# HALGAN IYO HAGARDAAMO
## Taariikh Nololeed



**ABDULLAHI YUSUF AHMED**

# STRUGGLE AND CONSPIRACY
## A Memoir

SCANSOM PUBLISHERS



"Itoobiya waxay danaysaa inay dalka ka dhismaan maamullo yar yar oo aan midnimadoodu yeelan karin awood ay boorka kaga jafaan siyaasaddii Soomali-weyn oo ah laf dhuunta kaga taagan Itoobiya ".

"Kenya waxay ku dadaashaa inay dhaqaale ahaan ka faa'iidaysato dhibaatooyinka Soomaaliya. Kaalmada adduunku Soomaaliya ugu deeqo waxaa lagu maamulaa dalkeeda ".

"Siyaasadda Yemen ee Soomaaliya ku beegan ayaa ah mid aan marna isbeddelin oo ku salaysan sidii Soomaaliya gacan looga siin lahaa inay dhab ahaan dib isugu taagto cagaheeda".

"Dawaladaha Khaliijka Carabta waxay siiyeen ururro diimeed iyo kooxo siyaasadeedba, dhaqaale loo adeegsaday si aan habboonayn oo dhibkii Soomaaliya haystay sii kordhisay ".

"Hay'adaha aan dawliga ahayn ( NGOs) waxay faraha ku dhigeen maal badan oo loogu talaggalay ummadda ku tabaalaysan Soomaaliya. Waxay kaalmadaas u adeegsadeen sidii ay rabaan oo aan maslaxada soomalida u adeegayn.. Waxay qayb ka noqdeen qalalaasaha Soomaaliya ka jira" .

"Faraggelinta siyaasadeed ee caalamka kaga imaanaysa Soomaaliya waxaa ugu daran tan ka soo jeedda dawladaha Masar iyo Itoobiya. Labadaas dal oo dhexdooda iska haya, ayaa Soomaaliya kula soo galgasha muranka dhexdooda ka aloosan" .

"Raggii loo doortay inay hoggaamiyaan golaha Sharci-dejinta, sida Shariif Xasan iyo Aadan Madoobe, waxay Baarlamaankii ka dhigteen dukaan ay ku ganacsadaan oo ay shilimaad kala weynaadeen qaranimadii "

"Nuur Cadde wuxuu u dhaqmay sidii nin ka faraxashay arrimaha Soomaaliya. Wuxuu doorbiday in uu wakiil u noqdo danaha iyo siyaasadda dawladda Itoobiya. Arrimaha dawladda oo dhan wuxuu u maamushay sidii guri uu leeyahay oo kale."

"Dhawrista sharciga iyo difaaca qarannimada ayaa igu khasbay inaan ku gacan-sayro taladii Siyaad Barre ii soo jeediyey oo ahayd inaan inqilaabno dawladdii sharciga ahayd bishii Jannaayo, sannadkii 1969kii. Waana arrinta aan ku mutaystay lix sano oo xabsi xaq-darro iyo xukun la'aan ah ".

-"Kartida ay Soomaalidu u leedahay in ay gudaheeda iska abaabusho waa dowrka keli ah ee u furan, si ay uga badbaaddo culayska faraggelinta dibadda lagaga hayo, isla markaasna ay masiirkeeda gacanta ku hayso".

# HALGAN IYO HAGARDAAMO
## Taariikh Nololeed



ABDULLAHI YUSUF AHMED

# STRUGGLE AND CONSPIRACY
## A Memoir

SCANSOM PUBLISHERS

Published by:

**SCANSOM PUBLISHERS**
BOX 6118, 175 06 JARFALLA
STOCKHOLM, SWEDEN
FAX: 46-8-58360647
www.scansom.com
scansom@scansom.com
scansom@hotmail.com

ISBN 978-91-85945-36-8

© Copyright 2012 Scansom Publishers. All rights reserved

No part of this book can be reproduced, stored in retrieval system, or transmitted in any form or by any means, electronic, mechanical, photocopying, recording, or otherwise, without written prior permission of the publisher.

# Tusmada buugga - Contents

| | |
|---|---|
| Mahadcelin | 7 |
| Hibayn | 8 |
| Gogoldhig | 9 |
| Tuulada Birta Dheer | 12 |
| Nolol Cusub: Ciidammada | 14 |
| Xoogga Dalka Soomaaliyeed (XDS) | 25 |
| Iskudaygii Afgenbigii Woqooyi Galbeed 1961kii | 27 |
| Yaa ka dambeeyey af-gembiga ? | 31 |
| Dib ugu soo noqoshadii Koonfur | 37 |
| Dagaalkii Itoobiya-Soomaaliya 1964kii | 40 |
| Ururkii Lib-Side | 44 |
| Waddada Afgenbiga | 49 |
| Magacaabiddii Taliye Cusub ee XDS | 51 |
| Siyaasaddii Cigaal ee Caruusha | 56 |
| Furitaan Xisbi Xisbi mucaarad ah (Dabka) | 65 |
| Iscasilaaddii Taliyaha Booliska Soomaaliyeed | 68 |
| Doorashadii 1969kii | 70 |
| Welwelka Maxamed Siyaad Barre | 72 |
| Aniga iyo Maxamed Siyaad Barre | 72 |
| Maxamed Siyaad iyo Saraakiisha Sarsare ee XDS | 78 |
| Dilkii Madaxweyne Cabdirashiid 15kii, Oktoobar, 1969 | 80 |
| Yaa lagu tuhmayaa dilkii Madaxweynaha ? | 85 |

| | |
|---|---|
| Afgenbigii Oktoobar 1969kii | 87 |
| Nolosha Xabbiska (1969-1975) | 95 |
| Iskudaygii Afgenbigii Cirro | 100 |
| Dagaalkii Soomaali Galbeed | 105 |
| Xaaskaagii way dhicisay | 112 |
| Afgembigii Cirro | 119 |
| Aasaaskii Jabhadda Badbaadinta ( SSF) | 123 |
| Hanaqaadka SSDF | 134 |
| Dhibaatooyinkii loo geystay Gobolka Mudug | 136 |
| SSF iyo Koofurta Yemen | 145 |
| SSF iyo Liibiya | 146 |
| SSDF iyo Itoobiya: Bilowgii is-afgaranwaaga | 157 |
| SSDF iyo dhabarjebinta Itoobiya | 161 |
| Ka soobixii xabbiska Itoobiya | 171 |
| Maxaa wiiqay guulihii SSDF | 174 |
| SSDF: Burburka Soomaaliya dabadiis | 179 |
| Qabsashadii Muqdisho iyo dhammaadkii Taliskii Siyaad Barre | 180 |
| USC | 181 |
| Unisom | 185 |
| Walaalaha Jabbuuti ' KOW' | 188 |
| Aniga iyo Al -Itixaad | 198 |
| Dhabarjebinta Al-Itixaad | 202 |
| Isbahaysiga Caydiid iyo Al-Itixaad | 212 |
| Shirkii nabadaynta Gaalkacyo | 219 |
| Shirkii Dibu-heshiisiinta ee Addis Ababa | 223 |
| Shirkii nabadda ee Gaalkacyo (Muqdisho) | 224 |

Shirweynihii SSDF ee Qardho 228
Salballaar 233
Caafimaad xumo ila soo deristey 235
Shirkii SODARE 242
Burburinta Shirkii SODARE 247

Aasaaskii Puntland 253
Dhismaha Dawlad Goboleedka Puntland 1998kii 258
Shirweynaha ergooyinka beelaha shanta gobol 261
Walaalaha Jabbuuti ' LABO' 267
SRRC 275
Isku daygii majaxaabinta Puntland 278
Afgembigii Islaan Maxamed 285
Shirkii Dibu-heshiisiinta Nayroobi 2002-2004 296
Dhismihii Hay' adaha Qaranka 304
Doorashadii Madaxweynaha 315
Aniga iyo Cabdullaahi Axmed Caddow 318
Dhaartii Madaxweynaha 14kii Oktoobar 2004 321
Dhismihii TFG 323
Is-hortaaggii hanaqaadka dawladda 324

Ka-qaybqaadashada Shirkii Dooxa ee 77 331
Aniga iyo Shariif Xasan (Yemen) 333
Soo cagadhigashadii Dalka (Jowhar) 336
Ku soo noqoshadii Jowhar 339
Mar labaad Aniga iyo Shariifka (Yemen) 347
Baydhabo 351
Baydhabo: Midayntii TFP 353
Dilkii Mudane Cabdalla Deerow Isaaq 355

Isqarxintii la ila beegsaday 360
Isbahaysigii la dagaallanka Argaggixisada 363
Dagaalkii Saddexaad ee Muqdisho 368
Isballaarintii Midowga Maxkamadaha UMM 371
Heshiiskii Koowaad ee Kharduum 372
Heshiiskii Labaad ee Kharduum:
TFG (Isbeddel Istiraatiijiyadeed) 373
Dagaalkii Maxkamadaha Dalka looga saaray 376
Odayaasha Beelaha HAWIYE 381
Maamulka Gal-Mudug 384
Shirkii Dibuheshiisiinta ee Muqdisho* 385

Dhammaadka Xukuumaddii Cali Geeddi 390
Ka hor dhismaha xukuumad cusub 393
Xukuumaddii labaad ee TFG 395
Maxaa ka danbeeyey ? 397
Siyaasadda dhabta ah ee dawladda Itoobiya 405
Walaalaha Jabbuuti ' SADDEX' 418
Gunaanad 421
Dhammaad 428

# Mahadcelin

Waxaan mahad ballaaran u celinayaa dhammaan dadkii gacanta igu siiyey soo ururinta, qoridda, iyo sixidda buuggan. Waxaan si gaar ah ugu mahadnaqayaa dadkan hoos ku xusan oo kaalin lama illaawaan ah ka qaatay hawsha buuggan:

1. Qoraagii Siciid Cismaan Keenadiid (oo geeriyooday bishii Soonka, 2011 inta uusan buuggu soo bixin. Eebbe naxariistii janno ha ka waraabiyo)
2. Maxamad Yuusuf Weyrax
3. Xuseen Cali Saylaan
4. Cabdirashiid Aadan Seed
5. Aadan Buryar iyo
6. Maxamuud Sh. Maxamad

# HIBAYN

Waxaan buuggan u hibeeyey dhammaan dadkii ila galay halgankii dheeraa ee aan soo maray rag iyo dumarba, intii dhimatay iyo inta maanta weli noolba.

Sidoo kale waxaan buuggan si gaar ugu hibeeyey marwadayda (Xaawo Cabdi Samatar) oo dhib iyo dheefba ila wadaagtay, muujisayna dhabar- adayg, samir iyo dulqaad muddadii dheerayd ee aan xabbiska ku jiray (laba iyo toban sano) oo aan ku xirnaa xaq darro iyo xukun la'aan.

# Gogoldhig

Buuggan taariikh nololeedka Madaxweyne Cabdullahi Yuusuf waa inta aan ogahay, buuggii ugu horreeyey ee uu madaxweyne Soomaaliyeed toos u qoro isagoo nool kaddib markii uu xilka ka degay. Waa qoraal daahfuraya oo ifinaya dhacdooyinkii badnaa ee isdaba-joogga ahaa ee ka socday guud ahaan geeska Afrika, gaar ahaanna dalka Soomaaliya lixdankii sano ee ugu dambeeyey (1950-2010kii). Waxaa buuggan ku xusan qoraallo badan oo xogta ay xambaarsanyihiin aan si kale lagu heleen, qof goob-joog ka ahaa mooyee. Waa dhacdooyin uu qoraagu isagu goob-joog ka ahaa intooda badan. Dhacdooyinka buuggan ku jira waxaa ka mid ah, kuwa badan oo la xiriira qisooyin leh murugo iyo tiiraanyo, ciil iyo caro, jab iyo naasa-beel, hoog iyo halaag, burbur iyo baro-kac, qax iyo kala-yaac. Sidoo kale waxaa geedi-socdkaas dheer ee nolosha barbar-socday kuwa kale oo watay faraxd, gallad iyo abaal, nabad iyo naruuro, bashbash iyo barwaaqo, raynrayn iyo riyaaq. Cutubyada buuggan ka kooban yahay waxaa ugu hilin culus kuwan hoos ku xusan :

- Korrinkii iyo taaariikh nololeedka qoraaga laga soo billaabo Tuulada Birta-dheer ee uu ku dhashay iyo sidii uu ku barbaaray Muddadii uu geel jiraha ahaan jiray oo miyiga ku noolaa. Habkii uu ciidanka ugu biiray sannadkii 195okii, kaddib marki uu askarnimo ka qortay magaaalada Gaalkacyo isaga oo aan ku talo-galin, war iyo wacaltoona aan u hayn shaqada iyo xirfadda
- Waxbarashadii Ciidanka ee uu dalka iyo dibeddaba ku qaatay muddadii u dhaxaysay 1950-1956kii
- Xilalkii kala duwanaa ee mudane C.Yuusuf ka soo qabtay Ciidanka Xoogga Dalka iyo Ciidanka Boliiska muddadii u dhaxaysay 1956-1963kii
- Kaalintii uu ka qaatay dagaakii Itoobiya iyo Soomaaliya sannadkii 1964kii, halkaaso uu ku mutaystay dallacaad iyo billad geesinimo.

- Iska hor-imaadkii Cabdullahi Yuusuf iyo taliyihiisii ciidanka S/Gaas Maxamad Siyaad kaddib markii uu G/Sare Cabdullahi Yuusuf ka diiday inuu inqilaab kala qayb qaato bishii, Jannaayo,1969kii
- Dilkii Madaxweyne Cabdirashiid iyo cidda lagu tuhumay inay lug ku la haayeen fal dembiyeedkaas
- Afgembigii Oktoober 1969kii, iyo xabbsikii loo taxaabay CabdullahiYuusf iyo Maxamad Faarax Caydiid 1969-1975kii ( Lix sano iyo dheeraad) oo xukun la' aan ah !
- Dagaalkii 2aad ee Itoobiya iyo Soomaaliya oo Cabdullaahi Yuusuf marlabaad masuul looga dhigay aag muhiim ahaa
- Aasaaskii jabhaddii ( SSDF) iyo mucaaradkii hubaysnaa mud-dadii uu ku jiray xabbiskii labaad (lix sano oo kale 1985-1991) ayaa mar labaad lagu xiray dalka Itoobiya
- Asaaskii dawlad goboleedka Puntland iyo kaalintii uu ka soo qaatay
- Loolankii doorashadii Madaxweynaha ee lagu qabtay dalka Kenya sannadkii 2004tii
- U guuridii dalka (degaankii dawladda ee magaalada Jawhar, Baydhaba, iyo Muqdisho)
- Dagaalkii Ururkii Midowga Maxkamadaha
- Shirkii dib-u-heshiisiinta beelaha Soomaaliyeed ee Muqdisho sannadkii 2007
- Dawladihii 1aad iyo 2aad ee TFG :da
- Is-casilaaddii Madaxweyne Cabdullahi Yuususf iyo
- Dhacdooyin kale oo aad muhiim u ah

Waxaa tixgelin iyo qadderin mudan inaan gunaanadka hordhaca ku xuso, kuna maamuuso qoraagii caanka ahaa ee Siciid Cismaan Keenadiid ( Ahun) oo qoraalka iyo sixidda buuggan qayb libaax ka soo qaatay oo geeriyooday bishii Soonka sannadkan 2011, muddadii lagu jiray hawsha gunaanadka buugga. Gebagebada gogoldhigga buugga waxaan ku maamuusayaa qoraalkan kooban oo aan Siciid Cismaan ka soo xigtay :

«Madaxweynihii hore Cabdullaahi Yuusuf Axmed, ma uusan fulin xilkii qaran ee laga sugayey. Ma isaga ayaa ka gaabiyey dhismaha maamul awood waxqabad leh, mise waxaa ka hor-istaagey xoogag diiddan nabadaynta iyo dibu-dhiska Soomaaliya?. Mudane Cabdullaahi Yuusuf waxaa la qummanaatay in uu qoraal ku soo bandhigo xaalada-hii iyo dhinacyadii maamulkiisa curyaamiyey . Waa bandhig aan leexleexad iyo duurxul lahayn oo toos farta ugu fiiqaya siyaasiyiin Soomaaliyeed, kuwo shisheeye iyo dawlado ay dhexmareen iska horimaadyo siyaasadeed oo gudubsan heer kasta ee uu mala' awaali karey qof xumo-saadis ahi; wuxuu sidaas darteed isu xilsaaray in uu ummaddii xilka u dhiibatay ee uu horteeda ku dhaartay uga warramo sababihii uu ballanqaadkiisii u fulin waayey. Dhalliil kasta oo dhismo ah oo ka hortimaadda aragtidiisa iyo fiirooyinkiisa siyaasadeed waxay soo noolaynaysaa wada-danaynta dalkaan, waayadii danbe la illaaway, in la wadaago. »

Waxaan qoraaga ( Madaxweyne Cabdullahi Yuusuf Axmad) iyo dadka qoraalka xiiseeya ugu hambalyeynayaa inuu buuggan yahay kayd dhaxalgal ah oo taariikhkeedna dihin toosh ku ifinayasa dhacdooyin badan oo beri hore la iska illaaway. Ugu dambayn waxaan u hambalyeynayaa shirkadda Scansom Publishers oo u tafo-xaydatay qoraalka, fidinta, iyo kaydinta afkeenna hooyo oo ku guulaysatay daabacadda buugta ugu badan ee la soo saaray 15kii sano ee ugu dambeeyey oo buuggan taariikh nololeedka Madaxweyne Cabdullahi ka mid yahay. Shirkadda Scansom waxay masuul ka tahay soo saaridda iyo arrimaha farsamada la xiriiira daabacaadda buugga. Qoraagu isaga ayaa u madax-bannaan fikradda iyo nuxurka qoraalka. Waxaan si gaar ugu mahadcelinayaa dhammaan dadkii qaaday ama iska lahaa qaar ka mid ah sawirrada buuggan ku xusan oo aan raadiyey (si aan ugu mahadnaqo) ayna nasiib-darrose ii suurta-geli weyday inaan helo xiriirikooda tooska ah. Shifo ku af-saar iyo akhris wacan.

Tifatiraha Buugga : Maxamad Sh. Xasan Nuur
Scansom Publishers, Toronto, Nofembar, 2011

# TUULADA BIRTA DHEER

Waxaan 1934kii ku dhashay tuulada Birta Dheer oo ku dhow magaalada Garowe. Hooyaday Bullo Nuur Seed way igu dhibtootay oo saddex habeen iyo saddex maalmood bay fooshu haysay. Waxaa la ii bixiyay magaca Cabdullaahi. Aabbahay Yuusuf Axmed wuxuu ahaa, sida waayadaas dadku u badnaa, xoolo dhaqato. Wuxuu dhalay siddeed iyo toban carruur ah, shan iyo toban wiil iyo saddex gabdhood. Hooyaday waxay dhashay siddeed, lix wiil iyo laba gabdhood. Waxaan ahaa yaraankii hooyaday iyo kii sagaalaad ee carruurta aabbahay dhalay. Hooyaday waxay dhimatay aniga oo toddoba sano jirey. Wixii xilligaas ka danbeeyey, waxaa gacanta igu haysay aayaday Caasha Jaamac Sugulle oo ahayd afadii labaad ee aabbahay. Habeenkii aan dhashay, waxaa subaxnimadiisa shir meesha ku lahaa odayaasha beesha aan ka dhashay, kuwaas oo dhaqan ahaan ay talada beeshu ka go'do. Odayaasha waxaa ku jirey oday la oran jirey Muuse-Geelle oo macruuf ku ahaa xiddigiska, sumcadna xirfaddiisa ku lahaa, oo aalaabaa waa la arki jirey badi wixii uu saadaaliyo.

Inta uusan shirku bilaaban, odayaashii beesha oo meesha ku dhan, buu Muuse-Geelle yiri: ‘ Allow yaa xalay wiil u dhashaa’ . Aabbahay Yuusuf Axmed ayaa gacanta taagay oo yiri: ‘ Aniga ayaa xalay wiil ii dhashay’. Oday Muusa-Geelle, wuxuu dabadeed aabbahay ku yiri: ‘ Intee wiil baa ka weyn ?’ . Aabbe wuxuu ugu jawaabay lix. Muusa-Geelle wuxuu dabadeed aabbahay u sheegay in aan raggaas oo dhan keligay ka hanaqaadi doono. Muuse-Geelle wuxuu aabbe ku yiri: ‘ Horta wiilka waxaad u bixineeysaa Cabdullaahi’ . Ugu dambayntii wuxuu ku yiri, ‘ Waxaan kuu sheegayaa in wilkaasi noqon doono nin hanaqaad ah oo nasiib badan, bulshada dhexdeedana uu magac ku yeelan doono’ . Sidaas ayaa Cabdullaahi la iigu bixiyay.

Qoyska aan ka dhashay waxaa u meelmartay naanaysta ah "YEY", taas oo aannu ka dhaxallay awoowahayo Axmed Xasan. Sida ay sheekadu igu soo gaartey, waxaa la yiri markii uu dhashay baa waxa loogu walqalay neef wan ahaa. Neefkaas markii la bireeyey oo

aan weli naftu ka bixin ee uu farganayo , ayaa meeshii wanka lagu gowracay waxaa soo qarqiyay 'YEY' aan la garanayn halka ay ka soo yaaceen, kuwaas oo dabadeed wankii walqasha afka la galay oo daqiiqado kaga soo jeestey. Dadkii meesha joogay oo dhan yaab baa ka soo haray. Dabadeed waxay isku raaceen in wiilka loo bixiyo 'YEY'.

Sannadkaas aan dhashay dhulku wuxuu ahaa barwaaqo oo degaanka wax dhibaato ahi kama jirin, haseyeeshee, gobollada dhexe oo dhan waxaa qafaal ka wadey Talyaaniga oo u baahnaa askar uga qaybgasha duullaanka uu sannad kaddib ku qaaday Itoobiya. Sidaas awgeed, dhallinyarada cabsi weyn bay qafaalka ka qabeen oo maalintii way dhuuman jireen. Arrintaasi khasaaro weyn bay reer miyiga u geysatay, maadaama dhallinyaradu hawlo badan reerahooda u qaban jireen, sida oodista xeryaha iyo raridda reeraha, dhaanka iyo ilaalinta geela, iwm. Cabsidaasi waxay soo afjarantay 1936kii kaddib markii uu Talyaanigu qabsaday Itoobiya.

Beesha aan ka dhashay dagaalka ma ayan jeclayn oo dagaalladii hore uga dhici jirey gobollada dhexe baa dad badani uga geeriyooday, duunyo badanina uga luntay. Dagaal uu "Suldaankii Hobyo" ku soo qaaday 1920naadkii dhibaato weyn baa beeshayada ka soo gaartey. Sidaas oo kale muddo wax yar arrintaas ka horraysay, waxaa qoyskayaga weerar ku soo qaaday koox ka tirsan daraawiishtii Sayid Maxamed Cabdille Xasan, kuwaas oo isku meel kawaanka ku saaray, awoowahay Axmed Yey, ayeeyaday iyo toddoba wiil oo ay dhaleen.

Sida wakhtigaas loo badnaa, waxaan ku koray miyiga, waxaana ku barbaaray nolosha adag ee rafaadka miiran ah oo miyiga ka jirta, taas oo maalin iyo habeenba shaqo lagu jiro, markii laga reebo saacadaha yar oo markii naftu ku qabato meel dhinac la isugu tuuro.
Waxaan wax ka raaci jirey xoolaha, waxaan wax ka rari jirey reerka marka la guurayo, xilliyada abaarta ahna reerka baan wax uga soo dhaamin jirey. Miyigu waa hawl joogto ah. Badi Soomaalidu waaya-aragnimo fiican bay u leeyihiin nolosha miyiga.

Inkasta oo aan ragga kale la qaybsanayay hawlaha faraha badan ee miyiga, haddana waxaan muddadii aan miyiga jirey, nasiib iyo fursad u yeeshay in aan barashada Qur' aanka halkaas ka soo bilaabo, dabadeedna magaalada ku dhammaysto. Miyiga waxaa qur' aanka iigu bilaabay macallin Cabdiraxmaan Maxamed Islaan oo aannu isku beel iyo degaanba ahayn.

## NOLOL CUSUB: CIIDAMMADA

1950kii ayaa magaalo iigu horraysay. Waxaan ku dhaygagay, dhismayaasha waaweyn ee dhagaxa lagu dhisay waddooyinka dhaadheer, dadka tirada badan oo dariiqyada isku dhaafaya, dukaannada iyo suuqyada wax lagu kala gadanayo oo aanan weligay arag. Magaaladu waa Gaalkacyo. Iyada oo aan raalli la iiga ahayn baan walaalahay iyo ilma adeertay iska soo raacay, kuwaas oo xoolo iib ah magaalada u soo wadey. Waxaan ahaa 16 sano jir, sannadkuna waa 1950kii. Waxaa xoolaha wadey afar nin oo aannu labana walaalo nahay, labana ilma adeer. Raggaasi waxay ahayeen niman xoog leh. Waxaa la kala oran jirey Axmed Yuusuf Axmed Yey (Dhiigsokeeye), Aadan Yuusuf Axmed Yey, Cabdille Guuleed Yey iyo Cabdi Guuleed Yey. Markii xoolihii aannu gadannay, kuna dhexjirney gadashada badeecadihii naloo soo diray ayaannu, aragnay meel lagu xoonsan yahay, halkaas oo sargaal cad iyo askar Soomaali ah oo la socotay ay dad kula hadlayeen. Meeshii ayaannu tagnay, waxaanuna ogaannay in askar la qorayo.

Nin askari ah baa wuxuu kor ugu dhawaaqayay: ' Yaa doonaaya in uu askari noqdo?' . Raggii ila socday gacmaha bay kor u taageen. Anigu weli ma aanan garan waxa laga hadlayo, balse agtooda ayaan taagnaa. Afartii ila socotey markii ay gacmaha taageen, ayaa loo yeeray, waxaana la istaajiyey meel xoogaa iga durugsan. Aniga oo meeshaydii iska taagan ayaa mid ka mid ah askartii ninka cad la socotey ii yimid. Wuxuu i waydiiyay in aan rabo in aan askari noqdo iyo in kale. Askarigu isaga oo u jeeda tabaryaridayda iyo yaraantaydaba ayuu si dadban iigu dhiirigelinayay in aan askar qorto oo wakhtigii baa ku

dhacay, hal qofna wuu ka dhimmanaa tirada dadka la rabay in ay Gaalkacyo ka qortaan. Aniga oo aan arrinta ku adkayn, run ahaanna aan si fiican u garan waxa laga hadlayo baan iska oggolaaday in aan askar qorto. Askarinnimada uma aanan yeelin oo keli ah codsigii askarigu ii soo jeediyey, ee waxaan ka xumaa in aan ka haro raggii aan la socdey. Ninkii wuu iga tagey oo wuxuu la faqay sargaalkii caddaa, kaas oo dabadeedna madaxa u ruxay. Madax ruxiddaasi waxay iila ekaatay in askarinnimadii la ii oggolaaday. Markii uu oggolaanshihii soo helay buu askarigii igu soo noqday oo igu yiri ' Yarow soo raac raggaan'. Intii aannaan meeshii ka tegin ayaa, raggii iga waaweynaa waxay xiriir la yeesheen dad aannu xigto nahay oo magaalada degganaa, kuwaas oo ay reerkii ugu sii dhiibeen badeecaddii ay naga sugayeen.

Waxaan ahaa nin da' yar oo reer baadiye ah, sheekada odayaashana ma aanan dhegeysan jirin, laba sababood awgood. Tan hore waxaan wax ka ilaalin jirey geela oo mararka qaarkood soomaba hoyan jirin, mararka aan soo hoydana waxaan iman jirey aniga oo daallan, dabadeedna waan istuuri jirey. Tan labaad dhaqanka ayaan ii oggolayn in aan odayaasha la fariisto oo miyiga odayaasha iyo dhallinyaradu, caadi ahaan, ma ay wada fariistaan ardaaga guryaha iyo golaha shirarkaba. Markii aan askarta qortay ayay indhihii ii furmeen oo aan wax badan dalka iyo dunidaba ka ogaadey. Waxaan gadaal ka ogaaday in muddo toban sano ah, saddex xukun dalka isu beddeleen. Talyaaniga oo Soomaaliya gumeysi ku haysan jirey waxaa jab weyni ka soo gaarey dagaalkii labadaad, kaas oo keenay in 1941kii dalka laga saaro. Waxaa dabadeed dalka la wareegay Maamulkii Ciidan ee Biritaaniya (British Military Administration), maamulkaas oo uu 1950kii xilka kala wareegey Maamulkii Wasaayadda ee Talyaanigu.

Ummadaha Qaramada Midoobay (UN) shirkoodii ku saabsanaa sidii laga yeeli lahaa dalalkii uu Talyaanigu gumaysan jirey ka hor dagaalkii labaad ee dunida (Soomaaliya, Liibiya iyo Eriteria) waxay go' aamiyeen in muddo 10 sano ah (1950-1960), Soomaaliya wasaayad ahaan Talyaaniga loogu dhiibo: Amministrazione Fiduciaria Italiana della Somalia (maamulka Wasaayadda Talyaaniga ee Soomaaliya). Sidaas ayay Ummadaha Qaramada Midoobay, iyaga oo ka duulaya dano siyaasadeed oo caalami ah ayan u tixgelin codsiga Xisbigii

hoggaaminayay halgankii gobannimo-doonka ee SYL. Kaas oo diiddanaa soo noqoshada Talyaaniga oo doonayay in muddadaas xaddidan, ay Soomaaliya hoos timaaddo afarta dawladood ee waaweyn (Boqortooyada Midowday ee Ingiriiska, Midowga Soofiyeetiga, Maraykanka iyo Faransiiska). Si loo dabciyo, kalsooni-darradii dhextiil Talyaaniga iyo Soomaalida, Ummadaha Midoobay, waxay maamulka Talyaaniga feer dhigeen Gole la-tashi oo ka koobnaa, Filibbiin, Masar iyo dalka Haiti.

Talyaanigu markii uu dalka ku soo noqday, wuxuu durba go'aansaday in uu dib u dhiso ciidammadii Soomaaliyeed oo dagaalkii labaad ku burburay. Tallaabadaas ayaa keentay imaatinka guddiga ciidanka ah oo Gaalkacyo askarta ka qoranayay. Sidaas bay iigu suurta gashay in aan ka mid noqdo ciidankii ugu horreeyey ee ay Soomaaliyada cusubi yeelato. Sida la og yahay, gumeysigu wuxuu Afrika ku haystay askar iyo odayaal, kuwaas oo dhinacna uga kharash yaraa ciidan iyo saraakiil rayid ah oo Yurub laga keeno oo degaammada oo dhan la dhigo, dhinaca kalena aad iyo aad ugu habboonaa sidii uu xukunkiisa ugu faafin lahaa dalka oo dhan. Hab gumaysigaasi wuxuu ku caan baxay "Xukun dadban" (Indirect rule). Askarta iyo odayaasha xukunkaas loo adeegsan jirey, waxay lahayeen awood kooban, haseyeeshee, iyaga uguse filnayd sidii ay ugu muuqan lahaayeen rag xambaarsan awooddii gumeystaha oo ay tahay in laga baqo. Sidaas awgeed, dalalka Afrika, askarigu wuxuu leeyahay haybad, dadkuna waxay aamminsan yihiin in uu yahay wakiilkii xukunka, sidaas darteedna, way ciseeyaan, ciso baqdin ka dhalatay.

Xilligaas askarigu wuxuu tuulooyinka ka ahaa hoggaamiye iyo macallin, bulshaduna aad ayay u tixgelin jirtey. Waxaan arki jirey, sida sharafta leh oo loo soo dhoweyn jirey, xoolana loogu qali jirey markii ay kormeerka samaynayaan, sidaas awgeedna, raggaas waxaan ugu jeeday in ayan cidina ka sarrayn oo ay ka muunad weyn yihiin culimmadii sida gaarka ah loo xurmayn jirey. In aan ka mid noqdo ciidan sharaftaas iyo awooddaas leh, waxay iila mid ahayd xurmada ugu sarraysa. Walaacii i hayay markii aan isqorayayna wuu iga ba' ay. Muddo gaaban kaddib, askartii la qoray, waxaa Galkacyo laga soo saaray baabuur iyaga oo loo soo qaaday dhinaca koofureed. Baabuurku

wuxuu igu noqday mucjiso labaad oo waanan weligay baabuur raacin araggiisuna wuu igu yaraa. Baabuurta nala soo saaray aad bay u gaabinayeen, jidadkuna aad ayay u xumaayeen oo hadba tuulooyin iyo magaalooyin baa nalaku nasinaayay.

Markii aannu magaalada Beledweyne ku soo dhowaanney, waxaannu soo gallay dhul buuro gaaggaaban leh oo aad u doogsadey. Waxaan ku dhaygagay dhir dhaadheer oo kayn ah iyo tog weyn oo ay biyo qulqulayaan, iyada oo aan roob da'ayn, cirkana daruuro ka muuqan, qorraxduna aad u kulushahay. Waxaan raggii iga waaweynaa ka codsaday in ay mucjisadaan wax iiga iftiimiyaan, iyaga laftooda aayaanse waxba igu dhaamin. Waxay i xusuusiyeen in aannu isku meel ka nimid oo aaney weligood dhulkaan arag. Ilaa aannu ka soo gaarney Dhanaane oo ah meeshii naloo wadey, waxaannu soo dhex maraynney dhul aad uga duwan degaankii aan ku soo barbaaray oo aad uga dhir badan, uga biyo badan ugana magaalooyin waaweyn. Waxaan markii iigu horrasey arkay waddooyin laami ah, baabuurro badan oo isdhaafaya iyo daaro isa saarsaaran oo dhaadheer.

Socod dheer iyo rafaad badan kaddib waxannu soo gaarney xerada tababbarrada ciidammada ee Dhanaane. Xeradu waa meel ballaaran; waxaa ku yaal guryo la seexdo, qolal waa weyn oo ay kuraasi taal oo wax lagu cuno, qolal wax lagu barto, bakhaarro wax lagu kaydsado, goobo kala duwan oo ciidamada lagu tababbaro, iwm. Waxaa naloo sheegay in meeshu tahay xeradii nalaku tababbari lahaa. Waxaannu meesha ugu nimid rag degaanka laga soo qoray oo iyagana tababbar loo keenay. Waxaa la ii sheegay in xerada la dhisay soddonaadkii qarnigii la soo dhaafay, waxaana loogu talaggalay maxaabbiistii lagu soo qabtay dagaalkii uu Talyaanigu ku qabsaday Itoobiya. Markii la eego meesha go'doonka ah oo xeradu ku taal, waa la garan karaa in ay ahayd meel ku habboon maxaabbiis aad loo ilaalinayo.

Dhinaca xeebta, waxay Muqdisho xagga xeebta u jirtaa 10 km, magaalada Markana xagga xeebta 50km ayey u jirtaa . Dhinac kasta si adag ayay uga dhawrsanayd, mana fududayn in gaadiid maro. Inkasta oo ay xeradu xeebta ku taal, haddana waxay ka dhisantay meel taag ah oo badda ka sarraysa . Malaha, waxaa sidaas loo yeelay in looga

gaashaanto fatahaadda badda. Habeenkii nala keenay, waxaa nala siiyey casho, waxaana naloo sheegay in aannu meelahayaga iska seexanno, oo waxaan diyaar ahayn qolalkii jiifka. Maalintii ku xigtey waa nala dejiyey oo waxaa nala geeyey qolalkii aannu seexan lahayn. Qolalka waxaa yiil sariiro laba laba isu dul saaran, qof walbana waxaa la tusay tii uu ku seexan lahaa. Qof walba waxaa la siiyey tirsi (lambar) iyo lebbiskii ciidammada. Habeenkaas waxannu seexannay qolalkii jiifka loogu talaggalay.

Waa markii iigu horreysey oo aan sariir ku seexdo, taas oo aan hadba dhinac isugu rogayey aniga oo ka baqayay in aan ka dhaco.
Nolosha Dhanaane waxay ahayd mid habaysan oo kala dambayn leh. Noloshaas tartiib-tartiib baan ula qabsaday. Dharkii ciidanka baa naloo geliyey, ' Gaaweetooyin' cuntada lagu cuno iyo buraashado biyaha lagu qaato baa nin walba gaarkiisa loo siiyey. Halkaasna waxaa ku dhammaaday noloshii miyiga oo xeerada gacmaha la wada gelin jirey iyo wax wada lahaanshihii wadareed. Subaxnimadii waxaa nala kiciyay qorraxda oo aan soo bixin, quraac baa nala siiyey, shan iyo toban daqiiqadood kaddibna kulligaya dibadda baa naloo soo saaray, koox koox baa naloo safay, dabadeedna waxaa nala geeyey goob weyn oo meesha ku tiil.

Waxaa meeshii yimid dhowr nin oo Talyaani ah oo koox Soomaali ahi la socoto. Nin Talyaani ah baa hadal noo soo jeediyey, waxaana ka afcelinayay nin Soomaali ah. Wuxuu noo sheegay in wixii maanta ka danbeeya tababbarka naloo bilaabbi doono iyo waxa aannu tababbarka ku qaadanayno; dhaqanka xerada iyo kala danbaynta ciidammada. Durba waxaannu gallnay heer awaamiir keli ah lagu soconayo. Waxaan la yaabay nolosha adag ee meesha ka jirta. Isku mar ayaa amar lagu kacaa, amar wax lagu cunaa, amar lagu seexdaa, amar saf lagu galaa, amar tababbar lagu galaa, amar duruusta lagu qaataa. Tababbarkii ciidammada ka sokow, waxaa nala bari jirey afka Talyaaniga, xisaabta, iwm. Guud ahaan, waxaannu galnay nolol aad uga duwan tii xorta ahayd ee miyiga ka jirtey, taas oo qof waliba wixii uu doono samayn jirey, isaga oo aan cid kale fasax uga qaadan, cidina ka hor istaagi karin. Ciidanka loo keenay tababarka waxaa ku jirey koox sidayda u da'yar oo sidayda u tabar yar.

Muddadii hore, kooxdayadaas waxaa laga qaybgelin jirey tababbarrada fudud ee ciidammada, markiise loo baxo tababbarrada culus waxaa nalaku reebi jirey xerada. Anigu wax baan iska baran jirey, fursaddas baa ii surtagelisey in aan qoraalka iyo akhriskaba kaga hormaro ciidankii tababbarka ku jirey. Markii aan xerada ka helay nafaqo fiican iyo tababbar joogto ah, xooggaygii iyo muqaalkaygiiba way isbeddeleen, dabadeedna waxaan bilaabay in aan ka qaybqaato tababbarradii cuslaa oo aanan hortii wax ka qaadan jirin.

Kolkii uu tababbarku noo dhammaaday, waxaa la ii soo beddelay Gaalkacyo oo haddana la iiga beddalay Qardho, halkaas oo aan shaqadii ciidammada ka bilaabay. Galabtii waxaan wax ka baran jirey dugsiyada caadiga ah ee magaalada ku yiil, taas oo aan ka gaarey meel fiican.

1953kii waxaa la ii soo beddeley magaalada Muqdisho, halkaas oo aan shaqada ka sokow, ka watey waxbarashadaydii rayadka ahayd. Sidaas oo kale waxaan ka qaybqaatay waxbarasho heer sare ah oo degdeg ah, taas oo loogu talaggalay saraakiisha loo qaadan doono ciidamada dawladda. Sida la og yahay, waajibaadka Talyaaniga waxaa ka mid ahaa in, sannad kasta uu maamulka Soomaaliya gaarsiiyo horumar la taaban karo, si markii la gaaro 1960ka dalku isu maamuli karo, dhinac kastana, isaga fillaan karo. Talyaanigu wuxuu 1954kii ku dhaqaaqay in uu dalka ka sameeyo tirakoob, kaas oo horseed u ahaa doorashooyin dalka ka dhaca.

Sidaas oo kale, wuxuu bilaabay in uu saraakiil badan oo ciidan iyo rayidba leh, tababbar sare ugu qaado dalka Talyaniga, si loo dhiso hawlwadeenno xirfad sare ku leh qaybaha kala duwan ee maamulka dawladda, kuwaas oo loogu talaggalay in ay sannadka 1960ka xilka kala wareegaan maamulka Wasaayadda Talyaaniga ee Soomaaliya. Iyada oo qorshahaas laga duulayo, ayaa 1954kii aniga iyo 13 dhallinyaro ah oo ka tirsan ciidanka, tababbar layli sargaal loogu diray dalka Talyaaniga. Waxaa nala geeyey dugsiga ' Ciidanka Lugta Cesano di Roma' oo 4km waqooyi ka xigta magaalo madaxda Talyaaniga ee Roma, halkaas oo aannu muddo laba sano ah tababbar ku soo qaadannay.



Markii uu 1956kii tababbarkii noo dhammaaday, waxaa nala siiyey Xiddigtii kowaad. Tababbarkaas waxaan ku soo baxay layli sargaalkii ugu darajo sarreeyey. Tababbarkaas saraakiishii ila soo qaatay waxay kala ahaayeen:

Maxamed Cali Samatar
Salaad Gabayre Kadiye
Cabdalla Maxamed Faadil
Maxamed Jaamac Xarbi
Xasan Maxamed Sabriye (Gaamuur)
Maxamed Nuur Maxamed (Baarqab)
Abuukar Xasan Waheliye (Suulaley)
Ibraahim Rooble Warfaa (Doonyaale)
Maxamed Faarax Caydiid
Maxamed Cali Sharmaan
Cilmi Nuur Tarambi
Nuur Caddow Cali
Abuukar Gacal Muudeey iyo
Aniga- Cabdullaahi Yuusuf

---

Dhallinyaradii 14ka Sarkaal ahaa oo waxbarasho tabarbar Ciidan u yimid dalka Talyaaniga sannadkii 1954.
Fiiri magacyadooda kor ku xusan.

DECRETO n. 269 rep.

AMMINISTRAZIONE FIDUCIARIA ITALIANA DELLA SOMALIA

L'AMMINISTRATORE

VISTO il decreto del Presidente della Repubblica 9 dicembre 1952 numero 2357;

VISTO il decreto 30 giugno 1953, n. 160 di rep. vistato e registrato dal Magistrato ai Conti il 16 novembre 1953 al foglio n. 10 del registro n. 1 con il quale vengono approvati gli organici del Corpo di Sicurezza della Somalia;

CONSIDERATO che alla data 1° gennaio 1956 negli organici fissati dal predetto decreto, sono disponibili quattordici posti per sottotenenti somali;

CONSIDERATO che i quattordici allievi ufficiali somali del 1° Corso d'istruzione in Italia presso la Scuola Fanteria di Cesano sono stati dichiarati idonei alla promozione al grado di sottotenente;

VISTA l'ordinanza n. 23 del 23 dicembre 1955 che stabilisce il trattamento economico del personale somalo militare e militarmente ordinato;

Decreta:

I sottonotati allievi ufficiali del Primo Corso d'istruzione in Italia presso la Scuola Fanteria di Cesano sono nominati sottotenenti con decorrenza 1° gennaio 1956 con il trattamento economico stabilito dall'ordinanza n. 23 del 23 dicembre 1955:

1. — Allievo Ufficiale MOHAMED ALI MOHAMED SAMANTAR
2. — Allievo Ufficiale MOHAMED ALI MOHAMED SCHERMAN
3. — Allievo Ufficiale ABDULLAHI JUSUF AHMED HASSAN
4. — Allievo Ufficiale SALAD GAVEIRE GHEDIE DIBLAUE
5. — Allievo Ufficiale MOHAMED GIAMA ARBI MOHAMUD
6. — Allievo Ufficiale HASSAN MOHAMUD SOBRIE FARAH
7. — Allievo Ufficiale NUR ADDO ALI GULET
8. — Allievo Ufficiale ELMI NUR TARAMBI ERZI
9. — Allievo Ufficiale MOHAMED FARAH HASSAN ELMI
10. — Allievo Ufficiale ABDALLA MOHAMED FADIL MOHAMED
11. — Allievo Ufficiale ABUCAR GAAL MUDDEI MOHAMED
12. — Allievo Ufficiale ABUCAR HASSAN UEHLIE MOHAMUD
13. — Allievo Ufficiale IBRAHIM ROBLE UERFA' APTIDON
14. — Allievo Ufficiale MOHAMED NUR MOHAMED OSMAN

Mogadiscio, li 31 dicembre 1955

L'AMMINISTRATORE
**Anzilotti**

*VISTO e Registrato Reg. n. 13 - foglio n. 36.*
*Mogadiscio, li 14 gennaio 1956.*
*Il Magistrato ai Conti: SPADARO.*

---

Janaayo 1, 1956dii waxaa la siiyey saraakiishan kor ku xusan derjada Xiddgtii ugu horraysay kaddib markii ay laba sano waxbarasho ku soo qaateen dalka Talyaaniga. Waa Dikreetadii lagu dallacsiiyey.

Soo noqodkayagii wuxuu ku soo beegmay waqti la baabbi' iyey ciidankii ciidan ahaa. Baabbi'inta Ciidankaas Talyaanigu wuxuu cudurdaar uga dhigay in, Soomaaliya ay mudda dhow xorriyad qaadan doonto, oo aan miisaaniyaddeedu qaadi kari doonin kharashka ciidankaasi u baahan yahay, arrintuna siyaasad kama marnayn. Sida la og yahay, Soomaaliya iyo Itoobiya waxaa ka dhaxeeyey dhul. Itoobiya waxay qabtey in arrimuhu ku eg yihiin xuduudda labada dal oo aan si rasmi ah loo kala qeexin. Halka Soomaalidu qabtey in Itoobiya ay gumeysi ku haysato dhul Soomaaliyeed. Waxaa Talyaaniga loogu xilsaaray in uu Itoobiya kala xaajoodo arrimahaas, maxaa yeelay Soomaaliya waxay ku hoos jirtey Wasaayadda Talyaaniga. Talyaaniguse arrintii meel waa gaarsiin waayay. Marka waxaa dhici kartey in Talyaaniga iyo Itoobiya ay galeen heshiis qarsoodi ah oo looga hor joogsanayo in ay Soomaaliya ciidan yeelato. Talyaanigii wuxuu yiri, Soomaaliya waxay u baahan tahay oo keli ah ciidan Boolis. Sidaas awgeed, markii aan dalka ku soo noqonnayba waxaa nalaku wareejiyey ciidanka Booliska, kaas oo aannan wax tababbar ah u lahayn. Sidaas darteed, waxaa nala geeyey Akademiyada Booliska Xamar, halkaas oo nalaku siiyey tababbar soconaayay 9 bilood. Laga bilaabo 1956kii, isbeddellada siyaasadeed ee dalka ka socdana waxay galeen marxalad cusub. Sannadkaas waxaa dalka lagu qabtay doorashadii ugu horraysey, taas oo ay ku guulaysatey SYL. Baarlamaankii ugu horreeyey ee dalku yeeshana wuxuu fadhigiisu noqday caasimadda Soomaaliya. Halkaas kal-fadhigoodii ugu horreeyey, xubnihii Baarlamaanka ka tirsanaa waxay Guddoomiye Baarlamaan u doorteen mudane Aadan Cabdille Cismaan. Halka Cabdullaahi Ciise loo doortay Ra' iisul Wasaare, kaas oo madax ka noqday xukuumaddii Somaalida ka koobnayd ee Tayaanigu ku

wareejiyey awooddii maamulka gudaha ee dalka. 1957kii waxaa la ii magacaabay Taliyaha Qayb-Hoosaadka Booliska ee Gobolka Banaadir. 1958kii waxaan qaatay Xiddigtii labaad, isla markaasna, waxaa la ii dhiibay Taliska qaybta Booliska ee Gobolka Jubbada Sare oo xaruntiisu ahayd magaalada Baydhabo. Halkaas waxaan ka soo beddelay Janan Daa' uud oo markaas ahaa Gaashaanle.

**GOVERNO DELLA SOMALIA.**
**DECRETO Amm.vo 8 febbraio 1958, n. 28 reg.**
**Avanzamento Ufficiali di Polizia.**

L'AMMINISTRATORE

VISTA la Legge della Repubblica Italiana 4 novembre 1951, n. 1301, che ratifica e dà esecuzione all'Accordo di Tutela per il Territorio della Somalia;

VISTA la Legge 7 maggio 1956, n. 1, relativa all'istituzione del Governo della Somalia;

RITENUTO necessario, in relazione alle esigenze dell'organizzazione delle Forze di Polizia, di promuovere al grado di Tenente n. 14 Sottotenenti che hanno compiuto due anni di permanenza nel grado;

VISTO il D.A. n. 262 in data 30 dicembre 1955 relativo alla promozione al grado di Sottonente dei 14 ufficiali di cui sopra;

VISTI i giudizi pronunciati dall'apposita commissione di avanzamento istituita presso il Comando delle Forze di Polizia;

VISTA l'Ordinanza 23 dicembre 1955, n. 23, relativa al trattamento economico del personale somalo militare e militarmente ordinato;

IN ATTESA che siano emanate le norme relative all'ordinamento delle Forze di Polizia ed allo stato giuridico degli ufficiali;

SU PROPOSTA del Ministro per gli Affari Interni;

DECRETA:

*Articolo Unico*

I sottonotati Sottotenenti della Polizia sono promossi al grado di Tenente con anzianità assoluta e decorrenza assegni dal 1° gennaio 1958:

1. — S. Ten. Mohamed Ali Mohamed Samantar
2. — S. Ten. Abdullahi Jusuf Ahmed

---

1dii Jannayo, 1958dii ayaa saraakiishan loo dallacsiisyey derejada laba xiddigle. Waa dikreetadii lagu dalalcsiiyey. Eeg bogga 2aad magacyada ku xusan.

3. — S. Ten. Mohamed Ali Mohamed Scerman
4. — S. Ten. Salad Gaveire Ghedie
5. — S. Ten. Hassan Mohamed Sobrie
6. — S. Ten. Mohamed Giama Abdi
7. — S. Ten. Mohamed Farah Hassan
8. — S. Ten. Nur Addò Ali
9. — S. Ten. Elmi Nur Tarambi
10. — S. Ten. Abdalla Mohamed Fadil
11. — S. Ten. Abucar Gahal Muddei
12. — S. Ten. Mohamed Nur Mohamed
13. — S. Ten. Ibrahim Roble Uarfà
14. — S. Ten. Abucar Hassan Uelie

Mozadiscio, li 8 febbraio 1958.

L'AMMINISTRATORE:
**Anzilotti**

ABDULLAHI ISSA MOHAMUD
HAGI MUSSA BOGOR

*VISTO e Registrato - Reg. n. 7 - foglio n. 286.*
*Mogadiscio, li 10 febbraio 1958.*
*Il Magistrato ai Conti:* SPADARO.

---

Jannayo, 1dii, 1958dii ayaa saraakiishan loo dallacsiisyey y derejada laba xiddigle. Waa dikreetadii lagu dalalcsiiyey. Eeg bogga 1aad magacyada ku xusan. Dikreetada waxaa la diiwangeliyey, bishii Febraayo 10dii, 1958kii.

## XOOGGA DALKA SOOMAALIYEED

Wax kasta oo Talyaanigu ka qabay, Soomaalidu way u jeeddey in aanu dalku jiri karin ciidan la'aan. Waxaa intaas dheer in dhisme ciidan cudud leh uu Soomaaliya ka ahaa arrin muqaddas ah. Heerka arrintaas laga taagan yahay waxay soo shaac baxday 1959kii, markii ay soo dhowaatey xornimadii Soomaaliya. Isla sannadkaas waxaa dalka soo foodsaaray laba arrimood oo dhiirrigeliyey baadigoobkii loogu jirey Soomaali-weyn. Tan hore, waxay ahayd Ingiriiska oo muujiyey dareen ah, in uu ' British Soomaliland' xorriyad siinayo isla sannadka ay Soomaaliya xorriyadda qaadaneyso, si labada dal u midoobaan. Tan labaad, waxaa Muqdisho lagu asaasay, urur siyaasi ah oo u xilsaaran isu duwidda dhaqdhaqaaqyada la xiriira dhulalka maqan ee Soomaaliya. Labada arrimoodba waxay soo dedejiyeen baahida loo qabo ciidan qaran oo, dhinacna ka suga amniga dalka, dhinaca kalena si dadban u taageera dhaqdhaqaaqyada ka socda dalalka maqan.

Sidaas awgeed, iyada oo tabarteeda la og yahay, ayaa dawladdii daakhiliga ahayd, si geesinnimo leh ugu tallaabsatay in ay dhidibbada u aasto Xoogga Dalka Soomaaliyeed (XDS) kaas oo u xilsaaran difaaca qaranka. XDS waxaa rasmi ahaan loo asaasay taariikhdu markii ay ahayd 12kii Abriil 1960kii, 79 beri ka hor, maalinta loogu talaggalay in Soomaaliya ay gobonnimo hanato. XDS waxaa lagu asaasay, tiro ciidan ah iyo koox saraakiil ah oo laga soo gooyey Ciidanka Booliska Soomaaliyeed iyo laba kun oo wiil oo markaas la qoray. Bishii Luulyo ee 1960kii waxaa lagu soo kordhiyey ciidankii Soomalida Ingiriisku gumaysan jirey ee la oran jirey ' Somaliland Scout Regiment' .

Xoogga dalka Soomaaliyeed waxaa taliye looga dhigay Janan Daa'uud Cabdille Xirsi. Saraakiishayadii isku kooxda ahaana, oo hore ciidan ahaan loo soo tababbaray, Maxamed Jaamac Xarbi mooyee, intayadii kale XDS ayaa dib nalooku soo wareejiyey. Isla sannadkaas horrantiisii, waxaa takhasus militari la iigu diray dalka Talyaaniga, markii aan soo noqdayna waxaa la i siiyey darajada Dhamme (Captain), waxaana madax la iiga dhigay hoggaanka Qaybta Tababbarrada iyo Hawlgelinta XDS.





Ciidanka XDS– Rag iyo Dumarba way lahaayeen!

Dhammaadkii 1960kii waxaa la ii beddelay qaybta XDS ee woqooyi galbeed, halkaas oo aan ka noqday Taliye Horin. Gobolladaas waxaan ka soo shaqeeyey ilaa dhammaadkii 1962kii. Muddadii aan halkaas joogey waxaan ka qaybqaatay fashilintii isku daygii afgenbiga la rabay in dalka lagu kala gooyo. Arrintaas waxaan ku mutaystay in aan u dallaco derejada ah Gaashaanle.

## ISKU-DAYGII AFGENBIGA WOQOOYI GALBEED 1962KII.

Damaashaadkii xorriyadda iyo midnimada oo aan weli dhammaan, laguna guda jiro tallaabooyinkii lagu dhisayay hab maamulka dalka mideeya, kaas oo looga dan lahaa in looga gudbo labadii maamul ee ka kala jirey Soomaaliya iyo Soomaaliland, ayaa subaxdii 20kii Disembar 1961kii lagu waaberiistey, dhacdo lama filaan ah oo weliba aan looga fadhiyin dhinaca woqooyi. Dhacdadaas foosha xumi waxay ahayd isku day afgenbi oo saraakiil dhallinyaro ah iyo saraakiil ku-xigeenno reer woqooyi ahi ku tallaabsadeen, taas oo ay u qaadeen in ay ku kala gooyaan jamhuuriyaddii shalay la isku daray.

Saraakiishaas waxaa hormuud u ahaa Xasan Cabdille Walanwal (Xasan Kayd) iyo Cabdullahi Koongo oo kala joogey Hargeysa iyo Burco. Xilligaas XDS wuxuu ku jirey dhismo oo weli ma yeelan wardoon la isku hallayn karo iyo qalabkii loo baahnaa ee lagula socon karay, guud ahaan, dhaqdhaqaaqa waddanka ka jira iyo, gaar ahaan kuwa ka jirey ciidammada dhexdooda. Waxa yaab ah, ma jirin, wax tuhun ah iyo wax shaki ah oo laga dareemay abaabulka dhallinyaradaasi ugu jirtey sidii ay dalka u kala goyn lahayd. Mararka qaarkood way jireen hadallo ay saraakiishu igula kaftami jireen, sida ' War taliye maxaad fasax u qaadan weydey oo sida saaxiibkaa Maxamed Nuur Baarqab, Muqdisho u aadi weydey' . Hadallada noocaas ah waxba kama aan dareemi karin, maxaayeelay maskaxdaydaba way ka weynayd in dad miyirkoodii qabaa xilligaas isku dayi kareen falal noocaas oo kale ah.

Dhacdooyinkii isku-dayga afgenbigu waxay u dheceen sida soo socota: L/Xiddigle Cabdullaahi Koongo oo ka mid ahaa raggii ugu cadcaddaa oo ka dambeeyey ayaa ku soo noqday magaalada Hargeysa, kaddib markii uu in mudda ah dibedda safar ugu maqnaa. Halkaas wuxuu kula kulmay L/Xiddigle Xasan Kayd oo hawsha kula jirey, Hargeysana abaabulka ka wadey. Koongo wuxuu la xiriiray Maxamed Awr oo Boorame hawsha ka wadey iyo Cawil Xaaji Cali oo hawsha Berbera ka socodsiinaayay. Sidaas oo kale wuxuu la xirriiray 20 sargaal iyo saraakiil xigeenno kula jirey abaabulka. Maalmahaas waan iska xanuunsanaa oo waxaan jiifey isbitaalka Burco, xaaladdaas oo fursad fiican u noqotay nimankii afgembiga watey, maadaama maqnaanshahaygu u sahley in ay ciidanka gacanta ku dhigaan. Dabadeed saacaddii ay afgenbiga u ballansanaayeen, bay ciidanka saf geliyeen oo ku yiraahdeen: ‘ Madaxweynihii wuu kala diray Baarlamaankii, isla markaasna amar ku siiyey ciidammada in ay dalka qabtaan’. Ciidankii iyaga oo aan shakiyin bay amarkii la siiyey iska qaateen. Waxaa dareenka walaaca geliyey laba arrimood. Warkaas oo aan meelna laga maqal iyo idaacadaha dalka oo si caadi ah hawshoodii u watey. Ciidanku ma haysan wax amar ah oo ay kaga hor imaan kareen afgembi isku-dayayaasha.

Goor ay barqadii tahay ayaa waxaa isbitaalka iigu yimid askari guriga iiga shaqayn jirey, kaas oo ii sheegay waxa dhacay. Waxaan amar ku siiyey in uu gurigii tago oo uu degdeg iigu keeno lebbiska ciidanka. Nasiibdarro, waxaa isku dhowaa isbitaalka aan ku jirey iyo naadiga saraakiisha, halkaas oo qaar ka mid ahaa saraakiisii afgembiga isku dayayay heegan ku ahayeen. Waxay arkeen askarigii dharka ii wadey, weyna soo daba galeen. Markii askarigu dharkii ii keenay oo aan lebbistay oo soo bixi lahaa ayaa waxaa qolka iigu soo galay toddoba sargaal oo ka mid ahaa raggii afgembiga wadey uuna madax u ahaa C/laahi Koongo. Waxay ii wadeen xagga xaafiiska isbitaalka. Inkasta oo Xaaji Jadami, agaasimaha isbitaalku uu noo jeeday markii aannu garab marayney, gartayna in an xaaladdu ayan caadi ahayn, shibtiisa buu iska galay, illeyn ma jirin wax uu samayn karaye.

Raggii i qabtay waxay toos ii geeyeen gurigii aan degganaa, halkaas oo ay xabbis guri iigaga dhigeen, bistooladdiina iiga qaateen. Waxaa

PAGE 4 THE SOMALI NEWS FRIDAY February 15, 1963

# TRIAL OF ARMY OFFICERS IN MOGADISHU

The Regional Tribunal of Hargeisa is at present sitting in Mogadishu under the presidency of Judge Hazelwood.

At its third hearing of the trial of the 21 accused of the coup d'état which took place between the 9th and 10th of December, 1961, the public prosecutor, Dr. Santiapichi, assisted by the deputy public prosecutor, Mr. Ahmed Yusuf, opened the case for the prosecution.

«We have brought forward the accused to be judged by this court for having organised an armed revolt against the state.

«On the evening of the 9th and the morning of the 10th, in the Northern region of the Republic, they endeavoured to assume control of the military and civil powers and to breach the union which is the fundamental of the Somali state.

«They undertook to carry out the act according to pre-established plans and in carrying out these plans they arrested the Governor of the Northern region, the Commander of the military forces in the North and they took over the civil and military powers of local authorities in all the districts and regions.

«They falsely told the people and the authorities that in Mogadishu, the President of the Republic had dissolved parliament and passed on their powers to the army; whilst doing this, the accused broke the authority of the state and assumed its powers in the Northern region.

«Later, they encountered resistance from amongst the ranks of the same force of the National Army, resistance which started later on the morning of the 10th.

«We intend to bring forth 83 witnesses, in particular we have called in front of this court a good number of senior officers and subalterns and a good number of civilian authorities who were involved in this occurence. «We ask the court that the first witness be General Daud Abdulle Hersi, Commander of the National Army, then the Governor of Hargeisa and after him other senior officers.

At this point, the defence asked if the public prosecutor could give exact details of the accused, one by one.

Dr. Santiapichi asked for a short adjournment to satisfy the request of the defence counsel Mr. Kapile.

The defence asked whether these details would be given in writing or orally. The prosecutor replied that he preferred them to be conveyed orally. The President adjourned the court for 20 minutes.

When the court resumed Dr. Santiapichi stated his accusations:

1. Lt. Hassan Abdullah Walanwal.

The organiser and instigator of the revolt. He arranged the plan with the rest of the accused. He directed the operation of the arrest of Colonel M. Ainansce Major Osman Sobrie and Major Nur Adde, arrested in the officers mess in Hargeisa, in which operation he took part. He brought together the two companies in Hargeisa, assembled the NCO's and told them that the parliament had been dissolved and that power had been assumed by the army, and that, in the North, he was exercising that power. Similar reports had been conveyed to the public near the police station in Hargeisa, and he directed the operation occupying the police station. He deployed the army.

He assembled the authorities in Hargeisa and told them that he had put an end to the unity of the state. He promoted the officer cadets to officers.

2. Lt. Abdullahi Aden Ahmed.

He was in charge of the operation in Burao. He occupied the police station, the Government House, the District Office and the Post Office. He gave orders to kill anybody who offered resistance and he told the Deputy Governor and the other authorities the contents of the revolt which had taken place. Afterwards he arrested Major Abdullahi Yusuf. He assembled the military forces and told them of the dissolution of parliament.

3. Lt. Mohamed Abdulle Robleh.

He was commander of 'A' Company in Borama and gave orders to prepare for a night exercise. He ordered the two platoons to proceed to Hargeisa. He ordered the guard to prohibit the entrance of the Colonel and he informed the army of the dissolution of parliament. He occupied the District Office, the Post Office and the Police Station.

4. 2nd Lt. Hussen Haji Ali Dualeh.

He took part in the arrest of the senior officers in Hargeisa. He organised all the operations for feeding and supplying the operation. He was in command of the operation in the occupation of Berbera where he arrested the Regional Governor and the District Commissioner. He informed the authorities about the revolt.

5. 2nd Lt. Mohamed Mohamud Siad.

He took part in the arrest of the senior officers and he distributed the uniforms to the promoted officers. He occupied Government House in Hargeisa.

6. Said Ali Ghir.

He persuaded the guard in the Officers Mess in Hargeisa to consent to the arrest of the superior officers. He took part in the guarding of these officers and he was charge of the prisoners. He occupied the airport and mounted anti-aircraft guns in two places. He gathered the officer cadets together at his house and read the order of the day to the officer cadets. He assumed the position of messenger for the leader.

7. 2nd Lt. Mohamed Abdurahman Haji Jama.

He transferred 'B' Company form Adadley to Berbera. Helped by 2nd Lt. Hussen Haji he occupied the police station.

8. 2nd Ltd. Daud Ali Iahia.

He gave the Governor of Burao the order to obey him and to do as he was told. He threatened him with death if he did not do so. He took part in the arrest of Major Abdullahi Yusuf and took his pistol from him.

9. 2nd. Lt. Faisal Haji Jama Ghedi.

He was assigned command of a reserve platoon in Burao to help the rebels who took part in the arrest of Major Abdullahi.

10. Officer Cadet Abdi Ali Hussen.

He accepted promotion and he kept guard over the senior officers in Hargeisa.

11. Officer Cadet Ahmed Haji Diriye.

He accepted promotion. He was in command of one of the platoons transferred to Hargeisa.

12. Officer Cadet Ali Harun Jama.

He commanded one of the platoons transferred to Hargeisa. He accepted promotion. He took part in the occupation of the police station at Hargeisa.

13. Abdikarim Ashur Abdalla.

He took part in guarding the superior officers in Hargeisa. He accepted promotion.

14. Abdi Dalla Abdi Mohamed.

He took part in the occupation of Burao.

15. Officer Cadet Said Ogla Ahmed.

He accepted recompense. He took part in the occupation of Burao, taking part at the same time in the arrest and guarding of Major Abdullahi Yusuf.

16. Abdi Yusuf Abokar Ahmed.

He took part in the operations in Burao and accepted command with the deputy commander of 'E' Company.

17. Mohamed Sheik Musa Abokar.

He took part in the operations in Burao under orders of 2nd Lt. Daud Ali Iahia in keeping control of the town.

18. Hussen Mohamed Bulale Hassan.

He took part in the operations in Berbera, helping Hussen Haji Ali to occupy the Police Station, the District Office, the Post Office and the Customs.

19. Yusuf Ahmed Kibar.

He took part in the operations in Berbera, helping to keep watch with a squad over the Regional Governor of Hargeisa in Berbera.

(Continued on page 5)

Xigasho: Somali News, Friday 15th , Feb. 1963kii

dabadeed ila hadlay Cabdullaahi Koongo, kaas oo igu yiri: ' Cabdullaahi waxba adiga kaama aannu rabno, kumana dilayno, waxbase kaa qarin mayno oo waad fahamsan tahay waxa aannu samaynay. Dantayadu waxa ay tahay in aannu saxno khalad ka dhashay midayntii labada gobol. Sida aannu ku sixi karnaa waxay tahay in aannu marka hore Somaliland ku soo celinno xaaladdii ay ku sugnayd 26kii June 1960kii, dabadeedna laga wada hadlo midaynta laba gobol, si loo saxo wixii qaldamey' . Annaga oo arrintaas ka duuleyna, ayaannu goosannay in aannu kuu haysanno rahaamad aan ku beddelanno saraakiisha reer woqooyi ee koofur jira.

Madaxdii Hargeysa joogtey oo ay ka mid ahaayeen Maxamed Caynaanshe, Maxamed Nuur Baarqab, Cismaan Sonkor iyo Maxamed Nuur Cadow waxaa lagu xiray xerada ciidammada. Waxaa saacado yar kaddib, afgembigii ka fuley Hargeysa, Burco, Berbera iyo Boorame oo ahaa degmooyinka keli ah ee woqooyi-galbeed oo ciidammadu ay fariisimmo ku lahaayeen. Nasiib wanaag, ciidan uu watey nin sargaal xigeen ah oo lagu magacaabo Faarax Dhillo-Casar oo Hargeysa joogey ayaa arrinta maqlay. Dabadeedna, isaga oo ciidankiisii wata buu toos weerar ugu soo qaaday gurigii ay madaxdu ku xirnayd. Iska horimaad yar oo halkaas ka dhacay waxaa ku dhintay sargaal ka mid ahaa saraakiishii afgembiga waddey, raggiisiina waa laga itaal roonaaday oo waa la wada qabtay. Dhillo-Casar wuxuu isla markiiba soo daayay madaxdii xirnayd. Sidaas oo kale, waxaa la qabtay Xasan Kayd oo markii raggiisii la qabqabtay, derbiga ka boodey si uu u baxsado, boodadii ayuu ku murkucday oo isla meeshii baa lagu qabtay.

Maxamed Caynaanshe wuxuu la soo hadlay fooniyaha Burco, wuxuuna ku yiri: ' Taliyihii iigu yeera' . Waxaa loo sheegay in aan xirnahay, dabadeed wuxuu amar ku bixiyey in degdeg la igu soo furo. Amarkaas ciidankii si buuxda buu u fuliyey, iyaga oo ciidan xoog leh oo horintaydii ka tirsan ku soo weeraray gurigaygii, mudda gaabanna hubkii kaga dhigay ciidankii fallaagoobay, dabadeedna xabbiskii iga soo daayay. Markii aan soo gaaray ciidankii xerada joogey ayaan amar ku bixiyey in degdeg loo soo qabqabto raggii ka danbeeyey falkii afgembiga. Sidaas oo kale Maxamed Caynaanshe wuuxu igu soo amray in ragga la qabtay oo dhan Hargeysa la keeno si dabadeedna Muqdisho

loogu gudbiyo. Amarku sidii uu ahaa ayaan u fuliyey. Waxaa kale oo uu amar igu siiyey in aan Berbera ka soo qabqabto saraakiisii afgembiga wax ka waddey. Waxaan Fooniye kula hadlay ciidankii halkaas joogey, kuwaas oo ii sheegay in saraakiishii baabuur qaateen oo iska tageen xeebtana mareen iyadoo ay nala tahay in ay Djibouti u socdaan ciidankii amar waxaan ku siiyey inay ka daba tagaan oo soo qabtaan waxaana Gaashaaanle Sare (Colonel) Maxamed Caynaanshe Guuleed u sheegay amarkii aan bixiyey. Raggii la soo qabtay waxay ku wareejiyeen G/ Sare Caynaanshe oo Hargeysa joogay, kuwii Burco iyo Berberaba markii Hargeysa la isugu geeyey, Xamar baa loo gudbiyey sidaas ayaa afgembigii ku dhicisoobay.

## YAA KA DAMBEEYEY AFGENBIGA

Shaki kuma jiro in aaney talada iyo farsamada iskudayga afgembigu ka iman maskaxda saraakiisha dhallinyarada ah ee falka samaysay, balse arrinta lagu hoggaamiyey, lagu maalgeliyey, haddii lagu fashilmana badbaadintooda la dammaanad qaaday. Sida la og yahay, boqolkiiba boqol shacbiga Soomaalidu waxay, si aan kala har lahayn, ugu heellanaayeen midnimada Soomaaliya. Run ahaanna iyaga ayaa sabab u ahaa in si degdeg ah loo mideeyo labada gobol. Labada dhinacba waxaa ka jirey siyaasiyiin tiro yar oo aan raalli ka ahayn qaabka degdegga ah ee arrinta loo maareeyey. Labada kooxood, mid waliba waxay qabtey welwel u goonni ah. Kooxda reer woqooyi waxay shaki ka qabeen in ay koofuri liqdo, maadaama koofuri dhul iyo dad ahaanba ka weyn tahay. Sidaas awgeed, waxay jeclaayeen in midoobidda ka hor si maangal ah la isula meel dhigo awood qaybsi raalli lagu wada yahay. Kooxdaas waxaa hoggaminayay Ra' iisul Wasaarihii Soomaaliland Maxamed Ibraahim Cigaal.

Kooxda reer koofureed, waxaa hoggaaminayay Aaden Cabdulle Cismaan. Welwelka ay qabeen wuu ka duwanaa kan reer woqooyiga. Kooxdaan waxaa welwel ku hayay sida dawlad itaal yari ay il biriqsi u midayn karto laba dal oo ku dhaqma laba hab oo kala duwan, kuwaas oo ka soo kala jeeda labadii dal ee kala gumaysan jirey Boqortooyada Midowdey ee Ingiriiska iyo Talyaaniga. Waxay jeclaayeen in midaynta

labada gobol aan lagu degdegin oo waqti la isa siiyo, si arrinta looga baaraandego, sidaasna looga hortago dhibaatooyin ka dhalan kara midnimada degdegga ah. Nasiib wanaag, labada kooxoodba waxaa si fudud u jiiray xamaasaddii shacbiga iyo go'aammada axsaabtii talada haysey. Sidaas awgeed, waxaa si degdeg ah loo saxiixay "xeerkii midnimada" ee labada gobol. Damaashaadkii kaddib, waxaa la isku daray labadii baarlamaan, waxaana guddoomiyihii ugu horreeyey loo doortay nin reer woqooyi ah oo la oran jirey Jaamac Cabdullaahi Qaalib. Labada jago ee Afrika taladu ka go'do oo kala ah Madaxweynaha iyo Ra' iisul Wasaaraha waxaa qaatay reer koofureed. Sidaas oo kale, jagooyinkii muhiimka ahaa ee xukuumadda waxaa ku darsaday reer koofureed.

## XUBNAHA DAWLADDII UGU HORRAYSAY 22kii LUULYO 1960kii


1. Aadan Cabdulle Cismaan — Madaxweyne
2. Cabdirashiid Cali Sharmaarke — Wasiirka Kowaad
3. Cabdi Xasan Buuni — Ku-xigeenka Wasiirka Kowaad
4. Axmed Xaaji Ducaale — Wasiirka Beeraha
5. Maxamed Xaaji Ibraahim Cigaal — Wasiirka Gaashaandhigga
6. Cali Garaad Jaamac — Wasiirka Waxbarashada
7. Cabdulqaadir Maxamed Adan (Zobbe) — Wasiirka Maaliyadda
8. Cabdullaahi Ciise Maxamuud — Wasiirka Arrimaha Dibadda
9. Shiikh Cali Jimcaale — Wasiirka Caafimaadka iyo Shaqada
10. Sh Cabdille Maxamed Maxamuud — Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga
11. Cali Maxamed Hiraabe — Wasiirka Warfaafinta
12. Cabdirisaaq Xaaji Xuseen — Wasiirka Arrimaha Gudaha
13. Maxamuud Axmed Aadan — Wasiirka Garsoorka
14. Cabdinuur Maxamed Xuseen — Wasiirka Hawlaha Guud iyo Isgaarsiinta
15. Cismaan Maxamuud Ibraahim — Wasiirka Danaha Soomaaliyeed.

Way dhici kartaa in wax qaybsiga noocaas ahi abuuri karay niyad xumo, talada wax lagu dhisayse ma ahayn mid jagooyinka lagu gorgortamayay (sida Axdiga ku meel gaarka ee dawladda TFG)da, balse waxay ahayd mid ku jaango'an siyaasadda Ra'iisul Wasaarihii dawladda



"We have to ask ourselves 'What can we do for Somalia', and **Not** What can Somalia do for each of us'.,,

**PRESIDENT ADEN ABDULLA OSMAN**



CHAPTER I

**H. E. Adan Abdulla Osman, President of the Somali Republic**

Born at Belet Wen (Hiran) after receiving education at State Schools, he acquired administrative experience in Government offices.
He subsequently devoted himself to his own flourishing business.
In February 1944, he joined the Somali Youth Club (subsequently called Somali Youth League), became a member of the party's steering board and in 1946 was appointed Secretary of the Belet Wen section of the party.
In 1951 the Regional Council of Mudugh designated him for the Territorial Council on which he served uninterruptedly (up to February 1956) as a representative of SYL.
In 1953 he was appointed Vice-President of the Territorial Council.
In 1954 he became President of the Somali Youth League and remained in office until 1956. Re-elected to the same position in May 1958, he occupied this post simultaneously with the post of President of the Legislative Assembly until 1st July 1960.
In the 1956, when the territorial Council was replaced by the Legislative Assembly, he was elected member of the National Assembly for the Belet Wen District at the general political elections, and in the meantime the Legislative Assembly appointed him as its President.
At the 1959 general political elections, he was again elected member of the National Assembly, which again appointed him President. He maintained this post when the Legislative Assembly was converted into the Constituent Assembly.
In his capacity as President of the Constituent Assembly, on 1st July 1960, he proclaimed the Independence of the Somali Republic and following the unification of the northern and southern territories - formerly British Somaliland and Italian Somaliland. The National Assembly chose him as Provisional President

6

of the Somali Republic for a period of 1 year, and in 1961 re-elected to the same mandate for 6 years.
President Adan is married to Lady Ascia Elmi Matan and has eight children.
He devotes his interest to legal, social and economic studies.
Besides Somali, he speaks Italian, English and Arabic.
A Self-made man, the President is widely popular and highly respected by the entire nation.

**President's views on world affairs**

The Somali President has been consistently fostering the ideals of mutual understanding co-operation, at home and abroad.
This has been the recurring theme of his statements, and of his action, in the Somali Republic and at international meetings. His views on world problems, always clear and positive, are expressed in the following declaration, which was contained in speeches he made at the African Summit, and Non-Aligned conferences.
"The most vital thing of all is, I believe, the need for States to adhere to a philosophy of action which will ensure that the moral integrity of their particular policies is unimpeachable. This is a matter to which I have given much thought and my own conclusion is that we will never attain this moral integrity until we accept that the well-being of man should be the true aim of all our policies."
There is too often a tendency to speak of the "interest of the State", the "dignity of the State", the "inviolability and sovereign independence of the State". The State becomes some kind of being a life of its own, divorced from the people.
Thus is the protection of the State, governments are today prepared to contemplate the destruction of even their own people. The nuclear powers know well the risk they take in completing the use of the nuclear weapon, the retaliation by another nuclear power. What kind of State will remain, we may ask, a desert, uninhabited save by a few pitiful wrecks? The futility of the

7

Xigasho: Somalia A Divided Nation Seeking for Reunification, Somali Minsistry of Information, 1965

dhisayay. Taas oo doorasho ama kalsooni kala noqosho lagu beddeli karey. Isbiirsiga saluuggaa ka dhashay dhismihii dawladda midnimada qaran iyo shakiyo horay u jirey waxay ka mid noqon kareen sababaha loo nisbayn karo isku dayga afgembiga fashilmay. Sida hore aan u xusay, saraakiishii iyo saraakiil ku-xigeennadii afgembiga isku dayay waxaa la wada keenay Muqdisho, halkaas oo in muddo ah maxkamd sugeyaal ku ahaayeen. Ka hor intaan maxkamadda la soo taagin ayaa arrintoodii loo rogay ‘ qaddiyad beeleed’ , dabadeedna, abaabul loo galay sidii eedaysanayaashaas loo badbaadin lahaa.

Rag magac iyo maamuus dalka ku lahaa, oo ay hormuud ka ahayeen Maxamed Xaaji Ibraahim Cigaal, Ra’ iisul Wasaarihii Soomaliland iyo Cabdullahi Oomaar, siyaasi iyo ganacsade weyn laguna tuhmaayay in ay iskudayga afgembiga bud-dhigayaal u ahaayeen ayaa, isu xilsaaray sidii loo tirtiri lahaa denbiga loo haysto eedaysanayaashaas. Raggaasi waxay cadaadis xoog leh saareen sidii dawladdu u cafiyi lahayd, iyada oo lagu beerlaxawsanayay in maxkamadayntoodu ka abuuri karto dalka qalalaase siyaasadeed, isla markaasna, shaki gelin kareysey baadigoobka loogu jirey Soomaali-weyn.

Dawladdu waxay xilligaas la gaadaa dhacaysey arrinta gobolka Soomaaliyeed ee NFD ee bariga Kenya oo isla waqtigaas ay ka socotey xog ururin iyo sahammo lagu hubinaayo ciddii ay doonayaan in ay raacaan, Kenya oo xornimadeedii soo dhowaatay ama Soomaaliya. Siyaasiyiinta reer woqooyi, waxay bilaabeen in ay dawladda u tusaan in, haddii eedaysanayaasha maxkamad la saaro oo la xukumo, ay shaki ku abuurayso rabitaanka NFD ku doonayso in ay Soomaaliya ku soo biirto, maadaama ay labadii horeba isla liicayaan oo ay kala go'id qarka u saaran yihiin. Dhinaca kale, waxaa la uruuriyey lacag fara badan oo dibedda lagaga keenay qareenno caalami ah oo eedaysanayaasha ka difaaca dembiga loo haystey. Waxaa la yaab leh, sida ruug-caddayaasha reer woqooyi, isugu taageen si ay wax kama jiraan uga dhigaan dembiga ugu weyn oo qaran laga geli karo.

Waxaase isweydiin leh, geesinnimada ama indha adaygga ragga noocaas u dhaqmayay ay ku hawaysan kareen in ay majaraha u qabtaan hoggaaminta dalka.

Sida la og yahay, kolkii isku daygii afgembiga maxkamadda la horgeeyey, dabadeedna, iyada oo la raacayo habsocodka sharciga la weydiiyey in ay eedaysanayaashu qirsan yihiin ama diiddan yihiin dembiga lagu soo oogey. Waxaa goobjoogayaashii maxkamadda oo dhan ka yaabiyey, markii dhammaantood ku jawaabeen ' maya' , taas oo macnaheedu ahaa in aanay wax dembi ah gelin. Markaas kaddib, ayaa Xeer-Ilaaliyihii, si faahfaahsan ugu soo oogey dembiga ay galeen, isla markaasna, maxkamadda soo hor istaajiyey intayadii ku maragfureysey. Dhaar dabadeed dhammantayo waxaannu maxkamadda horteeda ka caddaynay in eedaysanayaashu sameeyeen afgembi dhiig ku daatay oo lagu kala goynayo dalka; intaas kaddib, waxaa hadalkii qaatay madaxa qareennadii difaacayay eedaysanayaasha, kaas oo maxkamadda horteeda ka jeediyey hadal dheer oo aan wax nuxur ah lahayn, ujeeddadiisuse ahayd in uu isku daygii afgembiga u rogo gadood ciidan oo caadi ah, kaas oo xukunkiisu yahay anshax. Maalmo kaddib, waxaa Maxkamaddii ka soo baxay go'aan aan run ahaan, ka turjumayn dhinaca sharciga, balse cudurdaar loogu samaynayay go'aan siyaasadeed oo hore Maxkamadda dibaddeeda lagu soo gaarey, kaas oo ahaa in eedaysanayaashii wax dembi ah lagu caddayn waayay, sidaas awgeedna ay maxkamaddu sii daysey.

---

Footnote: Cabdullaahi Koongo, wuxuu ahaa sargaal ka soo baxay kulliyadda saraakiisha ee Qaahira (Masar). Xubin firfircoon ayuu isku daygii afgenbiga ka ahaa. Waa nin ceeb yar oo qunyarsocod ah. Muddo kaddib waxaa loo baddeley Wasaaradda Arrimaha Dibadda. 1970aadkiina waxaa laga dhigay Safiir. Kaddib wuxuu u wareegey Jaamacadda Carabta.

Cawil Xaaji Cali: wuxuu ahaa sargaal ka soo baxay kulliyadda Mons (UK). Xubin firfircoon ayuu ka ahaa isku daygii afgenbiga. Muddo kaddib waxaa loo beddeley Wasaaaradda Arrimaha Dibadda, halkaas oo uu ka gaaray darajada Safiir. 1977kii ayaa dalka dib loogu soo ceshey si uu dagaalka uga qayb qaato, toddobaadyo kaddib ayuuse dagaalka ka fakaday oo Kenya isu dhiibay, halkaas oo uu safiir ka ahaan jirey. Markii uu ciidanka amniga ee Kenya isu dhiibeyna wuxuu u sheegay in Safiirnimadiisu ay magac u yaal ahayd, balse ay shaqadiisa dhabta ahi ay basaasnimo ahayd uuna ahaa Kornayl ka tirsan ciidammada Soomaaliya. Yaabka-yaabkiis, isagoo anshaxdarradaas ku dhaqmay ayaa Siyaad Barre muddo gaaban ku cafiyey oo dalka lagu soo ceshay oo lacag uu ku ganacsado la siiyey. Hadda ( xilliga qoraalka buuggu socdo 2011) wuxuu ka yahay Wasiirka Maaliyadda maamulka Hargeysa. Cawil waa nin caan ku ah danaysiga.

Dhammaan edaysanayaashii waxaa shaqadoodii mid u dhiganta laga siiyey maamulka rayidka ah. Go'aankii Maxkamaddu wuxuu muujiyey, isu dheellitir la'aanta ka jirtey awoodaha hay'adaha qaranka (Sharci dejinta, Fulinta iyo Garsoorka), oo dastuur ahaan kala madax bannaan, markiise xaqiiqada loo kaco aan waxba ka jirin. Aniga oo yaabban baan maxkamaddii ka soo baxay. Go'aankaasi wuxuu i xusuusiyey mid ka daran oo hore ii soo maray, kaas oo aan wax kaga xusi doono bogagga soo socda.


## DIB UGU SOO NOQOSHADII KOONFUR

Dhammaadkii 1962kii waxaa la iga soo beddelay Woqooyi. Bilawgii 1963kii waxaa la igu magacaabay taliyaha ururka Xoogga Dalka Soomalaiyeed (XDS) ee Jubbada Sare. Sida la og yahay XDS ma haysan hub ku filan. Wax la sheegi karana kama dhaxlin dawladihii dalka gumaysan jirey, haddii laga reebo tiro yar oo baabuurta gaashaaman ah, dhowr madfac iyo dhowr beebayaal ah iyo iwm. Meelo kale oo hub ka soo gaarayna ma ayan jirin, haddii laga reebo hub yar oo fudud oo Masar laga helay. Iyada oo duruufahaas lagu jiro, ayaa Ra'iisul Wasaare Cabdirashiid Cali Sharmaarke wuxuu u duulay dalalka Galbeedka si uu uga soo helo, kaalmo Somaaliya ciidan loogu dhiso. Wuxuu ugu hormaray dalka Talyaaniga oo xiriir taariikhi ah la lahaa Soomaaliya, wuuse ku soo hungoobay.

Aragtida Talyaaniga hore ayaa loo ogaa oo wuxuu qabay in ayan Somaaliya lahayn awood dhaqaale oo ay ciidan ku yeelan karto. Dabadeed wuxuu tegay dalka Maraykanka halkaas oo si fiican loogu soo dhoweeyey, kulan dheerna kula yeeshay Madaxweyne John F. Kennedy. Dawladda Maraykanku waxay Ra'iisul Wasaaraha u sheegtay in ay diyaar u tahay in ay u dhisto ciidan gaaraya lix kun oo qalab fudud ku hubaysan: taladaas oo Cabdirashiid uu saluugay. Kaddib wuxuu tagay dalka Jarmalka Galbeed; kaas oo u sheegay in ay diyaar u yihiin in ay ka taageeraan xagga Ciidanka Booliska, aanayse bixinayn taageero XDS lagu dhiso.



The Prime Minister, Abdirashid Ali Shermarke, discussing with the President of the Italian Republic, Hon. Antonio Segni, during a reception given on his honour in Italy in 1960.



The Prime Minister, Abdirashid Ali Shermarke during his official visit to the USA with President Kennedy who recently died in tragic circumstances.

Markuu ku soo hungoobay dalalka Galbeedka ayuu, sida la sheegay, la xiriiray Madaxweynihii Masar, Jamaal Cabdi Naasir, kaas oo ku dhiirrigeliyey in uu kaalmo dhincyo badan leh weydiisto Midowga Soofiyeetiga, taas oo dooneysey in ay saamayn ku yeelato siyaasadda dalalka Afrika ee hore uu u gumeysan jirey Galbeedkii ay loollanka kula jirtey. Sidaas awgeed, gacma furan bay ku soo dhoweeyeen codsigii RW Soomaaliya.

Ra'iisul Wasaaruhu wuxuu qaatay taladii Jamaal Cabdi Naasir. Wuxuu martiqaad ka helay Ra'iisul wasaarihii Midowga Soofiyeeti Nikito Kuroshov. 1963kii ayuu Cabdirashiid ku tagey dalka Midowga Soofiyeetiga martiqaad rasmi ah isaga oo hoggaaminaya wafdi ballaaran oo uu ka mid ahaa taliyihii XDS, Janan Daa'ud Cabdille Xirsi. RW wuxuu halkaas la tagey codsi isugu jira taageero dhaqaale iyo mid ciidan. Labadii codsiba waa laga oggolaaday. Maalintaasi waxay noqotay maalin waa cusubi u dhashay ciidankii XDS.

## DAGAALKII ITOOBIYA KU SOO QAADDAY SOOMAALIYA 1964KII


Sida aan hore u soo sheegay waqtigaas anigu waxaan taliye urur ka ahaa XDS qaybtiisa Jubbada Sare. Isla waayadaas qaybaha Soomaaliyeed ee aan weli xoroobin waxaa ka jirtey kacdoon gobannimoddoon, gaar ahaan gobolka Soomaali Galbeed ee ay Itoobiya gumaysato, kaas oo isu beddeley dagaal hubaysan. Isbiirsiga Soomaaliya oo hub loo ballanqaaday iyo dagaalka ka socday Soomaali Galbeed waxay Itoobiya u aragtay halis aan la dhayalsan karin oo ku soo fool leh midnimadeeda. Sidaas awgeed, waxay istiri hal mar Soomaaliya dharbaaxo kulul ku dhufo si ay u garwaaqsato sida ay Itoobiya uga go'an tahay in aaney u dul qaadan doonin halis Soomaaliya kaga timaadda. Run ahaanse waxay dooneysey in weerarka gardarrada ah oo ay ku soo qaadday ku gaarayso saddexda ujeeddo ee soo socda:

On the occasion of one of his visists to Cairo, the Prime Minister, Abdirashid Ali Shermarke, talks with the Egyptian Premier Nasser.



Below: the Prime Minister cordially discusses with the Nigerian leader Abubaker Tafawa Balawa






In May 1961, the Prime Minister, Hon. Dr. Abdirashid Ali Shermarke, went to USSR.



Above, the Prime Minister with Premier Khrushchev. Below, the Prime Minister at the Kremlin accompanied by the Prime Vice-Chairmen of the Council, Mikoyan.



A Somali Delegation headed by the Prime Minister, Abdirashid Ali Shermarke, went in August 1963 to the Chinese People's Republic in official visit. The



pictures show the Prime Minister meeting President Mao-Tse-Tung and Premier Chu En - Lai. Below, the ceremony of the signature of the Chinese-Somali agreement



1. In ay ficil ahaan u garansiiso Soomaaliya in ay cawaaqib xumo kala kulmayso dagaalka ay Soomaali Galbeed ka waddo.
2. In ay qabsato goobo ka mid ah dalka Soomaaliya oo qalalaase siyaasadeed geliso dawladda curdanka ah, dabadeedna dadku ku kaco oo dawladda hubdoonka ah la rido.
3. In ay dhacsiiso beesha caalamka in hub la siiyo Soomaaliya ay ka dhigan tahay dab laga shiday geeska Afrika. Itoobiya oo istiraatiijiyaddaas ka duulaysa ayaa, weerar lama filaan ah ku soo qaadday goobo ku yaal xadka aan rasmiga ahayn oo ay Soomaaliya la leedahay, sida saldhiggii Booliiska iyo degaanka Qurac Joome, halkaas oo ay horraantii Maarso 1964kii, ku garaaceen dayuurado geystey dhibaato weyn oo dad iyo duunyoba leh. Sidaas oo kale, waxay weerar ku soo qaadeen goobo xudduudka u dhow oo ka tirsan gobollada Hiiraan iyo Woqooyi Galbeed.

## URURKII LIB SIDE

Waxaa durba heegan sare la geliyay XDS oo wakhtigaas ka koobnaa 6 kun oo askari oo aan hub culus haysan. Anigu waxaan madax u ahaa Ururka Libin-Side oo xaruntiisu ahayd Baydhabo kana koobnaa 750 askari. Waxaa amar la igu siiyey in aan ciidan u diro Qurac Joome. Muqdisho waxaa la iiga soo diray horin kumaandoos ah oo uu wato Farah Wacays Dhuule (Faras). Ciidan aan horay u diyaarshay iyo kumaandooskii Muqdisho ka yimid ayaan u diray Qurac Joome, halkaas oo ciidan xoog leh oo Itoobiyaan ahi xadka soo buuxiyey, dayuuradahooduna duqayn ka wadeen. Sidaas oo kale, Itoobiyaanku waxay ciidammo ka soo buuxiyeen xadka Doolow iyo Yeed.

Waxaa misana amar la igu siiyey in aan ciidankii kumaandooska ahaa horin kale ku xoojiyo. Si aan amarkaas u fuliyo horin aan Yeed hore u geeyey baan dib u soo ceshay. Isla markaas horin xoojin ah baa Kismaayo la iiga soo diray. Sidaas oo kale Beteri Altalari ah iyo Dhashiikayaal uu wato Maxamuud Geelle Yuusuf ayaa Muqdisho la iiga soo diray. Ciidammadaas oo dhan Doolow iyo Yeed ayaan u

dhaqaajiyey halkaas oo dagaal culusi ka bilowday. Nasiib wanaag, waxaannu durba ku guuleysanney in aannu ciidammadii Itoobiya ka saarno dhammaan goobihii ay guduha xuduudda Soomaaliya u soo galeen. Kaddibna u gudubney xadka Itoobiya, oo qabsannay xeradii ay fadhiyeen iyo magaalada Doolow oddo.

Itoobiyaanku markii ay ku fashilmeen ujeedadii ay ka la haayeen weerarradii koobnaa ee cabsi gelinta ahaa, waxay dagaalkii ku fidiyeen dhammaan xudduudka labada dal ka dhexeeyey. Sidaas ayaa dagaalkii ku galay marxalad cusub. Waxaa Soomaaliya oo hortiiba awooddeeda ciidan iska yarayd ayaa lagaga dhawaaqay abaabul guud oo aan loo kala harin si weerarka Itoobiya looga hortago. Sidii la filayay shacbigii wuxuu isu wada taagey difaaca dalka hooyo. Mutadawiciinta dagaalka diyaar u ahayd iyo fara badnida taakulaynta shacbigu isla soo barbartaagay XDS, waxay si aan la qiyaasi karin sare ugu qaadeen moraalka ciidammadii dagaalka ku jirey. Weerarkii gardarrada ahaa ee Itoobiya dalka ku soo qaadday wuxuu meel kasta oo ay joogeen, si farxad leh u mideeyey shacbigii Soomaaliyeed.

Intii dagaalku ka dhex socday labada dal, waxaa la wadey dadaal diblomaasi ah oo lagu doonayay in dagaalka lagu joojiyo, dadaalkaas waxaa hormuud ka ahaa Ururka Midnimada Afrika (OAU). Ururku wuxuu u xilsaaray dalka Suudaan in uu labada dal u kala dabqaado oo uu shir isugu keeno, xilkaas oo ay dawladda Suudaan ku guuleysatey. Labada dalba waxay oggolaadeen gogosha ay Suudaan ugu fidisay magaalada Khartuum.

Shirkaas ayaa lagu heshiiyey xabbad-Joojin rasmi ah, iyo in ciidammada la kala qaado oo qolo waliba xadkeeda ku ekaato, dabadeedna qolo waliba xudduuddeeda dib uga gurato 15 km. Aniga oo Doolow ku sugan ayaa waxaa halkaas iigu yimid wafdi ay kala hoggaaminayeen Maxamed Siyaad Barre oo ka socday dhinaca Soomaalida markaasna ahaa abaanduulaha XDS iyo G/Sare Mihretap oo ka socdey dhinaca Itoobiya. Wafdigu wuxuu u xilsaarnaa in uu hubiyo in ciidammadii la kala qaaday.

Aniga oo G/le ahaa iyo taliyihii Itoobiyaanka oo G/Sare ahaa ayaa guddigii wada jirka ahaa shir la qaadannay, annaga oo hordhignay qaabka aannu ciidammadii u kala qaadnay iyo sida aannu ugu guuleysanney fulinta awaamirtii nala faray. Markii shaqadii la isku afgartay ayaa sargaalkii Itoobiyaanka ahaa ee iga soo horjeeday meesha ka yiri: ' War ma inankaan yar baa ila dagaallamayay, waxaan filayay in ay maanta shirka iiga soo horjeestaan saraakiil ila da'a ah' .

Xabbad-joojinta la dhex dhigay labada dal waxay muujisay in Itoobiya ku fashilantay dhammaan saddexddii ujeeddo ee ay dagaalka ka lahayd. Guushaas kaddib, waxaa dhacday in shacbiyadda xukuumaddii ay doonayeen in ay ridaan si aan caadi ahayn u xoogeysatey, sidii dastuurku qorayayna doorashadii xilligeedii qabsoontay. Xiriirkii Soomaaliya dunida la lahaydna wuu sii xoogoobay. Sumcaddi Xoogga Dalka Soomaaliyeedna cirka ayay isku shareertay, sidaasna ku noqday ciidan shacbigu ku kalsoonaan karo, duruufo kasta oo soo wajaha. Jacaylka shacbigu u qabo XDS waxay ku muujiyeen suugaanta mu'allifiinta Soomaaliyeed ku soo bandhigeen qiiradooda. Xus gaar ah waxaa mudan fannaaniintii ay ka mid ahaayeen Seynab Xaaji Cali (Baxsan) heestii caanka ahayd (Geeshkayagow guulaysta) iyo heestii kale ee iyaduna caanka ahayd oo ay qaadi jirtay fannaanaddii magaca-dheerayd ee Xaliima Khaliif (Magool- Nin lagu seexdoow ha seexan), sidaas oo kale Togwajaale dagaal baa ka dhacay oo Ciidamadii dib baa loo kala qaaday.



* Sawirkan waa heshiiskii dagaalkii 1964 lagu kala saxiixday magaalada Doolow. Wafdiga Soomaalida waxaa madax u ahaa G/Le Cabdullahi Yusuuf Axmad. Waa Sarkaalka labaad marka laga tiriyo dhinaca midig ee sawirka. Inta kale dhammaan waxay ka sodeen ciidanka iyo maamulka Itoobiyaanka.

Dagaalku markuu dhammaaday ururkaygii waxaa la siiyey ammaan iyo calan, dhawr ka mid ahna abaalgudyo kala duwan, sida dallacaad iyo billado, halka aniga la isugu kay daray billad iyo xiddig, taas oo aan ugu dallacay derejada G/ dhexe.



Gaashaanle Cabdullaahi Yuusuf oo billad Geesi iyo dallacaad la guddoonsiiyey. Waxaa loo dallacsiiyey Gaashaanle Dhexe sannadkii 1964kii. Billadda waxa guddoosiiyey Madaxweyne Aadan Cabdulle Cusmaan.

Bartamihii 1965kii waxaa waxbarasho la iigu diray Midowga Soofiyeetiga, halkaas oo aan ka galay Kulliyadda Sare ee Dagaalka. Aniga oo waxbarashada sidaydii u watey ayaa waxaa si ku meel gaar ah la iigu magacaabay ku qaybsanaha arrimaha ciidammada (military attache`) ee Safaaraddii Soomaaliyeed ee Midowgii Soofiyeetiga. Baahida jagadaasi waxay ku timid xiriirka laba ciidan, kan Soomaaliya iyo kii Midowgii Soofiyeetiga oo si xawlli ah u kordhayay. In dawladdu ay jagadaas igu magacawdana waxaa sababay dhaqaale yarida dalka ka jirtey oo saamixi weydey in safaaradda lagu kordhiyo qayb dhan oo ciidammada gaar u ah, sidaas darteedna laga fursan waayay in laga faa' iidaysto saraakiishii Midowga Soofiyeetiga wax ku baraneysay Kan hormuudka u ah. 1968kii baan soo dhammaystay waxbarashadii dabadeedna waxaan dib ugu soo noqday Soomaaliya. Isla sannadkaas baa waxaa madax la iiga dhigay hoggaanka Tababarrada ee Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

## WADDADA AFGEMBIGA
### Fashil Siyaasadeed iyo Loolan SYL Gudaheeda

Laga bilaabo sannadkii aan waxbarashada u aadey Midowga Soofiyeetiga tan iyo soo laabashadaydii, waxaa dalka ka socday loollan siyaasadeed, kaas oo hadba weji cusub la soo baxayay. Sida la og yahay, lixdamaadkii waxaa cirka isku shareeray loollankii ka dhaxeeyey dawladaha waaweyn kuwaasoo (4 Powers) loo yiqiin "Xilligii dagaalka qabow", waxayna adduunka saddexaad ka dhigteen kooxo kala raacsan. Guud ahaan Afrika waxay ku jirtey xayndaabka reer Galbeedka. Sidaas awgeed, reer Galbeedku ma qaadan karin in dal ka mid ah Afrika uu ka baxo xayndaabkooda. Dr. Cabdirashiid Cali Sharmaarke oo ahaa Ra'iisul Wasaarihii ugu horreeyey ee ay Soomaaliya yeelato, baa xaalado soo foodsaaray awgood, wuxuu qaaday tallaabooyin madaxbannaan. Kaddib markii uu aqoonsaday Shiinaha, heshiis Militari la saxiixday Ruushka, Ingriiskiina xiriirkii u jaray markuu iska indha tiray natiijadii ka soo baxday aftidii laga qaaday

Gobolka Woqooyi Bari (NFD) ee Soomaalidu degto oo ay boqolkiiba sagaashan isku raaceen in Soomaaliya lagu daro oo Kenya laga gooyo. Tallaabooyinkaasi waxay u cuntami waayeen dawladda Talyaaniga oo Soomaaliya Galbeedka wakiil uga ahayd. Sidaas oo kale siyaasadda Ra'iisul Wasaarahu waxay ka caraysiisay Madaxweynaha Soomaaliya mudane Aadan Cabdille Cismaan oo siyaasad ahaan u janjeerey dhinaca Galbeedka.

---

Footnote: Aadan Cabdille Cismaan, wuxuu ahaa Madaxweynihii ugu horreeyey ee Soomaaliya. Wuxuu ahaa siyaasi ruug caddaa ah oo qunyar-socod ah, wuxuuna ahaa nin aqoon sare leh. Aaden Cabdille wuxuu goostay in uu hor istaago tallaabooyinka Cabdirashiid qaaday, dalkana ku soo cesho xayndaabka reer Galbeedka. Madaxweynuhu wuxuu gartay in qorshayaasha RW ay dalka ka fogeynayaan Galbeedka, dabadeedna Soomaaliya waayi doonto kaalmooyinka reer Galbeedka oo uu u arkaayay in ay lagama maarmaan u ahayd horumarka dalka. Kaddib markii 1964kii SYL ku guulaysatey doorashadii Baarlamaanka, waxay jagada Ra'iisul Wasaare rasmi ahaan ugu sharraxday mudane Dr. Cabdirashiid Cali Sharmaarke, sharraxaaddaas oo Madaxweyne Aadan Cabdille ku gacansayray isaga oo beddelkiisii jagadaas u magacaabay mudane Cabdirisaaq Xaaji Xuseen oo ay saaxiib dhow ahaayeen. Baarlamaankii si xoog leh buu uga horyimid go'aanka Madaxweynaha, waxayna u diideen kalsoonidii Ra'iisul Wasaarihii uu soo magacaabay. Madaxweynnuhu mar labaad buu dib u soo magacaabay mudane Cabdirisaaq, taas oo khasab ka dhigtay, si looga hor tago qalalaase siyaasadeed, in RW cusub kalsoonida la siiyo. Ku mintididda Go' aankii uu Baarlamaanku diidey ee Madaxweyne Aaden Cabdulle Cismaan uu si culus ugu soo celceliyey Baarlamaanka, markii danbana uu Baarlamaanku iska gudbiyey si looga hortago qalalaase siyaasadeed. Arrintaasi waxay dadweynaha ku abuurtay kalsoonidarro loo qaaday xagga sharciga oo waxay u ekaatay, ' Madaxweyne doonaya in qaab kasta ha ku fushee ay soo jeedintiisu fusho.' Nasiibdarro, Madaxweyne Aaden iskuma deyin in uu saxo aragtidiisa. Bal wuxuu qabay oo meela badan ka sheegay in aan hebel-hebel dhaamin oo xataa "IISHO" dalka wadi karto. Waxaa la aamminsanaa in Aadan Cabdille ahaa siyaasiga ugu bisil ee Soomaaliya xilligaas lahayd.

Mudane Ra'iisul Wasaare Cabdirisaaq Xaaji Xuseen wuxuu ka mid ahaa halgamayaashii SYL, laba goorna wuxuu ka noqday xooghaye guud. In kasta oo uu Aadan Cabdille kala mid ahaa u janjeeridda siyaasadda reer Galbeedka, haddana wuxuu ahaa nin dabeecad ahaan kulul, khilaafka siyaasadeed ku dheereeya, kuse adag qaddiyadda Soomaaliweyn. Muddaddii uu Ra'iisul Wasaaraha ahaa wuu qaboojiyey xiriirkii aannu reer Bariga la lahayn, wuxuuna xoojiyey kii aannu reer Galbeedka la lahaan jirnay. Isla markaasna wuxuu xoojiyey taageeradii uu siinayay gobannimaddoonka qaybaha maqan ee Soomaaliya.

Xagga maamulka wuxuu xaraf xaraf u fuliyey qorshayaashii Cabdirashiid ka tagey oo lagu midaynayay habka maamulka iyo shuruucda dalka. Hirgelinta qorshayaashi waxay sababtay in la beddelo madaxda maamulkii hore, laguna beddelo jiil cusub oo aqoon sare leh iyada oo aan loo eegin gobol iyo qabiil midkoodna. Tallaabadaas Cabdirisaaq wuxuu ku macneeyey in ay tahay waajib waddani ah, shaqada loo dhiibo qofkii ka bixi kara oo aqoonteeda leh. Waxaase ka horyimid kacdoon xoog leh, waxaana naynaays looga dhigay "Baqshadda Cas" (busta rossa) oo ah baqshadda la geliyo waraaqda shaqaalaha sare lagu ruqsaynayo. Xagga gobannimaddoonka waxaa loo nisbeeyaa in uu ka danbeeyey kacdoonkii 1966kii lagaga hor tagey General Digaulle (Digool) oo xilligaas booqasho rasmi ah ku yimid Jabbuuti. Sidaas oo kale wuxuu si qarsoodi ah u geliyey NFD cutubyo ka tirsan xoogga dalka Soomaaliyeed, si ay u kaalmeeyaan dhaqdhaqaaqii gobannimoddoonka ee NFD ka socdey.

Cabdirisaaq wuxuu ahaa nin firfircoon oo dabeecaddiisa lagu tilmaami karo ' keli-ismood' . Dabeecaddiisu waxay sababtay in SYL xiisado cusubi ka furmaan oo dhexdeeda mucaarad ka abuurmo, kaas oo ay hoggaaminayaan rag miisaan weyn dalka ku leh. Kooxdaas waxaa ka mid ahaa kuwa RW Cabdirisaaq dad ugu sokeeya oo ay ka mid ahaayeen Cabdirashiid Cali Sharmaarke, Xaaji Muuse Boqor iyo Yaasiin Nuur Xasan. Waana kuwa sabab u noqon-doona in Ra'iisul wasaarennimada waayo.

## MAGACAABIDDII TALIYE CUSUB EE XDS

1965kii waxaa dhintay Taliyihii XDS, Janan Daa' uud Cabdulle Xirsi. Jananku wuxuu hore u ahaan jirey Taliye ku xigeenka Ciidanka Booliska Soomaaliyeed, dabadeed markii la asaasay XDS baa looga dhigay taliye. Inkasta oo tababbarkiisu Boolis ahaa, haddana wuxuu ahaa sargaal dhisan oo haybaddiisa iyo kartidiisa ayuu ku kaabi jirey aqoonta kaga maqan xagga ciidammada. Muddadii uu XDS u talinaayay, wuxuu gaarsiiyey heer uu ciidanku si buuxda u gudan karo xilalkiisa. Tii Alle baa u timid, markii ciidanku u gudbay qaybtii labaad ee koritaankiisa. In muddo ah waa la isku haystey jagada uu banneeyey Janan Daa' uud. Loollankuna wuxuu ka dhexeeyey Janan Maxamed Siyaad iyo Janan Maxamed Ibraahim (liiqliiqato). Ujeeddada la isugu haystey ma ahayn mid shaqo soo hayn dheeri ah ka timid, balse waxay ahayd mid qabiil ku lug leh. Rag siyaasiyiin ah baa dhab ahaan arrinta dabada ka wadey, iyaga oo ku andacoonaya in jagada loo dhiibo Liiqliiqato. Waxay qabeen in aaney caddaalad ahayn in Laba sargaal oo ka tirsan beesha Daarood la isugu dhiibo taliska XDS iyo kan



Waa guddigii loo xilsaaray duugtii Janan Da' uud. Sawirka Saraakiisha caddaanka waa sarakiishii meydka ka keenay dalka Ruushka, halkaas uu ku geeriyooday. Saraakiisha Soomaalida ah waxa dhex muuqa Maxamad Siyaad, Maxamad F. Caydiid, CabdullahiYuusf, iyo qaar kale.

Boliiska Laba sargaal oo ka tirsan beesha Daarood la isugu dhiibo taliska XDS iyo kan Booliska Soomaaliyeed. Waxay qabeen in mar haddi Janan Maxamed Abshir oo Darood ahi xukumo Booliska in taliyaha XDS laga dhigo nin aan Daarood ahayn. Arrintaas waxaa is hortaagey mudane Cabdirisaaq oo ahaa RW. Taasina waa ay u suurtagashay, maxaayeelay habkii ' dawlad wanaagga' ee uu ku dhawaaqey baa reebayay in jagooyinka lagu qaybsado hab beeleed. Is-hortaagga arrintaas waxaa RW gacan ku siiyey odayaal Daarood ah oo isu taagey difaaca Siyaad Barre iyaga oo ku doodaya in Siyaad Barre oo ahaa ku-xigeenka Janan Daa' uud uu jegadaas xaq u leeyahay .

Taliyaha cusubi wuxuu ahaa nin dabeecad ahaan, dhaqan ahaan iyo shakhsiyad ahaanba ka duwan taliyihii geeriyoodey. Siyaad Barre wuxuu ahaa nin qabiili ah, siyaasi ah, bulsheyna ah. Wuxuu ahaa nin si fiican uga dhex muuqda shirarka beelaha iyo kuwa siyaasaddaba. Wuxuu ku dadaali jirey sidii uu u xoojin lahaa xiriirka beelaha iyo siyaasiyiinta u la leeyahay, wuxuuna hawshaas ku lumin jirey muddo



Saraakiisha XDS, sawirka waxaa ka dhexmuuqada saraakiil ay ka mid yihiin, Maxamad Siyaad, Liqliqato, Cali Samater, Cabdullaahi Yuusuf , Eerkole, iyo qaar kale

ka badan inta uu hawlaha ciidanka isku taxallujiyo. Markii laga eego dantiisa kuma xumayn, laba jeer ayuu ku liibaanay ka hortagga dhibaatooyin soo foodsaaray. Mar waxay ahayd markii taliska ciidanka lagu haystey 1965kii, marka kalena waxay ahayd waqtigii RW Maxamed Xaaji Ibraahim Cigaal uu 1968kii ku amray in uu aado Midowgii Soofiyeetiga oo uu tababbar ciidan ku soo qaato.



Madaxweyne Cabdirashiid Sharmaarke oo madaaarka Muqdisho ay saraakiil sarsare ku soo dhaweynayaan. Madaxweynihu wuxuu sawirkan gacanqaadaya G/Sare Cabdullaahi Yuusuf Axmed. Saraakiisha Dhinaa midig waxaa ugu horreeya G/Dhexe Salaad Gabayre, G/Dh Tawaad Dhaqane, G/Sare Ismaaciil Ereteriya, G/Dhexe Cabdullahi Yuusuf, S/Guuto Cabdi Dhibow, Janan Maxaamd Siyaad, G/Sare Maxamad Cali Mire, G/Sare Maxamuud Mire, S/Guuto Xuseen Kulmiye iyo qaar kale.

Muddadii u dhaxeysey magacaabistiisa iyo afgembigii Oktoobar, barnaamijkii hore loogu dajiyey Xoogga Dalka Soomaaliyeed sidiisii buu u socdey, oo tayo ahaan iyo tiro ahaanba si xoog leh buu sare ugu kacay. Sidaas oo kale waxaa si isdabajoog ah dalka ugu soo noqonayay saraakiil sare oo ka soo qalinjabiyey kulliyado abbaanduul ee waddammo kala duwan. Saraakiishaasi soo dhoweyn kama helin madaxda XDS oo u badnaa rag ka soo jeeda Booliska iyo kuwa hore ciidan u ahaan jirey oo 1956kii Booliska lagu wareejiyey, sidaas awgeedna way ka biyo-diidsanaayeen in habka ay ku shaqeeyaan wax laga beddelo.



Arrimahaas awgood waxaa soo shaac baxayay khilaaf u dhaxeeya jiilka cusub iyo madaxdii hore. Khilaafkaasi wuxuu saameeyey xiriirka wada shaqayneed ee saraakiisha sare, kaas oo tartiib-tartiib u saameeyey saraakiisha xiriirkooda qof ahaaneed. Taliyuhu ma ahayn nin dadka isu ururiya, balse wuxuu ahaa nin qaybi oo xukun ku shaqeeya. Taas oo ka marag kacaysa in ay hoggaamintiisu gurracnayd.

Sida la og yahay mar haddii hay'ad, nooc kasta ha'ahaatee, hoggaanku ka xumaado waxay gadaalaha ku danbaynaysaa fashilaad. Sida uu Siyaad Barre dhaqan ka dhigtay, wuxuu koox-koox u qaybiyey saraakiishii, kuwaas oo hadba qaar uu gooni ula fiqi jirey.

Badi saraakiishii markii ay ogaatey dabeecaddiisa iska hor keenidda ah way ka gaabsadeen oo shaqadoodii bay isku koobeen. Maxamed Siyaad Barre xiriirka uu la lahaa madaxda sare ee dalka buu uga faa'iidaysan jirey in uu ka been abuuro saraakiisha sare ee ciidanka, isaga oo mar walba ku beerlaxawsan jirey madaxda sare in uu horjoogo saraakiil wax isbiddey oo doonaysa in ay xukuumadda afgenbiyaan, taas oo waayadaas caadi ka ahayd in Afrika ay ciidammadu afgenbi sameeyaan.

Warkiisa madaxdu way u dhago-nuglaan jireen. Sidaas awgeed, sargaal kasta oo uu tilmaamo waxaa loo diri jirey nin beeshiisa ah oo ka tirsan madaxda dawladda, si uu u gaarsiiyo in uu ka waantoobo falka uu ku jiro. Si kasta oo uu warkaas u beeniyo sargaalka loo digey, lagama rumaysan jirin oo hadalka Siyaad Barre baa socon jirey.

## SOO BIXIDDII CIGAAL

Mudane Maxamed Xaaji Ibraahim Cigaal, markii uu ka baxay dawladdii Cabdirashiid wuxuu xulafo la noqday Shiikh Cali Jimcaale. Dabadeed waxay wada asaaseen xisbigii ahaa Somali National Congress, xisbigaas oo lahaa barnaamij laba ujeeddo leh: mid waddani ah oo la soo bandhigayay iyo mid qarsoon oo ku salaysan siyaasad ' Irirnimo' .

Xisbigaasi muddo gaaban buu ku fashilmay oo doorashadii ugu horreysey ee uu galay wuu ku guuldarraystay. Mudane Cigaal, maadaama uu ahaa siyaasi weyn oo dad badan kasban kara, wuxuu xiriir la yeeshay siyaasiin kale oo ruug caddaa ahaa oo ay ka mid ahaayeen mudane Xaaji Muuse Boqor iyo mudane Yaasiin Nuur Xasan , raggaas oo hormuud ka ahaa tartanka Cabdirashiid ugu jirey Madaxweynennimada. Markii mudane Cabdirashiid ku guulaystey doorashadii, wuxuu RW ka dhigay mudane Cigaal.

## Heshiiskii Caruusha
## (Arusha Memorandum of Understanding)

Kenya iyo Soomaaliya waxay awooddooda oo dhan isugu geyn doonaan si loo abuuro xiriir deris-wanaag sida uu dhigayo axdiga Ururka Midnimada Afrika (UMA). Waxay isku raaceen in sii socodka xaaladda kacsan aysan u adeegeyn danaha Kenya iyo Soomaaliya.
Sidaas darteed, waxay xaqiijiyeen sida ay u taageersan yihiin go' aankii shirkii UMA ee Kinshaasa, kaas oo nuqul ka mid ah lagu lifaaqay qoraalkan is-afgaradka. Si loo fududeeyo xal degdeg ah oo laga gaaro



Hon. Mohamed Ibrahim Egal was born in Odweina on 15 August, 1928. He completed his Primary, Intermediate and Secondary education in the former British Somaliland and then went to Britain for further studies where he stayed from 1950 1954.

On June 26, 1960, when the country gained independence, Hon. Mohamed Ibrahim Egal became the Pri- Minister of Somaliland.

After the Union and the formation of the Somali Republic, he was nominated Minister for Defence in the Cabinet of Dr. Abdirashid Ali Shermarke, now President of the Republic. After one year, Egal was nominated Minister for Education of the same Government.

In October 1962 Hon. Egal led a delegation to London to negotiate the NFD problem with British leaders. His delegation persuaded and obtained from the British Government to hold a referendum in the Northern Frontier District NFD. In the same period, he led another delegation to Kenya to organize the referendum, the result of which was 83% in favour of joining with the Somali Republic.

In October 1966, Hon. Mohamed Ibrahim Egal joined the Somali Youth League party.

SOMALI NEWS

## HIGHLIGHTS OF HON. EGAL'S CAREER

# EGAL TO BE P. M.

## Hon. Mohamed selected by President

MOGADISHU, July 5 — The President of the Republic H.E. Dr. Abdirashid Ali Shermarke today invited Hon. Mohamed Haji Ibrahim Egal to form a new Government.

This move followed a four-day consultation with leaders of political parties, Parliamentarians and other notables of the Republic. These included: Hon. Aden Abdulla Osman, the former President of the Republic; H.E. Sheikh Mukhtar Mohamed Hussein, the President of the Parliament; Hon. Abdirizak Haji Hussein, the former Prime Minister; Hon. Abdullahi Issa Mohamoud, the Minister for Industry and Commerce, who once served under the UN Trusteeship as Prime Minister, and Hon. Mohamed Haji Ibrahim Egal himself.

Political parties consulted were SYL, SNC, SDU, HDMS, the newly-formed SRSPW and the 14-strong Independent Parliamentary Group.

In a brief speech after the nomination, President Shermarke said that he hoped the people «would not criticize the new Prime Minister before his activities had been seen. Human beings do err but the best way to help them is to advise first, and only to criticize if the advice is not la...

He said that Hon. Egal was forecast as Prime Minister long before I was elected President. These rumours, he added, «gave me a chance to watch carefully the public reaction. There has been no negative reaction to Egal from the public or from the political parties.»

Thirdly-eight-year-old Hon. Mohamed Haji Ibrahim Egal has postponed his formal acceptance until he has consulted with the Central Committee of the Somali Youth League party and leaders of other political parties.

The Prime Minister designate said «I have been called by the President of the Republic, H.E. Dr. Abdirashid Ali Shermarke and he has entrusted me with the ...





# IST JULY CELEBRATED THRILLING PARADE IN NATIONAL SQUARE

BY A STAFF REPORTER

Mogadishu, 1st July, 1967 — The Republic celebrated here to-day the Seventh Anniversary of Independence with a splendid parade of the Armed Forces, the Police Force, students, Boy Scouts and folklore groups.

The new President of the Republic, H.E. Abdirashid Ali Shermarke, who had taken the oath of office the previous evening at a special ceremo... ...dulla Osman, the Prime Minister, the President of the Parliament, Ministers, members of the Diplomatic Corps, military and civil officers ...

muranka iyo si loo xaqiijiyo jiritaanka xiriir wanaagsan oo sii socda, labada dawladood waxay isku raaceen:

A. in la dhawro nabadgelyada iyo amniga xadduudda labadeeda dhinac iyada oo la iska ilaalinayo burburinta nafta bini'aadamka iyo maalka;
B. in ay joojiyaan dacaayadaha colaadda xambaarsan ee ay isu marinayaan warbaahinta sida Raadiyeyaasha iyo Wargeysyada, waana in la dhiirrigeliyo dacaayadaha ku saabsan horumarinta iyo xiriirka saaxiibtinnimo.
C. In si tartiib-tartiib ah loo joojiyo xaaladdii degdegga ahayd ee hore loogu soo rogey xudduudda labadeeda dhinac;
D. In dib loo furo xiriir diblomaasiyadeed ee dhexmara labada dal;
E. In tixgalin la siiyo hab dhiirrigelinaya xiriirka horumarinta dhaqaale iyo ganacsi;

In la sameeyo guddi ka kooban Soomaaliya, Kenya iyo Zambiya oo u hawlgala dhaqangelinta qodobbada heshiiska ee ku qoran dukumentiga, iyo sidoo kale , in ay qiimeeyaan siyaabaha xal ku habboon loogu gudbi karo arrimaha u dhaxeeya (source Africa Research Bulletin, Vol. 3-4, 1967, PP. 880-81).

---

Footnote: Shiikh Cali Jimcaale, wuxuu ka mid ahaa halgamayaashii SYL. Markii la dhisay dawladdii gudaha (daakhilga) ahayd wuxuu ka noqday Wasiirka Arrimaha Bulshada. Xornimada markii la qaatayna wuxuu noqday Wasiirka Caafimaadka, Xoolaha iyo Shaqada, jagadaas oo uu muddo gaaban hayay. 1961kii wuxuu jagada Madaxweynennimada kula tartamay Aadan Cabdille Cisman, kaas oo looga adkaaday.

Footnote: Yaasiin Nuur Xasan, wuxuu ahaa nin dhallinyaro ah oo keligiis isdhisay oo karti badan. Wuxuu Baarlamaanka ka soo galay magaalada Gaalkacyo, muddo gaabanna wuxuu ka mid noqday ragga u magac dheer Baarlamaanka oo shacbiyad ku leh Soomaalida dhexdeeda.

Lama garan karo waxa Cigaal ku khasbay in uu qaado tallaaba uu og yahay in aaney Soomaaliya, xaalad kasta oo ay ku jirto sina u soo dhoweynayn. Waxaa la malayn karey in taladaas uu cadaadis Ingiriisku ku lug lahaa. Sida la og yahay, RW Cigaal wuxuu 1962kii u xilsaarnaa in uu Ingiriiska kala xaajoodo arrimaha NFD, wuxuuna muddo lix bilood ka badan arrintaas u fadhiyey magaalada Nayroobi. Malaha, wada xaajoodkii uu Ingiriiska kula jirey iyo wixii ay isku afgarteen baa RW Cabdirashiid u bogi waayay oo uu dabadeed dib ugu yeeray, jagadii wasiirnimana ka qaaday. Sidaas awgeed baa RW Cigaal loogu xaman jirey in uu dhaqangeliyey heshiis uu hore Ingiriiska ula gaarey.

Shakigaas waxaa sii xoojiyey kaalinta libaax ee ay wada hadallada Arusha ka qaateen Madaxweynayaasha Niyareere (Tanzania) iyo Obote (Ugandha), kuwaas oo la og yahay in ay hore si adag uga soo horjeedi jireen qaddiyadda Soomaaliya, lana og yahay dhambaallada kulkulul ee arrinta la xiriirta oo ay qaybtii hore, 1960aadkii ku dhex maray madaxdaas iyo RW Cabdirashiid.

Qaddiyadda Soomaaliya way ka cuslayd mid shakhsi keli ah ku talaxtago. Xataa Siyaad Barre oo ku caan baxay "macallinka danaysiga", waa ku dhici waayay, weliba markii taliskiisu meesha ugu xun marayay, in uu Mingestu oo uu nabad ka doonaayay u saxiixo heshiis ay Soomaaliya gebi ahaanba kaga tanaasuleyso Soomali galbeed, sida RW Cigaal uga tanaasuley NFD.

Inkasta oo RW Cigaal sawir wanaaagsan ka bixiyey heshiiska uu la gaarey Kenya iyo Itoobiya, haddana hadalkiisii laguma qancin. Hadal uu RW hore mudane Cabdirisaaq, ka jeediyey golaha dhexe ee SYL wuxuu dhaleeceeyey siyaasadda RW Cigaal, wuxuu heshiiska Arusha ku tilmaamay "Isdhiibid iyo khayaano". In RW hore sidaas yiraahdo kuma qaldanayn oo mar wuxuu ka tarjumayay niyadda shacbiga, marka kale wuxuu ahaa ninkii gobannimaddoonka NFD hiil iyo hooba u fidiyey, kana dhigay cudud muuqata oo si ba'an isaga caabbisa gumeysiga Kenya. Tallaabooyinka uu RW hore qaaday waxay u soo jiideen shacbiyad iyo magac aanu hore dadka ugu lahayn.

tion state. That which other African States long to acquire Somalis have had for a thousand years. They are one people of one race, with one name, one religion, one language, one tradition and one economy. Like the Masai the Kikuyu and, for that matter, the Scots, they are divided into clans between which there are sometimes bitter feuds. Occasional feuds do not impair the passionate consciousness of Somali nationhood and the present determination of the inhabitants of all Somali regions to live under one flag, one democracy (the only genuine one left in Africa at present) and a government of their choosing.

#### DIFFICULTIES

Rebirth of the Somali nation as an independent single-nation state has run into many unexpected difficulties. As early as 1906 a single administration for all Somali regions was seen to be desirable albeit unattainable. During the last war and for some years afterwards this unity was actually achieved by British arms and, in 1946, the British Foreign Minister, Ernest Bevin, made a specific proposal that this unity should continue. For different reasons the proposal was rejected by the powers.

**There is no indication whatever, and there are many reasonable inferences to the contrary, that the Russians intend to launch Somalia or that Somalia herself intends to be launched into aggressive war to recover the captive Somali provinces by military invasion. This recovery will occur in other ways: «Qui mange du Somali en meurt», [«Whoever tries to eat a Somali will die of it»] is probably a fair adaption of an old French proverb.**

# SOMALI - KENYA RIFT
# A BRITISH CREATION

**By I. M. Lewis, (excerpt from the GUARDIAN of July 29, 1966).**

*Mr Lewis, a social anthropologist, teaches at University College, London. He has written works about Somali culture. Most famous are «A PASTORAL DEMOCRACY» and the «MODERN HISTORY OF SOMALILAND». He was one of the authors who were invited to participate in the Sixth independence anniversary of the Somali Republic on 1st July.*

* * *



#### RELATIONS DETERIORATING

Relations between Kenya and the neighbouring Somali Republic, which celebrated its sixth independence anniversary on July 1, are deteriorating. If Kenya's militant statements are to be taken at face value, it is hard to see how a serious collision can be averted. Such a climax would necessarily involve Britain and Russia as the main arms suppliers of these two states; and Kenya's ally, Ethiopia, which relies heavily on American military aid would not stand idly by.

Britain has much reason to be concerned, for although the Macmillam Government took every opportunity in avoiding responsibility in Somali affairs, the dispute between Kenya and Somalia is largely a British creation. The recognition of the Northern Frontier District of Kenya was Britain's last act before Kenyan independence. The desire of the majority of the region's nomadic tribesmen to secede from Kenya and form a union with Somalia had already been recorded by an impartial British commission at the end of 1962, but this result was set aside in Britain's anxiety to secure good relations with Mr. Kenyatta.

#### FREEDOM FIGHTERS

Today the struggle for unification with Somalia is continued by small guerrilla bands whom Kenya brands as gangsters and Somalia regards as patriotic freedom fighters. The Kenyans, of course, cannot admit that the Somali secessionists movement is spontaneous, and see Radio Mogadishu's fiery broadcasts as the cause of rather than the response to Kenyan border «pacification» measures.

This conflict is only one part of the wider Somali unification issue. Over a million Somali tribesmen, on whose national identity the Somali State is founded, live outside Somalia. The majority are in the Ogaden region to Eastern Ethiopia, named after its principal Somali inhabitants. Besides the 200,00 or so in the North/East Kenya, the remaining and smallest Somali enclave is in French Somaliland....

#### SOMALI DEMANDS.....

**What Somalia in fact claims is not those territories occupied by Somalis outside her present frontiers, but the right of their inhabitants to decide their future according to the principle of the self-determination. It is largely because Ethiopia and Kenya have good grounds to fear the result of any impartial plebiscite that they represent Somalia as laying an outright claim to their Somali inhabited territories. Beyond this, they fear a strain of tribal secessionist demands which might threaten their fragile nationhood.**

Few other States will support Somalia. Nor is there much hope for compromise. President Kenyatta has pledged not to yield an inch of Kenyan soil and Ethiopia's position is similar. The only possibility — a remote one — for long term settlement lies in some sort of a loose federation which would allow the Somali parts of Kenya and Ethiopia to form a regional unity with Somalia.

# BRITAIN DECEIVED SOMALIS



**The following article appeared in the September 2nd issue of the «Tribune», a London periodical devoted to political and and international affairs, and of a modern and liberal tendency.**

**The author, John Drysdale, is well-known to Somalis, and has spent many years in this country.**

* * *

### THE SOMALIS AND KENYA

As the three-year-old crisis between Kenya and the Somali Republic gathers momentum, about one quarter of the total area of Kenya, for the most part occupied by nomadic Somalis, is in active rebellion. The Somali Republic claims that the inhabitants of this area should be free to decide their own political future and merge their territory with the Somali Republic if the majority wish. President Kenyatta is adamant that he will not cede an inch of Kenya's soil.....

### SECOND VIETNAM

To understand the Somali Information Minister's outcry on August 11 this year that Britain «is seriously complicating the dispute» and that the crisis is now developing into a «second Vietnam», one must look back into some recent history.

A little-known fact about our imperial history during the years 1962-3 was a piece of unnecesary political deception perpetrated by the British Government in Kenya's North-Eastern region. It is, of course, widely-known that the Somalis in this region overwhelmingly declared in 1962 to an independent Canadian - Nigerian Commission that they wished to secede from Kenya before Kenya's independence and to unite with the Somali Republic. It is also known that the Kenya Government rejected the commission's findings and that Duncan Sandys and the then Kenya Governor, Malcom MacDonald, left themselves at that late hour with no room to manoeuvre short of injuring Britain's relations with Kenya; and yielded to Kenyan pressure.

**What is not so widely known, or at least what has hitherto been successfully concealed by officials and politicians alike, is that Mr. Sandys, in a confidential memorandum to the Canadian-Nigerian commission in September 1962, stated that there could be no cession of Kenya territory so long as the British Government was responsible for Kenya. This important decision was deliberately withheld from the Somalis while Mr. Sandys went through the motion of appointing a Commission to ascertain their wishes.**

### UNDERTAKING

Mr. Sandys' predecessor in office, Reginald Maudling had given the Somalis in this region an undertaking in April 1962, in the presence of Mr. Lawson Q.C., that an independent commission would visit their territory to ascertain public opinion regarding its future and that a decision, based on the findings of this commission, would be made by the British Government before Kenya elected its own Prime Minister in the spring of 1963.

However, Mr. Sandys only made an «interim decision» in March 1963, which readjusted administrative boundaries, and expressed the hope that the desert-bound Somalis, whom he had never visited, would «find that Kenya is a good place to live in».

He stressed that this was not the «final decision» and a delegation of Somalis from Kenya was again assured by the Secretary of State, Lord Lansdowne, in July 1963 that an «honourable settlement demands would be made be[fore Ke]nya became independent.

**There was, in fact no final d[eci]sion and, having continued, up [to] a few weeks before Kenya's independence, to deceive the Somalis into thinking that Britain could still grant their wishes, Mr. Sandys was relieved of all further responsibility when Kenya became independent in December 1963.**

### BEYOND ENDURANCE

So Britain, by promoting legitimate expectations in the minds of these unsopnisticated but intelligent nomadic peoples and then deceiving them; by arresting their leaders (this was before Kenya's independence — they are still detained without trial); and subsequently by supporting Kenya's armed forces in subduing them during the last three years of revolt, finally exasperated them beyond endurance.

**During my visit to the Somali Republic last month, I was convinced that the Soviet Union has no desire whatsoever to become involved in a war in north east Africa. Its agreement with the Republic to equip and train a large Somali army, at the request of the Somali Government, is no more unreasonable than Americas' military commitments in Ethiopia, and far less dangerous than Britain's active support (it is called «logistical support») of Kenya's armed forces in their fight against Somali insurgents.....**

# SOMALIA NOT «EXPANSIONIST»!

## Says Colombia Professor

The following letter recently appeared in the correspondence of the «New York Times» in reply to an article in which a reporter had described the Somali Republic as «expansionist».

* * *

*Dear Sir,*

*In his article in today's Times, Mr. Lawrence Fellows uses an unfortunate and misleading adjective*

*Continues on Page 16



# ARUSHA TALKS

——oo——

## SOMALI PROPOSALS WERE REALISTIC

**The Heads of State meeting on the Northern Frontier District held in Arusha during the Somali President's State visit to the Republic of Tanzania [from 7th to 14th December, 1965] was broken off by President Jomo Kenyatta of Kenya.**

**The talks had been called by Tanzania President Julius Nyerere, who acted as mediator, to try to settle the long-standing dispute between the Somali Republic and Kenya over the NFD.**

**The Somali Delegation submitted the following Draft Proposal to the Kenya Delegation:**

*«The Heads of State of Kenya and Somalia have agreed to recognise that the problems between their two countries is one for which neither of them can be held responsible, as it is a legacy left behind for them and many other countries of Africa and Asia as well as other parts of the globe by the British. Such problems are usually of territorial and border nature and are cause of continuous unrest, tensions and armed conflicts in many parts of the world. The Heads of State also reaffirmed their respect for the principle of territorial integrity of States, as enshrined in the Charters of the UNO and OAU of which both countries are members».*

The Heads of State realising and appreciating the delicacy of the problems at issue and the degree into which it has developed, are confident that with goodwill from all parties concerned, the present situation and difficulties can be legitimately considered surmountable to the best interest not only of those directly concerned but to that of African Unity as well.

The Heads of State agreed to consider as «positive and encouraging» the results of the meeting held at Arusha, Tanzania, by Presidents; Jomo Kenyatta and Adan Abdulla Osman on the 13th December, 1965; results which can necessarily be regarded as a solid basis for future talks or discussions.

In the meanwhile, and until such time that such talks or discussions may be resumed at a future date to be agreed upon, the two Heads of State and their Governments, in the light of the most cordial atmosphere in which the meeting took place under the Chairmanship of President Julius Nyerere (who, guided by his well-known devotion to Africa and African problems, took wisely the initiative of bringing East African sister countries to help discuss and eventually resolve their problems) have been able to reach understanding on the following points:

*1. The Government of Somalia makes it public that she does not profess any policy of territorial expansionism nor does she believe in the use of and/or the resort to violence as a necessary means for the solution of international problems.*

*2. The Government of Kenya has taken note with satisfaction of the aforesaid statement made by Somali Government on this specific point which is thought to have been one of the points of greatest concern to Kenya.*

*3. The Government of Somalia also gave its pledge to cooperate fully with the Government of Kenya in bringing about peace and order in that area in question where public security is reported to have been disturbed.*

*4. The Government of Kenya, on its part, recognises the interest of the Somali Republic in the welfare and destiny of the Somali people in Kenya.*

*5. Suggestions were made in respect to the cessation of propaganda through the press, radio, TV and any other media of communication, the content of which in this context could be regarded as hostile propaganda.*

*6. Early steps to be taken for the renormalisation of diplomatic relations between the two countries, with the firm belief that such relations can certainly serve as an effective channel of approach between the two countries in the exchanges of views on any matters of mutual interest».*

**Unfortunately, Kenya did not see fit to accept these reasonable and realistic proposals, insisting on the fact that Somalia should declare herself as being guilty of supplying arms and other material assistance to what she called «shifta», things which cannot be expected that the Somali Republic should do, as the allegations are entirely unfounded.**

Xigasho: Somali National Review Magazine, 1965

Khilaafkii siyaasadeed ee ka dhashay heshiiska Arusha iyo kan la midka ah ee uu Itoobiya RW Cigaal la saxiixday, wuxuu isu rogey colaad shaqsiyadeed ee ka dhaxeysa isaga iyo RW hore Cabdirisaaq . RW Cigaal wuxuu amar ku bixiyey in xarunta SYL la xiro. Cabdirisaaqna wuxuu arrintaas kaga jawaabay in golaha dhexe ee SYL uu RW Cigaal xisbiga ka saaro. Khilaafkii wuxuu socdaba waxaa la isla tegey Baarlamaanka. Sida la og yahay, Afrika Baarlamaannadu ma leh wax awood ah oo waxay fuliyaan wax allaale wixii ay xukuumaddu dooneyso. Sidii la filayay, Baarlamaanku wuxuu aqlabiyad buuxda ku ansixiyey heshiiskii Arusha. Haseyeeshee, iyada oo la og yahay, xasaasiyadda arrinta ka dhalan karta, ayaa go'aanka loo ekaysiiyey mid qabyo ah, sidaasna dawladda loogu boorriyey in ay ku dadaasho sidii uu heshiiskaasi uga tarjumi lahaa himilada shacbiga uu khuseeyo.

## Golaha Baarlamaanka

Wuxuu ansixiyey qorshaha Dawladdu ay ka soo bilawday Kinshaasa, Addis Ababa iyo Arusha, kaas oo ay ku dooneysey in ay abuurto xaalad isfaham iyo kalsooni si nabadgelyo looga gaaro xallinta muranka Soomaaliya kala dhexeeya dalalka xudduudaha la leh.

Wuxuu dawladda ku dhirrigelinayaa in ay sii hirgeliso qorshaha ay bilowday iyo weliba tallaabooyin dheeri ah, si ay xal lagu qanci karo uga gaarto muranka taagan iyada oo ilaalinaysa xuquuqda dadka ay arrintaani sida tooska ah u saamaynayso.


Wuxuu dawladda ugu baaqayaa in ay Baarlamaanka u soo gudbiso si uu u oggolaado oo u ansixiyo heshiisyadii ay la gaartey Itoobiya iyo Kenya. Waxaa uu u mahadcelinayaa Dr. Kenith Kaunda, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Zambia, isku daygiisii dhexdhexaadinta Jamhuuriyadda Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Kenya. Wuxuu u mahadcelinayaa Dr. Julius Neyerere, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Tanzania iyo Dr. Milton Obote, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Ugandha, ka qaybgalkoodii kulankii dhowaa ee Arusha.

The only thing for which the Somali Republic could be considered responsible is that she maintains that the most effective approach to this problem is to guarantee the inhabitants of the area, which from the numerical consistency point of view is more than an African state; the right to decide upon their future destiny.

The fact that Kenya after two years of complete independence has been unable to settle, in one way or the other this issue, makes it self-evident that the problem is not as easy as Kenya may think and therefore, necessitates a more realistic and serious approach.

Immediately after return home from Tanzania, the Somali Foreign Minister Ahmed Yusuf Dualeh denied his country had revived any «old arguments for territorial expansion» during the talks with Kenya.

«The fact is that there were no specific points presented by Kenya and the false accusation of expansionism was used by Kenya to obtain world public sympathy at the expense of the Somalis living in the Northern Frontier District», Mr. Dualeh said. He denied that Somalia had supplied arms to the freedom-fighters in the NFD and asked Kenya to show proof of Somali involvement.



## ARUSHA SOMALIS MEET PRESIDENT

In Arusha the President and the Prime Minister received at the State Lodge representatives of the Somalis living in the Kilimanjaro Region of Tanzania.

Several thousand Somalis live in Arusha and Moshi areas alone.

The discussions covered matters

The President advised the Somali Nationals living there to «co-operate fully and identify themselves with the Tanzanian people».

He said he was glad to learn that the Tanzanian people and Govern-

Referring to the question of education, the President stressed the necessity of providing religious background for the Somali children before they begin their formal studies. He suggested the establishment of private Quranic schools i

Markii uu Barlamaanku ansixiyey heshiiskii Arusha, lana gaarsiiyey dawladihii arrinta dhinac ka ahaa, RW Cigaal waxaa loo arkay nin mas'uul ah oo la aammini karo. Weriye Ingiriis ah oo RW Cigaal waraystay baa wuxuu weydiiyey in shacbiga Soomaaliyeed raalli ka yahay heshiiska iyo in kale. Wuxuu ku jawaabay in shacbigu si buuxda ugu qancay heshiiska Arusha. Taasna waxaa muujinaya aqlabiyadda ay ku ansixiyeen xubnaha Baarlamaanku. Sidaas oo kale, wuxuu caddeeyey in bannaanbaxyada looga horyimid heshiiska Arusha ay ka danbeeyeen dad tira yar oo danaystayaal ah, oo ka masaayrsan in hadda la gaarey wixii ay iyagu hore u gaari waayeen. Dhaliishaasi waxay, sida la garan karo, ku socotey RW hore, mudane Cabdirisaaq.

## FURITAAN XISBI MUCAARAD AH : DABKA

Markii Golihii Dhexe ee xisbigu uu ka horjeestey heshiika Arusha, waxaa caddaatay in, labada dhinac ee siyaasadda iskaga soo horjeeda, aaney isku xisbi ka wada tirsanaan karin. Waxaa kale oo caddaatey in, dadka Arusha-raaca ahi awoodda dawladda u adeegsadeen si ay siyaasaddooda iyo dacaayaddoodaba uga faafiyaan warbaahinta rasmiga ah, taas oo keentay in dadka Arusha-diidka ah si dadban loo aammusiyo.

Waagaan da' da yaraa SYL waxay ahayd dhaqdhaqaaq waddani ah, xisbi shacbiga oo dhan gacanta ku hayay, amarkii ka soo baxaana uu dalka oo dhan ka fuli jirey, gumeysiguna dhex geli kari waayay. Markiise xorriyadda la hantay, SYL waxay isu beddeshey xisbi dawladeed, tartiib-tartiibna way dareenbeeshay oo iyada iyo shacbigu way kala xiriir furteen. Dabadeed waxay isu rogtey Naadi khaas u ah siyaasiyiinta, kuwaas oo halkaas ku kala qaybsada jagooyinka kala duwan ee dawladda iyo qandaraasyada.

Markii SYL lagu kala tegey siyaasiyiintii Arusha-diidka ahaa waxay furteen xisbi cusub oo mucaarad ah oo lagu magacaabo "DAP"ka, ama ' Democratic Action Party' , kaas oo hoggaamiye looga dhigay mudane Cabdirisaaq Xaaji Xuseen. Xisbigu muddo gaaban buu dalka oo dhan laamo ka furtay. Khudbooyinka laga akhriyo aad iyo aad buu dadku u xiisayn jirey. Xisbigu wuxuu ka faa' iidaystey, dareenka shacbigana ku kiciyey heshiisyada xaaraanta ah sida mas' uuliyiinta xisbigu ku andacoon jireen.

Khudbooyinkii uu mudane Cabdirisaaq xisbiga ka akhriyi jirey, dhaleecaynta xukuumadda ka sokow, wuxuu shacbiga ugu yeeri jirey in ay kacaan oo dhawladda daba-dhilifka ah dalka ka qabtaan, wuxuu shacbiga ugu baaqi jirey sidii xasilloonidarro dalka looga abuuri lahaa; wuxuu gaarey heer uu "Fatwa" ku soo rogo madaxda dalka. Lama inkiri karo in baaqyadiisii meela badan laga soo dhoweeyey.

---

Footnote: Ra' iisul Wasaare Cigaal, wuxuu muddo gaaban isbeddel ku sameeyey siyaasaddii Soomaaliya ku socotey wixii ka horreeyey magacaabistiisa. Wuxuu bilaabay in uu kula dhaqmo siyaasad qabow dawladihii ay Soomaaliya dhul iyo siyaasadba isku hayeen, sida Itoobiya, Kenya, Faransa iyo Boqortooyada Midowdey ee Ingiriiska. Wuxuu booqashooyin ku tagey dalalkaas oo dhan, isaga oo gacma saaxiibtinnimo iyo is-afgarad u fidiyey.

Siyaasadda Cigaal waxay fajaciso ku noqotay shacbigii Soomaaliyeed oo dhan. Kuwaas oo si bareer ah uga horyimid markii uu qaaday tallaabooyin cadcad oo uu ku meel marinayo siyaasaddiisii ku aaddanayd dhulka Soomaalida ee gumeysiga ku jirey. Siyaasaddaas oo soo shaac baxday markii uu magaalada Arusha ee Tanzania kula saxiixday dawladda Kenya heshiis isafgarad.



H. E. Prime Minister Abdirizak H. Hussein

**Profile**

The Somali Prime Minister, Hon. Abdirizak Haji Hussein, is a staunch supporter of the policy for Somali reunification.
The programme presented by his Government to the National Assembly last summer, following the general election of March 31, made the cause of national unity a pillar of government action now and in future.
Abdirizak Haji Hussein was born in the Galkayo district on December 24, 1924.
He joined the S.Y.L. (Somali Youth League) party in 1944. In 1950 he was imprisoned for political reasons and spent six months in jail.
In 1954 he became a Galkayo councellor in the first municipal elections held in the country. In June 1955 he was sent to the United Nations, New York, to present a petition on behalf of the S.Y.L. party. At the end of the same year he was elected President of his party.
In 1959 Abdirizak became a member of Parliament for the Nugal district of Mudugh Region. After Independence on July 1, 1960 he was appointed as Minister of Interior, later becoming Minister of Communications and Public Works.
He now heads the government which last September obtained 91 votes out of 123 in the National Assembly. The S.Y.L. has also unanimously elected him as Party General Secretary.
The Premier has wife and one daughter.

Xigasho: Somalia A Divided Nation Seeking for Reunification, Somali Minsistry of Information, 1965.

## ISCASILAADDA TALIYIHII BOOLISKA

Booliska Soomaaliyeed wuxuu ahaa ciidan muddo soo jirey. Dhismihiisa waxaa bilaabay gumeysigii Talyaaniga, waxaa dib u dhisay gumaysigii Ingiriiska, dabadeed waxaa rasmi ahaan u dhisay Maamulka Wisaayadda Talyaaniga. Wax uu soo tukubaba, Booliska Soomaaliyeed wuxuu gadaalihii ku soo baxay mid karti iyo khibrad ahaanba Afrika ugu horreeya.

Sida Booliska adduunka, Booliska Soomaaliyeed wuxuu u qaybsanaa waaxyo ku kala takhasusay xirfadaha kala duwan ee Booliska, waxaase u dheeraa qaybo ciidan ahaan u tababbaran, sida qaybta daraawishta, qaybta birmadka, iwm. Sidaas awgeed, Booliska Soomaaliyeed wuxuu isku mar fulin karey hawlaha Booliska iyo kuwa Ciidammada. Tilmaantaas gaarka u ah baa qaymi dheeri ah u yeeleysey Booliska Soomaaliyeed, taas oo ah habka uu ku dhisan yahay ' Carabinieri-ga Talyaaniga' oo dhismaha Booliska gacan weyn ku lahaa.

Boolisku wuxuu kaalmo ka heli jirey dalalka Galbeedka, gaar ahaan Jamhuuriyadda Federaalka ee Jarmalka. Boolisku wuxuu ku fidsanaa dalka oo dhan, waxaa loo dhisay hab isgaarsiineed ee u suurtageliya qaybihiisa kala duwani in ay 24 saac gudahood ku soo gaarsiyaan Taliska Dhexe wax allaale wixii dalka ka dhacay iyo warbixinnada ku saabsan xaaladda aag kasta ka jirta. Booliska waxaa taliye u ahaa Janan Maxamed Abshir Muuse, oo ka dhigay ciidan haybad iyo cududba leh. Maxamed Abshir wuxuu ahaa nin leh awood ka badan tan uu taliye ahaan sharci u lahaa, sidaas oo kale wuxuu ku dhex jirey siyaasadda dalka, wuxuuna si gaar ah iyo xididnimaba ugu xirnaa Aaden Cabdulle, Madaxweynaha dalka.

Maxamed Abshir wuxuu qaadan waayay in Aaden Cabdulle looga adkaaday doorashadii. Dabadeed wuxuu u bareeray in uu si toos ah uga hortago siyaasadda xukuumadda. Sidaasna waxaa ku xumaatay wada shaqayntii Booliska iyo Dawladda. Markii, waano iyo wada-xaajood badan kaddib, waxba iska beddeli waayeen dhaqankii Jananka, ayay dawladdii soo saartay sharci Ciidanka Booliska si toos ah loo



Gen. MOHAMED ABSCIR attualmente negli U. S. A. per motivi di studio

hoos keenayo Wasaaradda Arrimaha Gudaha. Arrintaasi waxay ka caraysiisay Janan Maxamed Abshir, sidaas awgeedna wuxuu geeyey Istiqaalo. Waxaa jagadaas loo magacaabay Janan Jaamac Cali Qoorsheel. Wixii doorashadaas ka danbeeyey Janan Maxamed Abshir wuxuu si bareer ah ugu biiray mucaaradka, wuxuuna sidaas oo kale ku xirtay mashaa'ikh wahaabiyiin ah. Istiqaaladdii Maxamed Abshir iyo faragelintii dawladdu waxay ciidankii Booliska badeen dayac badan. Sidaas awgeed kala daadashada Boolisku waxay sababtay in dalku yeesho hal ciidan oo keli ah, kaas oo ah XDS.

## DOORASHADII 1969KII

Soomaaliya waxay ahayd dal dimoqraaddi ah oo axsaab badan la kala doorto. Qaabka doorashada ee dalku ku dhaqmi jirey waxay ahayd mid daldaloollo badan lahayd. Taas oo salka ku haysey hab nololeedka bulshada Soomaaliyeed oo ah dad reer guuraa u badan. Soomaaliya dadkeeda marnaba tiro-koob sax ah laguma samayn. Iyada oo arrimahaas laga shidaal qaadanayo baa la iska raacay qaabkii Talyaanigu hore ugu dejiyey in doorashadu ku dhacdo. Qaabka doorashada ee Talyaaniga laga dhaxlay wuxuu lahaa daldaloollo badan:

In ninka reer miyiga ahi ka codayn karey meesha uu doonayo.

In kuraasta lagu jaangooyey tirada degmooyinka oo aan wax tixgelin ah la siin tirada shacbiga deggan degmada.

In haddii hal xisbi oo keli ahi iska sharraxo degmo oo aanay jirin axsaab kale oo kula tartamaysa, keligiis baa kuraasta degmada wada qaadanaya. Isla markaasna shacbigii halkaas degganaa waxay aadayaan degmooyin kale oo ay ka codeeyaan, si ay kursiga u dhaafsiiyaan musharraxiin xisbi kale ah, beddelkooddiina u soo saaraan musharraxa ay doonayaan.

In aysan shuruudda cod bixintu ka mid ahayn in lagu codeeyo waraaqo aqoonsi. Taas oo suurtagelineysey in hal qof dhawr goobood ka codeeyo, isaga oo si fudud isaga tirtiraya khad khafiif ah oo gacanta laga mariyey.

In doorashada dalku ahayd mid aan xaddidnayn oo aanay jirin tiro go'an ama xudduud loo baahan yahay in xisbiga tartamaya ka gudbo, ama gaaro si uu kuraasta wax uga helo.
Habkaasi wuxuu dhiirrigelin jirey isbahaysiga qabiil, wuxuuna sababay in reer kastaa xisbi furto si uu kursi u helo.

Intaas waxaa dheeraa Guddiga Doorashada oo aan marna dawladda ka madaxbannaanayn iyo ciidammada mas'uulka ka ah habsami u socodka doorashada oo iyaguna ku socda awaamiirta dawladda, kuwaas oo aan dammaanad fiican u noqon karin doorasho si ah xalaal u dhacda.

Janan Siyaad Barre, Taliyaha XDS, si aan kala har lahayn buu XDS u dhexgeliyey doorashada, isaga oo doonayay in uu dawladda weji uga samaysto. Waayadaas lama sheegin doorasho Afrika ka dhacda oo dhaanta kuwii Soomaaliya ka dhici jirey. Sida la og yahay, dalalka Afrika waxaa isku xiran ku danaysiga mansabka dawladda laga hayo iyo musuqmaasuqa. Qofkii aan dawladda cid ku lahayn waxaa ka xaaraan ah in uu wax ka helo boobka hantida qaranka lagu hayo. Waxaa sidaas oo kale isugu xiran qofka jagada doonanaya iyo qabiilkiisa. Halkaas waxaa ku cad in nin aan ka dhalan reer muhim ah, aqoon kasta iyo karti kasta ha lahaadee, aanu Afrika hawaysan karin kursi uu doorasho ku helo, haddii aaney dawladdu si gaar ah u wadan oo aaney sanduukha lagu codeeyo ugu shubin codad been ah.

Arrintaasi waxay keentay in nin kasta oo Soomaali ah oo wax isbidaaba doorashada galo oo haddii uu ka mid noqon waayo musharrixiinta SYL, uu xisbi kale doonto ama uu xisbi furto. Doorashadii Maarso 1969kii waxaa ka qaybgalay xusbiyo tiradoodu kor u dhaafeysey lixdan iyo tiro aad u badan oo musharrixiin ah. Sidii la filayay waxaa doorashadii ku guuleystey xisbiga SYL oo weliba ku guuleystey aqlabiyad xad-dhaaf ah. Kuraas aan sidaas u badnaynna waxaa kala helay tobaneeyo xisbi oo kale, kuwaas oo hal xisbi ma ahee, dabadeed ku wada biiray SYL si ay jago ku habboon uga helaan. Doorashadii sannadkaas dalka ka dhacday, waxay noqotay mid aan weligeed dalka hore u soo marin. Laga bilaabo ololihii ilaa dhammaadkii doorashada waxaa dalka ka dhacay rabshado sababay

dhimasho iyo dhaawac badan, rabshadahaas oo loo nisbaynayo in ay ka danbeeyeen musharrixiintii tartanka ku hungowdey. Mudane Cabdirisaaq oo ahaa xildhibaanka keli ah oo xisbigiisu codad yar ka helay doorashadii ee aan ku biirin SYL, wuxuu halkiisii ka sii watay dagaalkii uu dawladda kula jirey, wuxuuna cirka ku shareerey ol' olihii uu muddada wadey ee uu shacbiga ku kicinayay dawladda iyo weliba abaabullo kale oo dalka lagu gelinayo qalalaase siyasadeed iyo xasilloonidarro.

## WELWELKA SIYAAD BARRE

Siyaad Barre wuxuu ka mid ahaa ragga aad ugu dhex jira siyaasadda dalka, si fiicanna wuxuu ula socdey qalalaasaha dalka ka jirey, iyo sida shacbigu u kacsan yahay, oo uusan wax kalsooni ahna dawladda u hayn. Waxaa kale ee uu garwaaqsaday in, duqowda beelaha uu ku xirnaa aaney mar saddexaad daafici karayn haddii jagadiisa loo soo dhigto. Sidaas awgeed, wuxuu go'aan ku gaarey in uu afgenbi abaabulo. Saddex arrimood ayaa ku geesinnimo geliyey aragtiddisan:

- ciidankii Booliska oo iska baabba' ay;
- dawladda oo aan marna shaki ka geli karin muddeecnimadiisa;
- jiritaanka mucaarad Siyaad Barre saaxiib la ahaa oo si joogta ah dalka dab uga hurinayay, dawladdana sharafta ka qaadayay.

## ANIGA IYO SIYAAD BARRE

Aniga iyo Siyaad Barre weligaya xiriir fiican ma aannaan yeelan, kamana wada hadlin arrimo ka baxsan hawsha XDS. Laba adduun baannu ku kala noolayn. Anigu waxaan ku taamayay sidii ciidanka looga hormarin lahaa dhinacyada tababbarka, wacyigelinta, feejignaanta iyo daryeelka. Halka Maxamed Siyaad aaney arrimahaasi u muuqan. Bishii Jannaayo 1969kii, ayuu Siyaad Barre oo keligiis ahi goor galabnimo ah gurigayga iga soo qaaday. Wuxuu i geeyey xeradii Taangiyada ee ku tiil Ceel Cadde. Saraakiishii xerada joogtey buu ka waraystay xaaladda ay Taangiyadu ku sugan yihiin, heerka dayactirkoodu uu marayo iyo sida ay hawlgal u yihiin. Waxay ugu jawaabeen in Taangiyadu fiican yihiin, hawlgalna yihiin.

Markii aannu ka soo noqonnay, ayuu sheeko aan la yaabay, oo weliba aanan ka filanayn ii bilaabay. Wuxuu igu yiri: ' Cabdullaahi waad la socotaa meesha uu waddanku maanta marayo. Gobolladii Soomaaliyeed ee Kenya haysatey faraheenna way ka baxeen, isaga oo ula jeedey heshiiskii Arusha, musuqmaasuq iyo hab xumo baahsan ayaa dalka ka jira, doorashooyinka waa lagu shubtaa, kuwa soo socda oo bisha Maarso dhici doonana waa lagu shuban doonaa, ee Cabdullaahi aynnu waddanka badbaadinno' .

Hadalkaasi waa iga yaabiyey, waana ii caddaatay in Taliyuhu afgembi wado. Waxaan ku iri: ' Taliye askar baynnu nahay, xilna wuxuu inaka saaran yahay difaaca dalka ee yeynaan faraggelin hawlo aan ina khusayn oo aynnu u dayno cidda ay khusayso' . Intuu xanaaqay buu igu yiri: ' Idinku ma rumaysnidin in cid kale dalka u talin karto, waxaan ku iri, annagee?, ' Waa idinka Maxamuud Saleebaan ah' . Waxaan ku iri: ' Taliye, anigu qabiil kaalama aanan hadlin, Maxamuud Saleemaanka aad sheegaysidna anigu waxna kuma qabo, weligeyna wax kama aanan doonan, ee waa adiga ninka ay taliyaha ka dhigeen oo maalin walba darajo hor leh u dallacsiiyaan, caruurtana la korshaan' . Hadalkaygii buu aad u dhibsaday, markaas buu xoog baabuurkii u soo waday oo kolkii gurigayga i keenayna igu yiri: ' Iga dago iimaan laawe yahaw' . Ninkii iimaan la' waa la arki doonaa baan ku iri inta salaamay.

Siyaad Barre wuxuu gartay in wixii uu la huursanaa ay dibadda u soo baxeen, wuxuuna ka baqay in aan warkiisa faafiyo. Balse isaga ayaa shaki qabay ma ahee, wuxuu garan waayay xataa haddii aan sheego in ayan cidina dheg jalaq ii siiynayn. Wuxuuse go' aansaday in uu i aammusiyo, dabadeedna wuxuu warqad u qoray dawladda uu ku leeyahay ninkaas ruushka ka yimid oo dhalinyaradii oo dhan wata ayaa cinqilaab wada, waxaa loogu jawaabay isaga iyo inta la socotaba xirxir oo kala masaafuri. Subaxdii dambe markaan xaafiiskii tagay buu igu yiri gurigaaga yaan kugu xiray ee ilaa amar cusub ha kasoo bixin. Maalmo kaddib buu ii yeeray oo igu yiri, ' Afartan iyo shan beri oo xabsi guri ah baad xiran tahay' . Waa markii labaad oo aan aniga iyo Siyaad Barre si toos ah isaga hor imaanayno. Markii hore waxay ahayd 1956kii. Xilligaas, Siyaad Barre oo madax ka ahaa Qaybta Booliska ee

gobolka Banaadir baa wuxuu Taliyaha Booliska ka codsaday in, saddexda sargaal oo kooxdayada ugu dereja sarraysey ee kala ahaa, aniga, Maxamed Cali Samater iyo Salaad Gabayre, gobolka Banaadir lagu reebo. Markii codsigisii la yeelay wuxuu noo kala dhiibay qaybo kala duwan ee gobolka Benaadir hoos yimaada. Aniga wuxuu madax iiga dhigay qayb-hoosaadka gobolka Banaadir. Maxamed Cali Samaterna qayb-hoosaadka Shabeellada Hoose, Gabayrena qayb-hoosaadka Shabeellada Dhexe. Isla xilligaas waxaa magaalada Muqdisho lagu diley Kamaaluddiin Salaax oo reer Masar ahaa kana mid ahaa saddexdii xubnood ee uu ka koobnaa Golaha la-tashigu ee UN-ku kormeerayaal uga dhigay wasaayadda Talyaaniga ee Soomaaliya. Saddexdaas waddan waxay u xil saarnaayeen in ay hubiyaan in Talyaanigu ku maamulo Soomaaliya qorshihii UN-ku kula heshiiyey. Wakiilka Masar si gaar ah buu xil isaga saaray in aan Talyaanigu qorshaha ka leexan. Sidaas darteedna, dhawr jeer buu ka horyimid tallaabooyin uu Talyaanigu ku doonaayay in uu muddadii 10ka sano ahayd sii dheeraysto. Qoorshahaas wuxuu doonayay in uu dunida u tuso go'aan Soomaalida ka soo baxay isaga oo arrinta u adeegsanaya axsaab badan oo Talyaanigu asaasay sida: Xisbiga Digil Mirifle, oo uu hoggaaminayay Cabdulqaadir Zobe, Partito Progressista Somalo, Liberale Somalo oo uu hoggaaminayay Xaaji Baraako iyo kuwo kale.

Kamaaluddiin Salaax si adag buu qorshahaas uga horyimid, kaddib waxaa la abaabuley shirqoolkii lagu dili lahaa. Waxaa la keenay nin Gasaare Gude ah (Raxanweyn) oo Masar hore u tagey oo madaxa looga jirey (waalan), kaas oo raggii shirqoolka wadey ku soo hanuuniyeen nacaybka Masar oo hore looga soo tarxiilay. Goor subax ah buu soo galay xaafiiska Kamaaluddiin oo ahaa xaafiis Soomaalida u furan. Ayada oo aan laga shakisanayn baa la soo dhoweeyey oo lagu yiri geedkaas harkiisa ku sug waa imanayaaye. Markii Kamaalddiin soo galay oo ku leexday inuu salaamo oo gacanta u soo taagay, buu si degdeg ah ula soo baxay toorrey u qarsoonayd oo ku boobay. Allaha u naxariistee Kamaaluddiin isla goobtii buu ku dhacay, wax yar kaddibna markaan albaabka ka galinay Cisbitaalka De Martini buu naf baxay. Ninkii waa la qabtay oo xabsiga ayaa la dhigay.

Baarista fal-denbiyeedkaas waxaa loo xilsaaray guddi uu Siyaad Barre madax ka yahay. Aniga Siyaad Barre baa guddigaas igu daray. Wuxuu amar igu siiyey in aan baaro oo waraysi ka qaado dadka aan Soomaalida ahayn ee baarista gacan ka geysan kara, halka Siyaad Barre uu isku koobay dadka Soomaalida ah. In uu waajibaadka shaqada sidaas u kala saaro xigmad weyn baa ku jirtey. Taas oo ah in dadka dilkaas wax ka ogaan karey ay Soomalida yihiin, isaguna gaar u meelaystay. Halka shisheeyuhu uusan wax weyn ka ogaan karin dilkaas, wuxuuna rabay in aanan falkaas waxba ka ogaan oo baarintaanka sawir ahaan uga dhex muuqdo.


Anigu baaritaankii si caadi ah baan u watey, waxaana waraysi ka qaaday rag ka mid ah jaaliyaddii Masar iyo Carab kale, haba u badnaadeen macallimiinta dugsiyada, saraakiisha Qunsuliyadda Masar iyo wakiilada Azhar ee Muqdisho. Dhammaantood waxay ka midaysnaayeen aragtida ay ka qabaan dilkii Kamaaluddiin Salaax, waxayna isku raacsanaayeen in Talyaanigu ka danbeeyey . Warbixintii baan qoray, Siyaad Barre baan gacanta ka saaray. Siyaad Barre warbixintii aan u gudbiyey baaritaankii rasmiga ahaa waa uu ka reebay, taas oo malaha uu ugu danaynayay Talyaaniga. Siyaad Barre iima sheegin in uu baaritaankaygii ka reebay warbixintii rasmiga ahayd.

Markii la bilaabay maxkamaddii, Masar waxay Muqdisho u soo dirtay qareen caalami ah oo wakiil uga noqda maxkamadda, kaas oo Af-Talyaaniga si fiican u garanayay. Qareenku markii uu Xamar yimid, wuxuu malaha durba waraysi la yeeshay Jaaliyaddii Masar iyo Qunsuliyaddii Xamar u joogtey. Waxay la socodsiiyeen in aan warbixin ka qaaday. Maxkamadda markii la furay oo Xeer-Ilaaliyihii Talyaaniga ahaa dooddiisii meesha ka jeediyey baa waxaa istaagey garyaqaankii Masar. Wuxuu weydiiyey in baaristii rasmiga ahayd ku eg tahay inta maxkamadda la horkeenay? Waxaa loogu jawaabay ‘ haa’ . Dabadeed wuxuu codsaday in maxkamadda la horkeeno raggii baarista ku lug lahaa oo dhan si uu su'aalo u weydiiyo. Sidaas baa la igu keenay maxkamadda horteeda. Garyaqaankii Masar wuxuu i su'aaley in aan guddiga baarista ku jirey, taas oo aan u xaqiijiyey, dabadeedna wuxuu i weydiiyey in dadkii aan waraysiga ka qaaday aan warbixin ka qoray, taasna waan u xaqiijiyey.

Markaas buu i weydiiyey meesha aan geeyey baaritaankii aan sameeyey. Waxaan ugu jawaabay in aan Taliyaha u dhiibay. Garyaqaankii wuxuu ku jeensadey Siyaad Barre, oo ku yiri, meeday warbixintii uu Cabdullaahi soo qoray? Siyaad Barre wuu inkiray in aan warbixin u dhiibay. Wuxuu weydiiyey sababta uu u qarinayo warbixinta. Waxaa kale oo uu weydiiyey in amar lagu siiyey amase uu baqayay. Siyaad Barre wuu khalkhalay. Garyaqaankii reer Masar wuxuu maxkamadda weydiistay in dukumintigii degdeg loogu keeno. Siyaad Barre baa gooni loola baxay oo lagu yiri dukumintigii xaggee baad geysey. Wuxuu ku jawaabay in uu u geeyey Taliyaha Booliiska kornayl Arnera. Markii loo tagay Taliyaha Boolisku wuxuu ku yiri raggii loo diray in ay armaajo agtiisa tiil kala baxaan. Kornayl Arnera waxaa la weydiiyey cidda u keentay dukumentiga, wuxuuna ku jawaabay in Maxamed Siyaad Barre u keenay. Aniga halkaas baa la iiga haray. Maxkamaddii waxay xukuntay ninkii loo haystey in uu Kamaaluddiin dilay, eedaysanayaashii kale oo Zobe ku jireyna waa la sii daayay. Ma garanayo sida ay ku badbaadeen Zobe iyo Siyaad Barre oo si weyn loo tuhunsanaa.

Si gardarro ah bay taliyihii gobolka Banaadir Siyaad Barre iyo taliyaha Booliskuba, colaad iigu qaadeen, maadaama aan waajibaadkaygii si xilkasnimo ah u gutey. Booliskii baa la iga fogeeyey, waxaana horjooge (Aid-de-Camp) la iiga dhigay Signor Franco oo ahaa ninka labaad ee wasaayadda Talyaaniga madaxda ka ahaa. Saddex bilood kaddibna waxaa la ii beddeley qaybta Booliska ee Jubbada Sare, halkaas oo aan ka soo beddelay Daa' uud. Waagaas ayay bilaabatay in maamulka dalka tartiib-tartiib lagu wareeijiyo Soomaalida (Soomaaliyeynta Maamulka).

Siyaad Barre afgembigii kaddib wuxuu soo dhoweeyey raggii arrintaas si uun wax uga ogaa. Kuwaas oo kala ahaa Zobe iyo garyaqaan Carlo Pirisko oo waagaas dalka ka ahaa Xeer-ilaaliye Guud. Zobe wuxuu madax uga dhigay wakaaladda Muuska oo ahayd hay'adda ugu weyn ee ka mas'uul ahayd dhaqaalaha Soomaaliya ee xilligaas. Garyaqaan Piriskona waxaa la siiyey "Waraaq Cad" ee uu mashaariicda dalka laga fulinayo ku dullaali karo. Dalka oo dhan waa laga og yahay fadeexaddii ka dhalatay mashruucii "Bacrinta" ee shirkado uu Pirisko watey dhismaheeda ka danbeeyeen.



Sawirka dhinac bidix, waa geesigii Kamaaludiin ee Soomaaliya lagu dilay. Afadiisii iyo ciyaalkiisii ayaa waxaa Masar ku booqday Madaxweyne Aadan Cabdulle iyo R. Wasaare Cabdirisaaaq Xaaji Xuseen.

Arrintaasi waxay sababtay in eedayn Siyaad Barre loogaga soo jeediyo maxkamad ku taal dalka Talyaaniga, taas oo xataa wasiirro dawladdiisa ka mid ahaan jirey ay ku lug lahaayeen. Waxaa kale oo la xaqiijiyey in Siyaad Barre laba beri kaddib markii uu xukunka qabsaday uu maxkamadda gobolka Banaadir u diray ciidammo hareereeya iyo saraakiil SRC-da ka tirsan oo gudaha u gala, kuwaas oo dabadeed si qarsoodi ah ula soo baxay "Galkii dacwadda Kamaaluddiin Salaax" fartana ka saaray Siyaad Barre. Tallaabooyinkaas oo dhammi waxay muujinayaan sida Siyaad Barre uusan uga maqnayn shirqoolkii lagu dilay Kamaaluddiin Salaax.

## SIYAAD BARRE IYO SARAAKIISHA SARSARE EE XDS

Siyaad Barre walaac uu ka qabo in warkii uu igu qarsaday uu faafo awgeed ayuu u tegey madax sare oo dawladda ka mid ah, oo ku yiri: ' Saraakiisha ay ka mid yihiin Cabdullaahi Yuusuf Axmed, Maxamed Faarax Caydiid, Cabdulqaadir Dheel Cabdille iyo Maxamed Nuur Baarqab waxay ku hawllan yihiin afgenbi dawladda lagu ridayo'. Siyaad Barre wuxuu arrinta afgenbiga kala xiriiray saraakiishii madaxda ka ahayd hoggaammada iyo qaybaha ciidanka ee kala geddisan.

Dhammaantood, markii laga reebo Salaad Gabayre way ku gacan sayreen. Maalin maalmaha ka mid ah ayaa aniga, Maxamed Faarax Caydiid, Maxamed Nuur Baarqab, C/qaadir Dheel iyo Xasan Gaamur oo aan aad isugu dhoweyn, waxaannu la kulannay Salaad Gabayre. Waxaannu kula talinnay in uu ka haro Siyaad Barre. Waxaannu u sheegnay in Siyaad Barre uu dhammaantaya la soo xiriiray oo aannu ka diidney in aannu afgenbiga kala shaqayno. Salaad wuu naga diiday in uu taladayadii maqlo. Markii aannu kala tagaynay baan waxaan ku iri: "Wallee haddaadan Siyaad Barre ka harin oo aad afgenbi la samaysid, waxaan hubaa in aad noqon doontid ninka ugu horreeya ee uu tiirka taagi doono." Anigu labadiinnaba waan idin aqaan, waana oddoroosi karaa waxa xiriirkiinnu ku danbayn doono". Wuxuu iigu jawaabay: ' Bal iska daa in aan ka haro ee waxaan kuu sheegayaa in haddii

Maxamed Siyaad igu yiraahdo ilmahaaga ii sadaqee aan ka yeelayo'. Salaad Gabayre halkaas waxaa gaarsiiyey, sida la sheegay, in Siyaad Barre ku qanciyey in uu rabo, afgenbiga kaddib in uu xukunka ku soo celiyo Madaxweynihii hore mudane Aadan Cabdille Cismaan oo Salaad Gabayre soddog u ahaa. Lama yaqaan haddii mudane Aadan arrintaas wax ka ogaa, waxaase la malayn karaa in, mudane Cabdirisaaq Xaaji Xuseen oo Aadan Cabdille Ra'iisul Wasaare ka dhigey, uu xiriir hoose la lahaa Siyaad Barre. Markii saraakiishii oo dhan ku gacansayreen taladii Siyaad Barre wuxuu laba jibbaarey been abuurkii uu ku oran jirey saraakiil baa afgenbi samaynaysa; been abuurkaas oo uu gaarsiiyey nin kasta oo dalka magac ku lahaa. Wuxuu abuuray kooxo badan oo afmiinshaarro ah oo warkaas dalka oo dhan ku faafiya, ilaa warkaasi noqday mid lagaga sheekaysto majilisyada jaadka iyo goobaha fadhi ku dirirka. Sidaas oo kale, Siyaad Barre wuxuu badiyey xiriirkii uu madaxda la lahaa, isaga oo ku beerlaxawsanaya in uusan waxba ka qaban karin saraakiisha isku hallaynaysa awood qabiil ciidankiina kala kooxaysatey. Wuxuu gaarey heer uu ku yiraahdo in uusan mas'uul ka noqon karin foolxumada soo socota oo uu diyaar u yahay in meel kale loo beddelo.

Markii arrinta afgenbiga warkeedii batay, ayaa walaac galay madaxdii dalka. Dabadeed waxay u yeereen Siyaad Barre, waxayna amar ku siiyeen in uu ad' adkaan muujiyo oo saraakiisha uu ku tuhunsan yahay falkaas uu ka wareejiyo hoggaammada iyo qaybaha xasaasiga ah oo ay joogaan. Siyaad Barre wuxuu amarkaasi u noqday fursad qaali ah oo awood u siinaysa in uu XDS gacanta ku dhigo. Sidaas awgeed wuxuu durbaba seef la dhexgalay saraakiishii uu ka baqayay oo dhan. Wuxuu ka qaaday jagooyinkii muhiimka ahaa oo ay hayeen, wuxuna u kala diray gobollada dalka iyo waxbarasho dibadeed. Aniga waxaa la ii beddelay gobolka Woqooyi Galbeed iyada oo la ii magacaabay abbaanduulaha qaybta 26aad ee XDS.

Raggii kale midba meel baa loo miidaamiyey. Jagooyinkii aannu bannaynay wuxuu ka soo buuxiyey sarakiil hoose oo aan waxba ka aqoon shakhsiyadda iyo hoggaaminta Siyaad Barre, kuwaas oo indha la'aan ku fulinayay amar kasta oo uu siiyo, isla markaasna mahad ugu hayay jagooyinka sare ee uu ku magacaabay.

# DILKII MADAXWEYNE CABDIRASHIID EE 15kii OKTOOBAR 1969kii

Mudane Cabdirashiid Cali Sharmaarke wuxuu dalka Ra'iisul Wasaare ka noqday bishii Luulyo 1960kii, sannadkaas oo Soomaaliya gobonnimadeeda hanatay. Magaciisu wuxuu ku lammaansan yahay aqoonsigii Shiinaha, heshiiskii Midowga Soofiyeeti ee dhismaha Ciidanka Soomaaliya, goynta xiriirkii diblomaasi ee Soomaaliya iyo Boqortooyada Midowdey ee Ingiriiska, kaddib markii dadweynaha NFD aftidii uu ku doortay in Soomaaliya lagu daro uu Ingiriisku ka horistaagey oo Kenya siiyey iyo waliba dagaalkii Itoobiya iyo Soomaaliya 1964kii.

PUBLISHED by the Ministry of Information at the State Press  
Tel. 3013  
MOGADISHU

**Somali News**

A GOVERNMENT NATIONAL DAILY

## PRESIDENT SHERMARKE ASSASSINATED

## MURDERER IN CUSTODY

## A 5-Day National Mourning

**CONDOLENCES FROM SHEIKH MUKHTAR AND YASSIN**

MOGADISHU, OCTOBER 16 (SONNA) — The President of the Republic, H.E. Dr. Abdirashid Ali Shermarke was assassinated by a 22-year-old policeman in Las Anod at [illegible] hour local time yesterday. The assassin, a police constable [illegible] Abdi Mohamed, is now under Police custody.



... general public on October 20, between 07.00 a.m. and 08.00 a.m. The burial will take place on Monday, October, 20.

### THE PROFILE

H.E. Dr. Adirashid Ali Shermarke was born in 1919 at Harardere in the district of Obbia. After having attended Quranic schools, he completed his elementary education in 1930.

From 1937 to 1943 he became a trader and later a Civil Servant in the then Italian Administration. At the same time, he brought his educational standard up to intermediate level.

He joined the Somali Youth League (SYL) immediately after its foundation in 1943. He entered the British Administration Civil Service in 1944. He completed his secondary education in 1950 - 52 while still a civil servant and got a scholarship to the University of Rome where he graduated in political science in 1958. One year after he returned from Italy he was elected to the then Legislative Assembly from Oardo as an SYL member in 1959.

He thus terminated fifteen years in the civil service.

On August 20, 1959 he had been among the first politicians who demanded independence before the target date of 31st December, 1960.

Immediately after independence on July 1st, 1960 he was nominated by President Aden Abdulla Osman as Prime Minister, a position he held until March 1964 when the first general elections were held. He was re-elected to parliament from Oardo, his old constituency.

As Prime Minister, he had travelled abroad extensively in pursuit of a non-aligned and neutral foreign policy. Although the ruling SYL Party recommended him to be reselected as Prime Minister by a large majority, President Aden invited Abdirazak [illegible] Hussein [illegible] which Dr. Abdirashid was not a member.


On July 10, 1967 he challenged President Aden Abdulla Osman and was elected President.

Married with 3 sons and 4 daughters, he was [illegible] and [illegible] world leaders during his premiership and presidency.

PRESIDENT SHERMARKE WITH HIS FAMILY



Xigasho: Somali News, October, 22nd, 1969



SOMALI NEWS

Wednesday 22 October 1969 — Page 1

# Somalia Buries Président Shermarke

ARMYMEN PUT A WREATH ON THE GRAVE

PRESIDENT KAUNDA OF ZAMBIA SIGNS CONDOLENCE BOOK.

FUNERAL PROCESSION ALONG MOG STREET

A MILITARY SALUTE TO THE BODY COVERED WITH THE FLAG

ARMYMEN CARRY BODY TO CEMENTERY

BODY BEFORE PRAYERS IN ABDULKADIR MOSQUE

WOMEN MOURNERS WEAR IN WHITE

COFFIN BEING LOWERED TO THE GRAVE

Xigasho: Somali News, October 22nd, 1969– Aaskii Madaxweyne Sharmarke (Ahun)

1969kii waxaa gobollo badan ee dalka ka dhacay abaar xun oo dad iyo duunyaba ay ku tabaaloobeen. Dabadeed wuxuu go' aansaday in uu kormeer ku tago. 14kii Oktoobar ayuu Burco iigu yimid isagoo kormeer kusoo wada maray Gobolka Bari, markuu Caluula joogay oo dadka la hadlayey, habar baa u keentay go' cad oo ku tiri waa kafantaadiiye hoo, waa lagu qayliyey islaantii, wuxuuse ku yiri dadkii daaya waaba intaasoo ay run sheegaysaa, marka la dilayna go'ii waa wataa oo boorsaduu ugu jiraa. Isla maalintaasna waxaan ka dejiney magaalada Hargeysa.

Aniga iyo ciidan aan watey ayaa gegida dayuuradaha ee Hargeysa salaan sharaf ku siinnay subaxii 15 October markuu Laascaanood u baxayey. Sidaas oo kale madaxdii gobolka oo dhammi halkaas bay ku sugnaayeen si ay Madaxweynaha u sagootiyaan. Madaxweynaha waxaa la socday guddoomiyahii Baarlamaanka Shiikh Mukhtaar iyo wasiirkii gaashaandhigga Hilowle Macallin. Habeennimadii Hargeysa casho sharaf baa loogu sameeyey gurigii uu degganaa. Waxaa u qorshaysnaa in uu subaxnimada tago magaalada Laascaanood ee gobolka Sool, halkaasna uu uga sii gudbo magaalada Gaalkacyo gobolka Mudug oo mudane Yaasiin Nuur Xasan ku sugayay, dabadeedna ay Muqdisho u wada duulaan.

Intii cashada loo fadhiyey ayaa waxaa dhacday arrin lala yaabay. Waxaa qolweynihii cashada soo galay nin diif badani ka muuqato oo dhar reer miyi qaba, kaas oo aan qofna albaabka ka celin. Ninkaas oo ay ka muuqatey isku kalsoonaan xad-dhaaf ahi wuxuu, sidii uu u soo socdey isa soo taagey dhabarka madaxweynaha. Mudane Cabdirashiid markuu isha ku dhuftay buu aad u farxay oo si qalbi furan ku yiri: ' Mudane Cali Nuur soo dhowow' . Ninkaas dad yar baa garanayay. Intii aan garanayni hoos bay isu wada weydiiyeen ninkaas Madaxweynnuhu isu taagey. Mar danbe ayaa la ogaadey in uu yahay halgamaagii weynaa ee SYL, kaas oo dalka oo dhan caan ka ahaa. heeso tiro badanna magaciisa lagu allifay, kuwaas oo shacbiga qiiro lagu gelin jirey.

Cali Nuur wuxuu Madaxweynaha ku yiri, hadda hawllan baad tihiin, waxaanse jeclaan lahaa in aan beertii kugu arko. Hadalkaas oo loo

qaatay in uu doonaayay in uu keli ku arko. Waxaase dadkii yaab geliyey sidii Madaxweynnuhu ugu jawaabay, markii uu yiri: ' Cali Nuur, ma waxaad u jeedaa beertii Villa Somaaliya, haa buu ku yiri'. Wuxuu intaas ku daray, isaga oo fiirinaya dhinaca uu ka fadhiyey mudane Shiikh Mukhtaar, ' Balse haddii aan Cali Nuur is arki weyno, waxaan kaala ballamayaa Shiikh Mukhtaar, Shiikh Mukhtaarow adaan kugu ogahay Cali Nuur. Shiikh Mukhtaar baa yiri, ' Madaxweyne xaggee aadaysaa?, Wuxuu yiri ilaah baa yaqaan'.

Malaha, Cali Nuur inta uu yaabay, buu Madaxweynaha weydiiyey in uu meel kale aadayo. Madaxweynihii wuxuu ugu jawaabay: ' Waxaani waa adduunyo oo wax kasta ayaa dhici kara, ee Shiikh Mukhtaar baa haddii aanan joogin ku qaabbili doona'. Illayn waa dardaaran Madaxweynaha hadalkiisu!. Dhammaan dadkii qolweynaha cashada u fadhiyey waxay la yaabeen hadalladii Madaxweynaha. Nasiibdarro, waxaa lagu dhici waayay in Madaxweynaha la weydiiyo sida wax u jiraan iyo sababta ka keentay in uu Cali Nuur kala dardaarmo Shiikh Mukhtar. Iyada oo la wada yaabban yahay baa cashadii laga kacay.

Markii uu Madaxweynnuhu seexanayay ayuu igu yiri: ' Cabdullaahi adiga iyo Hilowle ii imaada'. Kolkii aannu u tagnay waxaa la fadhiyey guddoomiyaha degmada Hargeysa Maxamuud Yaasiin Dalla'aan (Daboole). Markii uu ka soo baxay buu xaggayga u soo jeensadey oo igu yiri: ' Cabdullaahi waxaan rabaa in adiga iyo Maxamed Siyaad wada shaqaysaan, dibna laguugu magacaabo hoggaankii aad joogi jirtey. Waxaan doonayaa in aad Muqdisho timaaddid oo shaqadii halkaas ka bilowdid. Waxaan kuu sheegayaa oo kale in ay noo caddaatay in ay been abuur ahayd abaabulkii afgembi ee lagugu eedeeyey'. Markii uu hadalka dhammeeyey baan ku iri: ' Mudane Madaxweyne, aniga iyo Siyaad Barre ma aannu wada shaqayn karno ee waxaan kaa codsanayaa in aad waxbarasho ii dirtid ama shaqada iga fasaxdid'. Intuu i fiiriyey buu hadal canaan ah igu yiri, kaas oo ahaa: ' Waad madax adag tahay ee warkayga maqal'. Aniga oo aan u jawaabin baan aniga iyo wasiirkiiba ka soo baxnay.

Subaxnimada 15kii Oktoobar 1969kii, markii aannu gegida dayuuradaha ee Hargeysa ku sii sagootinayney buu intii uusan

dayuuradda fuulin aniga iyo Hilowle noo yeeray, oo amar ku siiyey Hilowle in markii ay Muqdisho tagaan uu degdeg Muqdisho iigu soo beddelo oo xaafiiskaygii hore aan ka hawlgalo. Markii aan damcay in aan arrintaas ka cudurdaarto buu igu yiri: ' Maalin dhowayd baannu Maxamed Abshir cayrinney ee odaygan ilmihiisa korsanayana (Siyaad Barre) kuma dari karnee, waryaa wax maqal oo Muqdisho imow'. Markii dayuuraddu hawada sare u duushay, baan qoslay oo waxaan Is-iri, ' Alloow yaa u kala warrama Cabdirashiid iyo Siyaad Barre'. Halka Siyaad Barre ku hawllanaa shirqoolidda iyo afgenbiga Madaxweynaha, Cabdirashiid wuxuu, marka uu amarka i siinayay, maskaxda ku hayay koritaanka carruurta Siyaad Barre.

Isla maalintaas, afar saac kaddib ayaa waxaa Laascaanood iga soo wacay Taliyahii Qaybta Booliska Gobolka Togdheer oo waagaas Laascaanod ka mid ahayd, G/dhexe Maxamed Saqadhi Dubad, kaas oo ii sheegay in Madaxweynihii la dilay, gacan ku dhiiglihiina la hayo. Waxaan weydiiyey oo yaa diley? ' Dee nin Majeerteen ah buu iigu jawaabay'. Waxaan ku iri yuusan idinka baxsan. Isla saacadihiiba meydkii Maxweynaha waxaa loo duuliyey Muqdisho. Raadiye fooniyihii markaan dhigayba, waxaa maskaxdayda ku soo dhacday waxa ku xigi doona oo Taliyaha XDS in muddo ah ku hamiyayay. Shaki iigama jirin isku xirnaanta dilka Madaxweynaha iyo afgenbiga soo food lahaa ee Siyaad Barre horseedka ka yahay, waxaanse saadaalin kari waayay wakhtiga afgenbigu dhacayo, ma xabaasha dabadeed, mase soo noqodka Ra' iisul Wasaaraha oo safar dibadda ugu maqnaa!. Maxamed Abshir Walde oo ahaa agaasimaha guud ee idaacadaha Soomaaliyeed oo xilligaas Hargeysa shaqo u joogey baan wasiirka arrimaha gudaha mudane Yaasiin Nuur Xasan u soo faray farriin digniin ah , oo aan la socodsiinayo in Maxamed Siyaad Barre afgenbi abaabulayo, loona baahan yahay in degdeg looga hortago. Ma aanan maqal wax uu Yaasiin arrintaas ka qabtay iyo in farriintaydii gaartey toonna, in kasta oo markii aan xabsiga ka soo baxay Walde ii xaqiijiyey in uu farriintii gaarsiiyey mudane Yaasiin. Markii maydkii Madaxweynnuhu Muqdisho soo gaarey, waxaa lagu dhawaaqay dhawr beri oo baroor diiq ah, dalkana waxaa lagu soo rogey bandow. Isla maalmahaas waxaa safarkiisii ka soo noqday Ra'iisul Wasaare Cigaal, kana qaybqaatay aaskii Madaxweynaha.

Si looga hortago madax la' aan (vacuum) ka dhaca habsami u socodka hawlaha qaranka, Ra'iisul Wasaaruhu wuxuu degdeg u abaabuley shir in ay isugu yimaadaan xubnihii SYL oo aqlabiyad ku lahaa Baarlamaanka. Ajendadu waxay ahayd in ay ku heshiiyaan mushaarraxa SYL u soo taagi doonto jagada Madaxweynaha, kaas oo dabadeed rasmi ahaan Baarlamaanka looga ansixinayo.

Shirkii horudhaca ahaa ee xarunta SYL lagu qabtay, waxaa jagada Madaxweynaha isu soo taagey mudane Xaaji Muuse Boqor iyo mudane Cabdullaahi Ciise. Dood kulul kaddib, habeenkii ay taariikhdu ahayd 20kii Oktoobar 1969kii, ayaa waxay ku soo gabagabowdey in, musharraxa rasmiga ah ee SYL ugu taagan jagada, uu noqdo mudane Xaaji Muuse Boqor. Qorshuhu wuxuu ahaa in mudane Xaaji Muuse Boqor lagu doorto Baarlamaanka 21ka Oktoobar. Intii dooddu socotay oo dhan, Janan Siyaad Barre wuxuu goobjoog ka ahaa halka xaaladdu mareysey.

## YAA LAGU TUHMAYAA DILKII MADAXWEYNAHA?

Waa wax adag in si fudud loo ogaado cidda xaqiiqo ahaan ka danbasey dilalka qorshaysan ee lala beegsado madaxda sare, waxaase hubaal ah in, badi kuwa Afrika ka dhaca ay ku fulaan isbiirsiga mu'aammarado dalka gudihiisa iyo dibaddiisa laga maleegey. Sidaas oo kale, waxaa dilkii Cabdirashiid loo arki karaa in uu ku yimid abaabul caynkaas ah. Taas oo halkeeda ah, ayaa waxaa dalka ka jirey tuhun loo qaateen ah oo ku saabsanaa dad la malayn karo in ay ka danbeeyeen dilkii Madaxweynaha. Dilkii Madaxweyne Cabdirashid waxaa tuhun culus galay madax sare oo ay madaxweynaha isku hayb iyo beel ahaayeen waxaana ugu hilin cuslaa Mudane Cabdirisaaq Xaaji Xuseen, Janan Maxamad Abshir Muuse iyo Sh. Nuur Cali Colow. Sidoo kale waxaa isna kaalin weyn ku lahaa Janan Maxamad Siyaad Barre oo isagu ahaa ninkii inqilaabka watay oo ka qaatay qayb libaax dilkii madaxweyne Cabdirashiid kaddibna u fuliyey inqilaabka sidii uu ku talo galay kaddib markii riyadiisii u rumowday oo inqilaabkii ku guulaystay. Dhinaca kale, Siyaad Barre wuxuu isu muujin jirey in uusan wax lug ah ku lahayn siyaasadda, meelaha lagu badan yahayna

wuxuu ka sheegi jirey in xukuumaddu ku dadaaleyso intii tabarteed ah si dalku horumar u gaaro, taas oo uu uga dan lahaa in uu shirqoolka Madaxweynaha ku socday iska fogeeyo. Dhab ahaanse si qarsoodi ah ula shaqayn jirey kuwii ka soo horjeedey Madaxweynaha. Laba-gallayn (Laba-wejiilaynta) Siyaad Barre waxay dabooleysay danta uu ka lahaa xoojinta shiddada raggaas dhextaal, maadaama ay halkaas uga muuqatey fursad dhab ah oo uu uga faa' iidaysan karey dedejinta afgenbiga uu doonayay in uu dalka ku qabsado. Siyaad Barre wuxuu cayaarayay khamaarka ah ' Waraf isku mar laba shinbirood ku dil' . Sidaas awgeed, waxaa la malayn karaa in Siyaad Barre shaqadiisa qabsaday, maadaama dalka oo dhan laga ogaa ragga ka shaqaynayay hagardaamooyinka Madaxweynaha, dabadeedna aan cidina waagaas ku fekeri karin in uu isagu lug ku leeyahay dilka Madaxweynaha. Sidaas buu run ahaan isku qanciyey.

Durba kolkii la dilay Madaxweynihii, Siyaad Barre wuxuu ku dadaaley sidii eedda dilkaas loogu maxkamadayn lahaa Cabdirisaaq Xaji Xuseen iyo Maxamed Abshir. Haseyeeshee, Xeer ilaaliyihii xilligaas Dr. Cabdi Faarax Baashane, ayaa baaris qabyo ah kaddib caddeeyey in aan lahayn wax raad ah oo mujinaya in labadaas oday ay fal-denbiyeedkaas wax lug ah ku lahaayeen. Siyaad Barre oo hore meel iska dhigtay in ayan Cabdirisaaq iyo Maxamed Abshir sina uga baxsanayn eedaynta uu la doonayay, baaristii Xeer-Ilaaliyuhu waxay ku noqotay dhabar jab uusan marna xisaabta ku darsan. Markii ay caddaatay in raggii dilka lagu tuhmayay aaney wax raad ah ku lahayn, ayaa waxaa bilaabatay in hadalhaynta arrintaba la iska daayo, maadaama ay iska caddatey in uusan fal-dembiyeedkaasi ka fogayn Siyaad Barre laftiisa. Siyaad Barre wuxuu illaawey in uu qorshihiisa ku darsado marin habaabinno badan oo haddii mid u socon waayo uu mid kale ku dayo, maadaama aan mar walba ' Waraf laba shinbirood lagu dili karin' . Maxkamaddii la soo saaray raggii loo xiray dilkii Madaxweynaha waxay dil ku xakuntay gacan-ku-dhiigliihii oo keli ah, intii kalena oodday ka qaadday. Sidii uu dhaqanka u lahaa Siyaad Barre wuxuu, isaga oo aan baaristii weli dhammayn, jagadii ka qaaday Xeer-Ilaaliyihii, kolkii maxkamaddii dhammaatayna xabbiska ayuu dhigay. Sanooyinkii dheeraa ee Siyaad Barre xukunka hayay Dr. Cabdi Faarax Baashane in yar buusan xabbiska ku jirin.

## AFGENBIGII SIYAAD BARRE: OKTOOBAR 1969

Sanooyinkan danbe waxaa dalal badan oo Afrika ka mid ahaa silsilay (kiciyey) saraakiil xukunka u ooman. Intii u dhaxaysey 1963-1969 ciidammada qalabka sida ayaa afgenbiyo iyo xukun marooqsi kaleba kula wareegey talada dalal ay tiradoodu 20 kor u dhaafayso. Tusaalaha ugu dhow waa afgenbiyadii Liibiya iyo Sudan oo ay muddo gaabani u dhaxaysey afgenbigii Oktoobar 1969kii. Soomaali badan oo ama aan xog-ogaal u ahayn wixii Afrika ka dhacayay ama aamminsanaa in hab-dhismeedka bulshada Soomaalidu uusan kolna suuraggelineyn afgenbi dalka ka dhaca. Waxay qabeen aragtidan: Degaan ahaan Soomaalidu waxay u badan tahay reer miyi, dhaqan ahaanna waa dad xor ah oo ku barbaaray dhaqan sugaya xuquuqda qofka, tan beesha iyo xiriirka beelaha ka dhexeeya. Xeer-dhaqameedku wuxuu u ahaa hab dhammaystiran oo asaas u ah waxa, qoraaga IngiriiskaI. M. Lewis, ku tilmaamay demoqraaddiyadda reer miyiga (Pastoral Democracy). Habkaas xorta ah ee miyiga ka jirey ayaa magaaladana ka socdey.

Xilligii kala guurka ee gumeysiga laga xoroobay, Galbeedku wuxuu bilaabay in uu dalalka uu gumeysan jirey u dejiyo hab demoqraddi oo casri ah. Labaadaas hab oo marka hore u muuqda kuwo iska soo horjeeda, si fiican bay isugu milmeen isuna buuxiyeen. Dalka waxaa ka dhici jirey doorashooyin, inkasta oo aaney wax isdhaafini ka maqnayn, haddana way dhaameen doorashooyinka Afrika ka dhici jirey, dawladuhuna si caadi ah bay isu beddeli jireen. Sidaas awgeed, Soomaaliya waxay adduunka ugu muuqatey dal ay dhab ahaan demoqraaddiyaddu ka hirgashay. Arrinta kale oo meesha ka saaraysey in dalka uu afgenbi ka dhaco waa geeddi socodka loogu jirey Soomaaliweyn, taas oo mudnaanta kowaad kaga jirtey barnaamijka siyaasadeed ee SYL. Himiladaasi waxay meesha ka saaraysey xukun la kala boobo. Qaddiyadda Soomaaliyeed waxay dhinaca shacbiga ka ahayd arrin muqaddas ah, run ahaanna waxay aamminsanaayeen in dawladda dalka ka jirtey ahayd mid dhimman, sidaasna ahaanayso ilaa ay soo xero geliso dalalka maqan.

Sidaas oo kale in afgenbi lagu fakaro waxaa meesha ka saarayay qaab-dhismeedka shacbiga Soomaaliyeed oo sida la og yahay ka kooban dhowr beelood oo, ilaa xad, tiro ahaan isu dheellitiran, kuwaas oo aan beel ama labo ama saddex ka mid ahi sina u haweysan karin in ay gaar ahaan ula wareegaan xukunka dalka. Haddiibase ay dhacdo, waxaa meesha ka baxaya miisaankii isu dheellitirnaa ee beelaha, cawaaqib xumada ka dhalatana lagama yaabo in la xakameeyo. Haddii la eego tiirarka bulshada isku haya, kuwaas oo ay ka mid yihiin xeer-dhaqameedka Soomaalida, demoqraaddiyadda dalka ka jirtey, mudnaanta uu shacbigu ku leeyahay qadiyadda Soomaaliweyn waxaa la garan karaa sida ay u yar yihiin fursadaha lagu daba geddiyi karo tiirarkaas. Sidaas awgeed, waxaa la aamminsanaa in aan lagu fakari karin isku day afgenbi. In aan aragtidaas lagu qaldanayn waayaha ayaa muujiyey.

Natiijadii ka dhalatay afgenbigii Siyaad Barre ku damcay inuu mid mid u siibo tiirarkii asaaska u ahaa jiritaanka midnimada ummadda iyo qarannimada dalka, maanta ayaa mireheedii la guranayaa. Habeenkii ay taariikhdu ahayd 20ka Oktoobar 1969kii, baa waxaa la dareemay dhaqdhaqaaq ciidan oo aan caadi ahayn, waxaana la isla dhexmarayay in abaabul Afgenbi socdo. Madax badan oo warka la gaarsiiyey ayaa la xiriiray wasiirkii arrimaha gudaha mudane Yaasiin. Wasiirka waxaa loo sheegay in Maxamed Siyaad afgenbi wado, dadkii la soo hadlayse mudane Yaasiin wuu qaboojiyey, wuxuuna u xaqiijiyey in aan warkaas waxba ka jirin oo isla saacaddaas Janan Maxamed Siyaad la fadhiyo oo uu shaah la cabbayo.

Nin waliba afkiisa ayuu xirtay oo iska seexdey. In kasta oo Siyaad Barre uu riwaayad qurux badan madaxda u dhigayay, haddana si habsami leh buu qorshihiisa u watey. Sidii uu u qorsheeyey ayayna arrimihiisii isugu dubba dheceen. Sidaasna waxaa ku rumoobay afgenbigii hadalhayntiisa la isla dhex marayay, kaas oo soo bannaanbaxay waabberigii 21ka Oktoobar 1969kii. Subaxdii waxaa lagu waabberiistey Siyaad Barre oo dalka ka taliya. Markii aan raadiyaha ka dhegeystey in dalka uu afgenbi ka dhacay, baan ka fakarey halista Soomaaliya ku soo fool leh. Waqtigaas anigu waxaan ku sugnaa magaalada Hargeysa. Siyaad Barre wuxuu la soo hadlay taliyaha

qaybta 26aad ee XDS Janan Maxamed Cali Mire oo ay aad isugu dhowaayeen, kana soo wadajeedeen kooxda ay saraakiisha jiilka cusub ee XDS ku magacaabeen garab saar dab, eray lagu dhaliilayay aqoontooda. Siyaad Barre wuxuu saaxiibkiis amar ku siiyey in uu magaalada qabto, kaas oo fuliyey amarkii la siiyey. Isla habeenkaas, waabberiga ka hor, Siyaad Barre wuxuu baabuur ku ritey Taliyihii Booliska Janan Qorsheel, kaas oo uu u sheegay in XDS dalka qabsaday, in uuna doonayo in ciidanka Boolisku kala qaybqaato xukunka dalka, rasmi ahaanna loo sheego in ciidammada qalabka sidey oo ka kooban XDS iyo Booliska ay arrintaas ka midaysan yihiin, Janan Qorsheelna wuu ka yeelay.

Siyaad Barre wuxuu laalay dastuurkii, markaas ayuu Baarlamaankii kala diray, wuxuuna dalka ku soo rogey xukun degdeg ah. Wuxuu durbadiiba xabsiga u taxaabay dhammaan xubnihii xukuumadda uu afgenbiyey oo Ra'iisul Wasaare Cigaal ugu horreeyo. Siyaad Barre wuxuu dhisay gole ciidan ee uu ku magacaabay Golaha Sare ee Kacaanka (SRC), kaas oo ka kobnaa 25 sargaal oo uu gacantiisa ku soo xushay; labaatan ka mid ah wuxuu ka soo xushay XDS, shanta kalena ciidanka Booliska. Isla isaga ayaa isku magacaabay Guddoomiyihii golahaas, Taliyihii Booliska wuxuu ku magacaabay ku-xigeen. Muddo gaaban wuxuu XDS ka sifeeyey saraakiishii ugu wanaagsanayd, wuxuuna ka dhigay qaar uu shaqada ka saaro iyo qaar uu u wareejiyo maamulka rayidka ah.

Siyaad Barre, waxba hore wax uguma qorshaysnayn sidaas awgeedna wuxuu subaxdii u yeertay Xeer-Ilaaliyihii Guud Dr. Cabdi Faarax Baashane iyo Agaasimihii Guud ee wasaaradda arrimaha dibadda Dr. Axmed Shire Lawaaxe wuxuuna ka codsaday in ay talo ka siiyaan wixii uu dadka u sheegi lahaa. Raadiyeyaasha dalka waxaa laga sheegay oo keli ah in dalka uu kacaan ka dhacay kaas oo ay hoggaaminayaan ciidamada qalabka sida, waxaa kale oo laga sii deynayay heeso waddani ah. Maalintaas wax kale lagama ogeyn xukunka cusub ee dalka ka dhashay. Labadaas khabiir waxay isla maalinkiiba u diyaariyeen bayaankii uu doonayay, kaas oo ay ku magacaabeen, ' Warqadda Kowaad ee Kacaanka' .

OCTOBER ST

PRINTED AT THE STATE PRESS
ALL DAYS EXCEPT FRIDAYS

NATIONAL DAILY

PUBLISHED BY MINISTR
MOGADISHU — Tel.

# SRC consists of

## 14 Secretaries Appointed To Run The COUNTRY

MOGADISHU, Nov. 1, (SONNA) — The formation of the Supreme Revolutionary Council has been released here today and the following is the list of the members:

1) Major General Mohamed Siad Barre, (President of SRC;)
2) Major General Jama Ali Korshel, (Vice-President;)
3) Major General Mohamed Ainanshe, (Vice-President;)
4) Brigdier General Hussein Kulmie, (Member;)
5) Lt. Colonel Ahmed Mohamoud Ade "
6) Lt. Colonel Mohamed Ali Samater "
7) Lt. Colonel Salad Gaveire Kedie "
8) Lt. Colonel Abdalla Mohamed Fadil "
9) Lt. Colonel Ali Mattan Hasci "
10) Lt. Colonel Mohamed Sh. Osman "
11) Lt. Colonel Mohamoud Miree Muse "
12) Major Ismail Ali Abucar "
13) Major Mohamed Ali Shirreh "
14) Major Ahmed Suleiman Abdulle "
15) Major Mohamoud Ghelle Yusuf "
16) Major Farah Wais Dulleh "
17) Major Musa Rabille God "
18) Major Ahmed Mohamed Farah "
19) Captain Ahmed Hassan Muse "
20) Captain Mohamed Omer Ges "
21) Captain Osman Mohamed Ghelle "
22) Captain Mohamed Yusuf Elmi "
23) Captain Abdi Wersama Issak "
24) Captain Abdirazzak Mohamed Abucar "
25) Captain Abdulkadir Haji Mohamed "

The Council has also announced a new fourteen-member Government to replace the toppled corrupt Government. Officially called as «Secretaries» instead of «Ministers», the new members of the Government, all of them young men who have been trained academically and provisionally for the office they held, were sworn in today for their new portfolios. The list:

Dr. Hassan Ali Mirreh, Education
Dr. Osman Nur Ali, Justice, Religion and Labour
Dr. Mohamed Aden, Health
Dr. Mohamed Ashor, Communication
Dr. Abdulle Aw Farah, Agriculture
Mr. Mohamed Burraleh, Minerals
Dr. Mohamoud Jama Ahmed, Information
Dr. Ahmed Mohamed Mohamoud, Planning
Mr. Mohamoud Abdi Arraleh, Finance
Mr. Omar Arteh Ghalib, Foreign
Dr. Abdulkadir Adan Abdulle, Public Works
Dr. Mohamoud Mohamed Osman, Rural Development and Livestock
Major-General Jama Ali Korshell, Interior
Dr. Mohamoud Galleh Elmi, Commerce



*Major General Mohamed Siad Barre addresses Members of the Supreme Revolutionary...*

...gs will go better. At the last moment, you were all aware of the great difficulties and problems the country was facing. There wasn't a single place functioning properly.

The people faced a lot of difficulties and felt hatred. The reason for this was that the country's leadership was not good. I don't want to accuse the previous leaders of this country, though there were some blame at times, there were a lot of things they had done for the country. I have ordered that they should not be touched. They should not be called criminals unless crimes committed by them are proved. For this reason, I will not speak about persons but in general there was nothing good.

Corruption and tribalism became common, everyone was helping his relatives. People were asked not «What do you know?» but «Who do you know?»

Due to bad management, religion was at stake. People almost believed in persons rather than in God. Educated people were at the bottom and worthless people with no much value were at the top.

Somalism was destroyed and ignored and everyone had at heart «who is my next of akin?» Who is my relative? And who is from my tribe?»

The State was like a country without people; a country where anybody who wanted could come in and everyone ... of the country for no reason and when they were fulfilling their duties.

I think further details are not necessary. When the country reached this stage, the heads of the Armed Forces thought that this was not the right thing and that it was not the way Somalia should be run, and that it needed to be put straight.

This was the cause of the revolution. The principles of the Revolution were not personal or just for the mere take-over of power but for the betterment of the general interests of Somalia and the Somalis, for the progress of the economy, people's health, education, defence and honour. This indispensable step should have been taken long ago and if it was done, Somalia would have gone far ahead than its present position.

The previous diseases should be eradicated and fought with. Justice and law should be strengthened so that the people's lives are not endangered and everyone could get his rights. National unity should be promoted and tribalism should be eradicated.

As we announced before, these are the principles of the SRC and the friends we called here today, are those selected to take-over the country's leadership. This shows that the Revolution was not a matter of taking-over power. We took from Somalis and hand... education are backward. You ... having the mind and educa... tion, we, having the strength and the Somali nation supporting us, let us now jointly work to take our people and ... country out of ignorance, of ... begging, hunger and disease.

Let us first rely on our strength, on our ability and on ourselves. If some thing is left to be done or a gab is still left to be filled in, it is not then a shame to ask for assistance or help. But assistance should be something to support what you have done yourselves and not, as it used to be, that everything should be done for us by foreigners or that we should wait for everything to come from foreigners.

The Government's programme shall be worked out but our principles should be based on the truth. We should not formulate a beautiful and detailed programme which is worthless.

If we can cultivate only a single farm, Well, let us work on that single farm and work hard on it. And if we could do more, let us try. Our plans and projects should be realistic and formulated to the level of our ability and our education.

We shall be in need of experts. They should do for us what we want and not what they want. This is because we know the difficulties and problems of our country and people. A foreigner ...

Warqaddu waxay ahayd barnaamij, muddo gaaban soconaya, oo diiradda lagu saarayay SRC waxa ay doonayso in ay qabato. Waxaa ku xusan laba arrimood oo muhiim ah, aanse meesha ku faahfaahsanayn. Kuwaas oo kala ah waqtiga SRC xukunka haynayso iyo waxa ay ka qabanayso dalalkii maqnaa. Midda hore, warqaddu waxay ka leedahay in muddo munaasib ah doorasho la qaban doono.Taas oo loo fasiran karo in ay doonayaan inay xukunka weligood haystaan. Qodobka la xiriirey qaybaha Soomaaliyeed ee weli gumeysiga ku jirey, waxaa laga dhadhansan karey in Soomaaliya ka hartay heshiisyadii Cigaal la galay dawladaha Kenya iyo Itoobiya oo ay warqadda ku caddahay in dalalka maqan lagu raadinayo si nabad ah. Warqaddu waxay sheegeysaa oo kale in kacaanku ku socon doono siyaasad dhexdhexaad ah, iyo qodobbo kale.

Anigu qof ahaan wax welwel ah isma aanan gelin oo way ii caddayd in aniga iyo Siyaad Barre aannaan wada shaqayn karin, isaga oo tan iyo 1956kii colaad ila daba taagnaa. Muddo bil ah kaddib ayuu igu amray in aan Muqdisho soo galo, markii aan u tageyna wuxuu ii sheegay in la igu magacaabay Qunsulka Soomaaliya ee Suudaan. Xilkaas waan diiday, waxaana u arkay xaqiraad iyo musaafiris. In xilkaas la ii magacaabayo, waxaa hore iigu sheegay Janan Caynaanshe oo aan saaxiib ahayn, isaga oo iigu daray in xilkani yahay ku meel gaar, oo danta laga leeyahay ay tahay in dibadda lagugu hayo inta Siyaad Barre lugihiisa ku istaagayo. Markaas kaddibna waa lagu soo gelinayaa oo xabsiga ayaa lagu dhigayaa, ee taladu adiga ayay kuu taal. Ma garan, mana weydiin wuxuu iigu sheegay arrintaas. Waxaanse u malaynayaa in uu ula jeedey in aan yeelo beddelkaas oo dabadeedna aan fakado. Anigu waan diidey jagadii la ii magacaabay. Arrintaasi waxay ka xanaajisey SRC oo dhan, dabadeed Siyaad Barre wuxuu amar ku bixiyey in xabbiska la ii taxaabo.

Siyaad Barre wuxuu dawladnimada ka qabay afkaar yaab leh, taas oo muujinaysa in uusan weligii isku deyin in uu bal xoogaa ka ogaado siyaasadda iyo xiriirka dunida. Siyaad wuxuu aamminsanaa in ayan dawlad yari jiri karin haddii aaney ku tiirsanayn dawlad weyn. Sidaas awgeed, wuxuu mudda gaaban gudeheeda isu dhiibay Midowga Soofiyeetiga, taas oo gacmo furan ku soo dhowaysey, ayada oo u

THURSDAY 23 OCTOBER 1969

# OCTOBER ☆ ST

PRINTED AT THE PEOPLES PRESS
ALL DAYS EXCEPT FRIDAYS

PEOPLE'S DAILY NEWS

PUBLISHED BY MINIST
MOGADISHU —

# REVOLUTION: 1st Announcem

## SRC ACTS ON BEHALF OF THE PEOPLE

**KNOWING:** The sacred right of the people and solemnly understanding the Charter of the United Nations and the Charter of the Organization of the African Unity;

**DETERMINED:** to collaborate all the people for the aspiration of liberty, justice and world peace and particularly with peace loving peoples and social justice;


**STRONGLY:** decided to consolidate to preserve the independence of the Somali nation for the exclusive welfare and interest of the Somali people and to create a socially founded with the principle of popular sovereignty, equality and justice and the right of the Somali citizens, without distinctions, for better social life,

### DECLARATION

[illegible]

**As from 0600 Hrs today (October 23) all traffic — air, land and sea — within the Somali Democratic Republic, shall be normal. Airports, airspace and seaports are open to traffic.**

[illegible]



## Swearing: To Protect and To Prosper

On this Holy Quran is the gun, the helmet and the hand of the Somali soldier — the protector of the nation. He swears, among other things, to serve his people and his beloved land to the best of his ability. Whether he is the private soldier who is standing erect on sentry under the cruel sun at the remote border post or the most senior officer planning at the Supreme Revolutionary Council Headquarters here in the capital city, the armed Forces have undertaken a solemn pledge to fulfill their responsibility not only to protect but also to prosper the Somali Democratic Republic. The official text of the swearing:

«In the name of God I swear to be loyal to the Somali Nation, to observe loyally the Military Rules and the laws of the nation and to obey unhesitatingly the orders of Superiors.

I swear to behave with honour, courage and discipline in every circumstance of peace and war, to maintain secrecy on all Military matters and to use every possible care in preserving in perfect efficiency, the arms, means, and equipments entrusted to me.

In case I fail to keep faith to my solemn oath, it should fall on me the curse of God, the severe punishments of law and the contempt of all.»

## 1.508 Anti–V Arrested

**TOKYO October 23. (Ce... ple were arrested when dem... Vietnam broke out througho...**

Of the total of 1,508 people arrested, including 80 women, 1,221 were seized in Tokyo. This was the largest number of people arrested in one day in Tokyo. During Okinawa day on April 28, 1,000 people were arrested. At that time ... people were arrested in Tokyo in last year's demonstrations against Japan's al...

Xigasho: Wargeyskii Somali News , oo loo bixiyey October Star,. Maqaalkan waa kii ugu horreeyey ee ku soo baxay magaca cusub ( October Star) , bishii Oktoobar, 23kii, 1969kii.

baahnayd in ay ka samaysato Badweynta Hindiya saldhigyo ciidan. Siyaad wuxuu Midowga Soofiyeetiga u sheegay in uu yahay nin hantiwadaag ah oo doonaya in uu dalka ka hirgeliyo habka hantiwadaagga, sidaas awgeedna uga baahan yahay taageero dhinac walba ah. Midowga Soofiyeetigu wuxuu bilaabay in uu u fidiyo kaalmo dhaqaale, ciidan iyo mid farsamaba. Intaas waxaa u dheeraa talada siyaasadeed oo ay siinayeen. Waxay ku qanciyeen in ayan dawladi hantiwadaag noqon karin haddii aaney dhaqaalaha dalka gacanta ku hayn. Sidaas oo kale waxay u sheegeen in aan hantiwadaag la dhisin haddii aan shacbiga gacanta lagu hayn oo laga ilaalin in aan siyaasado kale lagu jahawareerin. Waxaa kale oo ay ku yiraahdeen in loo baahan yahay jiritaanka hay'ado sirdoon iyo kuwa cadaadis oo daafaca xukuumadda hantiwadaagga ah.

Siyaad Barre wuxuu, isaga oo ku socda talooyinkaas, muddo gaaban ku qarameeyey dhaqaalihii dalka, sida bangiyada, shirkadaha waaweyn, ganacsiga dibedda, iwm. Qaramaynta dhaqaalaha waxaa looga dan lahaa in dawladdu wax walba maamusho oo iyadu ka taliso qoondaynta dhaqaalaha. Tallaabadaasi waxay soo afjartay habkii dhaqaalaha xorta ah ee hore dalka uga jirey. Dadkii badnaa oo dhaqaalaha ku lug lahaa waxay ku soo baxeen shaqo la'aan, waxaana khasab ku noqotay in ay dawladda hoos tagaan ama dibadda u qaxaan. Sidaas oo kale, wuxuu furay xafiis loogu magacaabay ‘ xafiiska siyaasadda’ oo loo xilsaaray in uu dhiso ururrada bulshada, sida kan shaqaalaha, dhallinyarada, haweenka, iskaashatooyin iwm.

Tallaabadaani waxay Taliska u fududeysey in ay dareenka bulshada la socdaan, kana sifeeyaan waxa ay ku tilmaameen ‘ canaasiirta kacaandiidka ah’ . Ururradaas waxaa ka farcamay urur hoosaadyo kale oo sii xakamaynayay xorriyadda shacbiga, isla markaas ku abaabulayay dacaayadda kacaanka sida dhismaha bulsho hantiwadaag ah. Isla muddadaas waxay abuureen hay' adihii cadaadiska oo ay ugu horraysey hay' addii nabadsugidda Soomaliyeed (NSS), taasoo lagu mataaneeyey, dhismeheedana looga dayday hay' addii sirdoonka ee Midowgii Soofiyeetiga (KGB). Hay'adda NSS waxaa loo dejiyey sharci gaar u ah oo awood u siinayay in ay dalka ka samayn karto wax allaale wixii ay doonto. Waxay awood u lahayd in ay qaban karto qofkii ay

doonto, heer kasta derejadiisu ha ahatee, xirto, jirdil ku samayso, dalkummarka ka qaaddo (baasaboorka), shaqada ka saarto, dugsiyada xirto, isu socodka dalka joojiso, iwm. Waxaas oo dhan iyada oo aan cid aan Siyaad Barre ahayni faraggelin karin. NSS-ta wuxuu madax uga dhigay Axmed Saleebaan Cabdalla oo gabadhiisa qabay, Golaha Sare ee Kacaankana xubin ka ahaa. Hay'adda kale ee cadaadiska shacbiga loo dhisay waxay ahayd Maxkamadda Badbaadada Qaranka , taas oo u xilsaarnayd denbiyada ciqaabta iyo dacwad kasta ee ay dawladdu dhinac ka tahay. Maxkamaddaasi wixii ay xukunto racfaan lagama qaadan karin. Maxkamadihii caadiga ahaa waxaa loo reebay oo keli ah denbiyada yar yar ee rayidka.

Maxkamadda Badbaadada waxaa guddoomiye looga dhigay Maxamuud Geelle Yuusuf oo xubin ka ah golaha sare ee kacaanka. Siyaad Barre wuxuu mahadiyey taladii uu Ruushku siiyey, oo uu mudda gaaban ku helay hab habaysan oo u fududeeyey sidii uu dalka gacanta ugu dhigi lahaa, dadkana cabsi joogto ah ugu hayn lahaa, dhaqaalaha dalka iyo macaawinada dibadda ka soo gashaba uu keli-maamul ugu haysan lahaa. Markii uu mahadiyey habka hantiwadaagga ah ee u suurtageliyey in hadalka Siyaad Barre ka soo baxa, ama wareegto uu soo saaro, ay isku si dalka uga hirgalaan, ayuu damaashaadkii loo dhigey sannadguuradii ugu horraysey ee Taliskiisa, soo saaray waxa uu ku magacaabay ‘ Warqaddii Labaad ee Kacaanka’ taas oo uu ku sharciyeeyey in mabda’ a (aydeolojiyada) kacaanku yahay Hantiwadaag Cilmi ku Dhisan.

Markii la bilaabay in wax la iska weydiiyo Hantiwadaagga Cilmiga ku Dhisan, Siyaad Barre wuxuu ku macnayn jirey in ay ka duwan tahay tan Ruushka looga dhaqmo, oo hantiwadaagga aannu qaadannay uu yahay wada shaqayn iyo wax wada qaybsi xalaal ah. Fasiraaddaas ayaa keentay in qof waliba sidii uu rabo u fasirto, iyada oo mar walba laga shidaal qaadanayo hadalka hoggaamiyaha, qofkii ka leexda ay ciqaab adag meel u taal. Run ahaan habka diktatooriga ah ee Siyaad Barre qaatay, wuxuu aad iyo aad ugu habboonaa dabeecaddiisa. Sida dadka yiqiin oo dhammi garan karaan, Siyaad Barre wuxuu ahaa nin meel walba belo uga jeeda oo shaki yar oo gala ama aragti tiisa ka duwan oo uu maqlo ula ekaadaan shiddo ku soo fool leh oo loo baahan yahay in

laga hortago. Siyaad Barre wuxuu ahaa nin aan saaxiibtinnimadiisa la isku hallayn karin. Waa la wada og yahay halka uu dhigay Janan Qoorsheel oo bilowgiiba afgenbiga taageeray, si uu uga takhalluso wuxuu ku eedeeyey in uu afgenbi abaabulayay, dabadeedna uu xabbiska u taxaabay. Waa la og yahay halka uu dhigay Janan Salaad Gabayre oo markii ay is-afgaran waayeen, isaga, Janan Caynaanshe iyo G/Sare Cabdulqaadir Dheel Cabdulle Islaan oo mar hore ciidammada laga saaray sida uu meel fagaare ah ugu toogtey. Muddadii uu dalka ku amar-ku-taaglaynayay, Siyaad Barre hadba derejo cusub buu isu caleema saari jirey, derejadaas oo la saanqaadeysey hadba dhinaca ay u janjeerto siyaasadda quwadda uu dalka hoos geynayay. Markii uu Ruuska xiriirka wanaagsan la lahaa wuxuu isu caleemasaaray Xooghayaha Guud ee XHKS. Muddo kaddibna, wuxuu isu caleemasaaray Madaxweynaha Soomaaliya.

## NOLOSHA XABBISKA (1969-1975KII)

Bilawga bisha Disembar 1969kii, goor ay tahay waabberi, waxaa gurigayga yimid ciidan fara badan oo uu wato Janan Salaad Gabayre. Kooxdii gurigayga soo gashay waxay ii shegeen in aan xirnahay, waxayna igu yiraahdeen intii aannu ku jiidi lahayn waxaa kuu sharaf roon in aad tartiibtaada noo raacdid. Waxaan ku iri: ' Waa yahay ee ii oggolaada in aan soo lebbisto' .

Sida la og yahay, mar haddii aad xiran tahay tallaabo kasta oo aad qaaddid waxaad u baahan tahay in aad fasax u heshid. Markii la ii oggolaaday, qolkaan galay oo waxaan soo lebistey dhar caadi ah. Baabuur baa la i saaray oo waxaa la i geeyey meel ku dhow Biraha dhaadheer ee anteenooyinka Radio Muqdisho oo ruushku dhisay kayn u dhow oo xagga galbeed magaalada Muqdisho ka xigta.
Halkaas waxaan ugu tegay Maxamed Faarax Caydiid oo hore meesha loo keenay. Malaha Caydiid looma sheegin in la xirayo oo dharkii ciidanka buu lebisnaa. Raggii na wadey looma sheegin meesha nala geynayo. Salaad Gabayre iyo sargaalkii na wadey ayaa faqay, dabadeed way israaceen oo SRC bay amar ka doonteen. Sargaalkii baa goor ay tahay barqo dheer soo noqday. Wuxuu yiri: ' Ina keena' .

Nin walba askari baa gacanta loogu xiray. Halkii baa nalaka waday, waxaan qaadnay waddada Afgooye oo waxaa nala geeyey magaalada Baraawe, dabadeed waxaa naloo gudbiyey xabbiska. Waxaa la damcay in nala geliyo qol tuugada lagu xiro oo wasakh miiran ah. Waannu diidney. Waxaannu ku niri: ' Waxannu nahay saraakiil, oo nama qabato in meeshaas oo kale nalaku xiro' . Kaddib way isku noqdeen oo waxay go' aan ku gaareen in meel kale nala geeyo. Waxaa nala geeyey daarta magaalada ugu weyn oo hore u ahaan jirtey Qasrigii Barqash, Suldaankii Sinjibaar oo gumeysigii ka hor saldanadiisa ku soo fidiyey gobolka Banaadir. Waa daar saddex dabaq ah. Waxaa nala geeyey qol ku yaal dabaqa saddexaad, kuwa hoosena waxaa la dejiyey askartii. Si fiican baa naloola dhaqmi jirey, cunna caadi ahna waa nala siin jirey. Daartaas waxaannu ku jirney afar bilood iyo toban beri.

Maalin maalmaha ka mid ahayd, ayaa waxaa noo yimid kaaliye caafimaad oo la oran jirey Maxamed Saalim Musalim (Yemeni-Soomaali). Wuxuu ahaa dadka faaliya. Intuu wax fiirfiiriyey ayuu yiri ' Alla meesha la idiin wadaa fogaa!' . Waannu isfiirinnay oo iska aammusnay. Habeenkii danbe, ayaa ciidan soo cammiray daartii aannu ku xirnayn. Baabuur baa nala saaray, waxaana toos naloo geeyey gegidda diyuuradaha ee Muqdisho. Halkaas waxaa joogey dhowr sargaal oo SRC-da ka tirsanaa. Saraakiishaas waxaan ka garanaayay Dafle iyo Geelle.

Gegida dayuuradaha waa la xiray oo saraakiil baa hadba dhinac u ordaysey, kuwo kalena gooni-gooni bay u faqayeen. Annagu waannu u jeednaa dhaqdhaqaaqa badan ee meesha ka socda, mase annu kala saari karin in annaga naloo tashanayay iyo in ay hawlo kale ku hawlanaayeen. Sida caadiga ah qofka xabbisan tuhun baa dila. Saraakiishii SRC-da ka tirsanaa, waxay u yeereen sargaal la oran jiran Sanbalooshe, kaas oo ay waraaq isla meeshii ugu dhiibeen. Sidayadii baa nin walba askari gacanta loogu xiray, dabadeed dayuurad baa nala saaray. Waxaa nalaka dejiyey goor aroor ah gegida diyuuradaha ee Hargeysa kaas oo, sidii ka dhacday kii Muqdisho, dhaqdhaqaaqii laga xiray. Dayuuradda markii aannu ka soo deganney, waxaa nala wareegey sargaalka xukuma xabbiska Mandheera ee ciidanka Asluubta Xasan Cabdi Khayrre. Xasan waa nin sharaf leh oo dad yaqaan.

Wuxuu noo sheegay in la yiri: ' Iska hay' oo aan loo sheegin muddada uu na haynayo. Waxaa kale oo uu noo sheegay in uu cunno iyo daawo na siinayo, uusanse wax kale noo qaban karin. Waxaa nala geeyey xabbiska Mandheera, dabadeedna waxaa nalaku xiray qolkii lagu hayn jirey dembiilayaasha dilka ku xukuman markii waqtigoodu dhammaadana lagu daldali jiray oo xarkihii suran yihiin. Qolku ma lahayn musqul caadi ah, waxaase ku taal mid macmal ah oo laga sameeyey caag oo annaga naloo dhigay.

Xabbiska Mandheera wuxuu ku yaal tog hawo fiican leh oo u dhexeeya Berbera iyo Hargeysa. Waxaa dhisay Ingiriiskii; waa xabbis si fiican u habaysan oo ay u dhan yihiin adeegyadii xabbisyada lagu yiqiin. Adeegyada ku yaal waxaa ka mid ah meelo maxaabbiista lagu baro xirfado kala duwan, si ay u shaqaystaan markii ay xabbiska ka soo baxaan, goobo lagu cayaaro, qolweyne wax lagu akhristo. Waxaa ku yaal qolal dadka dilka ku xakuman lagu dilo oo kan aannu ku jirney uu ka mid yahay. Waxannu aad iyo aad ugu liibaanney maktabadda xabbiska, oo aannu ka helnay kutub badan oo aannu akhrisanno oo wakhtiga isku dhaafinno. Toddobaad walba waxaannu akhrisan jirnay kutub kala mowduucyo ah. Mar aan askarta weydiiyey halka ay ka heleen kutubta badan, waxay iigu jawaabeen in ' Peace-corps-kii' Maraykanka ahaa ee Siyaad Barre uu dalka ka saaray, u dhiseen xabbiska maktabadda aad u cammiran, sidii ay dalka uga baxeen ayaanse waxba lagu soo kordhin'. Nolosha xabbisku waxay ahayd caadi, si wacan baa naloola dhaqmi jrey. Taliyuhu wuxuu gaarey heer uu nafaqada noogu siyaadiyo caanaha sac uu meesha ku haystey oo carruurtiisa loo lisi jirey. Dhowr goor baannu ka cudurdaarannay.

Subaxdii markii dibadda naloo saaro, waxaannu ku madaddaalan jirney, geed xerada ku yaal oo loo yaqaan ' Dhaameel Bilaadi' oo miro leh. Geedkaas baannu sidii ciyaalka qoryo ku tuuri jirney si miro noogaga soo daataan. Geed-tuurka waxaannu ka dhigannay madaddaalo iyo miro raadis. Halka maxaabbiistu hawllan ku ahaayeen cayaaro iyo raadinta miraha dhaameelka. Caydiid wuxuu ku jirey buuq nafsiyan ah, mar hore buu u socdaa, mar goobta ayuu ku wareegaa, mar walba hoos buu u jeedaa oo marna madaxa kor uma qaadi jirin, hadba faraha buu wax ku fiifiiqi jirey, oo intaas wax aan loo

jeedin buu la hadli jirey. Way muuqatey in xabsigu aad wax u yeelay, oo maxaabbiista kale markay arkaan xaaladda uu ku sugan yahay way ka nixi jireen. Markii aannu Xabbiska Mandheera ku jirney muddo dhan saddex sano, ayaa Mandheera ciidan hor lehi nala wareegay. Ciidanka nala wareegay waxaa watey sargaal ka tirsanaa ciidanka Asluubta oo la yiraahdo Axmed Cabdi Xaabsade, kaas oo amar lagu soo siiyey in uu Muqdisho dib noogu cesho. Markii dayuuraddii nalooka soo qaaday Hargeysa ay cagaha soo dhigatay gegida dayuuradaha ee Muqdisho, waxaa toos naloo geeyey Xabbiska Dhexe. Halkaas oo, sidii nalooku galay xabbiskii Mandheera, oo kale nala geeyey qaybta lagu xiro ' dil-sugayaasha', gaar ahaan qolalkii ay Caynaanshe, C/qaadir Dheel iyo Gabayre ku kala xirnaan jireen, kuwaas oo derbiyada qolalka ku qoray taariikhdii ay soo galeen iyo taariikhdii ay ka baxeen oo ah maalintii la dilay.

In markasta nala ku xiro qolalka ' dil-sugayaasha', dabcan waxa ku jirtey xikmad. Mase kala saari karo in loola jeedey in nala cabsi geliyo, iyo hore go'aan nalooka gaarey oo naloo diyaarinayo dilka. Ujeeddo saddexaad waxay noqon kartey, in aan jahawareerno oo ay cabsidu naga badato, oo aannu Siyaad Barre gacmaha u dhiganno si uu noo cafiyo. Haddii la eego duruufaha dalku ku jirey saddexda aragtiba waxay noqon kareen suurtaggal. Waxaase isugu kaaya xirmi waayay waxa markasta naloo geeyo qolalka ' dil-sugaayaasha' ee ku yiil labada xabbis oo dalka ugu waaweyn Mandheera iyo Muqdisho, iyo sida hagaagsan ee naloola dhaqmi jirey.

Wakhti danbe ayaan ogaanney in xoogaa arrintayadu ku adkaatay SRC-dii. Waxay garan waayeen sidii nalaka yeeli lahaa. Mar xaalkayaga looga dooday SRC-da, waxaa aqlabiyaddoodu isku raacday in nala dilo, waxaase go'aankaas si qayaxan isu hortaagey Siyaad Barre. Markaas ayaan gartay waxa naloo geeynayay qololka ' dil-sugayaasha.' Waxaa kale oo ii caddaatay in Siyaad Barre uusan ixsaan noo galeynin ee wuusan naga baqayn, oo si fiican buu dalka gacanta ugu dhigay, dabadeedna wuxuu gartay in aannaan waxba yeeli karin. Sidii xabsigii Mandheera ayaan Caydiid hayn kari waayay, qayladiisiina lala joogi waayay. Cid arrintiisa danaynaysey ma ayan jirin, illoowse waxaannu ahayn dad la xooray ee ayan xataa askartu ka danqanayn xanuunka

hayay ninkaas walaalkood ah. Arrintaas waxaan u gartay in amar lagu siiyey in aan marna xaggayaga la soo eegin, ama ciqaabta dalka ka socota ayaa qof walba waxay u rogtey in dareenkii bini' aadannimadii laga suuliyey. Waxaan maalin walba maqli jirey qayladiisa iyo askarta oo aammusineysa. Maalin maalmaha ka mid ah baan horjoogihii ku iri: ' Walaalow waxaan kaa codsanayaa in Caydiid qolkayga la keeno, aniga ayaa dejinayee' . Nasiibdarro waa uu ka sii daray. Xataa wuxuu gaarey heer ay saabuuntii qubayska nalooku keenay ula ekaato rooti, oo inta uu gacanta ku soo qabsado uu cuno, markaas baan ku boodi jirey si aan uga celiyo. Inta uu i soo fiiriyo buu isaga oo xanaaq indhaha la caddaynaya igu oran jirey "Waryaa rootiga ii daa jaajuus la i daba dhigay baad tahaye' . Sidaas oo kale, markii aan seexo is iraahdaba wuxuu soo qaadan jirey baaldiga qubayska oo madaxa iiga garaaci jirey. Waxaan isku deyi jirey in aan dejiyo, kumase aanan guuleysan, madaama xanuunka hayay uu ka weynaa wax sheeko lagu dejin karo.

Xabsigu turaal (arxan) ma leh oo dhibkaas oo dhan waa lagugu fiirsanayaa. Markii aan u adkaysan kari waayay rafaadka ninkaas hayay, baan afkayga furtay oo horjoogihii ku iri: "War soo bini' aadam ma tihiin, ma weydinnaan u jeedin ninkaas meesha ku dhimanaya' . War dad iska dhiga oo madaxdiinna u sheega in ninkaas takhtar loo geeyo. Haddiise la goostay in nala dilo, u sheega madaxdiinna in naloo dilo si ragannimo leh ee aan nala silcin. Waxaa kale oo aad xusuusisaan in aannu saraakiil sare nahay oo inta aannu nool nahay si xushmad leh nala kula dhaqmo." Horjoogihii aad buu ii dhegaystey, dabadeed inta uu indhaha igu gubay buu iska dhaqaaqay. Iimaba uusan jawaabin. Waxaa taas ka daran in uusan mudda dheer wax war ahba igu soo celin. Aniguna maalin walba meeshaydii baan qayladayda ka wadey.

Dhowr toddobaad kaddib, bay horjoogihii iyo askar uu watey qaybtii aannu ku xirnayn soo galeen, dabadeedna Caydiid bay qaadeen,
Soo noqodkoodiina waxay ii sheegeen in ay geeyeen isbitaalka Laasareeti, halkaas oo ' Electric Shock' lagu saari jirey. Alxamdu lillaahi, Caydiid aad iyo aad buu muddo gaaban uga soo kabtay jirradii haysey. Sidaasna waxaannu uga nasannay dhibkii uu nagu hayay. Intii aannu xabiskaan ku jirney marna nalama siin kutub aannu akhrisanno, raadiyaha ayaanse dhegaysan jirney. Waxaa dhacday in aannu maalin

maalmaha ka mid ah raadiyaha ka dhegaysanney in raggii siyaasadda u xirnaa oo dhan xabbiska laga sii daayay. Waxaa naga soo baxday neef oo waxaa na gashay rajo ah in annagana nala sii deyn doono. Nasiibdarro dhowr maalmood, juuq nalooma oran, oo run ahaan Siyaad Barre waaba iska kaaya illaawey. Maalin uu, Taliyaha Ciidanka Asluubta, Janan Ismaaciil Axmed Ismaacii, fursad u helay in uu Siyaad Barre la kulmo ayuu weydiiyey waxa aniga iyo Caydiid nalaka yeelayo. Markaas buu ugu jawaabay in uu iska kaaya soo daayo. Yaab, waa nin xukunkiisii intu adkaystay aan cidna welwel ku hayn. Sidaas ayay 20kii Oktoobar 1975kii ku soo afjarantay mowjaddii na sidatay oo hadba xabbis, xabbis kale noogu dhiibayay.

## ISKU DAYGII AFGENBIGII CIRRO

Sida caadiga ah dalalka Afrika awoodda oo dhammi waxay ku urursan tahay caasimadda, wax kastana halkaas baa laga maamulaa, sidaas awgeed, isku day kasta oo xukuumadda lagu afgenbiyayo waxaa khasab ah in caasimadda laga bilaabo. Haddii isku dayga afgenbiga laga soo bilaabo meelo ka baxsan caasimadda, waxaa halis loo yahay in arrintu u dillaacdo dagaal sokeeye ama dalku kala go'; inta ay ciidammadu jidka ku soo jiraan, ayay xukuumaddu heleysaa fursad iyo wakhti ay heegan ku geliso ciidammada caasimadda ku sugan, isla markaasna ku dhaqaaqdo talo iyo hawlgallo ay ku kala furfurto ciidammadda afgenbiga wada. Annaga oo arrintaas ka duulayna ayaannu, kaddib markii aannu isku dubbarridney qorshaha afgenbiga, go'aan ku gaarney in afgenbigu ka bilawdo caasimadda. Fulinta xilalkaasna waxaannu u xil saarnay G/ Sare Maxamuud Sh. Cismaan (Cirro).

Arrintaas ayaa keentay in afgenbiga lagu magacaabo Cirro. In kasta oo afgenbigu dhacay 1978kii, abaabulkiisu wuxuu bilowday dhammaadka 1975kii bil kaddib markii aan xabsiga ka soo baxay. Durba markii aan soo dhammaystay xabsigii dheeraa, waxaan la kulmay Siyaad Barre, waxaana u sheegay in uusan caafimaadkaygu wanaagsanayn oo aan doonayo in aan dalka dibaddiisa isku soo daaweeyo, taas oo uu ii diidey. Run ahaan, ma jirin wax jirro ah oo aan qabay, waxaanse

doonayay marmarsiiyo aan dalka uga baxo. Isaga oo iska dhigaya nin ka welwelaya arrimaha dalka ayuu Siyaad Barre igu yiri: Waxaa loo baahan yahay in dalka loo shaqeeyo, sidaas awgeed waxaan gartay in aan kaa dhigo maareeyaha guud ee ' Shirkadda Wagad'. Shirkadda Wagad waxaa lahaa dawladda, waxaana loo dhisay in ay la wareegto dhammaan hawlihii ay qaban jireen shirkadihii gaarka loo lahaa oo keeni jirey, iibinna jirey nooc kasta oo gaadiid ah iyo dhammaan qalabka dayactirka baabuurta. Waxay ahayd shirkad shaqo badan oo dakhli badani dawladda ka soo geli jirey.

Shirkaddaas la iiguma dhiibin aqoon iyo xirfad aan u leeyahay maamulka iyo maareynta dhaqaalaha oo waxba kama aanan aqoon, waxaase la iigu dhiibay in la i hawlgaliyo oo la iga hor-istaago in aan helo wakhti firaaqo ah oo aan soo ceshado xiriirkii caadiga ahaa oo aan xigto iyo saaxiibbaba la lahaa. In aan jagadaas cagajiid ku yeelo khasab bay igu noqotay. Sidaas oo kale, waxaan ku tashaday in aan dhaqdhaqaaqayga yareeyo, anigoo ogsoonaa in ciidammada nabad sugiddu ay ilaalo xoog leh igu hayeen.

Maalin maalmaha ka mid ah, ayaa Cirro wuxuu ila soo yeeshay xiriir aan toos ahayn. Wuxuu ii soo diray saraakiil dhallinyaro ah, kuwaas oo i soo gaarsiiyey farriintiisii. Nuxurka farriintaasi waxay ahayd in ay ka go'nayd in ay afgenbi sameeyaan oo Siyaad Barre xukunka ka tuuraan. Waxay ii sheegeen in ay doonayeen in aan la raadiyo dhaqaale ay afgenbiga ku abaabulaan iyo in aan meesha u fadhiyo talana ka siiyo hadba meesha ay hawli marayso. Dulucda hadalkoodu wuxuu ahaa in aan hoggaamiyo, dhaqaale u helo, qorshihii afgenbigana u diyaariyo, kana ilaaliyo in ay qaadaan tallaabooyin qaldan. Waxaan ku iri: ' Waxaad la xiriirtaan Abshir Muuse oo maareeye ka ahaa Wakaaladda Xoogga Korontada iyo Xirsi Bulxan oo Maareeye Guud ka ahaa Wakaaladda Muuska, waxaadna u sheegtaan in aan anigu idin soo diray'.

In kasta oo ay xukuumadda Siyaad Barre ku eedayn jirtey musuqmaasuq xukuumadihii ka horreeyey, waxaan muddo gaaban ku gartay in aan arrintaas waxba ka jirin oo xukuumadda Siyaad Barre tahay musuqmaasuqa hooyadiis. Waxaan muddo ku uruuriyey lacag

gaareysay ilaa saddex boqol kun doolar ($300 Kun oo doolar). Abshir Muuse iyo Xirsi Bulxanna waxay uruuriyeen lacag aanan hadda tiradeeda xusuusnayn. Run ahaantii, lacagtaan uruurinnay way ka yarayd baahida abaabulka, xoogaagii aannu uruurinnay ayaase si fiican hawlihii afgenbiga loogu maamulay. Natiijada ka soo baxday hawlaha abaabulka ay ku guda jiraan ayaa Cirro hadba warqad iigu soo qori jirey.

Dhammaadkii 1976kii ayaa warbixin la iigu keenay in uu Cirro doonayo in uu ku dhaqaaqo fulinta afgenbiga. Arrintaasi welwel bay i gelisey. Waxaan u yeeray Yaasiin Hurfe oo ahaa sargaal leh tababbar sare, Siyaad Barre ayaase ciidanka ka saaray oo ONAT (Wakaaladda Cagaf-cagafyada) u beddeley. Waxaan ku iri: ' Degdeg Cirro ugu tag oo inta aanu tallaabo qaadin ha ii soo sheego awoodda ciidan ee uu ku hawlgelayo'. Farriintii waa loo geeyey. Yaasiin markii uu igu soo noqday wuxuu ii sheegay in uu Cirro hayo 60 nin, uusanse la xiriirin ciidammada kale ee caasimadda jooga, oo ay ka mid yihiin kuwa taangiyada iyo madaafiicda. Mar labaad ayaan Yaasiin u diray Cirro una faray in tallaabadaasi ay tahay qar iska tuurnimo, isla markaasna sababayso in dad badani ku dhinto.

Markii aannu isugu nimid halkii aannu ku ballannay, ayaan Cirro weydiiyey in ay sax tahay farriinta Yaasin Hurfe iiga kaa keenay. ' Haa' buu iigu jawaabay. Waxaan dabadeed u sheegay in aan gartay in ay wixiisu ahaayeen laablakac ee aanu wax fikrad ah ka haysan waxa abaabul afgenbi yahay. Wuxuu igu yiri: "War geedkaani (Siyaad Barre) cago kuma taagna oo markii aannu weerar ku qaadno ayaa, inta aan isla legdamayno, guutooyin kale iga soo gaari doonaan, kuwaas oo hadda ku kala sugan Luuq iyo Hargeysa. Inta aan cabbaar aammusay oo fekeray baan ku iri Cirro: ' Bal wax yar i dhegeyso, waxna kaa qarin maayo oo shaki baa iga galay caafimaadkaaga. Marka hore, waxaad ii sheegtaa goorta ay ku soo gaarayaan ciidammada aad meelahaas fog ka sugeysaa'. Aniga oo jawaabtiisii sugin ayaan si cara leh ugu iri war waxaad waddaa waa isbiimayn aadan meelna ku gaarayn dawladna wax ku yeeli karayn. Ma waxaad dooneysaa in aad kumanyaal qof naftooda ku hurtid talo aan bislayn, taas oo haddii lagu dhaqaaqo la og yahay cawaaqib xumada ka dhalan doonta. Waxaan kula taliyey in uu degdeg



Cabdullaahi Yuusuf oo Maareeye looga dhigay Shirkaddii Fiat-Wagad sannadkii 1975-1976 dii.

u joojiyo dhaqdhaqaaqa uu hadda wado, laguna tallaabsado qorshe maangal ah oo afgenbi lagu samayn karo, kaas oo la saadaalin karo natiijadiisa. Ugu danbayntii waxaan ku iri: "Haddii aadan ku shaqayn tallaabadaas, waxaan kuu sheegayaa in, wixii mas'uuliyad ah ee ka yimaada hubsiimo la' aanta aad hadda waddaan, aanan anigu wax lug ah ku lahayn, taas oo aan weliba sheegi doono. Marka waxaan ku leeyahay in ay inoo wada wanaagsan tahay in aad dib u dhigtid, waxa aad hadda ku tala gashay' . Nasiibwanaag taladii waa uu iga qaatay.
Markaas kaddib ayaan Cirro si fiican ugu habeeyey qorshe aan hore uga shaqeeyey oo la xiriirey qaabkii uu afgenbigu u dhici lahaa. Waxaan ku iri: ' Qorshuhu waxaa weeye in marka hore la qabto Maxamed Cali Samatar oo ah Wasiirka Gaashaandhigga iyo Taliyaha Ciidanka, iyo Cumar Xaaji Masalle oo ah madaxa taangiyada iyo Saciid Faarax Gooje oo ah madaxa ururka Horseed ee Xamar-Jabjab fadhiya' . Saciid Faarax Gooje wuxuu markii hore xubin ka ahaa saraakiisha afgenbiga wax ka abaabuleysey, kaddibse dib buu u gurtay oo baqdin baa gashay, raggi shaqada la wadeyna wuxuu ku yiri: ' Waa nala ogaadaye ha la joojiyo hawsha' .

Cirro waxaan kula taliyey in uu ku dadaalo sidii gacanta loogu hayn lahaa Maxamed Maxamuud Guuleed oo madax ka ahaa ciidanka cirka, lana dhiirrigeliyo si uusan marna abaabulka uga bixin, taas oo aan u arkayney in ciidanka cirku uu muhiim u yahay afgenbiga, annaga oo cabsi ka qabney in markii la qabto ciidammada taangiyada iyo kuwa madaafiicda ay cirka ka garaacaan.

Qorshuhu wuxuu ahaa in markii laga soo jeensado qaybtaas hore ee hawlgalka, toos weerar loogu qaado Madaxtooyada, halkaas oo ay difaac kaga jiraan shan taangi, aaneyse u babac dhigi karin tangiyada tirada badan oo hore gacanta loogu dhigay haddana loo adeegsanayo qaybta labaad ee hawlgalka. Haddii qorshuhu sidaas u dhaco Siyaad Barre waa la qabanayaa ama waa uu fakanayaa, mid kasta oo ay noqotana afgenbigu waa guulaysanayaa. Cirro wuxuu igu wargeliyey in Siyaad Barre ku guda jiro diyaarinta dagaal Itoobiya lagu qaadayo oo ciidammada aynnu ku tashanayno loo dirayo dagaalkaas, sidaasna arrinta afgenbigu meesha uga baxayso.

Inkasta oo waxa uu ii sheegay ay saamayn ku yeelan karaan qorshahayaga, haddana waxaan ku qanciyey in talada afgenbigu ayan marna meesha ka baxayn, oo aynnu dib u soo noolayn doonno markii duruufu inoo saamaxaan. Maalmo kaddib sidii Cirro ii sheegay bay taladii Siyaad Barre ku dhammaatay oo waxa la bilaabay dagaalkii Soomaali Galbeed.

## DAGAALKII SOOMAALI GALBEED

Degdegga dagaalka loo galay iyo degdegga looga soo baxay, halista dalka la geliyey iyo burburka la gaarsiiyey oo uu ka soo kaban la'yahay soddon sano kaddib, waxay ka marag kacayaan in go'aanka dagaalka lagu galay uu ahaa mid qaldan oo la qaatay waqti khaldan. Arrintaasi waxay muujinaysaa in shacbiga Soomaaliyeed, haddii laga reebo Siyaad Barre iyo kooxda uu ku shaqaysan jirey, aanay wax talo ah ku lahayn tallaabadaas lagu hoogey. In kasta oo Idaacadaha laga sheegay in golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed (XHKS) uu gaaray talada dagaalka lagu galay, qof kastase u dhuun-dalooley hab-maamulka Siyaad Barre, wuu garan karey in aan XHKS wax go'aan ah arrintaas ka qaadan, oo uusan wax awood ah dalka ku lahayn, kaalintiisuna ku ekayd ' shaabbad wax lagu rasmiyeysto' .

Sida la og yahay, go'aanka ay Soomaaliya dagaalka ku gashay waxaa lagu qaatay xaafiisyo ka fog dalka Soomaaliya, waxaana ka danbeeyey dawlado shisheeye, kuwaas oo ka faa' iidaystey caadifadda iyo jahliga shacbiga Soomaaliyeed iyo xukuumad danaysi ku jirtey oo aan dal iyo dad toona dan ka lahayn. Sidaas ayay dawladaha shisheeye, iyaga oo u maraya dawlado daba dhilif u ah, ugu qunsadeen Soomaaliya siyaasad iyo steratiijiyad ku jihaysnaa sidii USSR looga saari lahaa mandaqadda geeska Afrika, dabadeedna badda Cas iyo badweynta Hindiyaba. Dawladaha Soomaaliya ka taageerayay dagaalka ay Itoobiya ku la jirtey waxaa ugu firfircoonaa Masar iyo Sacuudiga. Labadaas dawladood waxay ka midaysnaayeen oo keli ah, sidii ay wadajir gobolka uga fulin lahaayeen siyaasadda Maraykanka, balse waxay ku kala duwanayeen ujeeddada ay Soomaaliya ka lahayeen.

Halka Sacuudi Carabiya, iyada oo eeganaysa dano gaar u ah, waxay Itoobiya kala midaysnayd in aanay Soomaaliya mar danbe yeelan dawlad xoog leh oo saamayn ku yeelan karta geeska Afrika, Masarse waxay mar kasta u taagnayd in ay Soomaaliya noqoto dawlad xoog leh oo wakiil uga noqota danaha ay ka leedahay geeska Afrika.

Isaga oo danihiisa ka raacaya ayuu qaaday tallaabo uusan innaba ku tixgelinayn jiritaanka ummadda Soomaaliyeed ee ku kala nool Soomaaliya iyo Soomaali Galbeed. Aragtida Siyaad Barre waxay ahayd in uu ka faa' iido mooyee in uusan kolna dagaalka ku khasaarayn. Wuxuu qabay in haddii uu dagaalka ku guuleysto uu isu caleemasaari doono ' Halyeygii ummada Soomaaliyeed.' Sidaas oo kale ma jirin wax uu waayi lahaa haddii uu ku guuldarraysto dagaalka, isaga oo ballanqaad ka haystey dalalka Galbeedka in aaney marna Itoobiya, Ruushka iyo xulafadiisuba ka soo gudbi doonin xudduudda Soomaaliya, sidaas awgeedna uu xukunkiisa haysanayo, xataa haddii dagaalka looga adkaado. Arrintaas wuxuu ku mutaystay, xiriirka wanaagsan ee uu la yeeshay Galbeedka.

Xiriirkaas waxaa aabbe u ahaa, dayuuraddii Luftansa ee Jarmalka oo ay Falastiiniyiintii dayuuradda afduubtay ku soo dejiyeen Muqdisho, dabadeedna uu Siyaad Barre Jarmalka u fasaxay in ay dayuurradda ku furtaan gegida dayuuradaha ee Muqdisho. Arrintaasi waxay si aan la malayn karin sare ugu qaadday sumcaddii Siyaad Barre ku lahaa reer Galbeedka oo dhan, haba ugu horreeyeen Jarmalka iyo Maraykanka. Waxaaba la oran karaa in guuldarro kasta ee dagaalka ka soo gaartaa ay libin u tahay, oo ay ciidammada uusan ku kalsoonayni ku tirtirmayaan dagaalkaas.

Dalalka Carabta oo dhammi waxay Soomaaliya gacan ku siiyeen dagaalka ay Itoobiya kula jirtey, taageeradaasi waxay ahayd mid siyaasadeed, waxaana arrintaas tusaale u ah sida Carabta oo dhammi faraha uga laabteen xaaladda Soomaaliya markii ay dawladdii burburtay. Waxaa kale oo arrintaas tusaale u ah, marka laga reebo Yemen iyo Syria, sida ay burburka dabadiis uga dhaarteen in qof Soomaali ahi dalalkooda cag soo dhigo, halka dalal badan oo aan Carab ahayn, muslinna ahayn ay si bini'aadannimo leh u soo dhoweeyeen

una dejiyeen qaxootigii Soomaaliyeed. Goor habeen ah aniga oo gurigayga iska jooga ayaa Siyaad Barre ii yeeray, markii aan u tegey wuxuu ii sheegay in dalku uu dagaal ku jiro, xukuumadduna ku dhawaaqday xukun degdeg ah, si awoodda dalka oo dhan loogu jeediyo dhinaca dagaalka, haddii loo baahdana wax kasta xoog lagu maamulo. Wuxuu dabadeed igu yiri: ' Cabdullahi waxaan kuugu yeeray in aan kuu sheego in aan kugu magacaabayo taliyaha ciidammada aagga koofureed, kuwaas oo ay tiradoodu gaareysey 30kun oo askari oo wata hub nooc kasta leh' .

Ciidammada waxaan ka maqnaa muddo dhan siddeed sano, waxaana iigu danbaysey iyaga oo ah ciidan habaysan, maamul wanaagsan oo haybad qaran leh, balse wixii afgenbiga ka danbeeyey, waxaa soo foodsaaray isbeddello gurracan oo u dhalan rogey ciidan dano gaar ah loo adeegsado.

Durba markii Siyaad Barre xukunka faraha ku dhigay wuxuu bilaabay in uu ka sifeeyo saraakiishii kartida lahaa, hawlaha ciidammadana si fiican ugu takhasusay. Nasiibdarro, wuxuu ka dhigay, saraakiishii muddada dheer loo carbinayay hoggaaminta XDS iyo hanashada xirfadaha kala duwan ee ciidanka, maamulayaal degmooyin, gobollo, mashaariic, wakaalado iwm. Sidaas oo kale, Siyaad Barre wuxuu qaaday tallaabooyin uu ciidanka dib ugu habaynayo, si uu uga dhigo ciidan isagu leeyahay. Tallaabooyinkaas waxa ka mid ahaa:

- Ciidankii lagu carbiyey dabeecad qarannimo, buu wuxuu u rogey ciidan qabiil.
- Habkii maamulka ciidanku ku dhisnaa oo dhan buu meesha ka saaray oo ku beddeley mid ku dhisan maamul qoys.

Tallaabada kowaad waxay sababtay in cududda ciidanka laga dhigo mid ku dhisan qabaa'ilka xukunka isku bahaystay, kuwaas oo ah Marreexaan, Ogaadeen iyo Dhulbahante. Tan labaad waxay keentay in dallacaaddii, beddelaaddii iyo xuquuqdii kale ee ciidan lahaa laga dhigo mid lagu mutaysto qaab qabiil. Dhinaca kale waxaa si aad ah u kordhay, qalabkii iyo adeegyadii ciidanka, kaddib markii uu Siyaad Barre la galay heshiis saaxiibtinimo Midowga Soofiyeetiga 1974kii.

Sidaas oo kale waxaa kordhay tiradii ciidanka, taas oo suurtagelisey in, shaqa la'aanta dalka ka jirtey darteed, dhallinyaro badni ciidanka qorato. Laga bilaabo 1976kii, muuqaal ahaan Xoogga Dalka Soomaaliyeed wuxuu lahaa sawir ciidan oo aad u sarreeya, wuxuuse la luudayay hoggaan xumo, maxaa yeelay saraakiisha sare ayaa waxay u badnaayeen kuwo siyaasad ahaan darajooyinka lagu siiyey.

Siyaad Barre wuu ogaa in, saraakiishii uu garbaha u suray derajooyin aaney karti iyo xirfad ku mutaysan, balse reer hebelnimo lagu siiyey, aaney iyana meel iska bixin karin, ciidammadana dagaal gelin karin. Dabadeed waxaa Siyaad Barre sandulle ku noqotay in uu dib ugu yeero saraakiishii xirfadda lahaa ee uu tartiib-tartiib ciidanka uga sifeeyey. Anigu waxaan ka mid noqday boqolaalkii sargaal ee uu dib ugu yeeray. Amarkii Siyaad Barre waxaan qaatay aniga oo ka xun, aanse waxba samayn karin. Waxaana ogaa in haddii aan diido uusan markaan xabbis i geyneyn ee uuba toos ii dili lahaa. Arrintu waxay noqotay laba daran mid dooro. Ama ha ku dilo, ama dagaalka aadan aamminsanayn ku dhimo.

Waxaan ogaa in sarakiisha badan ee dib loogu yeeray oo aannu isku beesha ahayn loogu talaggalay in ay dagaalkaas ku wada dhintaan. Intii sharafdarro la igu dili lahaa, oo Soomaalida lagu oran lahaa waa khaa' in oo wuxuu diidey in Somaali Galbeed la xoreeyo, dadkuna iska rumeysan lahaa dacaayadda Siyaad Barre, waxaan door biday in aan dagaalka ku dhinto oo saxiibbaday dhibka la qaybsado. Maalmo kaddib, waxaan tegay qaybtii koofureed ee XDS ee taliyaha la iiga dhigay. Isla markiiba waxaan soo kormeeray fariisimmada ciidammada. Yaabka yaabkiis, waxaan durba indhaha ku dhuftay saraakiil badan oo aan horay u iqiin iyo kuwo aan anigu lixdamaadkii layli saraakiil dibedda ugu diray oo Siyaad Barre uu ciidammada ka saaray, maantase lagu khasbanaaday in ay iyagu dagaalka hoggaamiyaan.

Ciidammada aan meesha ugu tegay boqolkiiba sagaashan iyaga ayaa madax ka ahaa ururrada halkaas joogey. Keligey baa isweydiiyey ' Meeye, xaggee mareen wiilashii darajooyinka lagu raray'. Saraakiishii baan taliska ugu yeeray oo shir la qaatay, kaas oo aannu ku degsanney qorshihii aannu ku hawlgeli lahayn. Sida aannu

ogaannay, dagaalka ay dawladdu ku dhawaaqday looma samayn qorshihii dagaal ee ay ciidammadu ku hawlgeli lahaayeen, iyo tubta uu qorshahaasi goor walba ula saanqaadi kari lahaa hadba sida xaaladaha dagaalku isu beddelaan. Sidaas oo kale, ma jirin ku talaggal saad iyo taakulayn joogta ah oo ciidammada looga haqab tiri lahaa baahidooda badan. Ma jirin ku talaggal ciidan kayd ah oo beddela dhaawaca iyo dhimashada iman kartey. Mana jirin kayd hubeed oo lagu beddelo kuwa dagaalka ku baabba'a ama hub soo kordhaya oo dagaalka lagu xoojiyo. Intaas oo dhan waxay noqdeen kuwo laga sugayo dawladaha Siyaad Barre isbahaysiga leeyihiin. Hawlahaas la gabay oo dhammi, waxay Siyaad Barre khasab kaga dhigeen, in uu gacmaha u dhigto odayaashii qabaa'ilka Soomaaliyeed oo xukunkiisu uu mar hore karaamada uga qaaday si ay u buuxiyaan kaalintii ay dawladdisu gabtay. Wuxuu ka baryey in ay ciidan iyo sahayba ku taageeraan. Wuxuu baryada odayaasha ku barbar wadey jajuubid uusan waxba ka dhawrsanayn oo gaarsiisey in uu xoog ku qafaalo dhallinyaradii magaalooyinka joogtey.

Siyaad Barre, kama fekerin cadaawadda ay qof ahaantiisa iyo xukuumaddisaba u qabeen madax-dhaqameedyada uu gogosha u dhigtay si uu taagero uga helo, wuuna illaawey sidii xumayd ee uu odayaasha ula dhaqmay. Sidaas oo kale, markii uu isku furayay arrimaha qabaa' ilka, ma uusan garanayn in tallaabadaasi ku noqon doonto ' Pandora Box' mushkilad ku baahda oo uusan lug kala bixi doonin.

Markii aan qiimeeyey xaaladahaas oo dhan, waxaan goostay in aan qaybtii koofureed ee aan hoggaaminayay ku dagaal gelinno qorshe aannu taliskayaga ku degsanney. Goor ay subax hore tahay ayaan weerar ku qaadnay dhammaan aagagga ay xudduudka ka fadhiyeen ciidammadii naga soo horjeedey. Inkasta oo dayuuradaha cadawgu hakinayeen xawlliga uu weerarkayagu ku socdey, waxannu haddana, nasiib wanaag, ku guuleysanney in aannu mudda gaaban ku baabbi' inno difaacii cadawga. Tallaabadaasi waxay noo suurtaggelisey in aannu dhowr beri gudahood ku gaarno Nagayle oo xadka Soomaaliya u jirta 360km.

Markii aannu halkaas difaac ka galnay ayaannu Muqdisho weydiisanney saad iyo taakulayn degdeg ah, kuwaas oo aannu baahi weyn u qabney, si aannu horay ugu soconno, wax jawaab ahse nalakuma soo celin. Marba marka ka danbeeya ee dagaalku sii dheeraado, waxay cadowga u ahayd guul, maxaayeelay waxaa si joogto ah u soo gaarayay hub, saad iyo ciidammo u dagaallama, kuwaas oo looga soo daadguraynayay Midowga Soofiyeetiga, Cuba, Yementa Koofureed, Jarmalka Bari, iwm. Arrintaasina ma ahayn wax lala yaabo, maadaama la ogaa in Midowgii Soofiyeetigu go'aan ku gaaray in aan waxba laga beddeli karin xaaladda jirta; ciddii isku-dayda in ay xoog ku beddeshana xudduudaha Itoobiya aan loo dulqaadan doonin. Digniintaas Siyaad Barre waa ogaa, waase uu iska indhatirey oo wuxuu ku riyoonayay in dawladihii dagaalka geliyey ay ku taageerayaan qabsashada Soomaali Galbeed.

Markii ay ii muuqatay in weerarradii ka socdey aaggii gobollada woqooyi wax horumar ah laga gaari waayay, isla markaas culays xoog leh laga soo saaray dhinaca Itoobiya, buurihii Kaaraa Mardha la dhaafi waayay, khasaarooyin badanina ay ciidammadayadii soo gaareen, ayaan waxaan la xiriiray Siyaad Barre, waxaana u sheegay in aan hayo qorshe dhibaatooyinka kor ku xusan wax looga qaban karo. Siyaad Barre wuxuu ii soo diray dayuurad Muqdisho i geysa. Isla markii aan tegeyba waa uu i qaabilay oo hawshii baannu gudaggalnay. Waxaan halkaas ku soo bandhigay kaartadii iyo qoraalkii aan ku saleeyey qorshaha aan u soo jeediyey.

Waxaan u sheegay in qorshahaasi hirgal noqon karo haddii ciidanka aan xukumo la siiyo saad iyo taakulayn degdeg ah, lana xoojiyo. Waxaan ballan qaaday in haddii la i siiyo waxaan u baahnahay, in aan ciidanka degdeg u dhaqaajiyo oo Adis-Ababa ka soo weerarayo koonfurta. Taasi waxay, ciidammada cadowga ee difaaca kaga jira Harar iyo Dirir-dhabe oo ciidankeenu mari waayey, khasab kaga dhigi doontaa in ay dib u soo noqdaan oo ay xooggooda saaraan difaaca caasimadda Addis ababa, markii taasi dhacdana waxaa soo daba geli doona ciidammadeennii oo dhabarjebin ku samayn doona, ciidammadii u soo noqday difaaca Addis Ababa.

Siyaad Barre si fiican ayuu ii dhegeystey, kaartadiina u darsey, dabadeedna wuxuu igu yiri ' ka soco' . Anigu durba waan iska gartey in uusan arrinta raalli ka ahayn. ' Ka soco' ujeedadeedu ma ahayn in uusan qorshaha jeclaysan, balse waxaa dhib ku ahayd in uu aqbalo tala aan isaga ka soo unkamin oo haddii ay miradhal noqoto, uu qof kale magac ku yeesho. Kulankaas waxaa nala fadhiyey Janan Maxamed Nuur Galaal. Haddii aan maanta dib u eego, heerkii dagaalku taagnaa, markii Siyaad Barre socodsiin waayay qorshihii aan u soo jeediyey, waxaan weli aamminsanahay in, haddii qorshahaas fursad la siin lahaa, ayan muddo gaaban ciidammaddeennu ku jabeen. Horraantii 1978kii waxaa bilawday rogaal-celintii iyo weerarradii ay xulufada Itoobiyaanku ku soo qaadeen ciidammada Soomaalida, kuwaas oo hubka iyo saadka kaleba ay gabaabsi ku ahayeen, si geesinnimo leh bayse u dagaallameen, xoog ka weyn baase hafiyey. Kaddib markii uu isbeldeley miisaankii awooddu, Soomaaliyana la cidleeyey oo ay weydey wax u soo gurmada, ayaa dawladihii Siyaad Barre xulufada la ahaa kula heshiiyeen isbahaysiyadii Itoobiya in dagaalka la joojiyo oo aan xudduudda Soomaaliya laga soo gudbin.

Aniga oo weli dalbanaya in saad iyo taakulayn la ila soo gaaro ayaa, si aanan filaynin amar la igu soo siiyey in aan ka soo baxo gudaha Itoobiya oo aan dib ugu soo gurto xudduudda Soomaaliya. Amarkii ayaan qaatay oo si xirfadi ku dheehan tahay baan muddo gaaban ciidankii uga soo saaray gudaha Itoobiya, isla markaasna soo geliyey xudduudda doolow halkaas oo aan difaac adag ka galay iyaga oo aan khasaare badani nasoo gaarin, qalabkoodiina la soo wada baxay.
Waxaan maqli jirey ' Illeyn geel ninkii lahaa dhacayo, lama dhicin karo' . Waxaase taas ka daran sidii laga yeeli lahaa nin dalkiisii iyo dadkiisii ku danaysanaya, si kursigiisu ugu badbaado. Markii ay dagaalka ku guuleysatey Itoobiya waxay qaadday tallaabooyin foolxun oo ay kaga aargudaneyso Soomaalida. Waxay Soomaali Galbeed ka soo saartay in ku dhow laba malyan oo qof, kuwaas oo qaxooti ahaan Soomaaliya lagu soo dhoweeyey. Waxay sun ku shubtay ceelashii iyo warihii dadka iyo xoolohuba ka cabbi jireen, si ay intii qaxi weydey nolasha ugala dagaallanto. Waxay si aan kala sooc lahayn dayuurado ugu duqaysay dhammaan degmooyinkii dhulka Soomaaliyeed oo ay gumaysato. Adduunku arrintaas indhaha ayuu ka qabsaday.

# XAASKAAGII WAY DHICISAY

Dhammadkii 1976kii qorshaha afgenbigu waa uu dhammaystirnaa oo sida aan bogagga hore ku soo xusay, xilalka afgenbiga lagu fulinayay waa noo kala qaybsanaayeen. Sarakiisha arrinta igula jirteyse waxay muujiyeen in dulqaadkii ka dhammaaday oo ay doonayeen in ay degdeg hawsha ugu dhaqaaqaan. Taladii Cirro oo ahayd in uu 1976kii afgenbiga ku dhaqaaqo ka sokow, waxaa i soo foodsaaray, labo talo oo kale oo ka daran tii Cirro, kuwaas oo isla saraakiishii afgenbiga igula jirtey si bareer ah iigu soo bandhigeen. Midi waxay ahayd in ciidammada aagagga kala duwan dagaalka kaga jira oo badidood hoos yimaadaan saraakiisha afgenbiga ila waddey, laga soo saaro dagaalka oo toos afgenbiga loogu fuliyo. Markaan taladaas maqlay waxay igu noqotay filanwaa. Muddo dhowr daqiiqadood ah wax hadal ahi wuu iga soo bixi waayay.

Markaan xogaa qaboobay, ayaan aniga oo si deggan ula hadlaya ku iri saraakiishii ' Waan garanayaa waxa idin eryaya oo waa aynnu u wada jeednaa in ayan oddorosta dagaalkaani wanaagsanayn, kuna danbayn doono mustaqbal mugdi ah, haddiise aynnu dagaalka ka baxno oo dhinaca afgenbiga u jeensanno, sow Siyaad Barre noqon mayo geesi qaran, innaguna noqon meyno rag dalkooda khiyaanay oo baal madow ka geli meyno taariikhda dalka. Sow niyadsamida anynu ku dooneyno in aynnu Siyaad Barre dalka ka xoreyno, isu rogi meyso ama looma rogi doono in aynnu nahay jawaajiis shisheeye u shaqayneysey oo ciidankii dhabarjebisey, si dalku cadowga ugu gacan galo' .

Muran badan kaddib, raggii waa ay wada garaysteen hadalladaydii, waa ayna ku qanceen taladii aan u soo jeediyey ee ahayd in arrintaas la iska illaawo. Talada kale waxa la ii soo jeediyey muddo gaaban ka hor wakhtigii aannu afgenbiga u ballansanayn. Maalin maalmaha ka mid ah, ayaa si lama filaan ah waxaa Doolow noogu yimid Siyaad Barre oo wata konton ilaalo ah. Saraakiishii ila joogtey Doolow afgenbigana qayb ka ahaa, ayaa waxay badidood ku taliyeen in, si afgenbigu inooku sahlanaado, aynnu meesha ku dilno Siyaad Barre iyo inta la socotaba.

Saraakiishaasi waxay ku qanacsanaayeen in dilka Siyaad Barre ka dhignaan lahaa hawshii afgenbiga oo bar la qabtay.
Taladaasi waxay iila muuqatay mid haddii ay dhacdo cadowgu uu ku farxi lahaa, afgenbiguna ku fashilmi lahaa. Anigu laba sababoodba arrintaas waan uga horjeedey. Tan hore, waxaan qabay haddii Siyaad Barre la dilo in, isla markiiba rag xukuumaddiisa ka tirsani, ay si fudud kursigiisa ugu fariisan lahaayeen, dabadeedna ay dalka oo dhan xukun degdeg ah ku soo rogi lahaayeen, ciidamadana gelin doonaan heeganka u sarreeya, sidaasna uu meesha uga bixi lahaa afgenbigii aannu muddaba ku hawllanayn.

Sababta labaad ee aan taladaas uga soo horjeeday waxay ahayd in dilka Siyaad Barre horseed u noqon lahaa colaad qabiil oo aan weligeed la xakamayn kari doonin iyo taariikh khaa' inimo (assassination) kursi ku doonaya. Aragtida aan arrintaas iska taagay, waxaa gacan igu siyey G/Dhexe C/risaaq Sheekh Cismaan (Cali Baadiye). Raggii waxaan u soo jeediyey in arrinta si dhab ah looga doodo, si xilkasnimo ku jirto loo qiimeeyo, lana isu miisaamo faa' iidada iyo khasaarada ka dhalan karta. Nasiib wanaag, raggii dib buu u wada gurtay, kuwaas oo aan awal ku talagelin in dilka Siyaad Barre uusan waxba ka beddelayn xukuumadda oo mudda gaaban kurisigiisii qof kale ku fariisan doono.

Nasiib wanaag, waxaan ku guleystey in Siyaad Barre iyo raggii la socdeyba la badbaadiyo oo weliba aan iska diray iyaga oo nabad ah, ciidankuna ku soo dhoweeyey, kuna sagootiyey sharafta iyo xushmadda Madaxweyne leeyahy. Afgenbiku waxuu ahaa in uu dhaco 12kii Abriil oo ku aaddanayd sannadguuradii 18aad ee XDS, maalintaasna waxaa loo doortay in aan dhaqdhaqaaqayaga la dareemin, sidaasna ciidanmadayadu hawlahooda ku fuliyaan. Nasiibdarro, qaybtii Muqdisho joogtey iyaga oo aan waxba nala socodsiin bay xaalado aanay filayn oo soo foodsaaray awgood, soo hor mariyeen wakhitigii afgenbiga loo ballamay. Sidaasna waxay ku tashadeen in ay afgenbigii ay ku dhaqaaqaan 9kii Abriil 1978kii, taas oo ah saddex beri ka hor maalintii lagu ballamay. Dagaal saacado socdey kaddib, ciidankii afgenbiga wadey waa laga itaal roonaaday.

Afgenbigaas waxaa lagu qabtay 15 sargaal oo ciidammada ka tirsanaa, 2 aqoonyahan, iyo saraakiil tiro badan oo laga soo kala qabtay qaybaha kala duwan ee ciidammada, aanse wax lug ah ku lahayn afgenbiga. Sababta loo soo qabtay waxay ahayd hawlgal guud oo ciidammada looga sifaynayay qabiil gaar ah : Majeerteen. Taas waxaa ka sii darnaa go'aanka Siyaad Barre ku gaarey in uu xabsiga u taaxaabo siyaasiyiin iyo odayaal Majeerteen ah oo ay ka mid ahaayeen Xaaji Muuse Boqor oo dalka haybad iyo sharaf ku lahaa, taas oo dadka oo dhammi u arkeen arrin aan la qaadan karin. Si kastaba ha ahaatee, arrintaasi waxay muujisay in Siyaad Barre go' aansadey in uu si bareer ah u fuliyo colaadda uu Majeerteenka u qabo. Arrintaasi waxay ku faaftay dalka oo dhan, miyi iyo magaalaba.

Waxaa dhacay in dad badan oo Majeerteen ahi ay dalka ka qaxaan, sidaasna waxaa ku bilawday qaxii ugu horreeyey ee Soomaaliya ka dhaca. Siyaad Barre iyo Majeerteen way kala go'een. Habeen habeennada ka mid ah, ayuu Siyaad Barre baabuur qaatay oo toos u abbaaray gurigii Allaha u naxariistee Xaaji Yuusuf Cigaal. Wuxuu gurigii yimid Xaaji Yuusuf oo markaas darbigiisa fadhiya. Siyaad Barre salaan kaddib, wuxuu ku yiri: ' Xaaji iska warran' . Xaaji Yuusuf wuxuu ugu jawaabay, ' Belada aad dhigtay ma ahee war kale ma jiro' .

Siyaad Barre wuxu yiri: ' Ma waxaad ka hadlaysaa kacaandiidkii dalka dumin lahaa oo la qabqabtay' . Xaaji Yuusuf wuxuu ugu jawaabay Maya ee waxaan ka hadlayaa saraakiishii aad tiri afgenbi bay sameeyeen oo aad goortaas u rogtey qabiil afgenbi sameeyey' . Xaajiga oo hadalkiisii sii wata baa Siyaad Barre ku yiri: ' Maxamed i dhegeyso, annaga oo dawlad ah baad afgenbi nagu samaysey, deero-deero uma hardiyin, adiguna isku day afgenbi saraakiishaadu ka danbeeyeen baad waxaad garatay inaad qabiil dhan u aanayso oo weliba aad af buuxa ku tiri waan tirtirayaa' .

Waxaan ku leeyahay, wallaahi maantuu bilowday burburkii dawladdaadu, oo aadan ka danbaynayn Majeerteenka aad leedahay waan tirtirayaa. Siyaad Barre markuu cabbaar aammusnaa, aadna u dhibsaday hadalkii Xaaji Yuusuf Cigaal buu ku yiri: ' Xaaji maxaad ku talin lahayd?' .

Wuxuu ugu jawaabay, ' Anigu waxaan ku oran lahaa Gaalkacyo tag oo odayaashii Majeerteen la soo kulan, dhibka aad u geysatayna ka raaligeli, una soo ballanqaad in aadan saraakiishaas ku fulinayn go'aanka maxkamadda, isla markaasna u sheeg in aad magdhow ka siinaysid dhibkii aad gaarsiisey iyo in aad soo celinaysid ummaaddii faraha badnayd oo cid walba lahayd ee aad dalkooda ka qaxisay'. Siyaad iyo Xaaji Yuusuf waxay ahaayeen laba oday oo weligood is yiqiin waxay u wada hadleen si caddaan ah oo aaney waxba isula harayn. Markaas kaddib Siyaad Barre Xaajigii buu macasalaameeyey oo iska tegey. Dabadeed wuxuu u yeeray G/Sare Maxamed Jibriil Muuse oo ahaa ku xigeenka ciidanka Nabadsuggidda, una dhashay beesha Majeerteen, wuxuuna ku yiri: ' Gaalkacyo baad tegeysaa oo waxaad iiga soo uruurinaysaa odayaasha Majeerteen, halkaas oo aan kula kulmi doono'.

Jibriil sidii buu yeelay, odayaashii buu degaannadii qaarna ugu tegey qarna fooniyeyaasha kala hadlay, badidoodse waa ay diideen. Sidaas awgeed, intii uu heli karey ayuu Gaalkacyo ku diyaariyey, dabadeedna Siyaad Barre buu halkaas ugu yeeray. Shirkii dhex maray odayaasha Majeerteen iyo Siyaad Barre wax natiijo ah lagama gaarin oo labada dhinacba waxay ka bixi waayeen is eedayn. Gadaalihii Siyaad Barre wuxuu odayaashii u ballanqaaday in uusan saraakiishii afgenbiga lagu eedeeyey ku fulin doonin go'aanka maxkamadda oo uu cafiyi doono. Maalmo kaddib, markii uu Muqdisho ku soo noqday, arrintii uu odayaasha ka ballanqaadayna laga war helay, ayaa rag Golohiisii kacaanka ku jirey suuqyada ku daadsheen waraaqo ay arrintaas kaga soo horjeedeen, oo ay ku qornaayeen erayo aflagaaddo ah iyo guubaabin Siyaad Barre lagu guubaabinayo in uu xukunka fuliyo. Waraaqaha ay suuqyada magaalada ku daadsheen waxaa caan ka noqotey tii ay ku qornayd: "Wallee Majeerteen laga baq." Eedaysanihii ugu horreeyey ee afgenbiga madaxda ka ahaa G/Sare Maxamuud Sh. Cismaan wuxuu maxkamadda horteeda ka qirtay in uu keligiis ka mas'uul ahaa afgenbiga oo saraakiisha kale aanay wax lug ah ku lahayn, wuxuuna codsaday in saraakiisha la-eedaysan si degdeg ah loo sii daayo, oraahdisiise dheg looma jalaqsiin. Dhammaantoodna dil baa lagu xukumay, waxaana xukun dil ah lagu fuliyey 26kii bishii Oktoobar, sannadkii 1978.

Saraakiisha la toogtay waxaa ka mid ahaa kuwan hoos ku xusan:
1. G/ sare. Maxamuud Shiikh Cismaan (Cirro)
( hoggaamiyihii Inqilaabka - Majeerteen, Cumar Maxamuud)
2. G/ le Saciid Maxamed Jaamac (Majeerteen, Cusmaan Maxamuud)
3. G/ le Saciid Jaamac Nuur (Majeerteen, Ciise Maxamuud)
4. Dhamme: Inj. C/ salaan Cilmi Warsame -Gaab,
(Majeerteen, Nuux Jibraa' iil)
5. Dhamme: Ibraahim Maxamuud Xirsi (Isaaq, Habar Yoonis)
6. Dhamme: Cabdullaahi Xasan Nuur (Xawaadle)
7. Dhamme: Cabdullaahi Xasan Faarax (Hawiye, Duduble)
8. Dhamme: Inj. Maxamed Axmed Yuusuf -Caaggane
(Majeerteen, Cumar Maxamuud)
9. Dhamme: Bashiir Abshir Ciise ( Majeerteen, Cusmaan Maxamuud)
10. L/ Xiddigle: Cabdulqaadir Geelle Cumar
(Majeerteen, Cusmaan Maxamuud))
11. L/ Xiddigle: Cabdiraxmaan Macallin Bashiir (Majeerteen, Wadolmogge)
12. L/ Xiddigle: Cabdi Ugaas Cismaan (Hawiye, Murursade)
13. L/ Xiddigle: Aadan Warsame Yare (Majeerteen, Cumar Maxamuud
14. L/ Xidigle: Saciid Cabdulle Gorod (Habargidir, Sacad)
15. L/ Xidigle: Cabdiwahaab Axmed Xaashi
(Majeerteen, Cumar Maxamuud)
16. S/ Xarigle: Faarax Xalwo (Majeerteen, Cumar Maxamuud)
17. C/ Qafaar Warsame Yare (Rayad- Majeerteen, Cumar Maxamuud)

Taasi waxay caddaynaysaa in Siyaad Barre uu si kutalagal ah uu beel gooni ah ula dagaalamayey. Guddigii odayaasha beesha Majeerteen ee Maxamad Siyaad Barre Gaalkacyo kula soo kulmay waxay kala ahaayeen:

1. Maxamuud (Gurey) Cilmi Sarmaan
2. Axmed Geyre (Dalabey) iyo
3. Muuse Meygaag

Odayaashaa Madaxweynaha waxay ula garrameen si aad u adag, wuxuuna u carrab-laalaadiyey inuu dilka wiilashaas ka fiirsan doono. Nasiib darro xukun dil ah ayuu ku fuliyey markii uu Xamar ku soo noqday, kulankoodiina wuxuu noqday ' Hal bacad lagu lisay' .

Dilkii Dhallinyaradii saraakiisha ee Inqilaabka lugta ku lahaa waxaa si fiican dhacdadaas uga faalloday oo gabaygii **Gallayr** ka tiriyey abwaan ( Xasan Daahir Khalaf- Xasan Carab) oo ka mid ahaa abwaniintii jabhadda ila joogtay oo halganka qayb ibaax ka qaatay isaga iyo abwaaniinta kale oo ay ka mid ahaayeen Khaliif Sh. Maxamuud, Maxamad Cali Walash iyo qaar kale. Dhallinyaradaas nasiib darro waxaa lagu fuliyey xukun dil ah iyagoon wax maxkamad sharci ah aan la saarin, inta mid walba garbaduub loo xiray ayaa go'yar oo cas indhaha lagaga xiray kaddibna rasaas oodda looga qaaday. Sidoo kale wuxuu abwaanku gabaygan ku xusayaa Saraakiil badan oo kale oo maamulkii Siyaad Barre toogtay muddadii uu xukunka dalka haystay 1969-1990kii. Maansadu waxay leedahay sidan:

Xalay gelindambeeedkii maraan galangalcoonaayey
Sidii neef la gawracay maraan gawraxyada buuray
Gedgeddoomis mooyee maraan gogosha hiifaayey
Sidii geesi ciil qaba maraan gorodda laalaadshay
Garwaaxsigeed mariyo go'ii aan soo duubtay
Gawlkiyo jirkaygii maruu gibil madoobaaday
Dhulkii aan garaacahayey iyo gooha iga yeeray
Sidaan gaari saarnahay maruu geyra igu daacay
Anigoon isgaranayn maraan guura bahalleeyey
Ganaweyne aariyo maraan abanta guuguuley
Giiryaale saan ahay maraan wada gariiraayey
Golxobkiyo amlaydii maraan gacanta saaraayey
Gurdan badan maruu ii baxayoo iga galaayuusay
Gaxandhada maraan jiiray iyo gebiga hoostiisa
Goonyaha maraan fiiriyayoo gubatoo qiiqaysay
Gammaan faras sidiisii maraan golongol dhuubnaaday;

Godadiyo abeesiyo maraan halaqyo gaadaayey
Gabaahirig bannaan iyo maraan gole ka heesaayey
Guutooyin xoogliyo maraan gaasas kicinaayey
Gashi iga maqnaa iyo maraan gocosha reemaayey
Gaaraa-bidhaankiyo maraan galowga doodaynay
Gamasyada maraan qaatay oo geyr u diriraayey
Gaacalkiyo dadkaygii maraan cadow ka guulaayey

Gabiley iyo Boorame maraan gabay u sheegaayey
Goonyaha Hargeysiyo maraan Gacan Libaax joogay
Guryasamo Togdheer iyo Sanaag maraan dhexjiifaayey
Gabbal soo baxiyo maraan Bari sharaf la goobaayey
Garoowiyo Nugaal godan maraan guluf u heensaystay
Gaalkacyo iyo Yamasyskii maraan gudub u weydaartay
Galgaduud ma sii marin iyo gurigii Shaydaane
Gobolaysi baa lagu hayey oo waan ka gaabsadaye
Laba waa go'doon ceebna way kala gayoobeene
Matabaan garooriyo maraan gaaray Beledweyne
Gallayr bay kacshoo wuxuu i yiri go'e bal soo toose!
Waxaan iri gob xaalkeed maxaad galabta ii sheegi?
Wuxuu yiri miyaad gama'santahay gacalle see weeye!
Waxaan iri hurdadii waan ka go'ay labada gooroode
Wuxu yiri maxaad gocatayoo goday dhafoorkaaga?
Waxaan iri rag geeriyoodoo good cunaa jira e!
Wuxuu yiri xabaashuu ku guray weli miyaad gaartay?

Waxaan iri goday cagaf qodday bay gudub u seexsheene
Wuxuu yiri gurboodkii ay dhaleen gabannadii meeye?
Waxaan iri gidaarkiyo jidkay gorofsanaayeene
Wuxuu yiri gamboolaydi iyo dumarki yaa guursan?
Waxaan iri geyaankood cidaly gedenged joogaane!
Wuxu yiri hadday iil galaan maxaad u goobaysay?
Waxaan iri gafkii lagu dilay baan soo garwaaqsadaye
Garnaqsigii markaan bogannayoo hadalki soo gaabtay

Isagoo galiilyeysanoo gabaxa oo liita
Wuxuu yiri raggii go'ay intii aad ka garanasysid
Gooni iigu sheegsheeg abwaan gun ah baa tahaye!
Anna waw garaabayoo tirsigii waan u guud maraye
Gabayre iyo Caynaanshe iyo Janannadii Gaaska
Gacmadheere Ina Dheel barqay gawrac mariyeene
Culimaduu gumaadiyo sharciguu ciidda hoos geliyey
Geeshkeenna iyo ciidamada suu u kala gaabshay
Mingoobaaradii uu Jigjiga keligii goobaysay!
Gaashaanle Sare Ina Cusmaan meeshuu gabalaaxay!
Garbaduubki loo soo xiriyo guduridii feentay
Gorod iyo Ugaas baa ka xigay geesta midigta ee

Caaggane guskiyo qoorahay subixi gooyeene!
Gantaalkii Wahaab lagu dhuftiyo goobtii lagu toogtay
Gablan baa Warsame Yare ku dhacay guutaduu dhalaye
Geesigii Xalwiyo Ina Bashiir lagu dul geeraarye
Cabdulqaadir Geelliyo, Saciid Nuur gumuc la leefsiiye
Gabankuu jeclaa Jaamac Nuur gawrac lagu jiidye
Ibraahin gelgelintuu dhigiyo gaashiyadii dhiigga
Abshir guri dambasykii ka baxay laysba gelinsiiye
Hangar mariye gaaleef afliyo gudimo dhiiggiiye
Cabdullaahi bay gabawareen ganatadiisiye
Wax ma galabsan Soomaliduu gubay jirkiisiiye;
Dhagjar gawdii horey wadnaha kaga garaaceene
Gurxan iyo Canshuur Dhoolla-waa kibir u gaaguunye
Gabay laguma soo koobi karo gebi ahaantoode
Halkii gacan-ku-dhiigluhu dhigay wada ganaayeene
Sidii goosan weer laayey baa gabalba meel yiille
Go'yaroo casaanaa indhaha uga gahaarnaaye!

Garbahaarrey bahalkii ka yimid farax la geeraarye
Gorgorkiyo tukihii Xamar fadhiyey gaafa lama siine
Gaariga kolkii lagu ridaba gaar dablaa koraye
Waraabihii Gediyo, Caabdudwaaq hilibkii loo geeye
Gogoshii baa tabeysiyo intay guri la jiifeene
Ma gam'aan xigaalkood hurdana gana ma siiyaane
Gawsdambeedka iyo foolashay gaawinahayaane
Gaadmiyo iyo bareeraba dagaal waa gelahayaane
Gawsaweyne maantaa jihad loo gudboon yahaye
Godadkuu ku dhuumanahayiyo goobtii waan tegiye
Bal ciddii ku guulasysatiyo gobo'da aan dhawrno!

## AFGENBIGII CIRRO: FASHILAADDA DABADEED

G/Dhexe Cabdullaahi Axmed Cirro oo ahaa abbaanduulaha qaybta 60aad, wakhtigaase ahaa ku-simaha taliyaha qaybta. G/Sare Cumar Canjeex oo ahaa Taliyaha qaybta 60aad xarunta wuu ka maqnaa oo xagga Muqdisho ayaa taar been ah looga soo diray oo lagu wargeliyey in uu Xarunta dhexe ee XDS soo galo; taarkaasna waxaa ka

danbeeyeey raggii afgenbiga wadey. Cabdullaahi Axmed Cirro ayaa isla maalintaas markii ay saacaddu ahayd 11:00 barqanimo ii soo diray taar uu ku leeyahay "I dhegayso, laba eray ayaan kuu sheegayaa: ' Afadaadii way dhicisay' .

Mar aannu qadayneyney oo aannu iska sheekaysaneyney, baa waxaa soo galay raadiyihii oo Siyaad Barre ka hadlayo, kaas oo sheegay in XDS fashiliyey iskuday afgenbi ee uu ka danbeeyey G/ Sare Maxamuud Sh. Cismaan (Cirro). Markaas ayaan fahmey wixii ku qornaa taarkii Cirro ii soo diray. Isla duhurnimadii maalintaas ayaa Muqdisho taar la iiga keenay, la igu amrayo in la soo qabqabto saraakiisha liiska ku qoran oo ka tirsanayd guutada ciidanka difaaca cirka ee afgenbiga isku-dayday oo qaarkood aan weli la qaban. Markii uu warku noo sugnaaday ayaan fiidkii u soo baxay dhinaca Doolow. Waxaan u wada yeeray saraakiishii guutooyinka hayay ee afgenbiga igula jirey, kuwaas oo aan u sheegay sida ay wax u dhaceen, iyo in hadda wixii ka danbeeya dagaalkiina bareer noqday. Waxaan u soo jeediyey in aan, hal guuto ma ahee, ciidammada intooda kale u dhaqajinno xagga Baydhabo, si aannu u qabsanno xarunta 60aad oo fariisinkoodu yahay magaalada Baydhabo. Sidaas oo kale, aannu u sheegno guutooyinka inaka tirsan oo woqooyi jooga in ay Hargeysa qabtaan, dabadeedna aannu Raadiyo Hargeysa ka sheegno in aannu dalkii qabsannay.

Nasiibdarro, Saraakiishii ugu firfircoonayd ee afgenbiga wax ka waddey waxaa ku dhacay niyadjab iyo is-eedayn, taladii aan u soo jeediyeyna way diideen. Markaas baan waxaan u sheegay in Muqdisho taar la iiga soo diray, kaas oo la igu amrayo in aan Muqdisho wada-tashi u tago. Waxaan ku iri waan garanayaa waxa la iigu yeeray idinkuna waad garan kartaan. Sidaas awgeed, anigu Muqdisho tegi maayo, waana fakanayaa, waxaana u fakanayaa dhinaca Kenya.

Xagga Itoobiya uma baxsan karin oo shalay baan dagaal kula jirey. Waxaa ay iigu jawaabeen, ' Kaa aannu hari mayno oo waannu ku raacaynaa, hortase waxaannu burburinaynaa hubka culus oo dhan' . Waxaan ku iri: ' Taasi dhici mayso, maxaayeelay, haddii uu cadowgu ogaado in aannu burburinney hubkii cuslaa, toos bay ciidanka oo

difaac la'aan ah weerar ugu soo qaadayaan, waxaana u fududaanaysa in ay muddo gaaban cagta mariyaan soddon kun oo askari. Mas'uuliyadda ka dhalata xasuuq intaas le' egna ma aynnu qaadi karno. Marka arrintaas ha laga baxo' . Cabbaar markii aannu wada hadalnay, waxaan u sheegay in aan galabta tegayo, sidaas awgeedna ay si degdeg ah u soo baxaan intii i raaci lahayd. Isla galabtii ayaanu dhaqaaqnay waxaa iraacay G/dhexe Maxamed Abshir Cali Weyrax, G/le Axmed Maxamed Ilgiir, Saddex Xidigle C/laahi Maxamed Xasan (Farey) iyo laba Xidigle Jaamac Dheere oo naga daba yimid. Cabbaar markii aannu soconney baa waxaa nalaku joojiyey tuulada Malkariye oo toban 10km ka sokaysa Buulo Xaawo. Ma garan karo in ay tuhmeen iyo in ay xogtayada heeleen toona, balse markii aannu dhaafnay ayay naga soo daba qaateen. Waxaan amar ku bixiyey in aan xabbad lagu ridin haddii ayan iyagu nagu soo ridin. Nasiib wanaag, markii ay na soo gaari waayeen bay naga hareen, wax shil ahina halkaas kama dhicin. Waxannu sii hor marnay saldhigga Buulo Xaawo, halkaas oo Booliskii joogey salaan sharaf igu siiyey. Waxaan u qaatay in ay noo malaynayeen in aannu nahay wafdi rasmi ah oo kormeer u socda.

10kii Abriil 1978kii waxaa isla waddadaas nooga horyimid, saraakiil aan hore ugu diray tirokoob ay ka soo sameeyaan ciidanka iyo hubkooda, si aannu u helno xog' ogaalnimo aannu ku tashan karno afgenbiga ka hor. Meeshii ay nooga horyimaadeen baan istaagney. Baabuurkii baan ka soo degey, waxaan war bixin buuxda ka siiyey meesha xaal marayo iyo in afgenbigii fashilmay, oo aannu hadda baxsad u nahay xagga Kenya, dalkaas oo aannu magangelyo siyaasadeed weydiisan doonno. Saraakiishaas waxaan kula taliyey in ay na soo raacaan, nagana horreyaan, maxaayeelay annagu hub baannu wadanney, waxayse ku adkaysteen in ay na soo daba gelayaan. Dabadeed waxaan u sheegay in aaney meelna istaagin, taladaas oo ay iga yeeleen. Waxay istaageen Buulo Xaawo, halkaas oo ay ku nasteen. Subaxnimadii ayaa meesha loogu yimid oo la qabqabtay, dabadeedna xabsi dheer baa lagu xukumay. Raggaas waxaa ka mid ahaa, Allaha u naxariistee, dhamme Maxamuud Cabdi Samatar (Gaboobe) oo seeddigay ahaa iyo Dhamme Cali Faarax Filoose iyo sargaal kale oo Habar Jeclo ah oo aanan hadda magaciisa xusuusnayn.

Siyaad Barre markii uu ogaadey in aannu baxsannay ayuu ciidankii amar ku siiyey in nala soo qabto, taasise ma dhicin. Ma garan karo in Siyaad Barre amarkii ka noqday ama ciidanku amarkiisii fulin waayay. Waxaannu galnay Mandheera, dabadeedna waxaa nala geeyey saldhigga magaalada, halkaas oo wax nalaka qoray. Labadii saac ee subaxnimadii danbe ayaa waxaa Mandheera ku soo degtey dayuurad Herculas ah, dayuuraddii ayaa nala ku qaaday oo waxaan kusii degnay Wajeer, dabadeedna waxaan ka degnay Gaarisa, halkaas oo si fiican nalooku qaabilay, Saldhigga Boliisku Xero uu leeyahay oo guryo filooyin ah oo la degi karo ku yaaleen, waxaan halkaas joognay muddo laba asbuuc aan ka yarayn oo waraysi nalagula yeelanayey. Halkaas waxaan ku arkay G/Dhexe Maxamuud Barrow oo markaas ahaa taliyaha ciidanka Kenya ee fadhiya Mooyaale, wax hadal ahise halkaas naguma dhex marin. Maxamuud waa ninka noqon doona taliyaha ciidammada Kenya, kaddib markii uu fashiliyey afgenbigii Kenya ka dhacay 1982kii. Dad badni waxay yiraahdaan in Maxamuud dallacaadaas ku gaarey jagada uu ku soo ceshey Danial Arab Moi awgeed Madaxweynaha Kenya, kaas oo markii uu isku dayga afgenbi dalka ka dhacay tuulooyinka baadiyaha u cararay, balse waxaan qabaa in, ragannimada uu ku fashiliyey afgenbiga uusan ku badbaadin oo keli ah mansabka Arab Moi, balse uu burbur iyo dagaal sokeeye ka badbaadiyey dalka Kenya.

Haddii maanta dib loo eego, waxa ay ku danbeeyeen dalalkii ay afgenbiyadu ka dheceen, waxaa la oran karaa in Maxamuud ahaa horseedka nabadda iyo jiritaanka habka dawladeed ee Kenya. Subaxii dambe baa diyaarad macaa baabuurtayadii nalaku qaaday, waxaana nalaka dejiyey gegida dayuuradaha Ciidanka Cirka ee Nairobi, Hotel baa nala geeyey muddo bil dhowdhow ahna nalagu hayey, waraysi hor leh baa nalala yeeshay, markii nalaga dhamaystay waraysigii waxaa nala siiyey magangalyo siyaasadeed (Political Assaylum) inaan dalka ku noolaan karno, waxaase nala yiri warsaxaafadeed (Press Conference) baa la qabanayaa ee ka hadla, waxaan ka waramay, waxaan u nimid dalkaan iyo cinqilaabkii fashalay, kaasoo aan caddeeyey cinqilaabkaas fashilmay awgiis in la xirxiray saraakiil badan oo waliba la layn doono, maadaama afgembigii ciidan fashalayna halganka waan wadaynaa, dagaalkase waxaan ka dhigaynaa dagaal dadweyne.

# ASAASKII JABHADDA SSF (SSDF)

JABHADDA DIIMUQRAADIGA
BADBAADINTA SOOMAALIYEED

SOMALI SALVATION
DEMOCRATIC FRONT

Markii aannu Nayroobi soo gaarnay waxaan la kulmay rag badan oo ka soo baxsaday cadaadiskii xukuumadda Maxamed Siyaad. Wakhtiba iskama anaan lumin illayn waxaan ahayn rag meel lagu ba'ay ka yimide, waxaannu durba shir la qaadannay raggiii magaalada hore u joogey. Xog iswaraysi kaddib, waxaannu ka wada hadalnay xaaladaha dalka ka jirey iyo kuwa geeska Afrika oo dhan. Waxaannu dabadeed isla meel dhignay in la gaarey heer aan loo dulqaadan karin dulmiga iyo diktatooriyadda waddanka ka jirtey. Waxaa kale oo aannu isla meel dhignay in aan ciidammada Soomaaliya laga sugin iskuday danbe oo Siyaad Barre ay xukunka kaga tuuraan, isku daygii Cirro ayaa gebi ahaanba arrintaasi ku soo gunaanadantey. Siyaad Barre wuxuu, laf-dhabartii ciidanka iyo sarakiishii aqoonta sare lahayd ee XDS, kaga takhallusay dagaalkii Soomaali Galbeed, shakina noogama jirin in uu wixii ka haray ka takhalluskooda uga faa' iidaysanayo afgenbigii dhowaan fashilmay. Sidaas oo kale, way noo caddayd in markii uu ciidammada ka sifeeyo inta waxgarad ka ah uu XDS ka dhigan doono ciidan xukunkiisa oo keli ah ilaalo ka ah.

Nagama dahsoonayn in Siyaad Barre xirfad dheer ku leeyahay dabinnada noocaas ah. Xus gaar ah waxaa mudan, sifayntii uu bilawgii 1969kii ciidammada kaga fogeeyey doorkii sarakiisha, beddlelkoodiina hoosta soo gashaday saraakiil xirfad iyo waaya' aragnimo yar, dabadeedna u adeegsadey in uu xukunka ku qabsado. Mar haddii ay sidaas noogu caddaatay in aan ciidammada wax yididdiilo ah laga sugayn waxaannu istusnay in loo baahan yahay in la helo talo degdeg ah oo meelmar noqon karta, taladaas oo buuxin karta halkii uu burburka XDS banneeyey. Wax la gebi-dhacleeyaba waxaa ugu danbayntii la isla gartay in ay lagama maarmaan tahay in lagu dhaqaaqo sidii loo midayn lahaa mucaaradka Soomaaliyeed oo dhan ee afarta beni jaho ku kala daadsan iyo sidii loo dhisi lahaa urur siyaasi ah oo leh

garab ciidan. Guud ahaan, waxaa la isla gartay in isla helidda labadaas arrimood ay laf-dhabar u tahay tallaabo kasta oo la doonayo in Siyaad Barre xukunka looga tuuro. Si arrinta looga baaraandego waxaa shirku isku raacay in loo saaro guddii khubaro ah oo si fiican u sii baara , isla markaasna shirka soo hordhiga tallaabooyin dhaqangal noqon kara ee toos loogu dhaqaaqo. Waxaa arrinta loo magacaabay guddiga soo socda bishii Juun 1978kii.

1. Cismaan Nuur Cali Qonof
2. Cali Barre Jaamac (Ciddi-libaax)
3. Abshir Muuse Saciid
4. Xasan Cali Mire
5. Axmed Daahir Xasan
6. Maxamed Abshir Cali Wayrax
7. Axmed Maxamed Ciise (Ilgiir).

Dhowr maalmood kaddib, guddigii wuxuu shirweynihii soo hordhigay warbixin tifaftiran oo gunaanadkeedu ahaa in degdeg wax loo qabto, sida ugu dhakhsaha badanna shacbiga Soomaaliyeed loo soo bandhigo talo uu ku qanci karo oo looga hortegayo keli-talinta iyo siyaasadda qaran dumiska ah ee dalka lagu maamulayo. Si taas lagu gaaro waxay soo jeediyeen in la qaado tallaabooyinka soo socda, kuwaas oo run ahaan, aan wax weyn ka duwaneyn kuwii hore shirka loogu soo qaaday:

- In la sameeyo urur siyaasadeed oo mucaarad ah;
- In ururka la soo jeediyey uu yeesho cudud ciidan oo Siyaad Barre dalka looga xoreeyo.
- In waddammada deriska Soomaaliya la ah la weydiisto xarumo siyaasadeed iyo saldhigyo ciidan oo hawlaha ururka lagu fuliyo.

Shirkii wuxuu isku raacay in duuduub ahaan loo qaato talooyinkii ay soo jeediyeen. Sidaas awgeed, waxaa lagu dhaqaaqay sidii dalabka degdegga ah ee jabhadaha loo gaarsiin lahaa dawladaha deriska ah.

Waxaannu go' aansannay in aannu arrintaas u xilsaarno shakhsiyaad gaar ah oo si uun madaxda dalalkaas xiriir ula lahaa. Markii dawladahaas la gaarsiiyey waxa aannu damacsannahay iyo baahidayada degdegga ah, dareemo kala duwan bay noo muujiyeen. Dawladda Jabbuuti way ka cudurdaaratey, jawabteeduna waxay ahayd mid la

garaysan karey, iyada oo ah dal dhowaan ka xoroobay gumeysigii ayanna u suurtageli karin in ay Siyaad Barre dawladdiisa durba colaad kala hortagto. Dawladda Kenya waxay noo sheegtay in ay noo fidinayso oo keli ah kaalmo noo fududeysa waxqabad kayaga, sida baasabooro, magangelyo siyaasadeed, iwm, wayse ka gaabsatay in ay taageero rasmi ah oo ciidan na siiso. Dawladda Itoobiya waxay noo caddaysay in cadawga Siyaad Barre uu saaxiibkood yahay, sidaas awgeedna ay diyaar u tahay in wax allaale waxii aannu u baahanno ay gacan naga siineyso. Itoobiya waxaannu u dirnay Cismaan Nuur Cali Qonof*, isaga ayaana nooga soo weriyey soo dhoweynta ay noo fidisay. Wuxuu kale oo noo soo sheegay in madaxda dalkaasi ku tiri,' Haddii arrintu ay dhab idinka tahay waxaad noogu yeertaan saraakiishii samaysay afgenbigii fashilmay oo hadda Nayroobi ku sugan'.

Wakhtigaas waxaa raggii afgenbiga sameeyey Nayroobi ka joogey aniga, G/Dhexe Abshir Muuse, G/Dhexe Maxamed Abshir Cali Weyrax, G/Sare Axmed Maxamed Ciise (Ilgiir), Laba Xiddigle Yaasiin Cabdullaahi Boqor iyo Laba Xiddigle Faarax Muuse, oo lugtii uu Muqdisho ka soo bilaabay Mombaasa ku yimid. Markii taleefannadii Cusman Nuur nagu bateen, ayaannu intayadii saraakiisha ahayd shir gaar ah yeelannay oo aannu arrinta kaga wada hadlayno, dabadeedna waxaannu go'aan ku gaarney in aniga iyo Axmed Ilgiir aannu degdeg ugu dhoofno Adis-Ababa, oo halkaas Cismaan ugu tagno. Markii aannu go'aankayagii gaarsiinney Cismaan, kaas oo maalintii labaadba noo soo diray ruqsaddii dalku-galka (Visa), maalintii ku xigtena waannu dhoofnay.

---

* Cismaan Nuur Cali Qonof wuxuu ahaa aqoonyahan cilmiga sharciga kaga soo qalinjebiyey dalka Talyaaniga. Wuxuu dalka ka noqday Garsoore. Dabadeed siyaasadda ayuu galay, kursigii uu ku guulaystayna dawladdii xilligaas jirtey ayaa ka qaadday. Siyaad Barre markii uu dalka qabsaday ayuu ku magacaabay Wasiirka Caddaaladda. Muddo yar kaddib way isgaran waayeen wuuna xiray. Markii uu xabsiga ka soo baxay, Itoobiya ayuu u fakaday, halkaas oo isaga iyo dhowr siyaasi oo kale oo Siyaad Barre ka soo cararay ka asaaseen urur lagu magacaabay SOODAF, kaas oo aan magac uyaal waxba dhaafsiisnayn. Wuxuu ahaa nin geesi ah oo hufan. Wuxuu ka mid ahaa asaasayaashii SSDF, khilaafkii markuu dhacayna wuu ka baxay jabhaddii, dabadeed Xamar ayuu aaday, halkaas ayuuna ku geeriyoodey.

Habeenkii waannu seexannay, maalintii danbena waxaa halkii aannu degganayn noogu yimid niman nabadsugidda ka tirsan, kuwaas oo aannu meesha isku waraysannay, afkaar badanna is dhaafsannay. Wada hadalladaas kaddib, waxay na weydiiyeen in aannu u fasirro wixii aannu dooneyney. Aniga, ayaa hadalkii qaatay waxaana ku iri: ' Waxannu doonaynaa saldhigyo aannu ciidammo ku urursanno, kuna tababbaranno dabadeedna aannu dawladda Siyaad Barre dagaal halkaas kaga qaadno'. Waxaan intaas ugu daray in aannu saldhigyada u baahannahay inta aannu ka xogaysanneyno, oo aannu jecelnahay in aannu mustaqbalka ka samaysanno dalkayaga saldhigyada aannu u baahannahay.

Nimankii nabadsuggidda ahaa waxay hubsadeen in, wixii aannu ku wada hadalnay iyo farriintii Cismaan nooga geeyey ay si buuxda isu waafaqeen. Intaas kaddib, way naga tageen, waxayna noo sheegeen in aannu tala danbe isugu soo noqon doonno. Sidii aannu maleynayney, raggii noo yimid, waxay warbixintayadii iyo wada hadalkayagiiba gaarsiiyeen Mingiste Haile Mariam. Annagu magaalada baannu iska joogney oo Itoobiyaanka baannu jawaab ka sugeyney, taas oo nagu qaadatay mudadii u dhaxaysay (14kii Juun-11kii Luulyo 1978kii). Isla raggii baa noogu yimid halkii aannu degganayn. Meeshii bay naga wadeen oo waxay noo geeyeen Mingiste Haile Mariam. Waxaa xaafiiska la joogey dhawr nin oo Golohiisii Dergiga ka tirsanaa.

Salaan kaddib, waxaannu guda galnay arrintii aannu meesha u nimid. Mingiste wuxuu noo xaqiijiyey in warkayagii soo gaarey oo uu Dergigu yeelay codsigayagii. Waxay naga codsadeen in aannu Nayroobi ku noqonno oo aannu go'aankaas gaarsiino raggii aannu Nayroobi kaga nimid. Taas oo aannu aqbalnay. Annagu waxaannu dhinacayaga ka go' aansannay, Itoobiyaankuna nala waafaqay, in aannu Addis Ababa ku reebno Axmed Ilgiir, si uu u diyaariyo saldhigyadii aannu ciidammada ku soo urursan lahayn.

Aniga iyo Cisman Nuur Cali Qonof, waxaannu dib ugu soo noqonnay magaalada Nayroobi, halkaas oo aannu shir degdeg ah raggii isugu yeernay, dabadeedna ku siinnay warbixin tifaftiran oo la xiriirtey wixii aannu Addis Ababa la tagnay. Wada hadaladii annaga iyo madaxda

Itoobiya na dhexmaray iyo sida xushmadda leh oo ay ku aqbaleen dhammaan wixii aannu ka codsannay. Raggii oo dhammi waxay si niyad sami leh ku soo dhoweeyeen go'aanka ay Itoobiya ku gaartey in ay gacan naga siineyso halganka aannu kula jirno taliska Siyaad Barre. Sida la garan karo, dadka noogu dhowaa oo aannu ciidan ka qoran karney waxay ahaayeen Soomaalida dalkii ka soo qaxday oo Kenya ku nool iyo kuwii hore dalka Kenya uga shaqaysan jirey. Waxaannu dawladda Kenya ku wargelinney in aannu damacsannahay in aannu dalkeeda ka qoranno dhallinyaro mutadawiciin ah ee diyaar u ah in ay halganka nagala qaybqaataan. Waxaannu u sheegnay in aan qofna la khasbayn oo dadku diyaar u yihiin in ay dalkooda wax ka xoreeyaan.

Nasiib wanaag, dawladda Kenya way naga aqbashay arrintaas. Sidaas ayaannu dalka Kenya uga dhex bilawnay abaabul ciidan. Tiro wanaagsan oo mutadawiciin ah baannu halkaas ka helnay, haba u badnaadeene wadayaashii gaadiidka ganacsiga. Markii aannu muddo gaaban ku guuleysanney in aannu isu soo ururinno rag gaaraya 300, ayaannu sidii raggaas loo qaadi lahaa kala xiriirnay Kenya iyo Itoobiya, kuwaas oo wada tashi kaddib isku afgartay in racrac loo qaado, lana geeyo xeradii lagu tababbari lahaa ee Itoobiyaanku ugu talaggaleen. Sidaas oo kale Axmed Ilgiir, wuxuu noo soo sheegay in tababbarka saldhig looga dhigay tuulada Erar Goota, taas oo ku taal degaan barwaaqo ah ee dalxiiska iyo nasashada ku wanaagsan oo biyo kulul leh, oo 70km galbeedka ka xigta magaalada Dirir Dhabe.

Meeshu waxay ahaan jirtey goob uu Boqorkii hore Haile Salase ku nasan jirey. Waxaa ku yiil dhismayaal fara badan oo ay ka mid ahayeen qasrigii Boqorka gaarka u ahaa, guryo badan oo saraakiisha, ilaalada iyo shaqaalaha loogu talaggalay. Intaas waxaa dheera goobo tira badan ee tuulada ku dhex yiil oo malaha loogu talaggalay in madaxda Boqorka meesha ugu imaan jirtey ay ku tamashleeyaan. Ciidankii goobtaas la geynayay waxaannu ku sii darnay dhowr sargaal oo Soomaali ah. Itoobiya waxay noogu tabarrucday hub fudud, beebayaal dhawr ah iyo jiibab qoryo saaran yihiin, saraakiil macallimiin ah oo tababbarta ciidanka. Dhallinyaradii halkaas la geeyey waxay tababar ku qaadanayeen xirfadaha ciidammada lugta, kumaandooska, miinada iyo shiishka. Maalintii ay taarikhdu ahayd 12kii Sebteembar 1978kii ayaa

halkaas tababbar looga furay dufcaddii ugu horreysey ee cidaankii mucaaradka hubaysan ee SSF (SSDF oo gogolxaarkeedu xilligaas billaabmay). Munaasabaddaas waxannu dhignay xaflad ballaaran oo Ujeeddo badan ahayd. Dhinac waxaannu ku dhiseynay mooraalka ragga tababbarku u bilawday.

Dhinaca kalena waxannu xayaysiis u samayneynay dhismaha SSF. Waxay ahayd farriin aannu ku muujinaynay awoodda SSF. Mar haddii aannu helnay saldhig iyo abbaar, waxaa noo muuqatay in aannu wax badan qabsan karno. Tallaabadii ugu horreysey oo aannu qaadnay waxay ahayd in aannu Soomaaliya gudaheeda ka bilawno abaabul ciidan. Waxannu saraakiil dhignay degaammo u dhow xudduudda Soomaaliya. Sidaas oo kale, waxaannu wafdiyo u dirnay dalalka Soomaalidu ku badan tahay si ay jaaliyadaha dalalkaas deggan ugu fasiraan siyaasadda iyo ujeeddada jabhadda, uga dhisaan guddiyo iyo wakiilo isku xira jabhadda iyo jaaliyadaha iyo in ay uga soo urursh aan dhaqaale jabhaddu ku hawlgasho.

Wufuuddii aannu dibadaha u dirnay si aannaan filayn bay safarkoodii ugu soo guuleysteen. Meel kasta oo ay tageen si fiican baa loogu soo dhoweeyey, lacag aan yarayn bay jabhadda u soo urursheen, magaalooyinka waaweynna waxay ka sameeyeen wakiillo si joogta ah tabarrucaadka jabhadda ugu soo urursha, wixii dad ah oo doonaya in ay jabhadda ku soo biiraanna u fidiyaan tas-hiilaadka ay u baahan yihiin. Nasiib darro qaaraamihii jaaliyaduhu ugu tabarruceen jabhadda, shaqsiyaad baa si gurracan uga faa'iidaystey, kuwaas oo markii hore isku muujiyey in ay jabhadda daacad u yihiin, isla markaasna weydiistey tigidyadii iyo sahaydii safar oo ay ku iman lahaayeen xarumaha jabhadda.

Markii ay gacanta ku dhigeen sahaydii safar oo loo diray bay Muqdisho ugu dhoofeen oo Siyaad Barre u tageen, kuna yiraahdeen in ay Muqdisho baxsad ku yimaadeen, oo ay cadaadis iyo hanjabaado kala kulmeen taageerayaasha jabhadda, dabadeedna ay iska dhigeen in ay jabhadda u tegayaan, markiise la aamminey oo ay sahaydii safarka qaateen, bay Muqdisho u goosteen. Lix bilood gudohood Jabhaddu waxay ku guuleysatey in ay dalka gudihiisa iyo dibaddiisa joogitaan

rasmi ah ku yeelato. Saraakiishii u qaabishanayd siyaasadda iyo wardoonka waxay ku guuleysteen in ay, si joogta ah ula socdaan wax allaale wixii ka socdey xafiisyada iyo ciidammada xukuumadda Siyaad Barre. Hawlihii iyo abaabulladii aannu ka bilawnay dalka gudihiisa tartiib-tartiib baa natiijooyin wanaagsan looga gaarey. Saraakiishii Wardheer noo joogey ayaa noqday kuwii ugu horreeyey oo ay soo gaaraan mutadawiciin badan, kuwaas oo qaarna ka soo baxsaday dawladda, qaarna ka yimaadeen hawdka Burtinle iyo Ciid. Raggaasi koox koox iyo keli keli bay Wardheer ku yimaadeen. Kooxdii ugu badnayd waxay gaareysey boqol qof.*

Saad badan ma ayan wadan dadka halkaas imanayay, kuwa ugu roonaa baa waxay wateen sahay aan badnayn, halka kuwa kale ay xerada la yimaadeen dhowr tuldood (geel). Saraakiishii Wardheer joogtay waxaannu ku amarnay in ay raggaas meesha ku hayaan cutana siiyaan, tababbarna loo furo. Wardheer waxay ahayd meesha keli ah oo ay ku ammaan geli kareen, oo halkaas waxaa joogey ciidammo Itoobiyaan ah. Wardheer wixii bari ka xigey waxaa joogey Ciidankii dawladda Siyaad Barre.

Mudda gaaban kaddib waxaan tegay Wardheer, halkaas oo saraakiili igu sugeysey. Raggii meesha ku soo ururay ayaa la ii shiriyey, waxaana ku wacyi geliyey qaddiyadda aannu u dagaallamayno, waxaan u sheegay in dagaalku yahay mutadawacnimo, kaas oo aan qofna lagu khasbayn. Nasiib wanaag, raggi halkaas ku soo ururay waxay ii wada caddeeyeen in ay diyaar u yihiin la dagaallanka diktatooriyadda Siyaad Barre oo aaney meesha u iman in ay manfaco ka helaan.

* waa boqolkii ugu horreeyey oo Soomaaliya ka yimid, waxayna isugu jireen arday, shaqaale, ciidan iyo shacbi. Wardheer waxay yimaadeen 23kii Nofembar 1978.

Kaddib waxaa la go'aansaday in Doolow laga furo saldhig ciidan, waayo waxay ahayd meel dhallinyaro badan ka soo gudubto. Markii dufcaddii ugu horreysey ee ciidammada SSDF soo dhammaysteen tababbarkii ay ku qaadanayeen Erar Gooto, waxaa loo qaybiyey hub, waxayna halkaas ku sameeyeen dab-rid ay si fiican ugu guuleysteen. Waxaa noo caddaatay in aannu halkaas ka helnay ciidan tababbaran oo mooraalkiisu dhisan yahay.

## KORITAANKII JABHADDA (SSF)

Ciidankii tababbarka soo dhammaystay waxaa lagu soo qaaday baabuur waxaana la keenay Jigjiga. Guritaankaas waxaa nagu taageeray ciidan Itoobiyaan ah oo Jigjiga u socdey. Dabadeed lug baannu Jigjiga kaga soo baxnay, waxannuna ku nimid Wardheer. Ma jirin si kale oo aan halkaas ku imaan karney, oo ciidamadii Siyaad Barre ayaa hawlo ka wadey. Safarka dheer ee aannu Jigjiga ka soo qaadney waxaannu ku nimid Dhagaxbuur oo Jigjiga u jirta 160km. Markii aannu halkaas ka soo baxnay waxaannu sii marnay Qabridaharre oo Dhagaxbuur u jira 250km; waxaannu sii marnay Shiilaabo oo Dhagaxbuur 110km u jirta. Ugu dambayntii waxaannu gaarney Wardheer oo Shiilaabo u jirta 120km.

Guud ahaan safarkaasi wuxuu nagu qaatay 640km iyo 40 maalmood oo aannu ku jirney dagaal iyo socod. Markii aannuu nimid magaalada Wardheer waxaannu isku darnay labadii ciidan, kii aannu wadanney iyo kii aannu meesha ugu nimid. Halkaas waxaa nooga soo baxay hal urur oo xooggan. Taliyayaashii ciidanka waxaan ku iri: ‘ Iskama fadhiyeynee waa in aynnu degdeg u bilawnaa hawlgallo ciidan oo dhuumaalaysi ah’ . Sidaas oo kale, waxannu abaabulney ciidammo awri u raran tahay oo si isdabajoog ah u hawlgala. Ciidammadaasi waxay ka koobnaayeen saddex urur oo ku kala aaddan saddexda gobol ee woqooyi bari. Kan ugu horreeyey waxaannu ugu talaggalnay in uu ka hawl galo hawdka Gaalkacyo, Burtinle, Cadduun iyo agaggaarkooda. Ciidankaas waxaannu madax uga dhignay Sanweyne Daahir Seed. Aagagga ciidankaasi ka hawlgalayay oo dhan waxaa ku daadsanaa Ciidammadii Siyaad Barre iyo wardoonkiisii, sidaas awgeedna waxaa

lala socdey meel kasta oo ay cag dhigaan iyo dhaqdhaqaaqyada ay samaynayeen. Markii uu ciidanku soo gaarey meel u dhaxeysa Bookh iyo Dameer Joog, in kastoo aannu jeclayn in ay guureeyaan oo hawdka galaan bay habeenkii meeshooda degeen. Nasiibdarro, subaxii baa ciidammadii Siyaad Barre waxay hareereeyeen meeshii ay degeen. Saddex ciidan ayaa lagu soo saaray, laba ka soo kala baxay woqooyi galbeed, Gaalkacyo, iyo ciidankii Galdogob fadhiyey, kuwaas oo dhinac kasta kaga soo qaaday weerar midaysan.
Ciidankii SSF si geesinnimo leh ayuu u dagaallamay, si ba'anna way isu daafaceen. Ciidammadii duullaanka ahaa rag tiro badan ayay ka laayeen, iyagiina khaasaaro badan baa soo gaartey.
23 qof goobtii ayaa lagu dilay, 13 kale rasaastii baa ka dhammaatay oo waa la qabtay, waxaana lagu toogtey Galdogob.*

Intii kale way kala firxadeen. Qaar hawdka ayay galeen, qaar waxay aadeen reerahoodii, qaar kalena waxay wejiga saareen meel kasta oo ay ku badbaadi kareen. Ayaan wanaag, raggii kala firxaday waxay tartiib-tartiib, hal qalable ahaan xaruntii ugu soo noqdeen. Qaar ka mid ahaa waxay gaareen in ay xagga Nayroobi ka soo wareegaan. Arrintaasi waxay muujisay heerka ay dhallinyaradaas ka taagnayd qaddiyadda ay u dagaallamayeen. Kolkii uu dhibkaasi dhacay, saraakiil Itoobiyaan ah iyo kuwa Soomaali ahi waxay isla gaareen in, inta aagga oo dhan laga sifeynayo ciidanka Siyaad Barre, la joojiyo dagaallada dhuumaalaysiga ah. Waxaa kale oo ay ku heshiiyeen, in mar walba oo duruufuhu saamixi karaan la fuliyo hawlgallo yar yar, kuwaas oo lagama maarmaan ah si culays joogta ah loogu hayo ciidammada Siyaad Barre. Arrintaas oo halkeeda ah ayaannu go' aan ku gaarney in aannu ciidanka jabhadda ku baahinno xadka labada waddan, weliba goobahooda istaraateejiga ah. Annaga oo go'aankas ka duuleyna, ayaannu saldhig ciidan ka samaynnay Qallaafe, kaas oo ku jihaysan gobolka Hiiraan.

* Dagaalka Awrrayaal ( gaadiidka ay wateen baa awr ahayd) wuxuu dhacay bishii Jan. 1979, wiilasha 13ka ahaa waxaa ciidankii taliska Siyaad Barre dil toogasho ah ku fuliyey iyagoo maxaabiis ah bishii Abriil,1979.

Sidaas oo kale qayb ka mid ah ciidankii Doolow fadhiyey waxaannu u wareejinney Baarrey, aaggaas oo ku aaddan gobollada Bakool iyo Baay. Intii aannu aaggaan kala habayneyney, ciidanka Itoobiyaanku wuxuu madaafiic ku garaacay magaalada Buulo Xaawo, taas oo loola jeedey in aagga khalkhal la geliyo. Saldhig kale waxaannu ka furanay aagga Boorame, kaas oo ku aaddanaa Goroyocawl iyo Boorame. Hawlgal ay sameeyeen ciidammadan danbe waxay, gebi ahaanba ku qabsadeen saldhiggii ciidamada Siyaad Barre ee Goroyocawl.

Ciidammadii halkaas ku sugnaana waxay ku danbeeyeen wax la laayay iyo wax kala firxaday. Ciidankii jabhaddu wuxuu goobtaas ka helay hub, rasaas iyo saad kale oo tiro badan. Kaddib markii ciidankaasi uu guushaas gaarey ayaannu u wareejinney dhinaca Xarshin oo ku jihaysan Hargeysa iyo aaggeeda. Dhaqdhaqaaqa jabhadda iyo duulaamadeeda qorshaysan waxay dalka oo dhan ka abuureen xasilloonidarro, isla markaasna waxay niyadjab iyo welwel ku rideen ciidammadii Siyaad Barre.

Markii ay sare u kaceen tayadii iyo tiradii ciidanka Jabhaddu waxaannu go'aan ku gaarney annaga oo la kaashanayna cutubyo ka tirsan ciidammada Itoobiya, in aannu ku qaadno weerarro joogta ah saldhigyadii ciidammada Siyaad Barre ku lahaayeen gobolka Soomaali Galbeed, sida ciidammadii fadhiyey Cagaarweyne, Gallaaddi, Dhudub, Bookh iyo Dogob. Sidaas ayaannu dhowr bilood gudohood aagaggaas oo dhan uga sifeynay ciidankii Siyaad Barre iyo wardoonkiisiiba. Markii aannu gaarney guulahaas isdabajoogga ah, waxaannu go'aan ku gaarney in aannu duullaan ku qaadno degaanno ka mid ah Soomaaliya oo ku beegan saldhigyada ciidammada Siyaad Barre ay ku lahaayeen aagagga ay ka mid yihiin Gaalkacyo, Dhuusamarreeb iyo Bakool. Bishii Luulyo 1982kii waxaannu bartilmaameedkii kowaad ka dhigannay degmada Galdogob, halkaas oo ciidammo xoog leh oo uu taliye ka ahaa Axmed Cumar Jees saldhig ku lahaayeen.

Inta aannaan weerarka qaadin, waxaan la shiray saraakiishii ciidanka jabhadda hoggaamineysey, dabadeedna waxaan hadal gaaban u jeediyey ciidammadii, kuwaas oo aan ku iri: ' Maantay waxaynnu galeynaa

imtixaan adag, kaas oo duullaanka aynnu damacsannahay in aynnu ku qaadno ciidan inaka tira badan, inaka hub badan, inaka saad badan, aanse aqoon waxa uu u dagaallamayo, halka aynnu ku dagaalameyno qaddiyad xalaal ah oo aannu shacbigeena kaga xorayneyno cadaadiska uu Siyaad Barre ku hayo' . Soomaali oo dhammi waxay nagu qiimayn doontaa sidii aynu imtixaanka uga baxno. Sidaas awgeed, waxaa la inooka baahan yahay in qof kasta oo inaka mid ahi dadaal dheeri ah la yimaado, Ilaaheen guusha ina seejin maayo. ' Allaahu akbar, Soomaaliya ha noolato' . Hal mar baa ciidankii oo dhammi ku dhawaaqay ' Allaahu akbar, Soomaaliya ha noolaato' .

Ilaahay wuxuu qaddarey in aannu mudda gaaban kaga soo jeensanno ciidankii fadhiyey degmada Goldogob. Sidaas oo kale waxannu cagta marinnay ciidankii Degmada Balanballe joogey. Dabadeed waxaannu weerar ku qaadnay degmada Yeed, taas markii aannu gacanta ku dhignay nalaka soo saaray, kaddib markii nalaku soo weeraray ciidan badan oo hub culus wata. Dhinaca Kismaayo waxannu ka fulinney dhawr hawlgal, kuwaas oo jabhaddu ka gaartey natiijooyin wanaagsan, khatar badan bayse raggii hawlahaas wadey meeshaas kala kulmeen, dabadeed waxaannu garannay in aannu aaggaas isaga soo baxno. Marna isma dhimin hawlgalladii aannu kaga jirney dhinaca Woqooyi, waxaannuse sii xoojinney kolkii aannu Gallaaddi ka soo dhaqaajinnay ciidan aannu hore halkaas uga tagnay oo ka koobnaa batalyan ciidammada dhaqdhaqaaqa (mobile), kaas oo isla subaxdii ku waabbariistey agaggaarka magaalada Buuhoodle oo ciidan xooggan oo Siyaad Barre fadhiyey.

Waxaa jirtey qorshe hawlgal oo aannu hore ugu talaggalnay sidii aannu ciidammada halkaas fadhiyey u jabin lahayn annaga oo aan shacbiga khasaare u geysan. Ciidankii oo waajibaadkaas ku socda ayuu ciidankii Siyaad Barre oo hurda, saddex dhinac weerar kaga soo qaaday, jahawareerkii ku dhacay awgiis ciidankii taliska Muqdisho wuu kala firxaday. Sidaasna waxaannu ku qabsannay hubkoodii oo dhan oo ay ku jireen hub culus, shacbigiina waxba ma gaarin.

Xagga gobollada dhexe, waxaannu isla maalmahaas weerar ku qaadnay degmada Matabaan, halkaas oo aannu ku burburinney ciidammadii fadhiyey,wixii ay hub haysteenna gacanta ayaannu ku dhignay. Dagaalkii aan nasashada lahayn oo aannu ku galnay xeelado kala duwan, waxaannu ku qabsannay hub badan oo ku fillaaday in aannu hub ka wada sinno ciidankii jabhadda. Duullaammadii faraha badnaa ee aannu ku qaadaynay ciidammadii Siyaad Barre, waxay muujiyeen isu dheellitir la'aanta awooddayada oo aad u koobnayd iyo ujeeddayada oo aad u sarraysay; taas oo aan ku filnayn in aannu jebinno taliska Siyaad Barre.

## HANAQAADKA SSDF

Afar sano oo halgan aan kala go' lahayn jabhaddu waxay ku kasbatay qiraal lagu aqoonsaday in ay tahay xoog jira oo tixgelintiisa leh. Magaalooyinka iyo tuulooyinka dalka oo dhan waxay ka samaysatay unugyo aan war isu hayn oo ay ku fushato danaheeda siyaasadeed. Sidaas oo kale, waxay dibadda ka samaysatay wakiillo iyo xarumo warfaafineed oo jaaliyadaha iyo shisheeyaha sida gaarka ah u daneeya arrimaha Soomaaliya ay si joogta ah ugala socon karaan horumarka jabhaddu gaartey iyo weliba xaaladda guud ee dalka.

Haddii 1982kii la qiimayn lahaa halka aannu wax ka soo bilawnay iyo halka aannu xilligaas ku sugnayn, waxaa marag-ma-doonto noqonaysa in jabhaddii SSDF ay hanaqaaday. Sidaas awgeed, waxaannu go'aan ku gaarney, in aannu aragatidayada iyo xiriirradayaba ka ballaarinno halka ay muddadaas ku sugnaayeen oo aannu degdeg ugu dhaqaaqno sidii aannu adduun weynaha xiriir ula samaysan lahayn, ugana faa' iideysanno iskaashi kasta oo aannu la yeelanno dawladaha taageero noo muujiya iyo jabhadaha naga waaya-aragsan. Waxaan fariisiyey guddiga fulinta ee jabhadda, isla markaasna waxaan u soo jeediyey in la helo talo la xiriirta sidii aannu ku heli lahayn tageero dhaqaale, hub iyo mid siyaasadeed oo aannu ugaga gudubno marxaladdan adag ee na soo foodsaartay.

Waxaa la isla gartay in taageero la weydiisto dhawrka dal oo Carbeed ee ka horjeestey heshiiskii Camp David ee dhexmaray Menahem Begin iyo Anwar Saadaad, kuwaas oo Madaxweyne Jimmy Carter dhexdhexaadiyey 1978kii. Waxaa kale oo sumcadda jabhadda kor u qaaday waxaa ugu weynaa furitaankii idaacadda Raadiye Kulmis/ Halgan oo aan ugu talaggalney in aan bulshada ku wacyigelinno, isla markaasna, ku baraarujinno xogaha ka daahsoonaa oo sawir dhab ah ka bixinaya xaqaa' iqa iyo xukun xumida dalka ka jirta, sida cadaadiska iyo cabburinta shacbiga lagu hayo, musuqmaasuqa iyo boobka xoolaha dadweynaha, qabiil takoorka. Idaacaddu waxay si joogta ah u sii deyn jirtey daraasado cilmi ah iyo sahanna kala duwan oo maamul xumada dalka laga qoray, kuwaas oo uu faafreebka keli talisku ka reebay in laga sii daayo warbaahinta dalka ee xukuumaddu gacanta ku hayso. Idaacadda jabhaddu waxay, markii ugu horreysey intii xukunka askariga ahi dalka ka hirgalay, shacbiga u abuurtay fursad ay si joogta ah kala socon karaan xaaladaha dalka ka jira, isla markaasna, ku oddorosi karaan mustaqbalka madow oo ku soo fool leh haddii aanay, inta goori goor tahay, ka tabaabushaysan.

Idaacaddii jabhaddu waxay taliska Siyaad Barre ku noqotay laf dhuun-gashay. Xukuumaddu waxay si kasta isugu dayday, in ay tashwiish ku furto si aan dalka looga maqal. Ugu dambayntii, waxay ka dhigtay dhegeysiga ' Raadiye halgan' dembi xabbis ah. Tallaabadaan danbena kuma ayan guulaysan oo tirada dhegeystayaasha idaacadda jabhaddu way bateen. Sidii shacbigu ugu diirsadeen weerarrada joogtada ah ee ciidanka jabhaddu ku hayay kuwa Siyaad Barre ayay barnaamijyada idaacaddana ugu diirsadeen. Isbiirsiga labadaas arrimood, oo sannad ka hor mucjiso u ekaan karay, haddase xaqiiqoobay, waxay mudda gaaban, si aan la malayn karin, sare u qaadeen sumcaddii jabhadda.

## Dhibaatooyinkii loo geystay gobolka Mudug:

Gobolka Mudug guud ahaan, gaar ahaan dadka Majeerteenka ee gobol-kaas ku dhaqan oo beesha Cumar Maxamuud ay hormuud u tahay, wuxuu maamulkii Maxamd Siyaad Barre u geystay dhibaatooyin aad u ballaaran oo maanka fayoobi diidayo inay dawladi dadkeeda ku samayso . Dhibaatooyinkii badnaa ee dadkaas ay ku sameeyeen ciidamadii iyo dawladdii xilligaas jirtay waxaa ka mid kuwan hoos ku xusan:

- Waxaa laga burburiyey boqolaal Barkadood oo dadka reer miyiga ah iyo xooluhuba noloshoodu ku tiirsanaayen. Baraa-gaha ciidamada buburiyeen waxay ku yaalleen tuulooyinka ku teedsan Togga la yiraahdo Daara-Doonle ee ka bilowda agagaarka Burtinle, waxaana ka mid ahaa tuuoolyinka Malaasle, Qalaanqal, Sallax, Buubi, Sidoo kale ceelashii ku yiillay
- Degaanka Kaalmoone iyo Seemade qaarna ciidanka ayaa sun ku shubay, qaarna waxay u diideen dadkii inay ka cabbaan.
- Tuula kasta waxay ka reebeen hal barkad oo iyagu ka cabbaan inta hawl galka ciidanku socday.
- Waxaa iyana xusid mudan dhacdo kale oo sirgaxan oo tiiranyo leh oo Taliska Siyaad Barre ay ka sameeyeen
- tuulada Malaasle. Tuulada Malaasle waxay degaan iyo saldhig u ahayd Islaan Cabdulle (Islaanka beesha Cumar Maxamuud) iyo odayaasha guurtidiisa ka mid ahaa ee degaanka. Waxaa ciidankii lagu soo amray in xoog lagu soo qabto Islaanka iyo raggiisa kaddibna waxa weerar lagu soo qaaday islaankii iyo raggiisii. Nasiib wanaag islaanka waxaa difaacay dhallinyaradii degaanka ee uu caaqilka u ahaa oo jilibka u laabay ciidankii doonayey qafaalka Islaanka. Nasiib darro waxaa halkaas ku dhintay in ka badan toban nin oo dhallinyaradii degaanka ahaa iyo qaar badan oo ku dhaawacmay. Waxaa hoodo, guul iyo ayaan noqotay in dhallinayradii ku guulaysteen difaacii Islaanka kaddibna ula cararaan dhinaca degaanka hawdka.

Sidoo kale waxaa ayaan darridooda, dadkii reer miyigaa ahaa ciidankii loogu talo-galay inay difaacaan, ku sameeyeen in xoolahooda moodka ahaa ay dhacaan oo hadba sida ay doonaan ka yeelaan. Geela intii la rabo ayaa la iska kaxaysanayey, arigna waxay ka dhigteen masruuf ay iska qashaan maalin kasta.

- Dhibaatooyinka kale ee fooshaxumaa oo dadkii reer miyiga ahaa lagula kacay waxaa xusid mudan in inta miyiga laga soo qabqabtay rag badan oo geelooda iyo reerkooda la joogay kaddibna la isugu keenay Xero ciidanku lahaa oo ku taallay tuulada Burtinle. Burtinle iyo magaalada Gaalkacyo waxay isku jiraan 110 Km. Saraakiishii waxay markaas amar ku bixiyeen in dadkii xeryaha lagu xereeyey oo geelooda laga soo kaxeeyey in masaafada qiyaastii halkii Kiilomitirba inta qof la dilo meydiiksa waddada la dhigo. Sidaas waxaa lagu dilay 100 nin kaddibna meykoodii waddada lagu waray. Ujeedadu waxay ahayd in dadka la cabsi geliyo.

- Waxyaabaha kale ee foolxumada lahaa ee dadkii lagula kacay waxaa ka mid ahaa in kufsi, iyo faraxumayn lagula kacay dumarkii beesha iyaga oo aan waxba loo aabbayeelin.
- Dumarka kufsigaas lagula kacay waxaa ku jiray islaamo labaatan sano ka hor dhalmo daayey oo waayeel ahaa.
- Waxaa tixgelin gaar ah mudan dhacdo kale oo murugo lahayd oo ahayd inay soo qafaaleen gabdho yaryar oo jiray 14-15 sano oo arday ahaa kaddibna ay baabuurta weyn ee askarta qaar badan ku soo gurteen si ay u kufsadaan. Gabar gabdhihii ka mid ahayd ayaa markaas baabuurkii ka boodday isaga oo socda si aan loo kufsan. Nasiib darro gabadhii madaxa ayey ka dhul-bilowday waa ayna indha-beeshay Gabadhii dhibkaasi ku dhacay maanta sannadka 2011 ayey nooshahay iyada oo sidii ay maalintaas u indhabeeshay weli ku laxaad la' oo indha la'.

Dhibaatooyinkaas iyo kuwa ka sii foolxun ayaa dadkii reer miyiga u badnaa iyo kuwa badan oo reer magaalka ahaabaa nidaamkii kula kacay. Dhibkaas iyo gumaadkaas markii shacbigii loo geystay waxay soo aadeen dhinaca jabahadda, waana arrimha keenay inay jabhaddu si sahlan ciidan iyo cududba ku hesho.

Saraakiishii iyo madaxdii hawlahaas fulisay waxay u badnaayeen saraakiil reer Waqooyi ahaa oo beesha Isaaqa u badnaa. Raggaas ay dawladdu u soo idmatay gumaadka iyo burburinta gobolka Mudug wax ka mid ahaa:

- G/le Dhagaweyne ( oo jabhaddu markii dambe qabatay kaddibna ku biiray halgankii hubaysnaa ee SNM)
- Maxamad Kaahin (SNM)
- Tansaaniya (Jabhadda SSDF ayaa gobolka ku dishay)
- Ina Askar iyo qaar kale oo badan

Nasiib darro saraakiishaas shacbiga xasuuqay, qaar ka mid ah weli maanta way joogaan oo magaalada Hargeysa ayey ku xarragoodaan iyagoo sheeganaya inay mujaahidiiin yihiin oo magaca (SNM) ku soo dagaallamay. Nimankaas saraakiisha ah siday doonaan ayey dadka yeeli jireen,sharci iyo xeer ay ka biqi jireenna ma jirin. Hawsha loo idmay ayaa ahayd inay dadka gumaadaan, degaankooda burburiyaan, xoolahooda dhacaan.

Tuulooyinkii badnaa ee Gobolka Mudug ee dhibaatoyinka baaxadda badnaa iyo gabbood-falka lagula kacay waxaa kaloo ka mid ahaa, Tuulada Bacaadweyn, Balli-abees, Balli-dacar, Bayra, Bursaalax, Buuryaqab, Burtinle, Dameer-joog, Dogob, Dudun, Foodyacadde, Galxamur. Gambarrey, Magacley, Tuulo-Jalam, Tuulo-Xarfo, Riig-oomane, Roox iyo qaar kale. Dhibaatooyinka degaananadaas askartii ku samaysay waxaa ka mid ahaa barkadaha oo laga burburiyey, kufsi, qax iyo dil. Waxaa xusid gaar ah mudan in hal habeen lagu dilay 32 oday tuulada roox iyo bacaadweyn.

Dawladdu waxay goboladaas u diri jirtay wufuud badan oo dadka degaanka dega kula shiri jiray, kaddibna ku boorrin jiray inay dadkan Itoobiya u galay dadkooda la laayo oo dhiigoodu xalaal yahay.

Waxaa xusid mudan dhacdo kale oo murugo leh in taariikh ahaan loo xuso. Waxaa gobolka kormeer rasmi ah ku yimid Axmad Salebaan Dafle oo ahaa Taliyihii Ciidanka Nabadsugidda, wuxunna shir la qaatay beesha Sacad oo gobolka Mudug dadka dega ka mid ah, wxuuna ku yiri, ' Dadkan dhiigoodu iyo xilahoodu waa idiin xalaal' ee waxaad rabtaan ku sameeya. Oday beesha Sacadka nabadoon u ahaan jiray oo magaciisa la oran jiray Jaamac Seed (Ahun) ayaa markaas ugu jawaabay, ' Dhiiggoodu iyo xoolahooda midna xalaal nooma aha'.

Nasiib darro maamulkii iyo madaxdii dalka ugu sarraysay ayaa ololahaas iyo colaadda intaas la eg ku qaaday dad shacbi ahaa oo aan waxba galabsan. Arrintaas ayaa saldhig u noqotay in dadkii xooggiisa wixii awood ciidan geli garay ay yimaadeen jabhaddii kaddibna halkaas dagaaladdii isdaba-joogga ahaa la galay ciidankii ku sameeyey gumaadka iyo xasuuqa.
Waxaa jira dhibaatooyin iyo gabbood fal lixaad leh oo maamulkii Maxamad Siyaad si gaar ah ugu sameeyey degaanno badan oo beesha Majeerteenku dego oo ay ka mid yihiin gobollada Nugaal iyo Bari.

Waxaa iyana xusid mudan inay jireen arday fara badan oo laga soo xirxiray magaalooyinka Garoowe iyo Gaalkacyo oo loo wareejiyey xabsiyada Mandheera iyo Hargeysa oo halkaas ku xirnaa muddo dhawr sano ahaa. Waxay u badnaayeen arday dhigan jirtay dugisyada sare iyo macallimiin ka tirsanaa wasaaradda waxbarashada. Maxaabiistaas waxaa ku jiray gabdho.Waxa lagu xukumay dil. Markii ay dhawr sano xirnaay-een ayaa la iska sii daayey iyaga oo aan wax maxkamad sharci ah la keenin. Dhibaatooyinka gobollada Mudug, Nugaal iyo Bari maamulkii baday waxay u baahan tahay in si faahfaahsan qoraallo kale looga faalloodo. Halkan ujeedadu waa xusitaan taariikheed oo keliya.

Dhibaatooyinkii badnaa ee Taliskii Maxamad Siyaad u geystay gobollada beesha Majeerteenku degaan waxaa si fiican uga faallooday gabayaagii weynaa ee Khaliif Shiikh Maxamuud (Ahun) oo ka mid ahaa abwaaniintii jabahadda ila joogay oo halganka qayb libaax ka soo qaatay. Abwaanku isagoo halganka ku dhexjira ayaa lagu dilay magaalada Goldogob markay taariikhdu ahayd 9.7.1982kii, waxaana lagu aasay magaalada Gallaadi. Gabaygiisii caanka ahaa ee (Cara) ayaa tilmaan fiican ka bixinaya gabbood-falkii foosha xumaa ee dadka la baday. Gabaygu wuxuu ka kooban yahay 147 tixood. Maansadu waxay leedahay sidan:

Hadduu gabay maslaxd leeyahaoo, lagu qaboobaayo
Geel iyo darmaaniyo hadduu, guunyo noqonaayo
Haddii uu ku gaarsiiyo meel, samada guudkeeda;

Waa kaas garaadkiyo qalbiga, soo gimaamadane
Aan gufaacsho xalay buu ka yimid, Cal iyo Gaw Dheere
Guulaamadiyo murtida bal aan, idin gaarsiiyo;

Ha yeeshee garmaamiyo durduro, ma aha geeraare
Nin waliba gawaan ulama baxo, geerka maansade
Haddii aan guntiisiyo lafaha, gobo' da keenaynin;

Gumucdiisa weyn iyo haddaad, goolka qabanaynin
Gadaal inaad martaa baa ka roon, gole istaaggiise
Waxaan uga gun leeyahay haddii, aan idin garwaaqsiiyo;

Garku nimuusan marin iyo ciyaal, gu' gi tobnaad jooga
Haddii loo guntaday ee sidii goosan, la eryooday
Geedkuu lahaan jiray haddii, laga gawaan raacshay
Asey gaagaxsheen Caliyow waa, inu geddoomaa e
Waa inuu galoof iyo noqdaa, garnashi dayreede!

Ha yeeshee gabood lama ordiyo, gegi habaas weyne
Gardarradu ma fiicniyo inaad, gooni carartaaye
Markay taadu kuu soo gashaa, laga gariirshaa e'

Aniguna geddaas aan ahoo, soo gannoodsadaye
Tixahaan gorfeeyaa ka daran, guul darriyo hooge
Guubaabadaydaa nin ragi, garan ka-raayaaye;

Dhaxaa galiilyo iyo ciil, igu gunaadmeene
Dhaxaa garbaha layga rary, sidatan gaadiide
Geelayga dhaaxay galeen, wiilal gaamuraye;

Dhaaxaa sidii garaw haruur, gowska lay ridaye
Dhaaxaa go'doon iyo harraad, gaajo lay badaye
Dhaaxaa geyiga Eebbahay, rag iga guuleene;

Dhaaxaa girliga layla dhacay, gaal sidaan ahaye
Dhaaxaa la gaasiray raggii, igu gadaanaaye
Gorgorkiyo waraabuhu dhaaxay, hilib ka giigeene
Dhaaxaa gacmaha loogu xiray, geed la sii mudaye;

Dhaaxaa nimaan galabsadeen, kaga garraaxeene
Misa Shiikhii gaaraba dhaaxay, ugu gumuumeene
Dhaxaay gumaadeen wadaad, gelaya Mowliide;

Dhaaxay gablamiyeen ikhyaar, goxosh ah oo weyne
Dhaaxay gonguun ugu tireen, gaan walaala ahe
Guryahooda dhaaxay gubeen, reera geeddi ahe;

Dhaaxaay intay gaaf tumeen, guluf na saareene
Dhaaxay gelgelin naga dhigteen ama gabaahiire
Dhaxaay gallayrkiyo tukuhu, gudur ku naaxeene;

Dhaaxaa galowgii ka ciyey, galacle dhiiggiiye
Dhaaxay gumeystaha Siyaad, noo gurbaan tumaye
Gabadheennu guur iyo ka tage, gole ku weydiise;
Dhaaxay gambol xuni la galay, gololo toolmoone
Dhaaxaa intuu goray u qalay, saaray gaadada e
Marse haddii gu'gii hooray oo, galangal noo daacday
Geeridu xaq weeyee haddii, goob la diriraayo;

Soomaali gebigeed hadday, gees isugu baydhay
Jabhad garatay khayrkii haddii, Guulle noo curiyey
Goonyaha Wardheer iyo hadday, Dhudub ka guuxayso;

Garayskaan xirnaan jiray haddaan, gees isaga tuuray
Haddaan layga garaarixin inaan, geystay tabartayda
Sida goolka xoolaha haddaan, lay gorgorinaynin;

Gablamoy dagaallama haddii, laysla wada gaaray
Gar ilaahay weeye haddii, guuto la asaasay
Gujadii Af-weyniyo haddaan, gadashadii diidnay
Asay gaaggaxeen inamadii, nagu galayryeeyey
Gallad Eebbe weeyoo farxadi, way gudboon tahaye;

Waa inaan Ilaahay gartaa, waa gob qaaliya e
Waa inaan ku gawriisadaa, diintayadu guule
Waa inaan gaboobaye Salaad, gawda ku hayaaye;

Waa inaan guddoomaa tusbaxa, gacan ku haystaaye
Waa inaan wardiga gurubsada, gelin dhexaadkiiye
Waa inaan sunnuhu kama gabo e, sii hirgeliyaaye

Waa inaan gafkiyo laaxinkiyo, gor iska dhawraaye
Waa inaan shahaadada gutaa, saaci boqol gore
Waa inaana soor laba gardayn, gooshka Ramadaane

Gaashaanka waa inaan sitaa, gamaska qaataaye
Waa inaan jahaadka u gulfaa, waa geddii Bedere
Waa inaan gedoodaa sidii, geesigii Caliye;

Waa inaan galluubnahay sidii, geeljiraha Muduge
Waan inaan gantaalaha qarxada, soo gardaadsado e
Waa inaan sariir lagu gam'iyo, gogol illaawaaye;

Waa inaanan gaarida haween, gacan-togaalayne
Waa inaan googa'a ka cunin, gacaladaydiiye
Garangoorridiyo waa inaan, shilinta gooyaaye

Waa inaan gafanayaal cayilay, gabax ka siiyaaye
Waa inaan xaqii layga guray, soo gadaaal noqo e
Garmaqaate waa inaan tuntaa, gudin afaystaaye;

Waa inaan guhaad iyo xanaaq, giirka kiciyaaye
Golxobkayga waa inaan xirtaa, gelelef rooryc
Waa inay gabbaad iyo noqdaan, guri duggaal weyne;
Rabbi Idanki waa inay gudbaan, xaqa guddoonshaane

Afartaas ma gabangaabiyee, gibilka mow taagay
Ma gilgilay sidii qaanso, leebka laga gooyey
Gobo' kalena waa halaan shacbiga, ula garwaaxaystay;

Calankaad u soo hawl gasheen, haatan gorofowye
Gubatiyo runtii kama duwana, gelengel Shaydaane
Haddaad guudka saarteen dabeed, uma gargaartaane;

Good iyo abeesaa u galay, gaararkii Xamare
Sida loo gigaayaa qalbigu, ila gariiraaye
Golcaddii Talyaaniga ka daran, gocorka hasytaaye;

Gobanimadu ma ahayn inuu, bahal garqaadaaye
Ma ahayn dhurwaa loo galo, god iyo booraane
War waa loo gudboon yahay waa, guurti kaa maqane;

Isitcmaarka guunka ah ninkii, shalay u guuxaayey
Girliggaanka ololkaan ninkiii, nagu galaandeyray
Oo kabo gafuur weyn ilkaha, nagu garaacaayey;

"SYL" ninkii gaabiyaye laga, geyoon waayey*
Ninkii guuldarraystuhu dorraad, gacanta dhiigeystay
Ee nagu garmaamaynayaan, gabanna noo reebin;

Sirtayda ninkii goobi jiray, gooraan la arkaynin
Jeneraal garoomoo leh ninkii ula gucleynaayey
Garaadxumo daraadeed ninkii, gacallki moodaayey;

SYL: Somali Youth League

Dhagaxtuur gambarihii ninkii, naga dul geesaasay
Ha galgato meydkii ninkii, geystay tabarteeda
Ninkii buurya gedefow kufriga, noo gol qabateeyey;

Inamaha garaarta leh ninkii, Ferenjiga u guurshay
Xiditinna gaada leh ninkii, u hor gableynaayey
Xaaraan garaadda ah ninkii, gunnada loo siiyey;

Gar loo dayoba goonyaha ninkii, nagu galfoofaayey
War waa kaa go'yaasha isku deday, garanse meysaane
Guntadoo ka kaca waxaad tihiin, gun iyo shaashleeye;

Gabbashiyo la soo dhaaf xantoo, lala gurguurtaaye
Gujis iyo waxay tagaan tahay, gaadda ka cayaare
Goor iyo ayaan-yoon dagaal, cara ku gaaraada;

Gabbal dhiciyo waaberi qoryaha, cara ku geesnaada
Cara goolashiinnii la qalay, sumal u qoor gooya
Godobtaada maqan waa inaad, goobtaa abide;

Gashigaaga waa loo dhintaa yaad, gawaad noqone
Cara sidii laguu gurubsan jiray, mar is-garwaaqsiiya!
Cara goor iyo ayaan warmaha, gaatan ula jooga;

Naagaha gambada xoorayiyo, go'ayda yeeraysa
Cara siday kuwiinna u galeen, qaar kale u geysta
Cara Maxamad gebiguu ku jiro, gowga ka is-taagaa;

Cara geyra fiid baa jiree, foodda soo geliya
Cara gabayaxdaas laydin baday, gar uun u weydaarta
Marse haddaad gar soo wada martaan, guunku waa jabine;

Gerbigaad ku wada tiirsataan, waa la gees marine
Ilaah idanki goor dhow sidii, Xale waa go'ine
Rabbi uma gargaaroo fuluhu, waa gog laga naarye
Waxaa guusha hela kaan wadnaha, gaashi ku lahayne
Bal cara meesha laysugu gurmaday, geeya cududdiinna!.

## SSDF IYO YEMENTA KOOFUREED

Madaama loo baahday dawlad ka mid ah dawladaha Carabta ee diidey Heshiiskii Camp David oo noo furta albaabbada dawladaha ay isku siyaasadda yihiin, isla markaasna gacan naga siisa sidii aannu xiriir wanaagsan ula yeelan lahayn. Kolkii arrinta si fiican loo lafaguray waxay u ekaatay in Yementa Koofureed oo aannu hore xiriir ula lahayn ay arrintaas nooga noqoto abbaan. Taladaas kaddib, guddigii wuxuu soo jeediyey in, wafdi aan hoggaaminayo oo ka kooban aniga, Mustafa Xaaji Nuur oo jabhadda u qaabbishanaa waaxda warbaahinta, Cabdisalaan Aw Samater waaxda arrimaha dibadda iyo Abdiraxmaan Ashkir Gurrac (Bolonyo) waaxda amniga, uu degdeg ugu baxo Yementa koofureed, warbixin buuxdana madaxdeeda ka siiyo, wixii jabhadda u qabsoomay tan iyo wakhtigii ay halganka bilawday, halka ay maanta taagan tahay iyo waxa ay u baahan tahay. Isla maalmihii go'aanka la gaarey waxannu ka duulnay Addis Ababa, waxaannuna ka degney Cadan.

Yementa Koofureed taageero badan kama aannu filayn oo waannu ka warqabney xaaladdeeda dhaqaale, balse waxaannu ka dooneyney taageero siyaasadeed oo dawlaha hodonka ah dhiirrigelisa. Yementa Koofureed waxaa Madaxweyne ka ahaa Mudane Cali Naasir Maxamed. Wax yar kaddib markii aannu Cadan ka degney waxaa naloo geeyey Madaxweynihii, kaas oo si sharaf leh noo soo dhoweeyey, noona xaqiijiyey in aannu joogno dalkayagii labaad. Kaddib waxannu galnay wada hadalkii rasmiga ahaa. Wafdi ahaan waxaannu hore ugu soo heshiinney in aan anigu si kooban uga warramo barnaamijka aannu ula soconney. Madaxweynnuhu si fiican buu ii dhegeystey, wuxuuna na siiyey jawaab kooban, taas oo uu ku soo dhoweeyey una riyaaqay warbixintayadii.

Madaxweynnuhu wuxuu nagu yiri: "Sida aad ogtihiin Yementa Koofureed waa dal sabool ah, saboolnimadayaduse nagama reebayso xilalka naga saaran in aannu idin taageerno. Taas oo halkeeda ah, ayaannu ku dadaaleynaa in aannu taagero idiinka raadinno, idinkuna xirno dalalka Carabta ah ee aannu isku qaddiyadda nahay, sida Liibiya,

Suuriya, Aljeeriya, PLO iyo Ciraaq. Intaas kaddib wuxuu noo sheegay in Yemen Koofureed ay nagu taageereyso xoogaa hub fudud ah, dhawr baabuur oo qoryo saaran yihiin iyo lacag gaaraysa 50 kun oo doolar. Intaas kaddib, wuxuu noo sheegay wixii aannu ka sugayney in aannu ka maqalno, taas oo ahayd in isla maalintii uu u duulayo dalka Liibiya, oo uu qaddiyaddayada ka dhigan doono ajendeda ugu muhiimsan ee uu kala hadli doono Madaxweynaha Liibiya mudane Qadaafi, isla markaasna ku dhiirrigelin doono in uu idiin fidiyo taageero qiime leh. Wuxuu noo sheegay oo kale in uu Liibiya kaga soo noqon doono 24 saac gudahood, wuxuuna naga codsaday in aannu Cadan ku sugno. Sidii uu noo sheegay ayaa safarkiisii u dhacay*.

Laba maalmood gudahood buu ku soo noqday. Xaafiiskiisa ayuu noogu yeeray, wuxuuna noo sheegay in uu Qadaafi si buuxda u soo dhacsiiyey qaddiyaddayadii, dabadeedna uu ku yiri: ' Degdeg iigu soo dir' . Isla Madaxtooyada ayaa nalooku keenay tikidyadii aannu Liibiya ku aadi lahayn. Madaxweynnuhu wuxuu nagu yiri: ' Tikidyadiinna qaata oo toos gegida dayuuradaha uga baxa' . Cadan waxaannu ka raacnay Al-Yamda waxaannuna ku tagnay Kuwait, halkaas oo aannu dayuurad kale Dimishiq ugu duulnay. Dimishiq waxannu tagnay galabgaabkii, mana jirin cid imaatinkayaga ogeyd oo naga hortimid, sidaas darteedna, waxaa khasab nagu noqotay in aannu gegida dayuuradaha iska seexanno.

## SSDF IYO LIIBIYA

Subaxdii danbe baannu Dimishiq ka dhoofnay, waxaannuna ka degnay magaalada Bangazi, Liibiya. Halkaas baannu dayuurad kale ka qaadannay, taas oo aannu ku tagnay Tiriiboli, Liibiya. Gegida dayuuradaha ayaa nalaku sugayay. Socdaalkayagu wuxuu ahaa mid la qarinayay, sidaas darteedna waxaa nala geeyey Hoteel dalxiisayaasha loogu talaggalay. Raggii noo yimid waxaannu u sheegnay in waqtigu ciriiri nagu yahay, dagaalna nagu socdo oo aannaan muddo badan sii joogi karin, isla markaasna waxaannu ka codsannay in degdeg Madaxweynaha nalooku geeyo.

* shirkaas wuxuu ku beegnaa bishii Septembar, 1980kii

Inkasta oo naloo garaabay, haddana waxaa naloo sheegay in Madaxweynnuhu jiro xudduudda Koofurta Liibiya, kalkaas oo uu ka hoggaaminayo dagaalkii ay Liibiya kula jirtey Chad. Si kastaba ha ahaatee, raggii wuxuu la xiriiray Madaxweynihii, kaas oo amar ku soo siiyey in nalooku geeyo halkii uu joogey. Galabtii dambe, waxaa nalaku qaaday dayuurad, waxaana nala geeyey magaalo ku taal koofurta Liibiya, taas oo degaan u ah liibiyiinta madow. Sida naloo sheegay Madaxweyne Qadaafi aad iyo aad buu magaaladaas u jecel yahay, maadaama uu yaraantiisii halkaas uga soo baxay dugsiga sare. Hab maamuus sare (VIP) ayaa gegida dayuuradaha nalakaga soo dhoweeyey. Waxaa naloo keenay baabuur Marcedez ah iyo mid BMW ah. Waxaa nala geeyey guri, halkaas oo aannu habeenkii ku barinay. Subaxnimadii ayaa halkaas nalaka qaaday waxaana 2dii habeenimo nala geeyey tuulo la yiraahdo Ummul Araanib (hooyadii bakaylayaasha). Guri cidla ah ayaa nala geeyey, halkaas oo si fiican nalooku martigeliyey, nalakuna yiri halkiinna iska jooga inta war la idinku soo celinayo. Wax weyniba uma dhexayn markii nalaka tagey iyo markii nalaku soo noqday oo nalaku wargeliyey in Madaxweynnuhu berri na qaabbili doono. Sidii hore nalooku sheegay, in aan la oddorosi karin dhaqdhaqaaqa iyo dabeecadda Mudane Qadaafi ayaa durba noo caddaatay. Subaxii markii aannu quraacannay oo aannu isu diyaarinnay halkii Madaxweynaha nalooku geyn lahaa ayaa, yaab-yaabkiis, waxaa guriga noogu soo galay Qaddaafi oo lugaynaya.

Salaan iyo sheeko guud kaddib, wuxuu na weydiiyey in aannu wadanno khariiddadii Soomaaliya. Taas dhib naguma noqon oo hore ayaannu ugu soo talaggalnay. Khariiddadii baannu ugu soo bandhignay miiska korkiisa, una fasirnay istiraatiijiyadda aannu dagaalka ku wadno. Fasiraaddaas aad buu ugu riyaaqay, uguna qancay. Wuxuu nagu yiri: ' Niyad ma idinka tahay in aad Siyaad Barre la dagaallantaan?' . Waxaan ugu jawaabney, Haa. Wuxuu yiri: ' Hadda weynnu baxaynaa oo meel qado inooka bisishahay baynnu tegeynaa' .
Halkii ayaannu tagnay. Galabtii ayuu haddana noo yeeray. Markii aannu u tagnay ayuu gooni iigu yeertay. Wuxuu igu yiri: ' Waxaan maqlay in aad khibrad gaar ah u leedahay istiraatiijiyadda dagaalka' . Waxaan ugu jawaabay in aan in igu filan ka aqaan.

Waxaan u sheegay in afgenbiga aannu samaynay ee fashilmay nalaku khasbay ee aanu naga ahayn xukun-doon. Fashiliaadda dabadeedna waannu baxsannay, kaddibna aniga iyo saaxiibbadayba waxannu go'aansannay in aannu dagaalka halkiisii ka wadno inta aannu dalka ka xorayno keligi-taliye Siyaad Barre.

Qadaafi wuxuu na weydiistey in aannu bil la joogno, si aan khibrad uga qaadanno, khibradna ugu biirinno dagaalka uu kula jiro dalka Chad. Arrintaa waannu uga mahadinnay, waxaanse u sheegnay in dab nagu shidan yahay oo aannu ka nimid meel aan laga maqnaan karin. Markii aannu wada hadalkii dhammaysannay, wuxuu amar ku bixiyey in wafdiga oo dhammi shirka nagala soo qaybgalo. Kolkii fadhiga la ballaariyey ayuu wuxuu na weydiiyey habka aannu dalka ku wadi doonno markii aannu qabanno, isaga oo aan jawaab naga sugin ayuu markiiba na weydiiyey haddii aannu diyaar u nahay in aannu qaadanno ' Kitaabka Cagaaran' .

Waxaannu ugu jawaabney in Soomaaliya tahay dal sabool ah, dawladdeeduna aaney heli karin awood ay dadkeeda guryo ugu dhisto, waxbarasho iyo caafimaad lacag la' aan ahna ugu fidiso, shaqo-la' aantana uga saarto, haddiise ay dawladda Liibiya diyaar u tahay in ay siiso kaalmo dabooli karta baahidaas, waxay nala tahay in aannaan waxba ku diidi karin in aannu kitaabkaas qaadanno. Dooddii markii ay dhammaatay ayuu nagu yiri: ' Waa taa tiraahdeen dab ayaa nagu shidane, waxannu garannay in aannu hadda idin siinno lacag dhan $150 kun oo doolar oo aad dadkii u geeysaan, kaddibna aad iila soo noqotaan qorshe dhammaystiran oo ku saabsan hubka iyo dhaqaalaha aad u baahan tihiin' .

Durba waxaan xasuustay hadal uu Madaxweynaha Yementa Koofureed Cali Naasir igu yiri oo ahaa ' Waxaad ogaataan in Qadaafi isbeddel badan yahay, sidaa awgeed ha rumaysannina ballanqaadyadiisa oo degdeg gacanta uga qaata wax allaale wixii uu idin siiyo' . Aniga oo taas maskaxda ku haya ayaa waxaan ku iri: ' Madaxweynow noo dhammaystir waxa aannu kaa doonayno' .

Wuxuu noogu jawaabay: ' Anigaa idinka ballanqaaday in aan idin siiyo waxa aad iga rabtaane, muddo saddex bilood gudahood ah iigu keena qorshe tifaftiran oo si dhab ah baahidiinna uga tarjumaya' .

Hadda waxaad sii martaan abbaanduulaha Ciidanka Liibiya oo ka sii qaata lacagta. Sidii baannu yeelnay. Wuxuu naga codsaday in aannu ku salaanno Madaxweynaha Yementa Koofureed Cali Naasir. Markii aannu Qadaafi ismacasalaameyney, dayuurad baa nalaku geeyey Tripoli, halkaas oo toos nalooku geeyey abbaanduulihii. Lacagtii buu na siiyey, wuxunna nagu adkeeyey in aannu qorshahayaga degdeg ula nimaadmo.

Markaas taariikhdu waxay ahayd Oktoobar 1980kii. Dariiqii aannu Liibiya ku nimid ayaannu dib ugu soo laabannay. Cadan ayaannu ka degney, dabadeedna Madaxweyne Cali Naasir ayaa isla markiiba na qaabbilay halkaasna ku siinnay warbixin buuxda oo la xiriirta wixii aannu mudane Qadaafi kala soo kulannay, warbixintaas oo uu aad ugu farxay.

Xoogaagii hubka ahaa oo Cali Naasir noogu deeqay waxay mar hore gaareen dekadda Casab, dabadeedna Dirir Dhabe ayaa na loo ku keenay. Aniga oo ogaa in ay wafdiga baahi weyni haysey oo dayacnaantu ay ka muuqato wejigooda iyo lebiskoodaba, baan u soo jeediyey in aynnaan lacagtaas yar hunguriyeyn oo aynnu guddigii fulinta gaarsiinno, si ay u qoondeeyaan oo go' aan uga gaaraan.

Markii aannu ka soo noqonay safarkii aannu dibedda ku tagnay waxaannu toos u tagnay halkii uu guddiga fulintu fadhiyey. Waxaannu uga warbixinnay wixii aannu dibedda kala soo kulannay, dabadeedna waxannu miiska u soo saarnay xoogaagii lacagta ahaa oo aannu ka soo helnay Liibiya iyo Yementa Koofureed, taas oo isku dhammayd $200 kun oo doolar. Guddigii aad buu ugu farxay natiijadii safarkaas laga soo gaarey.

Dhaqanka noocaas ahi wuxuu si cad u muujiyey sida aan waxba uga jirin maamul xumadii iyo xukun marooqsigii taliska Siyaad Barre ka faafin jirey jabhadda. Xataa qaabka guddigu u dhisnaa wuxuu si buuxda uga marag kacayay awood qaybsiga maangalka ah ee jabhadda. Guddiga fulinta wuxuu ka koobnaa laba xubnood oo u dhashay beesha Habar Gidir, xubin Abgaal ah, labo xubnood oo reer Woqooyi ah iyo lix xubnood oo Harti ah.

Markii shirkii guddigu dhammaaday, waxaan degdeg ugu baxay Dirir Dhaba oo ahayd xarunta ciidankayaga laga maamulo, si aan ugala soo tashado saraakiishii jabhadda madaxda ka ahaa, ururinta xogta baahida jabhadda, dabadeedna aannu isugu dubbarridno qorshihii mudane Qadaafi uu naga sugayay ee uu doonayay in uu ku saleeyo taageerada uu dalkiisu noo fidin lahaa.

Sidaas waxaannu ku diyaarinnay miisaaniyad saddex sano ah ee la xiriirta baahida hubka, ciidammada iyo kharashka guud ee maamulka jabhadda. Qorshahana waxaannu ku darnay miisaaniyad gaareysa saddex milyan oo doolar oo hawlaha lama-filaanka ah .*

---

* Qabashadii shirweynihii lagu caleemo-saaray jabhadda SSF ee Addis ka dhacay bishii Feb 8-02-1979, waxaa rasmi ahaan Loogu dhawaaqay magaca Jabhadda inuu noqdo SSDF ( Somali Salvation Democratic Front). Sidoo kale waxaa idaacaddii Radio Kulmis loo bixiyey Radio Halgan.
Shirkaas la qabtay wuxuu ahaa shirweyne aad muhiim u ahaa, Waana shirweynihii lagu doortay hoggaanka siyaasadda ee jabhadda oo ka koobnaa 25 xubnood, waxaana madax iyo guddoomiyihii ugu horreeyey looga dhigay weriyihii caanka ahaa ee Mustafa Xaaji Nuur ( oo reer Hargeysa ahaa), ku-xigeenka 1aad waxaa isna loo dooortay Cumar Istarliin, ku-xigeenka 2aad waxaa loo doortay Cabdullahi Yuusuf iyo madax kale. Mustafe Xaaji Nuur wuxuu jagaadaas iska casilay 8 bilood kaddib markii uu guddoomiye jabhadda ka ahaa. Iscasilaaddaas kaddib waxaa guddoomiye ku meel gaar ah loo doortay mudane Cabdullaahi Yuusf Axmed. Mustafe Xaaji Nuur oo jagadii iska casilay waxaa isagana loo doortay inuu noqdo xoghayaha warfaafinta jabhadda SSDF (Information secretary)



Shirweynihii SSDF waxaa si rasmi ah guddoomiye la iigu doortay aniga-Cabdullahi Yuusuf kaddib markii ay uruurka SSDF ku soo biireen laba jabhadood oo mucaarad ahaa oo kala ahaa ( Somali Democratic Liberation iyo Xisbul-Shaqiila). Taariikhda midowgaasi dhacday waxay ku beegnayd bishii Oktoobar 5dii, 1981. Siciid Jaamac waxa isagana loo doortay guddoomiye ku-xigeen. Cabdiraxmaan Caydiid waxaa isagana loo doortay Xoghayaha warfaafinta.

Kaddib markii guddiga fulintu oggolaaday miisaaniyaddii aannu isku soo dubbarridney waxaannu si rasmi ah ula xiriirnay safaaradda Liibiya ee Addis Ababa, iyada oo aannu ku wargelinney in aannu diyaarinnay hawlihii dawladda Liibiya naga sugeysey, diyaarna u nahay in aannu kala soo xaajoonno. Si dhakhso ah bay safaaraddii dawladdeeda ugu gudbisey farriintayadii. Nasiib wanaag, dawladda Liibiya degdeg bay arrintayadii uga soo jawaabtey iyada oo safaaraddii amar lagu soo siiyey in ay sida ugu dhaksiinyo badan nooga soo ambabixiso magaalada Addis Ababa. Kolkii ay farriintii Liibiya na soo gaartey, waxaannu tala ku gaarney in aannu sii marno Madaxweyne Cali Naasir Maxamed, si aannu ula socodsiinno hawlihii aannu soo qabannay ee aannu doonayney in aannu ula tagno dawladda Liibiya, isla markaasna ku wargelinno taladii ay dawladda Itoobiya noo soo jeedisay ee ahayd in wixii laga soo helo Liibiya laga soo dejiyo dekadda Casab.

Madaxweyne Cali Naasir aad iyo aad buu ugu farxay booqashadii aannu ugu tagnay iyo sida aannu taladayada wax uga siinnay. Aad iyo aad buu noola dardaarmay oo nagu dhiirrigeliyey in aan dul u yeelanno wax kasta ee aannu la kulanno, kolkii uu na sagootinayayna wuxuu noo rajeeyay in aannu safarka ku soo guuleysanno. Maalmo kaddib waxaannu gaarney magaalada Tiriiboli. Huteel weyn ayaa markaan nalaku dejiyey oo qarsoodigii waa aannu ka baxnay. Huteelka waxaa ka muuqdey magaciisa ' Xarunta la Dagaallanka Gumeysiga iyo Sahyuuniyadda' . Subaxii danbe waxaa naloo geeyey Abbaanduulaha Ciidamada. Markii uu ka soo Jeestey akhriska dalabkayagii wuxuu noo sheegay in uu arrinta ku wargelin doono Madaxweyne Qaddaafi, noona soo sheegi doono halka uu nagu qaabbilayo.

Wuxuu intaas noogu sii daray in qaabbilaaddu ka dhici doonto xarunta ciidammada ama xarunta Madaxtooyada. Saacado kaddib, waxaa naloo sheegay in Madaxweyne Qadaafi uu berri nagula kulmi doono xarunta ciidammada. Sidii uu ballanku ahaa, waxaa subaxii danbe nala geeyey xaruntii, halkaas oo Madaxweynnuhu nagu sugayay. Wuxuu na weydiiyey in aannu qorshihii keennay. Taas oo aannu u xaqiijinnay iyada oo aannu isla markiiba miiska u soo saarnay khariiddadii iyo dalabaadkii aannu soo diyaarinnay. Madaxweynnuhu si deggan buu u

dhegeystey arrimihii aannu u soo bandhignay, dabadeed wuxuu dhiniciisa u jiitey khariiddadii iyo qorshihii miiska saarnaa, kuwaas oo uu in wakhti ah keligiis akhrisanayay. Kolkii uu ka soo jeensadey ayuu indho furan nagu soo eegay. Qaabka uu noo soo fiiriyey waxaannu ka dareennay in dalabkayagu geliyey xoogaa shaki ah. tuhunkiise wuxuu naga baxay markii uu nagu yiri: "Hadaa Dayib" oo macnaheedu yahay ' Qorshuhu wuu fiican yahay' .
Dalabkayagu wuxuu ku salaysnaa in naloo hubeeyo ciidan 5000 ah iyaga oo lagu hubaynayo nooc kasta oo hub fudud ah iyo in nalaka haqabtiro baahida aannu u qabno hubka soo socda:

40 Taangi oo T55 ah,
60 Beebe,
5 Urur oo altalari ah oo min 12 qori ah
80 qori oo lidka dayuuradaha ah
Gaadiid badan oo ciidanka iyo qoryahaba ku filan,
Qalabka war isgaarsiinta,
Rasaas 6 bilood ciidanka ku filan,
6 bilood shidaal iyo raashin ciidanka ku filan
3 malyuun oo doolar oo caddaan ah oo hawlaha lagu socodsiiyo.

Koolkii uu si fiican u dersay dalabkayagii buu, nasiib wanaag, na weydiiyey in aannu u baahan nahay PM21. Waxaannu ugu jawaabney in aannu u baahannahay 2 urur oo PM 21, iyo 25PM 107mm oo 12 dhuumood ah. Madaxweyne Qadaafi wuxuu u jeestey xagga abbaanduulaha, oo ku yiri: ' Wixii lacag ah aniga ayaa siinaya, adigana waxaa lagaa rabaa in aad hubka ugu diyaarisid sida ugu dhakhsaha badan, bil gudaheedna aad Casab uga dejiso' .

Madaxweynihu wuxuu nagu yiri: ' Berri xafiiska iigu imaada' .
Sidii ballanku ahaa, subaxdii ayaannu u tagnay. Halkaas waxaa gacanta nalaka saaray lacag dhan saddex malyuun oo doolar. Wax aanaan filanayn baa nala siiyey. Wuxuu nagu yiri: ' Lacagta tirsada' , taas oo aannu ka diidney aadna ugu mahadinnay. Markiise aannu hoteelka nimid waannu tirinnay lacagtii, waxayna noqotay sidii nalooku sheegay. Sidii aannu markii horeba sammaynay baannu isku raacnay in aan lacagtaas la taaban oo duuduub ahaan la horgeeyo guddiga

fulinta. Liibiya waxay u yeertay safiirkii Itoobiya u fadhiyey Tiriiboli, waxayna ka codsadeen in ay nasiiyaan dayuurad aan lacagta ku qaadanno ilaa Addis Ababa. Waxaa kale oo ay u sheegeen inay hubka iyo qalabkii kale mudda bil ah ka dejin doonan dekadda Casab.

Waxaannu ka codsannay dawladda Liibiya in ay ku wargeliyaan Madaxweyne Cali Naasir wanaagga badan oo aan Liibiya kala kulannay. Habeenkii dambe 9 saac ayaa nalaku wargeliyey in dayuuraddii diyaar noo tahay. Halkii ayaannu ka dhaqaaqnay waxaannuna ku hakannay, si aannu shidaal uga qaadanno meel koofurta Liibiya ku taal oo xadka Suudan u dhow. Dabadeed waxaannu ka degney Addis Ababa, halkaas oo madaxdii Itoobiya iyo kuwii jabhadduba nagu sugayeen. Markii lacagta dayuuradda laga soo dejiyey waa la wada farxay. Waxannu dawladda Itoobiya weydiisanney in ay xisaab nooga furaan Bangiga Itoobiya. Kaddibna waxaannu tagnay xaruntii Jabhadda, halkaas oo aannu warbixin buuxda ku siinnay guddigii fulinta ee jabhadda. Waxay i weydiiyeen in kaalmadani noo socon doonto iyo in kale. Waxaan ku iri: ' Haa, waa noo soconaysaa haddii aynnu dadnimadeeda yeelanno' . Hubkii iyo saadkii kaleba sidii uu qorshuhu ahaa ayuu nooga soo degey dekadda Casab, dabadeedna waxaa la bilaabay in ciidammadii tababbar lagu siiyo.

Markii aannu taageeraddas weyn helnay waxaannu go' aansannay in aan meel la iska fadhiyin ee hawlgallo la sameeyo, tirada ciidankana la badiyo. Waxaannu samaynay istiraatiijiyo dagaal oo ku jihaysan gobollada woqooyi bari. Annaga oo arrintaas abaabul ugu jirna, ayaa waxaa na hakiyey xiriir ay nala soo sameeyeen ururka SNM. Kulammo na dhex maray waxaannu isku daynay talo ahaanna ugu soo jeedinney in labada jabhadood la mideeyo, taladaase SNM way diiddey*.

---

• SNM ( Somali National Movement ) waxaa London looga dhawaaqay sannadkii 1981kii, waxayna Addis yimaadeen sannadkii 1982kii. SNM markii ay diidday in labada jabhadood la mideeyo, waxaan ku guulaysannay inaan samaynno iskaashi dhinacyo badan taabanayey. Waxaa dhexmaray iskaashi xagga ciidanka ahaa, iskaashi dhaqaale iyo taakulayn. Radio Kulmis waxaa loo bixiyey Radio Halgan oo labada jabhadood wada isticmaali jireen. Dhammaan Saldhigyadii SSDF ay gobollada waqooyiga ku lahayd waxaannu ku wareejinnay jabhadda SNM, si ay SSDF ugu madax bannaanaadaan gobolada Dhexe iyo Koonfur.

Diidmadaasna waxaa ugu wacnaa guddoomiyaha SNM mudane Axmed Maxamed Maxamuud Siilaanyo. Waxannu dhinacayaga isku raacnay in aannu xiriirka labada jabhadood xajinno intii aannu kari karno.
Sidaas darteed, waxannu SNM u soo jeedinney in aannu samaysanno hawlgallo ciidan ee midaysan. Taas waxay noogaga jawaabeen in aannu ka taageerno hawlgallada ay doonayeen in ay sameeyaan. Waxaannu dabadeed hawlgallo ka samaynay Gobolka Togdheer. Waxaannu u soo jeediney in Burco weerar lagu qaado, wayse nagu diideen. Waxay beddelkeedii noo soo jeediyeen in weerarro lagu qaado tuulooyinka magaalada ku dhow.

SNM waxay garaneysey in xoogga dagaalka la qaadayay ka imanayay dhinaca SSDF, oo SNM aaney waayadaas lahayn wax cudud ah. Sidaas awgeed, diidmada Burco weerariddu waxay ka soo jeeddey cuqdad ah, in qabashada Burco loo arki lahaa guul u soo hoyatey SSDF oo SNM aaney wax lug ah ku lahayn. SNM run nooma sheegin oo wax bay naga qarsaneysey, sidaas awgeedna waxay ka baqeen in qabsashada Burco oo SSDF ka danbayso ay taageerayaasheeda weji-gabax ku noqoto, sidaasna ay ku waydo madax bannaanideeda, isla markaasna ay meesha ka baxdo ka miro-dhalinta waxa ay naga qarsanayeen. Taas oo aannu xaqiiqadeeda muddo gaaban ku ogaanney, oo naga yaabisay.

Hore ugama fekerin, iyada oo laga wada dheregsanaa xukun xumadii dalka ka jirtey, in halkii gacmaha la isqabsan lahaa sidii dalka looga xorayn lahaa musiibada ku habsatay, ayey rag tiro badani jabhad isugu urursadaan una hawlgalaan sidii ay dalka u kala goyn lahaayeen.
SNM waxay naga dooneysey oo keli ah, in aannu meel walba u jilcinno oo weerar ugu qaadno, dabadeedna ay ayagu si tartiib ah u galaan . 1984kii Magaalada Dirir-dhabe waxaa shir isugu yimid ururka SSDF oo aan anigu hogaaminayey iyo ururka SNM oo mudane Axmed Maxamed Maxamud Siilaanyo oo Siyaad Barre u ahaan jiray Wasiirka Ganacsiga ilaa 12 sano, si loo xoojiyo halganka hubaysan oo looga horjeedo Maxamed Siyaad iyo taliskiisa, loona dedejiyo riditaankiisa, loona dhiso jabhad iyo mucaarad loo dhan yahay waxaan soo jeedinaynaa in labada jabhadood degdeg loo mideeyo.

Arintaa iyada ahi waxay dalka ka badbaadinaysaa inuusan dhicin dagaal qabali ah markii la guulaysto kaddib. Siilaanyo wuxuu iigu jawaabay, ' Xisaab 60kii khaldantay jeeraan saxno waxba idin ku darsan mayno taasoo macnaheedu yahay inaan SNM rabin midnimo Soomaaliyeed'. Haddaba, haddaan muddadaas kaddib talo kale ku dhalan Siilaanyo ulajeedadiisu waa in ay goostaan goboladii Ingiriisku gumaysan jiray. Waxaase wax lala yaabo ah woqooyi oo doonaysa inay si qabiilnimo ah uga go'do Soomaaliya inay sheegato Sanaag, Sool iyo Cayn oo guri Harti ah iyo Awdal oo guri Ciise iyo Godabiirsay ah, waxaa la yaab leh in qabiil ku fakaro inuu qabiil kale xoog ku goosan karo sheeganna karo xuduuddii Isticmaarkii Ingiriiska sidii iyagu ay yihiin caruur Ingiriis dhalay oo dhaxalkiisa leh.

Haddaba woqooyiga Soomaaliya ha ogaadeen, Soomaali dhammina ha ogaato inaan arintaasu suuragal ahayn, maxaa yeelay markii la israacay kaddib 1961kii afti baa la qaaday ummadda Soomaaliyeed oo dhammi waxay isku raacdaay midnimo, xuduuddii Ingiriiska iyo Talyaaniguna meeshay ka baxday. Waxaan haddaba kula talinayaa Siyaasiyiinta waqooyiga: (waxaan suuragal ahayn inayan Shacabka Soomaaliyeed oo woqooyiga deggan ku maaweelin).

Markii ay noo caddaatay siyaasadda qaran dumiska ah oo ay faraha kula jiraan, af buuxana noogu sheegeen in ay ka hawlgelaayaan gobollada woqooyi oo keli ah oo aaney wax dan ah ka lahayn dalka intiisa kale, ayaannu go'aan ku gaarney in aannu ciidammadayada ka soo qaadno woqooyiga oo isugu geynno xudduudka u dhexeeya Itoobiya iyo koofurta Soomaaliya, halkaas oo hore aannu saldhigyo ciidan ku lahayn.

Koofurta Soomaaliya waxaannu hore uga wadney hawlgallo dhuumaalaysi ah, jidgooyo iyo qaraxyo ciriiri lagu gelinayay isu socodka dalka, hawlahaasise waxay muddooyinkii hore oo dhan ku koobnaayeen gobollada Mudug, Nugaal iyo Bari.

Nasiib wanaag, markii aannu koofurta isku soo urursannay, waxaa laba jibbaarmey masaaxadii hawlgalladaasi ka socdeen, koofurta oo dhanna ka sinmay marka lagu daro Muqdisho oo aan qaraxyo ka samayn jirnay. Hawlgalladaan waxannu uga dan lahayn ' Waraf laba shinbirood ku dil'. Dantayadu waxay ahayd in aannu shacbiga u muujinno in jabhaddii soo dhowaatey oo ayaamo tirsani ay Siyaad Barre u harsan yihiin, sidaasna niyadda ugu dhisno, dhinaca kalena waxaannu dooneyney in aannu jahawareer ku ridno ciidammada Siyaad Barre.

## SSDF IYO ITOOBIYA: BILAWGII KHILAAFKA

Waxaa welwel ku ridey ciidammadii Siyaad Barre, SSDF oo hawlgalladeedii ciidan si fiican ugu socdaan, mooraalka ciidankeeduna heer sare marayo, joogitaankeeda iyo hawlgaladeeda ciidanna laga dareemay Soomaaliya oo dhan. Xukuumaddii ay dagaalka kula jirtey ay dhaqaale ahaan iyo siyaasad ahaanba taag yaraysey oo ay gudaheeda iscunayso, ciidankeediina burbur foodda u saaranyahay, Siyaad Barrena qirtay in aanney talo faraha ugu jirin oo sababahaas awgood ay khasab ku noqotay in uu ku dhawaaqo xukun degdeg ah, kaas oo uu u adeegsadey in uu xabbiska u taxaabo shakhsiyaadkii ugu firfircoona xukuumaddiisa, ayaa, nasiibdarro, xukuumaddii Itoobiya ku tallaabsatay siyaasad lid ku ahayd qarannimada Soomaaliya, heshiiskii iyada iyo SSDF ka dhexeeyey iyo gaar ahaan shakhsiyaddayda.

Itoobiya, iyada oo ka duulaysa aragti gaaban oo ay ku doonaysey in ay dareenka shacbigeeda ka jeediso mashaakilka faraha badan ee gudaha iyo dibeddaba ka haystey, ayay calankeeda ka taagtey degmooyin Soomaaliya ka mid ah ee ay jabhaddu qabsatay, sida Galdogob iyo Ballanballe, isla markaasna ku dhawaaqday in degmooyinkasi ka mid yihiin dalka Itoobiya. Wasiirkii Arrimaha Dibadda ee Itoobiya Dr. Col. Goshe Walde wuxuu warsaxaafadeed ku sheegay (sannadkii 1984) in degmooyinkaasi ka tirsan yihiin dalka Itoobiya, balse laga wada xaajoon karo, haddii lagu heshiiyo in la qeexo xudduudaha u

dhexeeya Soomaaliya iyo Itoobiya. Qof ahaan waan ka warqabay in belaayo ka taagnayd Itoobiya gudaheeda, taas oo Mingistu uusan u hayn wax xal u ah, iyada oo weliba abaar aad u xumi ay dalka ka taagnayd. Sidaas oo kale, waxaan xogogaal u ahaa in ay dawlado dhawr ahi u kala dabqaadayeen Siyaad Barre iyo Mingistu, doonayeenna in si Itoobiya raalli ku noqon karto ay ku soo afjaraan colaadda Soomalia iyo Itoobiya. U kala dabqaadidda labada keligi-taliye welwel naguma hayn, maxaa yeelay, jabhaddayadu waxay awood u lahayd in ay ciidammada Siyaad Barre dalka gudihiisa kula dagaallanto.

Arrinta welwelka weyn igu haysey waxay ahayd in, Siyaad Barre oo aan ogahay xukun jecaylkiisa, dawladdiisuna maalinba maalinta ka danbaysa ay sii tabaryarayneysey, kaddib markii jabhaddu ay goobo badan ku jebisey, ay naf-lacaarinnimadu u geyso in uu indho la'aan ku yeelo wax allaale wixii uu Mingistu rabo, oo uu si fudud u saxiixo heshiis caalami ah ee uu kaga tanaasulayo qaddiyaadda soo jireenka ah ee Soomaali Galbeed.

Haddii aan maanta dib u qiimeeyo xaaladda dhabta ah ee taliska Siyaad Barre waagaas ku sugnaa, waxaan oran karaa in dareenkaygu uu xaqiiqada u dhowaa, oo aaney waxba ku ahayn Siyaad Barre in uu gaaro go' aan noocaas ah. Damaciisa lama filaanka ah ee xagga Itoobiya naga soo foodsaaray iyo aragtida taagta daran ee Siyaad Barre arrintaas ku wajahay, waxay khasab nagaga dhigeen in jabhaddu la wareegto xilka difaaca qarannimada dalka. Sidaas awgeed, waxaan shir degdeg ah oo arrintaas ku saabsan u qabtay guddigii fulinta. Kaas oo dood badan kaddib la isla meel dhigay in ummuurtaas laga hortago oo adduunka loo caddeeyo in dalka Soomaaliya uusan gorgortan geli karin.

Kolkii uu guddigu caddeeyey aragtida jabhaddu arrintaas ka taagan tahay ayaa, waxaa soo baxday su'aal la xiiriirta sida ugu habboon ee guddiga fulintu uu go'aankiisa ku meelmarin karo. Waxaa la isweydiiyey in Itoobiya gudeheeda lagu faafiyo go'aankaas iyo in dalka dibaddiisa lagu ekeeyo.

Xubnihii guddigu waxay dhammaantood isku waafaqeen in ay tahay taagyari siyaasadeed in dibadda lagu faafiyo aragtida jabhadda, sidaas awgeedna ay habboon tahay in gudaha Itoobiyana lagu faafiyo, lagana faafiyo idaacadda ay iyada lafteedu ina siisay.

Taladii ugu adkayd waxay noqotay, yaa idaacadda Halgan ka hadlaya, taas oo dhammaan xubinihii guddiga fulintu ka aammuseen. Markii la aammusay ayaan waxaan soo jeediyey in Xasan Cali Mire oo u qaabbilsanaa jabhadda waaxda Arrimaha Dibadda uu ka hadlo idaacadda, isla markaasna ahaa soo jeediyihii talada aannu gaarney. Xasan waa ka cudurdaartey in uu idaacadda ka hadlo wuxuuna yiri: ' Anigu cagaha ayaan dhulka ku hayaa oo sida dadka qaarkiis qar iska tuur ma ahi' . Waxaan mar labaad soo jeediyey in, Cabdulqaadir Isbarriije oo Waaxda Warfaafinta noo qaabbilsanaa, xil ahaanna ahaa afhayeenka jabhadda, uu idaacadda ka hadlo. Cabdulqaadir wuxuu yiri: ' Neef baa i haysa oo codku iga soo bixi maayo, waxaana tegayaa biyo kulule oo Addis Ababa u dhow' . Guddiga intiisii kalena hoos bay madaxa u rogteen. Waxaa halkaas iiga caddaatey in raggii wada baqay.

Cabbaar markii aan fekerey, sida aan dareemayna ay xubnaha guddigu isweydiinayaan waxa aan oran doono, ayaan hadalkii qaatay oo si guudmar ah wax uga taataabtay qaddiyaddii aannu u dagaallameyney iyo taariikhda halgankii aannu muddada ku soo jirney, dabadeedna waxaan ku soo gabagabeeyey in aaney qummanayn in, duruufo kasta oo jira, madaxdu ka gaabiso dowrka laga filayo. Xubnihii guddiga fulinta waxaan ku iri ' Mar haddii aad ka gaabsateen in aad idaacadda ka hadashaan, aniga ayay khasab igu tahay in aan idaacadda ka hadlo. Waxa keli ah oo aan idin weydiisanayaa waa in, haddii aan arrintaas dhib kala kulmo, aad midnimadiinna ilaalisaan, halgankii meeshiisa ka sii waddaan inta ay jabhaddu ka gaarayso hadafkeedii. Waxaan guddiga xusuusiyey qallafsanaanta Mingistu iyo sharcidarrada Itoobiya ka jirta in wax waliba ay suurtaggal noqon karaan, sidaas awgeedna aad iyo aad ha loo feejignaado' .

Waxaan kale oo aan guddiga ku boorriyey in laga feejignaado cadaadiska suurtaggalka ah ee ay Itoobiya ina saari doonto iyo caqabadaha ay hawlgal keena u dhigi doonto, sidaas awgeedna ay adkaan doonto sidii Itoobiya loo joogi lahaa, halgankana loo sii wadi lahaa. Ugu dambayntii, waxaan guddiga kula taliyay in ay degdeg u dersaan sidii ay jabhaddu dagaalka uga wadi lahayd dalka gudihiisa. Guddigu aad iyo aad bay u soo dhoweeyeen talada aan u soo jeediyey, si cadna waxay iiga ballanqaadeen in ay, sida ugu dhakhsiiyaha badan, u meelmarin doonaan. Sidaas ayaan xubnihii guddiga isku macasalaameyney.

Subaxdii ku xigtey waxaan tegey Raadiye Kulmis/ Halgan oo ka mid ah tas-hiilaadka ay Itoobiya ay jabhadaha u fidisay, halkaas oo aan ka sheegay in guddiga fulinta ee jabhaddu uu fadhi ka yeeshay sida ay dawladda Itoobiya ugu xadgudubtey qarannimada Soomaliya, dabadeedna uu ka soo saaray go'aan uu ku canbaaraynayo go' aanka ay ku gaartey in ay calankeeda ka taagto Galdogob iyo Balanballe oo ah degmooyin ka kala tirsan gobollada Galgaduud iyo Mudug ee Soomaaliya. Waxaan sidaas oo kale Raadiye Kulmis uga caddeeyey in, jabhaddu degmooyinkaas ku qabsatey dagaal kharaar, iyada oo aan haddana la inkirsanayn in Itoobiya ay arrinta kaalmo xaddidan ku lahayd. Markii aan raadiyaha ka akhriyey go'aankii guddiga fulinta, ayaan ku daray caddayn ah in ' Hadalkii Wasiirka Arrimaha Dibadda ee Itoobiya uu sida rasmiga ah u faafiyey uu yahay mid xaqiiqada ka fog, sidaas darteedna ka codsaneyno adduun weynaha in la canbaareeyo falkaas' . Bayaankii aan raadiyaha ka sii daayay dabadiis, waaxaan ku soo noqday xaruntii jabhadda, halkaas oo aan iska watey shaqadaydii caadiga ahayd. Warkii markuu baxay ee laga dhegeystey Soomaaliya iyo adduun weynahaba, waxaan malaynayney in falcelis degdeg ahi naga soo foodsaarayo dhinaca Itoobiya, wax ju' noo yiraahdase ma aannu arag. Taas oo jirta ayayna dareenkayaga ka bixin in tallaabada aannu qaadnay aaney Itoobiya marnaba nagu cafiyeen.

Itoobiya waxay bilowday in ay tartiib-tartiib, si doqoni-ma-garata ah, ay u carqaladeyso hawlgalladii jabhadda, isla markasna ay ciriiri geliyaan dhaqdhaqaaqii iyo shaqadii madaxda jabhadda. Dhaqanka cusub ee ay Itoobiya bilowday in ay nagu wajahdo ayaa ahaa mid

tallaabo-tallaabo ula saanqaadaya saddex arrimood oo kala duwan, kuna salaysanaa siyaasadda Itoobiya ka lahaayd Soomaaliya.
Midda kowaad, waxay ku saabsanayd wada hadallada ay kula jirto Siyaad Barre, oo ay ku dooneyso in ay la gaarto heshiis lid ku ah danaha Soomaaliya. Itoobiya waxay Siyaad Barre kula gorgortamaysey SSDF oo noqotay fallaar wadnaha kaga taagan. Itoobiya waxay ku rajo weynayd in Siyaad Barre wax walba uu u saxiixayo si uu mar uun uga takhalluso SSDF.

Tan labaad, waxay ku saabsanayd garab ka dharbaaxa iyo dhiirrigelin Itoobiya ku koolkoolinayso SNM si ay u noqoto jabhad madaxbannaan oo u taagan gooni u goosadka gobollada Woqooyi Galbeed. Tan saddexaad, waxay la xiriirtey faraggelin hoose oo ay Itoobiya ku kala qaybinaysey madaxda Jabhadda si ay uga dhex kasbadaan dad danaheeda u fuliya oo ay adeegsadaan.
Muddo hal sano ku dhow, wadashaqayntii ka dhaxeysey Jabhadda iyo Itoobiya mugdi bay ku jirtey, oo shakigii kala dhexgalay wuxuu gaarey quus aan isu soo noqod lahayn. 1984kii wafdi aan hoggaaminayo ayaa SSDF uga qaybgalay shir lagu qabtay dalka Liibiya oo looga hadlayay sidii PLO loogu ururin lahaa ciidammo xoreeya Falastiin. Dhammaan wufuuddii shirkaas ka soo qaybgashay waxay halkaas ka soo saareen go'aan midaysan oo boqolkiiba-boqol lagu oggolaaday ajeendadii la soo hor dhigay. Go'aannadii shirka laga soo saarayna aniga ayaa u saxiixay jabhadda SSDF, wax tafaasiil ahse kama aanan bixin halka aan ciidanka ka keenayo.

## SSDF IYO DHABARJEBINTII ITOOBIYA

Isla ayaamihiiba waxaa soo baxday dacaayad been abuur ah oo Itoobiya soo maleegtey, taas oo laygu eedaynayay in aan ciidanka jabhadda ka rarayo dalka Itoobiya oo aan u wareejinayo jasiiradda Suqadara ee Koofurta Yemen. Xaqiiqo ahaan waxba kama jirin been abuurkaas. Markii aan Addis Ababa ku soo noqday waxaan la kulmay been abuurkii Itoobiya iga faafisay oo sheeko maalmeed noqday. Been abuurkaasi wuxuuba saamayn ku yeeshay rag ka mid ahaa madaxdii jabhadda, kuwaas oo si fiican looga dareemayay hab-dhaqankooda.

Waxaa durba ii caddaatay in Itoobiya ay ku guuleysatey faraggelintii ay in muddo ah kula dhex jirtey jabhadda oo ay gacanta ku dhigtay xubno badan oo madaxdeeda ka mid ahaa. Itoobiya kolkii ay hubsatay in madax badan oo jabhadda ka mid ahaa ay gacanteeda soo galeen, ayay ku dhaqaaqday in ay iyaga u adeegsato dhabarjebintii ay in mudda ah la dooneysey SSDF.

Waxay ku amartay raggii ay danaheeda gaarka ku fushanaysay oo ay jabhadda ka kasbatay in ay u soo diyariyaan warbixin ay ku rasmiyaynayaan been abuurkii ay hore u soo maleegtey, kuna caddaynayaan in Cabdullaahi Yuusuf uu doonayo in uu jabhadda ka rarayo dhulka Itoobiya, isla markaasna, kaga codsanayaan Itoobiya in ay si degdeg ah u soo dhexgasho, tallaabada ku habboonna ka qaaddo si aan loo siin Cabdullahi fursad uu ciidammada jabhadda uga saaro Itoobiya.

Itoobiya iyo madaxdii Jabhadda ee la shaqaynaysey waxay u arkayeen in tallaabada ay doonayeen in ay igaga takhallusaan ay si toos ah ugu meelmareyso, xisaabtase kuma ayan darsan in, derejo kasta ha lahaadeene, hawlwadeennada iyo ciidanka jabhadduba aaney waxba u arkayn raggaas oo aaney dheg u jalaqsiinayn go'aanka ay Itoobiya u yeeriso. Isla xilliyada la maleegayay shirqoolladaas, waxaa soo shaacbaxay warar lagu jahawareeray oo sheegay in khilaaf ba' ani uu ku dhex jiro madaxdii jabhadda. Wararkaas dadka lagu jahawareerinayay waxaa barbar socdey tallaabooyin gurracan oo Itoobiya ay jabhadda ku curyaamineysey.

Wax kasta oo ay Itoobiya samayneysey waxay ujeeddadeedu ahayd sidii magac iyo jiritaan ahaanba la iiga takhalusi lahaa. Qof ahaan, lama yaabbanayn shirqoollada la ii maleegayay oo hore bay ii soo mareen kuwa ka daran oo la doonayay in la igu dilo, Ilaah baase iga badbaadiyey. Halka daba-dhilifyadii ka qaybqaatay dhabarjebinta SSDF aaney waxba u qorshaysnayn oo ay doonayeen oo keli ah in ay Cabdullaahi ka takhallusaan, Itoobiyase mar hore ayay go' aansatay in ay SNM u adeegsato danaheeda. SNM isuma taagin qaddiyad ay qaranka ku badbaadineyso, sababaha curashadeeda qayb libaax ka qaatay waxaa ka mid ahaa dareen ganacsato isu aragtay in xukuumaddu

dhaawacday dano dhaqaale oo ay dalka ku haysteen, kaddib markii Siyaad Barre xayiray soo dejinta badeecadaha ay ka mid ahaayeen Franca Valuta, Qaadka, iwm., kuwaas oo reer woqooyi Keli-keenid ku haysteen. Isbeddelkii dhaqaale ee dalka soo foodsaaray 1980aadkii kaddib markii Soofiyeetigii dalka ka baxay, halkii uu banneeyeyna uu Galbeedku buuxiyey, ayaa sababay in la joojiyo badeecadaha kor ku xusan.

Raggii ama kooxihii dano gaar ahi kaga dhumeen habkii dhaqaale ee uu Galbeedku doonayay in ay dalka ka fuliyaan, ayaa ku guuleystey in danihii dhaqaale ee ka lumay, ay siyaasadeeyaan oo u muujiyaan in xayiraadihii badeecadahaasi lagula dagaallamayay qabiilka Isaaq.
Waxaa la oran karaa in arrimaha noocaas ah iyo gocoshooyin yaryar ee siyaasiyiin reer Woqooyi ah laga maqli jirey ay dhaliyeen baahi urur leh dabeecad qabiil iyo mid goboleedba oo ay danahooda ku difacdaan. Ilaa xad waxaa la oran karaa in SNM ay sidaas ku dhalatay. Sidaas awgeed SNM diyaar bay u ahayd in ay heshiis kasta la gasho si ay ku gaarto himiladeedii koobnayd ee ahayd in ay goosato Gobollada woqooyi-galbeed dibna ugu soo celiso ganacsatada reer woqooyi danihii yaraa ee xukuumaddii Siyaad Barre ka waayeen.

SNM waxay, iyada oo ka duuleysa ujeeddadeeda qaran dumiska ah, si toos ah isugu dhiibtey Itoobiya, isla markaasna la gashay heshiis qarsoodi ah oo ku salaysnaa kala goynta Soomaaliya iyo la dagaallanka SSDF iyo guddoomiyaheeda oo ay u arkayeen caqabad hor taagan meelmarinta heshiiskooda. Waxaa xusid mudan in, heeshiiskaas laga qariyey muwadiniintii ka tirsanayd SNM oo ay ku talaxtageen koox yar oo uu Siilaanyo hoggaaminayay, dhaqangelintiisase si dadban loogu adeegsadey SNM.

Hoggaanka wardoonka ee SSDF wuxuu gacanta ku dhigay qorshe sir ah oo ay ka danbeeyeen Itoobiya iyo SNM, kaas oo ku salaysnaa sidii la igu dili lahaa, dabadeed wuxuu bilaabay in uu tallaabo-tallaabo ula socdo hadba heerka ay marayso fulinta qorshahaasi. Sidaas oo kale waxannu helnay 13 waraaqood oo lagu amrayay in aniga iyo madax kale oo jabhadda SSDF ka tirsanayd toos loo laayo.

Markii mu'aammaraadka lidka nagu ahi ay gaareen heer aan loo dulqaadan karin, ayaan Mingistu, hordhigay waraaqihii xambaarsanaa go'aannada SNM ku gaartey in nala laayo. Waxaan xusuusiyey in labada Jabhadoodba ay magangelyo ku joogaan Itoobiya, sidaas awgeedna xukuumaddiisa ka codsanayno, haddii aaney iyadu lug ku lahayn mu'ammaraddaas, in ay degdeg wax uga qabato. Waxaa kale oo aan u sheegay in dulqaadkii naga dhammaaday oo haddii aan degdeg arrintaas wax looga qaban ay SSDF khasab ku noqon doonto in ay isdaafacdo. Mingistu wuxuu iigu jawaabey in ayan Itoobiya ka shaqayn isku diridda Jabhadaha iyo in aaney marna dhexgelin muran iyaga ka dhaxeeya. Wuxuu kale oo igu yiri: ' Waraaqaha aad ii keentay waxaan u gudbinayaa xaafiisyada ku shaqada leh si ay baaritaan ugu sameeyaan, dabadeedna natiijada ka soo baxda ayaan kugu soo wargelin doonaa, hadda iska tag oo war iga sug' . Warcelintii Mingistu waxay noqotay dhacdooyinkaan soo socda: Ilaaladaydii Dirir Dhaba joogtey baa waxaa loo diidey in ay tagaan xarumihii ciidankayga ee Dirir Dhaba ka baxsanaa.

Sirdoonka Itoobiya iyo madaxdii SSDF ee gacansaarka la lahaa waxay iska dhaadhiciyeen in socdaalka raggaasi la xiriiray qorshaha Cabdullaahi Yuusuf uu ciidanka kaga saarayo Itoobiya. Afar ka mid ah ilaaladayda baa iyaga oo ku sii jeeda gurigii aan degganaa ayaa koox ka tirsan ciidanka Itoobiya oo saraakiil SSDF ahi hagayso dhexda ku joojiyeen oo amar ku siiyeen in ay hubkooda u dhiibaan, iyaguna way diideen, maxaa yeelay kuwa amrayay ayaa laftoodu hubaysnaa. Markii xoogaa hadalkii la isla dhaafay, Itoobiyaankii rasaas ayay oodda uga qaadeen. Ilaaladii waxay isku dayeen in ay isdifaacaan, xoog ayaase lagu muquuniyey.

Goobtaas waxaa lagu dilay saddex ka mid ah Ilaaladii, midna waa la dhaawacay. Kii la dhaawacay horay ayay u qaateen, kaddibna way dileen. Ilaaladii hal nin ayay Itoobiyaanka ka dhaawaceen. Isla subaxdaas ayaa aniga iyo Dr. Cabdullaahi Maxamed Xasan (Faash) nalooka yeeray xarunta Nabadsugidda Itoobiya. Saraakiishii aannu halkaas ugu tagnay waxay nagu wargeliyeen in Wasiirka Amnigu na doonayay oo ay xafiiskiisa noogu geynayaan. Waa tahay baan ugu jawaabey. Meeshii nala geeyey waxaannu ugu tagnay Wasiirkii,

kaaliyeyaashiisii ugu sarreeyey iyo dhawr Janan oo Wasaaradda Gaashaandhigga ka socdey. Soo dhoweyn iyo salaan kaddib, raggii meesha fadhiyey waxay noo sheegeen wixii nalooku yeeray, taas oo ahayd in aan hoggaanka Jabhadda ku wareejiyo Maxamed Faarax Jimcaale oo markaas Jabhadda u qaabbilsanaa waaxda Arrimaha gudaha.

Wasiirkii iyo Janannadii la fadhiyey waxaan ugu jawaabay: ' Xil iyo ciidan midna wareejin mayo' . Waan gartey in ay doonayaan in aniga si qorshaysan la iiga takhalluso. Ka takhalluskayguna dhaco markii aan xilka wareejiyo, oo ku soo baxo nin aan xil hayn oo caadi ah , dabadeedna ka takhalluskayga (dil ama xabbis) dunida loogu muujiyo tallaabo caadi ah oo laga qaaday qof dambi galay. Dood dheer kaddib, markii aannu isla garan weyney taladii ay soo jeediyeen baa Wasiirku amar ku siiyey Janannadii gaashaandhigga ka socdey in Xarunta Gaashaandhigga nala geeyo si ay madaxda halkaas joogtaa isugu daydo in ay igu qanciyaan in aan taladooda raaco oo xilka wareejiyo. Sidii bay yeeleen oo xaruntii gaashaandhigga baa nala geeyey. Waxaa nala socday wiil ilaaladayda ka tirsanaa oo bastoolad sitey. Halkaas waxaannu shir kula galnay dhawr Janan, kuwaas oo xaraf xaraf iigu soo mariyey taladii aannu isku mariweyney aniga iyo wasaaraddii amnigu.

Markii ay iga quusteen bay si hoose u wada hadleen, kaddibna saraakiil kale bay amar ku siiyeen in nala geeyo xabsiga ciidammada. Raggii amarka la siiyey waxay nagu yiraahdeen: ' Ina keena meel baan idin sii marinaynaaye' . Waan gartay meesha naloo wado. Wiilkii nala socday oo lagu magacaabi jirey Canbaashe Cabdulle Xaashi Xanaf waxaan ku iri: ' Meel dhow baannu ka soo laabaneynaaye halkaaga nagu sug' . Waxaan ka cabsaday in, markii xabsiga nala dhigo, uu dagaallamo oo meesha lagu dilo. Markii aannu gaarney xabsigii waxaa toos noola wareegey taliyihii xabsiga. Xabsigu wuxuu ka koobnaa dhowr qaybood oo ku kala jaango'an dembiyada kala duwan ee loo kala haysto eedaysanayaasha meesha ku xabbisan. Annaga waxaa nala geeyey qaybta lagu magacaabo "Yemakananroj qooye ki fil" oo ah meesha saraakiishu xukunka ku sugaan marka la soo xiro. Aniga waxaa la igu xiray qolka 4aad, Cabdullaahi Faash-na qolka 5aad. Isma aannaan arki karin, islamana hadli karin.

Markii la maqlay in nala xiray oo warkii meel walba gaarey, ayaa ciidankii jabhaddu gadoodey, falkaas oo ay uga dan lahaayeen in ay si bareer ah dareenkooda u muujiyaan. Arrintaasi waxay Itoobiya ku noqotay mid aaney filanayn oo argaggax gelisey. Waxay dabadeed u yeereen raggii shirqoolka kala shaqeeyey, kuwaas oo ay amar ku siiyeen in ay degdeg u keenaan qofkii xilka loo dhiibi lahaa. Raggii Itoobiyaanku watey midmid bay dib ugu gurteen oo iska waayeen qof ku dhaca in uu shakhsi gaar ah Itoobiyaanka u tilmaamo.

Run ahaan, iyagu marna ma malayn in la weydiinayo qofkii jagadayda loo dhiibi lahaa oo Itoobiya bay ka sugaayeen in ay nin ka soo dhex qabato oo meesha u dhiibto. Aakhirkii waxay ku taliyeen in, inta shirweyne laga qabanayo, si ku meel gaar ah hoggaanka jabhadda loo dhiibo Maxamed Abshir Walde, kaas oo aannu isku jilib hoose nahay.

Sababaha Itoobiya ku khasbay in ay dadaal dheer u gasho, wakhti badan u quurto ka takhalluskayga, kama maqnayn welwel ka galay heerka sare ee tirada iyo tayada ciidanka SSDF gaarey, kaas oo aan ka madaxbannaanayn oo keli ah siyaasaddeeda, balse uu khilaaf qota dheeri soo kala dhexgalay. Welwelkii ay Itoobiya hore uga qabtey ciidanka SSDF oo ay tiradiisu gaareysey 8 kun, kuna hubaysnaa nooc kasta oo hub ah, wuxuu ku sii weynaadey markii ay si bareer ah ugu gacansayreen go'aankii ay gaareen Itoobiya iyo raggii la shaqaynayay, isla markaasna ay soo cayriyeen kuwii madaxda sheeganayay oo ay u dirtay.

Dhacdooyinkaas kaddib, Itoobiya waxay cambaarayn dusha uga tuurtay raggii la shaqaynayay, amarna ku siisay in ay keenaan rag dadku maqli karo. Shirqoolkii labada dhinac iska kaashadeen oo la igaga takhallusay waxaa ka horyimid caqabado aaney hore ugu talaggelin, kuwaas oo taladoodii ka dhigay hal bacad lagu lisay. Waxaa Itoobiya durba u soo baxay in, raggii ay dhabarka ka soo dharbaaxday ee hore ugu bishaareeyey in ay wax walba gacanta ku hayaan, aaney jabhadda waxba ka ahayn, wax xiriir ahna la lahayn taageerayaasha iyo ciidaanka jabhadda, bal iska daa awaamiir ay siiyaane.

Isku day badan oo ay Itoobiya samaysay si ay ciidanka uga qanciso in ay yeelaan amarka madaxda cusub wey ku fashilmeen. Ciidankii ma diidin oo keli ah taladii Itoobiyanka, waxaybase ka codsadeen in degdeg xabbiska la iga soo daayo. Dad badan oo kale oo Itoobiya u dirtay sidaas oo kale ayay ku yiraahdeen. Markii talo cakirantay ayaa waxaa lagu dhawaaqay in magaalada Harar lagu qaban doono shirweynihii Jabhadda. Maxamed Abshir Walde oo markii la i xiray ku meel gaar ahaan jabhadda loo dhiibay wuxuu diidey in uu ka qaybgalo tartaankii madaxnimada SSDF.

Maxamed wuxuu ogaadey in ayan cidina amar ka qaadateen, xataa haddii uu jagadaas ku guuleysan lahaa, dabadeedna dayuurad buu Addis Ababa ka qaatay oo Nayroobi buu ku noqday. Kolkii Walde iska tagey, waxaa guddoomiye laga dhigay Xasan Cali Mire. Xasan wuxuu is yiri xoogaa dadaal ah isku day bal in aad ciidanka qanciso, markiise uu gaarey aaggii ciidanka waxaa lagala horyimid buuq iyo qaylo, wuuna isaga soo noqday. Dawladda Itoobiya waxay garatay in madaxdii jabhadda ee maqaarsaarka ahaydi ayan waxba wadi karin. Mingiste arrintii waa la kharaaraatey. Wuxuu shir u qabtay Xasan Cali Mire iyo kooxdiisii, shirkaas oo lagaga dooday sidii lagu heli lahaa talo caqligal ah ee lagu hagaajin karo xaaladda adag ee soo foodsaartay. Welwelka xulafada wada haystey ka sokow, Mingiste waxaa u dheeraa kan ka haystey halista uga iman kartey joogitaanka ciidan 8kun gaaraya oo aad u hubaysan oo dhulkiisa ku sugan.

Dr. Xasan Cali Mire iyo kooxdiisii waxay Itoobiya u soo jeediyeen in ay ciidanka SSDF amar ku siiyaan in ay hubka dhigaan, haddii ay ka diidaanna ay xoog uga dhigaan. Ciidanka SSDF wuxuu kala fadhiyey Wardheer, Qorrof, Galdogob iyo Balanballe. Kolkii Itoobiyaanku ku dhaqaaqay fulinta amarkii lagula taliyey, ciidankii SSDF wuxuu diidey in uu hubka dhigo. Markii la is mari waayay, waxay Itoobiyaankii ka fursan waayeen in ay xoog adeegsadaan. Sidaas ayaa waxaa ku bilawday iska horimaad xooggan oo dhexmaray ciidammadii Itoobiya iyo kuwii SSDF ee kala fadhiyey Wardheer, Qorrof iyo Galdogob. Itoobiyaanku si fudud uguma bareeri karin ciidanka Jabhadda ee waxay ogayd in ay iyadu gacanta ku hayso maqaasiinnada ay rasaastu u tiil labada ciidan.

Muddo markii dagaalku socdey baa ciidankii Jabhadda waxaa ka dhammatay rasaastii. Sababtaas ayaa Itoobiya u suurtagelisey in ay gacanta sare yeelato. Iska horimaadkaas waxaa dhinaca jabhadda kaga shahiidey dad gaaraya 60 qof, halka tiro intaas ka badanina ka dhaawacantay. Khasaarada Itoobiyaanka soo gaarteyna aad iyo aad bay intaas uga badnayd. Badi ciidankii jabhadda waxaa dabadeed, iyaga oo hub la'aan ah, lagu hareereeyey xeryahoodii. Ciidankii ku sugnaa Balanballe markii uu ogaadey wixii ka dhacay melihii kale wax dagaal ah ma qaadin. Intii yarayd ee ka hartay oo ku sugnayd taliska guud ayaa waxaa u tegey Muuse Islaam, kaasoo u sheegay in uu Nayroobi gaarayo oo ay halkooda ku sii sugaan inta uu uga soo noqonayo.

Si loo waayo qof loo hirto ayaa Itoobiyaanku waxay Islaan Cabdulle Islaan Faarax xabsi dawlo ahaan ugu xirtay magaalada Harar. Sidaas oo kale, waxay xabsiyo kala duwan dhigeen saraakiishii ciidanka ugu magac weynayd. Saraakiishaas waxaa ka mid ahaa Saciid Dheere, Cabdulqaadir Isbarriije, Cabdullaahi Cali Mire (Carays), Maxamuud Maxamed Cali (Sigane), Hoorri iyo Daahir Mire Jibriil. Mar qur ah bay kala yaaceen dhammaan kuwii madaxda sheegan jirey oo midmid ayay u dhuunteen. Itoobiyaanku waxay gacanta ku dhigeen hubkii jabhadda oo dhan, waxayna ku xeraysatay bakhaarro gaar ah oo ay ugu talaggashay. Mudda kaddib waxay hubkaas kala siisay SNM iyo USC, kuwaas oo ay gadaal ka riixayeen, oo ay doonayeen in ay u muujiyaan in ay yihiin jabhadaha keli ah ee Siyaad Barre dagaalka kula jira.

Itoobiyaanku laba ujeeddo bay buunbuuninta arrintaas ka lahaayeen: mid waxay ahayd in ay muqaal waddaninnimo u yeesho jabhado ku sheeg ay maamulato; tan labaadna waxay ahayd in ay jabhadaan ku bahdisho SSDF oo isku daydo in ay ka dhigto wax aan jirin, tariikhdeediina sidaas ku aasto. Been abuurka iyo dhaqan xumida Itoobiya waxay gaareen heer ay ciidankii yaraa ee xaruntii jabhadda ku sugnaa ay halkooda ku masruufto, si ay dunida ugu muujiso in jabhaddii SSDF iskeed isaga baabba'day oo waxa ka haray oo keli ah yihiin xoogaaga xaruntoodi ku sugan. Waxay riwaayaddaas u dhigeysey oo keli ah in aan lagu eedayn in ay iyadu baabbi'isay jabhaddii ku dhowaatey in ay Siyaad Barre dalka ka xorayso, qarannimadii dalkana sugto.

Maalmo kaddib, markii ciidankii SSDF wiiqmay, ayaa bishii Juunyo 1986kii waxaa laga watay qolkii uu ku jirey Cabdullahi Faash, taas oo loo qaatay in takhtar la geynayo, isaga oo hore u jirranaa oo uu dhowr jeer codsaday in takhtar la geeyo; halkiise takhtar laga geyn lahaa waxaa la geeyay qol xabsiga ku yiil, halkaas oo, sabab la'aan, muddo saddex bilood ah lagu jirdilayey. Waxaa yaab lahayd si aanan u tuhmin maqnaanshihiisa ayaa sidii caadiga ahayd cuntadana naloo wada keeni jirey markii la ii dhigana qolkiisa ayaa la iila dhaafi jirey.

Dhowr mar oo aan wax tuhmey, ayaan askartii ilaalada naga haysey weydiiyey waxa ay xaaladda Faash ku sugan tahay, kuwaas oo markasta iigu jawaabi jirey in uu ladan yahay. Gadaal waxaan ka ogaan doonaa in xabbiska lagu diley, markii naftu ka baxdayna ay meydkiisii kala baxeen ilig dahab ah oo ugu jirey. Subax dambe, goor ay saacaddu tahay 8:30, baa aniga oo ka nacawsanayay dariishadda qolka aan ku xirnaa, waxaa la i hormariyey sariir meyd lagu sido. Waan gartay waxa ay ula jeedeen waa ladanyahaydoodii.

Mana aanan garan waxa ay hortayda u soo mariyeen meydkii Cabdullaahi Faash oo ay sida xayawaannimada ah u dileen. Ma waxay ka ahayd cabsi gelin, mise hordhaca jirdil igu soo fool leh !.

Kolkii ay meydkii dibedda u soo saareen, Itoobiyaanku waxay u yeerteen dadkayagii magaaladda joogey, kuwaas oo ay ku yiraahdeen: ' Ninkani waa is diley ee qaata meydkiisa oo xabaasha' . Dadkii aad buu uga naxay, oo waxaa xataa shaki galay aqoonsigiisii, oo meydka loo wareejiyey wuxuuu ahaa lafo iyo maqaar.

---

• Dr. Xasan Cali Mire, wuxuu ka mid yahay aqoonyahannada Soomaaliya ugu sarreeya, wuxuu wax ku soo bartay Princeton University oo uu Ph,D ka soo qaatay 1960aadkii. Wuxuu jagooyin sare ka soo qabtay dawladihii Soomaaliya ka jirey. Xukuumaddii Ciidan wuxuu noqday wasiirka Waxbarashada iyo Barbaarinta, jagadaas oo uu iska casiley, isaga oo u bogi waayay barnaamijyada waxbarasho ee dawladda, kaddibna Soomaaliya wuu isaga tegey oo wuxuu degey Kenya.

*Maxamed Abshir Walde: Waa nin is-dhisay oo dantiis yaqaan ah. Karti iyo aqoon ku filan leh, hal abuurkiisuna badan yahay.

*Maxamed Faarah Jimcaale, wuxuu ka mid ahaa ragga ugu firfircoon jabhadda. Wuxuu ahaan jirey macallin dugsiyada Sare. Wuxuu wax ku soo bartay Lugano, Switzerland iyo waddammo kale. 1989kii markii USC la aasaasay wuxuu noqday gacan yaraha Janan Caydiid. Xilliga Dagaalka sokeeyaha wuxuu noqday mufakir qabiil.

*Canbaashe Cabdulle Xaashi Xanaf, wuxuu ka mid ahaa Ilaaladayda gaarka ah, markii uu na waayay gurigii buu iska aadey. Goortii uu gurigii tagey ayaa la weydiiyey raggii meesha uu ku og yahay?. Wuxuu ku jawaabey gaashaandhigga ayay iiga tageen oo nagu sug yiraahdeen, waana la waday meel la geeyeyna garan maayo. Wiilkii waa lagu jeesjeesay, waxaana lagu eedeeyey nacasnimo, fuleynimo iyo mas'uuliyaddarro. Wiilkii wuu niyadjabay, dabadeed habeen-barkii buu bastooladdii la soo boodey oo ku tiriyey Dr. G/sare Cabdulqaadir Cabdi Samater oo ay qol wada seexan jireen ilmo abtina ahaayeen. Subaxdii wiilkii Itoobiyaankii ayaa xabsiga u taxaabay, mar danbena dib looma arag waxaana lagu diley xabsiga.

*Ambassador Muuse Islaan Faarax, wuxuu ahaa raggii Soomaali ugu horreeyey ee Jaamacadaha Masar wax ku soo bartay. 60maadkii markii uu dalka ku soo noqday wuxuu shaqo ka bilaabay Wasaaradda Arrimaha Dibadda oo uu ka gaarey darajada danjire. Wuxuu galay sifayntii uu Maxamed Siyaad beel gaar ah kaga sifaynayay shaqooyinka dawladda ee muhiimka ah. Dabadeed wuxuu ka mid noqday aasaasayaashii SSDF.

*Cabdullaahi Maxamed Xasan (Faash), wuxuu ahaa nin deggan oo mas'uul ah oo dadku u siman yahay. Wuxuu wax ku soo bartay Midowgii Soofiyeetiga. Wuxuu ka mid ahaa raggii Maxamed Siyaad soo xushay. Wuxuu ka mid noqday madaxda xaafiiska siyaasadda ee Madaxtooyada. Dhammaadkii 1974kii waxaa loo magacaabay wasiirka Warfaafinta iyo hanuunita dadweynaha. Markii la dhisay XHKS (Xisbigii Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed), wuxuu noqday xubin ka tirsan Golaha Dhexe isla markaasna waxaa loo magacaabay guddoomiyaha guddiga kormeerka xisbiga. 1981kii wuxuu ku biiray Jabhaddii SSDF halkaas oo uu ka mid noqday hoggaankeeda. Muddadii uu jabhadda joogeyna hawlo waaweyn oo wax tar leh buu ka dhex fuliyey, sumcaddii jabhaddana kor buu u qaaday.

## KA SOO BIXII XABBISKA ITOOBIYA 1991kii, 28kii May

Siyaad Barre dhiciddiisii afar bilood kaddib, ayaa Mingistena xukunkii laga tuuray. Addis Ababa waxaa damaashaad ku soo galay Jabhadihii isbahaystay ee Mingiste ridey. Jabhadahaas waxaa hoggaaminayey Tigrega. Sida kii Siyaad Barre ciidankii Mingiste wuu kala yaacay. Maxaabbiistii ila xirayd galabtii ayaa irdaha laga furay qaybtaydiina keligey baa habeenkii ku baryey.

Subaxnimadii ayaa qaar ka mid ah askartii firxadka ahayd waxay soo mareen xabsigii aan ku jirey, dabadeedna waxay iga fureen irridda si ay ii bililiqaystaan. Sargaal ka mid ah ciidanka firxadka ah, oo Gaashaanle ahaa ayaa, markii uu ogaadey in aan ahay hoggaamiyihii SSDF, isku dayey in uu i dilo, nasiib wanaagse, waxaa hor istaagey Janan Wasihun oo muddo dheer meesha ku xirnaa, horena Taliye uga ahaa ciidanka taangiyada ee xukuumaddii Mingistu, dalka Maraykankana wax ku soo bartay. Markii in ay i dilaan uu Ilaah iga badbaadiyey, dharkaygii bay baareen oo waxay hore u qaateen dhowr shay oo ka mid ahaa iyo konton Doolar oo jeebka iigu jirtey.

Xabbaddii oo weli magaalada ka socota ayaan iskay isaga soo baxay xabsigii. Ma aanan garanayn meel aan wejiga saaro. Caafimaadkaygu waa wanaagsanaa, moraalkayguna waa sarreeyey oo mar haddii Ilaahay iga soo saaray meeshii belo waxaan aamminsanaa in aanan waxba waayeyn. Markii aan fakarey waxaan ku tashaday in aan u lugeeyo Ras Hoteel, halkaas oo waagii hore ay Soomaalidu isugu imaan jirtey. Waxaan soo lugeeyey 8 km, Hoteelkiina waxaan soo gaarey aniga oo tabardarro iyo daal la liicaya. Nasiib wanaag, markii aan Hoteelkii soo istaagayba waxaan arkay Cabdulqaadir Isbarriije iyo Daahir Mire Jibriil oo labadaba laga soo daayay Xabsiga Alambakha*.

---

* Xabsiga Alambakha wuxuu caan ku yahay in qofka loo diro uu adduunka ka samro!

Waxaa Hoteelka si sharaf leh noogu soo dhoweeyey ninkii lahaa, kaas oo aannu hore ula lahaan jirney macaamilo wanaagsan. Wuxuu dabadeed nagu yiri: ' Inta Ilaahay dariiq idiin bixinayo, halkiinna seexda oo cuna, lacagna ha ka welwelina' . Habeenkii meeshayada ayaannu iska seexannay. Subaxdii danbe ayaan raggii kale ku iri: ' War meesha iskama fadhiyi karaynee aynnu dadkeennii la xiriirno oo qaylodhaan u dirsanno' . Sida ugu fudud oo aannu qayladhaantayada dadka ku gaarsiin kareyney waxay ahayd annaga oo saxaafadda la xiriirna. Isbarriije waa jirranaa. Marka aniga iyo Daahir baa ku khasbanaannay in aannu xiriirkii wadno.

Waxaannu tagnay Hilton Hoteel, halkaas oo aannu ka helnay ninkii Wakaaladda Reuters Addis Ababa u joogey. Markii aannu weriyahaas u xog warrannay buu wuxuu nagu yiri: ' Aniga ayaa idinku soo xiri doona laanta af soomaaliga ee BBC ee idinku iska taga oo halkiinna ku war-dhawra' . Sacaaddu markii ay ahayd 5tii galabnimo ayaa waxaa na soo wacay qof dumar ah. Waxaan weydiiyey cidda ila hadleysa. Gabadhii waxay iigu jawaabatey: ' Waa Zaynab Maxamed Jaamac oo BBC kaala soo hadlaysa' . Waxaan u sheegay in aannu meesha ku joogno saddex qof, dhowaanna aannu xabbiska ka soo baxnay, aannaanse weli war ka hayn raggii kale oo Harar ku xirnaa. Waxaan u sheegay in aannu qaawannahay oo aannaan lacag iyo dalkummar midna haysan. Sidaas awgeed, waxannu u baahan nahay gurmad degdeg ah.

Markii ay idaacaddu sii daysey qayladhaantayadii, waxaannu habeenkii oo dhan ka seexan weyney teleefoonno nalooka soo dirayey gudaha dalka iyo dibeddaba. Subaxdii danbe waxaa nalooka yeeray Xawaalad, waxaana naloo sheegay in toddoba kun oo doolar ay noo taal. Lacagtaas oo ay noo soo direen Jaaliyadda Soomaaliyeed ee Saudi Arabia. Kolkii aannu Xawaaladdii ka soo qaadannay lacagtii naloo soo diray, horta waannu ka arratirannay, kharashkii hoteelkana waannu iska bixinnay.

Goortii ay naftu nagu soo noqotay waxaannu aadnay Safaaraddii Soomaaliya Addis Ababa oo weli furnayd. Safiirkii wuu maqnaa, waxaase joogey kaliyeyaashiisii. Raggii aannu meesha ugu tagnay, waxay ahaayeen dad wanaagsan, si fiican bay noo soo dhoweeyeen, baasabboorana degdeg bay noogu diyaariyeen. Xabbiska Harar waxaa laga soo daayey saraakiishii SSDF ee halkaas ku xirnayd, kuwaas oo kala ahaa: Maxamed Hoorri oo ahaa Taliyaha Ciidanka Jabhadda, Carays, Saciid Dheere, saraakiil yaryar oo kale iyo Mujaahidiin badan. Raggaas waxaa xabbiska ka sii daayay ciidankii Tigrayga ee magaalada qabtay, weli magaalada ayaa lagu hayay, nalooma keenin, waxaannuse kula xiriirnay telefoon.

Maalmo kaddib, waxaannu la xiriirnay Safaaradda Liibiya ee Addis Ababa taas oo aannu dhambaal ugu dhiibney Qadaafi, kaas oo, nasiib wanaag, degdeg noogu soo jawaabey oo amar safaaradda ku soo siiyey in ay sida ugu dhakhsaha badan noogu jarto tikidyo aannu Liibiya ku tagno. Isla maalmihiiba, waxaannu ka degnay magaalada Tiriiboli, halkaas ay nagu soo dhoweeyeen madax dawladda ka tirsanayd, dabadeedna waxaa nala ku dejiyey meel qarsoon oo ay ciidammadu lahaayeen. Raggii na soo dhoweeyey waxay isla garteen in, inta aan Qadaafi naloo geyn, naloo fidiyo baaris caafimaad, annagoo muddo dheer xabbiska ku soo jirney. Markii caafimaad ahaan nala baaray aniga iyo Daahir waxba nala kama helin, Cabdulqaadir Isbarriijese wuu xanuunsanaa.

Meeshii nala ku dejiyey waxaannu ku barannay Shiikh Ibrahim oo ah Guddoomiyaha Jabhadda Galbeedka Soomaaliyeed. Markii aannu Shiikha is waraysannay, wuxuu noo sheegay in jabhaddu sideedii u waddo halgankii ay Itoobiya kula jirtey, oo aannu waxba ka khusayn isbeddelka ka dhacay dalka Itoobiya. Shiikhii wuxuu, dabadeed na tusay buug uu ka qoray Maxamed Siyaad, kaas oo uu aad iyo aad ugu ammaanayay keli taliyihii dalka baabba' shey.

Markii aannu buuggii fiirfiirinnay, Shiikhii waxaannu u sheegnay in aannu annagu Siyaad Barre ka qabno fikrad ka duwan tan buugga ku qoran. Nasasho dhowr beri qaadatay kaddib, waxaa naloo geeyey Qadaafi. Warbixin baannu ka siinny wixii ay jabhaddu soo martay iyo halka ay ku danbaysey. Sidaa oo kale, waxaannu u sheegnay in dalkii burburay oo aannu ka dooneyno wax la qabasho hor leh. Wuxuu noogu jawaabey in wixii shakhsi ahaan naloo qaban karo uu nagala ballamayo ninka amniga xukuma, arrinta Soomaaliyase wuxuu nagu yiri: ' In uusan, wakhtiga xaadirka ah, waxba ka qaban karin, oo uu dadkii u qaybsamay boqol firqo oo kala socda.

Sidaas awgeed, waxaan idinka doonayaa in aad ii keentaan dad wada socda oo wax lala qaban karo' . Liibiya waxaannu joogney muddo laba bilood ah. Sooryo ahaana waxaa naloo siiyey lacag dhan laba boqol kun oo doolar. Kolkii aannu Liibiya ka soo dhammaysannay arrimihii aannu u tagnay, waxaannu ku soo noqonnay Addis Ababa. Qaar ka mid ah Saraakiishii xabbiska laga soo daayey, ayaa meesha noogu yimid, kuwaas oo aannu lacagtii wax ka siinnay, halka aannu meeshoodii wax ugu dirnay raggii kale ee aan Addis Ababa noogu iman.

## MAXAA WIIQAY GUULIHII SSDF ?

Sumcaddii jabhadda ee sare u kacday iyo go' aan ay hore u qaadatay oo looga dan laha in lagu soo dabaalo shacbiga diyaarka u ah in ay halganka ku soo biiraan, waxay sababeen in meel kasta dalka gudihiisa iyo dibaddiisaba looga soo qulqulo. Inkasta oo taasi ahayd arrin lagu farxo, haddana dibu-dhac badan bay jabhadda ku keentay. Mutadawiciin badan ka sokow, waxaa ku soo biiray: rag hore siyaasiyiin u ahaan jirey, sida Xirsi Bulxan, sarakiil sare oo xukuumadda iyo ciidammdaba jagooyin muhiim ah ka hayn jirey, sida Janan Maxamud Muuse Xirsi (Cadde).

Kooxo Siyaad Barre ka soo fakaday oo urur ahaan isu soo habeeyey, oo ay hoggaaminayeen Cabdiraxmaan Caydid, Cumar Salaad, Iikar Xaaji Maxamed Xuseen. Dhammaan raggaasi waxay jabhadda ku soo biiriyeen sumcad iyo waaya' aragnimo, waxaase kale ay ku soo kordhiyeen, afkaar iyo aragtiyo kala duwan oo qarkood xambaarsanaayeen dano shisheeye, dana shakhsi ama kooxeed. Hubaal, jabhaddu uma bislayn, awoodna uma lahayn in ay kala maarayso danaha isjiiraya ee dadkii cusbaa ay jabhadda la soo dhexgaleen. Haddii aan maanta dib u eego aragtiyihii kala duwanaa ee sida qotada dheer u dhaawacay jabhadda, waxaan u kala saari karaa shan qaybood:

1. In jabhadda lagu saleeyo diinta islamka, lagana sifeeyo afkaarka Galbeedka iyo kuwa Hantiwadaaggaba, dabadeedna lagu xirto dalalka muslinka ah, gaar ahaan dalalka khaliijka. Aragtidaas waxaa qabey kooxo Sacuudiga iyo Kuwayt nagaga soo biiray oo uu hormuud ka ahaa Xirsi Magan (Ahun).

2. Siyaad Barre waa na xumeeyey, dadkeenniina waa baabbi'iyey, hantideennii waa uu dhacay, maanta wuu arkay in aynnu iska celinney, xukumaddisiina gilgilney. Sidaas awgeed, waxaa la gaarey heer aynnu Siyaad Barre la bilaabi karno waanwaan qarsoodi ah oo aynnu daneheenna ku gaarno, qaar naga mid ahaa ayaa fikraddaas qabay.

3. Waxaa loo baahan yahay in aynnu dabeecadda iyo fikradda maxalliga ah ee Jabhadda ku beddelno dhaqdhaqaaq waddani ah oo beesha hantiwadaagga la qabsata. Taas oo ka soo jeedda taladii Fidel Castro u soo jeediyey oo ahayd in Soomaaliya iyo Itoobiya fideraali laga dhigo, si gobolka hantiwadaaggu ugu faafo. Aragtidaas waxaa hormuud ka ahaa kooxdii hantiwadaagga sheeganaysey oo urur ahaan noogu soo biirtay. Aragtidaas waxaa hormuud ka ahaa Siciid Cabdi, Cabdiraxmaan Caydiid, Cumar Salaad iyo Iikar Xaaji Maxamed.

4. In Jabhadda loo rogo xisbi dimuqraaddi ah oo dalalka reer galbeedka xaafiisyo ka furta, si aynnu qaddiyaddeenna uga dhigno mid ku salaysan afkaarta casriga ah sida Xuquuqda bini' aadanka, xuquuqda haweenka, xorriyadda saxaafadda iyo lahaanshaha gaar'ahaaneed intaas oo uu Siyaad Barre ku xadgudbay Sidaas waxaynnu cadaadis ku saaraynaa reer Galbeedka, si ay uga joojiyaan kaalmada ay siiyaan oo ay xukuumaddiisu ku taagan tahay. Aragtidaas waxaa hormuud ka ahaa Maxamed Abshir Walde iyo kuwo kale.

5. Jabhadda reer baa iska leh ' Reer Mahad- Cumar Maxamud' , reer bay u adeegtaa, reer baa maamusha oo dadka kale waxba kama aha. Sidaas awgeed, waa in meesha lagu kala tagaa, ama awoodda la qaybsadaa. Aragtidaas waxaa hormuud ka ahaa Cismaan Nuur Cali Qonof iyo Xirsi Bulxan. Doodahaas Jabhadda ka dhex socdey iyo khilaafaadka madaxda ku dhex jirey oo maalinba maalinta ka dambaysa isa soo tarayey, waxay saamayn ku yeesheen ciidammada iyo taageerayaashii Jabhaddaba, taas oo arrimaha wiiqay ka mid ah. Falceliska Siyaad Barre, wuxuu noqdey: dagaal toos ah, faquuqa taageerayaasha Jabhadda iyo siyaasad ah qaybi oo xukun.

---

*Xirsi Bulxan, wuxuu ka mid ahaa xukuumaddii uu Siyaad Barre afgenbiyey, kaddib waa la xiray. Markuu xabsiga ka soo baxayna hay'addii Muuska dhoofin jirtey ayaa Maareeye Guud looga dhigay. Wuxuu qayb ka ahaa abaabulkii lagu diyaarinayey Afgenbigii fashilmay (9kii, Abriil, 1978kii). Mar labaad baa la xiray, markii la soo daayeyna wuxuu ku soo biiray jabhadda SSDF. Waa siyaasi madax adag oo xubin firfircoon ka ahaa loollankii ka abuurmay jabhadda dhexdeda.

*Janan Maxamuud Muuse Xirsi (Cadde): wuxuu ka mid ahaa saraakiishii ciidanka Soomaaliyeed ugu tababbarka sarreeyey, waxna ku soo bartay Talyaaniga. Siyaad Barre wuu ka saaray ciidanka wuxuuna ka dhigay Guddoomiye Gobol, kaddibna waxaa lagu magacaabay ku-qaybsanaha arrimaha ciidammada (Military Attache' ) ee Safaaraddihii Soomaaliya ee Shiina iyo Canada. Kaddib wuxuu ku soo biiray Jabhadda. Waqti kooban kaddibna wuu isaga tagey.

## Tanaasulaad siyaasadeed oo uu Itoobiya u sameeyey Siyaad Barre

Maxamed Siyaad wuxuu abuuray guddi xukuumaddiisa ka tirsan oo Majeerteen ah, kuwaas oo loogu talaggalay in ay Jabhadda baabbi'iyaan. Guddigaas waxaa ka mid ahaa Aadan Maxamed Cali, Cabdiraxmaan Cabdille Shuuke, Maxamed Cumar Jaamac ' Dhigic-dhigic' , Mire Awaare, Xasan Abshir Faarax, Janan Aadan Xirsi iyo Janan Maxamed Jibriil.

Raggaas waxaa la siiyey warqad furan, lacag iyo awood maamul. Qof kasta oo ka mid ahaa wuxuu toos ugu xilsaarnaa jilibka uu ka dhashay in uu SSDF ka soo saaro. Wadar ahaanna waxay u xilsaarnaayeen in ay talo-wadaag u noqdaan sidii SSDF loo baabbi'in lahaa. Markii la eego awoodda ballaaran ee la siiyey waxay tartiib-tartiib u noqdeen dawlad, dawlad ku dhex jirta, waxayna wakiillo ka samaysteen waddanka gudihiisa iyo dibaddiisaba si ay u helaan rag ay ku shaqaystaan oo dhallinyarada uga soo saara Jabhadda.

Dowrka Talyaaniga: Talyaanigu wuxuu la lahaa Siyaad Barre xiriir toos ah oo isugu jirey dhaqaale iyo siyaasad. Wuxuu xoogga saaray sidii uu Siyaad Barre uga demin lahaa dabka ay jabhaddu ku shidday. Wuxuu ku guulaystey in uu odayaal magac ku leh Majeerteenka iyo Siyaad Barre wada hadalsiiyo. Wuxuu ku heshiisiiyey in Talyaanigu maalgelin ku samaynayo Woqooyi Bari, taas oo gaaraysey boqollaal Malyuun oo doolar. Talyaanigu wuxuu odayaashii Majeerteen ku qanciyey in dawladdiisu uga magdhabayso dhibaatadii uu Siyaad Barre soo gaarsiiyey dadka gobolladaas deggan. Maalgelintaa la sheegey waxaa maanta laga hayaa oo keli ah Jidka Garowe iyo Boosaaso isku xira iyo dekadda Boosaaso oo aan midna si fiican loo dhisin. Wixii ka haray boqollaalkii Malyuun Siyaad Barre iyo Talyaaniga ha la weydiiyo.

Dowrka Itoobiya: Jabhadda iyo Itoobiya waxaa markii horeba isu keenay dan ay ka midaysnayeen oo ahayd la dagaallanka Siyaad Barre. Kolkii Jabhaddu ay Siyaad Barre jilcisay bay Itoobiya go' aan ku gaartey in ay Jabhadda kula gorgortanto Siyaad Barre si ay uga hesho

tanaasulaad ku saabsan arrimaha Soomaaliya, Itoobiyana ugu abaal guddo in ay Jabhadda baabbi'iso. Tallaabadaan oo Siyaad Barre u siinaysey fursad uu ku sii haysto xukunkiisa naf la caariga ah.

Dowrka Ruushka iyo Mareykanka: Sida la og yahay Itoobiya wixii taliskii Dergiga ee Mingistu ka horreeyey waxay isbahaysi la ahaan jirtey dawladda Maraykanka, Soomaaliyana waxay isbahaysi la ahaan jirtey Ruushka. Isbeddelkii 1974kii ka dhacay dalka Itoobiya wuxuu sababay in, xiriirkii ka dhexayn jirey labada dal oo Afrikaanka ah iyo labadii quwadood ee dunida ugu waaweynaa, uu isweydaarto, oo Ruushkiina Itoobiya u wareego, Maraykankiina Soomaaliya. Waxaase la garan in ay labadaas quwadood ka dhexeeyaan waxyaalo badan oo aaney ku kala tegi karin. Sidaas awgeed, quwadahaasi waxay ku heshiiyeen in xaaladda Soomaaliya iyo Itoobiya la qaboojiyo, si uusan dagaal danbe, uga dhexdhicin, xudduudahoodana loo daayo sidii uu isticmaarku uga tagey.

Sidaas oo kale, waxay ku heshiiyeen in labada dalba joojiyaan taageerada ay kala siin jireen jabhadaha lidka ku kala ah labada dawladood. Heshiiskaas oo guud ahaan ka horjeedey qaddiyadda Soomaaliyeed gaar ahaanna Jabhadda SSDF, wuxuu noo geystey dharbaaxo aan la malayn karin.

Dowrka SNM: Aragtida gurracan oo Jabhaddaasi ka qaadatay qaddiyadda Soomaaliya waa mid taariikhi ah. SNM waxba kama duwanayn hub ay Itoobiya u adeegsato burburinta SSDF iyo kala goynta Soomaliya. Siyaasaddii habka qabiil ku dhisnayd ee MOD ama isbahaysiga Marreexaan, Ogaadeen iyo Dhulbahante oo Siyaad Barre gundhig uga dhigay dawladdiisa, buu wax la mid ah dalka tartiib-tartiib ugu fidiyey, isaga oo qabaa'il gaar ah isbahaysigiisa ku soo xirayay, halka uu qabaa'il kalena kala dagaallamaayey. Si uu u meel mariyo siyaasaddiisa, wuxuu mararka qaarkood hub isugu dhiibi jirey qabaa'ilka uu soo dhoweystey iyo kuwa kale si uu dab uga dhex shido; markii ay islaayaanna uu dibuheshiisiin la galo si uu isugu muujiyo garsoorihii nabadda.

Qabaa' ilkaas la baxay MOD wuxuu ka adeegsan jirey shaqsiyaad danaystayaal ah oo waddaniyadda ka maran. Siyaasadda noocaas ahi, waxay sababtay in bulshoweyntii Soomaaliyeed is aammini weydo oo nin waliba uu qabiilkiisii hoosta ka galo, taasina dhaawac weyn bay u geysatey SSDF. Isbiirsiga qodobbadaasi haba kala culays weynaadeene, ayaa loo nisbayn karaa carqaladaha ka horyimid Jabhaddii SSDF.

## SSDF: BURBURKA DABADIIS

Inkasta oo Jabhaddii la burburiyey, ayaan marna xusuustayda ka saari waayey shanta arrimood oo si gaar ah ii taabatey, kuwaas oo kala ah:

- Silica xabbiska loogu diley Cabdullaahi Faash oo aan weligiis cidna wax yeelin. Sababta loogu diley sida bini' aadannimada ka baxsanayd waxay ahayd oo keli ah, sidii geesinnimada lahayd ee uu Jabhadda uga daafacay shirqoolkii ay Itoobiya dooneysey in ay ku afgenbido.
- Kumannaankii dhallinyarada ahayd ee magacayga Soomaaliya uga yimid, Jabhadduna tababbar fiican siisay, kuwaas oo si geesinnimo leh uga horyimid markii la damcay in lagu sandulleeyo in ay amar ka qaataan madax ayan doonayn, dabadeedna Itoobiyaanku gumaadey.
- Hubkii Liibiya nagu caawintay oo nooc kasta lahaa oo markii jabhadda la burburiyey loo qaybiyey jabhado gadaal ka gaar ah, oo aan wadin dano Soomaliyeed, dagaalna u soo gelin, kuse dul kufay Siyaad Barre, markii SSDF ilko tirtay.
- Sida waxmagarad iyo qaran dumis isugu dayeen in ay daboolaan taariikhda sharafta leh ee SSDF, jabhaddaas oo Soomaali ku baraarujisey in ay xukunka diktatooriga ah iska xoreeyaan, halganka hubaysanna u bilowday si ay Siyaad Barre ruugga dhulka ugu dhuftaan.
- Eedayn gardarra ah ee la igu masabiday shirqoolkii lagu dilay Cabdiraxmaan Caydiid iyo raggii la socday, shirqoolkaas oo sida uu Ilaah igu og yahay aanan meelna ka soo gelin. Waxaase jiri karey sababo maangal ah, oo shirqoolkaas, qaab si isku mid ah ama kala duwan, ay ku maleegi kareen Mingistu iyo qaar kaleba.

## QABSASHADII MUQDISHO IYO DHAMMAADKA TALISKII SIYAAD BARRE

Laga soo bilaabo afgenbigii fashilmay ee Cirro, taliska Siyaad Barre waxaa ku socdey dagaal aan kala joogsi lahayn, kaas oo tartiib-tartiib xididdada u siibey tiirarkii uu talisku ku taagnaa, isla markaasna daboolka ka qaaday beentii uu muddo dheer ku jahawareerinayey dadka. XDS wuu kala daatay, Xisbigii iyo ururradii bulshada waa lagu kala tegey, maamulladii gobollada iyo degmooyinku way iska xirmeen. Dhammadkii siddeetanaadka, taliskii Siyaad Barre wuxuu isugu soo ururay caasumadda iyo goobo kooban oo wixii ciidammadiisa ka haray fariisimmo u ahaa.

Sidaas oo kale waxaa taliskii tartiib-tartiib uga xoroobey shacbigii uu dacaayadda ku haystey. Waxay garteen in rajadii horumar iyo mustaqbilkii wacanaa ee loo ballanqaaday ay ahayeen dhalanteed iyo maaweelo indhaha dadka looga jeedinayay musuqmaasuqa dalka ka socdey iyo xatooyada xoolaha daweynaha oo shakhsiyaad iyo beelo gaar ahi iska xalaaleysteen.

Sida ay Soomaalidu u aragtay musiibada dalkooda ku habsatey, ayaa adduunka oo dhan looga arkay in ujeeddada xukunka Siyaad Barre ayan ku koobnayn oo keli ah xaqiijinta danihiisa gaarka ah oo ay ugu horraysey ku waaridda kursiga. Waxaa la gartey in Siyaad Barre uusan wax caaqiba ah dalkiisa u hayn, balse inuu ku danaysigiisa ugu horseedayo burbur iyo dagaal sokeeye. Sidaas awgeed, midmid ayay dalalkii kaalmayn jirey isaga fogeeyeen, taageeradoodiina ka joojiyeen, xiriirkii diblomaasi oo ay la lahaayeenna ay tartiib-tartiib hoos ugu dhigeen.

Haddii dib loo eego sababaha fududeeyey in Siyaad Barre si fudud Kursiga looga tuuro, waxaa soo baxaysa in uusan awalba xukunkiisu wax awood ah ku lahayn dalka, balse uu ku taagnaa cadaadis ciidan iyo taageero dhaqaale ee uu ka helayey dawladiihii ku loollamayey dagaalkii qaboobaa. Way dhammaadeen maalmihii uu dadka ku aammusin jirey car yaa is dhaqaajiya, bundukh caaraddiis baan

xukunka ku qabsaday, cid iigu imaan kartaana ma ay jirto. Waxaa ku xigtey in, 26kii jannaayo 1991kii, uu caasimadda ka baxsado. Qof kasta oo la socda shiddadii talisku dalka ka maleegayey, si fudud buu u garan karaa in sharaf la'aanta lagu jabiyey ay tahay jawaabtii ku qummanayd wixii uu shacbiga ka galabsaday, iyo mirihii ka dhashay qabyaaladda uu tiirarka uga dhigay jiritaanka keli-taliskiisa. Sida la og yahay, Siyaad Barre maalintii uu xukunka dalka boobay ayuu dalka ku soo rogey siyaasad aan Soomaaliya hore looga maqal, taas oo ah xukuumad qabiil ku dhisan.

Markii ay caddaatay in uu taag beelay ayaa kooxo badani abaabul u galeen sidii ay kursiga uga tuuri lahaayeen. Kooxahaas waxaa ugu cadcaddaa kuwo ka tirsan beelaha Hawiye oo degaanka xoog ku lahaa, heystayna maal xad-dhaaf ah oo ay ku dagaal geli kareen. Beelahaasi waxay mudda gaaban ka hor, loollanka loogu jiro hanashada kursiga, u samaysteen Jabhad fulisa arrimo iyo ciidanba oo ay ku magacaabeen USC (Somali National Congress).

## U S C

USC waxaa lagu asaasay magaalada Rooma, 1989kii, waxaana asaasay siyaasiyiin beelaha Hawiye ka tirsan oo dalka Talyaaniga qaxooti ku ahaa. Taladii iyo hoggaamintii USC waxay durba u soo wareegtey Muqdisho. Halkaas waxaa si degdeg ah looga ururiyey lacag fara badan oo lagu asaaso garab ciidan oo gobollada dhexe ka soo bilaaba hawlgal ciidan. Madaxda garabka siyaasadda ee USC waxay u badnaayeen ganacsato iyo odayaal bulshaweynta Soomaaliyeed ku xiran. Qaar ka mid ahi waxay ka tirsanaayeen kooxdii la baxday ' Manifesto' oo iyaguna isla waayadaas madaxa la soo baxay, soona saaray baaqa la magac baxay Manifesto, oo Siyaad Barre loogu jeediyey in, si dalka looga badbaadiyo burbur, uu xukunka si ku meel gaar ah ugu wareejiyo Aaden Cadde, Madaxweynihii ugu horreeyey ee uu dalku yeesho. Raggii Siyaad Barre arrintaas u xiray waxaa ku jirey odayaal badan oo madaxda USC-da ka tirsan, qaar kale oo Cali Mahdi ka mid ahaana xariggii bay ka baxsadeen oo Itoobiya bay carar ku galeen,

halkaas oo ay meelo kale uga sii gudbeen, markii la cafiyeyna dalka ayay dib ugu soo noqdeen. Sannadkii xukunkii Siyaad Barre ugu danbeeyey, dhaqdhaqaaqa USC-du aad iyo aad buu ugu fiday degaannada taageerayaashoodu ku badnaayeen, isla markaasna, waxaa isa soo tarayey hawlgallada ciidan oo ay gobollada qaarkood ka waddey. Waxaa kale oo isa soo taraysey saamaynta Jabhaddu ku yeelatay siyaasadda dalka, taas oo ku khasabtay Siyaad Barre in uu dhowr goor shirar la galo madaxda jabhadda qaarkood, isaga oo isku dayayey, inkasta oo uu ku fashilmay, in uu la heshiiyo ama kala qaybiyo.

Markii siyaasadda USC ay saamayn dalka iyo dibaddaba ku yeelatay, ayaa waxaa soo foodsaaray laba dhacdo oo gebi ahaanba beddeli doona ujeeddadii loo asaasay ee ahayd hanashada hoggaanka dalka. Dhacdada hore waxay ahayd geeridii mudane Cali Wardhiigley, oo ahaa maskaxda ka danbaysey asaasidda USC-da, isla markaasna, ahaa hoggaamiyaha ruuxiga ah ee Jabhadda. Geeridiisa waxay USC-du ku weydey hoggaamiye aaney beddel u heli karin. Sumcaddeedii iyo hawlaheediiba way wiiqmeen. Dhacdada labaad waxay ahaayd Janan Caydiid oo markii Taliskii Siyaaad Barre ka maarmay suuqa la soo dhigay oo Addis Ababa ka soo degey, Itoobiyaankana kula heshiiyey in ay ka wada shaqeeyaan sidii beelaha Hawiye Siyaad Barre loogu kicin lahaa , dabadeedna xiriir wanaagsan Itoobiya iyo Soomaaliya loo dhex dhigi lahaa.

Janan Caydiid aad iyo aad buu u saluugsanaa jagadii taliye ciidan oo USC ugu yeertay, dabadeedna, wuxuu isu caleemasaaray guddoomiyennimadii USC-da. Sidaasna wuxuu USC-dii uga dhex abuuray khilaaf aan daawo lahayn. Janan Caydiid si fiican buu u garanayey in uusan marna aqoonsi ka helayn garabka siyaasadda ee Muqdisho fadhiyey, dabadeed wuxuu jeebka kala soo baxay baaq gurracan oo uu is yiri shacbiyad baad kaga dhex heleysaa beelaha Hawiye. Baaqaas oo ahaa, Hawiye waa inuu Daarood iska xoreeyaa. Dagaalkii xukuumadda lagula jirey ayaa Caydiid wuxuu u beddeley dagaal qabiil. Sidaasna wuxuu Siyaad Barre ugu samaystey ciidan qabiil oo uusan weligiis ku riyoon. Markii uu gobollada dhexe si fiican u soo gudaggalay oo beelihii abaabul ciidan ka dhex bilaabay, wuxuu ku dhex

baahiyey, kuna hanuuniyey aragtidii uu dalka la soo galay ee ahayd in Daarood laga aarsado, dalkana laga saaro. Reer miyigii masaakinta ahaa ee fikraddaas lagu soo kiciyey si fudud bay maskaxdooda u gashay. Halhayska Caydiid dalka ku soo biiriyey waxba kama duwanayn tii ka dhacday Ruwanda 1994kii ay madaxda Hutu-gu ku kiciyeen shacbigooda si ay u xasuuqaan Tutsi-ga. Janan Caydiid, wuxuu ahaa seef-la-bood. Dadka lama tashan jirin, ma qiimeyn jirin cirib-danbeedka siyaasaddiisa. Markii dagaalkii Muqdisho bilawday oo Siyaad Barre laga adkaaday, magaaladana laga saaray, Caydiid wuxuu magaalada soo galay isaga oo ka buuxa fikraddiisii ahayd laynta Daaroodka. Fikradahaas oo uu Jananku si fiican magaalada uga hirgeliyey wixii ka danbeeyey 26kii Jannaayo 1991kii oo ah maalintii USC-du qabsatay magaalada oo ay Raadiye Muqdisho kaga dhawaaqday in ay taladii dalka la wareegtay.

Waa maalintii ku xigtey 26kii Jannaayo oo ahayd maalintii uu Siyaad Barre caasimadda ka baxsaday. Waxaa maalmo yar la laayay tobannaan kun oo beesha Daarood u dhashay, kuwaas oo ay ka mid ahaayeen raggii Muqdisho iyo Soomaaliyaba gumeysigii shisheeye ka xoreeyey iyo waliba caruur iyo haween. Xasuuqu wuxuu sababay in boqollaal kun ay ka qaxdo Muqdisho oo qof waliba uu u qaxo halkii uu ku badbaadi karey. Daarood badani wuxuu u qaxay gobollada Jubbooyinka iyo Gedo. Siyaad Barre laftiisu wuxuu u qaxay magaalada Garbahaarey ' Gedo' ee uu ku dhashay.

Markii uu qaxu bilawday, ayaa Janan Caydiid, afarta gees ee magaalada Muqdisho qaylo isla taagey, isaga oo dadka ku beerlaxawsanaya eraya ay ka mid ahaayeen: ' Tolla' ayay war Daarood aynnu ka daba tagno, haddii kale dib buu isu soo abaabuli doonaa oo weerar buu inaku soo qaadi doonaa. War maanta ayuu Daarood u tabaryar yahay ee aynnu erino oo dabargoyno' . Taasi waxay ahayd caqli yaab leh oo aan taariikhda dalka hore u soo marin.

Si wacan baa baaqii Caydiid Muqdisho loogaga riyaaqay, teknikadii iyo miliishooyinkii beelaha baa la isku daray, dabadeed halkaas ayaa laga soo dagaalgeliyey, kuwaas oo waajibaad adag la soo siiyey si ay u fuliyaan hawlgalka dabar goynta Daaroodka. Sidaas, waxaa ku

bilawday dagaalkii muddada dheer ka socdey Jubbooyinka ee u dhexeeyey ciidankii dabargoynta beesha Daarood iyo mileeshiyaadkii iska caabbinta ee beelaha Daarood. Kaas oo ahaa dagaal ayaandarro oo ay Soomaaliyi isku baabbi' isay.

Isla markaa wuxuu dagaal aan kala joogsi lahayn ku waday Gaalkacyo oo mar ay gacantiisa gashay uu ku xasuuqay dad gaaraya kun iyo dheeraad iyo in aad u badan oo barakacday, dadka qaar inta meel la isugu keenay baa la laayey iyagoo waliba qaarkood aad u yaqaanay, waxaa ka mid ahaa dadkaas Maxamuud Xaaji Xasan, Jaamac Biixi Xanaf, Maxamud Cali Nuur iwm, kuwaas oo ka mid ahaa Odoyaashii ugu waaweynaa Gobolka Mudug, waa nabadoonadii iyo Ganacsatadii.

Dagaalladii dalka ka socdey waxay iska noqdeen taxane aan dhammaad lahayn. Is-riixriixii iyo dhul kala qabsashadii ka dhalatay, waxaa ku naf waayey tobannaan kun oo qof, waxaa ku barakacay boqollaal kun, waxaana dalalka deriska ah u qaxay dad lagu qiyaasay malyan iyo bar. Intii Caydiid uu ku hawllanaa dagaaladaas ayaa waxaa furmay shir jabhadaha waaweyn la isugu keenay magaalada Jabbuuti, kaas oo Mudane Cali Mahdi Maxamed loogu doortay Madaxweynaha Soomaaliya. Sidaasna Caydiid wuxuu ku gafey, jagadii uu hore iska meeleystey, oo uu isku qanciyey in uu yahay geesigii Hawiye, dabadeedna uu xaq u leeyahay derejadaas, beesha Hawiyena ay waajib ku tahay in ay ku sharfaan jagada Madaxweynennimo. Janan Caydiid wuxuu u arkay in magacaabiddii Cali Mahdi ay tahay shirqool lagu liidey halgankiisii. Sidaas awgeed, wuxuu dagaal ku qaaday Cali Mahdi.

Dagaalkaas oo la baxay dagaalkii afarta bilood waxaa ku naf waayey dad aad u badan oo rayid ah. Waxaa ku burburay wixii ka haray magaalada Muqdisho. Waxuu saamayn ku yeeshay maciishaddii boqolaal kun oo dad ah, kuwaas oo ku noolaa gobollo badan, dhaqaale ahaanna Muqdisho ku xirnaa. Dagaallada ka socdey Muqdisho oo saamayn xun ku yeeshay koofurta Soomaaliya oo dhan, gaar ahaan gobollada Bay, Bakool iyo Gedo, waxay ku soo abbaarmeen waqti uu jilaal xumi dalka ka jirey oo xoolihii miyigu nafci beeleen, tacabkii beerahana lagu khasaaray, meel kalena aan dadkaas wax uga imanayn, Waxaase xusid mudan, wixii ka dhacay gaar ahaan

Gobollada Bay iyo Bakool oo Layntii dadka ka sokow wixii dadka Bakhaarada iyo Bukaaraha ugu jiray xoog looga rartay, taas oo sababtay in baahi darteed dadkii tarab-tarab dariiqyada ugu le'daan (dhintaan), waa arrin dalka iyo dibaddaba Shaac noqotay oo marag madoonto ah falalkii arxan la'aanta ahaa ee gobolladaas ka dhacay. Sidaas awgeed, waxaa aaggaas oo dhan soo foodsaaray dhibaatooyin aadami oo aan hore Soomaaliya loogu arag. Waxaa dhacday in dadku cunto la'aan u dhinto oo la kala aasi waayey.

## UNISOM

Markii dagaalka Muqdisho lagu kala adkaan waayey, cawaaqib xumada ka dhalatayna saamayn weyn ku yeelatay dareenka bulshoweynta adduunka, waxaa lagama maarmaan noqotay in, beesha caalamku arrinta soo faraggeliso, tallaabo kastana qaaddo si dagaalkaas lagu joojiyo, dhibaatooyinka aadami ee ka dhashayna wax looga qabto. Dadaal badan kaddib waxaa UN-ku ku guulaystey in ay, 31kii Marso 1992kii, labada dhinac ee Magaalada Muqdisho isku haystay, ku heshiisiiso xabbad jooyin. Dhibaatooyinkii bini' aadannimo ee ka dhashay dagaallada sokeeye waxay soo jiiteen indhaha adduunweynaha.

Warbaahinta caalamka iyo hayadaha Samafalkuba dowr weyn bay ka qaateen caalamiyeyntii xasuuqa Soomaaliya ka socdey, kaas oo ahaa qaar dadku gacmihiisa ku abuurtay. Musiibada dalka ka jirtey ma ahayn mid Soomaalidu wax ka qaban kartey. Inkasta oo UN-ka uu Xooghaye Guud ka ahaa Boutros Ghali oo khabiir ku ah arrimaha Soomaaliya, run ahaanna jeclaa in uu degdeg wax uga qabto, haddana hay' adda uu madaxa ka ahaa oo caadi ahaan u xilsaaran wax ka qabashada arrimahaas oo kale, ma heli karin dhaqaale iyo cudud ay wax kaga qaban karto ibtilada sidaas u baaxadda weyn. Nasiib wanaag, waxaa wax ka qabashada xaaladda ba'an ee Soomaaliya ka jirtey xil iska saaray, dawladda Maraykanka, gaar ahaan Madaxweyne Bush.

Faallooyin kala duwan baa laga sameeyey tallaabada wax ku oolka ah ee Maraykanku qaaday. Dad badni waxay u arkeen tallaabo USA ku dejineyso dareenka shucuubta muslinka ah ee ka xumaatey weerarkii ay ku qaadday dalka Ciraaq. Dad kale waxay ku micneeyeen in tallaabadaasi la xiriirtey dano shidaal iyo kheyraadka Soomaaliya oo shirkado Maraykan ahi dalka ka lahaayeen, halka kuwa kale arrinta ku fasireen in xisbiga Jamhuuriga ah ee isla wakhtiyadaas wareejinayey Aqalka Cad uu doonayey in uu xisbiga Dimuqraaddiga ah u dhigo barroosin la dega, dabadeedna dusha looga tuuro mas'uuliyadda fashilaad kasta ee hawgalkaas ka dhalata.

Doodahaas oo dhan Soomaalidu dheg uma ayan jalaqsiin oo waxay u arkayeen siyaasado iyo dano ay ka danbeeyaan dad nabad ku naalloonaya, waxaa keli ah oo ay Soomaalidu u heellanayd waxay ahayd in ay hesho cid ka samatabixisa hoogga iyo ba' a ku habsadey. Sidaas awgeedna, gacma furan bay ku soo dhoweeyeen gurmadkii Maraykanka. Natiijadii hawlgalkaas laga gaarey waxay muujisay in Soomaalidu ay jid lahayd. Run ahaanna wax badan baa hawlgalkaas dalka ugu qabsoomay. Boqollaal kun oo ay macaluuli wiiqday, geerina qarka u saarnaa baa ku badbaadey, dhowr sanana waa lagu nastay oo dagaalkii sokeeye baa la xakameeyey. Dabadeed waxaa Hawlgalkii Maraykanku madaxda ka ahaa mas'uuliyaddii kala wareegtey UNISOM, taas oo loo xilsaaray in ay dalka nabadayso, habkii dawliga ahaana dalka dib ugu soo dabaasho.

Mudda gaaban kaddib, khilaaf baa wuxuu ka dhex dhashay UN-ka, dawladda Maraykanka iyo qaar ka mid ah dawladihii laf dhabarta u ahaa ka mira-dhalinta hawlgalkii ay Soomaaliya beesha caalamku niyad wanaagga ugu soo gurmatey. Khilaafkaasi wuxuu sababay in tartiib-tartiib ay dawladihii waaweynaa bilaabaan in ay Soomaaliya dib uga gurtaan. Waxaa ugu horreeyey Maraykanka oo markii 18 askari Muqdisho looga diley go' aansaday in ay dalka ka baxaan. Mid mid bay dalalkii kale oo dhammi waddadoodii qaadeen, sidaasna waxaa gebi ahaan ku af jarmay hawlgalkii ay UNISOM dalka ka waddey.

Nasiibdarro, go'aanka beesha caalamku ku gaartey in ay Soomaaliya ka baxdo, waxay sababeen in dagaalkii sokeeye iyo burbur hor lehi dalka dib uga bilawdaan. Kaas oo ilaa hadda dalka ka socda, Soomaaliyana ka dhigay dal dawladnnimadii ku fashilmay.

1995kii UNISOM way ka baxday Soomaaliya, iyada oo aan ka tegin, haddii laga reebo taageeradii aadaninnimo ee lagu guulaystey bilawgii hawlgalka. Wax yar ka hor iyo kaddib, bixitaankii UNISOM waxaa dalka soo foodsaaray laba arrimod oo siyaasad ahaan saamayn weyn dalka ku yeeshay. Midi waxay ahayd geeridii 2dii Jenaayo 1995kii, ku timi Madaxweynihii xukunka laga riday mudane Siyaad Barre, taas oo ka dhacday dalka Nijeeriya, halkaas oo mudda saddex sano ku dhow uu ku joogey laajinnimo siyaasadeed. Siyaad Barre meydkiisii waxaa la keenay Soomaaliya, waxaana lagu xabaalay magaalada Garbahaarrey.

Lama sheegin jirrada uu u dhintay. Siyaad Barre waxaa lagu xasuusan karaa in uu afgenbiyey xukuumad sharci ah, dabadeedna natiijo xumadii ka dhalatay keli-taliskiisii, ay sabab u noqotay burburka qarankii Soomaaliyeed. Tan labaadna waxay ahayd geeridii bishii Luulyo 1996kii ku timid Janan Caydiid ee ka dhacday magaalada Muqdisho, halkaasna lagu xabaalay. Janan Caydiid wuxuu ku dhintay isaga oo dagaal kaga jira degmada Madiina ee Muqdisho. Caydiid waxaa lagu xusuusan karaa in uu dagaalkiisa ku bilaabay halku-dheg ah beesha Daarood ha la ciribtiro.

Markii Cali Mahdi loo doortay Madaxweynaha dalka, Caydiid wuxuu ku dhawaaqay dagaal beesha Hawiye dhexdeeda ah, kaas oo ay iskaga horyimaadeen Habar Gidir iyo Abgaal. Ugu danbayntii Jananku wuxuu abaabulay dagaal ay iskaga horyimaadeen Jilib ka mid ah Habar-Gidir. Taas oo sababtay geeridiisa.

## WALAALAHA JABUUTI (SHIRKII laad)

Soomaaliya iyo Jabbuuti waa laba dal oo walaala ah oo xor ah. Waxay isla soo mareen taariikh dheer oo halgan ah. Labaduba waxay qaybo ka yihiin dhulka Soomaaliyeed ee isticmaarku shanta u kala gooyey. Labadaba isbeddelkii ka dhashay dagaalkii labaad ee dunida ayaa baraarujiyey. Dhammaadka dagaalkii labaad ee dunida, afartii Dawladood ee Waaweynaa Biritaaniya, Faransa, Midawga Soofiyeeti iyo Maraykanku, way awoodi waayeen in ay wadajir heshiis uga gaaraan mustaqbalka Soomaaliya. Faransiisku wuxuu soo jeediyey in xukunkii Talyaanigu sidiisii u sii socdo, Maraykanku wuxuu doonayey maamul caalami ah oo toos ah, Ingiriiska waxay soo jeedisay Soomaliweyn oo lagu maamulo wasaayad Ingiriisi ah (British Trusteeship). *

Markii 1958kii Fransiisku uu xoog ku marsiistay xeebta Soomaaliya aftidii uu ku kala dooran siinayey dalalka Afrikaanka ee uu gumaysto oo Xeebta Soomaaliyeed ay ka mid ahayd in, ay ka xoroobaan Faransiiska iyo in ay sii wataan wax wada qabsiga Faransiiska, ayuu Maxamuud Xarbi oo ahaa mas' uulka xilligaas Xeebta Soomaaliyeed ugu sarreeyey, isla markaasna ahaa guddoomiyaha xisbiga gobannimo-doonka ee xornimada u taagnaa, cabsi awgeed uga soo fakaday Jabbuuti oo Muqdisho soo galay. Muqdisho oo ahayd xarunta laga abaabulayo halganka xoraynta iyo midaynta dhulka Soomaalida ee la gumaysto. Maxamuud Xarbi aad baa Muqdisho loogu soo dhoweeyey, dabadeedna waxaa madax looga dhigay xaafiiska "Somali Pan-Congress" oo waqtigaas la furay, loona xilsaaray isu duwidda dadaalka lagu xoraynayo dhulka Soomaaliyeed.

---

*Talada Xoghayaha Arrimaha Dibadda ee Biritaania Mr.Ernest Bevin ayaa, Abriil 1946kii taladan hor dhigay saddexdii dhiggiisa ahayd, oo lagama maarmaan uga dhigay meelmarinteeda ogolaanshaha Itoobiya. Hididdiiladii ' Soomaaliweyn' oo kol ka bidhaantay taladii Ernest Bevin waxay ku asaruurantay diidmadii Itoobiya oo Bevin laftiisu uu fulinteeda ku xiray. Waxaa isa sii biirsaday diidmada Itoobiya iyo ka hor-imaadkii Midowga Soofiyeeti iyo Maraykanka. (Eeg the Somali Dispute; John Drysdale:Pall Mall Press, London and Dunmow, 1964).

Nasiibdarro, Maxamuud Xarbi wuxuu ku dhintay shil dayuuradeed, kaas oo loo aanaynayo in uu Faransiisku lug ku lahaa. Markii hoggaamiyihii ruuxiga ahaa ee (Somali Pan-Congress) uu dhintay ayaa hawlihii xaafiiskaasi wadey dawladdu toos ula wareegtey oo la sameeyey wasaarad u gaar ah arrimaha dhulalka maqan. Hadba markii uu cadaadiska Faransiisku ku hayo Xeebta Soomaaliyeed ee uu gumaysto sare u kaco, muwaadiniin badan ayaa Soomaaliya uga soo qaxi jirtey. Sidaas awgeed, laga bilaabo halgamayaasha jabhadda xoraynta xeebta Soomaaliya, siyaasiyiin, arday, ganacsato, iwm, ma jiro qof magac leh oo aan Muqdisho muddo ku noolayn ama shaqadiisaba ka wadan.

Gobannimaddoonkii isku abaabullay Muqdisho, awooddoodii waxay ku baahiyeen Jabbuuti waxayna ku muujiyeen markii ay 1966kii Janan Digool ( General De Gaulle) oo booqasho ku yimid magaalada Jabbuuti ay kala horyimaadeen kacdoon shacbi oo habaysan, dabadeedna booqashadaasi fashilantay. Markii taasi dhacday Faransiisku wuxuu dadkii reer Jabbuuti saaray cadaadis xoog leh, kuwaas oo isugu jirey dil, xarig iyo musaafiris. Magacii Xeebta Soomaaliyeedna wuxuu ku beddelay xeebta Cafarta iyo Ciise. Xiriirkii Soomaaliya iyo Faransiiskuna wuxuu gaarey meeshii ugu xumayd. Markii Ra'iisul Wasaare Maxamed Xaaji Ibraahin Cigaal bilaabay siyaasad cusub oo ku wajahan dhulka Soomaaliyeed ee la gumaysto, wuxuu weydiistey in uu Janan Digool la kulmo, si looga wada hadlo dhulkaas la gumeysto, kulankaasina wuxuu ka dhacay magaalada Paris. Markii Maxamed Siyaad Barre uu xukunka qabsaday waxaa la tuuray siyaasaddii Cigaal, dabadeedna Soomaaliya waxay dadaal dheer u gashay sidii Xeebta Soomaaliyed loo xorayn lahaa, taas oo nasiib wanaag dhacday 1977kii. Muddo yar kaddib markii ay xorriyadda qaadatay, Jamhuuriyadda Jabbuuti waxay ku dadaashey in ay yeelato siyaasad ka madaxbannaan saamaynta siyaasadeed ee dawladda Soomaaliya.

Markii xukuumaddii Siyaad Barre burburtay, dalkiina uu dagaal sokeeye ka bilowday ayaa Madaxweynihii Jabbuuti mudane Xasan Guleed Abtidoon, oo ahaa Oday Soomaaliyeed, isu xilsaaray sidii uu Soomaaliya u badbaadin lahaa. Shirka Jabbuuti ee dibuheshiisiinta

waxaa go' aankiisa lahaa guddigan; uu Guddoomiye ka ahaa Aadan Cabdille Cismaan:

Aadan Cabdille Cismaan (Guddoomiye)
Maxamed Ibraahim Cigaal (La-guddoomiye)
Cabdirisaaq Xaaji Xuseen (La-gudoomiye)
Cismaan Axmed Rooble (Xubin)
Cabdulqaadir Maxamed Aadan (Zoppo) - Xubin
Maxamuud Yuusuf (Muuro) - Xubin
Cismaan Maxamed Jeelle (Xubin)
Cumar Xasan Qoorey (Xubin)
iyo Janan Muuse Xasan- Xubin

Waxaa la isku afgartay in shirka laba weji laga dhigo. Kan hore oo lagu magacaabay Jabbuuti Kow, waxaa lagu caddeeyey mabaadiida guud ee dalka lagu maamulayo Siyaad Barre dabadiis. Waxaana ka soo baxay go'aannada soo socda:

1. Maxamed Siyaad Barre waa u halis dalka, midnimada iyo nabadgelyada. Waa in uu dalka ka baxaa.
2. Xabbad joojin (baaq walaaltinnimo).

3. Bil kaddib waa in la isugu yimaado shir guud oo ay ka soo qayb galaan Jabhadihii shirka kowaad ka soo qaybgalay iyo kuwii aan ka soo qaybgelin sida SDA, USF, USP iyo SNM, halkaasna lagu dhiso dawlad waddani ah oo loo dhan yahay.

4. Midnimada ummadda Soomaaliyeed waa muqaddas lama-taabtaan ah. Woqooyi oo loo diro ergooyin ka kala socda Dawladda Jabbuuti, Odayaasha iyo Jabhadaha.

Wejiga labaad oo lagu magacaabey Jabbuuti Labo oo isla kooxihii ka qaybgalay shirkii Jabbuuti Kow isugu yimaadeen waxaa ka soo baxay go'aannada soo socda:

1. Maxamed Siyaad Barre oo dagaal hubaysan lagu qaado, haddii nolol lagu qabtana maxkamad la soo taago.

1. Xabbad joogin guud laga bilaabo 26ka (jimce bishatan 7aad 1991kii), ururkii jebiyana isku meel laga wada noqdo. Magacaabid guddi ilaaliya, dhawra go' aammada oo ka kooban Odayaasha iyo jabhadaha.
1. Midnimadu waa muqaddas lama-taabtaan ah, meel marinteedana waxaa u xilsaaran dawladda KMG ah.
2. Qaadasho dastuurka 1960kii muddo aan laba sano ka badnayn, laga bilaabo maalinta heshiiska la saxiixay (21 bishii 7aad 1991, 13:30 Guriga Baarlamaanka Jabbuuti). Dhisid gole sharci dejineed- 123 xubnood oo ku salaysan Degmooyinkii jirey 1969kii ka hor. Degma kasta waxay lahayd guddoomiye iyo labo guddoomiye ku-xigeen.
3. Doorasho Madaxweyne ku-meel gaar ah (Cali Mahdi Maxamed) muddo 2 sano ah laga bilaabo maalinta la dhaariyo.
4. Laba Madaxweyne ku-xigeen: kowaad SDM; labaad SSDF iyo SPM.
5. Ra' iisul Wasaare: nin u dhashay Woqooyiga Soomaaliya.
6. Gole sharci:
   Guddoomiye SSDF iyo SPM

   Laba guddoomiye ku-xigeen: USF iyo SDA.

Waxaa shirka ka qaybgalay taladana wax ku lahaa lixda jabhadood ee soo socda, waxaana hormuud u ahaa madaxdan hoos ku xusan:

- SSDF- Muuse Islaan Faarax
- USC- Cumar Xaashi Aadan
- SPM- Cumar Macallin
- SDM- Cabdi Muuse Mayow
- SDA- Maxamed Faarax Cabdullaahi
  USF- Cabdiraxmaan Ducaale Aadan.

Bishii Agoosto 18keeda 1991kii, aqalka ummadda, waxaa lagu dhaariyey Madaxweynaha KMG ah Cali Mahdi Maxamed. Waxaa dhaariyey Shiikh Xuseen Abuukar. Waxaa goobta ku dhammaa hoggaamiyayaasha 6dii urur (USC garabka Cali Mahdi, SSDF, SPM, SDM, USF iyo SDA) oo heshiiskii Jabbuuti ka qayb ahaa. Waxaa madasha ku sugnaa madax kale oo ay ka mid ahaayeen Ra' iisul Wasaarihii hore ee Soomaaliya mudane Cabdirisaaq Xaaji Xuseen iyo mudane Cabdulqaadir Maxamed Aadan (Zoppo). Waxaa shirka lagu

martiqaaday Janan Maxamed Faarax Caydiid, aanse shirka iman oo sida madasha lagu wargeliyey ku cudurdaartey Xanuun.
Sida la og yahay garabka Caydiid ee USC wuu ka soo horjeedey shirka Jabbuuti. Waxaa kale oo shirka ka maqnaa oo diiddanaa jabhado sida SNM, SNF iyo xoogag kale. Mudane Cabdirisaaq Xaaji Xuseen oo ka mid ahaa madaxdii dejisey go' aammadii Jabbuuti kow iyo labo, wuxuu aad u dhaliilay Ra' iisul Wasaarennimada loo magacaabay Cumar Carte Qaalib oo uu ku tilmaamay siyaasi aan lahayn dhabar-adaygii loo baahnaa, wuxuuna sheegay in jagadaas uu ku haboon yahay Jaamac Maxamed Qaalib. Mudane Cabdirisaaq wuxuu dhawrayey qodobka 7aad ee go' aammadii shirka Jabbuuti labo, kaas oo xeerinayey in Ra' iisul Wasaaruhu noqdo nin u dhashay Woqooyiga Soomaaliya.

Wax lagu jiro dareen colaadeed iyo dhacdooyin teelteel ah waxaa Muqdisho ka qarxay, markii ay taariikhdu ahayd 17kii bishii 11aad 1991kii, dagaalkii 4ta bilood ee dhaliyey geeridii iyo burburkii ugu baaxadda weynaa ee taariikhda Muqdisho soo mara. Ma ahayn dagaal lagu beegsanayo bartilmaameedyada ciidammo iska soo horjeeda. Labada hoggaamiye Cali Mahdi iyo Caydiid, midkood waliba hubka wax gumaada ayuu wuxuu ku duqaynayay xaafado uu kan kale qabiilkiisu u badan yahay. Jaliiladuhu (bumbooyin) waxay ku habsanayeen guryaha qoysas hortiiba la tabaalaysnaa gaajo iyo cudur. Dhex-dhexaadin kasta ee dibu-heshiisiineed waa lagu guuldarraystey. Miro-dhal ma noqon heshiis xabad-joojineed (15.2.1992) oo mar loo hanqal taagey oo ay New York ku kala saxiixdeen ergo Dawladda KMG ah ee Cali Mahdi Maxamed ka wakiil ahayd oo uu hoggaaminayey Maxamed Qanyare Afrax iyo ergo garabka Caydiid wakiil ka ahayd ee uu hoggaaminayay Cismaan Xasan Cali (Caato). Waxaa xigey taxane xabbad joojineed oo wada burburay.

Dhinac kale waxaa nala soo xiriiray odayaashii gobollada Woqooyi Bari oo uu hoggaaminayo Islan Maxamed Islaan Muuse, kuwaas oo naga codsaday in aannu degdag u soo gaarno. Sidaas oo kale, Nayroobi odayaashii joogey baa qaylo-dhaan noo soo diray.

Xaqiiqo ahaan waqtigaas anigu diyaar uma aanan ahayn in aan tago dhulkii ama Nayroobi midnaba. Waxaan ka shaqaynayey sidii aan horta u tegi lahaa Kanada oo in mudda ah uu reerkaygu ku noolaa, kuwaas oo aanan arag muddo 7 sano ah. Markii aanse qiimeeyey duruufaha dalka ka jira fikraddii ahayd in aan Kanada ku horreeyo waan ka noqday, culayskii ay odayaashu i saareen awgiis. Waxaan goostay in aan ku hormaro Nayroobi oo odayashii beesha Daarood igu sugayeen, halkaas oo ururradii Daaroodkana uu khilaaf ka dhex aloosnaa. Nimankii aan Nayroobi ugu tagey odayaal iyo ururraba wax wada socdaa ma ayan jirin.

Dabadeed dhammaantood ayaan shir isugu yeeray, oo waxaan u sheegay, haddii ay hore xukun isugu haysteen in ay hadda cidla taagan yihiin. Muranka ugu weyn ee ururradaas dhexyiil wuxuu ahaa, fulinta go' aankii ka soo baxay shirkii Jabbuuti ee ahaa Siyaad Barre ha la soo qabto. Go' aankaas baa waxaa ka soo horjeedey ururro badan. Waxaan ku iri: ' Bal horta aynnu miyir yeelanno oo aan isweydiinno ujeeddada ka danbaysa Siyaad Barre ha la soo qabto' . Oday waayeel ah oo geed hoostiis fadhiya, reerkiisii la jooga, oo aan waxba ku yeeli karin. Jawaabtu waa in aan qofna dani ugu jirin. Ulama jeedo Siyaad Barre denbiyo ma uusan gelin, ee waxaan billayn, haddii xaaladda uu dalku ku jiro maanta la fiiriyo sidii loogu heli lahaa maxkamad arrimihiisa caddaalad ku fulisa.

Intaas waxaa ka sii daran in tallaabadaasi ay isu beddeli karto weerar beesha Marreexaan lagu qaaday. Aniga oo in mudda ah dalka ka maqnaa waxaan danaynayey ragga hadlaya wejiyadooda iyo mowqifyadooda kala duwan. Yaab yaabkiis, ragga ugu daran ee oranayey Siyaad Barre ha la soo qabto, waa kuwii uu wax tari jirey iyo kuwii uu xulafada la ahaa. Waxaa ku jirey wasiirro, saraakiil sare oo ciidammada ka tirsanaan jirey, ganacsato, indheergarad iyo madax sare oo ka mid ahaan jirtey Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed (XHKS). Kolkii uu buuqii demi waayey ayaan waxaan u soo jeediyey madaxdii ururrada Daaroodka oo dhammaantood Nayroobi ku sugnaa marka laga reebo Axmed Cumar Jees oo ay wakiillo u joogeen, in inta rasmi ahaan dagaalka ugu jirta ay gooni u baxaan oo arrinta buuqa dhalisay ee Siyaad Barre la xiriirta go'aan midaysan ka gaaraan.

Dood dheer kaddib arrintii aragti midaysan baannu ka qaadannay. Taas oo ah in arrinta Maxamed Siyaad meel la iska dhigo oo aan mar danbe laga hadlin oo xooggayaga iyo dadnimadayada isugu geyno sidii aynnu isaga difaaci lahayn ururrada hororka noqday oo dagaalka nagu haya. Markii aannu go'aankaas gaarney dhammaantayo waxaannu isku raacnay in aannu (Charter House) shir jaraa' id ku qabanno.
Waxaan ku hormaray magaalada Kismaayo oo aan isku dayey inaan heshiisiiyo daaroodkii halkaas deganaa oo khilaaf ka dhex jiray waase ii suuroobi weyday inaan heshiisiiyo.

Markaasaan aniga oo fulinaya codsigii ay hore iigu soo direeneen odayaasha Gobollada Woqooyi Bari ayaan qoraxdhicii 1da Disembar 1991kii, ka degey magaalada Gaalkacyo oo ah caasimadda Gobolka Mudug. Magaaladu waxay ahayd goob dagaal. Madfaca USC garabka Caydiid ku soo rideysey waxay magaalada dhaafayeen ilaa 8km, waxayna gaarayeen Halabooqad, halka ciidanka lugtuna ee isla jabhaddasi uu magaalada u fadhiyey taagga ka soo jeeda xaafadda Baraxley. Xaaladda caynkaas ahi waxay tusmo u ahayd heerka ay gaarsiisnayd khatarta ay magaaladu ku sugnayd.

Aniga oo subaxdii danbe kormeeraya ciidammada difaaca kaga jira magaalada, ayaa abbaarihii 10kii barqannimo waxaa magaalada iigu yimid wafdi ballaaran oo uu hoggaaminayo Guddoomiyihii SSDF, Maxamed Abshir Muuse.

Madaxda la socotey waxaan ka xusuustaa Cabdullaahi Boqor Muuse oo Guddoomiyuhu u magacaabay madaxa maamulka rayidka ah ee saddexdaas gobol, Yuusuf Camba-Cambe oo ka mid ah odayaasha reer Nugaal, Maxamed Xaaji Aaden, Oday Caydiid, Abshir Muuse, G/Sare Cabdi Sugulle oo taliye ka ahaa Booliska saddexda gobol iyo laba nin oo kale ee aanan magacyadooda xusuusnayn. Waxaa kale oo wafdiga la socday nin Carab ah oo lagu magacaabo ' AL-Qac' kana socdey hay'ad samafal ah oo laga leeyahay dalka Sacuudiya, xaruntiisuna tahay Jabbuuti.

Aniga iyo wafdigii na soo booqday waxaannu tagnay xarunta ciidanka laga maamulo oo hore u ahaan jirtey degaanka rasmiga ah ee Guddoomiyaha Gobolka. Markii aannu halkaas ku shaahney oo iswaraysannay ayaa ninkii Carabka ahaa igu yiri, ‘ waxaan rabi lahaa in aan gaar ahaan kuula hadlo. Laba kursi ayaa meel gees ah naloo dhigay.

Markii aannu fariisannay ayuu, isaga oo aan wax gogoldhig ah u samayn, igu yiri: "Haddii aad tihiin SSDF waxaannu idiin hubaynaynaa toban kun oo nin ee la midooba Al-Itixaad Al-Islaami’ . Aad iyo aad baan uga waswaasay ninkaas taladiisa. Sidaas oo kale, waxaan la yaabay caqli xumadiisa iyo isla-weynidiisa. Waxaan isweydiiyey sida taladaas oo kale uu ugu soo jeedin karo nin uusan garanayn wuxuu yahay. Waxaan kale oo isweydiiyey cidda uu ka socdo oo uu ciidanka u dhisayo. Ma suurtoowdaa in Sacuudi Caraabiya ka danbayso Al-Itixaad Al Islaami baan haddana isweydiiyey, taasina caqligal ila noqon weyday. Sidaas oo kale waxaan hoos isu weydiiyey in arrinta Carabku ii soo jeediyey uu Maxamed Abshir la og yahay iyo in kale. Markaan isweydiiyey su'aalo badan oo aanan jawaab u hayn ayaan ka cudurdaartey arrinta uu ii soo jeediyey oo ku iri: ‘ Anigu hadda ayaan dalka ku soo noqday oo waxba lama socdo, welina lama tashan madaxda aan dhulka ugu imid, sidaas awgeed wax jawaab ah kuma aan siin karo’ .

Markii aan aniga iyo Carabkii faqayagii dhammaysannay oo dadkii la soo fariisannay, baa Maxamed Abshir igu yiri, ‘ Hadda waannu noqonaynaa oo caawa ayuu Islan Cabdille casha noogu sameeyey magaalada Burtinle’ . Taas oo aan yeelay. Gaalkacyo baan ka soo baxnay waxaannu soo qaadnay waddada Burtinle u baxda, waxaase si lama filaan ah waddada nagu joojiyey rag ciidanka SSDF ka mid ah, kuwaas oo af buuxa nagu yiri: ‘ Naga tegi meysaan, aag dagaal baad na dhigteen oo aydinnaan wax taakulayn ah noo soo dirin, hal marna na soo booqan, dhaawacana aan wax gargaar ah la soo gaarsiin. Halkaan baad nala joogeysaan’ . Wax hadal ahi kama soo bixin guddoomiyaha iyo raggii kale oo la socdey. Ilaaladii la socotey iyo ciidankii jidgooyada sameeyey way ismari waayeen.

Dabadeed waxaan wafdigii ku iri: ' Bal suga aniga ayaa la hadlayee. Raggii baan u tegay oo ku iri aniga ayaa idiin soo noqonaya oo wixii dalab ah idinka qaadaya, madaxdana kala xiriiri doonee waddada u banneeya wafdiga oo ballammo laga sugayo, wax badanna meesha taagnaa, wakhtina ku socdaa' . Ciidaanku wuu iga aqbalay codsigii, dabadeedna waddadii buu banneeyey.

Wafdigii oo dhan marka laga reebo Cabdullaahi Boqor Muuse xanaaq bay la dhaceen. Iska soconnay oo magaalada Burtinle waxaannu gaarney hal saac oo fiidnimo. Maamulka Maxamed Abshir uu ka dhisay gobollada Woqooyi Bari waxaa Guddoomiye ka ahaa Cabdullaahi Boqor Muuse. Islaanka oo aanan muddo arag baan la fariistay. Sida ii muuqatay Maxamed Abshir marna lama kulmin Islaanka habeenkaas ka hor. Cashadii markaannu dhammaysannay baa Maxamed Abshir u diray wafdiga qaarkiis iyo ninkii Sacuudiga ahaa xagga Boosaaso.

Aniga oo raba in aan Islaanka macasalaameeyo, baa waxaa ii yeeray Maxamed Abshir oo igu yiri, qolada ila socota baa rabta in ay kula hadlaan. Qol baannu fariisannay, dabadeedna eedo badan baa la ii soo jeediyey, ilaa la gaaray in la igu yiraahdo: ' Yaa kuu fasaxay in aad Gaalkacyo ka soo degtid?. Maad Garowe ka soo degtid?. Maxaadse nooga qaadan weydey fasax aad ciidammada ugu tagtid?' . Waxaan ku iri: ' Sua'aal ma idin weydiin karaa?. Maxay ku kala duwan yihiin Garowe iyo Gaalkacyo?. Waxaan qof ahaan isweydiiyey in raggu wareersan yahay iyo in kale. Miyeysan ogayn in ciidanka difaaca ku jiraa uu yahay raggii SSDF oo aannu soo wada jabnay. Waxaan ku iri: ' Aniga Garowe iyo Gaalkacyo waa isugu kay mid. Illaa anigaan waxba garane, raggu aniga ayay iska kay ilaalinayaan' .

Markii ay dooddu kululaatay baa Maxamed Abshir talo ku soo jeediyey in aannu kala hoyanno, oo aan anigu Gaalkacyo ku noqdo, dabadeedna aannu Boosaaso isugu nimaadno. Isla habeenkii ayaan guure Gaalkacyo ku tagey oo iska seexday. Markii aan difaacii magaalada si fiican u habeeyey baan saraakiishii u sheegay in Boosaaso la iga sugayo oo aan baxayo, waxaanna ku adkeeyey in ay is ilaaliyaan difaacana xajiyaan.

Maalmo yar kaddib, baan Gaalkacyo ka jarmaaday, waxaanna horay u sii watay 10 askari iyo laba baabuur oo qoryo saaran yihiin. Ragga ila socdaa weligood gobolka Mudug sooma dhaafin, waxayna la yaabeen fogaanta dhulka aannu u soconno. Markii aannu marayney tuulada Ceel Doofaar, baa taliyihii ilaalada ila socotey amar ku bixiyey in la istaago, dabadeedna xaggayga soo dhugtay oo i weydiiyey meesha aannu u soconno. Waxaan u sheegay in aynnu Boosaaso u soconno. Isaga oo hadalkayga liqi la' buu wuxuu yiri, waxani Boosaaso ka fog ee ma Yemen iyo dalalka Carabta baynnu u soconnaa?. Waxaan ku qanciyey in aan Boosaaso u soconno, taas oo aannu fiidkii gaarney, oo la ogaa in aannu imaanayno, waxaana naloo diyaarshay guryo fiilooyin ah oo ku yaal gudaha warshadda (Net Fish).

Maxamed Abshir intii aannaan magaalada soo gaarin buu dalka Sacuudiga u dhoofay. Waana dhaqan uu lahaa in markii uu toddobaad joogaba uu dalkaas u dhoofo. Sidaas awgeedna uusan wax badan kala socon hawlaha dalka laga wado. Dekadda Boosaaso oo ahayd isha dakhli oo keli ah oo gobollada Woqooyi Bari lahaayeen, iyadana Guddoomiyuhu wuxuu maamulkeeda u dhiibey ururka Itixaad Al-Islaami. Dakhliga waxaa SSDF laga siiyaa boqolkiiba 20, inta kalena Al-Itixaadka ayaa qaata. Xisaabaadkii dekaddu waxay noqdeen sir gaar u ah Al-Itixaad, cid la xisaabtantaana ma ayan jirin. Waxay meesha ka dhigteen dukaan ay iska leeyihiin. Markii ay bishu dhammato bay SSDF ku oran jireen intaan baa dakhligii noqday, dabadeedna boqolkiiba 20 ka siin jireen.

Al-Itixaad Al-Islaami, joogitaankoodu kuma ekayn oo keli ah dekadda Boosaaso, ee waxayba saldhig ciidan ku lahaayeen Qaw oo Boosaaso 18km u jirta. Saldhiggaas waxaa ku soo xerooda xubno badan oo ururkaas ka mid ah oo ka kala yimaada meelo badan oo dalka ka mid ah. Kharajka ku baxa waxaa laga soo qaadaa dekadda. Markii aan madax badan weydiiyey waxa ciidankan tirada badan, aadkana u hubaysan loo geyn waayey aagga difaaca? Waxaa la iigu jawaabay SSDF ma ay xukunto. Waxaa halkaas iiga caddaaday in Al-Itixaad ay wax kale damacsan yihiin. Cabdullaahi Boqor Muuse baan ugu tagey xaafiiskiisa, kaas oo markaan iswaraysannay ii sheegay in Maxamed Abshir dhoofay oo ka codsaday in uu hawlaha sii wado. Waxaan

weydiiyey dekaddu ma gacanta Itixaad bay ku jirtaa? Wuxuu iigu jawaabey, haa. Waxaan kale oo weydiiyey cidda leh ciidanka Qaw fadhiya, wuxuu iigu jawaabay in Al-Itixaad leeyahay.
Ugu danbayntii waxaan weydiiyey sida aynnu isu daafici karno, mar haddii dekaddiina la inaka haysto, ciidanna nala kordhigay. Wuxuu ii sheegay in uusan garan karin, oo loo baahan yahay in su'aashaas la weydiiyo Maxamed Abshir, oo isagu dekadda Al-Itixaad u dhiibey, isla markaasna uu xog' ogaal u yahay ciidanka Qaw fadhiya. Arrintaasi welwel hor leh bay igu reebtay. Cabdullaahi Boqor Muuse waxaan ku iri, anigu ma aanan garan maamulka aad dhisteen iyo micnaha aad Gaashaandhigga iigu magacawdeen. Maamul aan waxba maamulin weligey ma aanan maqal. Waxaan xusuusiyey in ay iyagu ii yeereen si aan dalka u daafaco ee aanan jago-doon ahayn, sida ii muuqatana aaney waxba faraha ugu jirin. Waxaan kale oo u sheegay in aan degdeg u baxayo, oo aagga Galkacyo difaac ka gelayo, ugana baahanahay in ay taakulayn degdeg ah ila soo gaaraan. Maalintii danbana waxaan iska casiley jagadii la igu magacaabay, magaaladana waan ka baxay.

## ANIGA IYO AL-ITIXAAD

Somaalidu waa ummad muslim sunni ah oo ku dhaqanta mad-habta Shaaficiga. Dalka waxaa ka jiri jirey mawlacyo iyo xarumo fadhi u ah xer, kuwaas oo lagu baran jirey qur' aanka ama shiikh caalim ah kutubta laga raacan jirey. Waxaase dalka ku hor leh kooxo xukun doon ah oo siyaasad ahaan diinta u adeegsanaya si ay danahooda ku gaaraan. Waa jirtey in 70aadkii, ay soo shaacbaxeen dumar ku labista xijaab korka oo dhan ka daboola iyo dhallinyaro gardheer sii deysatey oo si gaar ah isu bahaysan jirey, kuwaas oo ay ciidanka Guulwadayaasha luuqyada isku cayrsan jireen. Ma jirin wax astaan ah oo lagu tuhmi karey in, kooxahaasi horudhac u ahaayeen dhaqdhaqaaq diin iyo siyaasad isku wata oo dalka ku soo fool leh. Nayroobi markii aan imid baa la ii sheegay in ay jiraan kooxo hubaysan oo magac diimeed wata. Markaas baan dadka weydiiyey sida ay inaku soo galeen. Waxaa la ii sheegay in dhammaadkii 70aadka, dalal badan oo muslim ah oo ay xukumaan keli-taliyaal, ay soo foodsaareen dhaqaale xumo, shaqo la'aan iyo adeegyadii bulshada oo hoos u dhacay.

Arrimahaasi waxay jahawareer ku rideen dad badan oo nolol maalmeedkii ciriiri ka galay, cadaadiska dalalkaas ka jireyna suurtaggal ugu noqon weydey in ay dhibaatooyinka haya ka hadlaan ama banaanbaxyo ka sameeyaan, sida adduunka ka dhacda.

Wixii intaas ka danbeeyey, dadkii oo dhammi wuxuu u leexday masaajiddada. Sida la og yahay dunida muslimka, masaajiddadu waxay fuliyaan dhowr arrimood oo aan meel kale laga helin. Kol waa xarun cibaado, kolna waa xarun cilmi oo wax baa laga bartaa, kol kalena waa xarun wacyigelineed. Kaalintaas wanaagsan ee masjidku ka qaato barbaarinta iyo dhisidda mujtamaca islaamka ah, waxay soo jiiteen ummad fara badan oo aan hore masaajiddada ugu xirnaan jirin. Shacbigii tirada badnaa, oo ka xoroobey jahawareerinta dawladda, waxay u leexdeen dhinaca masaajiddada, halkaas oo barashada cilmiga ka sakow, ay ka heleen fursad ay aragtiyadooda isku dhaafsadaan, dhibaatooyinka dalka ka jirana ka hadlaan, maamul xumada iyo musuqmaasuqa dawliga ahna ku dhaliilaan. Sidaas ayay masaajiddadii isugu rogeen meel uu shacbigu ku soo hirto. Sidaasna waxaa ku abuurmay dhaqdhaqaaq diini ah oo dabeecad xisbi leh, si toos ahna uga horyimid xukumadaha dalalkaas ka jirey. Soomaaliya oo waddammadaas la duruuf ahaydna waxay qaadday tubta kacdoonkaas diiniga ah.

1980aadkii markii weerarradii isdabajooga ahaa ee SSDF ku haysey xukunkii Siyaad Barre ay awooddiisii wiiqeen, ayaa dalka waxaa ku soo noqday dhallinyaro badan oo waddammada Carabta, siiba Sacuudi Caraabiya kaga soo qalinjebiyey dariiqada Wahaabiyada, kuwaas oo dalka ku soo kordhiyey dhaqanka Wahaabiyada oo aan horay dad badani dalka uga aqoon. Siyaad Barre wuxuu dareemay in dhaqdhaqaaqyada cusub ee dalka soo galay ay yihiin dagaal hor leh oo hoostiisa ka qarxay. Dabadeed wuxuu is yiri haddii aadan gacan bir ah ku qaban shiddo hor leh bay kuu soo jiidayaan. Ciidankiisii amniga oo dhan buu hawlgeliyey si ay dhaqdhaqaaqyadaas uga hortagaan, rag badanna xabsiga ayuu dhigay.

In badan oo ka mid ah wadaaddadaasna maxkamad buu soo taagey. Kuwaas oo qaarkood lagu xukumay dil iyo xabsiyo dhaadheer. Xukunkii ayuu fulin waayey kolkii ay dhaliilo uga yimaadeen dawlado uu dhaqaale ahaan ku tiirsanaa. Cid aan ururradaas ka arko waxaa iigu horraysey Nayroobi. Maalin maalmaha ka mid ah, baa rag ay ka mid yihiin Maxamed Qaasim ' Wabeeneeye' ah oo ah ganacsade weyn oo Nayroobi deggan, Xuseen Cabdille Codweyn ' Cumar Maxamuud' iyo Cabdullaahi Cali Xaashi ' Meheri' , waxay casumeen aniga, Cabdirisaaq Xaaji Xuseen oo markaas Muqdisho ka yimid iyo Axmed Daahir Xasan. Waxay noogu yeereen iyo waxa ay iyagu yihiin midna ma aanan garanayn. Sidas oo kale in Al-Itixaad uu jiraba ma aanan ogeyn. Qadadii markii ay dhammaatay bay hadalkii qaateen, waxayna ku bilaabeen: ' Annagu haddii aannu nahay Al-Itixaad-Al-Islaami, waxaannu doonaynaa in naloo dhiibo dekadda Kismaayo, sida nalooku dhiibey dekadda Boosaaso' .

Waxaannu nahay dad muslimiin ah, aammin ah oo wixii dhakhli ah ee dekadda soo gala dhawraya. Markii ay hadalkii dhammaysteen baa Cabdirisaaq hadalkii qaatay. Sida la og yahay, Cabdirisaaq diinta si fiican buu u yaqaan. Wuxuu kula murmay Itixaad waxa uu yahay. Diinta aad nagu beerlaxawsanaysaan oo aad sheegaysaan na dhacsiiya, illaa waxaani waa wax nagu cusub oo ka duwan diintii aan horay u niqiin. Markii la ismari waayey waxaa la murmay Axmed Daahir. Anigu waxaan ku iri, su'aal baan idin weydiinayaa. Magaca aad sheeganaysaan maqalkiisu waa ii maanta, waayo muddo dheer waddanka waan ka maqnaa.

Waxaynnu nahay dad ilma adeer ah ee maad mid nala ahaataan, maxaad gooni ugu baxaysaan? Tan kale maxaad u doonaysaan in dekadda la idiin dhiibo, ma na dhacsiin kartaan?. Waxaan garanayaa in aydinnaan la dagaallamayn dadka aannu la dagaallamayno oo guryahayagii naga soo saaray, haddana annu ka baxsan la' nahay oo weli na daba jooga. Sow ma ogidin in aannu xoogaa caqli ah leenahay, waayelna nahay oo aannu garan karno in aad dakhliga dekadda hub ku gadanaysaan, isla markaasna dekadda kala soo degi doontaan wixii aad rabtaan. Waxaan ugu danbayntii ku iri: ' War heedhahaya, ma carruur baad na mooddeen?' .

Anigu waxaan idin leeyahay cagaha dhulka ku haya. Waxaana idinkula talinayaa in aad nabadda dalka ka shaqaysaan oo aydinnaan shiddo hor leh dalka ku soo kordhin. Sidaas baannu ku kala tagnay.
Markii dooddayadii dhammaatay, waxaan maqlay in ay waraaq degdeg ah u qoreen Al-Itixaad Al-Islaami-ga Boosaaso jooga. Warqaddaas waxay ku yiraahdeen waxaa idinku soo socda nin halis ah, oo haddii aydaan iska qaban aan halkaas wax dan ahi inooka suurtoobayn. Mar danbe oo aan aniga iyo Maxamed Abshir Boosaaso isugu nimid, baan waxaan ku iri: maxaad ciidanka Qaw fadhiya oo aadka u hubaysan, una tababbaran ugu oran weydey dalka nala daafaca? Waxay ila tahay, haddii taladaas la diido, in loo baahan yahay in aynnu isla ciidankaas ka digtoonaanno, oo uu khatar muuqata nagu yahay.

Waxaan ugu daray in ay iyaga keligood dekadda ka faa'iidaystaan oo aynaan innagu waxba ku haysan, taasina ayan ahayn arrin socon karta, sidaas darteedna loo baahan yahay in aan kala wareegno dekadda, si ugu yaraan aynnu taakulayn ugu helno ciidanka difaaca ku jira. Dood iyo muran badan kaddib, waxaan ku guuleystay in aan Maxamed Abshir dhacsiiyo taladii aan u soo jeediyey, kaddibna dekaddii baannu Al-Itixaad ka qaadnay. Markaan hubsaday in dekaddii gacantayada soo gashay, Gaalkacyo oo sansaan dagaal ka jirtey baan dib ugu noqday.

Markii aan Gaalkacyo tegeyba waxaa la igu salaamay war dhiilo leh. Kaas oo ah in Siyaad Barre Baydhabo laga saaray oo Xadka Kenya uu ka tallaabay, Kismaayana Moorgan laga qabsaday oo xasuuq ba'an dadkii lagu hayo, qaxootina Kenya ku qulqulayo. Waa shiddo hor leh. Si culayska looga qaado shacbiga aan hayb wadaagta nahay ee koofuurta Soomaaliya ku sugan, waxaannu goosannay in Habar Gidir oo horseed ka ah duullimaadka koofureed, aannu weerar kaga qaadno Mudugta koofureed iyo Galguduud oo degaan u ah, si aannu Caydiid ugu sandulleyno in uu ciidammada koofur kala soo noqdo oo gobollada dhexe xooggiisa soo saaro.

Saddex beri ka hor, inta aannaan duullimadka qaadin ayaa madaxdii SSDF, isimmadii iyo waxgaradkii kale ee gobollada Woqooyi Bari ugu caansanaa, isku afgarteen in ay Garowe shir isugu yimaadaan, si ay uga arrinsadaan xaaladaha cusub ee soo kordhay.

# DHABAR JEBINTA AL-ITIXAAD AL-ISLAAM

16kii June 1992kii ayaa shirkii Garowe nooga furmay. Qof madax ah oo shirkaas ka maqnaa ma jirin. Waxaan meesha ka caddeeyey in aan saddex beri kaddib, sidii aynnu ku heshiinney, duulaan qaadi doono, ee inta aynan weerarka qaadin waxaan jeclahay in aynnu wax isku ogaanno. Waxaa la idinka rabaa taakulayn joogta ah oo isugu jirta cunto, shidaal, daawo, rasaas iyo ciidan diyaar ah oo wakhti kasta la dalban karo. Markii la dhegeystey taladaydii, waxaa la isku raacay in arrinta laga baaraandego oo go'aan kama dambays ah laga qaato 19ka Juun 1992.

Habeenkii aniga oo iska hurda oo qorshaynaya sidii aan berri ku bixi lahaa ayaa war degdeg naloo keenay, kaas oo nalooku xaqiijiyey in Al-Itixaad Boosaaso iyo Qardho qabsadeen. Waxaan ogaa oo kale in togga Ligle oo Garowe u dhow ay ku xeraysan yihiin ciidan dhan 1,500 oo tekniko iyo taakulaynba haysta. Sidaas oo kale waxay ciidan dhigeen Heemo oo Bacaadweyn u dhow si ay u kala gooyaan Gaalkacyo iyo Garowe. Subaxdii markii aan soo kacay baa waxaa la ii sheegay in Maxamed Abshir iyo Cabdullaahi Boqor Muuse ay aadeen shirkii loo ballansanaa 19ka Juun. Halkaas baa iyagana loogu sheegay in Itixaadkii qabsaday Boosaaso iyo Qardho.

Dib bay u soo noqdeen oo waxay yiraahdeen waxaannu ka xaqiiqsanaynaa raadiyaha Booliiska. Iyaga oo raadiyihii jira baan xerada u soo dabamaray. Halkaas oo la iigu sheegay in dalkii la haysto. Waxaa intaas la iigu daray in odayashii raadiyaha aadeen oo war rasmi ah laga sugayo. 10 daqiiqo kaddib bay soo noqdeen noona xaqiijiyeen in warku sax yahay. Waxaan isla markiiba gartay in, ciidankii Ligle fadhiyey uu mar hore soo dhaqaaqay naguna soo maqan yahay. Waxaan raggii u sheegay in aan degdeg magaalada u gaarayo si aan xiriir ula sameeyo ciidankii Gaalkacyo joogey. Markii aannu isku afgarannay, baa ilaaladii xerada oo ordaysa noo timid oo noo sheegeen in ciidankii Ligle fadhiyey uu nagu soo socdo. Xeradii taliska oo aannu ku shirayney baannu ka soo baxnay oo waxaannu nimid qaybtii ciidanka. Bannaanka baannu istaagney.

Janan Cismaan Fatiig oo taliye xerada ka ahaan jirey aadna u kala yaqaan dhismaha xerada, baa talo ku soo jeediyey in, inta aan la ina hareerayn, aynnu ka baxno albaab ku yaal muska xerada. Intii aannu arrinta ka murmayney bay ciidammadii Itixaadku soo dhowaadeen oo xabbad oodda nooga qaadeen. Aniga iyo G/ Sare Khaliif Ciise Mudan oo kaaliye ii ahaa, waxaannu aadney Raadiye Fooniye xarunta dhexdeeda ku yiil si aannu gurmad u dirsanno. Markii aan raggii ka dhaqaaqnay bay is qabteen oo yiraahdeen war nimanka aynnu wax la qabno oo yeynaan meesha uga tegin. Dhammaantood way noo yimaadeen. Toban wiil oo ila socday baan amar ku siiyey in ay dagaallamaan inta aannu raadiyaha ku hadlayno, si aannu u helo wakhti aannu gurmad degdeg ah u wacanno. Waxaan la hadlay Janan Cali Ismail oo abbaanduule noo ahaa, fadhiyeyna taliska dhexe ee ciidanka difaaca, xaruntiisuna ahayd Tuulo Xarfo ' Tuulo buuryaqab' . Waxaan ku iri la hadal G/ Sare Cabdicasiis Bowbowle una sheeg in uu degdeg noogu soo diro guuto ciidan ah, oo dalkii Al-Itixaad Al-Islaami baa qabsaday. Guutada isagu ha soo wado ama Saciid Dheere ha u soo dhiibo.

Janan Cali Ismaaciil oo aannu ka sugeyney jawaab degdeg ah, isaga oo sida aannu malaynayney in uu taliye ahaan ka gubanaya dhabarjebinta nalaku dhuftay, ayaa weji kale iila soo baxay. Ilayn iskama warqabnee, Itixaadkii baaba nagu dhex jira. Taliyihii aannu ka sugayney in uu degdeg u bixiyo awaamiir nalooku soo gurmanayo ayaa, nasiibdarro, iigu jawaabay, wax dhib ahi ma uu jiro ee aan idiin imaado oo idin dhexdhexaadiyo. Markii aan Jawaabtiisii maqlay baa muusika ii yeertay, ilaa heer dhulkuba ila gariirey. Markii aan Janan Cali Ismaaciil ka samray baan toos ula hadlay G/ Sare Cabdicasiis Bowbowle oo Gaalkacyo joogey. Marka hore, waxaan u sheegay in uusan Janan Cali Ismaaciil ka qaadan amar danbe, oo ay inoo caddaatay in uusan SSDF ka tirsanayn oo uu Al-Itixaad Al-Islaami la haysto. Dabadeedna waxaan ku amray in uu guuto ciidan ah toos Garowe ugu soo diro. Sidaas waxaan ugu sheegay in aaney guutadu meelna istaagin, yeyna jidgooyooyinka loo dhigay la dagaallamin ee ha soo jiireen. Waxaan kale oo u sheegay in ciidanka isaga ama Saciid Dheere midkood uu soo dhaqaajiyo.

Intaas dabadeed, raggii baan ku soo noqday. Dhinaca kale dagaalkii nagu bilowday 9kii subaxnimo ilaa 1dii duhurnimo si aan kala go' lahayn buu noogu socdey. Dhallinyaradii na difaacaysey, in kasta oo ay si geesinnimo leh u dagaallameen, nasiibdarro, waxaa ka dhammatay rasaastii, dhawacyo kala duwanina way soo gaareen, sidaas darteedna nooma harin awood danbe oo aannu isku daafacno. Intaas waxaa noo dheeraa, taliyihii xarunta 54aad G/ Sare Maxamed Dirir oo xabbadi ku dhacday, dhaawac culisina gaarey, dhiigbaxna u dheer yahay oo xerada noo dhexyaal, waxna aannaan u qaban karin, oo aanan wax gurmad ah haysan. Markii aan garan waayey wax aan sameeyo baan xaqiiqada iska wajahay, oo raggii u sheegay in aaney waxba inoo soo kordhinayn in aan meesha iska taagnaanno ee aan ciidanka weerarka inaku haya xerada u furno oo u sheegno in ay soo galaan.

Itixaadkii mar hore buu xerada dhinac walba ciidammo kaga hareereeyey, markii aannu u furnayna way soo galeen. Ugu horrayntii wiilashii na daafacayey bay qoryihii ka qaadeen, odayaashayadiina waxay noo sheegeen in aannu xirannahay. Waxaan meesha ku joogney labaatan nin oo madax ah iyo 10kii wiil oo saaka oo dhan na daafacayey. Waxay na geeyeen qol u dhow albaabka xerada laga soo galo. Dabadeed waxay na weydiiyeen magacyadayada. Ciidanka na qabsaday waxaan durbadiiba ka gartay laba sargaal oo aan XDS ka wada tirsanaan jirney. Mid wuxuu ahaa reer Biciidyahan waxaana la oran jirey Cabdi Guuleed Warfaa, kan kalena wuxuu ahaa Deshiishe magaciisuna wuxuu ahaa Saciid Orfano.

Nimankaas anigu markiiba waan gartay iyaguse ima ayan garan. Maxamed Abshir Muuse oo dhinaca bidixda naga xigey oo timir cunaya, baa wuxuu ku yiri: ' Walaalayaalow magacu ha noo danbeeyee, horta noo sheega waxa aad noo xirxirateen' . Mid ka mid ah raggii na qabtay baa ku yiri kii magacyada qorayey: ' Ina dhaafi magaciisa waa naqaannaaye' . qaar kale magacyadoodii way sheegeen, rag aan ku jireyse way diideen in ay magacooda sheegaan. Raggaas waxaa ka mid ahaa Mire Awaare, Cabdulqaadir Isbarriije iyo Daahir Mire Jibriil.

Markii ay dhammaysteen magac qorashadii, saraakiishii Itixaadku waa naga baxeen. Magaalada xabbaddu way ka dhex dhacaysaa, ciidanka naqabtey waxaa weerar ku soo qaaday shacbi isa soo urursaday oo xabbaddu meel walba way ka socotaa. Goortii ay saacaddu ahayd 5tii galabnimo, saraakiishii aannu u xirnayn waxay is tuseen in aanaan meesha ku xirnaan karin oo ay habboon tahay in xerada Ligle nala geeyo. Waxay baabuur Land Rover ah ku riteen aniga, Maxamed Abshir, Cabdullaahi Booqor Muuse iyo Xirsi Bulxan, afar nin oo ilma adeer ah oo gurigoodii lagu qabsaday, iyaga oo aan wax dembi ah gelin, Sow yaab iyo amakaag ma aha!.

Xabbadaha isdhaafaya awgood, waxay arkeen in aaney jidka Ligle toos u aadi karin. Sidaas, waxay ku tashadeen in ay ka baxaan buuraha gaaggaaban oo xerada ka danbeeya oo ka soo laabtaan waddada dhinaca Laascaanood ka timaadda. Baabuurka intii aannu saarnayn baa Maxamed Abshir wuxuu wiilkii wadaha ahaa ku yiri: ' Maxaad noo maagteen oo noo xirxirteen?' . Wuxuu ugu jawaabay: ' Kolkii aad muslim noqotaan oo diinta soo gashaan baa la idiin sheegi doonaa waxa la idiin xiray' . Wadihii wuxuu ku hadlaayay lahjadda Abgaal. Saddexdayadii kale annaga oo yaabban baannu hal mar Maxamed Abshir wada fiirinnay oo isku mar niri: ' War meesha catow ma yaal ee dagaal baa ka jira, nimankuna way na haystaan' .

Markii aannu xerada Ligle u dhow nahay, baan isha ku dhuftay saddex nin oo garar dhaadheer oo meesha taagan, giddigoodna waan aqooday, waxayna ahaayeen Cabdulqadir Gacamay (Ciise maxamuud), Xuseen Cabdille Codweyn(Cumar Maxamuud) iyo Cabdicasiis Guureeye Kaarshe (Ciise Maxamuud). Cabdicasiis Guureeye waxaannu ka wada tirsanaan jirney ciidanka XDS. Markii ay na aqoonsadeen bay saddexdoodiiba madaxa sii jeediyeen. Raggii nala xirnaa waxaa la soo mariyey waddadii aannu soo qaadnay, oo tartiib-tartiib bay xerada Ligle u keeneen. Markii dhammaantaya xerada Ligle la isugu kaaya keenay, baa afartayadii hore loo keenay naloo yeeray. Waxaa naloo waday dhinaca togga, dabadeed waxaa nala is taajiyey meel dhexe. Waxba naloo ma sheegin. Cabbaar markaan meeshii taagnayn bay na geeyeen teendho yar oo togga dhexdiisa ka dhisnayd. Goortii aannu galnay oo cabbaar joogney bay kooxdii kale noo keeneen.

Markii ay nagu hubsadeen bay teendhadii nagu qufuleen oo nagu yiraahdeen: ' Qofkii madaxa kala soo baxa xabbad baa dhafoorka kaga taal' . Meesha nala geeyey ciidan baa ku wareegsanaa. Ciidankii gurmadka oo aannu Gaalkacyo ka sugayney habeenkii nama soo gaarin. Ciidan kale oo Burtinle ka soo gurmadey waxaa dib u ceshay ciidan Al-Itixaad dhigeen Rabaable. Saciid Dheere markii u cagta mariyey ciidankaas ayuu ka baqay in ciidammo kale jidgooyo u dhigaan, dabadeed wuxuu goostay in uu jidka toos Garoowe u yimaada ka weecdo, oo uu ka soo wareego xagga xero Dhulbahante. Sidaas darteed ayuu subaxnimadii ka soo galay waddada Laascaanood. Goor arooryo ah oo aannu hurdada ka toosnay baannu rasaas xoog leh maqalnay. Xeradii nalaka soo xiray, ' 54aad' bay dagaal ku qaadeen, halkaas oo ay 150 nin ku dileen xeradiina ka qabsadeen, magaalada Garowena way sifeeyeen. Hawlgalladaas kaddib, waxay u soo dhaqaaqeen halkii aannu ku xirnayn, taas oo ay isla markiiba hareereeyeen. Wax rasaas ahse kuma ayan ridin oo waxay ka baqeen in ay xabbaddu na soo gaarto.

Saddexdii nin oo naga jeestey markii xerada nala keenay, ' C/Qaadir Gacamey, ina Codweyn iyo Guureeye Kaarshe' , baa markan iyaga oo ergo ahaan u socda teendhadii noogu soo galay. Waxay noola yimaadeen cudurdaar aannaan ka filayn. Waxay nagu yiraahdeen: ' Waxaa dhacay dagaal aan loo baahnayn, sidaas awgeed waxaannu dooneynaa in aannu xakamaynno oo la wada fariisto, lana wada hadlo' . Maxamed Abshir oo guddoomiye noo ahaa baan hadalkii ka boobay, oo ergadii ku iri: ' Jeer aad na sii deysaan oo aan ciidankayagii u tagno wax wada xaajood ah idinla geli meyno' . Sida la og yahay, nin xirani cod ma leh. Hadalkana waxaan guddoomiyaha uga boobay in aan ka hortago in aaney nagu sandullayn in aannu yeelno wax allaale wixii ay doonayaan, oo isugu muujinno dad ad' adag. Maxamed Abshir wuu iska aammusay. Markii aannu is mari weyney bay nagu yiraahdeen: ' Na suga wada tashi baannu qoladayadii la soo yeelaneynaa, dabadeedna waannu idiin soo noqonaynaa' .
Waxay nagu soo noqdeen markii ay saacaddu ahayd 12kii duhurnimo, ilaa haddana 24 saac baannu u xirnayn. Waxay noo sheegeen in ay taladayadii qaateen, oo isku raaceen in nala sii daayo. Markii aannu teendhadii ka soo baxnay, wax yarna soo dhaqaaqnay bay na joojiyeen

oo meel bannaan ah na istaajiyeen. Waxaa isha nagu dhuftay nin Itixaad ah oo aannu XDS ka wada tirsanaan jirney, madaxna aan u ahaan jirey, xeradana markaas madax ka ahaa kaas oo aniga iyo Mire Awaare si fiican u garanayey. Sargaalkaas waxaa la oran jirey Maxamuud Ciise ' Dhulbahante'. Sargaalkaasi wuxuu amar ku baxshey in labadayada ma ahee inta kale la sii daayo. Wuxuu yiri: "labadaas nin waa saraakiil oo haddii aynnu sii deyno waxay nagu dalbanayaan ciidankooda. Toddoba ka mid ah raggii la sii daayey baa yiri annaguna tegi meyno. Intii kale way iska tageen. Daahir Mire oo ka mid ahaa raggii la sii daayey baan la ballamay oo ku iri: ' Ilaa galabta qorrax dhaca haddii nala soo deyn waayo, ciidanku weerar xerada ha ku soo qaado'. Kaddib waxaa nalaku ceshey teendhadii nalaka soo saaray. Daahir Mire wuxuu farriintii u sheegay Cabbaas Dheere, kaas oo gaarsiiyey Saciid Dheere. Markuu farriintaydii helay, Saciid Dheere wuxuu ciidankii tartiib-tartiib ugu soo durkiyey xeradii, sidaasna ciriiri ku geliyey ciidankii Itixaadka.

Gabbal-dhacii markii ay xabaddii bilaabi lahaayeen baa waxaa noo yimid Maxamed Abshir iyo saddexdii Ikhwaanka ahaa, oo noo sheegay in nala sii daayey, waxayna nagu yiraahdeen: ' Soo baxa'. Markii aannu dibedda nimid baa dhallinyaro da' yar oo ka tirsan ciidanka Itixaadka nagu qayliyeen, iyaga oo leh, ' Yaa gaalada sii daayey, wallaahi waannu laynaynaa'. Laba baabuur baa nalakula cararay oo waxa nala geeyey magaalada Garowe. Habeenkii halkaas baannu ku barinay oo waxaannu seexannay hoteelka Saciid Diiriye.

Subaxdii baannu xeradii 54aad, intayadii madaxda ahayd shir isugu nimid. Guddoomiyuhu markii uu shirka furay buu hadalkii qaatay oo yiri: ' Muslim baynnu nahay, Itixaad wada hadal bay inooku yeereen, yaynaan ku gacansayrin codsiga ay inoo soo jeediyeen. Kaddib anigaa hadalkii qaatay oo iri: ' Ragga waanwaanta inooku yeeray waxay haystaan Bosaaso iyo dekaddii iyo magaalada Qardho, marka waxaan soo jeedinayaa in aynnu ciidanka Ligle jooga jabinno, kuwa bari qabsadayna ku duulno, haddii kale weligeen xasili mayno, Ciidanka Caydiid ee Habar Gidirna ku duuli kari mayno'.

Siddeed iyo tobankii kale ra'yigaygii bay qaateen. Maxamed Abshir iyo nin kale oo reer Nugaal ah oo keli ah baa ka horyimid taladii iyo shirka ka soo jeediyey. Waxaan dabadeed ka codsaday reer Nugaal in, inta aynnu shaqada ka qabsanayno, Maxamed Abshir gurigiisa lagu hayo. Sidii bay yeeleen. Kolkii aannu shirkii soo gunaanadney, baan madaxdii ka codsaday in ay guryahooda iska aadaan oo fursad u siiyaan intayada ciidammada ah in aannu xilalkayaga gudanno. Intii aannu shirka ku jirney bay galabgaabkii noqotay, dabadeed waxaannu ku heshiinney in aannu habeennimada dagaalka isu diyaarinno, subaxdiina weerar qaadno, isla caawana dariiqyada oo dhan ka xirno.

Ciidankii si buuxda bay awaamiirtii u fuliyeen oo meel walba way xireen, waxaannuna go'aansannay in aan ciidankaas loo oggolaan in meesha ka baxaan iyaga oo fiyow. Markii Itixaadkii wada hadalka naga sugayey xaggayaga cidi uga tagi weydey, waxaa nala soo xiriiray saddexdii ikhwaan oo ku jirey talada waanwaanta, kuwaas oo gartay in wax jiraan, aanse garanayn meel ay wax ka qabtaan. Waxannu ku niri: ‘ Ama hub qaata oo dagaalka nala gala, ama halkiinna hoteelka ina Geelle-kaneec aannu qol idiinka gogolno. Waxay doorteen in qol loo goglo.

Sidaas oo kale ciidankii Itixaadku, markii ay ka samreen ergadii waanwaanta ugu maqnayd bay waxay is yiraahdeen meesha ka baxa, mase dhinac kasta ciidan hubaysan baa ku meersan. Kolkii uu waagu beryey ayaa cidammadii SSDF dhinac kasta xeradii Ligle weerar kaga soo qaadeen. Ciidammadii Ikhwaanku way jahawareereen, waxay bilaabeen in ay hubka dhinac walba isaga ridaan, si ay meel uun ay ka baxaan u baannaystaan, ciidankayaguna markuu gartay waxa ay doonayaan buu isaguna afarta gees ka xabbadeeyey. Dhinacayaga khasaaradu way yarayd, dhowr askari oo naga dhintay iyo tobaneeyo dhaawac ah bay ku ekayd, ciidankii Itixaadkase oo ka koobnaa 1,300. oo aad u tababbarnaa, wateyna tekniko, hub kala jaad ah, waxaa ka fakaday tira boqol ka yar, waxaanunna ka qabannay kontomeeyo askari oo aad u da’ yar, una badan dhaawac. Dallinyaradii waxaannu geyney magaalada, waannuna daaweyney, saddex bilood kaddibna waxaannu u geeyney reerahoodii. Sidaas oo kale, saddexdii iskhwaan ee Itixaadka madaxda u ahaa waxannu geeyney, markii aannu ka baqnay

in dad caraysani suuqa ku dilaan, gurigii Islaan Maxamed, isaga oo aannu ka barinay in uu ku dadaalo sidii u raggaas u badbaadin lahaa, codsigaas oo uu Islaanku naga yeelay. Markii aannu ka faraxalannay ciidankii Ligle ayaannu ku tashannay in aannu carrawno oo Qardho iyo Boosaaso ka xorayno Itixaadka. Khaliif Ciise Mudan baan ciidaan horseed ah siiyey si uu degdeg Qardho ugu xoreeyo. Dabadeed, waxaan dhaqaajiyey ciidankii weynaa. Markii aannu cabbaar soconney, baannu aragnay baabuur yar oo nagu dhexjira, waan istaagey oo sargaalkii iigu dhowaa weydiiyey, war yaa wata baabuurkaas?. Intii aannu ii jawaabin baan aqooday raggii watey. Waxay ahaayeen Maxamed Abshir iyo Cabdullaahi Boqor Muuse oo aan Garowe uga imid, kuwaas aannu isku ogeyn in ay halkaas joogaan, oo aaney dagaalna gelayn, naftoodana halis gelinayn. Raggii baan u tegay oo aan u sheegay in aannu dagaal ku jirno oo ayan na raaci karin, iyo in aannaan qaadi karin mas'uuliyadda ka dhalan karta haddii wax gaaraan, sidaas awgeed baan u sheegay in aan magaalada Qardho ku reebayo.

Taladii way yeeleen, markii aan Qardho tagnayna waxaan geeyey guriga Abshir Muuse, waxaana ku iri, inta dagaalku socdo halkaas baannu idinku og nahay. Inta aannaan Qardho soo gelin Khaliif Ciise magaalada wuu xoreeyey, dagaal culusna lama uusan kulmin, oo Al-Itixaadkii halkaa joogey markii ay maqleen waxa ku dhacay saaxiibbadoodii Ligle, ayay badidood kala yaaceen, wixii ka harayna Khaliif bay isu dhiibeen, hubkiina way dhigeen, dabadeedna waxaan u dhiibnay Booliska degmada oo waa la xabbisay.

Qardho waannu ka gudubney oo guure ayaannu ugu caddaynay. Waagu wuxuu noogu beryey tuulada Juriile. Ceel Doofaar markaannu gaarnay baa ciidanka daalkii ku soo baxay oo raggii tallaaba qaadi waayey, dabadeed waxaannu isla garannay in aannu halkaas iska seexanno. Fiidkii baannu dhaqaajinnay. Muddo yar markaannu soconney baa waxaa naloo sheegay in jidku xun yahay oo aan habeenkii la socon karin. Waxaa kale oo naloo sheegay in ciidanka Al-Itixaad ku jiro meermeerta Waddo isku noqnoqota oo qarar dhexdood marta oo baabuurtu si dhib badan isugu dhaafto, meelo ka mid ahna aaneyba isku dhaafi karin ilaa tuulada Karin.

Halkayagii baannu seexannay, waagu markuu beryey baannu dhaqaajinnay annaga oo lugayneyna, hab dagaalna ku soconna. Markaan aannu gaarney meermeerta afkeeda baa Itixaadkii dagaal nagu bilaabay. Ciidanka weerarka nagu haya wuxuu saaran yahay buuraha, wuxuuna hore u gooyey waddada laamiga ah ee magaalada loo maro. Ciidankii reer Mudug waxaa dhib ku noqotay sidii ay buuraha u fuuli lahayeen oo aad iyo aad bay uga sheegteen oo waa dad weligood ku noolaa, kuna dagaallami jirey dhul bannaan.

Ciidankii reer bariguse si fudud buu buuraha u fuulay oo waa niman ka soo jeeda degaammo buuraley ah. Markii arrintu qallafsanaatey baannu aniga iyo Khaliif wadannay ciidanka qaarkiis iyo teknikadii oo xoog ku bannaynay waddada. Markii ay ahayd lix saac oo duhurnimo ayaannu Karin gaarney.

Waxaannu ka yaabnay waxa meyd dariiqa daadsan. Run ahaan, waxay noola dagaallameen si nafti hurnimo ah. Qaar baa markii ay rasaastu ka dhammaatay dhagax nagula dagaallamay. Ma aannaan joogsan oo waannu soconnay ilaa aannu gaarney kontaroolka Boosaaso, halkaas oo ay difaac adag kaga jireen. Teknikada ayaan la marnay kontaroolka dhiniciisa hore si aannu buuraha uga sifayno wixii kaga haray ciidanka Al-Itixaad. Saacaddu markii ay shanta galabnimo ahayd baannu galnay magaalada Boosaaso.

Ciidanka waxaannu u qaybinnay dhowr kooxood, kuwaas oo dabadeed aannu kala geyney xaafadaha magaalada. Al-Itixaad waxaa laga soo saari waayey isbitaalka magaalada, xiriir kasta oo aannu la yeelannay waannu ku guuleysan weyney, dabadeed waxaa sandulle nagu noqotay in aannu meesha kula dagaallanno. Hortii waxaannu ku tashannay inaan magaalada dhiig ku daadan, kooxdii isbitaalka ku jirtey ayaase nagu khasabtay in aannu xoog ku muquuninno.
Hore baannu u ogeyn in ragga nala dagaallamayey u badnaayeen carruur magaalada laga soo ururshey oo la maan habaabiyey, sidaas darteed baannu door bidnay in aannu ku dadaalno sidii aannu u badbaadin lahayn oo u qabqaban lahayn, dabadeedna reerahoodii dib ugu celin lahayn.

Markii aannu isbitaalka xoraynay, baan ciidanka amar ku siiyey in ay dekadda isku wareejiyaan, si aannu waabberigii weerar ugu qaadno. Magaalada cabsi baa ka jirtey oo dadku fiidnimadiiba guryahooda bay ku xeroodeen. Wax bililiqo ahi kama dhicin oo hore baannu falxumadaas uga gaashaamannay, kaddib markii aannu xaafad xaafad fariisimmo uga samaynay ciidankii SSDF.

Meelihii ugu horreeyey ee aannu haddiibana gacanta ku dhignay, waxaa ka mid ahaa xafiiskii Al-Itixaad Al-Islaami ee Boosaaso. Waxaannu gacanta ku dhignay Arkifiyadii Al-itixaad. Waxaannu ka helnay dokumenti sir u badan. Waxaa ka mid ahaa:

1. Barnaamijka siyaasadeed oo ay doonayeen in ay dalka ku maamulaan.
2 Warqaddii ay u soo qoreen saddexdii Ikhwaan ee Nayroobi igu casumay, taas oo ay imaatinkayga uga soo digeen.
3. Magacyadii golaha xukuumadda ee ay aaggaan u magacaabi lahaayeen.

# ISBAHAYSIGA CAYDIID IYO AL-ITIXAAD

Nasiibdarro, habeenkii aannu magaalada qabsannay waxaannu amar ku bixinnay in habeenkiiba dekadda la hareereeyo si aannu waabberkii weerar ugu qaadno ciidammada halkaas ku jira. Waxaannu illowney in ay baddu u furnayd oo ay doonyo iyo huuriyaal ka raaci kareen. Inkasta oo gef istarateeji ahi meesha ka dhacay, haddana ma jirin wax aannu arrintaas ka samayn karney, oo ma aannu haysan gaadiid badeed oo aannu kaga hareerayn karney dhinaca badda.
Sidaas awgeed, Itixaadkii intii uusan waagu beryin ka hor bay dekadda isaga baxeen oo badda mareen, dabadeedna ku biireen ciidankoodii Qaw fadhiyey oo halkaas difaac ka galeen.

Ciidankii SSDF oo dhan baannu isu soo ururinnay, dabadeedna Qaw baannu dagaal ku qaadnay, dagaalkaas oo aannu ku guulaysanney, meeshana kaga saarnay. Subaxdii baannu ka daba tagnay oo ilaa Ceelaayo ku daba joogney, intii aannaan gaarin ayayse ka baxeen oo xero Warsangeli isku shubeen. Halkii baannu difaac ka galnay, oo dhulka Warsangeli ayaannan fasax u haysan. Arrintu markii ay halkaas marayso baannu Suldaan Ismaaciil xiriir la yeelannay, waxaannu ku niri Itixaad annagu waannu ka soo saarnnay dhulkayagii, haddana xero Warsangeli bay soo galeen, khatartii ay nagu hayeenna ma ayan dhammaan, waxaannu hubnaa in ay idinkana dhib idinla soo gelayaan. Sidaas awgeed, waxaannu kaa codsanaynaa in aad noo fasaxdaan in aannu soo dabagalno oo xero Warsangeli kula dagaallanno. Wuxuu noogu soo jawaabey in dalka Warsangeli dalkayagii yahay, Hartina aysan waxba kala lahayn, cadawgiinnuna cadawgayaga yahay, meel kasta oo ay dalkeenna ka joogaanna ay waajib tahay in lagula dagaallamo, annaguna waxaannu ku dadaalaynaa in aannu ciidan idiin soo dirno.

Markii aannu madaxdhaqameedkii beesha Warsangeli fasaxaas ka helnay, waxaannu ka daba tagnay ciidammadii Itixaadka. Xoogaa ka mid ah ciidankii Itixaadka baannu ku gaarnay tuulada Durduri, dagaal yar oo halkaas nagu dhexmaray waannu ka gacan sarrayney.

Ciidankii Itixaadka badidiisii gudaha bay u sii galeen xero Warsangeli, waxaannuse garan weyney dhinaca ay u baxeen. Sahammo ayaannu dirnay, shacbigii degaanka baannu weydiinney, waxayna noo sheegeen in ay u leexdeen dhanka buuraha Saliid ee aanay aadin dhanka Laasqoray.

Casarkii baannu weerar ku qaadnay difaaca ay ka samaysteen buuraha, oo qiyaas ahaan u jirey Laasqoray 30km, taas oo ahayd meel kayn iyo buuro iska galaan. Ciidankoodu wuxuu saarnaa buuraha, waxay ku jireen togga aagaggaas oo dabeecad ahaan ah meelo jiq ah oo aan la geli karin. Labada ciidan way isu muuqdaan oo waa ay is hor fadhiyaan. Habeenkii waannu ishabaynay oo meeshayadii baannu difaac ka galnay, subaxiina waxaannu degsanney qorshe weerar. Weerarka waxaannu u habaynay hab qabiil, kaas oo ah sida ugu habboon oo lagu dagaal gelin karo miliishooyin beelo soo urursheen oo aan lahayn tababbar iyo anshax ciidan. Annaga oo ka duuleyna tababbarkooda ayaan sida soo socota u habaynay:

Reer Mudug waxay xigeen dhinaca midigta, waxayna u badnaayeen dad tababbaran oo hore uga tirsanaa SSDF.

1. Waxaa ku xigey reer Nugaal, oo u badan ciidan Garowe laga soo abaabulay oo aan tababbar badan lahayn.
2. Waxaa ku xigey ciidanka Cismaan Maxamuud.
3. Waxaa ku xigey ciidan isku jira oo ah Cali Jibraa'iil iyo Siwaaqroon.
4. Waxaa ku xigey ciidan isugu jira Cali Saleebaan iyo Dashiishe oo xoogaa tekniko ah watey.
5. Bidixda waxaa fadhiyey ciidanka Ugaar Saleebaan oo ah niman dagaal yahan ah, aanse waqti dheer meel fadhiyi karin.

Saf ballaaran oo sidaas u habaysan baannu ku dagaal galnay. Ciidankii Itixaadka ee buuraha fadhiyey fiinta buuraha bay dib ugu gurteen. Dhererka buuruhu wuu naga yaabiyey oo marmar waxaad arkeysaa daruuraha oo hoostaada maraya. Ciidankoodii togga joogeyna waannu u geli weyney oo meeshii baa kayn jiq ah nagu noqotay oo xataa labadii wada socotaa aanney is arki karin.

Kolkii xaajadii sidaas noogu adkaatay, waxaan amar ku baxshay in ciidan hoos laga wareejiyo, ciidan kalena gadaal laga mariyo. Inkasta oo aannu si joogto ah Morter iyo PM ugu qaraaceyney, haddana waannu ka dhaqaajin weyney goobihii ay fadhiyeen. Ciidankii aannu gadaal ka wareejinney waa la soo jebiyey, baabuurtii ay wateenna miino ayaa looga qarxiyey.

Dabadeed waxaannu go' aasannay in aannu ka joojinno taakulaynta iyo sahayda. Waxaannu haysanney Raadiye aannu hadalkooda ku dhageysanno. Goor ay habeen tahay, annaga oo radiyahooda dhegta ku hayna, baa waxaa mowjadda soo galay raadiyihii Itixaadka oo ay ku wada hadlayaan laba nin oo aannaan weligey hore ugu fekerin in ay wada hadli karaan. Labada nin waxay kala ahayeen Janan Caydiid iyo Xasan Daahir Aways. Janan Caydiid wuxuu ka soo hadlayay magaalada Baardheere, Xasan Daahirna wuxuu joogaa buuraha Sanaag fiintooda. Malaha aragtida ay labada nin ku kala duwan yihiin waxaa ka weyn abtirsiinyaha mideeya, oo isku maslaxad ka dhigaya. Annaga kuwii dad noo xigey oo ka tirsanaa ururka Al-Itixaad Al-Islaami ee Shiikh Xasan ka tirsan yahay baa na dhabarjebiyey oo weliba dagaalkii nagu sii wada.

Janan Caydiid hadal kooban buu Xasan Daahir Aweys ku yiri, kaas oo u dhacay sidatan: ' Xasanow sidii aynnu isku ogeyn, haddii aad qabsan weydey dhulkii aynnu danayneyney, waxaan kaa doonayaa in aad Majeerteenka meeshooda ku haysid inta aan Faqashta koofurta ka sifaynayo' . Xasan jawaab kooban buu siiyey, taas oo ahayd: ' Sarreeye, taasi waa ballan Ilaah' . Wada hadalkaas waxaa nooga soo baxay laba arrimood:

Tan hore waxay noo caddaysey in hawlgalka Al-Itixaad ku doonayey in u ku qabsado gobollada Woqooyi Bari u qayb ka ahaa siyaasadda Caydiid uu hore u dhigtay, si uu dalka isugu ballaariyo, si uu sare ugu qaado awooodiisa iyo ku gorgortankiisa hoggaaminta dalka.

Tan labaadna, waxaannu ku ogaanney in annaga oo Harti ahi hormuud ka nahay fulinta qorshaha Caydiid, oo ciidanka Xasan Daahir nagula dagaallamayo boqolkiiba sagaashan ay Harti yihiin. Xasan Daahir ciidan iyo lacag toona kama gelin hawlgalka la doonaayey in nalaku qabsado. Sida laga warqabo, Xasan Daahir wuxuu ahaa sargaal ka tirsanaan jirey Ciidanka Asluubta, hawlaha ciidankaasi dalka ka hayeyna waxay ku ekaayeen haynta, dhaqan celinta iyo dibujihaynta maxaabbiista. Sidaas awgeed, habayaraatee ma la hayn wax tababbar ciidan ah.

Waxaa igu adkaatay in aan garto, sida fudud ee dulliga ah ee dadkayaga qaarkiis uu ugu hoggaansamey cadaw ku hawlan isirtirkooda.
Sidaas oo kale, waxaa ii soo baxday in xiriirka Itixaad iyo Caydiid uu dhaafsiisan yahay dagaalka ay ka wadaan gobollada Woqooyi Bari, oo is bahaysigaasi yahay mid ku jihaysan dhammaan degaannada Daaroodka. Taas oo ay ku caddaatay dagaalladii uu Itixaadku ka wadey Gedo, Jubbada Dhexe iyo Jubada Hoose. Ku danaysiga diinta ee Itixaadku horseedka ka yahay iyo siyaasadda beel u adeegga ah ee uu ku socdey, waxaa marag-ma-doonto ka dhigaya dagaalka uu tan iyo markii uu hanaqaaday kula jirey beesha Daaroodka. Annaga oo weli Sanaag dagaal ka wadna, baa waxaan xog ku helay in ciidan uu Cabdiwahaab Maxamuud Gurey watey oo Mudug ka soo cararay uu soo raacay ciidan Dhulbahante ah oo Itixaadka u soo gurmadey, ay nagu soo fool leeyihiin.

Waxaa naloo sheegay in ciidanku uu soo dhaafay degmada Baran. Waxaan amray in degdeg loo diro rag miino yaqaan ah, oo miino ka wada buuxsha waddooyinka la isleeyahay way soo marayaan. Kooxdii shaqadaas loo diray si wacan bay uga soo dhalaaleen. Duhurnimadii ayay dib saldhiggoodii ugu soo noqdeen iyaga oo aan wax khasaara ahi soo gaarin. G/Sare Duuliye Khaliif Ciise Mudan baan u diray Laasqoray si uu halkaas difaac uga galo. Sidaas oo kale G/Dhexe Maxamed Saciid Boqor (Indhacaddays) waxaan uga tagey taliskii, ayadoo la iiga yeeray Boosaaso. Saraakiishaas waxaan faray in ay difaacooda adkaystaan.

Nasiibdarro, Indho-Caddays difaacii buu ka soo baxay. Arrintaasi waxay keentay in jidkii uu cadawga u bannaanaado. Indhacadys intaas kuma ekaane Khaliif buu la hadlay oo ku yiri: ' Weynnu hareeraysannahay ee ka soo bax Laasqoray'. Khaliif warkii buu run mooday waana soo guurey. Markii uu Khaliif ka soo baxay Laasqoray baa Itixaadkii u dabamaray. Sidaas baa Indhacaddays Itixaadkii noo hareeraysnaa nooga sii daayey. Difaacoodii waxay isugu gaysteen Gacan oo 20km Laasqoray ka xigta dhinaca Boosaaso. Intii ay noo hareeraysnaayeen waxaannu gaarsiinney khasaare badan oo dhimasho iyo dhaawac leh. Halkaas waxaa kaga dhintay Professor Cabdicasiis Faarax oo ahaa madaxa siyaasadda Itixaad, waxaana ku habsaday Morter.

Waannu ka daba guurney, markii aannu Gacan gaarney baannu difaacoodii isu muuqannay, dabadeed halkaas baannu fariisin ka dhigannay, qorshaheennana samaysannay. Buuraha waxaa u saaran qoryo waaweyn , dooxadana difaac adag bay kaga jiraan. Waxaan diray ciidan uu xilkiisu yahay in ay buuraha gadaal ka soo fuulaan oo qoryaha waaweyn gacanta ku dhigaan. Ciidankaas waxaan madax uga dhigay nin G/Sare ah oo Gahayle ah oo dhulka yaqaan.

Ciidankayagii baan weerar dooxada ka geliyey. Dhabarjebintii aannu dirnay qoryihii way qaban waayeen oo dib baa loo soo ceshay. Sidaas awgeed qoryihii buuraha saarnaa waxay ku soo foorariyeen ciidankayagii dooxada weerarka kaga jirey. Khasaare badan baa halkaas naga soo gaarey. Dhimashadu waxay gaartey 73 askari, dhaawucuna intaas wuu ka badnaa, khasaarada Itixaadka gaartey ayaase ka badnayd tan na soo gaartey. Subadxii danbe baannu halkii ka soo guurney. Qaar ka mid ah ciidan beeleedyadii dagaalka nagula jirey baxsad bay bilaabeen, si kasta oo aannu yeelnana waannu celin weyney.

Ciidankii meel baannu isugu keenay, dhaawaciina Boosaaso ayaannu u gudbiyey. Waxaa iga go'aan ahayd in aan ciidan hor leh soo urursado oo weerar hor leh ku qaado si aan Itixaadka aagga uga sifeeyo, haddii kale waxaa suurtowda in ay Boosaaso dib ugu soo noqdaan.

Itixaadkii in aannu jilcinnay oo aanay waxba ku noolayn waxaa ka marag ah in markaannu dib u gurashada bilownay ay na soo daba geli waayeen. Aniga oo qorshahaas ku jira ayaa la ii keenay war degdeg oo la iigu sheegay in inta aan meesha ku hawlanahay Gaalkacyo weerar lagu qaadayo. Warakaas oo soo dhaboobey, meelo badan ayaa qaylodhaan iiga timid. Warsangeligii waxay ii sheegeen in uu G/Sare Cabdullahi Ilka-jiir oo ay hore ugu cid dirsadeen uu degaanka soo gaarey.

Cuqaashii Warsangeli waxay igu yiraahdeen Ilkajiir baa noo imanayee waxaannu ku talinaynaa in aad Gaalkacyo daafacdid. Ciidankii meesha baan uga tagay, markii aan Boosaaso tagayna waxaannu isku aragnay Ilkajiir, kaas oo ii sheegay in uu diyaar u yahay in uu shaqada la wareego. Waxaan shir isugu yeeray madaxdii SSDF, waxaana shirkaas ka soo qaybgalay Ilkajiir. Wuxuu halkaas ka caddeeyey in uu xero Warsangeli mas' uuliyaddeedii la wareegayo, isla markaasna ku dadaalayo in uu dagaal la'aan iyo waanwaan Itixaad uga saarayo geyigaas. Wuxuu yiri: ' Haddii aan qiimeeyo wararka aan helayo, Itixaadku awood ahaan way liitaan, talada aan u jeedin doonana xaggooda waxay ka noqon doontaa fardo kula carar' . Madaxdii SSDF way oggolaadeen talada Ilkajiir.

Madaxdii SSDF waxay markaas kaddib fadhi u qabatay odayaashii, ganacsatadii iyo culummadii, kuwaas oo aan u sheegnay go'aanka laga gaarey carro Warsangeli. Hadalkii baan qaatay, waxaana raggii shirka isugu yimid ka codsaday in la ururiyo ciidan 1,500 ah oo heegan u ah difaaca Boosaaso, oo laga yaabo in Itixaadkii soo labakacleeyo ama lagaba yaabo in ay magaalada ku dhex jiraan. Oday Cali Saleebaan ah baa hadalkii iga daba qaatay, oo yiri: ' Ari ha naga tegin, annagu waxba kama naqaan ciidan iyo istiraatiijiyo dagaal, sida aad og tahay annagu meherado kale baannu ku hawllanahay, sida ganacsiga, kalluumaysiga, xijiga iwm. Intaan qoslay baan waxaan ku iri: ' Annaguba haddaannu nahay reer Mudug shaqooyin aan ciidan la xiriirin baannu qabannaa, sida geel raaca, biyo dhaaminta iwm, isla markaasna waannu is daafacnaa. Waxaa la rabaa, sidayada oo kale, idinka oo meheradihiinna haysta in aad is daafacdaan' .

Markii uu shirkii noo xirmay, ayaan isla goobtii ku qabtay war saxaafadeed. Waxaan halkaas ka caddeeyey in ururka Al-itixaad iyo wixii la caano maalaaba yihiin kooxo argaggixiso ah oo haddii aan si kama danbays ah loo ciribtirin, waxaa hubaal ah in ay khasab noqon doonto in, maalin maalmaha ka mid ah, xalka Soomaaliya laga doono meel fog. Waxaan intaas ku daray in loo baahan yahay in la ogaado in ururka Al-Islaax oo leh istiraatiijiyo aan xabbad ku dhisnayn baannu xukunka ku doonaynaa, iyo kan Tabliiq oo leh annagu diinta baannu faafinaa oo keli ah iyo ururka Al-itixaad oo leh qori caaraddis baannu xukunka ku qabasanaynaa, aanay xaqiiqo ahaan wax badan ku kala duwanayn.

Saddexdaas urur aragtidayda waa isku ujeeddo, waxa keli ah ee ay ku kala duwan yihiin waa shaqooyinka ay u kala xilsaaran yihiin. Tusaale ahaan, ururka Al-islaax wuxuu isbahaysiga ururrada xagjirka ah u qaabbilsan yahay maalgelinta, waxbarashada iyo siyaasadda. Ururka Tabliiq wuxuu u xilsaaran yahay sahanka iyo ururinta xogaha, halka Al-itixaad u qaabbilsan yahay dagaalka. Markii aan hawlahaygii Boosaaso ka dhammaystay ayaan ciidankii xero Warsangeli ka soo raray. Intii ahayd reer Bari iyo reer Nugaal gobolladoodii baan ku reebay. Waxaanna kula ballamay in ay degaannadooda difaacdaan, si aan mar danbe gaadmo loogu qabsan, intii reer Mudug ahaydna waxaan ula gudbey Gaalkacyo.

Markii aan ku soo noqday Gaalkacyo dhammaadka 1992kii, ayaa ciidankii Caydiid weerar nagu soo qaaday. Mahadda Ilaahay waannu jabinney, qalab badanna waannu ka qabsannay. Intaas kuma aannu ekayn ee weerar hor leh baannu ku qaadnay; waxaannu gaarney Wargalo oo ah degaanka ' Sacad-Habargidir' bartamihiisa, xarragase kuma aannaan tegin oo si adag baannu ugu rafannay. Annaga oo Wargalo ku sugan ayaa, iyada oo la fulinaayo go'aan UN-ku ka qaateen wax ka qabashada arrimaha qallafsan ee Soomaaliya, waxaa dalka soo gaarey ciidammo caalami ah oo uu Maraykanku hoggaaminayey (UNITAF). Sidaas awgeed ciidammadii dib baan Gaalkacyo ugu soo ceshay.

# SHIRKII NABADAYNTA GAALKACYO

Gaalkacyo waa caasimadda gobolka Mudug, waxayna ku taal bartamaha Soomaaliya. Gaalkacayo waxay u jirtaa 750km magaalooyinka waaweyn ee Soomaaliya, marka laga reebo Kismaayo. Magaaladu waxay kordhay 1905tii markii Saldanadii Yusuf Cali Keenadiid ee Hobyo, ay arkeen ahmiyadda ay gobtaasi u leedahay fidinta awoodda Saldanada. Sida uu Suldaanku qiyaasayey waxay noqotay xarunta ugu weyn ee ganacsi ee gayigaas. Halkaas ayaa reer miyigu ganacsi ahaan u keensan jireen xoolaha, subagga, hargaha iyo caanaha, dabadeedna wixii ka soo gala ayay badeecado kala duwan kaga gadan jireen. Sidaas ayay magaaladu tartiib-taartiib ugu noqotay suuq goboleed isku xira hawdka, woqooyiga, bariga iyo koofurta Soomaaliya. Aagga istiratiijiga ah ee magaaladu ku taal, ayaa sare u qaadday ahmiyaddeeda. Intaas waxaa u dheer waa magaalo dhextaal u ah beelaha kala duwan ee waqooyiga Mudug, kuwaas oo weligood nabad ku wada caanamaali jirey oo si sharaf lehna magaalada ugu wada noolaan jirey, isla markaana xiriir ganacsi kala dhexeeyey beelaha dega koonfurta gobolka Mudug.

Ganacsiga ballaaran ee ka abuurmay Magaaladu wuxuu soo jiitey dad badan oo cilmi leh oo ka bilaabay dugsiyo wax lagu barto iyo xarumo diinta lagu raacdo. Isbiirsiga arrimahaasi waxay suurtaggeliyeen in rag badan oo degaanka ka tirsani hantaan qaababka casriga ah ee ganacsiga, siiba dhoofinta iyo soo dejinta badeecadaha, isla markaasna fidiyaan xiriirka ay la leeyihiin dalalka dibedda. Sidaas oo kale waxaa magaalada ka soo baxay, kaddib markii ay Saldanadii Hobyo dhacday, rag aan yarayn oo xiiso u yeeshay la socdka arrimaha adduunka ka dhacayey, kuwaas oo tartiib-tartiib u kasbaday wacyi iyo aragti siyaasadeed, sidaasna ku yeeshay dareen iyo himilo dheer. Isbeddelkaas waxaa tusaale u ah sida ay magaaladu ku soo jiidatey indhaha gumaystayaashii iyo sida magaaladu u noqotay xaruntii gobannimaddoonka laga hoggaaminayey. Waxaa kale oo, horumarka degdegga ah ee ay magaalada gaartey soddon sano mudda ka yar, tusaale u ah ragga ka soo jeedey oo hoggaanka u qabtay dagaalkii gobannimaddoonka iyo xornimadii ka dhalatay.

Markii uu dalku burburay 1991kii, waxaa bilowday afkaar qarandumis ah oo ku salaysan dhac, boob, dhulballaarsi iyo isirsooc, kuwaas oo ay horseed ka ahayd jabhadda USC, oo soo shaac baxday sannad ka hor burburkii qaranka Soomaaliyeed. Hoggaanka jabhaddaas ayaa waxaa u muuqatey ahmiyadda istiraatiijiyadeed iyo dhaqaale ee ay magaalada Gaalkacyo leedahay, isla markaasna quuddarraynaysey in ay ka dhigtaan xarun ay kaga gorgortamaan mustaqbalka siyaasadda Soomaaliya.

USC oo aragtidaas ka duulaysa ayaa weerar lama filaan ah ku qabsatay magaalada Gaalkacyo. Ciidanka USC waxaa madax ka ahaa saraakiil u badan Sacad oo Caydiid madax u yahay, kuwaas oo ciil aan la garanayn halka uu ka soo jeedo u qabey magaalada iyo dadka degganba, kaas oo gaarsiiyey in ay burburshaan, dadkana xasuuqaan. Dadka ay ku dileen waxaa lagu qiyaasay tiro ka badan kun qof, maxaabiistii ay qabteena waa laayeen, kuwaas oo ay ku jireen odayaal caan ah, haween iyo carruur. Sidaas oo kale, waxay bililiqaysteen hanti xad-dhaaf ah oo lagu qiyaasay malaayiin doolar. Intaasi markay dhacday, baa Janan Caydiid oo qabsashada, dhaca iyo xasuuqa u riyaaqsan iskuna qanciyey in ay qabsashadu tahay mid waarta baa ciidankii tacaddigaas geystey u soo qoray warqad ammaan iyo hambalyo ah. Abaabul ballaaran iyo gurmad degaanno badan ka yimid, kaddib, ayaa USC xoog looga saaray magaalada, khasaare badanna la gaarsiiyey.

Markii ciidankii soo duulay laga sifeeyey magaalada ayaa nasiibdarro, shacbigii ku abtirsan jirey USC ka qaxeen magaalada iyaga oo ka baqay in laga aargoosto, taas oo aan dhaqan u ahayn dadka magaalada xoreeyey. Caydiid jabka halkaas ka soo gaarey kuma uusan quusan, oo riyadii uu ku doonayey in uu magaaladaas qabsado ayuu ku sii mintiday. Sida la og yahay, wuxuu faraha ku dhigay hub tiro badan oo Siyaad Barre Muqdisho kaga tegey, hubkaas oo ugu muuqdey in uu dalka qabsan karo. Sidaas darteed, wuxuu Muqdisho iyo gobollada dhexe ka soo abaabuley ciidan fara badan oo aad u hubaysan, kaas oo uu ugu talaggalay in uu mar labaad Gaalkacyo ku qabsado, kumase guulaysan.

Muddadii u dhaxaysey 1991kii ilaa bartamihii 1993kii, ciidammada USC waxay magaalada Gaalkacyo ku soo qaadeen 35 weerar, kuwaas oo dhammantood lagu jebiyey. Intaas waxaa dheer in ciidammada SSDF ay qabsadeen dhul baaxad weyn oo ka mid ah degaanka USC garabka Caydiid. Mar Ururrada Soomaaliyeed uu Addis Ababa uga socdey wadahadal nabadeed ee UNISOM qabanqaabisay, ayaa Caydiid qorsheeyey in, inta shirku socdo, uu weerar kama danbays ah ku qaado, kuna qabsado magaalada Gaalkacyo. Nin ka tirsan sirdoonka Maraykanka oo markaas Addis Ababa ku sugnaa ayaa i soo gaarsiiyey xog ku saabsan weerar hor leh oo uu Caydiid ku damacsan yahay in uu Gaalkacyo ku qabsado. Ninkaas baan dabadeed weydiistey in uu ixsaan ii sameeyo oo xogta uu ii sheegay gaarsiiyo Caydiid iyo Maxamed Abshir oo isku hoteel degganaa.

Ma hubo in uu raggaas gaarsiiyey xogta uu ii sheegay iyo in kale. Waxaa xusid mudan in Caydiid diidey in uu ka soo qaybgalo shirka dibuheshiisiinta ee Addis Ababa ka socda, isaga oo sabab ka dhiganaya arrimo la xiriira amnigiisa. Waxaa cabsidaas ku abuuray isaga oo lagu eedeeyey dilka askar Pakistan ah uuna ku jirey baadigoob ay UNISOM ugu raad-joogtey. In kasta oo xayiraaddii laga qaaday haddana ma uu hubin in weli lagu daba joogo iyo in kale oo cabsi weyn buu ka qabey. Shirkii baa waxaa la isweydiiyey sidii loo keeni lahaa Caydiid. Dabadeed waxaa la isla gartay in aan anigu Muqdisho ka doono oo keeno Addis Ababa, iyada oo la ogaa in aannu saaxiib ahaan jirney. Dayuurad aan Muqdisho ku tago baa la i siiyey si aan Caydiid ugu xaqiijiyo in uusan ninna daba joogin, oo loo baahan yahay in uu shirka ka soo qaybgalo.

Nasiib wanaag waa iga yeelay, sidaas baannu Addis Ababa ku wada nimid. Markii la soo gaarsiiyey xogtii la xiriirtey qabsashada Gaalkacyo ayaan gartay in dib-isu-dhigidda Caydiid ay ahayd riwaayad riqiis ah oo uu dadka ku jahawareerinayey, balse uu xaqiiqo ahaan ku jirey abaabul dagaal oo ku wajahan Gaalkacyo, taas oo qabsashadeeda uu u arkayey in uu ku gaarayo himiladii uu in mudda ah ku taamayey ee ahayd in uu adduunka ugu muuqdo hoggaamiye aan la'aantiis Soomaaliya xal laga gaari karin.

Caydiid wuxuu ku hammiyayey in shirka oo la fadhiyo lagu salaamo qabsashada Gaalkacyo, dabadeed ergooyinka shirka ka qaybqaadanaya hoos madaxa u rogtaan oo isaga talaggalaan sed bursi Caydiid loo sharciyeeyo. Tala xumada, khiyaanada iyo damaaciga dhul ballaarsi ee Caydiid jidaystey, waa waxa aakhirkii dhaxalsiiyey in ay awooddiisu ku soo koobanto xaafado Muqdisho ka mid ah, halkaas oo uu ku alleystey. Markii uu iga tegey ninkii Maraykanka ahaa ee xogta Caydiid i soo gaarsiiyey, waxaan tegey safaaraddii Soomaaliya, si aan fooniye halkaas yiil ugala hadlo madaxdii ciidanka difaaca Gaalkacyo oo ku wargeliyo weerarka ku soo fool leh. Sidii baan yeelay, isla markaasna waxaan talo ku siiyey qaabkii ay isaga difaaci lahaayeen weerarkaas.

Nasiib wanaag, ciidanka Caydiid wuxuu weerarkiisa soo qaaday iyada oo si habaysan la isugu diyaarshey. SSDF kuma qaadan saacado badan si ay u jebiso ciidanka ku soo duuley. Caydiid markuu maqlay guuldarrada ka raacday isku daygaas, ayaa waxaa ku dhacday niyadjab, taas oo dhalisay in uusan mar danbe hawaysan weerar uu Gaalkacyo ku qaado.

Waa maxay ula jeedada ka dambaysa inay Sacad dagaal kusoo qaadaan degaanka waqooyiga Gobolka Mudug kana riixdaan dadkii hore u dagi jiray? Anigoo xog ogaal u ah qorshihii Caydiid iyo tolkiis, akhristayna maabkii (khariidaddii) ay u diyaarsadeen siday Mudug oo dhan ula wareegi lahaayeen, waan garanayaa sababta Gal-mudug dhisay magaalada Gaalkacyo, ula jeedadoodu waxaa weeye dadkii degaanka u lahaa waqooyiga mudug intay barakiciyaan inay ku celiyaan intay Buurtinle u sokeyso.

Xuduudaha Caydiid sameeyey, wuxuu ka dhigay tuulada Faratooyo ee u jirta Buurtinle 20 kg, dhinaca Xeebtana wuxuu mariyey Eyl iyo Garacad dhexdooda, dhinaca Sanaagana Malaasle meel dhinaca waqooyi ka xigta, dhinaca Galbeedkana wuxuu ku taagay ilaa xuduud beenaadka inoo dhexeeya inaga iyo Ethiopia ee Ciidka xigta, ilaa hadda Sacad wuxuu rabaa inuu inta kasoo guuro degaankiisii oo dhan sida

Hobyo, Xarardheere oo soo dhaafo Linea Tomaseli, oo xuduud u ahayd waqooyiga iyo koonfurta Mudug uu caasumad ka dhigto magaalada Galkacyo. Reer Mudug sarena haddaan qof ka harayn ma yeelayaan degaankiina ka guura oo ay u baneeyaan qolo kale, arrintaa ku salaysan damaca Sacad macnaheedu wuxuu noqonayaa inaan waligiis Mudug nabadi ka dhicin; marka ninkaan ogeynow ogow ula jeedada runta ah ee Sacad waa sidaas.

## SHIRKII DIBUHESHIISIINTA EE ADDIS ABABA

Kaddib markii dhowr bilood ka hor la gabagabeeyey shirkii lagaga hadlayey arrimaha bini' aadannimada ee ay isla UNISOM ku abaabushay magaalada Addis Ababa, kaas oo ay ka soo qaybgaleen madaxda jabhadaha, madaxda dhaqanka iyo bulshada rayidka ah, ayaa waxaa loo gudbey abaabulka shir dibuheshiisiineed oo lagu xallinayo khilaafka siyaasadeed ee dalka ka taagan, isla markaasna dib loogu dhisayo dawlad Soomaaliyeed oo dalka burburka ka samatabixisa. Shirkaasi wuxuu ka furmay magaalada Addis Ababa, bishii Maarso 1993kii, waxaana ka soo qaybgalay jabhadihii ku loollamayey hoggaanka dalka, kuwaas oo ay tiradoodu ahayd 14 urur.

Durba markii shirku furmay USC waxay soo jeedisey in jabhadaha aan hubaysnayn shirka laga saaro, soo jeedintaas oo SSDF ay ku gacansayrtay. SSDF waxay halkaas ka caddaysay in meesha loo yimid dibuheshiisiin oo jabhadaha oo dhammi xaq u leeyihiin in ay siyaasaddooda shirka ka caddeeyaan, oo mid kasta oo ka mid ahi ay wakiil ka tahay bulsho weyn oo shacbiga Soomaaliyeed ka mid ah. Dood dheer kaddib, waxaa la isku raacay mowqifkii SSDF. Shirka markii laga soo baxay waxaa igu soo orday oo si farxad leh ii gacanqaaday, Allaha u naxariistee Maxamed Raajis. Shirku wuxuu socdey 15-27 Maarso 1993kii.

Waxaa ka soo baxay qodobbo ay ka mid yihiin:

1. Hub ka dhigis iyo nabadayn.
2. Ilaalinta xudduudaha dhulka, cirka iyo badda Soomaaliyeed si aan hub looga soo gelin.
3. Xabbad joojin.
4. In la cunaqabateeyo ururkii aan u hoggaansamin qodobbada heshiiska.
5. In gobollada Soomaaliyeed oo dhan laga abuuro Ciidan Booliis oo dhexdhexaad ah.
6. Soo celin hantidii qaranka iyo isu celin hantidii gaar' ahaaneed ee la kala dhacay.
7. In khilaafaadka lagu dhammeeyo wada hadal iyo si nabad ah.

## SHIRKII NABADDA GAALKACYO

Janan Caydiid wuxuu ahaa nin aannu muddo dheer saaxiib ahayn, oo min layli-sargaal ilaa akadeemiyada abbaanduulka aannu wada soconney. Dhib badan oo xabsigii Siyaad Barre ka mid yahayna soo wada qaybsannay ayaa, maalin maalmaha ka mid ah iga codsaday in aannu iska kaashanno sidii aannu nabad waarta dib ugu soo dabaali lahayn gobolka Mudug.

Inkasta oo aniga iyo Caydiid aannaan is arag mudda dheer, dariiqayaguna kala leexday wixii ka danbeeyey afgenbigii Cirro ee fashalmay. Wixii fashilmidda afgenbigaas ka danbeeyey aniguna waxaan dagaal hubaysan kala soo horjeensaday Siyaad Barre, Caydiidna wuxuu ku biiray kooxda xukunka wax ka haysata oo si dhow ugu xiran Siyaad Barre. Siyaad Barre wuxuu Caydiid u magacaabay la-taliyihiisa amniga, taas oo uu ku gaarey in lagu aammino kormeerka guud ee ciidammada iyo siyaasadda Gobollada Dhexe, si uu isugu dubbarrido dagaalkii looga soo horjeedey SSDF.

Mid ka mid ah weerarradii is daba-joogga ahaa ee u dhaxeeyey ciidammada Siyaad Barre iyo SSDF oo Caydiid si toos ah uga qayb qaadanayey ayuu Jananku si dirqi ah kaga baxsaday ciidan uu watey sargaal ka mid ah SSDF oo lagu magacaabo Shire Gooni.

Waxaa dhacday in Caydiid lug ku fakaday kaddib markii baabuurkiisii waxyeello weyn loo geystey. Intaas oo jirta, run ahaan nagama maqnayn baahida aan annaguna u qabney nabad degaanka Mudug ka taabbagasha oo waqtigaa ku xiran aanse mustaqbalka rasmi ahayn. Maxaa yeelay waxaa ii muuqatey in haddii uu dagaalku sii dheeraado ay nagu adkaanayso sii wadiddiisu. Ciidankii difaaca Gaalkacyo kaga jireyna ay badankood, sababo badan awgood, tartii-tartiib uga baxeen oo degaannadoodii ay ka yimaadeen ku noqdeen. Arrintaasi waxay keentay in ay difaacii ku hareen oo keli ah 500 oo wiil oo u badan isku reer hoose. Waxaannu gaarney heer aannu la ciirciirayney daryeelka bukaanka iyo dhaawaca. Sidaas oo kale ma jirin awood buuran oo dhaqaale oo noo saamixi kartey in aannu dagaalka sii wadno. Ganacsatadii way musallifeen oo taakulayn kale lagama heli karin. Xaaladahaas adag oo isbiirsaday dartood, ayaa lagama maarmaan ka dhigtay in nabad la helo. Taas ayaana igu khasabtay in aan soo dhoweeyo codsigii Janan Caydiid. Waxaase hubaal ahayd in dhinaca naga soo horjeedey uu isaguna baahi taayada ka daran uu nabadda u qabay oo u dalbaday.

Mar ay arrimi halkaas marayso, xaaladuhuna culus yihiin, ayaan anigoo codsigii Caydiid maanka ku haya, welise aan go'aan ka gaarin, talo ugu tagey Islan Cabdille Islaan Faarax oo xilligaas ku sugnaa tuulada Xarfo oo u dhaxaysa Bacaadweyn iyo Burtinle. Islaanka markaan u tagey waxaan warbixin dhan ka siiyey natiijadii ka soo baxday shirkii Addis Ababa, sidii aan ku ogaadey weerarkii ugu danbeeyey ee Caydiid Gaalkacyo ku soo qaaday, iyo codsigii nabadeed ee uu ii soo jeediyey Caydiid markii dagaalkii ugu dambeeyey ee Galkacyood ciidankiisii lagu jabiyey. Sidaas oo kale waxaan uga warramay xaaladda dhabta ah ee maanta difaaca magaaladu ku sugan yahay.

Markii aan warbixintii u dhammeeyey ayaan weydiiyey wixii uu arrintaas kaga talin lahaa. Intii aan la hadlayey oo dhan marna Islaanku wejigayga ma fiirin, wuu wardiyayey wuuna i dhageysanayey. Wardigii buu in yar joojiyey oo ammusay, waan gartay in uu fekerayey oo maankiisa arrimaha ka qiiymaynayey. Dabadeed waa ii soo jeestey oo igu yiri: "Haddii arrimuhu sida aad ii sheegtay yihiin, waxaan kugula talinayaa in adiga oo aan cid kale la tashan aad toos nabad u raadisid.

Waxaan ku noqday aaggii difaaca, waxaana fadhi la qaatay ciidankii difaaca ku jirey. Waxaan uga warramay xaaladdu meesha ay marayso. Waxaan ugu tifaftiray sidii aan hore Islaanka ugu warbixiyey. Sidaas oo kale waxaan u sheegay taladii Islaanka. Waxaan dabadeed weydiiyey waxa ay iyagana la tahay. In la ogaado aragtidooda, lana tixgeliyo, waxay ahayd, duruufaha burburbka ah ee lagu jirey, arrin ahmiyad sare leh, oo ay iyaga ku xiran tahay fulinta iyo fashilinta heshiis kasta ee la gaaro. Ciidaanku wuxuu u kala safnaa cuntub-cuntub sawir ka bixinayey aagagga ay difaaca kaga kala jireen. Cuntub kasta afhayeen baa u hadlayey, dhammaantoodna waxay noqdeen isku cod. Taliyihii ciidanka oo warkii soo gabagabeeyeyna wuxuu ku dhawaaqay in ciidanka difaaca Gaalkacyo si buuxda u tageerayaan taladii Islanku soo jeediyey.

Warkaasi markuu ku faafay gobollada Woqooyi Bari, dad badan ayaa aad uga horyimid, siyaalo kala duwanna u dhaliilay siiba Nugaal, Bari iyo waliba niman aqoonyahanno sheegta oo reer Mudug ah. Qaar ka mid ahi waxay igu sheegeen in aan khaa'in ahay, dhegse uma aanan jalaqsiin edayntaas raqiiska ah oo ka soo yeeraysa dad aan xaqiiqada uu difaacu ku sugan yahay ogeyn. Aniga iyo wafdigii ila socdey waxaannu ka duulnay Gaalkacyo 2dii Juun 1993kii, isla maalintaasna waxaannu ka degney Muqdisho. Halkaas oo aan shir kula qaadannay Caydiid iyo raggiisii.

Laba maalmood oo wada hadal ah kaddib, waxaannu 4tii Juun 1993kii kala saxiixannay heshiis nabadeed oo xaaladda gobolka iyo magaaladaba lagu xasilinayo, deris-wanaaggii iyo wada noolaashihii beelaha walaalaha ah ee gobolka iyo magaalada wada dega dib loo soo celiyo. Heshiiskaas waxaa ka xumaaday UNISOM madaxdeedii, kuwaas oo ku dadaaley in ay fashiliyaan, iyaga oo u adeegsanaya madaxda kale ee gobollada Woqooyi Bari ka tirsan. Kuwaas oo sida la yiri loo ballanqaaday mansabyo sare oo kala duwan in laga siinayo xukuumadda UNISOM dalka ka dhisi doonto.

Arrintani, waxay madaxda gobollada Woqooyi Bari ka dhalisay, khilaafaad weyn sidii ay UNISOM doonaysey. Markii aan dib ugu noqday gobollada Waqooyi-Bari oo ihaanayn la igu sameeyey,

oo la igaga sameeyey gobolada Nuugal iyo Bari oo mar hore ciidankoodii difaaca ka baxay oo guryahoodii iska aaday iyo niman reer mudug ah oo Maxamed Abshir Walde horkacayo, marka nin mar hore ciidankiisii ka baxay difaaca iyo mid danayste ah oo aan xog ogaal u ahayn xaqiiqda dhabta ah ee difaaca dheg uma dhigin ee waxaan ku adkeystay heshiiskii aan soo galnay. Inkastoo aan la kulmay diidmo xoog leh oo heshiiska looga soo horjeedo, haddana waxgarad badan oo Boosaaso joogey oo uu ugu horreeyey Shire Cusmaan Carraale (Gaalo Eri), ayaa ku dadaaley in buuqaas la joojiyo waqtina la siiyo ragga heshiiska hormuudka ka ah si ay uga mira-dhaliyaan heshiiska ay inoo soo qaadeen. Wuxuu ku daray, haddii heshiisku taabbaggal noqdo waa sidii la rabey, haddii uu taabbaggal noqon waayana meeshiisa buu ku baabba'ayaa. Waxaana loo baahan yahay in aannu nabadda ku dadaalno, haddii aannu weynana ku dadaalno in aan isdaafacno, sidii aan horeba isu daafici jirney. Odaygaas hadalkiisii baa loo wada riyaaqay, sacab baana lagu oggolaaday.

Muddo gaaban kaddib waxaan ku noqday Gaalkacyo. Halkaas baan ka bilaabay hawlihii lagu taabbaggelinayey qaybtii heshiiskaas nooga aaddanayd. Waxaa hawlahaas gacan igu siiyey Cali Ismaaciil Cabdi Giir ' Leelkase' oo ka mid ah siyaasiyiinta reer Mudug, isla markaasna ahaa guddoomiyaha jabhadda SNU (Somali National Union). Sidaas oo kale, Caydiid wuxuu fuliyey qaybtii heshiiska kaga aaddanayd. Markii laga gudbey wixii carqalado ahaa ee heshiiska xannibaad ku noqon karey ee ay beeluhu kala sheeganayeen ayaa waxaa durba soo shaacbaxay waxtarka nabadda. Wakhti yar kaddibna waxaa magaalada dib uga bilowday ganacsigii iyo isu socodkii labada dhinac ee hore cabsi awgeed u joogsaday, kuwaas oo in muddo ah magaalada ku kala maqnaa, haddana si xurmo leh hawlahoodii ugu soo noqday.

Nasiib wanaag, heshiiskii aannu wada galnay aniga iyo Caydiid oo Soomaali iyo ajnabiba ka hor yimaadeen, iskuna dayeen in ay fashiliyaan, dhinacayaguna wuu ku mintiday hirgelintiisa. Wuxuu noqday heshiiska keli ah ee Soomaaliya uga hirgalay sidii loogu talaggalay, nabad waartana ka dhaliyey gobolka mudug.

Halkaas oo maanta si walaaltinnimo ku jirto loogu wada nool yahay, ganacsigii iyo isu socodkiina isu furmeen, si buuxdana looga wada faa'iidaystey jawiga nabadeed ee cusub. Heshiiskaas waxaa kale oo laga faa'iiday weerar uu caydiid Kismaayo ku waday oo aan ku iri heshiiskaan gali mayno haddaadan Kismaayo weerarka ka joojin, wuuna iga yeelay.

## SHIRWEYNIHII SSDF EE QARDHO

Markii ay xiisaddii Gaalkacyo ka taagnayd degtey, xaaladdiina caadi ku soo noqotay, lana arkay in nabaddii faa'iido badan laga helay, ayaa waxaa soo baxay fikrad ku jihaysan sidii loo soo afjari lahaa isbarbaryaaca guddiga xaaladda degdegga ah ee la dhisay muddadii dagaalka sokeeye cirka isku shareeray 1992kii iyo hoggaanka sare ee SSDF, kuwaas oo hawlahoodii iyo madaxdoodiiba isku milmeen. Taasi waxay keentay in la waayo hoggaan midaysan oo hawlkar ah oo ay SSDF leedahay, door muuqdana ka qaata siyaasadda dalka, isla markaasna, wax uun hab ah oo lagu kala danbeeyo ka sameeya gobollada Woqooyi Bari. Dadkii waxaa dhib ku noqday jidgooyooyinka ay dhigteen maleeshiyaadka ayan jirin cid xukunta. Inkasta oo gobollada Woqooyi Bari nabad iska yihiin, haddana waxaa dhibaato ku hayey burcad marmar ka dillaacda oo ciriiri gelisa isu socodka waddooyinka, baad joogto ahna ka qaadda baabuurta. Waxaa kale oo iyaguna degaanka dhib ku hayey hubka xad-dhaafka ah oo suuqyada magaalooyinka lagu wato, iyo daldaloollo badan oo kale oo halis ku ahaa xasilloonida aan salka buuran lahayn ee degaanka ka jirtey.

Si duruufahaas wax looga qabto, waxaa lagu heshiiyey in Boosaaso lagu abaabulo shir ay Isimmadu isugu yimaadaan, si ay gacan uga geystaan dadaalka loogu jiro dib u habaynta SSDF. Shirkaas waa la isugu yimid, waxaana ka soo qaybgalay dhammaan isimmadii soo jireenka ahaa, wuxuuna soconaayey labo toddobaad. Markii ay Isimmadu isugu yimaadeen magaalada Boosaaso, iskana waraysteen xaaladda degaanka iyo dhibaatooyinka ka taagan waxay, kulammo gaargaar ah la yeesheen madaxda kala duwan ee siyaasadda.

Shirkii Isimmada waxaa ka soo baxay go'aan ah in, bal marka hore SSDF laf ahaanteeda dib loo habeeyo, arrintaas oo loo gartay in ay lagama maarmaan tahay si dhibaatooyinka taagan wax looga qabto, isla markaasna, ay bilow u noqoto tallaabooyin dib loogu hagaajiyo maamulka gobollada Woqooyi Bari. Sidaas awgeed waxaa la isku raacay in magaalada Qardho lagu qabto shirweynihii labaad ee SSDF bisha Juun 20keeda 1994kii. Taladaas aniga oo ahaa Guddoomiyaha Guddiga Xaaladda Degdegga ah iyo Maxamed Abshir oo ahaa Guddoomiyaha SSDF si buuxda baannu ku wada oggolaannay. Shirka waxaa kale oo lagu gaarey in xubnaha rasmiga ah ee ka soo qaybgelaya shirweynaha ay tiradoodu dhammaato 165 xubnood, kuwaas oo 30 xubnood oo ka mid ah lagu maamuusay jaaliyadaha dibadda ku nool, loona daayey in ay dhexdooda iska soo xushaan. Xubnaha kale oo gaaraya 135 xubnood waxaa loo qaybiyey sida soo socota:

- Gobolka Bari waxaa la siiyey 52 xubnood,
- Gobolka Nugaal waxaa la siiyey 35 xubnood,
- Gobolka Mudug waxaa la siiyey 35 xubnood
  Qaybta Ceelcad waxaa la siiyey 13 xubnood.

Xubnahaas waxaa iska soo dhex xulaya beelaha waxaana ansixinaya Isimmada. Waana xubnahaas oo keli ah kuwa, xaq u yeelan doona in ay cod ka dhiibtaan doorashada shirweynaha. Sidii qorshuhu ahaa beelihii way soo xusheen ergooyinkii, isimmadoodiina way soo saxiixeen, dabadeedna waxaa loo soo gudbiyey xoghayntii shirweynaha, balse waqtigii shirka loo ballansanaa baa waxaa hareereeyey saddex caqabadood, kuwaas oo kala ahaa:

1. Maxamed Abshir iyo taageerayaashiisa oo ku doodayey in guddiga xaaladda degdegga ah oo aan anigu hoggaaminayey uu xulashadii xubnaha ku tagrifalay.
2. Reer Nugaal oo xubnihii degmada Burtinle oo ka tirsan gobolka Nugaal ka qadiyey xubnihii ay xaqa u lahaayeen.

Beesha magaalada Qardho u badan oo ku kala qaybsantay qabsoomidda shirka. In kasta oo la xalliyey arrintii Burtinle oo reer Nugaaleed sidii ay doonayeen loo yeelay, labadii arrimood oo kale baa shirweynihii caqabad ku noqday. Cabdullaahi Boqor Muuse wuxuu diidey in shirku furmo, si uu uga hortago guul i raacda. Waxaa la gaarey heer is mariwaa ah oo nabaddii gobollaadaasi halis gashay.Cabdullaahi Boqor Muuse iyo rag la fikrad ah oo uu ka mid yahay Janan Cabdullaahi Faarax Hoolif, Saciid Faarax Yare iyo Xasan Cali Mire baa waxay soo jeediyeen in labada musharrax ee hadda loollamaya la isla tuuro oo la keeno qof dhexdhexaad ah oo heshiis lagu yahay. Raggaasu waxay gaar ahaan farta ku fiiqeen Cabdirisaaq Xaaji Xuseen. Taladii ay isla soo qaadeen bay, iyaga oo aan wax talo ah na weydiin, toos ugu dhaqaaqeen. Waxay telefoon kula hadleen Cabdirisaaq, waxayna uga warameen halka ay xaaladdu marayso iyo go' aanka ay gaareen, ugu danbayntiina waxay ka codsadeen in uu sida ugu dhakhsiiyo badan dalka u soo galo. Taladaas waxaa ku raacay Isimo ay ka mid yihiin:

1. Boqor Cabdullahi Boqor Muuse (Cusmaan Maxamuud)
2. Islaan Maxamed Islaan Muuse (Ciise Maxamuud),
3. Suldaan Saciid Maxamed Garaase (Ciise Maxamuud)
   Garaad Maxamed Cilmi Shirwac (Cumar Maxamuud)

Taladaas waxaa ka horyimid isimo ay ka mid yihiin:

1. Islaan Cabdille Islaan Faarax (Cumar Maxamuud)
2. Ismaaciil Xaaji Cabdullahi Beeldaajie (Cali Saleebaan)
3. Beeldaaji Cali Faarax (Cali Jibraa'iil )
4. Beeldaaje Axmed Maxamed Xirsi (Ugaar saleebaan)
5. Beeldaaje Cali Bin Jacayl (Ismaaciil Saleebaan )
6. Beeldaaje Yaasiin Cali-Bari ( Siwaaqroon) iyo
7. Islaan Yaasiin (Cismaan Maxamuud)

Taladaas waxaa dhexdhexaad ka noday :
1. Boqor Maxamuud Boqor Muuse (Cismaan Maxamuud)
2. Ugaas Yaasiin Cabdiraxmaan (Dashiishe )

Talada Cabdirisaaq loogu yeerayo markii ay i soo gaartey waxaannu u xilsaarnay Cali Barre (Ciddilibaax) in uu telefoon kula hadlo Cabdirisaaq oo ay saaxiib ahaayeen, si uu u weydiiyo bal in uu doonayo in uu SSDF madax ka noqdo. Cabdirisaaq wuxuu si cad ugu soo sheegay in uusan marnaba danaynayn jago uu ka helo SSDF. Markii ay arrimi halkaas marayso ayaa xubnihii sida sharciga ah hore loogu soo xulay go'aan ku gaareen in aysan waqti danbe iska lumin oo ay shirkooda qabsadaan. Kaas oo lagu qabtay qolweynaha guriga Abshir Muuse Qardho ku lahaa, aniguna aan dhinac ka degganaa. Shirweynihii wuu qabsoomay. Si aqlabiyad leh baa la igu doortay. Sidaas oo kale waxaa la dhisay golihii dhexe ee SSDF.

Isla maalmahaas ayaa Cabdirisaaq Xaaji Xuseen Boosaaso ka soo dagey oo Qardho u soo gudbey. Wuxuu la fariistay isimmadii, wuxuu la kulmay aniga, Maxamed Abshir, Cabdullahi Boqor Muuse iyo rag kale oo madaxda iyo odayaasha reer Woqooyi Bari ka tirsan. Markuu darsay xaaladda buu warqad u soo qoray aniga iyo Maxamed Abshir, taas oo uu ku codsanayo in arrinta la qaboojiyo, shirweynahana mudda saddex bilood ah dib loo dhigo, isla markaasna fursad loo siiyo in uu saddexdaas bilood dhexdooda ku qaban qaabiyo shirweyne hor leh. Warqaddii waxaan hor dhigay hoggaanka cusub ee SSDF oo dhowaan la doortay, kuwaas oo tala ku soo jeediyey in Cabdirisaaq loo sheego in shirweynihii la qabtay, qaab-dhismeedkii jabhadda la dhammaystiray, Golihii Dhexe iyo Guddoomiyihii SSDF-na la doortay.

Markii aan jawaabtii Golaha Dhexe u diray Cabdirisaaq arrintii faraha ayuu kala baxay. Inta ayan jawaabtayadu gaarin baa waxaa Cabdirisaaq u tegey odayaal badan oo ay isku beel hoose yihiin iyo kuwa kale oo degaammo kala duwan ka kala yimid, kuwaas oo kula taliyey in uusan dhexgelin khilaafka SSDF oo arrin basiid ah sharaftiisa ku lumin; Cabdirisaaq wuxuu dadkii badnaa ee u tagey u xaqiijiyey in uusan u imaan dalka in uu buuqa Qardho ka jirey ka qayb qaato, balse u yimid oo keli ah in uu eego haddii ay suurtaggal noqon karto in uu ragga

is-haya oo saaxiibbo la wada ah heshiisiin karo, haddana ay ula ekaatay in uusan waxba ka qaban karin, dabadeedna uu go' aansaday in uu dhexdhexaadintiisii meesha ku soo afjaro. Isla muddadiiba wuxuu soo kormeeray in uu xogogaal u noqdo xaaladda gobollo uusan muddo warkooda hayn. Laba toddobaad kaddibna wuxuu ka dhoofay gegida dayuuradaha ee Boosaaso.

Markii aan doorashadii ku guulaystey ayaa Cabdullaahi Boqor Muuse warqad ii soo qoray, taas oo uu iigu sheegayo in aanan Boosaaso tegi karin. Intaa kuma ekaan ee wuxuu waddada dhigay boqol wiil oo hubaysan oo loogu talaggalay in ay jidka iga hor istaagaan si aanan Boosaaso ku gaarin. Waxaan ugu jawaabey anigu meeshii aan rabo oo gobolladaan ka mid ah waan tegayaa, dariiqii aan rabana waan marayaa. Subaxii danbe ayaan Qardho ka tagey oo xagga Boosaaso u kicitimay. Nasiib wanaag, dhallinyaradii Cabdullaahi Boqor waddada dhigay markii ay i arkeen bay si fiican ii soo dhoweeyeen, iyaga oo weliba salaan sharaf iigu daray. Yar iyo weyn dadka deggan Woqooyi Bari way kala yaqaanniin cidda ka daafacday weerarraddii bahalnimada ahaa ee USC iyo ciiddii aan waxba ka qaban. Aad iyo aad baan ugu farxay in wiilashii dhibkayga loogu talaggalay ay gacmo furan igu soo dhoweeyeen.

Markii aan Boosaaso soo gaarey waxaannu xoogga saarnay sidii aannu jabhadda uga dhigi lahayn mid hawlgal ah oo wax qabadkeedu muuqdo. Isla maalmihiiba waxaannu jabhadda u samaynay xarun ay rasmi ahaan ku shaqayso, iyada oo aan weligeed dalka gudihiisa xaafiis rasmi ah ku yeelan. Waxaannu dhaqan gelinney qaab-dhismeedkii jabhadda, annaga oo waaxyaha kala duwan ee qaab-dhismeedka ku jaangoyney una kala qeexnay hawlihii ay u kala xilsaarnaayeen, dabadeendna waxaan toos u bilawnay hawlihii caadiga ahaa ee nalaka sugayey. Muddo gaaban kaddib waxaa degaanka laga dareemay in jabhaddii si xoog leh isu beddeshay, in hab la hirgeliyey iyo in bulshadii heshay dariiq ay kula xiriiri karaan madaxda jabhadda, si wadar ahna looga wada tashan karo hadba arrimaha xalka u baahan.

## SAL-BALLAAR 1994

Markii, aannu ku guulaysanney in aannu gudahayaga iska habayno, ayna noo caddaatay in heshiiskii Addis Ababa ee 1993kii ee loogu talaggalay in Dawlad Soomaaliyeed lagu dhiso uu fashilmay, ayaannu bilownay in aannu xiriir la yeelanno jabahadaha kale ee dalka, si wax looga qabto arrimaha cakiran. Waxaa arrintaas nooga soo jawaabey Caydiid oo noo sheegay in uu qabanqaabiyey shir ay jabhadaha oo dhan isugu imanayaan Muqdisho, uuna jeclaan lahaa in SSDF kala soo qaybgasho.

Talo soo jeedintii Caydiid waxaan hordhigay golihii dhexe ee SSDF, waxaana uga digay in ay si fiican arrinta uga baaraandegaan. Caydiid waa nin aan jeclayn in talada lala qaybsado, oo tiisu meel u taal. Waxaa kale oo aan u sheegay in, kaddib markii aannu ku guuleysanney hirgelinta nabadda Mudug, aniga iyo Caydiid ka wada hadallnay sida ay suurtaggal u noqon karto in aannu dhisno dawlad ay Soomaalidu u wada dhan tahay. Waxaa kale oo aan xusuusiyey in fekerka Caydiid wax iska beddeli karaan oo ay suurtaggal tahay in uusan wakhtiyada qaarkood indhaha ka qarsan karin xaqiiqda. Taas oo uu ku muujiyey fulinta heshiiskii lagu nabadeeyey gobolka mudug. Golihii dhexe waqti badanba kuma qaadan in ay go'aan ka gaaraan taladii Caydiid soo jeediyey.

Waxay soo jeediyeen in aanan talo soo jeedinta Caydiid ka hortagin, balse in aannu niyad sami ku soo dhoweyno oo shuruud la'aan ku yeelno, dabadeedna aragno waxa uu na horkeeno. Haddii waxa uu i noola yimaadaa inoo cuntami waayaan, arrinta meesheeda ayaannu ku xiraynaa, oo ma ay jirto awood nalaku marsiin karo go'aan aannaan raalli ka ahayn.

Annaga oo ku soconna go'aankaas, ayaa wafdi ballaaran oo aan hoggaaminayo ka dhoofay gobollada Woqooi Bari si aannu shirkaas uga qaybqaadanno. Wafdiga waxaa igu weheliyey rag ay ka mid ahaayeen Cabdi Cabdulle Saciid (Jinni Boqor), Saciid Cusmaan Islaan,

Maxamed Xaaji Aadan, Maxamed Ali Yusuf (gaagaab), Janan Cabdulaahi Saciid Samantar. Gobollada kalena dad badan baa ka yimid. Shirku wuxuu ku bilawday si wanaagsan, hab socodka hawlihiisa si macquul ah ayaa loo agaasimay. Waxaa la magacaabay guddiyo kala duwan oo si fiican isugu soo habeeya qodobbadii shirka looga doodayey, sida dastuurka, barnaamijka siyaasadda, iwm. Waxaase arrintu nala xumaatay markii la gaaray awood qaybsiga. Waxaa meeshii laga caddeeyey in aan beesha Daarood waxba ku lahayn saddexda jago ee ugu sarreeya dawladda la dhisayo, kuwaas oo kala ah Madaxweynaha, Guddoomiyaha Baarlamaanka iyo Ra' iisul Wasaaraha. Arrintaasi waxay nagu noqotay wax aannaan marna malaysanayn. Markii taasi dhacday, ayaan meeshii ka caddeeyey in aan shirka la isugu iman waxqaybsi xalaal ah, balse la doonayo in meesha laga dhaliyo qalalaase hor leh. Waxaan ku daray haddii aan ahay oday Daarood, waxaan si aan leexleexad lahayn idiinku caddaynayaa in aniga iyo wafdigaygu shirka ka baxayno. Waxaa la isku dayay in la i qaboojiyo, aragtidaydii ayaanse ku adkaystay.

Aniga oo halkii aan degganaa kula shiraya wafdigii ila socdey, ayaa waxaa salaan iigu yimid Cismaan Caato oo lagu tirin jirey in uu ahaa gacanta midig ee Caydiid, kaas oo isku dayey in uu iga raalligeliyo gef uu Caydiid sameeyey, isla markaasna, ii caddeeyey in isaga iyo beesha Habargidir tooni la qabin sida Caydiid ula dhaqmay adiga iyo beesha aad wakiilka ka tahay. Waan u mahadceliyey, waxaanse ugu daray in aan Caydiid ka badsho, isla markaasna hubo in uusan meelna wax geynayn.

Markii aan bixitaan isu diyaariyey baa waxaa i soo gaarey xog lagu kalsoonaan karo oo oranaysa in UNISOM la iiga tebiyey war been abuur ah, kaas oo lagu yiri in aan Caydiid la ogaa , kuna dhiirrigeliyey sidii uu u layn lahaa koox Baakistaaniyiin ah ee ka tirsanayd ciidanka UNISOM kuna sugnayd Raadiye Muqdisho. Warkaas oo ahaa mid uusan waxba ka jirin. Xilligaas ay arrintu dhacdayna waxaan ku sugnaa magaalada Boosaaso. Ma aan garan karo sida UNISOM ay been abuurkaas ugu qanacday iyada oo aan wax baaris ah samayn, iyo sida fudud oo ay go'aan ugu gaartey in la i soo qabto, ama la i dilo.

Wax aan sameeyo iyo cid aan arrinta kala xiriiro aqoon waayey, waxaana khasab igu noqotay in aan Muqdisho dhuumasho uga soo baxo, oo ‘ Kilomitir 50’ dayuurad ka soo qaato, si baxsad ahna Nayroobi ku galo. Waxaa nasiibdarro noqotay in, qaar ka mid ah raggii wafdigayga ka tirsanaa, sida Cabdi Cabdille Saciid (Jinni Boqor), Maxamed Xaaji Aadan iyo Saciid Islaan, ay shirkii Salballaar ku haraan, kuna doodeen in ay iyagu beesha Daarood ka wakiil yihiin. Markii aan Boosaaso soo galay waxaan si rasmi ah u fariisiyey golihii dhexe ee SSDF. Halkaas oo madaxdii shirka ka soo qaybgashay aan warbixin buuxda ka siiyey wixii aan Muqdisho kala soo kulmay. Waxaan dabadeed u soo jeediyey in laga doodo sidii labada garab ee SSDF loo midayn lahaa. Goluhu wuxuu arrintaas ka soo saaray go'aan dhaxalgal ah, kaas oo ugu yeeraya labada dhinac in la heshiiyo. Guushaasi waa tan horseed u noqon doonta sida midaysan ee laba sano kaddib SSDF uga qaybgashay shirkii SODERE.

## CAAFIMAAD XUMO ILA SOO DERISTEY

Tan iyo markii aan yaraa waxaan ka soo shaqeeyey hawlo ciidan oo kala geddisan, waana jeclaa shaqadayda, waxaana ka gaarey jago ka mid ah darajooyinka ugu sarreeya ciidanka, taas oo ahayd madaxa hoggaammada tababbarrada iyo hawlgelinta. Waxaase saamayn weyn igu yeeshay isbeddelladii sharcidarrada ahaa ee ciidanka qaranka soo foodsaaray. Dabadeed waxaa noloshaydii halakeeyey xabbis dheer, halgan hubaysan iyo loollan siyaasadeed oo muddo dheer qaatay. Duruufahaas adag oo i soo foodsaaray awgood, marna iima suurtaggelin in aan caafimaadkayga baaro. I991kii markii aan ka soo baxay xabbiska Itoobiya, waxaan ku soo beegmay xaalado adag oo markaas dalka ka jirey. Waxaan isu diyaariyey in aan dibadda u dhoofo arrimo qoys iyo arrimo caafimaadba. Xaaladahaas dalka ka jirey awgood ayaanse u bixi waayey. Dagaalladii Al-Itixaad Al-Islaami, kuwii barbar socdey ee USC iyo khilaafka siyaasadeed ee SSDF ka dhex jirey ayaa afar sano igu qaatay. Nasiib wanaag, si fiican baannu arrimahaas oo dhan uga hortagnay. Inkasta oo dhibaatooyinka guud, ee dalka ka jirey aaney wax weyni iska beddelin, haddana xaalad roon baa Waqooyi Bari ka jirtey.

Sidaas darteed, waxaan gartay in aan dibadda ugu baxo baaris caafimaad. Bilihii ugu horreeyey ee 1995kii, ayaa hay'ad samafal muslin ahi waxay iigu deeqday afar qof oo ay soo xajisiiso, kharashkana ka bixiso. Aniga ka sokow, waxaa fursaddaas ka faa' iidaystey xaaskayga Xaawa Cabdi Samatar, la-taliyahayga Yuusuf Cumar Azhari iyo xoghayahayga Daahir Mire Jibriil. Markii aan Maka tagayba oo hawlihii xajka gudaggalay waxaan dareemay in caafimaadkaygu ka sii darayo. Tobanki beri ee waajibaadka xajka la gudanayay baan dhib ku dhammaystay. Jirradii i haysayna, maalin walba way ka soo dareysey.

Maalmo kaddib markii aan xajka dhammaystay, ayaan la kulmay Guddoomiyaha Bankiga Horumarinta Islaamka Dr. Axmed Maxamed Cali waxaana ka codsaday in uu gacan iga siiyo sidii aan ku heli lahaa isbitaal aan isku baaro. Taas oo uu iga aqbalay, isaga oo isla markiiba amar ku bixiyey in la i geeyo Fahad Hospital, wixii kharash ahna lagu soo dallaco. Isla maalintii baannu ka tagnay Maka oo xagga Jidda uga gudubney. Subaxdii ka danbayseyna waxaa la i geeyay isbitaalka. Saddex maalmood baa la i baarayey. Natiijadii ka soo baxday baaritaanka ima dhiirrigelin. Waxaa la ii sheegay in beerkaygu aad u jirran yahay, oo la iga helay cagaarshow C (Hepatitis C), kaas oo beerka dila. Dabadeed waxay ii sheegeen in ay beerkayga ku arkeen laba wax oo aad u culus. Mid waxay ahayd bar madow oo laga baqayo in ay tahay carsaanyow (Cancer). Midda kale waxay ahayd qayb ka mid ah beerka oo qallashay, lamana soo noolayn karo. Waxay igu yiraahdeen annagu dhowr beri cisbitaalka waannu kugu hayn karnaa, daawana waannu ku siin karnaa, waxbase kuma tarayso. Markii aan magaalada ku noqday baan Daahir Mire u yeertay oo ku iri: ' waxaad la hadashaa jaaliyadda reer Woqooyi Bari ee London, waxaadna ku tiraahdaa Cabdullaahi Yuusuf aad bu u jirran yahay ee dalkugal ' Visa' uu dalka Ingiriiska ku soo galo u raadsha' . Waxaan kale oo u sheegay in Dalkugalka la iigu soo diro Boosaaso oo aan dhowaan u ambabixi doono. Waxaa arrinta hormuud ka noqday Sureer Abshir Muuse (Maxamed Abshir walaashiis), Maxamed Cismaan Cali Maad, Cabdirashiid Aadan Seed (Qoor) iyo Yaasiin Maxamed Guure Xanaf (Afdheere), kuwaas oo noo soo sheegay in ay nala soo xiriiri doonaan markii uu dalkugalku diyaar noqdo.

Mar hore ayaan gartay in beerka la beddelo ma ahee aaney raja kale jirin. Takhaatiirtii Sacuudigu wax aan qaboojiye ahayn ima siin karin . Waxaan takhaatiirtaas u sheegay in aan dalkii ku noqonayo. Taas oo ay iiga digeen, waxayse igu yiraahdeen: ' Haddiiba ay noqoto in aad baxdid, waxaan kugula talineynaa in aad Jidda ku soo noqotid saddex bilood gudahood' . Toban beri markii aan Boosaaso joogey waxaa la ii soo sheegay in dalkugalkii uu diyaar yahay oo aan degdeg u soo baxo. Sidaas baan ku dhoofay. Waxaa safarka igu weheliyey afadayda iyo Daahir Mire oo labaduba wata baasaboorro ajnabi ah oo Viso ay London ku galaan looga baahnayn. Waxaan tagey London dad badan baa i soo dhoweeyey.

Markii la i dejiyey, waxaan dadkaas ka codsaday in ay takhtar beerka ku takhasusay i geeyaan. Waxaa la i geeyey isbitaal gaar ahaan loo leeyahay. Takhaatiirtii markii ay i baareen waxay ii xaqiijiyeen intii ay ii sheegeen takhaatiirtii Sacuudigu. Waxay sheegeen in arrintaydu aad u culus tahay, beerkayguna dhaafay heer wax laga qaban karo. Waxay dabadeed ii gudbiyeen isbitaal kale oo isagana gaar loo leeyahay (Private) oo lagu magacaabo Cromwell Hospital, halkaas oo uu ka shaqeeyo Prof. Dr. Roger Williams oo ah khabiir looga danbeeyo arrimaha la xiriira beerka. Markii uu darsay natiijooyinkii ka soo baxay baaristii takhaatiirtii hore buu isaguna dib u baaray. Dabadeed wuxuu ii caddeeyey in beerkayga la beddelo ma'ahee aysan rajo kale jirin. Barta madow ee beerka iigaga taalna ay tahay khatar isla markaasna ay fidayso. Subaxdii danbe wuxuu igu sameeyey (Kimo Ambulation). Saraeyada baa la dalooliyey, tuubo afka hore ku leh Laser baa toos nabarkii loogu gubay, dabadeedna ' liquid anti Cancer' ah buu u raaciyey oo nabarkii daaweyn lagu baabbi'iyey. Hawshaashi markay dhammaatay wuxuu igu yiri ' gurigaaga aad.' Subaxii markii aan soo toosay hal tin ahi madaxayga kuma oollin. Waan yaabay waana welweley.

Dabadeed takhtarkii baan dib ugu laabtay, kaas oo aan u sheegay waxa igu dhacay. Taakhtarkii waa i qaboojiyey, wuxuuna ii sheegay in arrintu la xiriirto daawadii uu i siiyey, muddo gaaban kaddibna timuhu sidoodii iigu soo bixi doonaan.

Waxaan weydiiyey in la heli karo farsama kale oo beerka wax looga qaban karo isaga oo la beddelo mooyee. Haddiise ay noqoto in la beddelo intee buu dhaqaale ahaan iigu kacayaa? Wuxuu iigu jawaabey in aaney jirin farsamo kale, beddelka beerkuna ku kacayo laba boqol oo kun oo doolar (USD 200 kun doolar). Waxaan u sheegay in aanan heli karin lacag intaas le' eg. Inta uu i fiirshay buu si naseexo ku jirto iigu sheegay in ay beerkayga u dhimman tahay mudda lix bilood ah oo loo baahan yahay in muddadaas ka hor aan lacagta helo. Waxaan ku iri waa hagaag, wixii Ilaah ka dhigo bay noqon, waana ka tagey.

Markii aan takhtarka London ka dhammaystay wixii macluumaad ahaa oo aan u baahnaa, ayaan nin aan adeer u ahay oo Virginia (USA) deggan, u dirsaday dalkugal 'Visa' aan Maraykanka ku tago. Waxaan rabay in aan ogaado faraqa u dhaxeeya kharashka isbitaalka London iyo kan Maraykanka. Safarkaas waxaa ii raacay labadii qof oo horay iila socotey. Markii aan Virginia tagnay ninkii aan adeerka u ahaa oo lagu magacaabo Cabdi-Daahir Maxamed Yuusuf wuxuu i geeyey isbitaal, halkaas waxaa la igaga miiray biyo badan oo jirka iga galay, baaritaanna waa la igu sameeyey.

Sidii takhaatiirtii Ingriisku ay ii sheegeen bay iyaguna ii xaqiiyeen, taas oo ahayd in beerkayga lix bilood u hartay. Waxaa kale oo ii caddaatay in haddii Maraykanka beerka la iiga beddelo uu iigu kacayo saddex boqol oo kun oo doolar ($300 kun). Waxaan ku iri lacagtaas ma aan heli karee maxaad igula talinaysaan?. Waxay igu yiraahdeen: ' Waxaannu kugula talinaynaa in aad Ingriiska ku noqotid laba sababood awgeed. Marka hore Ingriisku wuu nooga fiican yahay cuduradda beerka gala. Marka labaadna waa naga jaban yahay'. Isbitaalkii waan ka soo baxay waxaana tegey guriga Cabdi-Daahir. Markii aan gurigii tagay baan Cabdi-Daahir iyo Daahir Mire u sheegay in ay guddiyo sameeyaan oo Jaaliyadda Woqooyiga Maraykanka lacag ka soo ururiyaan. Sidaas oo kale waxaannu guddiyo ka samaynay Afrikada Bari, gobollada Woqooyi Bari iyo dalalka Carabta.
Guddiyadaas oo dhan waxaa loo xilsaaray in ay soo ururiyaan laba boqol kun doolar ($200 oo kun) oo beerka la iiga beddelo. Aniga iyo afadaydu London baannu ku noqonnay.

Isbitaalkii London waxaan ku iri i suga inta aan lacagta ka helaayo. Taakhaatiirtii waxay i xusuusiyeen in waqti igu socdo. Guddiyadii dadaal xoog leh bay galeen. Aniga oo afar bilood xaaladdaas ku jirey lacagtiina weli kala dhimman tahay ayaa xanuunkii isa soo taray, oo aan bilaabay in aan Koomo galo. Lacagta waxaa lagu soo shubayay xisaab uu mas' uul ka yahay Yaasiin Maxamed Guure Xanaf (Afdheere) oo London degganaa. Intii aanan Koomada gelin, xilligii la ii qabtayna laba bilood ka harsan tahay, baa waxaa la ii sheegay in lacagta la soo ururiyey ay dhan tahay 170 kun oo doolar, oo ay weli dhimman yihiin ($30kun oo doolar). Arrintu markii ay halkaas taagan tahay baa waxaan guddigii London weydiiyey inta lacag ka soo gaartay Afrikada Bari.

Waxay ii sheegeen in Cabdullaahi Jinoole, Yaasiin Nuur iyo Yuusuf Nuur oo ahaa ganacsatada ugu jeebka roon ayan weli waxba ka soo gaarsiin. Waxaan Yaasiin Nuur Xasan farriin ugu sii dhiibay guddigii lacagta ururinayay taas oo aan ku leeyahay in uu lacagta dhimman isagu ku soo daro. Yaasiin Nuur Xasan oo isaguna jirranaa oo ku sugnaa Dar-Es-Salam (Tanzania), baa la hadlay Yusuf Nuur Xasan, waxaase lacagtaas xil weyn iska saaray oo khasab ka dhigay in lacagta deg deg loo soo shubo Cabdullahi Jinoole, lacagtii dhimmanaydna waa la soo shubay. Sidaas oo kale, takhaatiirtu waxay ku jireen dadaal kaas u dhigma oo ay beer qof ila dhiig ah ku raadinayeen, anigana dhiigaygu waa B+ oo si looga helo Yurub ay aad u yar tahay. Iyaga oo aan weli beer helin baa lacagtii xisaabta isbitaalka lagu shubay. Jeeg 200kun oo doolar ku qoran tahay baa sidaas Yaasiin Afdheere mas' uuliyaddiisii ku soo xiray. Isbitaaalkii baa la i geeyey, biyo caloosha ku jirey baa la iga miiray. Intaas kaddib waxaa la ii sheegay in jaadka dhiiggaygu ku yar yahay qaaradda Yurub.

Taariikhdu markay ahayd 2dii Abriil 1996kii ayaa beerkii la soo helay. Aniga oo fadhiya muddo hal saac ah qolka sugitaanka ayaa waxaa soo galay takhtar ordaaya, kaas oo ii sheegay in beerkii la helay, oo la helay nin dhallinyaro ah oo "Organ Donor" ah oo nooca dhiiggiisu yahay B+ , waxaa la i weydiiyey in aan diyar ahay. Haa, baan ku jawaabey. Wuxuu takhtarkii igu yiri: ' Saxiix warqadahan, taas oo ay ku caddahay in haddii aan geeriyoodo aan cidna loo qabsan karin' .

Warqaddii waxaa diiday in aan saxiixo afadayda Xaawo, Yaasiin Afdheere iyo Xirsi Xaaji Jaamac oo markaas ila joogey. Waxaan u sheegay in waxa ii dhimanina yihiin wax laba bilood ka yar, sidaas darteedna ay ila qumman tahay in intii aan silic u dhiman lahaa aan dhinto aniga oo dadaalaya oo beerkii beddelaya. Sida Soomaalidu tiraahdo waxaan qabaa, ' Naftu orod bay kugu aammintaa. Dabadeed saxiixii baan ku duugay' . Markii aan warqaddii saxiixay takhtarkii neef baa ka soo booddey oo wuxuu ka cabsi qabay inta la iska daba jiitamayo in beerka la helay dhinto.

Dabadeed shaqadoodii bay bilaabeen. Waxaa miyir iigu danbaysey markii Irbadii suuxisada ahayd la igu dhuftay anigoo albaabkii qolkaan ku jiray la iga sii saarayo 7:00 fiidnimo. Qalliinkii baa la bilaabay, kaas oo soconayay 8 saac. Waa lagu guulaystay. Markii takhaatiirtii xaqiiqsadeen in beerku si fiican u shaqaynayo bay i geeyeen meesha dadka Koomada ku jira la geeyo (Intensive Care Unit) oo dhulka hoostiisa ah. Halkaas oo takhaatiirta mooyee ayan cid kale iigu iman karin. Subaxdii sagaalka barqannimo baan baraarugey oo indhaha kala furay. Meel i xanuunaysa ma ayan jirin, mana dareemin. Sanka labadiisa dul baa tuubooyin iiga jireen, caloosha meesha feeruhu ku dhammaadaanna tuubo kale baa iiga jirtey. Ibtana tubo ayaa iiga jirtey. Hadba jirkayga meel baan taabtaa oo wax baa ka taagan. Dhinaca midigtayda ah waxaa jiifey nin caddaan ah oo xalay wadnaha laga qalay, kaas oo aan qayladiisa ka seexan waayey.

Isla barqannimadii waxaa ii soo galay Prof. Dr. Roger Williams iyo gabar takhtarad ah oo la socotey. Waxay arkeen in aan soo jeedo. Takhtarku wuxuu i weydiiyey in aan garanayo iyo in kale. Ma hadli karin balse madaxa ayaan ruxay, taas oo aan ula jeeday in aan garanayo. Qalin iyo buug buu ii dhiibey oo igu yiri qor magacayga. Waan qoray waana u ceshay. Takhtarkii gabadhii buu eegay oo ku yiri degdeg buu u soo kabtay. Wuxuu intaas ku daray, ' Waa ninkii u horreeyey oo beerka laga bedelay oo muddo gaaban ku soo kabtay' . Gabadhii buu u sheegay hawsha loo baahan yahay in la iga qabto inta uu isagu subaxdii ka soo noqonayo. Eheladii ka war sugaysay xaaladdayda buu markii uu sii dhaafaayey u sheegay in aan fiicnahay oo ay laba-labo qof ii soo booqan karaan.

Waxaa ii soo galay Xaawo Cabdi Samatar oo afadayda ah iyo Yaasiin Afdheere oo dadkii u sheegay in ay i booqan karaan. Markii dadkii soo galeen baan gacanta u ruxay, waxayna qaarkood yiraahdeen wallaahi waa nool yahay waana fiican yahay. Su'aalo bay qaarkood i weydiiyeen waana uga jawaabey. Maalmahaas cunto la ima siin oo Faleebe ayaa la igu quudinayey. Subaxii labaad saddexdii saac ee barqannimo waxaa ii yimid Prof. Dr. Williams iyo takhtaraddii la socotey. Waraysi kaddibna waxay amreen in aan socsocdo oo aanan iska jiifin, wuxuu amar ku bixiyey oo kale in maalin walba la ii sameeyo jimicsi iyo masaajo. Kaddib kalkaaliye baa ii yimid oo muddo nus saac ah baan lugaynayey. Isla maalintaas qol rasmi ah baa la i geeyey oo meeshii hoose waa la iga soo saaray. Prof. Dr. Roger Williams wuxuu igu yiri haddii xaalkaagu sidan ku sii socdo 15 beri gudahood waad kaga baxaysaa isbitaalka, wuxuuna ii qoray dawadii aan qaadan lahaa.
Waxaa kale oo isla maalintaas ii yimid nin la yiraahdo Dr.Heatting oo ii sheegay in uu yahay ninkii i qalay oo beerka iga beddelay, wuxuna igu yiri: ' Waad i weydiin kartaa haddii ay jiraan wax su'aalo ah oo aad qabtid'. Muddadii 15ka beri ahayd ee aan isbitaalka jiifey waxaa inta badan ila joogey oo wehel ii ahaa Cabdullaahi Maxamuud Maxamed Farabadane (Cabdullaahi Dheere).

Subaxii 15aad ee aan qalnaa baa waxaa ii yimid Prof. Dr. Williams iyo takhtarad la socotey, waxay iga waraysteen sida xaalkaygu yahay. Markii ay i dhegaysteen waxay ii sheegeen in aan maanta ka baxayo isbitaalka. Waxay amreen in kalkaaliye guriga iigu yimaado oo dawada i siiya inta aan ka baranayo sida daawada loo qaato. Waxaa kale oo ay ii sheegeen in aanan London ka bixi karin muddo saddex bilood ah. Waxaan dagey guri ay leedahay gabar la yiraahdo Faadumo Dhooqa-Ruug oo ku yiil xaafadda Camden, meel u dhow saldhigga Tareenada ee Kings Cross. Muddadii aan gurigaas joogey waxaan galabtii ku lugayn jirey beerta Camden, waxaa ila lugayn jirey Cabdille Qoryoliqe, Yaasiin Afdheere, Maxamuud Jeeni, Xuseen Cali Saylaan, Cabdicasiis Farabadane, Cabdirashiid Qoor, Inj. Maxamed Cismaan Cali Maad iyo dhallinyaro kale. Saddex bilood kaddib baan takhtarkii ku noqday. Waa la i baaray, waxaana la ii sheegay in aan fiicnahay oo aan safri karo, balse in aan lix bilood kasta London baaritaan u imaado.

## SHIRKII SODERE

Markii aan hawshii caafimaadka ka soo faraxashay, waxaan ka qaybgalay shirar kala duwan ee Jaaliyadda Soomaaliyeed ee London deggan isugu iman jireen, kuwaas oo looga doodi jirey arrimaha Soomaaliya, wixii hadba soo kordhana lagu falaanqayn jirey, mustaqbalkana lagu oddoroosi jirey. Shirarkaasi waxay u badnaayeen dood cilmiyeedyo iyo xog isweydaarsi. Kama soo bixi jirin go'aanno iyo hal-abuurro hor leh ee lagu dhaqaaqo.

Inkasta oo labada jawi kala duwanaayeen, waxaa la oran karaa in shirarkaasi aaney waxba ka duwanayn kuwii ka socday majlisyada fadhi ku dirirka ee ay Soomaaliya caan ku noqotay. Arrimaha ugu muhiimsan ee dalka ka dhacay muddadii aan la legdamayey caafimaad xumida i soo foodsaartay, waxaa ka mid ah bixitaankii ay UNISOM dalka ka baxday, dagaalkii beesha Sacad dhexmaray, kaas oo ay kala hoggaaminayeen Caydiid iyo Caato oo hore u ahaan jirey labada nin oo magac dheer USC ku lahaa iyo dilkii Caydiid. Dilkii Caydiid wuxuu soo afjaray loollankii u dhaxeeyey Cali Mahdi iyo Caydiid, kaas oo hareereeyey siyaasadda Soomaaliya laga bilaabo 1991kii-1996kii.

Kaddib markii ay dhammaatay hoggaamintii siyaasadeed ee Caydiid iyo Cali Mahdi waxaa dhacday in magalada Muqdisho loo kala qaybsado degaanno yaryar oo qabaa'ilka u kala xayndaaban, kuwaas oo ay horjoogayaal ka yihiin qabqablayaal cusub. Waxaa qabqablayaasha cusub laga tilmaami karaa Qanyare oo degaanka Dayniile ku habsaday; Muuse Suudi Yalaxow oo degmada Madiina goostay, Bootaan C. Caalin (Xaaraan-Ku-Naax) oo agaggaarka SOS jidgooyo dhigtay, Bashiir Raage oo degmada Kaaran qayb ka mid ah goostay, isla markaasna meesha ka furtay Raadiyo-FM ah, kaas oo faafin jirey dacaayad ka soo horjeedda dhinacyada uu neceb yahay. Koox ganacsato ah oo Xaaji Abuukar Caddaani hoggaaminayo, oo markii dekaddii weynayd xirantay, dekad macmil ah ka furtay Ceelmacaan, halkaas oo ay ka soo dejin jireen dhammaan badeecadaha iyo qalab ganacsi oo dhan.

Maalin maalmaha ka mid ah aniga oo weli London jooga ayaa waxaa ila soo xiriiray dawladda Itoobiya, iyada oo dhanbaal ii soo marisay safaaradda ay London ku leeyihiin. Nuxurka dhambaalkaasi wuxuu ahaa in siyaasaddii Soomaaliya qalalaase hor leh oo aan la oddoroosi karin gashay, taas oo ka dhalatay bixitaankii UNISOM iyo dhimashadii Caydiid 1dii Agoosto, 1996kii. Waxay ii sheegeen in aan la malayn karin waxa ka dhalan kara dhimashada Caydiid, oo ahaa caqabadda ugu weyn ee hortaagnayd dibu-heshiisiinta Soomaaliya. Ugu dambayntii dawladda Itoobiya waxay dhambaalkaas igaga codsatay in aan Itoobiya wada tashi u imaado. Safiirka waxaan u sheegay in uu gaarsiiyo dawladdiisa in aan oggolaaday martiqaadkaas. Markii aan London ka dhammaystay wixii iiga xirnaa, ayaan Itoobiya u duulay. Addis Ababa waxaannu ku kulannay Wasiirka Arrimha Dibadda ee Itoobiya mudane Seyoum Mesfin. Wuxuu igala hadlay sidii shirweyne Soomaaliya lagu badbaadiyo loo qaban lahaa, sidaas darteedna ay doonayaan in ay abaabulaan shir dibuheshinned oo ku kooban Soomaalida koofureed, taas oo macnaheedu ahaa in Somaliland aysan shirka ku jirin.

Intaas wuxuu iigu daray in Itoobiyaanku ii arkeen qofka keli ah ee isu keeni kara kooxaha kala duwan ee siyaasadda Soomaaliya. Aragtida wasiirku ii soo jeediyey waxay iigu muuqatay talo habboon in aan maanta Soomaaliya lagu fiirsan sida ay tahay. Waxaananse weli garan danta ay Itoobiya shirka ka leedahay. Sidaas awgeed waxaan wasiirka weydiiyey natiijada laga rabo in ay ka soo baxdo shirka ay doonayaan in la qabto. Wuxuu iigu jawaabey in danta laga leeyahay ay tahay in laga wada tashado sidii Soomaaliya dawlad loogu dhisi lahaa.

Markii aragtidayadii isu soo dhowaatey buu iga codsaday in aan taladooda gaarsiiyo madax kooxeedyada reer koofureed, kana dhaadhiciyo in gogosha Itoobiyaanku dhigeen laga soo qaybgalo. Codsigaas waan ka yeelay. Dabadeed waxaan weydiiyey in ay hayaan magacyada shakhsiyaadka shirka lagu martiqaadayo. Taasna wuxuu iga yiri in aaney hayn oo loo baahan yahay in aannu hadda wada samayno. Sidaas waxaannu ku bilownay in aannu qorno magacyada madaxda gobollada Woqooyi Bari, gobollada dhexe oo Muqdisho ku jirto, RRA iyo kuwa Jubbaland.

Raggii la ii diray dhamaantood waan la hadlay waana u bandhigay taladii meesha tiil aniga oo weliba ugu muujiyey danta weyn oo inooku jirtey in ay tahay ka tashiga arrimaha dalkeenna, isla markaasna ku adkeeyey in ay shirka ka soo qaybgalaan. Kooxihii oo dhan way oggolaadeen Xuseen Caydiid mooyee. Waxaan u sheegay Itoobiyaankii in kooxihii oo dhan ay oggolaadeen ka qaybgalka shirka marka laga reebo Xuseen Caydiid oo yiri anigu Madaxweynaan ahay, balse Itoobiya laga sugayo goorta iyo goobta shirka. Jawaabtii wakhti badanba kuma qaadan, oo degdeg bay dadkii u casumeen , kuwaas oo mudda gaaban Addis Ababa ku soo gaarey, dabadeedna waxaa halkaas ka furmay shirkii lagu ballansanaa.

Ergooyinkii ka soo qayb galay shirka waxay ka cabsi qabeen in Addis Ababa oo magaalo weyn ah oo ay joogaan diblomaasiyiin, wakiillada hay'adaha caalamiga ah iyo war baahinta adduunku ay saamayn ku yeeshaan habsocodka shirka. Sidaas awgeedna ay habboonaan lahayd in shirka ay ku qabsadaan meel ka baxsan Addis Ababa, kana deggan, si ay waqti badan oo ay kaga baaraandegi karaan shirkooda ergooyinku isugu helaan. Ergooyinkii iyo Itoobiyaankiiba waxay isla garteen in madasha shirka loo beddelo tuulada Sodere ee ku taal daanta webiga Hawaash. Tuuladaas oo ah meel jawigeedu deggan yahay oo ilo biyo kulul iyo Hoteelo leh oo loo tagi jiray nasasho, isla markaasna ah meel xiran. Halkaas baa shirkii nooga bilowday.

Meeshaa waxaa isugu yimid Soomaali keli ah iyo dhowr sargaal oo Itoobiyaan ah oo badi dhinaca saadka iyo xiriirnta shirka iyo dawladda Ethiopia naga taakuleynayey. Dooddii ka dhex sacotey siyaasiyiinta shirka isugu yimid hadba heer bay gaareysey, waxaa loo wada hadlay si saraaxad leh, waxaa la isu dhaliilay si ayan naxariisi ku jirin, wax la isula harayna ma ayan jirin. Cali Mahdi baa loo doortay guddoomiyaha shirka. Gabagabadii shirkana waxaa lagu heshiiyey in aan dawlad la dhisin, balse la sameeyo gole qaran oo qabanqaabiya shir qaran oo loo dhan yahay. Markii talada la isla qaatay, baa waxaa laga hadlay meeshii shirka lagu qaban lahaa. SSDF waxay soo jeedisay, kol haddii Muqdisho ayan maanta nabad ahayn, waxaa nala habboon in shirka lagu qabto magaalada Boosaaso.

Madax ka mid ah dadkii shirka ka qaybgalay ayaa arrinta muran ka soo jeediyey iyaga oo ku andacoonaya in ay Boosaaso tahay magaalo beeli leedahay. Waxaan xusuusiyey in Muqdishoba ay beeli deggan tahay. Waxaan ka codsaday in aannu meel iska dhigno muranka caqabad ku noqon kara hawlaha shirka. Markii murankii batayna waxaan shirka ku iri, haddii Boosaaso la diiddan yahay, anigu ma garanayo meel kale oo nabad ah oo shir lagu qaban karo, sidaas darteed waxaan soo jeedinayaa in sidii horeba u dhici jirtey, shirka lagu qabto dalka dibaddiisa. Taladaasi waxay shirka ka dhex dhalisay buuq badan oo la xakamayn kari waayey, dabadeed waxaa si cagajiid ah la isugu raacay in shirka Boosaaso lagu qabto. Markii arrintaas laga baxay waxaa laga dooday tirada Guddiga Qaranka iyo sida loo qaybsanayo.

Waxaa goobtii iska taagay Cabduqaadir ' Zoppe' oo soo jeediyey in tirada beeluhu ay kala qaadanayaan noqoto mid siman. Buuq hor leh ayaa shirkii ka dhex dillaacay. Cabdulqaadir ' Zoppe' taladiisii buu ku adkaystay. Dabadeed shirkiiba qiilqiil buu galay. Waxaa khasab noqotay si fashilaad looga hor tago in taladii ' Zoppe' la yeelo. Shirkii waxaa kale oo uu isku raacay in la sameeyo shan guddoomiye oo meerto ah. SSDF waxay guddoonsatey in aan anigu uga mid noqdo, Maxamed Abshirna SSDF sii hoggaamiyo. Beesha Absame waxay doorotay Aadan Gabyow, Hawiye waxay doorteen Cali Mahdi iyo Cismaan Caato, RRA waxay doorteen Cabdulqaadir ' Zoppe'.

Waxannu go' aan ku gaarney in qodobbadii aannu isku raacnay oo dhan la gaarsiyo dawladda Itoobiya, isla markaasna aannu ka dalbanno xarun guddigu ku shaqeeyo. Sidaas oo kale waxannu ku heshiinay in wafdiyadu dalkii degdeg ugu noqdaan oo toos loo hawlgalo. Markii uu shirku xirmay waxaannu ku soo laabannay Addis Ababa. Waxaan hoteel Gion ka samaysannay xafiis aan shaqada ku sii wadanno.

Wafdigii SSDF waxay ku soo noqdeen Boosaaso halkaas oo si fiican loogu soo dhoweeyey, raallina laga noqday go'aannada ka soo baxay shirkii Sodere. Waxannu degdeg u guda-galnay hawlihii qaban-qaabada shirka aannu ballanqaadnay in lagu qabto Boosaaso. Waxaannu diyaarinnay guddiyo kala duwan, sida guddiga dhaqaalaha, kan nabadgelyada, kan warbaahinta iyo kan dejinta iyo soo dhoweynta.

Guddi kastana shaqadiisii buu bilaabay. Isla markiiba waxaa la soo gaday teendho weyn oo shirka lagu qabto oo kharaj badni ku baxay, waxaa la diyaariyey hotelladii iyo guryihii martida la dejin lahaa. Markii aannu intaas isku dubbarridney, waxaannu safar u aadnay Muqdisho si aannu xubnihii guddiga ka tirsanaa ee Muqdisho ku sugan ula socodsiinno heerka abaabulka shirku marayo, isla markaasna, ugala tashanno tallaabooyinka ku xiga.

Markii waqtiga shirka la qaban lahaa soo dhowaadey baa reer Muqdisho dooddii Boosaaso-diidka ahayd soo cusboonaysiiyeen. Sidaas oo kale waxaa ina Caydiid lagula taliyey in uu shirka carqaladeeyo, taladaas oo ay ka danbaysey dawladda Masar. Murankii oo halkiisa taagan baannu intayadii kale isku afgarannay in aannu dhaqaale weydiisanno dawladaha aannu saaxiibka nahay oo ay ugu horrayso dawladda Yemen. Annaga oo dhaqaale doon ah, kuna sugan dalka Yemen, ayaa Addis Ababa teleefon laga keenay. Aniga ayaa la ila hadlay. Waxaa la igu yiri 'fadlan soo gala' oo waxaad ka qaybqaadaneysaan shirka ay dawladda Masar dalbatay oo Qaahira ka dhacaya, kaas oo Xuseen Caydiidna ka soo qaybgelayo. Waxaa naloo sheegay in, ujeeddada laga leeyahay shirka ay Masar qabaneyso ay tahay sidii loo midayn lahaa siyaasiyiinta Soomaaliyeed. Teleefonka waxaa ii soo diray Tekede Alamu Wasiiru Dawlaha Arrimaha Dibadda ee Itoobiya. Waxaan weydiiyey in ay ka fiirsadeen talada ah in Masar la tago.

Waxaan u sheegay in Masar ay khiyaano waddo oo ay dooneyso in ay nakala dirto, meeshana ku baabbi' iso midnimadii taagta yarayd ee aannu dhowaan Sodere ku soo yagleelnay. Waxaan u sheegay in Masar midmid u garaneyso shakhsiyaadka Guddigu ka kooban yahay, taqaanna mid walba waxa qanciya, sidaas darteedna u fududdahay in ay maareyso damacooda iyo baahidooda kala duwan, dabadeedna arrinta ku soo gabagabayneyso mid ay lacag ku gadato iyo mid ay ballan qaad kale u samayso. Nasiibdarro, Wasiirku waa ka dhega adaygay wixii aan kula hadlay. Wuxuu igu yiri: ' Dad baa alle idinka dhigay oo Masar iyo qolo kale toona idinma khasbi karaan, waxaad leedihiin mowqif, kaas ayaad daafacaneysaan, ee waxa loo baahan yahay in aad isku kalsoonaataan' .

Waxaan dib ugu soo noqday hotel Saba oo aannu degganayn. Raggii baan shir isugu yeeray, warbixin buuxda baan ka siiyey wixii aannu Wasiirka ku wada hadalnay, dabadeed waxaan u sheegay in wixii aannu arrinta ka oran lahayn la inaka sugayo. Guddigii wuxuu soo jeediyey in talada Masar la aqbalo. Anigu hore baan u ogaa in xubnaha guddiga qaarkood xiriir la lahaayeen dawladda Masar. Sidaas awgeed marna ma aanan filayn in ay codsiga Masar muran gelin kareen.

## BURBURINTA SHIRKII SODERE

Dawlado badan ayaa daneeya arrimaha Soomaaliya. Qaar dano istaraatiiji ka leh, qaar dano shidaal ka raja qaba iyo qaar daneeya xeebteeda dheer. Dawladahaas oo dhammi, waxay si dadban iyo si muuqataba taako-taako ula socdaan wax allaale wixii dalka ka dhacaya. Waxay noqotay wax dabiici ah in, isku day kasta oo Soomaalidu dhexdeeda ka samayso ama beesha caalamku ku taageerto si Soomaaliya loo dabaqabto, ay wiiqdo faraggelinta dawlado ama kooxo dano gaar ah lihi. Faraggelinta siyaasadeed ee caalamaka kaga imaanaysa Soomaaliya waxaa ugu daran tan ka soo jeedda dawladaha Masar iyo Itoobiya.

Labadaas dal oo malaha dhexdooda iska haya, waxay jecel yihiin in murammada ka dhaxeeya ay Soomaaliya kula soo galgashaan. Sida la og yahay Itoobiya iyo Masar waxaa ka dhaxeeya adeegsiga biyaha webiga Niil, kaas oo sidii ay u wadaagi lahaayeen ku noqotay mushkilad istiraatiiji iyo mid dhaqaaleba, weliba haddii la eego biyo yaraanta gobolka ka jirta. Taariikh ahaan Soomaaliya iyo Itoobiya weligood ma ayan yeelan wax xiriir ah oo isu soo dhoweeya, oo arrinta Soomaali Galbeed baa weligeed abuuraysey xasaasiyad siyaasadeed, dhawr goorna ay dagaal khasaare badan geystey isaga hor yimaadeen. Dhinaca kale Soomaaliya iyo Masar waxay lahaan jireen xiriir wanaagsan oo taariikhi ah. Masar waxay dadaal dheer u gashay sidii ay Soomaaliya xorriyaddeeda ku gaari lahayd, waxay dhallinyarada Soomaaliya u furtay albaabbada Jaamacadaheeda oo dhan mid milatari iyo kuwo cilmiba. Saamaynta ay dalka ku leedahay wuxuu ahaa mid taariikhi ah. Sidaas darteed, Masar waxay weligeed jeclayd in aan

Soomaaliya laga xigsan oo aysan ka bixin siyaasaddeeda. Sidaas awgeed Masar ma qaadan karto in siyaasad Soomaaliya lagu maamulo oo aysan talo ku lahayn ay fusho . Masar waxay jeceshahay in koofurta Itoobiya ay ka jirto dawlad xoog leh oo Itoobiya culays ku hayn karta.
Markii ay Soomaaliya burburtay waxaa is beddelay isu dheellitirkii siyaasadeed ee gobolka ka jirey, maxaayeelay awooddii Soomaaliya ayaa meesha ka baxday. Waxaase cabsi ku hayey xasilloonidarrada Soomaaliya ka jirtey iyo ururrada mintidiinta ah oo Soomaaliya ka dhashay, kuwaas oo dhibta ay Soomaaliya ku hayaan u xawili karey Itoobiya, isla markaasna, gacan ka geysan karey dagalka xorriyadoonka Soomali Galbeed.

Sidaas awgeed Itoobiya waxay rabtey in ay Soomaaliya degto oo yeelato dawlad aan xoog lahayn oo aan halis ku ahayn, taas oo weliba iyada ka amar qaadata. Dhinaca kale, sumcaddii iyo xushmaddii ay Masar ku lahayd Soomaaliya gebi ahaan way burburtay kaddib markii ay Masar dhexgashay, qaybna ka noqotay dagaallada Soomaaliya ka dhex socda. Taasi waxay guul la taaban karo u noqotay Itoobiya. Waana saamaynta ay ku yeelatay dalka, in ay abaabusho shir ay isugu yimaadaan 90% siyaasiyiintii Soomaaliya, kana soo saarto go'aanno wax ku ool ah oo dariiq u furi karey dibuheshiisiin iyo dhismaha dawlad Soomaaliyeed.

Masar arrintaasi waxay ku noqotay mushkilad aaney filanayn. Dabadeed waxay awooddeeda siyaadeed oo dhan saartay sidii ay u fashilin lahayd shirkaas. Arrintaasi waxay igu noqotey mid aan la yaabo, maskaxdaydana ka weynaatey, waxayna ii xaqiijisay in diblomaasiyadda Itoobiya tahay mid aan qaangaar ahayn.
Markii la gaaray go'aankii shirka Qaahira lagu aadi lahaa, ayaa Maxamed Abshir noo sheegay in uu muddo gaaban gaarayo Dalka Sacuudiya. Sidaas oo kale Cali Mahdi wuxuu noo sheegay in uu Qaahira ka hor, meel gaarayo oo mudda gaaban kaga soo noqon doono. Warar aanan xaqiiqadooda hubin ayaa sheegay in labadaas oday shir kula yeesheen sirdoonka Masar dal saaxiib ah. Wararku waxay intaas ku dareen in lacag iyo ballanqaadyo jago odayaashaas lagu maamuusay, iyaguna dhinacooda dawladda Masar u ballanqaadeen in, shirka Masar abaabushay ee Qaahira ka dhici doona, ay gacan weyn ka

geysan doonaan sidii uu ku guulaysan lahaa. Ragga intoodii kale waxay dib ugu soo noqdeen Addis Ababa. Annaga iyo Itoobiyaanku waxaannu ka doodnay arrintii waxayna ku adkaysteen taladoodii ahayd in aan tagno shirka Qaahira. Subaxdii dambe baa dayuurad nala saaray oo Qaahira nalaka dejiyey. Halkaas waxaa nagu soo dhoweeyey saraakiil sare oo ka socday hay'adda Nabad-sugidda Masar iyo Arrimaha dibadda. Soo dhoweynta saraakiisha sirdoonku ma ahayn ujeeddo la'aan, oo waxay ii xaqiijisay warar aan hore u maqli jirey oo oranayey in siyaasadda Masar ay gacanta ugu jirto (Aminga Qowmiga).

Waxaa nala geeyey hoteel weyn oo webiga Niil ku yaal. Halkaas waxaannu ugu tagnay Xuseen Caydiid iyo wufuud kale oo naga soo horreysey. Dabadeed isla hoteelkii baa shirka laga furay. Shirka waxaa hoggaaminayey saraakiisha amniga oo nooma suurtoobin in nalala kulansiiyo saraakiil ka tirsan wasaaradda arrrimaha dibadda oo aannu arrimaha qaarkood kala hadli lahayn. Sidii hore loo sheegay si buuxda baa shirka looga soo qayb galay. Dhinaca beesha Daarood waxaa ka socday :

Cabdullaahi Yuusuf Axmed
Aadan Cabdullaahi Nuur Gabyow
Maxamed Abshir Muuse
Cumar Xaaji Masalle
Axmed Cumar Jees
Maxamed Xaaji Aadan
Maxamuud Khaliif Shire

Inta kale oo isugu jiray Dir, Digil iyo Mirifle iyo Hawiye waxay tiradoodu ahayd 19 xubnood. Dhawr maalmood markii la wada hadlayey oo la ismari waayey, runna la isu sheegi waayey, nin walba taladiisana meel afka u saaray, ayaa nimankii reer Masar waxay bilaabeen in ay, si qarsoodi ah, goonigooni wufuuddii ugu yeertaan. Markii hore ragga qaarkii way is adkeeyeen balse markii la cadaadiyey waa ay is dhiibeen oo wixii Masar ka dooneysey bay ka saxiixatay. Goor subax ah baa waxaa ii yimid saraakiil ka tirsan amniga qaranka Masar. Waxay ii sheegeen in ay takhtar i geynayaan. Waxay ogaayeen in beerka la iga beddelay oo aan mar kasta takhtar isaga baah nahay.

Waxay i geeyeen Cisbitaal weyn, waa i baareen, wax caafimaad xuma ahna igama dareemin. Dabadeed ninkii Jananka ahaa oo i waday baa i yiri, xafiis halkaan ah baan sii maraynaa wuxuuna ii geeyey taliyaha Ciidanka Amniga kaasoo ii geeyey Wasiirka Amniga oo la yiraahdo Cumar Saleeban, ahna la taliyaha Madaxweynaha Masar. Waxaannu ka wada hadalnay sida shirku u socdo iyo ajendeda laga doodayo. Su'aalo badan oo uu si dadban ii weydiiyeyna wuxuu ka dhadhansaday in aanan yeelayn cadaadiska Masar waddey, dabedeed wuxuu si bareer ah iigu yiri: ' War nin yahow, mashaakil baa na haysta; Soomaaliya haddaan loo yeelin sida beesha Hawiye rabto dawlad u dhisi kari mayno, waxay ku qancaayaan oo keli ah in Cali Mahdi Madaxweyne laga dhigo, Xuseen Caydiidna Ra'iisul Wasaare' .

Intaan hadalkaas ka carooday, baan ku iri: ' Waxaan u gartay in aad iska hadleysid oo aadan si fiican uga baaraandegin xaaladda Soomaaliya iyo weliba wixii dalka ka dhacay laga soo bilaabo rididdii Siyaad Barre' . Waxaan u sheeggay in markii USC Muqdisho qabsatay in beesha Hawiye oo aad leedihiin dalka ha loo dhiibo, ay ka shaqeeyeen sidii qabiilka Daarood loo ciribtiri lahaa, dalkana looga saari lahaa kumase ayan guulaysan. Waxaan Wasiirka Amniga ku iri: ' Ma taas oo jirta baan yeeli karnaa in aan madaxda USC ugu caleema-saarno kaligood madaxnimada dalka, si dabadeed iyaga oo dawlad ah wixii naga haray u gumaadaan' .

Marka xasuuqu dhaco oo nala weydiiyo waxa sababay, ma waxaannu ku jawaabi doonnaa walaalahayaga reer Masar baa na weydiistey in aannu kuwa na gumaaday talada u dhiibanno. Waxaan ku iri, in madaxda beesha Hawiye ee maanta oo aad dabada ka riixaysaan ayan run ahaan dawladnimo rabin, dalkana xukumi karin oo xataa iyagu is xakumi karin oo beelaha ay ka kooban tahay aan midina midda kale waxba u quurin. Dersigii laga bartay muddadii burburka lagu jirey ayaa, qof kasta oo caqli leh ugu filan garashada ujeeddada dhabta ah ee madaxda beesha Hawiye qaarkood. Waxa ay doonayaan oo keli ah waa dil, bililiqo iyo burburin. Waxaan hubaa haddii ay maanta Qaahira gacanta ku dhigi lahaayeen in, toddoba beri kaddib aan la arkeen halka ay ka baxeen, bal wax kale iska daaye, Ahraamta . Haddii aydinaan hore sidaas u ogayn maanta ogaada.

Ugu danbayntii waxaan ku iri: ' In aanan maanta iyo berri toona qaadanayn talada aad soo jeedisey, waxaana idinkula talinayaa in aad ka hartaan wax aan socon karin. Haddana, waxaan si xushumad leh kaaga codsanayaa in aad hoteelkii igu celisaan'. Intii aan kulankaas ku maqnaa ayaa, xubnihii wafdiga loo wareejiyey Naadiga Ciidanka Lugta, halkaas oo si qarsoodi ah shirka looga maamulayey. Waxaan arkay Aadan Gabyow oo meel taagan, Daaroodkii kale waa la kaxaystay. Meeshii uu taagnaa baan ugu tegey. Waxaan uga sheekeeyey kulankii na dhexmaray aniga iyo Wasiirka Aminga iyo sida aragtideenu u kala fog tahay. Waxaan u sheegay in Masar dooneyso in xukunka loo dhiibo beesha Hawiye. Aadan Gabyow ma uusan jeclaysan mawqifka Masaarida. Wuxuu igu yiri: ' Cabdullaahi, haddii aad adigu yeeshid kolna anigu ma oggoli'.

Isla barqadii Aadan Gabyow waxaa loo qaaday isbitaalka ciidanka markii la baaraynа waxaa loo sheegay in kelyihiisu liitaan. Waxay kula taliyeen in uusan Masar ka tegin si loo daaweeyo, wuuse ku gacansayray oo isla galabtiiba ka soo baxay. Markii la soo ceshayna wuxuu igu yiri: ' War sariir seexan maaye aan tashanno oo meesha isaga tagno'. Waxaan u sheegay in aan taladiisa qaatay oo aan dadkii qaylo-dhaan gaarsiiyey, kuwaas oo aad iyo aad u dhibsaday waxa Masar lagu walaaqayo, waxayna ii xaqiijiyeen in ay dibadbaxyo ka samayn doonaan si ay dareenkooda adduunka ugu muujiyaan. Waana tallabo wanaagsan. Waxaannu ku tashanay in aannu Masar ka tagno oo Baasabooradayadana ka qaadanno, sidaasna shirka uga baxno. Waxaa nagu adkaatay sidii aannu ku heli lahayn baasaboorradayadii, waayo lama rabin in aannu shirka ka baxno. kolkii aannu ku daalney, baannu u sheegnay saraakiishii na maamulaysey in aannu qaban doonno shir jaraa'id oo aannu ku caddayn doonno in baasaboorradayadii naloo diidey oo nalaku khasbayo in aannu aqbalno go'aanno aannaan raalli ka ahayn. Waxaannuna u sheegnay in ay annaga iyo iyagaba sharaf noo tahay in ay baasaboorradayada nasiiyaan.

Ugu danbayntii way garaysteen oo subaxdii danbe baannu qaadanay baasaboorradayadii, dabadeed waxaan u tagey Maxamed Abshir, kaas oo aannu u sheegnay in meesha la inaku xumeeyey oo la inaka dhigay wax aan jirin.

Sidaas darteed, waxaan ka codsaday in aannu shirka qaadacno oo uusan saxiixin heshiiska Masar dabada ka waddo. Maxamed Abshir aragti tayda ka duwan buu qabey wuxuuna iigu jawaabey: ' War i dhaaf hana iila iman dacaayadihii Boosaaso ka socdey ee horay la ii soo gaarsiiyey gacantiinaa waa iga dhufsaday oo yiri waan saxiixayaa'. Taas oo uu ula jeedey bannaanbax ballaaran ee Boosaaso ka dhacay oo looga soo horjeedey shirka Qaahira. Waxaan ku iri Maxamed i dhagayso: ' Waxaan rabaa in aad ogaatid, kuna talaggashid in haddii aad saxiixdid heshiiska ay la mid tahay adiga oo gabay dowrkaagii siyaasadeed, siyaasad ahaana waad ku baaba'aysaa. Markii aan ka samray Maxamed Abshir, aniga iyo Gabyow waxaannu u tagnay maamulkii shirka. Waxaannu u caddaynay in aannaan waxba ka saxiixayn oo aannu dooneyno in dayuurad nala ku qoro oo aannu isla caawaba dhoofno.

Annaga oo weli Qaahira ku sugan ayaa heshiiskii la saxiixay, kaas oo ay saxiixeen 25 qof. Waxaa diiday oo keli ah aniga iyo Aadan Gabyow. Waxaannu safiirka Itoobya ku wargelinney sida wax u dhaceen, kana codsannay in uu dawladdiisa gaarsiiyo in aannu berri Addis Ababa tegi doonno. Markii aannu gegida dayuuradaha u soconney, waxaannu hoteelkiisa ku sii marnay Cawad Casharo oo na raaci lahaa. Isaga oo diyaar ah baannu hoteelkii ugu tagnay, waxaannu ka bixinnay $1200 (kun iyo laba boqol oo doolar), dabadeedna gegidii baannu toos u aadnay.

Markii aannu Addis Ababa tagnay waxaa nala geeyey hoteel. Waxaa nala kulmay Dr. Takade Alemu oo ah wasiiru dawlaha arrimaha dibadda, kaas oo noo sheegay in aannu shirkii Qaahira mowqif xaq ah ka istaagnay. Inta aan si fiican u fiirshay baan waxaan ku iri: ' Qaahira wax cusubi kama dhicin ee waxaa ka dhacay wixii aan idiinka digey oo aad iga maqli weydeen. Waxaan ugu sii daray anigu horay baan shirkaas u diiddanaa waayo waa ii muuqatey in uusan wax wanaag ah soo kordhinayn, Marsarna aysan dhexdhexaad ka ahayn siyaasadda Soomaaliya'. Kaddib waxaannu la kulannay Meles Zenawi iyo Seyoum Mesfin, kuwaas oo aannu si qota-dheer uga wada hadalnay wixii shirka ka dhacay, si maangal ahna u wada qiimaynay go'aannaddii ka soo baxay oo ilaa heer aannu isku aragti ka noqonnay.

Itoobiyaanku waxay noogu jawaabeen bal naga war suga inta wufuuddii kale ka imanayaan oo aannu is waraysanayno. Dhawr beri kaddib, waxaa Addis Ababa soo galay wufuuddii kale oo uusan Maxamed Abshir la socon. Markii la weydiiyey waxa ay wadaan, waxay ku jawaabeen waxaannu u soconnaa Muqdisho, halkaas oo aannu ka dhisi doonno maamul. Taas oo ay ku macneeyeen in ay tahay tallaabada ugu horreysa ee dadaalka loogu jiro dhismaha dawlad qaran. Kuwii Daaroodka ahaa ee heshiiska wax ka saxiixayna Muqdisho bay u gudbeen si ay dhismahaas uga qaybqaataan, Itoobiyaankuna waxba kama qabin. Mudda gaaban kaddib Itoobiyaankii baa noo yeeray oo noo sheegay in Sodere la fashiliyey, kuwaas oo dabadeed nagula taliyey in aannu gobolladayadii ku noqonno oo hawlahayaga wadanno.

Markii aannu si fiican u qiimaynay wixii aannu tan iyo Sodere soo marnay, aniga iyo Aadan Gabyow waxaannu go'aansannay in aannu degdeg u dhoofno, aniguna aado Woqooyi Bari, isaguna Jubooyinka, dabadeedna ku dadaalno sidii aannu shacbiga u abaabuli lahayn, xooggayagana isugu geyn lahayn sidii aannu degaannadayada uga samatabixin lahayn burburka daba dheeraaday ee dalka ku habsaday. Addis Ababa waxaa iga soo raacay Saciid Cadduur iyo Xasan Abshir oo SSDF ugu jirey Guddigii Fulinta ee hore Sodere loogu soo dhisay Addis ababana sii joogey.

## AASAASKII PUNTLAND

Shirar badan oo hadda ka hor beesha caalamka, ururro goboleedyo iyo dawlado gaar ahi u qabteen dibuheshiisiinta Soomaalida iyo dibusoodhisidda dawladdii qaranka wax natiijo ah lagama gaarin, xaaladda dalkuna way ka sii daraysaa. Iyada oo guud ahaan dalkii burbursan yahay, ayay Woqooyi Galbeed ku dhawaaqday gooni isutaag. Dhinaca koofureedna waxaa ka socdey dagaallo aan dhammaad lahayn, kuwaas oo sababay xasuuq iyo ku habsasho dhul beelihii lahaa laga barakiciyey. Taas oo jirta ayaa Janan Caydiid kaga dhawaaqay magaalada Muqdisho dawlad dhalanteed ah isaga oo isku qanciyey in uu sidaas ku yahay Madaxweynihii qaranka.

Gooni u goosadka Wogooyi Galbeed iyo iscaleemasaarka Caydiid waxay ahaayeen ayaandarro carqaladaynaysa dadaalka loogu jiro midaynta Soomaalida. Gobollada Woqooyi Bari waxay, nasiib wanaag, ka badbaadeen burburkii dalka. Horumar la taaban karana way ku tallaabsadeen. Waxa u qabsoornay iyo xasilloonida ay ku libaaneenba waxaa ugu waenaa saddex arrimood oo isbiirsaday:

- tan iyo maalintii xornimada la qaatay wax mashaariic ah oo gobolladaan laga hirgeliyey ma ayan jirin, sidaas oo kale ma jirin wax dhaqaale ah oo dawladihii dalka isaga danbeeyey geliyeen, mana jirin wax looga qoondeeyey kaalmooyinkii dalka loogu deeqay 30kii sano ee dalku xorta ahaa. Dibu-dhaca dhaqaale ee gobolladaasi ku caan baxeen waxay ku mutaysteen magaca ah 'gaari waa' . Haddiise maanta dib loo eego dayaca geyigaan la baday, waxaa la oran karaa in ayba dhiirrigelin u noqotay wax qabsiga iyo isku kalsoonaanta.

- Boqollaal kun oo gobolladaan ku abtirsada ayaa burburka dabadiis dib koofurta ugaga soo qaxay iyaga oo faro maran oo wax walba laga soo furtay. Dhib kasta ha la kulmeene si tartiib-tartiib ah ayay degaankii cusbaa ula qabsadeen. Dadkaasi waxay gobollada ku soo biiriyeen xirfad, aqoon iyo hal-abuur aan hore looga aqoon. Kuwaas oo sabab u noqday horumar, sida shaqo abuuris, maalgelin, guud ahaan kobcinta dhaqaalaha iyo arrimaha bulshada.

- Waxaa muddo gaaban gudaheed laga arkay gobolladaan isbeddel ballaaran iyo dareen horumarineed.
- Inkasta oo ay dawladdii burburtay, haddana maamulladii yaraa ee ka jirey gobolladaan way sii xoogaysteen iyaga oo kaashanaya madax-dhaqameedyada iyo waxgaradka.
- Waxaa kale oo xoog iyo farsamooyin ku soo kordhiyey reer koofureedkii ku soo qaxay Woqooyi Bari. Iyada oo arrintaas laga duulayo, ayaa tan iyo intii ka danbaysey shirweynihii Qardho ee SSDF dib loogu dhisay ayaa waxaa soo shaac baxaday fikrad oranaysa in degdeg loogu dhaqaaqo sidii loo dhisi lahaa ismaamul goboleed mideeya Woqooyi Bari.

Kaddib markii, ilaa heer, fikraddii loo arkay mid meel mar ah, lagunawada qancay, ayaa waxaa xiriir lala sameeyey hay'adaha UN-ka iyo qaar ka mid ah deeq-bixiyayaasha iyada oo laga codsanayo kaalmo farsamo iyo mid dhaqaale oo gundhig u noqda dadaalka loogu jiro ismaamul goboleedka Woqooyi Bari. Markii oggolaansho guud laga helay waxaa loo gudbiyey misaaniyad isugu jirta kharashka abaabulka, qabashada shirka, iyo miisaaniyad hal sano ah oo lagu dhaqaajiyo hawlaha ismaamul goboleedka la dhisayo. Hay'adaha iyo deeq-bixiyeyaashu codsiga loo diray si sharaf leh bay ku soo dhoweeyeen. Markii hawluhu soo gaareen heerkii lagu dhaqaaqi lahaa sidii loo hirgelin lahaa habka muddada laga shaqaynayey, ayaa waxaa shir isugu yimid siyaasiyiintii, madaxdhaqameedkii iyo waxgaradkii gobollada Woqoyi Bari.

Shirka waxaa la soo hordhigay barnaamij qodobbadiisa ugu muhiimsani ay ahaayeen: (b) habka maamul ee la doonayo in la dhiso ‘ ismaamul-goboleed mise dawlad-goboleed’ ; (t) xiriirka u dhexaynaya habka cusub iyo SSDF; (j) qaabka loo midaynayo saddexda gobol. Aniga oo maanka ku haya burburkii dalka ka dhacay iyo sida Soomaali u kala guurtay, ayaa waxaan shirkii u soo jeediyey in tirada gobollada la midaynayo laga badiyo saddexda gobol oo lagu soo kordhiyo ugu yaraan gobollada Daaroodka iyo Soomaalidii kale oo isbahaysigan danaynaysa. Hadalkaygii wuxuu noqday mid aan la filayn oo xiisad weyn dhaliyey. Dood hor leh baa meeshii ka bilaabatay, waana lagu kala qaybsamay.

Qaar waxay ku adkaysteen taladii hore ee la isugu yimid, halka qaar kalena soo dhoweeyeen fikradda cusub. Kuwa hore waxay u badnaayeen aqoonyahanno, kuwa danbena siyaasiyiin iyo madax-dhaqameedyo. Arrintii waa la isku mari waayey. Sida la og yahay, gobollada Woqooyi Bari iyo weliba kuwa Woqooyi Galbeed waxay kaga duwan yihiin koofurta Soomaaliya kaalinta muuqata oo ay madaxdhaqameedyadu ku leeyihiin maareynta khilaafadka iyo go' aan ka qaadashada arrimaha culus ee soo foodsaara. Taariikh ahaan madax-dhaqameedyadu meel kasta oo ay dalka ka deggan yihiin iyaga ayaa beelahooda u talin jirey, go'aankooduna wuxuu ahaa lama dhaafaan.

Gumeysigii ayaase gebi ahaanba baabbi' iyey hormuudnimadii ay bulshadooda ku dhex lahaayeen. Murankii ka tagnaa in gobolada la kordhiyo iyo in kale waxaa fududeeyey isimmadii uu hoggaaminayey Cabdullahi Boqor Muuse oo arrintii la wareegey. Markii madax-dhaqameedyadu ay wada-tashigoodii dhammaysteen waxay talo ku soo jeediyeen in shirka la hakiyo, anigana la ii xilsaaro in aan xiriir la sameeyo beelaha deggan gobollada aan soo jeediyey in laga qaybgeliyo ismaamulka la dhisayo. Taladdaas waa la wada qaatay. Waxaan samaystay barnaamij safar oo aan ku tegayo degaanka beelaha aan doonayo in ay shirka ka soo qaybgalaan. Waxaan horta u baxay dhinaca Harti Woqooyi, halkaas oo aad la iigu soo dhoweeyey, shirar badanna aan kula qaatay madaxdhaqameedyadii Dhulbahante iyo Warsangeli. Waxaan warbixin ka siiyey sida ay u fashilmeen shirarkii tirada badnaa oo aan muddadii burburka lagu jirey ka soo qaybqaatay, kuwaas oo ay ugu danbeeyeen shirkii Sodere ee Itoobiya ka dhacay iyo kii Qaahira lagu qabtay.

Waxaan u sheegay oo tala ku soo jeediyey in maamulka laga samaynayo Woqooyi Bari, loo helo mid ka baaxad weyn oo ugu yaraan mideeya beelaha Darood ee aaggan deriska la ah, sidaas darteed waxaan doonayaa in aan ogaado fikraddiinna. Waxaan ugu daray in aan anigu qof ahaan si ayan u suuragalin in Somaliya kala go'do oo aan Somaliland loo aqoonsan, aan qabo in ay dani inooku jirto in aynu maamul wada dhisanno, Maamul goboleed aynu danaheenna ku fushanno, inta xaalka koofurta wax iska beddelayaan.

Waxaan ku sii adkeeyey in ay garwaaqsadaan in aan xal ku jirin colaad aan dhammaad lahayn oo wanaaggu ku jiro in ay heshiyaan, geeddi socodka nabadda ka soo qayb qaatan si loo xalliyo dhibaatooyinka dalka ka jira, qarannimadeenniina dib loo soo nooleeyo. Nasiib wanaag reer Sool iyo reer Sanaagba fikraddii si buuxda bay iila qaateen. Dabadeed waxaan sidaas ku wargeliyey madax-dhaqameedyadii reer Woqooyi Bari, kuwaas oo farxad ku soo dhoweeyey go'aanka ay Harti Woqooyi ku aqbashay in ay si buuxda uga soo qaybgelayaan abaabulka.

Markii aan ka soo noqday dhinaca Harti, waxaan u gudbey dhinaca gobolka Mudug si aan arrinta ugala xaajoodo beelaha Daarood oo ay ka mid yihiin Leelkase iyo Awrtable oo halkaas deggan. Nasiib wanaag, waxkhti badanba igama qaadan oo iyagaaba arrinta igaga kululaa oo igu dhiirrigeliyey in aan dadaalka kordhiyo si degdeg ahna habka looga miradhaliyo. Dabadeed waxaan la xiriiray odayaal badan ee ka tirsan beesha Marreexaan ee degta waqooyiga gobolka Galguduud, si aan arrinta ugala xaajoodo. Duqowdii waxay ii soo direen wafdi ballaaran oo beeshaas ka tirsan. Kolkii aan odayaashaas la kulmay, baan durba gartay in aaney wafdiga ku jirin odayaal ka tirsan reer Diini oo ka mid ah beelaha ugu waaweyn.

Markii aan odayaashaas u bandhigay shirka aan qabanqaabada ugu jirno, ujeeddooyinka ka danbeeya iyo sida ay muhiim u tahay in ay shirka ka soo qaybgalaan. Odayaashii aan la shiray waxay iigu jawaabeen: ' In hawsha aannu ku guda jirney ku fadhido taladii hagagsanayd oo loo baahnaa in mar hore lagu dhaqaaqo, iyaguna diyaar u ahaayeen in ay ka soo qayb galaan' . Aad baan ugu farxay hadalladii wanaagsanaa oo ay ka soo jeediyeen kulankii aannu isugu nimid. Kolkii si rasmi ah loogu dhawaaqay qabashadii shirka, gobolladiina loo kala qoondeeyey, loona kala diray tiradii ergooyinka uu gobol waliba shirka u soo dirsan lahaa, ergooyinkii ka socdey gobollada qaarkoodna mar hore ay bilaabeen in ay ku soo qulqulaan magaalada Garowe oo shirka lagu qabanayo.

Nasiibdarro, waxaa la ii soo sheegay in beesha Marreexaan go'aan ku gaartey in aaney markaan diyaar u ahayn ka qaybqaadashada shirka waxaase noo yimid qaar ka mid ah. Ergooyinkii kale aad bay uga xumaadeen diidmadaas. Qof ahaan kuma aanan qancin waxa beeshaasi kaga cudurdaaratey shirka. Waanse garanayey halka ay ka soo jeedeen labada arrimood ee go'aankas ku khasbay. Tan hore waxay xiriir la leedahay siyaasadda Reer Diini oo isbahaysi kula jirtey beesha Cayr. Isbahaysigaasi wuxuu ku salaysnaa qabsashada magaalada Kismaayo. Sidaas awgeed, uma suurtoobi karin beesha Marreexaan in ay dhinacna beesha Hartida la samaysato isbahaysi, isla markaasna ku duusho Hartiga Kismaayo gacanta ku haya. Arrinta labaad waxay la xiriirtay cadaadiska taliskii Siyaad Barre ku hayey beesha Majeerteen iyo

afgenbigii Cirro. Sida la og yahay, tan iyo dhalashadii Kacaankii 21kii Oktoobar, siyaasadda dawladdu waxay ku dhisnayd colaadinta Majeerteenka, waxayna sii xoogowdey wixii ka danbeeyey afgenbigii Cirro iyo jabhaddii hubaysnayd ee SSDF.

Markii aan hawlahayga soo dhammaystay ayaan ku soo noqday magaalada Boosaaso oo ay ku sugnaayeen madaxdii SSDF iyo waxgarad kale oo tira badan. Halkaas ayaan madaxdii joogtey warbixin ka siiyey wixii aan safarradaydii kala soo kulmay, warbixintaas oo aad loogu bogey. Shirar badan oo aannu halkaas ku yeelannay waxaannu isku waafaqnnay in la dhiso Dawlad Goboleed midaysa shanta gobol oo talowadaagta noqday, degdegna loo qabanqaabiyo shirweynihii maamulka loogu dhisi lahaa. Iyada oo aan waxba la isku diiddanayn baa waxaa soo baxday arrin la xiriirta sharci ahaanshaha habka loogu yeerayo shir beeleedka lagu ansixinayo in dawlad goboleedkaas la dhiso oo beelaha shanta gobol deggani isku wada waafaqaan. Waxaa dabadeed la isla oggolaaday in go'aan ka soo baxa madax-dhaqameedyada beelaha doonaya in ay ku midoobaan hab cusub oo keli ahi ka dhigi karo dhismaha iyo jiritaanka Dawlad Goboleed mid sharci ah.

## DHISMAHA DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND 1988

Dhismaha dawlad goboleedka Puntland wuxuu maray saddex heer oo is dhammaystiraya, waxayna kala yihiin:

### Shirkii Isimada

Dhismaha Dawlad Goboleedka Puntland wuxuu ku bilawday shirkii madaxdhaqameedka beelaha shanta gobol ee Woqooyi Bari dega. shirkaas waxaa lagu qabtay magaalada Garowe. Waxaa ka soo qaybgalay sagaal iyo labaatanka isim ee ugu magac dheer gobolladaas. Isimadu waxay shirkooda ku qireen:

- in dalku marayo marxalad adag oo aan mustaqbalka la oddorosi karin.

- in xil gaar ahi ka saaran yahay sidii ay uga hortegi lahaayeen saamaynta ay degaankooda ku yeelan karto cawaaqib-xumo ka dhalata sii jiitanka burburka;
- in loo baahan yahay in la helo ismaamul habaysan oo ilaaliya danaha bulshada Woqooyi Bari, isla markaasna suga amniga iyo horumarka. Waxay dabadeed isku raaceen:

in la dhiso Dawlad Goboleed midaysa shanta gobol ee ay Woqooyi Bari ka kooban tahay;

- in la qabto shir ay ka soo qaybgalaan ergooyin ka socda gobolladaas , kaas oo lagu ansixinayo dastuurka dawlad goboleedka.

## Qabanqaabada Shirweynaha Beelaha:

Markii la faafiyey go'aannadii isimmada ayaa waxaa la bilaabay qabanqaabada shirweynihii ergooyinka beeluhu isugu iman lahaayeen si ay u dhisaan dawlad goboleedka. Waxaa la magacaabay guddiyo fara badan oo arrinta meelmariya. Guddiyadaas waxaa ugu xil cuslaa guddiga dastuurka iyo guddiga dhaqaalaha. Kan hore waxaa loo xilsaaray in ay muddo saddex bilood ah ku soo diyaariyaan dastuur ka jawaabaya ujeeddada asaasiga ah ee ka danbaysa dhismaha dawlad goboleedka, isla markaasna sugaya midnimada qaranka Soomaaliyeed. Xilalka la saaray ka sokow, ma jirin wax tas-hiilaad ah oo guddiga lagu baritaaray, dabadeed wuxuu ku khasbanaaday in uu habka iskaa-wax-u -qabso ku hawlgalo.

Run ahaan dadaal badan bay arrinta u galeen, baaris cilmiyeed badan bay sameeyeen, khubaro kala duwan oo xirfad sare u leh dastuurrada iyo fiqiga bay la tashadeen. Ugu danbayntii waxay ku guuleysteen in ay mashruucii dastuurka u soo gudbiyaan xoghaynta shirka muddadii loo qabtay. Waxaa dabadeed isla guddigaas loo xilsaaray soo diyaarinta xeerkii iyo hannaankii doorashada lagu geli lahaa. Guddiga dhaqaaluhu, run ahaan ma heli karin dhaqaale ku filan oo lagu haqabtiro baahida shirka sidaas u baaxadda weyn. Isha keli ah oo xoogaa dakhli ahi naga soo galo waxay ahayd dekadda iyadana khidmad yar ma ahee, wax canshuur ah lagama qaadi jirin. Guud ahaan dhaqaalaha Woqooyi Bari ma fiicnayn oo way adkayd in ganacsatada

looga helo wax tabarrucaad ah. Kharashka shirka ku baxaya waxaa lagu qiyaasay hal malyan doolar. Waxaa lagu talaggalay in uu shirku socdo muddo bil ah oo ay ka soo qaybgalaan dad gaaraya 600-700, kuwaas oo isugu jira ergooyinka rasmiga ah, isimmada iyo goob-joogayaal kale. Markii la diyaariyey dhaqaalihii ayaa waxaan la xiriiray hay'adihii iyo deeq-bixiyayaashii hore loogala xiriiray dhismaha ismaamul goboleedka. Markii codsiga cusub loo bandhigay, faahfaahinna laga siiyey baahida keentay dhismaha dawlad goboleed midaysa shanta gobol ee qorshaha ku cad, si aan la filayn bay uga horyimaadeen ugana cudurdaarteen oggolaanshihiisa. Markii aannuu ku qanci weyney diidmadooda qayaxan ayaannu su'aalney sababta ka hortaagan in ay mashruucaan wax ka maalgeliyaan. Waxay ku jawaabeen in gobollada Sool iyo Sanaag yihiin dhul la isku haysto, sidaas darteedna aaney faraha la geli karin. Waxaa noo caddaatay in si dadban loogu qanciyey beenta gooni u goosashada Woqooyi Galbeed.

Mudda yar kaddib, markii lagu guulaystay dhismaha Puntland ayaannu ogaan doonnaa in, nin lagu magacaabo Matt Bryden uu qaddiyadda gooni u goosashada qayb ka yahay, isla xilligaasna madax ka ahaa hay'ad Woqooyi Bari ka shaqaysa oo la oran jirey War-torn Societies oo uu la taliye u ahaa hay'adaha iyo deeq-bixiyayaasha aannu taagerada weydiisannay, dabadeedna uu laf ahaantiisu uga digey in nala caawino, oo gacan kasta oo laga geysto dawlad goboleedkaasi ay sabab u noqon doonto dagaal halkaas ka dhaca. Hal sano kaddib Matt Bryden waxaa laga eryay Puntland, dabadeedna wuxuu u wareegay Hargeysa, halkaa oo uu ka sii wadey colaadintii Puntland.

Xaajadii oo sidaas noogu cakiran, ayaa guddiga abaabulka iyo dejintu na soo gaarsiiyey in ay magaalada oo waagaas aad u yarayd, soo buux dhaafiyeen kumanyaal qof oo shirka xiisaynaya oo gobollada ka kala yimid, kuwaas oo dhan kun iyo laba boqol oo isugu jira ergooyin. isimmo, madax dhaqameedyo, fannaaniin, culimmo, jaaliyado, weriyayaal in ay si rasmi ah shirka isaga diiwaan geliyaan, sidaasna maamulka shirku kharashkooda qabo. Waxba arrintaas lagama oran karin, maxaa yeelay raggaasi waxay ahaayeen lafdhabarta bulshada gacan u noqon doonta dawlad goboleedka la dhisayo.

Dabadeed waxaannu ku heshiinney in aannu Ilaah tawakalno oo arrinta u abbaarno hagar la' aan. Waxaannu mulkiilayaasha guryaha, hoteellada iyo makhaayadaha aannu adeegsanayno kula heshiinney in ay kharashka nagu baxa naga qaataan intii aannu heli karno, wixii nagu harana ay naga sugaan muddo saddex bilood aan ka badnayn. Sidaas ayaa shirkii noogu furmay.

## Shirweynihii Ergooyinka Beelaha Shanta Gobol

1998kii waxaa ka furmay magaalada Garowe shirweynihii ergooyinka ka socda shanta gobol, kuwaas oo tiradoodu gaaraysey 600. Waxaa guddoomiye loo doortay Islaan Maxamed Islaan Ciise, isla markaasna ahaa odayga gobolka Nugaal. Waxaa guddoomiye ku xigeenno looga dhigay afar xubnood oo ergada ka mid ahaa oo ka kala socdey afarta gobol ee kale. Waxaa xoghaynta shirka madax looga dhigay nin xil kas ah ee la yiraahdo Axmed Faarax Yare oo xubin ka ahaa jaaliyadda London ka timid.

Shirka waxaa ka soo qaybgalay dadkii hore isu diiwaan geliyey, goob-joogeyaal iyo marti sharaf. Maalintii ku xigtey waxaa la guda-galay ajendihii, waxaana mudnaanta kowaad la siiyey Mashruuca Dastuurka la soo jeediyey in uu noqdo sharciga lagu maamulayo Dawlad Goboleedka Puntland. Markii guddigii u xilsaarnaa soo gabagabeeyey bandhiggiisa ayaa ergooyinka loo furay in ay ka doodaan. Isla markiiba waxaa doodda isu diiwaan geliyey in ka badan saddex boqol oo ergay. Iyada oo la og yahay sida Soomaalidu u hadal jeceshay iyo sida ay hadalka ugu raagaan ayaa waxaa la xisaabay in ay mudda dheer qaadaneyso haddii intaas oo dhan hadalka la siiyo.

Dhaqanka beelahana qofna hadalka looma diidi karo. Taasina waxay ka mid tahay waxa uu I.M.LEWIS ku tilmaamay dimuqraaddiyadda reer guuraaga 'Pastoral Democracy'. Si mushkiladdaas looga gudbo waxaa lagu taliyey in shirka toddobaad la hakiyo oo gobol kasta fursad loo siiyo in uu gooni ahaantiisa Mashruuca Dastuurka uga soo doodo oo dabadeed shirka la yimaado aragti midaysan. Taasina way socon weydey oo gobol waliba dhexdiisa buu is khilaafay. Dabadeed waxay

noqotay in dooddii shirweynaha laga dhex furo. Arrintaasi waxay qaadatay mudda ka badan afartan iyo shan maalmood. Waxaa xusid mudan in dooddii dastuurka ee shirka ka socotey aad la isugu khilaafay, laba mowqifina la kala istaagey. Waxaase la isku raacay in iyadoo la dhawrayo xeer-dhaqameedkii, haddana habka maamul ee casriga ahna la tixgeliyo.

Intii doodda lagu jirey waxaan dareemay xanuun malaha ka dhashay shaqadii badnayd iyo shirarkii isdaba joogga ahaa ee aan galay tan iyo markii, sannad ka hor beerka la iga beddeley. Waxaa dabadeed khasab igu noqotay in aan Nayroobi baaris caafimaad u aado. intiise aanan tegin waxaan madaxdii halkaas ku sugnayd kula dardaarmay in wax kasta oo caafimaadkaygu ku danbeeyo, ay shirka sidii loogu talaggalay u wadaan, si looga gaaro natiijada wanaagsan. Nasiib wanaag wax hakad ah iyo wax kala go ahi kuma iman habsami u socodkii hawlaha shirka. Aniguna laba toddobaad gudohood baan Garowe dib ugu soo laabtay.

Barnaamijkii shirka waxaa la soo gabagabeeyey bisha Luulyo. Waxaa muran dheeri ka dhacay halkii noqon lahayd caasimadda dawlad goboleedka. Taas oo reer barigu ay ku adkaysteen in Bosaaso laga dhigo. Muran badan kaddib waxaa la isku afgartay in saddex arrimood daraadood Garowe laga dhigo. Magaalada Garowe waxay ku taal bartamaha Puntland, dhaqaale ahaanna waa ay liidataa, haddii aan degdeg wax looga qabanna dadku Boosaaso ayuu uga qaxayaa. Dood dheer kaddib waxaa aqlabiyad la isku raacay in Garowe laga dhigo caasimadda Dawlad Goboleedka Puntland. Dastuurka Dawlad Goboleedka Puntland waxaa saldhig u ah diinta islaamka, wuxuuna isugu miisaman yahay habka dimuqraadiga ah iyo xeer dhaqameedka.

Awoodda Dawlad Goboleedku waxay si isu dheellitiran ugu kala xilsaaran tahay saddexda qaybood ee kala ah Xeer-Dejinta, Fulinta iyo Garsoorka, kuwaas oo kala madaxbannaan. Waxaa dabadeed la galay dhismihii hay'adaha dawlad goboleedka. Waxaa lagu bilaabay qaybsashada xubnaha Golaha Xeer-Dejinta waana la isku waafaqay. Tan iyo marki uu shirku bilawday, waxaa magaalada ka socdey olole

doorasho. Martiqaadyada, shirar hoosaadka iyo ballanqaadyada musharraxiinta kala duwan ee tartanka ugu jira jagooyinka ugu sarreeya Dawlad Goboleedka waxay magaaladii shalay mugdiga ahayd ka dhigeen meel nololi iyo naruuro ay ka jirto. Arrimahaas oo mudda gaaban ku beddelay wejigii ay magaaladu hore u lahaan jirtey.

Waxaa xusid mudan in, tartamayaashii ugu magaca dheeraa ee ololaha doorashada ku jirey, ay illoobeen ama is illowsiiyeen in xaaladdii ay ogaayeen ama wax ku ahaayeen isbeddeshey, kaddib markii habka dhismaha dawlad goboleedku isu beddeley mid ka baaxad weyn kii saddexda gobol, isla markaasna uusan tilmaan u baahnayn shakhsiga ummaddaas oo dhan isu keenay, kaas oo toos ugu sharraxan ergooyinka shirka isugu yimid. Waxayse xaqiiqada ogaadeen goor danbe oo ay tacab iyo lacagiba uga baxeen ololaha, sidaas awgeedna tartankiiba way ka hareen, waxaase igala qayb galay tartankii dhawr qof oo kale, waxaana la igu doortay aqlabiyad. Maalin kaddibna waxaa Madaxweyne ku-xigeen loo doortay Maxamed Cabdi Xaashi oo ka soo jeeday gobolka Sool. Sidaas oo kale waxaa loo doortay Guddoomiyaha Golaha Sharci-dejinta Yuusuf Xaaji oo ka soo jeeday gobolka Sanaag.

Waxaannu ku dadaalney in si xaqa ah beeluhu wax u qaybsadaan. Gobolka Bari oo ugu ballaaran ayaa wuxuu isku darsaday Guddomiyaha Maxkamadda Sare, saddex meelood oo meel Golaha Wasiirrada oo tiradiisu dhammayd 9 iyo xubnaha Golaha Sharci-dejinta oo tiradiisu dhammayd 67 xildhibaan, Gobolka Nugaalna wuxuu qayb u helay Caasimadda Dawlad Goboleedka. Muddo saddex bilood ah waxaan ku dhammaystiray dhismihii maamulka, garsoorka iyo hay'adihii amniga. Inkasta oo ay dhammaantood heer bilaw ah taagnaayeen, haddana waxay ahayd tallaabo weyn oo muujisay in aan jidka qumman ku joogney oo tartiib-tartiib habkii dalka dib loogu soo celinayo.

Si loo daboolo baahida hay'adaha iyo guud ahaan kharashka maamulka waxaannu soo saarnay canshuuro aan bulshada culays ku ahayn, dhaqdhaqaaqa dekaddana aan wax yeelayn. Waxaannu door bidnay in la fududeeyo khidmdaha dekadda laga qaado iyo canshuuraha la saaray bedeecadaha kala duwan waxay sababeen in dhaqdhaqaaqa dekadda

Boosaaso noqdo kan ugu sarreeya ee dekadaha dalka ka jira, weliba iyada oo la og yahay in dekadda Boosaaso ay in door ah ka yar tahay saddexda dekadood oo kale ee dalka ka jira (Muqdisho, Berbera iyo Kismaayo). Markii aannu intaas isku dubbarridney ayaan waxaan u dhoofay dalka Liibiya oo waagii aannu halganka ku jirney taageero badan noo fidiyey. Si xushmad leh baa nalooku soo dhoweeyey. Dawladda Liibiya waxay noo fidisay taageera lacageed oo dhan hal milyan oo doolar. Shan boqol oo kun oo lacagtaas ka mid ah waxaannu ku bixinnay deynkii aannu ku galnay qabashada shirweynihii Garowe, intii hartayna waxaannu raasumal uga dhignay Bankiga Puntland. Markii maamulkii Puntland oo dhammi wada shaqo galay, ayaannu talo ku gaarney in aannu wax ka qabanno baabi' inta iyo boobista lagu hayo khayraadka dabiiciga ah iyo cawaaqib xumada ka dhalata oo ay ugu horreeyaan xaalufinta dhulka iyo wasakhaynta badda. Tallaabadaas oo, nasiibdarro, noqotay mid tabartayada ka weyn.

Markii dawladdii burburtay waxaa meesha ka baxay shuruucdii dalka ka jirtey iyo ciidammadii dhowristooda u xilsaarna, dabadeed birri iyo badba waxay noqdeen meel ayan cidina ilaalin. Sidaas oo kale, shufto shisheeye oo horror ah oo aan damiir xakamaynayn ayaa badda la dhexgashay maraakiib jiriif ah iyo farsamooyin kalluumaysi oo ka reebban aduunka. Isla muddada burburka lagu jirey, badda Soomaaliya waxay noqotay qashin-qub la helay. Wixii qashin ahaa ee warshadaha iyo isbitaallada dalalka horumaray ay soo tuureen oo meel la geeyo adduunka laga la' aa ayaa baddatan cidlada ah lagu soo qubay. Sidaasna waxay maanta badda Soomaaliya ku noqotay meelaha ugu khatarsan xagga caafimaadka. Waa wax lala yaabo in dalalka shidaalka hodanka ku ah iyo kuwa adduunka ugu hormarsani, ay si ka baxsan qawaaniinta caalamka ula dhaqmaan dalkaan burburay.

Markii aan tabardarradayada iyo khatarta badda nooga soo fool lehba ogaanney, ayaannu heshiis la galnay shirkad Ingiriis ah oo badaha ilaalisa oo la yiraahdo ' Hart Group' oo Khaliif Ciise Mudan wakiil ka ahaa. Heshiiskaasi wuxuu qorayey in ay badda ka ilaaliyaan kuwa sharcidarrada uga kalluumaysta iyo kuwa qashinka ku daadsha. Waxaa kale oo heshiiska ku jirey in ay dad noo tababbaraan, in ay fasax kalluumaysi oo habka adduunka waafaqsan bixiyaan, dakhliga laga

helana aannu wadaagno. Run ahaan, sannadkii ugu horreeyey shaqo fiican bay qabatay. Waxay tababbar heer sare ah siisay badmaaxyo gaaraya laba boqol oo qof, qalab aan badnayn bay keentay, wax un dhaqaale ahna way naga soo gaareen. Kol danbase tuhun baa nakala dhexgalay, heshiiskii baa burburay, shaqadiina waannu ku kala tagnay. Dabadeed heshiis la mid ah baannu la galnay shirkad reer Aasiya ah oo uu wakiil ka ahaa Cabdiweli Ali Taar oo reer Puntland ah, iyadana waannu ku fashilannay. Markii aannu aragnay in isku daygayagii meel gaari waayey, waxaan la xiriiray dawlado badan iyo hay'ado caalami ah, waase noo suuroobi weydey in aannu wax heshiis ah la gaarno.

Burcad Badeed waa arrin dawladaha waaweyn ay gacanweyn ku leeyihiiin aasaaskeeda iyo maalgelinteedaba. Dawladuhu waxay xeebaha Soomaaliyeed ka leeyihiin dano dhaqaale, kuwo siyaasadeed iyo kuwo tamareed (Energy) intaba. Meeshii kaalmo yar lagu siin lahaa DFKGS sida:

- Sugidda amniga xuduudaha dalka bad iyo berriba
- Gacansiinta dawlad goboleedyada si ay ula dagaalanka amni-xumada burcad-badeedka. Meesha ugu habboon in dagaalka laga miradhaliyo waa dhinaca berriga.
- In laga kaalmeeyo dawlad gobaleedyada dhinaca sharciyada iyo amniga. Xabsiyo dhisid iyo xarumo dhaqancelin, ayaa wax badan lagu toosin karay iyo
- In la abuuro goobo xirfad iyo meherado loogu abuuro dhallinyarda.

Codsiyadii iyo cabashooyinkii aannu u gudbinay (UN Security Council)ka nasiibdarro dheg-jalaq looma siin. Badweynta Hindiya iyo Xudeed Badeedka Soomaaliya waxay noqotay fagaare ay ku hardamaan dawladaha waaweyn ee ka soo jeeda xoogaggii ku hardami jiray dagalkii qaboobaa (Bari iyo Galbeed). Maanta maraakiibta dagaalka adduunka oo dhan waxay joogaan xeebaha Soomaaliyeed iyadoo qola kastaba ku andacoonayso inay ganacsigeeda iyo danaheeda ilaashanayso. Qolo kasta waxay u xusul-duubaysaaa inaan dhaca iyo boobka khayraadka dalkan looga dheerayn. Dawladaha waaweyn waxay u isticmaleen murtidii Soomaliyeed ee ahayd: ' Qawda maqashii waxna ha qaban' .

Maanta ayaa la guranayaa mirihii cawaaqib xumada ka dhalatay dayaca la baday badda iyo xeebaha Soomaaliyeed.
Inkasta oo aannaan ku wada guuleysan arrimo badan oo aannu dooneyney in aannu wax ka qabanno, haddana waxaa la oran karaa in muddo gaaban ay Puntland cagaheeda ku istaagtey. Sidaas awgeedna ku noqotay quwad dalka ka jirta oo tixgelinteeda leh. Waxay durba saamayn ku yeelatay Soomaaliya oo dhan. Taas oo aan ku ekaan dalka gudihiisa, balse u gudubtey dawldaha daneeya arrimaha Soomaaliya.
Dhismaha Puntland meelo badan oo dalka ka mid ah waa laga soo dhoweeyey, meela kale waa laga naxay, halka meelo kalena argaggax laga qaaday. Meelaha laga soo dhaweeyay waxaa ka mid ahaa Hiiraan iyo Jubbooyinka, kuwaas oo u arkay in dhismaha Puntland yahay tallaabo fiican oo ah tusaale lagu dayan karo. Kuwa ka naxay guusha Puntland waxaa ka mid ahaa qabqablayaashii Muqdisho haystey, kuwaas oo ku qoqobnaa fikrado qabiil kana soo horjeedey siyaasadda Puntland oo horseedaysay dib u soo noolaynta qarannimadii burburtay.Waxaa kale oo ayana diiddanaa horseedka Soomaalinnimada xambaarsan kuwa gooni u goosiga ku dhawaaqay.

Nasiib wanaag, dacaayad riqiis ah oo lagu oranayay in dhismaha Puntland yahay tallaabo cusub oo dalka lagu kala googoynayo waa isa soo tari weydey. Dacaayaddaas waxaa faafiyey rag ajnebi iyo Soomaali isugu jira oo khubaro sheegta, qaar ka mid ah dawladaha sida gaarka ah u daneeya arrimaha Soomaaliya iyo qabqablayaasha Muqdisho ku sugan. Annagu marna ma aannaan qaadin wax tallaabo ah oo dacaayaddaas lagu beeninayo, balse ficil iyo waxqabad dhab ah baannu ku beeninney. Puntland oo aan hal sano jirsan, baannu ku soo dhoweynay siyaasiyinta dalka oo dhan, si ay noola qaybsadaan waaya-aragnimada aannu ka helnay mudadii yarayd oo aannu habka cusub ku shaqayneyney.

Waxaannu u bandhignay halka wax noo marayaan, qorshayaasha aannu ku guda jirno, caqabadaha na hortaagan, si aannu fikradaha isu weydaarsanno. Inkasta oo awooddayada dhaqaale hooseysey, haddana wixii yaraa oo aannu haysanney baannu wax uun ka gaarsiinney badi madaxdii jabhadaha kala duwan ee na soo boqday.

Sidaas oo kale ayaannu gacan ugu fidinnay halgankii ay, reer Hiiraan iyo beelaha ku midoobay RRA, dhulkooda kaga saareen USC-garabka Caydiid oo xoog ku haystey. Tallaabooyinkaas oo dhammi waxay ka marakaceen in Puntland noqotay xarun qarannimada Soomaaliya horseed u ah. Bal dadka kale ha joogeene, waxaa la yaab leh geesinnimada ay qabqablayaasha Muqdisho noogu eedeeyeen gooni u goosashada, markii ay ayagu ku fashilmeen in ay magaalada isu furaan bal maamul goboleed ha noo danbeeyee.

## WALAALAHA JABUUTI (Shirkii 2aad)

Mar labaad bay 1999kii dawladda Jabbuuti soo dhex gashay siyaasadda Soomaaliya. Xasan Guuleed waxaa jagadii Madaxweynennimo ka beddelay Ismaacil Cumar Geelle oo ah nin dhallin yar oo ay odayga aad isugu dhow yihiin, horena xukunka loo soo barbaariyey. Ismaaciil waa nin aftahan ah, kuna hadla afaf badan, si fududna dadka uga dhaadhicin kara wixii uu doonayo. Xilliga uu xukunka qabanayo Jabbuuti waxaa ka taagnaa dhib dhaqaale iyo kuwo siyaasadeed oo aad u qallafsan. Sidaas oo kale, dagaal ba'an baa ka dhex socdey Itoobiya iyo Eretireeya oo deris la ah, kaas oo saamayn weyn Jabbuuti ku lahaa. Ismaaciil Cumar Geelle, wax dhug ah uma yeelan mashaakilka qallafsan ee dalkiisa iyo deriskiisaba ka jirey, balse wuxuu door biday, dan kasta ha ka lahaadee, in uu isku hawlo arrimaha ka taagan Soomaaliya. Haddii aannu dib u eegno xaaladda Soomaaliya waagaas ka jirtey, waxaa si fudud loo xaqiijin karaa in dalku marayey meel lagu farxi karo, haddii la barbar dhigo halkii uu taagnaa sagaalkii sano ee ka horreeyey. Sida la og yahay Soomaaliya waxay ka niyadjabtay shirarkii badnaa ee hore loogu dhigay oo aan wax natiijo ahi ka soo bixin, balse isu rogay kuwa xiisad hor leh dalka ka abuura. Waxaa sidaas ku bilawday aragti ah in ay Soomaalidu dib isugu noqoto oo iyadu dhexdeeda ka heshiiso, kana talabaxdo xal dibadda uga yimaada. Baadi goobkaas waxaa looga dan lahaa in aakhirka lagu gaaro dhismaha maamul hoos laga soo bilaabo. Waxaa lagu guulaysan waayey isku dayadii hore oo shacbiga maamullo kor uga keenayey. Waxaa talo lagu gaarey in habka oo hoos laga soo dhisaa, iyada oo gobollada dalka intii is oggoliba wada samaysato hab ismaamul

goboleed, dabadeedna Soomaaliyi meel isugu wada timaaddo oo u dhisato dawlad qaran oo ay raalli ka wada yihiin. Waxaa xaqiiqo ah in dhismaha hoos ka soo bilawda ee kor isugu yimaada, uu laba faa' iido leeyahay. Tan hore waxay tahay fursadda uu u siinayo ismaamul goboleedyada ama dawlad goboleedyada in ay arrimohooda hoose gaar u maamushaan oo ay uga madax-bannaanaadaan jiitanka maamul ee dawladda dhexe. Tan labaad waxay xaqiijineysaa midnimadii qaranka, hal abuurka xorta ah ee muwaadinka iyo horumar isu dheellitiran ee baahida shacbiga ku dhisan.

Tallaabadaas waxaa bilaabay, kuna guulaystey gobollada ku midoobaey dawlad goboleedka Puntland. Waxaa qaban-qaabadeeda ugu jirey gobolka Hiiraan iyo gobollada lixda ah ee galbeedka koofur Soomaaliya. Tallaabooyinkaas isa soo taraya ayaa marag-madoonto ka dhigaya geeddi socodka madaxabannaan ee uu shacbiga Soomaalidu u hawlgalay in ay gudahooda ka xallistaan dhibaatooyinka dalka ka jira. Kartida ay Soomaalidu u leedahay in ay gudaheeda iska abaabusho waa dowrka keli ah ee u furan si ay uga badbaaddo culayska faraggelinta dibadda lagaga hayo, isla markaasna ay masiirkeeda gacanta ku hayso. Inta jecel wanaagga Soomaaliya waxaa waajib ku ahaa in ay gacan ka geystaan habka dhismaha dawlad goboleedyada, kaas oo faa' iidadiisa muddo gaaban lagu arkay. Balse inta jecel nabadda iyo horumarka dalka loogama fadhiyin in ay furaan mowjado cusub oo lagu carqaladaynayo.

Waxaa dhacday wax ka duwan wixii laga filayey kuwa aannu saaxiibbada u haysanney. Waase ayaandarro in ay caqabado hor leh la yimaadeen. Ismaaciil Cumar Geelle oo la og yahay khibradda dheer ee uu u leeyahay sirdoonka run ahaanna tallaabo-tallaabo ula socdey wax kasta oo ka dhacaya Soomaaliya, si fiican buu u ogaa in 1999kii xaaladdii dalku ka soo raysay, dagaalladii istaageen, isu socodkii dadka iyo badeecaduhuba caadi noqdeen, meelo badan oo xataa Muqdisho ku jirto maalgelin xoog lihi ka socoto, waxyaalahaas oo dhammi soo dhoweyn kama helin Madaxweynaha Jabbuuti. Arrintaasna wuxuu ku muujiyey khudbaddii u ka hor akhriyey Shirweynigii Ummadaha Midoobay ee ka dhacay magaalada New York 1999kii.

Muddo yar kaddib, markii uu hubsaday in uu khudbaddiisii xoogaa khushuuc iyo soo dhoweyn ah ka helay, ayuu wuxuu ku dhawaaqay in dawladda Jabbuuti qabanqaabineyso shir dibu-heshiisiineed oo Soomaalida la isugu keenayo, si halkaas dawlad looga dhiso, sidaasna lagu soo afjaro dhibaatooyinka dalka ka jirey. Shirka Ismaaciil Cumar Geelle waxaa lagu qabtay degmada Carta oo Jabbuuti u dhow, sidii kii 1991kii Xasan Guuleed Jabbuuti ku dhigay.

Waxaa lagu talaggalay in shirku u dhaco laba qaybood. Mid la yiri wuxuu khaas u yahay indheer-garatada kaas oo looga doodayo xaaladda Soomaaliya, isla markaasna diiradda lagu saarayo wixii daraasaad ah oo Soomaaliya laga qoray, si dalka looga helo war buuxa oo saldhig looga dhigo doodaha shirka. Qaybtaan waxaa si qarsoodi ah loogu casumay dad la yiri waa khubaro oo laga keenay qaybaha kala duwan ee dalka, mase jirin cid lagala tashaday. Inta aan ka xusuusto Puntland waxaa ka tagay qaybtaas hore Cabdiraxmaan Sh. Maxamed Faroole iyo Axmed Cabbaas Shaacuur (Gacma-Gaab).

Markii laga reebo Faroole oo madasha shirka ka jeediyey dhaleecayn ku jihaysan Puntland iyo hoggaankeeda, isaga oo weji iyo mansab u gaar ah madasha ka raadsanayey , balse raggii kale si hufan bay doodihii uga qaybqaaten. Inta badan raggii madasha shirka yimid waxay dhaleecaynayeen gobolladii ay ka yimaadeen ayaga oo danahooda eexinayey. Waxay ku faraxsanaayeen talada Ismaciil gaar ahaan u gaaray oo uu shirka ka reebay in ay ka qaybqaataan maamullada dalka ka jira iyo kooxaha Xamar ku dagaallamaya.

Qaybta labaad ee shirka waxaa lagu talaggalay in lagu heshiisiiyo ergooyinka shirka ka soo qaybgelaya, dastuur cusub oo ku meel gaar ahna lagu ansixiyo, gole sharcidejin lagu dhiso, Madaxweyne lagu doorto, dabadeedna dalka dib loogu noqdo oo dawlad qaran lagu dhiso.Talo ahaan ma xuma, reer Jabbuutise isma weydiin sida qorshahoodu run ahaan uga tarjumayo xaqaa'iqa dalka ka jira. Arrimaha laga wado Shirka Carta oo dhan waxaa laga soo deyn jirey TV-yada Soomaaliya laga fiirsado, halkaas oo si joogta ah ay bulshadu ugala socon jirtey. Markii shirka lagu dhawaaqay ayaan waxaan booqasho ugu tegay Ismaciil Cumar Geelle. Waxaan weydiyey bal sida

uu ergooyinka u qorsheeyey iyo sida loo soo xulayo. Wuxuu ii sheegay in uu Muqdisho ka dhigay soddon degmo oo tiiba saddex qof tahay, laba rag ah iyo hal dumar ah, sidaasna ay ku yeelaneyso sagaashan xubnood; Hargeysa toban degmo oo tiiba tahay saddex qof , laba rag ah iyo hal dumar ah, sidaasna ay ku yeelaneyso soddon xubnood; Baydhabo shan degmo oo min saddex qof ah, laba rag ah iyo hal dumar ah, sidaasna ay ku yeelaneyso shan iyo toban xubnood; Kismaayo iyo Boosaaso min hal degmo oo min saddex qof ah, laba rag ah iyo hal dumar ah, sidaasna ay mid waliba ku yeelaneyso saddex xubnood.

Markii ay ii caddatay sida uu u kala door biday magaalooyinka, baan weydiiyey in kuwa uu ku yareeyey xubnaha ay yihiin magaalooyin dad yari deggan yahay ama aaney sidoodaba ahmiyad lahayn. Wuxuu iigu jawaabey in aan annagu (Daarood) hore dalka u dhacnay oo degmooyin badan samaysannay oo uusan hadda diyaar u ahayn in uu na siiyo degmooyin cusub. Markaas baan Ismaaciil ku iri, ma og tahay in Jabbuuti iyo Soomaaliya laba dal kala yihiin? wuxuu igu yiri, haa.

Ma og tahay in aad Jabbuuti Madaxweyne u tahay oo aadan Soomaaliya Madaxweyne u ahayn? wuxuu yiri, haa. Waxaan ku iri, waxaan kuu sheegayaa in aadan xaq u lahayn in aad Soomaaliya u magacawdid degmooyin iyo ergooyin, aadse xaq u leedahay, oo aad tahay nin walaalkayo ah in aad shir noo abaabushid oo markii aannu isu nimaanno wixii aannu isku qabanno nagu dhexdhexaadisid. Wax kale oo kaaga furan Soomaaliya ma ay jiraan. Waxaana kuu sheegayaa oo kale, haddii aad tiri shirka kama soo qaybgelayaan maamullada dalka ka jira iyo kooxaha hubaysan oo aad ku magacawday qabqablayaasha, yey yihiin kuwa kale oo aad shirka u qabanaysaa oo dalka awood ku leh?. Markii aannu isgaranweyney waannu is macasalaamayney waa aanuna kala tagnay. Markii aan Boosaaso tagay waxaan shir gooni-gooni ah la yeeshay golihii xukuumadda Puntland iyo madaxdhaqameedkii, waxaana u sheegay wixii aan kala soo kulmay Jabbuuti. Qaar badan oo ka mid ahaa waxay soo jeediyeen in lagu dhawaaqo in shirka Puntland ay qaadacday. Waxaan ku iri inta aynaan go'aanka ku degdegin bal aynnu mar kale isku dayno in aynnu Ismaaciil kala hadalno sida uu wax u wado.

Halka ay Puntland si feejigan u dersaysey waxa Jabbuuti ka socda, Maxamed Xaaji Ibrahim Cigaal oo Madaxweyne ka ahaa Soomaliland, wuxuu furtay afkiisa oo cambaarayn dusha uga tuuray Madaxweynaha Jabbuuti, isaga oo weliba ku eedeeyey in shirka Jabbuuti yahay shirqool lagu baabbi' inayo gooni isutaagga Soomaaliland.

Cigaal wuxuu yiri: ' Haddii ina Cumar Geelle uu doonayo in uu dib u soo nooleeyo Soomaaliweyn, bal horta ha ku dhawaaqo in ay Jabbuuti ka harayso xornimadeedii oo wixii hadda ka danbeeya ay noqoneyso gobol ka mid ah Soomaaliya'. Eedayntaas kaddib, wuxuu ku dhawaaqay dhowr tallaabo oo cadaadis lagu saarayo dadka reer woqooyiga ah oo uu uga digayo in ay shirka Jabbuuti ka qaybgalaan. Sidaas oo kale, waxaa shirka dhaleecayni uga timid qabqablayaasha isku haysta xukunka Muqdisho.

Cismaan Caato wuxuu Ismaciil ugu baaqay in uu ka noqdo qaabka uu shirka u agaasimayo oo ah mid aan wax natiija ah laga gaarayn, oo aaney talada dalku markaan ku xirnayn ururrada bulshada, madaxdhaqameedyada iyo shakhsiyaadka suuqa laga soo ururiyey oo shirka la isugu keenay. Wuxuu dabadeed ka codsaday Madaxweynaha Jabbuuti in uu xaqiiqada wajaho oo haddii ay dhab ka tahay in uu qabto shir dibu-heshiin Soomaaliyeed, uu miiska isugu keeno dadka xaqiiqa ahaan talada dalka isku haysta, kuwaas oo xalka Soomaaliya uu ka iman karo. Wuxuu ugu danbayntii kula taliyey in uusan isku daalin wax ka duwan talada uu u soo jeediyey.

Muuse Suudi oo isaguna arrinta ka hadlay wuxuu isticmaalay erayo ka mid ah kuwii uu caanka ku ahaa "Ar xaggee la geyhaa dawladda Jabbuuti lagu dhisayo". Isaga oo oraahdaas ka wada in aan Muqdisho la keeni karin. Muuse ma oran in dawlad Jabbuuti lagu soo dhisayaa aaney dalka ka shaqayn doonin, balse fikraddiisa wuxuu ku cabbiray waxa uu aamminsan yahay oo ah in Soomaaliyaba Muqdisho kaliya tahay. Sidaas oo kale ayay qabqablayaashu uga soo hor jeesteen qaabka Ismaacil wax ku wado.

Puntland, waxay wafdi ka kooban saddex wasiir u dirtay Jabbuuti. Kuwaas oo kala ahaa Xasan Abshir Faarax, Cali Ismaaciil Cabdi-Giir iyo Axmed Maxamed Cigaal. Wafdigaas baan dhambaal ugu sii dhiibay Ismaaciil Cumar Geelle, kaas oo aan kula talinayo in uu shirku noqdo mid loo dhan yahay, oo ay ka soo qaybgalaan maamullada dalka ka jira , kooxaha hubaysan iyo bulshada rayidka ah. Isla markaasna in aad oggolaatid in madaxdaasi ay ergooyinkooda soo xushaan oo aadan adigu u soo xulin. Ismaaciil markii uu dhambaalkii akhristay waa ku gacansayray taladii aan u jeediyey. Wafdigii aannu dirnay wuxuu noo keenay qaylodhaan iyo canbaarayn ay ku eedaynayaan Ismaaciil Cumar Geelle. Waxaan weydiiyey haddii ay arrintu sidaas tahay maxaad ku talinaysaan?.

Waxay iigu jawaabeen in Puntland shirka qaadacdo, meel kastana ay ka sheegto. Maalin kaddib baan golaha xukuumadda shiriyey, waxaan Xasan Abshir ka codsaday in uu warbixin ka siiyo wixii wafdigu uu Jabbuuti kala soo kulmay. Xasan sidii uu horay iigu sheegay buu golihii ugu warbixiyey, taladiisiina wuu dhiibtay. Golahii wasiirradu waxay isku raaceen in shirka la qaadaco. Golaha waxaan u sheegay anigoo aragtidaas la qaba in ay ii oggolaadaan in markaan London aadayo sii maro Jabbuuti oo mar saddexaad isku dayo in aan wax dhacsiin karo. Sidii baan yeelay isaguna mawqifkiisii buu ku adkaystay. Waxaan dabadeed ku iri, ' Mudane Madaxweyne annaga nagu tashan maysid' .

London markaan ka soo noqday waxaan soo maray Itoobiya, waxaana u sheegay in ay Puntland saddex goor isku dayday in ay arrimaha shirka kala arrinsato Ismaaciil Cumar Geelle, talo kasta oo aannu u soo jeedinnose si uu shirku u hagaago ma uusan yeelin. Waxaa noo caddaatay in shirku gaar u yahay Madaxweynaha Jabbuuti oo Soomaalidu wax talo ah ayan ku lahayn. Wasiirka Arrimaha Dibadda ee Itoobiya Seyoum Mesfin wuxuu ii soo jeediyey in aan labadayadu tagno Jabbuuti. Waxaan ku iri raalli ahow, waayo hadal iiguma laabna Ismaaciil. Mesfin waa tagay waxay ka wada hadleen iyo wixii uu kala kulmay waan u war la' ahay.

Markii aan Garowe tegay waxaan golahii xukuumadda ku wargeliyey in uusan ninku is-afgarad diyaar u ahayn oo ay hadda nala gudboon tahay in aynu go'aankii aynu arrintaan hore uga gaarney aan fulinno. Waxaa kale oo aannu go'aan ku gaarney in qofkii reer Puntland ah oo shirkaas ka qaybqaata aannaan aqoonsanayn. Sidaas oo kale, gegida dayuuradaha iyo dekadahayaga waan ka mamnuucnay in shirkaas looga dhoofo. Muddo kadib golaha wasiirada oo shir leh ayaa Xasan Abshir noo soo jeediyey in go'aankii qaadacaadda ahaa oo shirka laga qaatay laga noqdo oo shirka laga qaybgalo. Waa la wada yaabay. Xasan Abshir wuxuu ka mid ahaa raggii ugu firfircoonaa oo Puntland dhismaheeda qaybta weyn ku lahaa. Waa ninkii wafdigii aannu Jabbuuti u dirnay madaxda ka ahaa, waa ninkii soo jeediyey talada shirka lagu qaadacayo. Waxaannu garan weyney waxa isbeddelkiisaan ugu wacnaa. Raggii shirka fadhiyey oo dhan waxay ka xumaadeen mowqifka Xasan.

Laba maalmood kaddib Xasan istiqaalo buu ii keenay. Waxaa yaab lahayd markii uu xaafiiska soo galay warqaddii buu miiska ii saaray oo isaga oo aan ila hadlin albaabka ka baxay. Muddo gaaban kaddibna Dubai buu u duulay, halkaas oo uu ugu tegay Cabdullaahi Axmed Caddow, oo danaynayey in uu shirka Jabbuuti uga tartamo Madaxweynennimo. Labada nin waxay ku heshiiyeen in Xasan ol' ole u galo sidii Caddow lagu dooran lahaa, isaguna Ra'iisul Wasaare uga dhigi lahaa. Markii heshiiskaas oo Aadan Maxamed Cali goobjoog ka ahaa uu dhacay saddexdoodii waxay soo aadeen shirka Jabbuuti.

Shirkii waa furmay waxaana ka soo qaybgalay dhawr boqol oo qof oo isugu jira ururro bulsho, madaxdhaqameedyo, dumar, culamaa'uddiin ay ugu muuqaal weynaayeen Al-islaax, ganacsato, siyaasiyiin iyo qurbajoog. Waxaa shir guddoomiye loogu doortay Xasan Abshir Faarax. Mar ergooyinka qaarkood shirka iska dhex taageen, kuna qayliyeen in loo yeero dadka dalka wax ka ah oo shirka ka maqan baa Xasan Abshir ku yiri dadkaas wixii ka maqan loo joojin maayo ee ha la wado shaqada. Eraygaas oo Soomaalidu halhays ka dhigatay markii ay rabaan in ay wax xoog ku marsiiyaan. Shirku wuxuu xirmay markii ajandadii loogu talaggalay soo gabagabowday.

Dabadeed waxay beeluhu qaybsadeen xubnihii uga qaybgeli lahaa golaha sharcidejinta ee TNG. Shirkoodii ugu horreeyey waxaa guddoomiye loo doortay Maxamed Abshir Muuse oo ugu da' weynaa. Dabadeed waxaa guddoomiye rasmi ahaan loogu doortay Cabdalla Deerow Isaaq oo ka tirsanaa beesha Raxanweyn. Markii dhismihii baarlamaanka la isku raacay, waxaa la gudaggalay doorashadii Madaxweynaha. Rag badan baa jagadaas u tartamay, waxaase aakhirkii isugu soo baxay labadii tartame oo ugu cod batay. Kuwaas oo ka la ahaa Cabdiqaasim Salaad Xasan iyo Cabdullaahi Axmed Caddow oo labaduba ka tirsan yihiin beesha Hawiye. Waxaa doorashadii ku guulaystey Cabdiqaasim Salaad Xasan. Maalmo kaddib Ismaaciil Cumar Gelle wuxuu qabanqaabiyey xaflad weyn oo madaxda gobolka qaarkood ka soo qaybgaleen oo Cabdiqaasim lagu caleemasaaray.

In kasta oo dhismaha TNG dib u dhac u keentay Soomaaliya, Ismaciil Cumar Geelle wuxuu gaarey guul. Taas oo uu ku kasbaday in uu afhayeen ka noqdo arrimaha Soomaaliya oo adduunka looga danbeeyo. Cabdiqaasim iyo Ismaaciil waxay isku raaceen waddammo Carbeed, kaddibna waxay isu raaceen New York si uu khudbad uga jeediyo adduunka hortiisa, halkaas oo uu ku noqday Madaxweynihii ugu horreeyey muddo 10 sano ah oo Soomaaliya madasha adduuka ka maqnayd. Qof ahaan si fiican baan u aqiin Cabdiqaasim oo waxaannu wada joogi jirney Moosko oo uu Jaamacad ka dhigan jirey, aniguna aan kaga jirey kulliyadda sare ee abbaanduulka ciidammada isla markaasna aan Safaaradda Soomalida aan u ahaa ku-qaybsanaha arrimaha ciidammada (Military Attache).

Cabdiqaasim xilligaas wuxuu sheegan jirey Marxist-Leninist. Isaga iyo dhawr saaxiibbadiis ah oo ay ka mid yihiin Axmed Cabdi Xaashi (Xasharo) iyo Xuseen Saalax waxay ahaayeen niman firfircoon oo shirarka ka hadla, hantiwadaagga cilmiga ku dhisan faafiya. Tusaale: Cabdiqaasim wuxuu wasiir u noqday Maxamed Siyaad Barre bilowga 70aadkii, markii uu sheegan jirey Marxist-Leninist, sidaas oo kale wuxuu wasiir u ahaa markii uu Siyaad Barre ka baxay hantiwadaagga, wuuna la shaqaynayay tan iyo burburka Taliskii Siyaad Barre. Waxaa qeexan in siyaasiyiin badan ayan fikradahoodu wax mabda' ah ku xirnayn.

Cabdiqaasim dawladdiisii buu Muqdisho keenay Iyada oo aan haysan dhaqaalihii ay wax ku qaban lahayd. Kaddib gurigiisii buu xaafiis ka dhigtay hawl-wadeennadii la socdayna magaalada ayay degeen. Muddo gaaban kaddib Cabdiqaasim iyo Ra' iisul Wasaarihiisii Cali Khaliif arrimmo aan yarayn bay isku afgaran waayeen, siiba maamulka dhaqaalaha ay ka helaan deeqbixiyayaasha. Khilaafkoodaasi wuxuu gaaray heer ay isku eedeeyaan warbaahinta dalka. Cabdiqaasim kolkaas wuxuu xal biday in uu jagada Ra' iisul Wasaare u dhiibo Xasan Abshir. Muddo kaddib xalkaasi ma uu noqon mid qanciya Madaxweyne Cabdiqaasim, taas oo keentay in jagada Ra' iisul Wasaare loo magacaabo Maxamed Cabdi Yuusuf.

Loollankaas siyaasadeed ee fiinta maamulku wax saamayn ah kuma yeelan dadweynaha, maxaayeelay barnaamij u danaynaya danaha bulshada ayaan ka dhex muuqan is-afgaranwaaga dhexyiil madaxda. TNG waxay ka dhalatay caadifad iyo dano Ismaciil Cumar Gelle gaar u ah. Isbeddelladeeduna waa astaan ka mid ah qaabka ay ku dhisantay. Shirka lagu dhisay waxaa la sheegay in ay ka soo qaybgelayaan oo keli ah ururrada bulshada, markii taladaasi ay socon weydeyna waxaa loo beddelay shir beeleed. Markii hay'adihii qaranka la dhisayna TNG waxay isu beddeshay xukuumad ay hoggaanka u hayaan xubno ka tirsanaan jirey taliskii Siyaad Barre ee dalka rogey. Markii hoggaankani fashilmay TNG waxay gacanta u gashay dhaqdhaqaaqyada kala duwan ee diiniga ah iyo ganacsatada burburka dalka ka taajirtey.

## GOLAHA DIBUHESHIISIINTA IYO DIB U SOO NOOLAYNTA SOOMAALIYA (The Somali Restoration and Reconciliation Council SRRC)

Markii ay ii caddaatay in tallaabada Jabbuuti qaadday oo ay ku dhistay TNG, ay tahay mid lagu curyaaminayo habka hoos ka soo dhiska degmooyinka iyo gobollada oo Puntland laga hirgeliyey, meelo badanna qabanqaabadiisa lagu gudajirey, taas oo iila muuqatay wax aan la qaadan karin. Waxaa kale oo ii muuqday in TNG oo aan ka talin kulay ku tahay xaafad Muqdisho ka mid ah ay boobtay saldanadii qaranka, shirarkana kaga qaybgasho magaca Soomaaliya. Intaas oo

dhan markii aan arkay baan waxaan goostay in aan xil iska saaro sidii aan u abaabuli lahaa xoogagga dalka ka jira oo dhan si aan uga hortagno maaweelada Ismaaciil Cumar Geelle ku wado Soomaaliya iyo sidii aannu adduunka u tusi lahayn in TNG-du aysan Soomaali ka wakiil ahayn. Sidaas darteed waxaan Puntland ku casumay hoggaamiyayaal kala duwan oo ka kala yimid qaybaha Soomaaliya, waxaannuna meel isla dhignay in khilaalaafaadka naga dhexeeya meel iska dhigno oo danta Soomaaliweyn loo soo jeesto.

Dad badan baa arrintaas igu dhaleeceeyey, iyaga oo leh dadkii dawladnimada Soomaaliya hortaagnaa buu hor fariistay. Dhaleecayntaas dheg uma aanan jalaqsiin oo waxaan ahmiyadda siinayey in ayada oo la kala aragti duwan yahay danta dalka la isugu yimaado oo wax walba laga hormariyo. Dadaalkii aan wadey wax weyn buu taray oo waxaa adduun-weynihii ogaadey in xoogaggii dalka oo dhammi TNG dibadda ka yihiin, sidaas awgeedna kuwii doonayey in wax un ay la qabtaan ay quusteen, oo ay u caddaatay in aan TNG ayan meesha waxba ku hayn.

Itoobiya oo jecel in ay mar walba lug kula jirto xaaladda Soomaaliya, jecelna in ay ka faa' iidaysato markasta oo ay u muuqato meel ay ka soo geli karto. Iyada oo xaaladda cusub ka faa' iidaysanaysa bay ila soo xiriirtay. Waxay igu tiri in TNG baaba' ku dhowdahay oo loo baahan yahay in maamullada dalka ka jira iyo kooxaha kaleba iyaguna diyaar u noqdaan in ay gogosha dhigaan kharashkana bixiyaan. Sidii la isku afgartay dhammaan siyaasiyiintii oggolaatay shirka waxay isugu yimaadeen Addis Ababa.

Hab-socodka shirku wuxuu yeeshay sawirkii Sodere oo 1997kii Itoobiyaanku abaabuleen. Mudda yar markii Addis Ababa la joogey, Itoobiyaankii waxay noo soo jeediyeen in shirka lagu qabto tulada Awaase oo ku taal koofurta Itoobiya, Addis Ababa-na u jirta 300km. Awaase waa meel biyo iyo buuro badan oo lagu nasto. Markii shirku noo bilawday, sidii caadada u ahayd ururrada Soomaaliyeed, waxaa lagu murmay ciddii guddoomiye ka noqon lahayd iyo magacii ururka la dhisayo loo bixin lahaa.

Waxaase lagu guulaystey in la dhiso urur kulmiya mucaaradka, kaas oo loo bixiyey Somali Restoration and Reconciliation Council SRRC, hoggaan isu dheellitiranna waa loo disay. Habargidir iyo Abgaal baa isku qabsaday guddoonka golaha dhexe ee ururka. Markii maaro loo waayey, Itoobiyaanka baa na soo dhexgalay oo nagu heshiisiiyey in la sameeyo guddoon meerta ah, kuwaas noqonaya wakiillo ka kala socda shanta beelood ee awood qaybsiga dalku ku jaan go'an yahay. Waxaa meeshii lagu magacaabay shan guddoomiye iyo shan la-guddoomiye oo ka kala socda shanta beelood. Dastuurka Puntland wuxuu qorayaa in aan Xukuumaddeedu ka qaybgeli karin ururro ay isugu yimaadaan kooxo siyaasadeed, sidaas awgeed Puntland waxay ku qanacday in ay wakiil ku yeelato golaha dhexe ee ururka, si ay ula socoto hawlaha ururkaas. Waxay Puntland jagadaas ugu magacaabatay Dr. Yuusuf Cumar Azhari.

Markii la dhammaystiray magacaabistii xubnaha guddoonka ururka, waxaa lagu murmay meeshii laga dhigi lahaa xarunta ururka, arrintaasna waxaa lagu gabagabeeyey in laga dhigo Baydhabo oo wakhtigaas maamul laga dhisayey. Sidaas ayaa SRRC ku samaysatay maamul adduunka ula xiriira, si xilkasnimo lehna u dhowra isku duubnaanta ururka. Sida keli ah oo ay Soomaaliyi u yeelan karto cod muuqda oo ay dawladaha iyo ururrada caalamiga ah kula xiriiri karto. Markii aannu shirkii soo gabagabayney, waxaannu tagnay Addis Ababa, halkaas oo aannu dawladda Itoobiya ku wargelinney go'aannadii aannu shirka ku gaarney, arrintaas oo ay soo dhoweeyeen.

Aniga iyo intii ila socotey waxaannu ku noqonnay Puntland, intii kalena waxaa loo qaaday magaalada Baydhabo. In muddo ah xafiiskii Baydhabo si fiican buu u shaqeeyey, nasiibdarrose waxaa saamayn ku yeeshay qalalaase ka dhex dhacay RRA dhexdeeda, qalalaasahaas oo dabadeed isu rogey gacan ka hadal iska horkeenay Shaati Guduud oo SRRC ka tirsan oo dhinac ah iyo Aadan Madoobe iyoMaxamed Ibraahim Xaabsade oo dhinac ah, kuwaan oo heshiis hoosaad la galay TNG-da Cabdiqaasim. Dagaal xun baa magaalada Baydhabo ka qarxay, Shaati Guduud wuxuu ku guulaystay in isbahaysiga Aaden Madoobe iyo Xaabsade uu magaalada ka saaro, balse TNG iyo Indhacadde ayaa gurmad degdeg ah la soo gaarey, kaas oo ay dib magaalada ugu

qabsadeen. Markii Baydhabo lagu kala tegay, waxaa adkaatay meeshii ururka la dejin lahaa, dabadeed ururkii wuxuu iska noqday magac aan waxba ka danbayn. Nasiibdarro, waa markii labaad oo qaybaha kala duwan ee maamullada iyo ururrada siyaasadeed ee dalka ka jiraa ku guuleysteen dhismaha hay'ad midaysa oo ay qarannimadii ku baadi-doonaan oo lagu baabbi' inayo khiddado meelo kale laga soo abaabulay. Tani waa dersi kale oo muujinaya in aan Soomaalida loo oggolayn in ay tashato; waana arrin la hubo.

## ISKU DAYGII MAJAXAABINTA PUNTLAND 2001

Dhinac kasta oo laga eego, saddexdii sano oo ay Puntland dhisnayd, waxay noqotay taabbaggal . Waxaa soo baxay xoogag badan oo u arkay in jiritaankeedu uu ka horjeedo maslaxadahooda. Xoogaggaasi waxay intaa doonayeen daldoloollo dhexdeeda ka soo baxa oo abuura khilaaf gudeheeda ah. Sida la og yahay, Puntland waxaa loo sameeyey dastuur casri ah oo ka sarreeya marxaladdii lagu jirey, kaas oo xamaasaddii ka abuurantay dedejinta dhismaha hab looga gudbi karo burburkii jirey awgiis sababay in aan si habboon looga baaraandegin.

Dastuurku wuxuu qorayaa in muddada saddexda sano ah oo dastuurkani ku eg yahay, lagu sameeyo tiro koob, xisbiyo iyo doorasho. Haddii la samayn waayana in xukunka loo wareejiyo guddoomiyaha maxkamadda sare, kaas oo bil gudaheed ku abaabulaya shir ay isugu yimaadaan ergooyin ka tirsan beelihii Puntland soo dhisay oo ay isimmadu ansixiyaan. Sida la garan karo isuma dhigmaan baaxadda hawlahaasi leeyihiin iyo waqtiga yar ee la go' aamiyey in lagu fuliyo, iyo waliba tabar darrada xukuumadda curdanka ah ee laga sugayo in ay fuliso hawlahaas. Markii muddadii saddexda sano ahayd dhammaatay oo aan waajibaadka kor xusan waxba laga qaban ayaan fariisiyey Golihii Sharcidejinta Puntland, kuwaas oo dood kaddib aqlabiyad buuxda ku ansixiyey in saddex sano oo hor leh muddada dastuurka lagu daro. Markaas baan anigoo aan saxiixin go'aankii Baarlamaanka waxaan isugu yeeray Is'imadii dhaqanka, waxaana hor dhigay Go'aankii Baarlamaanka, waxaa ayiday 54 Isim go'aanka

kordhinta Saddexda sano ee Baarlamaanka, waxaase diiday tobaneeyo Isim oo uu hogaaminayo Islaan Maxamed Islaan Muuse oo ay lasoo xiriireen maamulkii Cabdiqaasim ee Muqdisho, maamulkaas oo lacag badan ku bixiyey in la burburiyo dawlad goboleedka Puntland oo kaddibna iyadoo shan gobol loo kala qaybiyey, gobol walba gaarkiisa Muqdisho loo hoos geeyo, ayaan darro dadka hawshaas ka shaqaynayey waxaa ka mid ahaa rag Cabdiqaasim maamulkiisa ku jiray laakiin reer Puntland ah, aniguse waxaan raacay go'aanadii aqlabiyadda Baarlamaanka iyo Isimada Puntland oo go'aankii baan saxiixay.

Isimadii yaraa oo Islaan Maxamed hogaaminayey waxay ku tallaabsadeen afgembi ay ku sameeyeen dawladdii Puntland iyo maamulkeediiba. Go'aankaasi wuxuu abuuray xiisad ka dhalisay Puntland qalalaasihii lala doonayey oo dagaal la isaga hor yimid. Taas oo ay ka faa'iidaysteen xoogaggii doonayey in ay Puntland burburto. Kuwee bay ahaayeen xoogaggaasi? Annagu aqoon buuxda baannu u lahayn kuwa ay dhibtay jiritaanka Puntland, kuwaas oo isugu jira dawlado, dhaqdhaqaaqyo kala duwan ee diini ah, hay' ado dawli ah, kuwo goboleed iyo kuwo maxalli ahba.

Puntland ahaan, waxaannu ku hawllanayn horumarinta Puntland iyo ka hortagga shirkii Carta oo lagu dhisayey dawlad maqaarsaar ah oo loola jeedey in lagu burburiyo maamulladii dalka ka dhismay iyo kuwa ka dhismayey, lagagana hortago geeddi-socodka ka bilowday dalka gudihiisa laguna tiigsanayay dhismo dawlad qaran. Nasiibdarro ma aanan ogeyn in mar hore nala dhex galay. Sidii ay Soomaaliya u burburtayba dawladaha daneeya arrimaha dalka, waxay ka dhex samaysteen wardoon iyo basaasiin ay kula socdaan xaaladda Soomaaliya, isla markaasna ku fushadaan wixii ay ka doonayaan.
Dhismaha Puntland wuxuu wax badan ka beddelay fikraddii hore laga haystay Soomaaliya, taas oo ahayd in mustaqbalka Soomaaliya ku xiran yahay sida wax isaga beddelaan arrimaha Muqdisho ka taagan iyo waxa ay ku danbayn doonto xaaladda gooni u goosatada Woqooyi Galbeed. Puntland waxay bedeshay aragtidaas, oo hal maamul bay isugu keentay shan gobol oo ka mid ah gobolladii burburka hortiis dalka ka jiray.

Isla markaasna ay ku dhawaaqday in ay degdeg ugu tallaabsato sidii dalka nabad loogu soo dabaali lahaa, qarannimadiina dib loogu soo noolayn lahaa. Sidaas awgeed, waxay soo jiidatey danayntii adduunka. Dawladahaas waxaa ka mid ah Itoobiya, Kenya, Masar, Yemen, Liibiya, dawladaha Khaliijka. Waxaase kala duwan danaha ay ka leeyihiin iyo sida ay doonayaan in ay uga fushadaan. Haddii aan si kooban u guud maro faraggelinta dawladahaas, waxaan oran karaa: Itoobiya, waxa ay danaysaa in ay dalka ka dhismaan maamullo yar yar oo aan midnimadoodu waxyeeli karin. Midnimada ka soo baxdana aanay yeelan karin awood ay boorka kaga soo jafto siyaasaddii Soomaliweyn oo ah laf dhuunta kaga taagan Itoobiya.

Sidaas awgeed, Itoobiya waxay muujisay in ay diyaar u tahay in ay si feejignaan leh gacan uga gaysato dhismaha maamul goboleedyada si aysan shiddo uga imaan xadduuddaha muranka ku jira oo u dhaxeeya labada dal, sidaasna ku xakamayso taageero Soomaali Galbeed uga timaadda dalka Soomaaliya. Halkaas waxaa ka caddaan kara in ayan Itoobiya lug ku lahayn qalalaasaha Puntland ka dhacay. Taas beddelkeeda waxay gacan naga siisay sidii aannu Puntland u xasilin lahayn.

Masar, siyaasaddeedu waa sidii dib loogu soo noolayn lahaa dawladnimada Soomaaliya oo ay iyaduna ula yeelan lahayd xiriir sokeeye. Waxaase jirta in Masarta maantu ayan lahayn sumcaddii iyo karaamadii ay Soomaaliya ku lahayd. Sidaas awgeed waxay door bidday in ay ka shaqayso sidii Soomaaliya ay u kala daadsanaan lahayd, waxayna isku qancisay in sii socoshada qalalaasaha Soomaaliya ka jira uu uga roon yahay jiritaanka dawlad Soomaaliyeed oo aan Masar ku xirnayn. Sababtoo ah, qalalaasaha Soomaaliya ka jiraa wuxuu welwel joogto ah ku hayaa degganaanshaha Itoobiya oo ay Masar isku haystaan adeegsiga biyaha webiga Niil oo ay Masar qayb libaax ka qaadato.

Dawladaha Masar ku haysta adeegsiga biyaha Niil kuma eka Itoobiya oo keli ah, balse waxaa jira dhowr dal oo kale oo webigu maro oo iyaguna saamigooda doonaya, kuwaas oo hore haybaddeeda darteed uga dhawrsan jirey.

Masar Soomaaliya waxaa ay ka doonayso waa in ay weligeed ahaato xoog khatar ku ah Itoobiya si ay awoodeeda oo dhan Soomaaliya ugu soo jeediso, meelna iska dhigto waxa u dhaxeeya iyada iyo Masar. Arrintu iyada oo aanay naga dahsoonayn baa safiirka Masar Addis Ababa u fadhiya mar uu martqaaday madaxdii Soomaaliyeed ee ka qaybgashay shirkii Sodere ayuu u dulamary siyaasadda Masar ka leedahay Soomaaliya. Hadalkiisii wax aannan ogeyn naguma soo kordhin, wuxuuse naga codsaday in Soomaalidu la difaacdo biyaha Niil. Hadalkii intaan qaatay baan ku iri, ' Mudane danjire, arrimaha biyaha Niil ee ka dhaxeeya idinka iyo Itoobiya, kuwo la mid ah baa annaga iyo Itoobiya naga dhaxeeya'. Waadna og tahay in webiyada Jubba iyo Shabeelle oo laf dhabarta u ah jiritaanka Soomaaliya ay ka soo bilowdaan buuraha Itoobiya oo aannaan ku heshiin isticmaalka biyaha, taasna waa la garan karaa muranka iyo khilaafka ka dhalan kara.

Marka waxaa loo baahan yahay in aynnu wada daafacno webiyada aynnu isticmaalkooda ku muran sanahay innaga iyo Itoobiya oo aanay xaq ahayn in aad nagu tiraahdid webiga Niil keli ah ha la daafaco." Danjirihii intuu aad ii fiiriyey buu igu yiri: ' Adigu waxaad tahay ninka Soomaali ugu khatarsan oo aan weligey la kulmay'. Waxba kama aanan oran hadalkiisii waayo ma mudnayn in aan ka jawaabo. Sidaas awgeed Masar waxay mar kasta gacmo furan ku soo dhoweysaa kooxaha aan siyaasaddeeda ka fogeyn, waxay ka soo horjeedaa maamullada kale ee siyaasaddeeda saluugsan.

Kenya, aad bay arrimaha Soomaaliya u danaysaa. Sida Itoobiya ma jecla in ay dhalato dawlad Soomaaliyeed oo xoog leh, waxayse kaga duwan tahay Itoobiya uma qabto Soomaaliya colaad qoddo dheer. Waxay ku dadaashaa in ay ka faa'iidaysato dhaqaale ahaan dhibaatooyinka Soomaaliya. Sida la og yahay kaalmada adduunku Soomaaliya ugu deeqo waxaa lagu maamulaa dalka Kenya. Sidaas oo kale waxay dhiirrigelisaa sidii ganacsatada iyo maalqabeennada Soomaaliyeed ay maalgashi ugu samaysan lahaayeen Kenya. Labadaas arrimoodba way ku guulaysatey. Marka ma ay jecla dawlad Soomaaliya ka dhalata, waxayse doonaysaa in xaaladda Soomaaliya ka jirtaa aysan waxba iska beddelin, xiriir fiicanna la yeelato Soomaaliya oo dawlad la'aan ah.

Waxaa xusid mudan in 1991kii xilligaas oo dagaalada sokeeye marayeen heer gumaad iyo dhallaangawrac ah ay dawladda Kenya soo dhoweysey kumanyaal qaxooti ah. Ma ayan ahayn qaxooti caadi ah ee waxay ahaayeen baxsad xabbad lala daba joogo. Nabad waxaa ugu horraysey kolka ay soohdinta ka tallaabaan, taas lafteedu ma ahayn badbaado dhab ah oo waxaa dhici jirtey, marar aan yarayn, sida dhacdadii Beledxaawo halkaas oo inta looga daba tegey gudaha Kenya la soo qabqabtay oo la laayey. Dadkaas baydadka ahaa, muddo kaddib, markii ay nabad iyo xorriyad shaqo dawladda Kenya ka heleen waxay abuureen hawlo ganacsi iyo xirfado kala duwan oo dowr weyn maanta kaga jira kobcinta dhaqaalaha iyo horumarka guud ee dalkii martigeliyey.

Yemen, siyaasadda Yemen ee Soomaaliya ku beegan waxay weligeed ahayd, haddana tahay mid aan marna isbeddelin oo ku salaysan sidii Soomaaliya gacan looga siin lahaa in ay dib isugu taagto cagaheeda. Ma jirto dan gaar ah oo ay ka leedahay Soomaaliya, ma jirto mar ay si gurracan u faraggelisey arrimaha Soomaaaliya, ma jirto kooxaha ku loollamaya Soomaaliya mid ay si gaar ah xiriir ula leedahay, waxaybase dadaalkeeda gaarsiisey in ay Yemen isugu keento kooxaha iska soo horjeeda si ay u heshiiyaan oo dalka u xasiliyaan.

Intaas waxaa dheer oo Yemen kaga duwan tahay dawladaha adduunka oo dhan kaalinta ay ka qaadatay badbaadinta shacbiga Soomaaliyeed ee ku barakaca colaadaha dalka ka socda. Waxaa la oran karaa in iyada oo la og yahay awooddeeda dhaqaale, ay burburka la qaybsatay shacbiga Soomaaliyeed. Taas waxaa ka marag kacaya soo dhoweynta walaalnimo oo dhinacyada badan. Marka hore dalkeeda bay u furtay, arrintaas oo sababtay in Soomaali gaareysa boqolaal kun maanta Yemen ku sugan yihiin, kuwaas oo intooda badani xeryo qoxooti ku sugan yihiin. Marka labaad waxay u oggolaatay in ay sidii ay doonaan uga faa' iidaysan karaan, dhammaan, sida shaqooyinka, isbitaallada iyo dugsiyada. Marka saddexaad waxay deeq waxbarasho u fidisay ardayda Soomaaliyeed ee dugsiyada sare soo dhammaysta, si ay Yemen ugu sii wataan waxbarashada Jaamacadeed.

Liibya, waxay aad isugu hawshay in ay wax ka qabato xaaladda Soomaaliya ee murugsan. Shirar badan bay dalkeeda ku qabatay. Hoggaamiyayaal badan oo ka kala socda kooxaha Muqdisho bay dalkeeda ku martiqaadday. Waana dawladda keli ah ee qayb ka qaadatay dhismaha Puntland uguna tabarrucday dhaqaale dhan hal malyan oo Doolar iyo tiro yar oo hub fudud ah. Inta badanse aragtida ay ka qabto siyaasadda Soomaaliya waa mid aan toosnayn, waayo waxay isku hawshay xal u helidda arrimaha Muqdisho, iyada oo qabtey in haddii Muqdisho xal loo helo ay arrimaha Soomaaliya hagaagayaan. Si kastaba ha ahaatee siyaasadda is rogrogga badan ee Liibiya ayaan ahayn mid la isku hallayn karo.

Khaliijka, dawaladaha Khaliijka iyo Soomaaliya waxay wadaagaan dhaqan, diin iyo dhowaansho juqraafii. Soomaali badan baa deggan oo ka xoogsata. Sadaqo badan oo ay siiyeen ururro diimeed iyo kooxo siyaasadeedba waxaa loo adeegsaday si aan habboonayn oo dhibkii Soomaaliya haystay uga sii daray. Guud ahaan dawladaha Khaliijku uma hagarbixin in ay kaalmeeyaan walaalahooda Soomaaliyeed. Sacuudiga oo ka mid ah dawladahaas, iskuday uu sameeyey in uu ku dhexdhexaadiyo kooxaha siyaasadda ku loollama ee Soomaaliya kuma guulaysan in uu xal u helo.

Hay'adaha Dawliga ah iyo Kuwa aan Dawliga ahayn: waxay la wareegeen kaalintii dawladi ku lahaan lahayd dalkeeda. Hay'adahaasi waxay faraha ku dhigeen maal badan oo loogu talaggalay ummadda ku tabaalaysan Soomaaliya, waxayse kaalmadaas u adeegsadeen sidii ay rabaan. Madaxda iyo hawlwadeennada hay'adahaasi waxay saldhig ka dhigteen magaalada Nayroobi ee dalka Kenya, halkaas oo ay dhaqaalihii loogu deeqay dadka tabaalaysan ugu takrifaleen si ay muddo gaaban ugu hodmaan. Arrimahaasi waxay sababeen in boqolkiiba 75 dhaqaalihii Soomaaliya loogu talaggalay in ay iyaga ku baxdo, badi wixii ka soo harana ay ku baxdo xaafiisyadooda, faraggelinta siyaasadda Soomaaliya iyo dullaaliintooda. Madaxda hay'adahaasi dalkii loogu dhiibay kaalmooyinka sannadkii oo dhan maalmo kooban bay tagaan. Waxayse gobolada ka furteen xaafiisyo magacuyaal ah, oo aan wax shaqo ah qaban, wax awood ahna aan lahayn. Xaafiisyadaas waxay fariisiyeen dad ay ka keeneen adduunka

saddexaad, oo mushaar yar qaata iyo dhallinyaro Soomaali ah oo aan aqoon badan lahayn masawir ahaanna meel loo fariisiyey. Xaafiisyadaas waxay madaxda Nayroobi u qaabbilsan yihiin barnaamijka ay ku hawlagalaan. Dhammaadka sannad walbana waxay soo saaraan warbixinno wada dacaayad ah oo ay ku buunbuuninayaan wax yar oo ay qabteen, xilkii weynaa ee laga sugayeyna ay ku qarinayaan. Hay'adahaasi waxay noqdeen xubin ka mid ah qalalaasaha Soomaaliya ka jira, weliba kuwo ku firfircoon xaalad abuurka. Haddana waa wax jira in ay gacan bini' aadannimo ka geysteen quudinta, daaweynta iyo xannaanada kumanyaal Soomaali ah oo dalka gudihiisa iyo dawladaha deriska ahba ku nool.

Puntland markii la dhisay waxaan isku daynay in aannu hab kuwada shaqayno. Waxaannu weydiisannay in ay noo soo bandhigaan hawlaha ay dalka ka wadaan, nagala xisaabtamaan kharajyada ay dalka gelinayaan iyo in aannu wada samayno barnaamij midaysan balse codsiyadayadii oo dhan way ku gacansayreen. Arrintaasi waxay nagu khasabtay in aannu Puntland ka cayrinno madaxdii hay'ado badan. Markii ay taasi dhacday bay dagaal hoosaad nagu qaadeen, bulshadii Puntlandna way dhexgaleen si ay nooga hor keenaan. Barnaamijkaas burburinta waxaa iyaga iyo bulshada isku xiri jirey dullaaliin NGO-yo u shaqeeya oo nasiibdarro u badan reer Puntland, raggaas oo ay ka mid yihiin Maxamed Abshir Walde, Cabdirisaaq Juriile, Maxamed Cabdi Cali (Diakonia). Hay'adaha Nayroobi saldhigga ka dhigtay waxay si dadban iyo si toos ahba door weyn uga qaateen isku daygii majaxaabinta Puntland.

Al-Itixaad Al Islaami iyo Puntland waxaa 1992-93kii dhexmaray dagaal lagu hoobtay oo dad iyo duunyaba ku baabba'een. Raggiise dagaalkaas waday intay hubkii dhigeen bay iyaga oo fulinaya siyaasaddooda cusub, dib dadweynihii u soo dhexgaleen. Waana isla raggii kuwa dugsiyadii, masaajiddadii iyo dhaqaalihii gacanta ku dhigay oo dadaal ugu jira hoggaaminta beelaha. Weligoodna ma illaawin jabkii ku dhacay waxayna xillagaas ku taamayeen sidii ay Puntland dib ugu qabsan lahaayeen. Shaki kuma jiro in ay hormuud ka ahaayeen isku daygii majaxaabinta Puntland. Inta isku kaashatay majaxaabinta Puntland waxay halkaas ka heleen fursaddii ay ku doonayeen in ay

Puntland ku baabba'shaan. Sidaas awgeed waxay xooggooda saareen Islan Maxamed Islaan Muuse oo tan iyo waagii Maxamed Siyaad si rasmi ah ugu caleemosaarnaa Odayga Gobollada Woqooyi Bari.
Is-afgarad dhex maray iyaga iyo Odayga ayaa gundhig u noqday durbaankii lagu tumay been abuurkii la iga sameeyey ee la igu eedeeyey in aan jebiyey dastuurka Puntland. Markii uu soo baxay go'aankii Golaha Xeer-dejinta Puntland, kaas oo muddadii Puntland lagu daray saddex sano oo hor leh, ayaa Islaan Maxamed isaga oo arriintaas ka duulaya ku dhawaaqay shir Isimada Puntland oo degdeg loogu qabanayo magaalada Garowe. Shirkii wuu qabsoomay, waxaase ka soo qayb galay afar isim oo ka mid ah Isimmada Puntland magac ku leh Puntland, balse lagu xanto in ay ku xiran yihiin ururrada xag jirka ah.

## AFGENBIGII ISLAAN MAXAMED ISLAAN MUUSE

Markii ay dawladdii burburtay waxaa sidaas oo kale u burburay dhaqankii soo jireenka ahaa ee xeerin jirey madax dhaqameedyada, oo rag aan hore magac ugu lahayn bulshada dhexdeeda ayaa cimaamad cagaaran garbaha saartay oo derajo isim sheegtay. In kasta oo dhaqan xumadaas Siyaad Barre bilaabay oo qabaa' il uu neceb yahay isimmo u magacaabay, haddana muddadii burburka lagu jirey iscaleemasaarku wuxuu gaaray heer uu jees kasta isim yeesho. Markii dhabtii la gaaray kuwii cusbaa ee isimmada sheeganayey beelaha ay matalayeen wax tixgelin ah way ka waayeen.

Arrintaasi waxay muujineysaa in meel ayan dawladi ka jirin kaalinta isku haynta iyo badbaadinta beesha uu xilku saaran yahay isimmada soo jireenka ah ee xushmad iyo sumcadba weligood ku lahaan jirey bulshada dhexdeeda. Go' aan wax ku ool ah oo la' aantood la qaadan karey ma uusan jiri jirin.
Dastuurka Puntland wuxuu rasmiyeeyey xilkoodii soo jireenka ahaa. Sida ku cad qodobka

- 30aad.
- 30.1. Dastuurka wuxuu aqoonsan yahay oo xaqiijinayaa jiritaanka xilka hoggaamiye dhaqameedyada.
- 30.2. Wixii muran iyo is afgaranwaa ka dhexdhasha beelaha oo xal

kale loo waayo, iyada oo la raacayo Axdigan iyo xeerkiisa, waxaa loola noqonayaa Isimmada si ay talo ugu soo jeediyaan ama go'aan kama dambays ah uga gaaraan. Sida ku cad dastuurka isimmadu wax xil ah kama hayaan maamulka dawladda, haddii aan si gaar ah xukuumaddu uga codsan in ay tala ka bixiyaan arrin/ arimo gaar ah. Shirka uu Islaan Maxamed ku baaqay in uu ka dhaco magaalada Garowe oo looga hadlo is-afgaranwaaga ka dhashay arrimaha dastuurka, ma leh wax sharci ah iyo wax nidaam dhaqan ah oo loo cuskan karo. Sidaas awgeed, arrinta islaanku ku dhawaaqay waxba kama duwana afgenbi aan geed loogu soo gabban. Inkasta oo isimmo badani Puntland ku nool yihiin, haddana waxaa laga tixgeliyaa, kuwii soo jireenka ahaa.

Shirka islaan Maxamed ku baaqay waxaa ka soo qaybgalay afar ka mid ah Isimmadii soo jireenka ahaa (Islaan Maxamed laftigiisa, Garaad Cabdiqani, Beeldaaje Xaaji Cabdullahi iyo Beeldaaje Cali Faarax). Shirkoodii kaddib bay xafiiska iigu yimaadeen oo ii sheegeen in ay i kala doorransiiyaan in ay muddo laba sano ah ii dheereeyaan iyo in aan oggolaado in aan doorasho galo oo ay shir ku baaqaan. Taladaasi waxay noqotay mid aan la yaabo, dabadeed waxaan weydiiyey halka ay arrinta ka soo galeen iyo waxa ay dantooda dhabta ahi tahay.

Markii ay ii sheegi waayeen wax i qanciya, ayaan u sheegay in golaha xeerdejinta iyo aqlabiyadda Isimmada Puntland arrintaas go'aan ka gaarey oo ayan hadda Isimmadu arrintan dib usoo celin karin, ma ayan garaysan arrinta oo xanaaq bay iiga tageen. Dabadeed afkooda bay furteen, qayladooduna meela badan bay gaartey. Qoladii ugu horraysey oo dacwadoodii oggolaatay waxay noqotay TNG oo Xasan Abshir RW ka ahaa. Waxay durba la soo gaartey lacag taagero ah. Waxaa meela kala duwan laga abaabulay bannaanbaxyo la iiga soo horjeedo. Meelo badan waxaa ka bilawday hub urursi. Haba ugu daraato magaalada Boosaaso. Islaan Maxamed maalin walba wuxuu idaacadaha siiyaa waraysi u eg in uu isagu mar hore la wareegay dhammaan awooddii Puntland. Qawaaniintii iyo kala danbayntii Puntland hore ugu guuleysatey in ay degaankeeda xasiliso ayaa faraheeda ka baxay.

Markii aan arkay in ay xaaladdu meel xun mareyso ayaan go' aansaday in aan Boosaaso aado, si aan dhibaatooyinka ka jira wax uga soo qabto, iyo si aan u soo hubsado waxa ka jira warar is khilaafsan oo magaalada la iiga soo tebiyey. Kolkii aan ku soo dhowaadey ayaan u leexday xagga gegida dayuuradaha, aniga oo doonayey in aan xaaladda magaalada ka wareysto ciidanka halkaas ku sugan. Markii aan baabuurkii ka degeyba, tacshiirad baa xagga magaalada la iiga soo furay.

Illeyn Itixaadku tallaabo tallaabo bay dhaqdhaqaaqayga ula socdeen. Dagaalkaasi wuxuu igu sii xoojiyey shakigii aan hore u qabay ee ahaa in ay khiddada wax kaga jireen rag maamulkayga ka mid ahaa, gaar ahaan taliyaha ciidammada G/ sare Carays. Shakiga aan taliyaha ka qabey waxaa igu dhaliyey mar aan ka codsaday in uu Boosaso tago oo soo hubiyo wararka kala duwan oo laga soo sheegayey ee uu iigu jawaabey in aan loo baahnayn in la tago, isla markaasna ii xaqiijiey in aan halkaas wax dhibaato ahi ka jirin. Dagaalkii Boosaso igu qabsaday ilaa xad waan iska daafacay, markiise rasaastii ay iga dhammaatay dib baan uga soo gurtay oo xagga Garowe baan u soo baxay. Qardho oo iyadana jidgooyo la ii dhigtay xoog baan ku soo dhaafay.

Habeenkii waxaan u soo hoyday Garowe, waanse seexan waayey, oo buuq iyo qaylo baa afarta gees ee magaalada la iiga kacshay. Ciidankii waxaan amar ku siiyey in aaney xabbad ku ridin dadka buuqaya. Markii ay ii muuqatay in aanan sidatan magaalada ku joogi karin, alaabtaydii baan ka xirxirtay oo habeenkii baan tartiib uga baxay oo xagga Gaalkacyo u gudbay. Mudda badan kuma qaadan reer Garowe in ay gurigaygii bililiqaystaan. Waxaan moodi jirey in aannu ka hufannahay bililiqada tan igu dhacday ayaase waxay muujineysaa in Soomaalida oo dhammi ku wada aflaxday dhaqan xumida ay ka dhaxleen taliskii Siyaad Barre.

Gaalkacyo markii aan tegay, waxaan durba u hawlgalay, si aan dhibaatooyinku u sii ballaaran oo loo xasiliyo Puntland. Waxaan marka hore la kulmay odayaashii gobolka Mudug, kuwaas oo igu raacay in degdeg xaaladda Puntland loo caadiyeeyo. Dabadeed golihii Xeerdejinta baan Gaalkacyo shir ugu qabtay, iyaguna sidaas si la mid ah bay fadhigoodii ku soo gabagabeeyeen.

Waxaannu isla dejinney barnaamij hawgal ah ee muddooyin go'an lagu fulinayo. Iyada oo arrintaas laga duulayo ayaan dib u soo nooleeyey isku xirnaantii gobollada iyo degmooyinka Puntand, aniga oo xafiis arrintaas qaabbilsan Gaalkacyo ka furay, taasina waxay ii suurtaggelisey in aan taako taako ula socdo wax kasta oo Puntland ka dhacaya. Halka aan Gaalkacyo ka wado hawlo lagu xasilinayo xaaladda foosha xun ee Puntland ka socota, Islaan Maxamad wuxu Garowe ka wadey hawlo lagu sii hurinayo fidmada degaanka ka taagan. Wuxuu magaca Isimmada uu Garowe isugu keenay ka soo saaray go'aan lagu caddaynayo in ay dhammaatay muddadii saddexda sano ahayd ee xukuumaddu xilka hayn lahayd, ayna ku fashilantay xilkii uu shacbigu u igmaday. Sidaas awgeedna loo baahan yahay in sharciga la hirgeliyo oo si ku meelgaar ah maamulka loogu wareejiyo Guddoomiyaha Maxkamadda Sare.

Dabadeed Guddoomiyaha Maxkamaddu wuxuu dhinaciisa ka soo saaray go'aan uu kula wareegayo xilka maamulka Puntland, sida uu qorayo qodobka 34aad iyo kan 35aad ee Dastuurka Puntland.*
Islaan Maxamed wuxuu dabadeed ku dhawaaqay in bil gudaheed ay ergooyinka beelaha Harti isugu yimaadaan shir dib loogu dhisayo hay'adihii dawlad goboleedka Puntland. Sidii uu shirku ku qabsoomi lahaa waxaa qeyb libaax ka qaatay xubno la yaqaan oo ka tirsan Al-Itixaad, kuwaas oo kharash badan geliyey sidii ay beeluhu ergooyin ugu dirsan lahaayeen shirka Islaanku ku baaqay. Itixaadku kuma ekaan oo keli ah in ay shirka wax ka abaabulaan, waxayse lacag badan geliyeen sidii shirku u qabsoomi lahaa iyo weliba sidii ay uga soo bixi lahayd natiijada ay doonayaan, si ay ku helaan xukuumad ay tartiib-tartiib dib ugu dhismi karaan.

Markii ay ergooyinkii soo wada gaareen Garowe, cuqaal reer Mudug ah ayaa Islaanka dhowr jeer ugu tegey in uu ka waantoobo ku dhaqaaqa tallaabooyin hor leh oo sii hurin kara mashaakilka culus ee Puntland ka taagan. Sidaas oo kale waxaa Garowe tegay Boqor Maxamuud Boqor Muuse si uu arrinta ugala hadlo Islaanka, kumase guuleysan dadaalkii uu ku doonaayey in uu ku xakameeyo dhibaatooyinka degaanka ka abuurmay, balse suuqyada ayaa looga oriyey, baabuurkii uu watayna dhagax baa lala dhacay.

Falxumadaasi waxay waxgaradka Puntland oo dhan u muujisay in waxa Garowe ka dhacayaa ka fog yihiin wax Puntland dani ugu jirto, balse yihiin wax meelo kale laga hoggaaminayo, oo sida laga garan karo isugu biya shuban kara dagaal sokeeye oo Puntland ka dillaaca. Kolkii la qiimeeyo tirada dadka faraha badan ee shirka uu Islaanku abbaanka ka yahay iyo muddada dheer ee shirku soconayey waxaa la garan karaa misaaniyadda xoogga leh ee ku baxday, taas oo aan laga heli karin gudaha Puntland, balse laga helay meelo kale, siiba ahaan Al-Itixaad iyo TNG, kuwaas oo ka midaysan siyaasadda lagu burburinayo Puntland. Halka uu Islaan Maxamed shirkiisa watey, aniguna waxaan ku jirey dhisme ciidan, xoojinta xiriirka reer Puntland ka daacadda ah iyo hub urursi.

Markii arrimahaas oo dhammi kay isugu dubba-dhaceen, ayaan wada-tashi la galay waxgaradka reer Mudug iyo madaxda Puntland oo meela kala duwan jooga. Dhammaan odayaashaasi waxay igula taliyeen in aan Garowe galo oo kala cayriyo kooxda halkaas ku shireysa. Taladaas waan qaatay, waxaanse u sheegay in aynaan ku degdegin qaadista tallaabadaas, weyna igu raaceen. In aannu hawlgalka dib u dhiganno waxaa nagu sandulleeyey waxa Garowe ka socda oo aannaan hubin waxay ku danbayn doonaan, oo wararka naga soo gaarayey ay aad iyo aad u kala duwanaayeen. Dhinac kale, waxaa meesha ka sharraxnaa dad labaatameeye ku dhow, kuwaas oo haddii aannu doorashada hor istaagi lahayn aannu ku wada eedoobi lahayn.

* Q. 34.1. Axdiga Puntland wuxuu dhaqangelayaa maalinta shirweynaha Garowe uu ansixiyo, Maajo 1998. Wuxuuna jireyaa saddexda sannadood ee kala guurka ah oo keli ah, waxaana beddelaya Dastuurka cusub ee Puntland.

Q.34.2. Haddii sabab kasta awgeed dawladdu ku diyaarin waydo Dastuurka cusub saddexda sano ee kala guurka ah gudahooda, Golaha wakiillada iyo Golaha xukuumadduba way jiritaan beelayaan. Xilkii Madaxweynahu wuxuu ku wareegayaa Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, oo laga doonayo in uu 30 maalmood gudahood isugu yeero shirweyne Gobolladii ku bahoobay dawladda Puntland, si ay xaaladda cusub uga soo go'aan qaataan.

Q.35.1. Qodobada Axdigan waxaa beddeli kara Golaha Wakiilada marka laga reebo, qodobbada ku cad qodobka 35aad.2., wax ka beddelkaas oo ku imanaya markii ay laba jeer oo ugu yaraan bili u dhaxayso, mar walba afar meelood saddex (3/4) xubnaha Golaha Wakiiladu isku raacaan beddelka qodob ka mid ah Axdigan.

Q. 35.2. Qodabada 1.1, 2, 6, 7, iyo 34, ee Axdigan lama beddeli karo.

Shirkii waxaa lagu doortay Jaamac Cali Jamac oo u dhashay beesha Cismaan Maxamuud oo lagasoo maalgaliyey Muqdisho, oo aan ogahay in la soo siiyey $500,000 Doolar. Maalintii la doortay tii ku xigtey baa la dhaariyey, isla maalinta la dhaarinayo baan Gaalkacyo ka soo baxay waaguna wuxuu iigu beryey meel 30km Garowe u jirta. Ciidammadii waxaan ka soo kiciyey Abqaale, halkaas oo ay mudda dhowr bilood ah tababbar kaga jireen, dabadeed hubkii baan meesha ugu qaybiyey. Hore hub uma aanan siin oo waxaan ka baqay in ay gataan ama la fakadaan. Burburku wuxuu na baray in dhallinyaradu ciidanka u qortaan si ay qori uga helaan oo keli ah.

Nasiibdarro qorigu wuxuu noqday qayb nolosha ka mid ah. Markii aannu wax walba isku dubbarridney, waxaan amar ku siiyey in ay magaalada galaan oo xiraan labada kontarool: kan laga soo galo iyo kan laga baxo, dabadeed iyaga oo aan qofna wax yeelin Jaamac Cali Jaamac soo qabtaan. Ciidankii si wacan buu qeybtii hore ee amarkii la siiyey u fuliyey, magaaladana way wada hareereeyeen iyaga oo aan rasaas ridin. Dabadeed waxay u soo jeensadeen qaybtii labaad ee isla amarkaas la xiriirtay ee ahayd qabashada Jaamac, kolkiise ay soo gaareen derbigii guriga uu deggan yahay ayaa ilaaladii guriga korkiisa saarnaydi rasaas ku furtay ciidankii, iyaga oo shan ka mid ah meeshii ku diley, shan iyo tobanna dhawac kala duwan gaarsiiyey.

Markii warkaasi i soo gaarey ayaan amar ku bixiyey in gurigaba madfac lala dhaco si sheekadiisuba nooga harto. Markii u damtii madfaca maqlay ayuu derbiga jaranjaro kaga boodey oo gurigii Islaan Maxamed tegey, isaga oo aan salaaminna wuxuu ku yiri: "Islaan ninkii magaalada wuu qabsaday oo hadda gurigaygii buu madfac la dhacayaa. Islaanku ma ahayn nin naxa, wixii aan dani ugu jirinnna waaba iska dhegatiraa. Markuu cabbaar ka aammusay buu ku yiri. ' Jaamac waadigii igu yiri mar ha la i doorto, aniga iyo Cabdullaahi laba G/sare baannu nahay oo waxba igama qaadi doonee; annagu ku doorannay ee orod oo ninka iska celi oo guriga iiga bax' .
Intii uu Islaanka la joogey oo dhan annagu waxaannu la dagaallamayney gurigii uu deggaanaa. Dhismaha gurigu aad buu adkaa, oo waxaa la moodaa in loogu talaggalay in lagaga gabbado rasaasta hubka culus.

Muddo markii la garaacayey ayaa dhulka la dhigay. Kaddib ciidankii baa guriga galay oo qol qol u baaray. Waxay meesha ku arkeen oo keli ah meydkii toddobadii ilaalada ahayd. Gadaal baan ka ogaan doonnaa sidii uu ku baxsaday iyo waxay kala muteen isaga iyo Islaanku.

Waxaa isweydiin leh sababta uu sidaas u yeelay: ma wuxuu doonayey in Jaamac suuqa laga qabto isaga oo ku dhex jira koox la beel ah oo halkaas dad badni ku dhinto oo dabadeed xiisad qabiil halkaas ka dhalato. Taas ma aan garan karo, waxaanse hubaa in uusan Islaanku ka biqin in aan ciidan gurigiisa u soo diro oo amar ku bixiyo in gurigiisa la galo oo Jaamac xoog lagula soo baxo. Islaanku wuxuu noqday siyaasi aan la yaraysan karin, wuxuuna si fiican u garan karey in waxa ugu weyn oo aan iska dhawrayey ahayd xiisad colaadeed oo magaalada ka dhalata.

Islaanku hore wuxuu ahaan jirey oday laga danbeeyo oo tuuladiisa ku eg, uma badnaan jirin magaalooyinka, wixiise ka danbeeyey Afgenbigii Cirro wuxuu heshiis wada shaqayn ah la galay Taliskii Siyaad Barre oo wuxuu noqday odaga keli ah ee dawladdu kala tashato arrimaha gobollada Woqooyi Bari. Wixii waagaas ka danbeeyey Islaanku waa isaga baxay arrimihii miyiga oo siyaasi buu isu beddeley. Jaamac wuu ka tegay gurigii Islaanka, wuxuu tegey guri u dhow, kaddibna wuu ka lugeeyey, gaari baa laga dabageeyey Taleex iyo Xali buu maray habeenkii Qardho ayuu u hoyday oo dabadeedna uu subaxii dambe Boosaaso ka sii aaday, maalmo kaddibna Jabbuuti ayuu uga sii baqoolay.

Maalintii aan magalaada soo galay waxaan xarun ka dhigtay Hoteelka Ina Geele Maxamed Kaneec iyo guriga Ardo Gacamay oo magaalada geeskeeda koofureed ku yaal. Waxaan bilaabay sidii dib loogu soo dhisi lahaa ciidankii Daraawiishta oo kala daatay. Waxaan kaalmo yar oo isugu jirta hub fudud iyo koox tababbarayaal ah ka helay dawladda Itoobiya.

Ma daneeyo waxa magaalada ka dhacaya, hadbase koox ayaa ii timaada, Islaan Maxamed iyo Suldan Garaase ayaa warqad iisoo qoray ay leeyihiin ka bax magaalada oo ku noqo carri Cumar Maxamud, markaan warqaddii akhristay baan weydiiyey carriga Cumar Maxamud xaggee ka bilowdaa waxay yiraahdeen Tuulo Jalam, waxaan ugu jawaabey in aan magaalada Garoowe ku dhashay oo aanan ninna marti ugu ahayn, magaaladuna caasimaddii Puntland tahay. Kuwa kalena waxaan ku qancin jirey in aan meesha hawlo ciidan oo aan la iiga maarmi karin ka wado. Dhammaan odayaasha magaca ku leh magaalada Garowe, laba qof oo keli ah oo aan marna hoteelka iigu iman waa Islaan Maxamed iyo Suldaan Siciid Garaase kuwaas oo ahaa raggii tiirarka u ahaa afgembigii Islaan Maxamed. Dhawr bilood kaddib markii aan ciidammadii dhisay, madaxdii Puntland oo dhan isu soo ururshay, ayaa waxaa Garoowe igu soo weeraray ciidan uu watay Khaliif Ciise Mudan, kaddibna waan ku duulay oo jabinay, waana daba galay ilaa Qardho agteeda halkaas oo aan dul seexanahy Qardho, subaxdiina Qardhaan dhexmarnay annagoo u socona Boosaaso.

Habeenkii waxaannu ku nasannay tuulada Kalabayr oo 60km u jirta magaalada Boosaaso. Waxaan u cid diray Isimadii, Odoyaashii iyo Waxgaradkii oo aan ku iri magaalada inaan soo galo baan rabaa ee ma dagaal baan kusoo gala, mise waa la nalagusoo dhaweynayaa, waxay iigu jawaabeen in la igu soo dhawaynayo. Laba beri kaddibna Boosaaso baannu soo galnay, halkaas oo si ballaaran nalooku soo dhoweeyey, qalaalisihii siyaasadeedna ku soo afjarmay. Kaddib markii la xasiliyey maamulkii xukuumadda, waxaa Boosaaso lagu qabtay shirkii Baarlamaanka Puntland si loo gudaggalo ajeendooyinkii taagnaa ee in mudda ah hakadka ku jirey.

Waxaa horraantii Baarlamaanka la soo hordhigay mashruucii dastuurka Puntland ee in muddo ah socday oo gobollada iyo degmooyinka Puntland oo dhan hore loogaga soo dooday, khilaafkii dhacayse awgiis, aan loo helin fursad lagu meelmariyo. Dastuurka cusubi wuxuu ka mid ahaa arrimihii laga sugayey in xukuumaddu ku soo dhammaystirto muddada saddexda sano ahayd ee jiritaankeedu ku ekaa, aaneyse ku guulaysan. Waxaa ugu muhiimsan ee dastuurkaani kaga duwan yahay kii Puntland lagu dhisay waxaa ka mid ah

hannaanka dimuqraaddiyeynta habka Puntland iyo muddada uu soconayo oo afar sano la gaarsiiyey. Sidaas oo kale, dastuurkani wuxuu meesha ka saaray dhammaan qodobbadii khilaafka dhaliyey ee jiritaanka Puntland khatarta geliyey; iyada oo loo dhigayo sida soo socota: ' Haddii sabab kasta awgeed dawladdu fulin weydo arrimaha tira koobka, aftida dastuurka, doorashada golayaasha labada bilood ee ugu danbaysa 3da sano ee ku meel gaarka ah ayaa hab beeleed oo waafaqsan sidii lagu soo xulay Golaha Wakiillada ee hadda jira lagu soo magacaabayaa Xubnaha Golaha Wakiillada ee beddelaya kan hadda jira, kuwaas oo iyaguna dooranaya Madaxweynaha, Madaxweyne ku-xigeenka iyo Guddoomiyaha Golaha Wakiillada iyo Ku-xigeenadiisa' . Intii aan ku gudajirey hagaajinta wixii qaldamay ayaa dhallinyaro ka soo jeedda Qardho iyo Garowe meel istiraatiiji ah oo Qardo u jirta 70km, kala gooyeen isu socodkii waddada, baabuurradii mareyseyna cashuur ku soo rogeen. Odayaal aan u diray in ay dhallinyaradaas u caqli celiyaanna waa ay soo cayriyeen.

Markii ay arrintu mudda socotey ayaan ciidammada amar ku siiyey in ay waaddada banneeyaan. Amarkaas oo ay maalin gelinkeed ku fuliyeen, khasaara badan oo la sheegay in ay halkaas ka dhacdayna been bay noqotay. Xaaladdii caadi bay ku soo noqotay. Aniga iyo wafdi ballaaran oo ka socda Puntland waxaannu u baxnay Nayroobi, si aannu uga qaybqaadanno shirka dibuheshiisiinta Soomaaliyeed ee halkaas ka furmay. Marka aan dalka ka dhoofayey waxay ila ahayd in xaaladda Puntland marayso meel lagu kalsoonaan karo, waxaase dhacday in beeshii Jaamac Cali Jaamac ka dhashay soo laba kaclaysay oo abaabul ciidaan gashay, xoogaa dhallinyaro ahna Dhuudo ku ururisay, isla markaasna tol wacasho bilawday. Arrintaasi waxay dhalisay walaac hor leh oo aan marna la filayn. Beeshii rag badan baa dibadda uga yimid oo Janan Cadde Muuse ku jiro. Aniga oo Nayrobi jooga waxaan amar ku siiyey taliya ciidammada Puntland G/sare Carays in uu arrintaas degdeg uga hortago oo kala eryo dhallinyaradii Dhuudo isku urursatay inta aaney arrintu meel fog gaarin. Taliyihii ma uusan fulin amarkaas oo wuxuu ii soo sheegay in uu rabo in uu siyaasad iyo wada hadal ku furdaamiyo. Taladii uu soo jeediyay waxba kama socon. Arrintii aan ka welwelsanaana sidii aan maleynayey bay u dhacday, oo ciidankii Dhuudo lagu ururinayey waa batay, raggii loo

qaylo dirsadayna dalka waa soo gaareen, degaankana dhaqdhaqaaq baa ka bilawday. Laba bilood kaddib waxaan ku soo laabtay Puntland, waxaana ka soo degey Boosaaso, halkaas oo aan ka bilaabay shirar iyo wada xaajood aan ulajeedey in xiisadda Dhuudo ka dhalatay si nabadgelya ah lagu dhammeeyo, haddii nabad-doonimadu shaqayn weydana xoog lagu soo afjaro. Markii aan dhinac siyasadeed iyo dhinac ciidanba ka diyaar ka noqday, ayaan xagga Qardho u baxay. Magaalada markii aan tegay waxaan la hadlay maamulka degmada, waxaana ka codsaday in aniga iyo cuqaasha naloo abaabulo shir aannu ku wada hadalno. Maamulkii sidii buu yeelay oo subaxdii danbe aniga iyo odayaashi toos baannu shir u wada qaadannay. Nasiibdarro, shirkaas waxba kama soo bixin, ugu danbayntiina waxay ii dhiibeen waraaq ay ku qoran yihiin toddoba qodob oo si gaar ah la iigu eedaynayo. Qodobka ugu daran wuxuu ahaa in aaney bal heshiis iska daaye, wada hadal danbe ila yeelanayn ilaa aan ciidammadayda kala baxo gobolka Bari.

Markii waan waantii dhicisowdey, waxaan ku soo noqday tuulada Alxamdu-lillaahi ee Qayaadsame u dhow, halkaa oo saldhig ku meel gaar ah ciidanka u ahayd. Waxaan degsannay qorshe hawlgal, dabadeedna dagaal baannu ku qaadnay Dhuudo. Iska hor imaad culus baa halkaas ka dhacay, inkasta oo khasaaro na soo gaartey, ciidankii Dhuudada jab weyn baa ku dhacay. Tekniko iyo hub aan yarayn baa laga qabsaday. Tiro ciidankooda ka tirsanaydna gacanta baa lagu dhigay. Janan Cadde wixii u badbaadey wuxuu kala gudbay laamiga xagga gobolka Sanaag, wuxuu xero ciidan ka samaystay meel u dhow degmada Ceel Afweyn, taas oo hoos timaadda maamulka gooni-u-goosatada Soomaliland.

Janan Cadde wuxuu halkaas u degey saddex sababood awgood:

- marka hore wuxuu aqoon u lahaa degaanka iyo dadka deggan Gobolka Sanaag oo uu mudda dheer Guddoomiye ka ahaa xilligii Siyaad Barre.
- marka labaad wuxuu ogaa in gooni-u-goosatadu soo dhoweyneyso ciddii diyaar u ah waxyeellada Puntland iyada oo weliba taageera kasta u fidineysa;
- marka saddexaad wuxuu doonayey meel ammaan ah oo uu ciidaan ku dhisto.

Inkasta oo uu Cadde qarandiidkii u galay, oo meel istiraatiijik ah saldhig ka dhigtay, haddana ma jirin halis dhow oo uu Puntland ku hayey. Dabadeed waxaan ku noqday shirkii dibu-heshiisiinta ee Nayroobi ka socdey, halkaas shaqada ka socotey meel adag ayay mareysey, maqnaashahaygiina waa la tabey oo saaxiibbaday waxay ka baqeen in kooxaha diiddan habka federaaliga ah ay gacanta sare yeeshaan. Nasiib wanaag, dadaal badan kaddib, wax badan oo naga qalloocday baannu toosinney. Isku xirnaantii kooxda SRRC dardar cusub baannu gelinney oo shaki xubnaha kala galay waannu daaweyney. Muddada aan Nayroobi joogey, marna maankayga kama bixin Puntland, warbixin joogta ahna waa la iga soo siinayey, wixii talo la iiga baahdana meesha baan uga dirayey.

Janan Cadde muddadii uu Ceel Afweyn ku sugnaa wuxuu dhistay ciidan fiicaan. Beesha uu ka dhashay ka sokow waxaa u tegay, rag Puntland jaga ka waayey iyo rag aniga ii ciil qaba. ciidanka Caddese welwel iguma hayn, balse waxaan welwel ka qabay halka uu gaarsiisan yahay xiriirka uu la leeyahay gooni-u-goosatada iyo waxa ay ka damac san yihiin ciidanka reer Puntland ah ee ku sugan degaannada ay maamulaan. Waxaan isweeydiin jirey in ay suurtoobi kartey iyo in kale in ciidankaas gooni-u-goosatadu u adeegsato Puntland. Arrintaasi waa ila foolxumaatay. Dabadeed waxay iila ekaatay in aan toos Cadde ula xiriiro. Janan Cadde si fiican baan u aqaan, waxaannu hore uga wada tirsanaan jirney XDS, dabadeed waxaannu isugu nimid jabhaddii SSDF, waxaannu isugu nimid shirweynihii Qardho ee SSDF.

Guud ahaan waa nin aannu si fiican isu garaneyno oo aannu wax walba ka wada hadli karno. Waxaa kale oo aan ku tashanayey in rag badan oo ciidanka Cadde ku jira oo xiriir naga dhexeeyey ay ku dhiirrigelin kareen waanwaan heshiis iyo in arrimaha jira oo dhan si maangal ah lagu dhammeeyo. Muddo markii uu xiriirkayagu qarsoodi ahaa oo aannu isku afgarannay in aannu heshiinno, waxaannu go' aansannay badbaadinta ciidanka halkaas jooga awgiis, in aannu kaashanno odayaal na dhexdhexaadiya. Waxaannu helnay Boqor Buur Madow oo Isaaq ah iyo Suldaan Saciid oo Warsangeli ah, kuwaas oo ka soo wada jeeda Gobolka Sanaag. Salaadiintaasi si sharaf leh bay noogala shaqeeyeen arrintaas.

Aniga iyo Cadde waxaannu ku heshiinney qaabkii ciidanka loo soo rari lahaa, waddooyinka uu soo mari lahaa iyo halka uu Boosaaso ka fariisan lahaa, arrintaasina waxay u dhacday sidii loogu talaggalay. Dhowr maalmood oo wada hadal ah kaddib, waxaannu ku heshiinney in ciidammada Cadde lagu daro kuwa Puntland iyo in jabhaddiisa jagooyin kala duwan laga siiyo xukuumadda, maamulka iyo ciidammada Puntland.

Markii aaannu ka heshiinney dagaalkii labada sano Puntland ka socday , meelo kala duwanna hambalyo nalooka soo diray, ayaan inaga iyo Cadde isu raacnay magaalada Nayroobi, si aannu shirka uga wada qaybqaadanno. Garaadka iyo bisaylka ay reer Puntland ku gaareen in khilaafkii dhexmaray ay ka heshiiyaan, waxay noqotay dersi qiimo weyn leh oo in mudda ah dalka iyo dibaddisaba looga hadal hayey. Aniga laf ahaantayda baa marmar isweydiiya waxa la samayn karo si reer koofureed loo heshiisiiyo, iyada oo la og yahay in aaney sida reer Woqooyi iyo reer Puntland ugu fududayn.

## SHIRKII DIBUHESHIISIINTA SOOMAALIYEED 2002-2004

Shirarkii taxanaha ahaa ee dhawr iyo tobanka sano socdey, midowga Afrika wax natiijo ah kama dhalin, waxaana loo aanayn karaa kalsoonidarro Soomaalida dhexdeeda caqabad ku noqotay, heshiisyada gobolada qaarkood laga gaarayna waxay u fuli waayeen farsamo iyo dhaqaale la' aan. Waxaa sii dheer faraggelinta shisheeye oo si joogta ah u walaaqaysey xaaladda Soomaaliya. Dalal badan oo Afrikaan ah oo ay ka mid yihiin Liberia, Siraleone, Chad, Burundi baa waxa soo foodsaaray qalalaase siyaasadeed iyo dagaallo sokeeye oo la mid ah, ama ka daran kan Soomaaliya ka taagan. Colaadda dalalkaas ka abuurantay waxay gaartey heer aaney keligood gudahooda ka xallisan karin, xaalka Soomaaliyana kuwaas kama uu duwana. Nasiib wanaag, waxaa dawladahaas oo dhan u soo gurmadey dawladaha galbeedka, kuwaas oo muddo gaaban ku xasiliyey, isla markaasna, isugu dubbaridey taageero dhaqaale oo caalami ah, si ay mar labaad cagahooda isugu taagaan. Sidaas awgeed, maanta waxaa la oran karaa in dawladahaasi ay

ka soo kabteen burburkii. Waxaa hubaal ah in dawladaha reer galbeedku aaney Soomaaliya ugu hagar bixin sida dalalka kale ee Afrika. Gurmadkii caalamiga oo Maraykanku abaabulkiisa ka danbeeyey bilowgii 1990aadkii lagama gaarin wax natiijo ah oo la taaban karo. Gurmadkaasina wuxuu iska soo xirmay, markii uu Maraykanku dalka isaga baxay, kaddib dagaallo kulul oo uu la kulmay 18 askarina Muqdisho looga diley, ayada oo aan weli xaaladdii gaajo iyo dhimasho ay sii xumaatay.

Markii la arkay in TNG-dii Jabbuuti lagu soo dhisay ay fashilantay baa Midowga Afrika go'aan ku gaaray in xal u helidda arrimaha Soomaaliya loo xilsaaro dawladaha ku bahoobay IGAD. Shir gaar ah oo IGAD yeelatay waxaa la isku afgartay in la abaabulo shir dibu-heshiisiineed ee la isugu keenayo maamullada iyo kooxaha siyaasadeed ee dalka ka jirey. Si taladaas lagu meelmariyo IGAD waxay go'aan ku gaartey in ay u saarto guddi farsamo ee si dhammaystiran arrinta uga soo baaraandega. Guddigaas waxaa loo xilsaaray labada arrimood:

1. Tan hore waxay ahayd xaqiiqo raadis looga baaraandagayo xaaladda dalka ka jirta, warbixin tifaftiranna la soo hordhigo golaha IGAD.
2. Tan labaad waxay ahayd in talo laga keeno qaybaha kala duwan ee siyaasadda iyo bulshada rayidka ah oo shirka ka qayb qaadan kara iyo mudnaanta ay kala leeyihiin ee lagu jaangoynayo qoondaynta ergooyinka.

Shir IGAD ku yeelatay magaalada Kharduum waxay isku raaceen in aan TNG-da wax qabad iyo kaalin danbe laga sugin ee degdeg loo qabto shirkii dibu-heshiineed ee hore la isugu raacay.
Madaxweynaha Kenya mudane Daniel Arab Moi ayaa codsaday in Kenya lagu sharfo in ay dhigto gogosha dibu-heshiisiinta, taas oo laga yeelay. Dabadeed AU iyo IGAD waxay deeq-bixiyayaasha iyo dalalka muslimka ah qaarkood ka codsadeen in ay gacan ka siiyaan hantidii shirka lagu maalgelin lahaa, codsigaasna waa laga oggolaaday. Markii abaabulkii shirka la dhammaystiray, waxaa IGAD laf ahaanteedu ka doodday dabeecadda uu shirku yeelanayo iyo hannaanka uu ku

soconayo maamulka shirku, iyaga oo dantoodu ahayd in shirka laga dhigo mid ka duwan kuwii hore. Shirarkii hore abaabulka maamulkooda, waxaa iska lahaa dadkii soo go' aamiyey oo Soomaalidu cod kuma lahayn. Intaas waxaa weliba u dheeraa in ergooyinkii shirarka la isugu keeni jirey loo cayimi jirey wakhti aad u kooban oo ay ku soo heshiiyaan, dabadeedna halkaas ka soo saaran heshiis loo dhan yahay. Habkaasi waa kan sababay in ay waxba ka socon waayaan heshiisyadii tirada badnaa ee shirarkaas ka soo baxay, IGAD-na waayo' aragnimo ku filan bay ku yeelatay xaaladda noocas ah.

Iyada oo waayo' aragnimadaas laga duulayo ayaa IGAD waxay go' aansatay in uu xilkeedu ku ekaado abaabulka shirka iyo taageero farsamo, mamulka iyo go' aan ka qaadashada shirkase loo daayo Soomaalida. Taas oo noqonaysa in hoggaanka shirka, ajandada shirka iyo muddada shirku soconayaba ay Soomaalidu dhexdeeda kaga heshiiso. Go' aankaas aad iyo aad baa dalka oo dhan looga soo dhoweeyey, waxaana run ahaan loo arkay tallaabo horumar leh oo ku qumman wakhtiga la marayo, xaaladaha dalka ka jirey iyo baadigoobka xal caqligal ah ee lagu meelmariyo heshiis looga gudbo is afgaran waaga ka dhexjirey qaybaha kala duwan ee shirka la isugu keenay. Sidaas darteed, go'aanka IGAD wuxuu u muuqday mid loo baahnaa oo markii ugu horreysey fursad u siiyey Soomaalida in ay dhexdooda ka doodaan kana gaaraan heshiis ay u dhan yihiin.

Go' aankaas kaddib, guddigii farsamadu wuxuu bilaabay in uu xiriir la sameeyo qaybaha kala duwan ee Soomaaliya si uu uga helo oggolaansho ay shirka kaga soo qaybgalaan. Guddigaasi markuu uu na soo gaaray waxaannu u xaqiijinnay in ay Puntland shirkaas ka qaybqaadanayso. Dhammaan kooxdayadii SRRC waxaannu isku wargashannay in aannu si wadar ah shirka uga wada qaybqaadanno. Sidaas oo kale, waxaa oggolaaday kooxihii kala duwanaa ee Muqdisho isku haystey. Shakhsiga keli ah ee shirka ka horyimid, sharciyaddiisana shaki geliyey wuxuu ahaa mudane Cabdiqaasiim Salaad Madaxweynaha TNG, oo shirka u arakayey shirqool lagu majoxaabinayo.

Waxaa ku gacansayray Golihiisii Baarlamaanka TNP iyo xukuumaddiisii, kuwaas oo dabadeed khasab kaga dhigay in TNG-du si aan dibudhac lahayn kaga qayb-qaadato shirka dibu-heshiisiinta. Qolada kale ee inkasta oo lagu martiqaaday, diiddey in ay shirka ka soo qaybgasho waxay ahayd Soomaliland. Shirkaani wuxuu kaga duwanaa shirarkii ka horreeyey ka soo qaybgalka baaxadda ballaaran ee qaybaha kala duwan ee bulshada Soomaaliyeed. Taasi waxay noqotay markii ugu horraysey oo ay si siman shirka uga wada qaybqaataan kooxaha siyaasadeed iyo bulshada rayidka ah. Kuwaas oo loo aqoonsaday xoogagga dhabta ah ee dalka ka jirey.

Dhamman waxaa nalaku wargeliyey tirada xubnaha shirka ka qaybgalaya iyo magaalada shirku ka dhacayo ee Eldoret, Kenya. Puntland waxay ii dooratay in aan noqdo madaxii wafdiga shirka uga qaybgelayey. Waxaa markii hore i raacay wafdi ballaaran oo uu ka mid ahaa Madaxweyne ku-xigeenkii Puntland Maxamed Cabdi Xaashi, inkasta oo isaga iyo madax kaleba ay ayaama yar kaddib Puntland dib ugu noqdeen, si ay halkaas shaqadii uga sii wadaan. Wafdigayagii waxaa Eldoret kaga haray intii aannu u garannay in joogitaankoodu shirka muhiim u yahay, laba arrimood awgood:

- Tan hore in ay hawlaha shirka kaalin firfircoon ka qaataan.
- Tan labaad in ay ergooyinka iyo diblomaasiyiinta shirka ka soo qaybgalay xiriir joogto ah la yeeshaan si aannu gogoldhig ugu samayno kasbashda hoggaaminta dalka.

Waxaannu bishii Oktoobar 2002dii tagnay Eldoret halkaas oo ay nooga soo horreeyeen wufuuddii kale. Hoteelladii way naga hor buuxsameen, dabaded hoteello yar yar oo magaalada ku dhexyiil baa wafdigaygii la geeyey, anigana guri bay i dejiyeen. Subaxii danbe waxaan tagnay madashii shirka oo la fadhiyo, halkaas oo wasiirkii arrimaha dibadda ee Kenya, ka jeediyey khudbad munaasibadda loogu talaggalay. Markii la galay dooddii shirka waxaa lagu heshiiyey in xabbad-joojin dalka oo dhan laga hirgeliyo, taas oo ay saxiixeen lix iyo toban mas' uul oo shirka joogay. Dabadeed waxaa la qabtay guddiyo kala duwan oo loo xilsaaray in ay ka soo shaqeeyaan qodobbo kala duwan ee shirka looga doodayey. Reer Puntland waxay xoogga saareen hawlaha guddiga dastuurka, kaas oo ahmiyad gaar ah u lahaa, oo ay in

muddo ah ku dadaaleysey sidii dalka oo dhan looga hirgelin lahaa habka federaalka oo xaqiiqo ahaan daawa u noqon karey isku soo noqoshada shacbigii burburku kala erdheeyey.
Dhinaca kale, waxaannu la soconney dadaalka ay wadeen beelaha Hawiye oo sababa iyaga gaar u ah awgood ku dhegganaa in dalka dib loogu soo dhiso habkii dhexe oo hore u jirey oo run ahaan looga hortegi karo sad-bursiga iyo amarkutaagleynta. Markii uu shirku mudda afar bilood ah ka socdey magaalada Eldoret, ayaa waxaa isbeddeshey xukuumaddii dalka Kenya, oo waxaa ka dhalatay xukuumad cusub ee uu hogaaminayo mudane Mwai Kebaki, taas oo go' aamisay in shirka Nayroobi loo wareejiyo. Markii shirkii Nayroobi la keenay waxaa la geeyey xarun ku dhex taal Empagathi (College of Technology). Xukuumadda cusubi waxay maamulka shirka u soo magacaabay Mr. Kiplagat.

Ma garan karo haddii Mr. Magwale oo maamulayay shirkii Eldoret meesha looga wareejiyey arrimo siyaasadeed iyo in daawo looga dhigayey cabashooyin badan oo hore looga geeyey. Ergooyinkii si habaysan baa loo kala dejiyey, hawlihii shirku si wanaagsan bay halkaas uga bilaawdeen. Dhowr bilood kaddib, guddiyadii loo kala xilsaaray deraasadda dhowr qodob oo mudnaanta kowaad kaga jirey ajeendada shirka, si sharaf leh bay uga soo dhalaaleen xilalkii loo igmaday, warbixinnadii laga sugayayna waxay xoghaynta shirka ugu soo gudbiyeen muddadii loo qabtay. Isla ayaamihiiba waxaa warbixinnadii ay guddiyadu keeneen la soo hordhigay shirweynaha. Markii dooddii furantayna waxaa ka hadalkooda isku wada qoray dhammaan ergooyinkii shirka. Dooddii way dheeraatay oo waxay laba goor dhaaftay muddadii loogu talaggalay. Kolkii dooddii faraha ka baxday, dhowr qof oo waxgarad ah baa iskood isugu deyey in ay u kala dabqaadaan madaxdii ergooyinka, si ay mowqifyada ay kala taagnaayeen isugu keenaan meel dhexe, dabadeedna doodda halkeeda lagu joojiyo oo laga maarmo in qodobbada mid mid loogu codeeyo. Nasiibdarro, dadaalkaasi mirodhal ma noqon, dooddiina halkeedii bay ka sii socotey.

Jiitanka dooddu waxay khasab ka dhigtay in shirkii dhammaan waayey, kharashkiina faraha ka baxay, deeq-bixiyeyaashiina dulqaadkii

ka dhammaaday iyaga oo si toos ah iyo si dadbanba u muujiyey in taageeradoodii dhaqaale gabaabsi tahay. Ciriiriga dhaqaale ee shirka soo foodsaaray, wuxuu saamayn xoog leh ku yeesheen ergooyinkii shirka, kuwaas oo jiifkii iyo cunnadiiba culays ku noqdeen, oo hoteelladii ay degganaayeen ay bilaabeen in ay albaabada ka xirtaan, markii lacagta lagala raagaba. Dheeraanta dooddii shirweynaha ka socotey ka sokow, shirku wuxuu marar badan u joogsanayey maqnaanshaha badan ee madax kooxeedyada Muqdisho oo si bareer ah shirka u lug jiidayey, kuwaas oo cudurdaar ka dhigan jirey shirar iyo wada-tashiyo Muqdisho ka socdey oo joogitaankooda looga baahnaa. Dhib kasta oo shirka soo foodsaaray, wuxuu bartamihii 2004tii soo gaaray heer gebagabo ah. Qodobkii ugu danbeeyey ee shirka la soo hor dhigay wuxuu ahaa laba axdi oo ku meel gaar ah oo ku kala salaysan hab fideraali ah iyo hab dhexe. Kala doorashadaasi waxay keentay in dooddii aad looga murmo, habsami u socodkii shirkuna khalkhal galo.

Xaaladdaasi waxay socotey dhawr toddobaad, aakhirkiina waxaa lagu heshiiyey in la qaato axdiga federaalka ah. Arrintaasi waxay keentay in Madaxweynihii TNG mudane Cabdiqaasim diido Shirkii iyo wixii lagu go'aamiyeyba, barqannimadiinna isaga oo caraysan ayuu Muqdisho u duulay. Sababta ugu weyn oo Madaxweynaha TNG-du ka carooday ma ahayn Axdiga Federaalka, balse waa kala-tagga TNG-da oo aan cidina ku harin, isagiina cidla la dhigay. Dadaal badan oo diblomaasiyiin shisheeye ah iyo saraakiil IGAD ka tirsani wada jir u sameeyeen waxay, muddo gaaban, ku guuleysteen in ay Cabdiqaasim shirka ku soo celiyaan. Isla waqtiyadaas waxaa Nayroobi soo gaarey.

Madaxweynaha Ugandha Yweri Musaveni oo ahaa guddoomiye sannadeedkii IGAD si uu u dhexgalo khilaafka ka dhex jirey madaxda Soomaaliyeed ee shirka isugu timid. Madaxweynnuhu wuxuu khudbad dheer ka akhriyey qolweynihii lagu shiriyey ergooyinkii shirka ka qaybgalay oo ku yaal Safari Park Hoteel ee Nayroobi. Khudbaddiisu waxay ahayd mid ay ku dheehnayd walaalnimo, waano iyo ku baraarujin dhibaatooyinka Soomaaliya ka jirey, taas oo uu ka baxshay sawir aan weligiis laga dhex muujin shirarkii faraha badnaa ee kan ka horreeyey, sawirkaas oo uu kala mid dhigayey waxa dalka ka socday xasuuq sii kordhaya oo indhaha laga qarsanayo.

Waa arrin dhammaanteen ceeb inaku ah in aynnu indhaha ka qarsanno. Khudbaddaasi waxay abuurtay dareen isu soo dhowaansho aan hore Soomaalida looga baran. Soomaalida ka sokow, hadalladii Madaxweyne Musaveni waxay weliba qiirageliyeen jaaliyadihii dibadaha ku noolaa iyo shacbi weynihii kale oo shirka goobjoogga ka ahaa. Ugu danbayntii wuxuu canaan xoog leh u soo jeediyey madaxda Soomaalida oo , sida uu yiri, danahooda gaarka ah jecel in ay ka hor mariyaan danta guud. Wuxuu yiri: ' Hab-dhaqankan mirihiisii waa la arkay oo hadda waxaa loo baahan yahay in si waddaninnimo ku dheehan tahay loo wajaho dhibaatooyinka Soomaaliya ka jira si dalka loo daba qabto' .

Intaas kaddib, wuxuu shir gaar ah la galay dhammaan madaxdii shirka ka soo qayb gashay oo mudane Cabdiqaasim ku jiro, kuwaas oo uu mid mid uga dhegeystey waxay ka qabeen go'aannadii uu shirku gaaray iyo waxa ay la ahayd in dib loogu noqdo ee la hagaajiyo si shirku is afgarad ugu dhammaado. Qodobbadii Cabdiqaasim soo jeediyey waa laga dooday, si aanu shirku u fashilminna, tanasulaadkii uu doonayey waa loo wada oggolaaday. Go'aannadaas waxaa lagu qoray heshiis gaar ah oo tixraac u noqon doona Axdigii lagu heshiiyey. Si loo rasmiyeeyo heshiiskii lagu saxiixay hoteelkii Safaari Park, adduunweynahana loo muujiyo in shirkii guul ku dhammaaday, maamulkii shirku wuxuu subaxdii danbe ku diyaariyey Madaxtooyada dalka Kenya xaflad weyn, taas oo loogù talaggalay in madaxdii heshiiska gaartey ay halkaas ugu saxiixaan iyada oo Madaxweynaha Kenya goobjoog ka yahay.

Markii axdigii la isla gartay, waxaa la gudaggalay qaybsashadii iyo xuliddii xildhibaanada iyada oo la waafajinayo axdiga. Shir laga yeeshay habkii loo raci lahaa qaybsashada xildhibaannada waxaa lagu heshiiyey in wax lagu qaybsado habkii wax loogu qaybsaday shirkii Carta (Jabbuuti) ee lagu dhisay TNG-da. Taas oo jirtey, ayaa beelo ka mid ah beesha Daarood waxay ka midoobeen sidii ay u dhici lahaayeen tiradii beesha Majeerteen ku lahayd Carta. Iyaga oo arrintaas ka duulaya ayaa beelihii Daarood waxay dacwad arrintaas ku saabsan u gudbiyeen Guddigii Khilaafaadka ee IGAD, kaas oo go' aankiisu kamadanbays yahay oo aan racfaan laga qaadan karin.

Waxaa magaalada Nayroobi la isla dhexmari jirey in aan guddigaas lagu kalsoonaan karin, oo uu hore arrimo la isku hayey ka gaarey go'aanno aan hagaagsanayn. In aan guddigu hufnayn waxaa isku raacay beelaha oo dhan mase jirin wax ay ka samayn kareen oo khasab baa lagu ahaa in go'aannadiisa la iska oggolaado. Guddigu markii uu galay dacwooyinkii ay beelaha Darood hor geeyeen, wuxuu si fudud ku gaarey isaga oo aan waxba naga weydiin dacwada nalaka soo qoray, ama dhegeysan waxa aannu ka qabno go'aan aan sharci iyo dhaqan midna ahayn oo uu shan kursi kaga qaaday beesha Majeerteen. Kuraastaas wuxuu beesha Marreexaan ka siiyey saddex, sidaasna waxay ku yeelatay 14 kursi halkii ay Carta ku lahayd 11 kursi. Sidaas oo kale, beesha Leelkase wuxuu siiyey laba kursi , taas oo sidaas ku yeelatay 5 kursi halkii ay Carta ku lahayd 3. Markii intaas nalaka jaray, baannu dhexdayada ka gaarnay in aannu iska jarno laba kursi oo kala siinno beesha Warsangeli iyo beesha Dashiishe, kuwaas oo sidaas ku kala yeeshay Warsangali 5 iyo Dashiishe 2 kursi, halkii ay Carta ku kala lahaayeen 4 iyo 1 kursi. Beesha Majeerteen, iyada oo dooneysey in ay iska fogeyso wax carqalad ah oo ay shirka u geysato, waxaa ku khasbanaatay in ay garsoorxumadaas iska liqdo, oo markii la gaaro wax wada qeybsi ku salaysan hal qof iyo hal cod xaqu caddaan doono.

Ma aanan garan meel nalakala dagaallamayey, guddigii sare ee IGAD oo ka koobnaa wasiirrada arrimaha dibbadda ee dawladaha ku bahoobay IGAD, baa mar labaad nooga daba yimid qaybtii yarayd ee naloo reebay. Guddigaasi wuxuu sandulle nooga dhigay in afar qof oo Harti ah oo ay iyagu wateen aannu khasab kuraas ku siinno. Shakhsiyaadkaasi waxay kala ahayeen Jaamac Cali Jaamac, Caasho Axmed Cabdalle, Cali Baashe iyo Zakariye Xaaji Maxamuud, dhammaantoodna waxaa daba ka riixayey dawladda Jabbuuti. Arrintaas si xoog leh baan uga hortagey, waanse ku guuldarraystay oo go' aankoodii baa meelmaray. Markii beelihii soo dhammaystireen soo xulidda xildhibaannada, waxaa si rasmi ah loo furay Golihii Baarlamaanka Federaalka ku meel gaarka ah ee Jamhuuriyadda Soomaaliya.

Dhaartii kaddib waxaa shirkii ugu horreeyey guddoomiye loogu doortay xildhibaankii ugu fac weynaa, kaas oo noqday mudane Xirsi Bulxan. Sida la og yahay Golaha laguma dooran sida caadi ahaan xildhibaannada Barlamaannada loo doorto oo waxaa lagu soo xulay qaab qabiil, halka Barlamaannada dunida loo doorto qaab degaan, sidaas oo kale looma tixgelin waayo' aragnimo iyo aqoon. Xildhibaannada TFP-da isugu yimid kuma socon barnaamijyo axsaabi horseed ka tahay, bal waxay ka tarjumayeen xaaladihii kala geddisnaa ee dalka ka jirey iyo danihii iyana kala duwanaa ee ka jirey degaannada ay qabqablayaashu ka talinayeen. Arrimahaas oo dhan baa sabab u ah sal la' aan ka dhalatay hoggaamin xumadii joogtada ahayd ee Baarlamaanka soo foodsaartay.

## DHISMIHII HAY'ADAHA QARANKA

### 1.Golaha Shacbiga (TFP)

Bishaas maamulkii ku meel gaarka ahaa ee TFP wuxuu diyaariyey habkii lagu dooran lahaa maamulka rasmiga ah ee Baarlamaanka. Jagadaas waxaa isu soo sharraxay dhawr qof, labada musharrax ee hormuudka ka ahaa doorashadaas waxay kala ahaayeen Shiikh Aadan Maxamed Nuur (Adan Madoobe) oo taageero ka haystay kooxdayadii SRRC iyo Shariif Xasan Shiikh Aadan oo taageero ka haystay kooxaha Muqdisho iyo RRA (Rahanweyn Resistance Army). Olol' olaha doorashada Shariifka waxaa waday Maxamed Qanyare Afrax, kaas oo uga dan lahaa in uu TFP-da gacanta ku dhigo si uu ugu shaqaysto, danihiisa siyaasadeedna ugu fushado. Halka kooxda SRRC-du doonaysey in TFG-du noqoto tiir adag oo u adeegta sidii qarannimada dib loogu soo noolayn lahaa. Doorashadii waxaa ku guulaystey Shariif Xasan Sh. Aadan. Doorashadaas kaddib waxaa loo gudbey doorashadii Madaxweynaha. In kasta oo, run ahaan, ol' olaha doorashada Madaxweynnuhu socotey muddo dheer ka hor doorashada Baarlamaanka. Annagu reer Puntland ahaan, muddo hore ayaannu ol' olahaas bilownay. Guddi gaar ah ayaan u saarnay.



Doorashadii Madaxweyne C. Yuusuf– Oktoober 2004



Dhaartii Madaxweyne C. Yuusuf– Nairobi Oktoobar 2004



Madaxweyne C. Yuusuf oo la kulmay Koofi Anaan– Xoghayihii hore ee (UN)ka



Heshiiskii Madaxweynaha C. Yuusuf iyo Shariif Xasan ee lagu qabtay magaalada Cadan 2006. Cali C. Saalax ayaa dhexdhexaadiyey






Shirkii Iskaashiga ee Sanca– Dawladaha Somaliya, Yeman, Suudaan





Madaxweyne Yuusuf oo booqasho rasmi ah ku tegay dalka Kuwait.



President Yusuf, President Kumaratunga of
Sri Lanka iyo Xuseen Saylaan, New York 2005.



Madaxweyne C. Yuusuf oo booqasho Rasmi ku yimid dalka Sucuudiga 2005




Madaxweye C. Yuusuf oo kulan la qaatay Madaxweynaha Koonfur Afrika-Tabo Mbeke



Madaxweye C. Yuusuf oo kulan la qaatay Madaxweynaha

Tansaaniya **Jakaya Mrisho Kikwete**





Madaxweyne C. Yuusuf oo ka hadlaya Xarunta Jimcidda Quruumaha (UN General Assembly) ee magaalada New York, iyo isagoo kulan la qaatay xoghaya guud (UN) ka Ban Ki-Moon

President Yusuf, PM. Meles Zenawi, Seyoum Mesfin Foreign Min., General Abdullahi Ali Omar (Ina Libaax sanka taabtay) iyo Xuseen Saylaan. Addis Ababa, Oct. 2006.





Amb. Rienburger US Amb to Kenya, H.E. President, US Under Sec. of State Jandaye Fraiser, PM. Ali M Geddi and Amb. John Yates US Special Envoy to Somalia). Baydhabo, April 2007.

Madaxweyne C. Yuusuf oo booqasho rasmi ku tegay dalka Sucuudiga sannadkii 2005






Madaxweyne C. Yuusf oo booqasho rasmi ah ku tegay dalka Shiinahah sanaadkii 2006.

Wuxuu la kulmiye madaxweynaha dalka Shiinaha

President Yusuf and President Ho Jintu in Beijing, China in 2006 (during China−Africa Summit)





Madaxweyne C. Yuusuf oo booqday madaxweynaha Faransiiska Mr. Sarkozy



Presidet Yusuf, PM Geddi, Gen. Darwish, Xussen Saylaan, Xiif Cali Taar, Cabdirashid Xirsi, Cubayd, iyo qaar kale). Baydhabo, April 2007







Madaxdii dawlad goboleedka Puntland iyo madaxweyne C. Yuusuf
Sawirka hoose waa: Madaxweyne Faroole iyo wafdi la socday oo booqasho ugu tegay Madaxweyne C. Yuusf dalka Yemen kaddibna qado sharaf loo sameeyey.

Guddigaas waxaan kula taliyey in, inta aanay hawlahooda gudaggelin ay samaystaan barnaamij shaqo oo ay ku hawlgalaan. Sidaas oo kale, waxaan kula taliyey in ay ergooyinka laba u kala saaraan: kuwo dulman iyo kuwo wax dulmiyey, kuwo aamminsan habka federaaliga ah iyo kuwa aan aamminsanayn. Beelaha Hawiye ma ayan oggolayn habka federaaliga ah, mana ayan oggolayn in nin aan Hawiye ahayni uu Madaxweyne dalka ka noqdo. Sidaas awgeed, waxaannu isla garannay in aannaan beeshaas waqti badan ku lumin, haddiise laga helayo shaqsiyaad iskala sarreeya qabiilka oo ay Soomaalinnimadu ku weyn tahay in lala xiriiro oo la soo dhoweeyo.

Markii aan dhinacyo badan ka eegay, waxaan guddigii ku adkeeyey in ay xoogga saaraan beelaha Daarood, Dir koofureed, Digil iyo Mirifle, Jareer Weyn iyo beesha Gibil Cad. Muddo markii la joogaba waxaan guddigii ololaha noogu xilsaarnaa ku xoojinayney shaqsiyaad ka wakiil ah beelaha aannu sida gaarka ah u danayneyney, tan iyo intii aannu ka gaarney in xubnihii guddigu noqdaan kuwo matala Soomaali oo dhan. Guddigaasi wuxuu shaqaynayey maalintii uu shirku bilowday tan iyo maalintii doorashada la qabanayey. Markii rasmi ahaan loogu dhawaaqay in ololihii doorashada Madaxweynennimadu bilowday, ayaa dhammaan raggii hawadu kaga jirtey waxay bilaabeen in ay isu diyaariyaan doorashadaas, diyaarsadaanna barnaamijkii ay dalka ku hoggaamin lahaayeen oo ay shirka TFP-da la hortegi lahaayeen, xubnaha Baarlamaankana cod kaga heli lahaayeen.

Ka qaybgalka doorashadu waxay u furnayd muwaadin kasta oo buuxin karey shuruudaha asaasiga ah ee ku cad Axdi qarameedka. Shuruudda kale ee ku xirnayd ka qaybqaadashada doorashadaas waxaa ka mid ahaa bixinta $2000 doolar oo tartamuhu isku diiwaan gelinayey.

## Doorashadii Madaxweynaha

Codayntii loogu tartamayey Madaxweynennimada waxaa la galay 10kii Oktoobar 2004tii. Waxaa xildhibaannadii la isugu keenay qol weyn oo ku dhex yaal gegida cayaaraha Nayroobi, halkaas oo doorashada Madaxweynnuhu ka dhaceysey.

Isla qolweynahaas ayaa musharraxiintii la isugu keenay, waxaase la fariisiyey meel gaar ah. Tirada isdiiwaan gelisey ee loollaanka ugu jirey jagadaas waxay gaarayeen dhawr iyo labaatan. Sidaas wakiilladii IGAD iyo ergooyinkii ka socdey beesha caalamka waxaa iyagana la fariisiyey meel u gaar ah. Markii qolweynihii lagu soo wada ururay, Guddoomiyaha Baarlamaanku wuxuu musharraxiintii, isaga oo raacayey sida ay u kala horreeyaan xarfaha higgaadda magacyada, mid mid ugu casumay in ay is taagaan halkii loogu talaggalay si ay fagaarahaas ugu soo bandhigaan barnaamijkii ay dalka ku hoggaamin lahaayeen. Markii la ii yeeray waxaan halkaas ka jeediyey barnaamijkaygii siyaasadeed, oo ay qodobbadiisa ka mid ahaayeen:

- In aan ku dadaali doono hirgelinta habka federaaliga ah, kaas oo aan aamminsanahay in looga biskoon doono maamul xumadii iyo awood marooqsigii uu na baday habkii keli-taliska ahaa.
- In aan xoogga saari doono dibu-heshiisiinta shacbiga Soomaaliyeed, isla markaasna, ku barbar wadi doono barnaamij hub ka dhigis, dib u jihayn iyo shaqo abuur ku wajahan miliishiyooyinka hubaysan ee dalku ka xasili waayay.
- In aan ku dadaali doono sidii muddo gaaban dib loogu soo dhisi lahaa ciidammadii qaranka iyo kuwii amniga. In aan xoojin doono hay' adaha qaranka lafdhabarta u ah, si loo sugo sharciga iyo kala danbaynta, loogana baxo fawdada iyo musuqmaasuqa, sidaasna aan dalka ku gaarsiiyo maamul wanaag.
- In aan ku dadaali doono sidii dib loogu soo dhisi lahaa kaabayaashii dhaqaalaha, isla markaasna loogu horumarin lahaa khayraadka dalka ku jira.
- In aan ku dadaali doono sidii dalka looga hirgelin lahaa dhaqaalaha ku dhisan suuqa xorta ah, sarena loogu qaadi lahaa hal abuurka muwaadinka, isla markaasna loo kobcin lahaa dhaqaalaha dalka iyada oo la xoojinayo wada shaqaynta xukuumadda iyo qaybta gaar ahaaneed ee dhaqaalaha.
- In aan xoojin doono iskaashiga caalamiga ah si TFG-du u kasbato taageero isugu jirta mid siyaasadeed, diblomaasi iyo dhaqaale; iskaashigaas oo la'aantiis aan dalku si fudud cagahiisa dib isugu soo taagi kari doonin.
- In aan ku dadaali doono sidii dib loogu soo noolayn lahaa

adeegyadii dawladdu bulshada u haysay oo in muddo ah burbursanaa. Markii musharrixiintii ka soo wada jeensadeen barnaamijyadoodii, ayaa kolkii ay saacaddu ahayd 11:00 am waxaa la bilaabay codayntii. Codayntii Xildhibaannada oo u dhacaysey sida ay magacayadoodu u kala horreeyaan. Xildhibaankii codeeyaba meel aan ahayn meeshii uu hore u fadhiyey buu fariisanayey, si uusan u dhexgelin oo saamays ugu yeelan xildhibaannada aan weli codkooda bixin. Codka waxaa lagu ridayey sanduuq muraayad ah oo wixii lagu ridayo loo wada jeedo. Guddoonka Baarlamaanka baa mas'uul ka ahaa tirinta codadka. Musharrax kasta wakiil baa wuxuu u joogey meeshii codadka lagu tirinayey.

Wareeggii kowaad saddexdii musharrax oo ugu cod badnaa waxay kala heleen tirada soo socota:

| | |
|---|---|
| Cabdullaahi Yuusf Axmed wuxuu helay | 80 cod |
| Cabdullaahi Axmed Caddow wuxuu helay | 60 cod |
| Maxamed Qanyare Afrax wuxuu helay | 33 cod |

Codadkii kale waxay u kala qayb sameen musharraxiintii kale ee tartanka ku jirtey. Mudadii hakashada lagu jirey, saddexdayadii musharraxba waxaannu ku dhaqaaqnay sidii aannu ku soo kala jiidan lahayn codadkii musharraxiinta wareeggii hore ku hartay. Anigu ololahaygii waxaan ka bilaabay mudane Cabdiqaasim, Madaxweynihii TNG-da, kaas oo aan ka codsaday in uu igu soo wareejiyo codadkii uu helay, nasiib wanaag wuu iga aqbalay wuxuuna weliba iga ballanqaaday in uu xildhibaanada beesha Hawiye igala hadli doono si ay codka ii siiyaan.

Sidaas oo kale ayay xildhibaannadii beesha Marreexaan codkooda iiga ballanqaadeen. Beesha Digil-Mirifle oo hore ba codkooda iiga ballanqaadday, waxay ii xaqiijiyeen in ay ballankoodii ku taagan yihiin. Xuseen Caydiid, Maxamed Dheere iyo kooxo kale oo beesha Hawiye ka tirsanaa ballan bay iga qaadeen.
Maxamed Qanyare oo ahaa ninka saddexaad ee tartankii kowaad ugu cod badnaa, hore ayaan ugula heshiiyey in uu codadkiisa igu soo wareejiyo haddii ay noqoto in uu tartanka labaad ku haro. Markii aan qiimeeyey wixii iiga soo baxay xiriirradii aan muddadaas yar dad kala duwan la yeeshay, waxaa ii muuqatay in ay rajadaydu wanaagsan tahay.

Muddo gaaban kaddib, waxaa lagu noqday qolweynihii, waxaana toos loo bilaabay codayntii, markii la dhammaystirayna, waxaa la bilaabay tirintii cododka, dabadeedna waxaa lagu dhawaaqay natiijadii codaynta. Anigu waxaan helay 147 cod, Caddow wuxuu helay 81 cod, Qanyarena wuxuu helay 61 cod. Markii la arkay in aan 275ta cod ka helay 147, taas oo ka badan boqolkiiba konton tirada xildhibaannada uu Golaha Shacbigu ka kooban yahay, ayaa wakiilladii beesha caalamku waxay isku raaceen in ay codayntii dhammaatay oo ay guushii aniga i raacday, musharraxii igu xigey mudane Caddow ayaase diidey taladaas, isaga oo meesha ka caddeeyey in uusan codaynta oggolaanayn tan iyo inta uu wareegga saddexaad dhammaanayo.

## ANIGA IYO CABDULLAAHI AXMED CADDOW

Aniga iyo Caddow waxaannu ahayn kuwo hore isu yiqiin, labadayaduba waxaannu ahayn saraakiil ka tirsan ciidammada dalka, anigu waxaan ka tirsanaa XDS, isaguna wuxuu ka tirsanaa Ciidanka Ilaalada Cashuuraha (Financial Guards), ciidankaas oo uu ka gaaray derejada taliye Ku-xigeen. Mase aan xusuusto in aannu is aragnay wixii ka danbeeyey afgenbigii Siyaad Barre.Waxaan ogaa in mudane Caddow uu mas' uul sare ka noqday xukuumaddii Siyaad Barre, tartiib-tartiibna qoyska reer Siyaad ugu biiray, kaddib markii gabar uu dhalay uu guursadey wiil Siyaad Barre dhalay. Waxaa kale oo aan warar ku maqlay in ay Caydiid is afgaran waayeen, dabadeedna uu door bidey in uu dibadihiisa isaga noolaado.

Mudane Caddow wuxuu dib siyaasadda dalka ugu soo laabtay markii lagu dhawaaqay in Jabbuuti lagu qaban doono shir dibu-heshiineed oo Soomaaliya dawlad loogu dhisayo. Abaabul xoog leh ayuu halkaas ka galay, wuxuuna isu sharraxay jagada Madaxweynenimo, waxaase uga adkaaday mudane Cabdiqaasim oo ay isku beel yihiin.

Sannadkii 2002dii aniga oo Boosaaso jooga, ayaa waxaa iigu yimid laba nin oo beesha Sacad u dhashay oo ka socdey Cabdullahi Caddow. Nin waa aan garanayey oo wuxuu ahaa Cabdirashiid Ilqayte, ninkii kalese ma aan xusuusto.

Labadaas nin waxay ii sheegeen in ay dhanbaal iiga wadeen mudane Caddow, isla markaasna ay doonayeen in jawaabtayda oo qoraal ah ay u geeyaan diyaarna ay u yihiin in ay magaalada sii joogaan inta ay jawaabtayda ka helayaan. Waxaan ku iri haddii aad sidaas garateen waxaan idinka codsanayaa in aad oggolaataan in maalmaha aad Boosaaso joogtaan aan anigu idin martigeliyo. Way oggolaadeen dabadeedna hoteel ayaannu dejinney.

Nuxurka dhambaalku wuxuu ahaa, in beesha caalamku ay qabanayso shir hor leh oo Soomaalida lagu heshiisiinayo, isaguna uu danaynayo in uu shirkaas isaga sharraxo Madaxweyne, sidaas awgeedna uu aad ugu baahan yahay taageeradayda. Wuxuu ii soo sheegay oo kale in haddii uu jagadaas ku guulaysto uu igu abaalmarin doono jagada Ra' iisul Wasaare. Habeenkii baan shir degdeg ah ugu yeeray xubno ka tirsanaa Baarlamaanka iyo Xukuumadda Puntland, waxaana hor dhigay dhambaalkii Caddow.

Aragtiyo kala duwan kaddib waxaa wadajir la igula taliyey in aanan wax qiimo ah siin dhambaalka, isagana loogu jawaabo si hufan oo lagu garansiinayo in codsigiisu nala yahay ' Quud aan jirin qoryo u guro'. Waxaan madaxdii reer Puntland u soo jeediyey in aannu mudane Caddow weydiinno su'aalaha soo socda:

- Waxa uu ka qabo in dalka lagu dhaqo habka federaalka ah;
- Waxa uu ka qabo arrimaha dadka hantidoodii (guryo, beero, iwm) lagu habsaday, iyo tan dadka bililiqaystay hantidii dawladda;
- Waxa uu ka qabo dhulka ay Habargidir qabsatay oo dadkii lahaa laga barakiciyey.

Waxaan ugu dambayntii madaxdii ku adkeeyey in ay qumman tahay in la shaqayntiisu ay ku xirnaato sida ay jawaabihiisu inoo qanciyaan. Ergadii uu noo soo diray baan jawaabtii oo xiran ugu sii dhiibey. Laba toddobaad kaddib waxaa na soo gaartey jawaabtiisii, taa oo uu noogu soo dhiibay nin reer Puntland ah . Jawaabihiisiina waa kuwan:

- In aan hab federaali ah loo baahnayn oo maamulka dalku ku wanaagsan yahay nidaam ku salaysan Ismaamul Goboleedyo (Regional Autonomy);
- In arrintu ku wanaagsan tahay in loo daayo sharciga iyo maxkamadaha;
- In arrintu ku wanaagsan tahay in loo daayo in Soomaalidu ka wada tashato.Waxgaradkii aannu talo-wadaagta ahayn ayaan ula tegey jawaabihii Caddow, giddina waxay u arkeen kuwo ka soo horjeeda garsoorka iyo dibuheshiisiinta Soomaaliyeed. Waxaannu go' aansannay in si hufan loogu warceliyo. Mar labaad ayaannu El-doret ku kulannay. Dhowr wada hadal baannu wada yeelannay. Marmar waxaan isweydiin jirey waxa baas ee ninkaanu og yahay oo ayan ergooyinka kale ogeyn. Wuxuu u hadlayey sidii nin shirka oo dhammi jeebkiisa ku jiro oo hubey in jagada uu u tartamayo uu mar hore meel ku soo hubsadey. Dhawr jeer oo iga codsaday in aannu hoteelka uu degganaa ku kulanno iima ayan suurtoobin sababo kala duwan awgood. Waxaan dabadeed u soo jeediyey in aannu ku shirno gurigii aan degganaa, haddii ay taasi ku adagtahayna waxaan u soo jeediyey in aannu mid ka mid ah hoteelada magaalada ku kulanno. Isku daygii wada hadal aannu aniga iyo mudane Caddow yeelannaa wuxuu xirmay kolkii uu ka cuslaystay in uu yimaado gurigii aan degganaa ama aannu hoteel magaalada ka kiraysanno.

Iyada oo siyaasadda mudane Caddow la xaq dhowrayey ayaa waxaa la galay wareeggii saddexaad ee codaynta, waxaannuna kala helnay 189 aan anigu helay iyo 78 uu isagu. Qolweynaha doorashada waxaan soo galay aniga oo isku kalsoon oo, meel soo dhigtay in haddii aan ku guulaysan waayo tartankaas aan siyaasadda ka fariisanayo. Waxaa kale oo aan tilmaansadey sidii aan noloshayda u dabberi lahaa kolka aan siyaasadda ka haro. Isla markaasna, waxaan ku qanacsanaa in aan dadaalkii u sarreeyey u soo galay sidii aan guusha ku hanan lahaa.

Carada iyo qawadka ay siyaasiyiinta qaarkood, sida Guddoomiyaha Baarlamaanka iyo qabqablayaasha Muqdisho ka muujiyeen guulaysashadayda waxaa qiime tiray kol haddii xildhibaannada intoodii badnayd ay ii caleemo-saareen in aan ahay tartamaha ugu habboon in uu xilka Madaxweyne qabto.

Markii rasmi ahaan loogu dhawaaqay natiijadii doorashada, waxaa halkii aan fadhiyey iigu yimid Kiplagat kaas oo igu yiri: ' Ina keen calankii baynnu saareynaaye' . Intaas kaddib, wuxuu i geeyey halkii ay fadhiyeen IGAD iyo ergooyinkii ka wakiil ahaa beesha caalamka, wuxunna igu martiqaaday in aan dhowr eray oo mahadnaq ah u jeediyo. Intaas kaddib, Caddow buu ku casumey in uu i garab istaago, Caddowna sidii buu yeelay, oo wuxuu meesha ka caddeeyey in aan doorashadii uga adkaaday.

## DHAARTII MADAXWEYNAHA NAYROOBI 14kii OKTOOBAR 2004

Isla habeenkii ay doorashadu dhammaatay, waxaa la iga soo waday qolweynihii ay doorashadu ka dhacday, waxaana la i dejiyey Inter-Continental Hoteel, halkaas oo aan ka samaystay xoghayn kooban oo ii fududaysa qabashada ballammada iyo la-kulanka madaxda, siyaasiyiinta iyo shacbi weynaha, isla markaasna, kala shaqaysa guddigii IGAD abaabulka xafladda iyo goobta ay ka dhaceyso dhartii rasmiga ahayd. Dhowrka beri ee u dhaxaysey waxaan kulammada ka sokow, taleefoonno kula xiriiray madaxda dawlado iyo hay'ada caalami ah, kuwaas oo aan kala hadlay arrimo dalka dan u ahaa. Sidaas oo kale waxaan diyaarinayey khudbaddii aan ka akhriyi lahaa munaasabadda dhaarta, taas oo la qorsheeyey in ay dhacdo 14ka Oktoobar, 2004. Xafladda dhaarta waxaa ka soo qaybgaley Soomaali badan oo qaarkood hore u degganaa Nayroobi, qaar kalena ay u yimaadeen ka qaybgalka munaasabaddaas taariikhiga ah, diblomaasiyiintii shisheeye oo saldhiggoodu ahaa Nayroobi, Madaxweynayaashii IGAD iyo kuwa kale oo Afrikaan ah.

Markii khudboyinkii dhammaadeen, waxaa bilaabatay dhaartii. Guddoomiyaha Baarlamaanka ayaa igu dhaarshey, sida ku cad qodobka 42aad ee Axdiga ku meel gaarka ah, ' Waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaah inaan u guto xilkayga, si daacad ah oo danta dadku ku jirto, dhowrana Axdiga iyo shuruucda Jamhuuriyadda Soomaaliya' .
Koolkii aan dhaartii ka soo jeensadey waxaan munaasabaddii ka jeediyay khudbad yar oo aan meela badan wax kaga taataabtay.

Marka hore, waxaan ku mahadiyey dhammaan dawladihii xafladdan soo abaabulay, kuwii maalgeliyey iyo gaar ahaan dawladda Kenya oo martigelisey. Sidaas oo kale, waxaan mahad u jeediyey madaxdii iyo shaqaalihii u dhabaradaygay ka mira-dhalinta shirkan muddada soo jiitamayey iyo weliba hay'adihii warbaahinta oo shirka ku soo jeediyey indhaha dadweynaha dunida iyo gaar ahaan ummadda Soomaliyeed.

AU-da, IGAD, Jaamacadda Carabta iyo guud ahaanba beesha caalaamka waxaan ka codsaday in aaney u qaadan in dib u soo noolaynta dawladdii Soomaaliya ay ku dhammaatay xilkii Soomaaliya ka saarnaa, wixiise maanta ka danbeeya ay Soomaaliya uga baahan tahay in ay la garab istaagaan taageero dhinacyo badan leh oo lagama maarmaan u ah dalkayaga si uu mar labaad cagihiisa isugu taago. Soomaalida waxaan xusuusiyey sida uu dalkeennu u burburay, dadkeennii u sabooloobay oo dani ku khasabtay in shanta qaaradood uu qaxooti ka noqdo, habkii iyo kala danbanyntii u lumeen, sharaftii iyo xushmaddii aannu adduunka ku laheyni u baabba' day, sidaas awgeed loo baahan yahay in aynnu ka baxno tafaraaruqa halkaas ina dhigay oo gacmaha is-qabsanno si aynnu dalkeenna u dhisanno, dunidana ula saanqaadno.

Khudbaddii waxaan ku soo xiray, dadka hortiisana ka caddeeyey, in la ogaado in aan ku raja weynahay in haddi Alle idmo, aan ku guuleysan doono xilka aan qaaday; in aan diyaar u ahay in aan xataa naftayda u huro gudashada waajibaadka dalka iyo dadkaba iga saran, iyo in aan xilka iska casili doono haddii ay ii caddaato in aanan ka soo bixi karin xilkii aan qaaday. Markii munaasabaddii la soo gabagabeeyey waxaa la i geeyey guri wanaagsan oo aan ku noolaado inta aan Nayroobi ku sugnahay, oo aannu dhammaystirayno dhismihii dawladda iyo hawlo kale. Maalmo ka hor, inta aanan Ra'iisul Wasaaraha magacaabin waxaan u duulay magaalada Addis Ababa si aan guddiga amniga ee AU ula soo socodsiiyo xaaladda Soomaaliya, isla markaasna, uga codsado in dalka la keeno ciidan nabad ilaalineed oo gaaraya labaatan kun. Arrintaas oo aan u arkay inay lagama maarmaan u tahay si dalka loo xasiliyo, ciidammadii qarankana dib loogu dhiso.

# DHISMIHII XUKUUMADDA: TFG

Wada-tashi maalmo qaatay kaddib waxaan gartay in aan Prof. Cali Maxamed Geeddi u magacaabo Ra' iisul Wasaaraha dalka si uu xukuumad tayo leh u soo dhiso, aniga oo tixgelin weyn siiyey talooyin iiga yimid beesha caalamka oo oranayey in aan Ra' iisul Wasaare loo magacaabin mid ka mid ah qabqablayaasha dagaalka sokeeye. Sida Axdiga ku cad, awood qaybsigu wuxuu ku salaysan yahay 4.5. Sidaas awgeed, jagadaan waxaa iska leh beesha Hawiye, oo beelaha Daarood iyo Dhigil Mirifle waxay kala qaateen Madaxweynaha iyo Guddoomiyaha Baarlamaanka. Weliba isla beesha Hawiye dhexdeeda waxaan jagadaan u doorbidey beesha Abgaal, maxaayeelay Madaxweynihii ugu danbeeyey ee TNG-du wuxuu ahaa Habargidir. Iyada oo arrintu sidaas tahay, ayaa rag badan oo ka tirsan beesha Hawiye tartan ugu jireen jagadaas. Sidaas awgeed ma fududayn in arrinta si sahlan loo meelmariyo.

Xulashadii Prof. Cali Geeddi waxaa ka horyimid caqabado sharci ah, oo ma uusan ahayn xubin Baarlamaan. Nasiib wanaag, waxaa xubinnimadiisii Baarlamaanka ku wareejiyey Maxamed Cumar Xabeeb (Maxamed Dheere) oo ay isku beel yihiin. Prof. Cali Geeddi wuxuu dawladdii ku soo dhisay muddadii Axdiga ku xaddidnayd, dawladdaas oo muran yar kaddib, Baarlamaanku ansixiyey. Dawladdu waxay ahayd mid salballaaran, oo isugu jirta wasiirro, wasiiru-dawlayaal iyo wasiir ku-xigeenno, kuwaas oo ay tiradadoodu kor u dhaafeysey 90 xubnood. Sidaas waxaa loo yeelay in beeluhu iska wada dhex arkaan shaashadda xukunka dalka, madaxdii kooxaha Muqdishose kuma ayan farxin qaab dhismeekan, oo ay kaalintoodii hoggaamineed meesha ka maqan tahay. Markii dawladdii la dhammaystiray, waxaan go' aansaday in, inta aanan ka guurin Kenya, aan wafdi isku dhaf ah ee ka kooban Baarlamaanka iyo xukuumadda oo Ra'iisul Wasaaruhu ka mid yahay socdaal ku geeyo gobollo dalka ka tirsan, si ay xog'ogaal ugu noqdaan xaaladda dalka. Safarkaas oo muddo 7 beri ah qaatay waxaannu ku tagnay, gobollada Hiiraan, Shabeellada Dhexe, Baay iyo Dawlad Goboleedka Puntland. Safarkaas si fiican baa wafdigii uga soo faa'iidey, shacabkii ay soo booqdeenna ugu farxeen.

# IS-HORTAAGGII HANAQAADKA DAWLADDA

Marna igama maqnayn in xoogag dahsooni nala leeyihiin talada dalka, marnase kuma aanan fekerin in ay meel walba iyo wakhti walba dagaal nooga soo qaadi karaan, maskaxdana way ka weyn tahay in xukuumad shir caalami ah lagu dhisay oo aqoonsi caalami ah haysata, oo ay hay'adaha dawliga ahi kharash badan ku baxshaan sidii looga hortegi lahaa hanaqaadkeeda. Nasiibdarro, waxaa dhacday in hay' ado caalami ah oo huwan magaca UN-ka ay si bareer ah u abaabuleen, maalgeliyeen kooxo magac iyo midab ahaanba Soomaali ah, run ahaanse ah calooshood u shaqaystayaal aan aamminsanayn wax ka baxsan danahooda yaryar ee maaddiga ah. Sida hab-dhaqankooda ka muuqatey dhowr iyo tobankii sano ee dalku burburka ku jirey qabqablayaashaas danahooda gaarka ah ayey uun ilaashanayeen. Waxaa iyana xusid mudan in ayan hay'aduhu keligood ku ahayn talada lagu doonayey in lagu majaxaabiyo TGF-da, balse ay shirqoolkaas kula jireen shirkado caalami ah iyo hay'adaha wax basaasa oo dhowr dawladood oo aan jeclaysan in dawlad Soomaali ah dib ugu soo dhisanto.

Dhibaatooyinkii la baday iyo carqaladihii loo dhigay muddadii gaabnayd ee TFG-du ku sugnayd magaalada Nayroobi, ayaa tusaale yar looga qaadan karaa heerka ay gaarsiisnayd cadaawadda xad-dhaafka ah ee loo qabey TFG-da iyo gebi ahaanba sida looga horjeedey in dalku ka soo kabto burburka. Ka soo laabashadaydii Addis Ababa, waxaan xukuumadda ka codsaday in, iyada oo la raacayo sharciga dalka u degsan, la soo diyaariyo codsigii rasmi ahaan AU-da loogu weydiisan lahaa in ay, sida ugu dhakhso badan, ugu hawlgasho isku dubbarridka ciidammo nabad ilaalineed oo Soomaliya loo soo diro, dabadeedna Baarlamaanka laga ansixiyo oo dekreeto Madaxweyne lagu soo saaro. Habkaas oo waafaqsanaa talo soo jeedintii guddi uu dalka u soo diray golaha ammanka ee AU si uu u soo qiimeeyo baahida ciidanka loo baahan yahay in Soomaaliya lagu xasiliyo. Markii ay xukuumaddii soo dhammaystirtay mashruucii dalabka ciidammo nabad ilaalineed waxay u gudbisey Baarlamaanka si uu u ansixiyo. Barlamaankii wuxuu arrinta ka fariistay 17kii bishii Maarso 2005. Shirku wuxuu ka

dhacay hoteel weyn oo magaalada Nayroobi ku yaal, waxaana guddoominayey Shariif Xasan Shiikh Aadan. Kulankaas khilaaf weyn baa ka dhacay, markii la is mari waayeyna, guddoomiyuhu wuxuu ku dhawaaqay in uu arrinta cod gelinayo, tallabadaas oo uu uga dan lahaa in uu arrinta u maamulo si aan sharciga waafaqsanayn, xildhibaanno badan ayaase ka horyimid afduubkii uu doonayey in uu shirka ku maamusho. Buuqii sidaas ku dhashay wuxuu sababay gacan ka hadal ay isaga horyimaadeen xildhibaannadii qolweynaha ku shirsanaa, kaas oo ay ku dhaawacmeen dhowr xildhibaan. Dhacdadaasi oo laga sii daayey TV-yada, waxay noqotay mid adduunka oo dhan ka yaabisay, magac-xumo weynno u soo jiiddey guud ahaan Soomaaliya.

Guddoomiyihii Baarlamaanku markuu fidmo ka abuuray xildhibaannada dhexdooda, ayuu hoteelkiisii ku noqday. Dhibaatadii uu abuurayse intaas kuma ekaane, wuxuu si xishood-darro ah, hoteelkiisi ugaga dhawaaqay natiijo been abuur ah oo uu ku sheegay in ajeendadii laga dooday oo cod la geliyey, kaas oo 156 cod lagu diidey in dalka la keeno ciidammo nabad ilaalineed oo ay ku jiraan ciidammada dawladaha safka hore, halka ay 55 cod ku oggolaadeen in ciidammada safka hore la oggolaado.

Guddoomiyuhu wuxuu been abuurkiisa ku sheegay in 6 xildhibaan arrinta ka aammuseen. Tirada qolweynaha fadhidayna wuxuu ku sheegay 217 xildhibaan. Cid aan Guddoomiyaha ahayn ma arkin meel codayni ka dhacday iyo goor la codeeyey toona. Fadeexaddasi waxay daboolka ka qaadday xilkasnimo darrada guddoomiyaha Baarlamaanka.

Si arrintaas xaqiiqadeeda loo ogaado, adduun weynahana loo soo bandhigo ayaa dhowr maalmood kaddib Baarlamaankii shir isugu yimid. Waxaa markaa shirka Baarlamaanka ka soo qaybgalay ergooyin ka socdey beesha caalamka. Guddoomiyihii Baarlamaanku wuu diidey in uu shirka ka soo qaybgalo, dabadeed waxaa khasab noqotay in Guddoomiye ku-xigeenka kowaad mudane Maxamed Cumar Dalxa uu shirka guddoomiyo. Kalfadhigaas waxaa la soo hordhigay isla ajeendadii uu guddoomiyahu ka been sheegay.

Markii laga dooday oo loo gudbay codayntii waxaa oggolaaday 165 xubnood, waxaa diiday 46 xubnood, waxaana ka aammusay 5 xubnnood. Markii la dhammaystiray dhismihii hay'adaha qaranka waxaan xukuumadda ku adkeeyey in ay si degdeg ah ugu hawlgasho sidii, muddada ugu gaaban ee suurtagalka ah, hay' adaha qaranka oo dhammi uga guuri lahayeen Kenya oo Soomaaliya ku tegi lahaayeen si ay halkaas shaqadooda uga bilaabaan. Markii la maqlay go'aanka ay dawladdu ku gaartey in ay dalkii u guurto, ayaa madax kooxeedyadii Muqdisho, sidii dhaqanka u ahayd, waxay buuq aan loo baahnayn ka sameeyeen halkii dawladda xarun looga dhigi lahaa.

Arrintaasi, sidii dhacdadii ka horreysey ee Shariif Xasan sameeyey, waxay noqotay hadal maalmeedkii magaalada Nayroobi. Markaas kaddib baan Ra' iisul Wasaaraha kula heshiiyey in, inta aan dawladdu go'aan rasmi ah ka qaadan halka loo guurayo, uu socdaal gaaban ku gaaro magaalada Muqdisho, si uu u soo hubiyo xaaladda dhabta ah ee ka jirta. Mudda yar ka hor, waxaan socdaal dhowr beri qaatay kaga soo noqday dalalka Khaliijka, kuwaas oo ay Soomaaliya weligeed la lahayd xiriir sokeeye. Madaxda dalalkaas waxaan uga soo warbixiyey halka ay mareysey xaaladda Soomaaliya, waxaana u gudbiyey qoraal aan kaga codsaday taageero wax ku ool ah oo dalka dib loogu soo dhiso. Dalalkaas si fiicanna waa la iigu soo dhoweeyey, taageera fiicanna way ii ballanqaadeen.

Ku soo noqodkaygii Nayroobi, waxaa i soo foodsaartay arrin iga yaabisay. Sida la og yahay, magaalada Nayroobi waxay caan ku tahay burcadnimo abaabulan. Malaha rag burcaddaas ka tirsan baa la socdey safarka aan dalalka Khaliijka kaga soo noqday, dabadeedna waxay ku fekereen in aan halkaas kala soo noqday jawaanno lacag ah. Isla habeenkii bay gurigii aan degganaa weerar ku soo qaadeen, ciidankii ilaalada ahaa ayaase ka hortegey. Dhacdadaas cidina wax kuma noqon oo Ilaah waa naga badbaadshey. Baaritaan la sameeyey, nasiibdarro, ma maqlin cid loo qabtay. Ra' iisul Wasaaruhu wuxuu halkaas kula kulmay siyaasiyiin iyo odayaal fara badan, kuwaas oo ay is weydaarsadeen warbixin iyo talooyin. Subaxdii danbe, wuxuu tegey gegida kubbadda cagta ee Banaadir si uu shacabkii badnaa ee Magaalada

ku soo dhoweeyey uu fagaarahaas uga jeediyo khudbad uu diiradda ku saari lahaa xaaladda dalka. Dhismaha TFG-da, isla markaasna, shacbiga ugu bishaarayn lahaa tallaabooyin ay dawladdu degdeg u qaadi doonto si ay dalka u xasiliso. Nasiibdarro, markii u hadalkii bilaabay, ayaa soo dhoweyn looga dhigay in Jaliilad (bumbaano) lagu qarxiyo. Sidaasna waxay ku dishay dad aan waxba galabsan, kuwa badan oo kalena dhaawacyo baa ka soo gaarey. Nasiib wanaag, Ra' iisul Wasaarihii wuu ka badbaadey qarraxii lala beegsadey, goobtiina si degdeg ah baa loogala cararay. Soo noqdkiisii wuxuu ii xaqiijiyey in, duruufaha ka jira awgood, aan waqtigaan Muqdisho xukuumaddu ku shaqayn karin.

Markii hadalhaynta magaaladii dawladdu u guuri lahayd ay suurtaggal u ekaan weydey, ayaan Guddoomiyaha TFP ka codsaday in uu Baarlamaanka fariisiyo si arrinta degdeg go' aan looga gaaro. Xukuumaddu waxay Baarlamaanka horgeysey barnaamij ah in, inta laga xasilinayo caasimadda, TFG-du ku meel gaar ahaan xarun uga dhigato magaalo kale oo dalka ka mid ah ee xasillooni ka jirto. Xukuumaddu waxay Baarlamaanka u sheegtay in, iyada oo laga faa' iidaysanayo waaya-aragnimadii laga helay xukuumaddii Cali Mahdi iyo tii ka danbaysey ee Cabdiqaasim, ay xaqiiqowdey in, duruufaha Muqdisho ka jira awgood, aaney surtaggal ahayn in xilligaan xukuumadu halkaas ku shaqayso.

In kasta oo xildhibaannada badidood arrinta u riyaaqeen, waxaa si xoog leh uga horyimid madax kooxeedyadii hore ee casimadda. Waxay meesha ka caddeeyeen in tallaabada ay xukuumaddu soo jeedisey ay tahay mid lagu doonayo in caasimadda dalka la wareejiyo. Hadalkaas oo aan waxba ka jirin, sida ku cad Axdiga qaranka in Muqdisho tahay caasimadda Jamhuuriyadda Soomaaliya. Xildhibaannadii waxay iyaguna ku eedeeyeen madax kooxeedyada in ay doonayaan in ay xukuumadda Muqdisho geeyaan, dabadeedna ay iyaga maxbuus halkaas ugu noqoto, sidaasna TFG-da ku baabbi'iyaan iyada oo aan wax shaqo ah dalka ka qaban sidii ay yeeleen TNG-dii. Markii ajeendadaas loo codeeyey waxaa la isku raacay in si kumeel gaar ah dawladdu ku sii shaqayso magaalooyinka Baydhabo ama Jawhar.

Go'aankaas waxaa ka xumaaday madax kooxeedyadii Muqdisho, kuwaas oo warmurtiyeed ay soo saareen ku sheegay in ay Muqdisho tegi doonaan oo ay nabad ka xasilin doonaan. Dabadeed iyaga iyo koox xildhibaanno ah oo Shariif Xasan hoggaaminayo ayaa iyaga oo aan cidna ogeysiin Muqdisho ka degey. Tegidda Muqdisho waxay ula jeedeen in ay dunida ku jahawareeriyaan. Markii ay Muqdisho tageen waxay uruuriyeen tiro miliishooyin ah oo ay ku xereeyeen duleedka Muqdisho, dacaayaddii looga dan lahaana waxay ku fashilantay kolkii miliishooyinkii kala carareen. Dacaayadda qabqablayaasha waxaa soo dhoweeyey qaybo ka mid ah hay'adaha Ummadaha Midoobey ee qaabbilsan Soomaaliya, gaar ahaan kuwa nabadgelyada u xilsaaran. Kormeer ay halkaas ku tageenna aad bay u buunbuuniyeen ilaa ay riwaayaddaas ku sifeeyaan tallaabo loo baahnaa oo mustaqbalka dhow miro-dhal noqon doonta.

Ma garanaayo haddii ay arrintaas awgeed wax taagero ah ku siiyeen. Shariif Xasan oo daba joogeyna, dhinaciisa buu arrinta ka koolkooliyey oo isku dhex masawiray. Waxaase ayaandarro ku dhacday isaga oo dhexda uga jira khudbad uu qabqablayaasha ku ammaanayey oo goobtii madfac xoog lehi ku soo dhacay, halkiina lagu kala cararay. Markii uu isku daygii qabqablayaashu fashilmay, Shariif Xasan wuxuu ku soo noqday Nayroobi. Tallaabadaasi markii ay fashilantay, haddana waxay u soo dhigteen sidii ay u fashilin lahaayeen go'aankii ay dawladdu ku gaartey in ay Baydhabo u guurto. Shariif Xasan iyo qabqablayaashii Muqdisho, waxay la xiriireen Maxamed Ibraahim Xaabsade oo Shariif Xasan abti u ah, iyo Aadan Saransoor, kuwaas oo xilligaas Baydhabo ku sugnaa. Raggaas waxay kula heshiiyeen in aaney dawladdu Baydhabo xarun ka dhigan, waxayna u direen kharajkii ay ku hawlgeli lahaayeen. Arrintaasi sidii ay doonayeen bay ku dhammaatay, oo dawladdii waa laga hor istaagay in ay Baydhabo tagto. Kolkii arrintii Baydhabo isa soo xirtay, xukuumaddii waxay go' aansatey in ay u guurto Jowhar oo ahayd magaalada labaad ee Baarlamaanku hore u go'aamiyey.

Maxamed Dheere oo ah guddoomiyaha Gobolka Shabeellada Dhexe, gacmo furan buu taladaas ku soo dhoweeyey. Waa la garan karey in ayan qaqablayaasha iyo Shariif Xasan qaadan karin oo si ay noqotoba

ay hollinayaan sidii ay u carqaladayn lahaayeen.TFG-du ma ayan haysan wax dhaqaale ah oo ay arrimeheeda ku fushato. Xoogaaga yar ee beesha caalamku ay ugu deeqdayna uma madaxbannaanayn oo waxaa loo soo marinayey UNDP. Sidaas awgeed, xukuumaddu kharaj kasta oo ay u baahato, waxay ku khasbanayd in ay codsi rasmi ah ugu gudbiso hay'addaas. Iyada ayaa dabadeed go'aan ka gaareysa sida , goorta iyo inta ay bixinayso.

Ra' iisul Wasaaraha iyo Wasiirka Qorshaynta iyo Iskaashiga Caalamiga ayaa TFG-da mas'uul uga ahaa xukuumadda xiriirka kala dhaxeeyey hay'addaas. Sidaas oo kale labada mas'uul bay xukuumaddu u xilsaartay wixii arrimo ah ee la xiriirey abaabulka iyo guuritaanka TFG-du dalka ku degeysey. Shirar badan kaddib, waxaa rasmi ahaan go'aan lagu gaarey in maalinta ay taariikhdu tahay 13ka Juunyo 2005tii TFG-du ka guurto dalka Kenya. Go' aankaas waxaa loo gudbiyey Dawladda Kenya, iyaduna gacma furan bay ku soo dhoweysey, isla markaasna, waxay go' aansatay in ay si rasmi ah noo ambabixiso. Xafladdii nalaku sagootiyey waxaa lagu qabtay gegida caalamiga ah ee dayuuradaha ee Nayroobi. Waxaa xafladdaas ka so qaybgalay Mwai Kibaki, Madaxweynaha Kenya iyo marti sharaf kale oo badan.

Khudbad uu halkaas ka akhriyey Madaxweynnuhu wuxuu noo rajeeyey guul, wuxuuna noo xaqiijiyey in ay Kenya ka qayb qaadan doonto xasilinta iyo dib u dhiska Soomaaliya. Aniga oo khudbaddiisii ka jawaabayey waxaan isaga, dawladda iyo shacbiga Kenyaba uga mahadnaqay martigelintii ay noo fidiyeen saddexdii sano ee uu shirkii dibu-heshiisiinta iyo dhismaha dawladdu ka socdey dalka Kenya, waxaana ka codsaday in ay taageeradooda iyo saaxiibnimadooda halkii ka sii wadaan inta ay Soomaaliya cageheeda isku taageyso. Markii aannu gaarney go' aankii guuritaanka waxaan madaxda TFG-da ka codsaday in barnaamijka dhoofitaankayga lagu saleeyo wakhti munaasib ah ee ii suurtaggelin kara in aan casar dheer ku dego magaalada Jowhar, si aan madaxda iyo shacbiga halkaas ku sugan uga mahadceliyo soo dhoweynta ay magaaladooda ku soo dhoweeyeen TFG-da si ay in muddo ah halkaas ugu shaqayso.

Maxamed Dheere, Gudooomiyaha Gobolka Shabeellada Dhexe iyo shacbigii reer Jowharba gegida dayuuradaha bay harkii, iyada oo weliba ay qorraxdu aad u kulushahay, halkaas ugu soo urureen soo dhoweynteyda. Ra' iisul Wasaara, Wasiirka Qorshaynta iyo Iskaashiga Caalamiga mudane Cabdirisaaq Juriile iyo Agaasimaha Madaxtooyada Daahir Mire Jibriil waxay ii xaqiijiyeen in ay dhoofitaankayga ku saleeyeen sidii aan ka codsaday. Arrintaas waxaan mas'uuliyiinta ugu adkaynayey in tegitaankayga Jawhar uu u dhaco sidii lagu ballamay. Digtoonaanta dheeriga ah waxaa igu dhalisay Maxamed Dheere oo ah nin dadaal badan ayse wax kasta ka suuroobaan, arrinta degitaanka Jawharna ay noo lahayd ahmiyad gaar ah.

Nasiibdarro, sidii aan doonayey wax uma dhicin. Raggii aan u xilsaaray diyaarinta dhoofitaankayga waxay heshiis la galeen dayuurad uu lahaa Jaamac Buluug, taas oo Soomaaliya Jaad u qaadda oo aan la garanayn saacadda ay Kenya ku soo noqon kartey. Dib u dhaca dayuuraddu waxay sababtay in Madaxweynaha Kenya oo xafladda ii dhigayey uu isaguna soo raago, dabadeed waxaa khasab noqotay in aan galabgaabkii ka duulo magaalada Nayroobi.

Inkasta oo markii aan dayuuradda fulayey la ii sheegay in aan Jowhar ku degayo, haddana taasi ma dhicin oo wuxuu gabbalku noogu dhacday markii aannu Baydhabo dul mareyney. Dabadeed duuliyihii wuxuu ii sheegay in aannu toos Jabbuuti uga degi doonno. Isbeddelka barnaamijkaygii lagu sameeyey wuxuu iila ekaaday waran dhabarka la iiga dhuftay. Sidaas waxaa igu soo foodsaaray labo arrimood oo aan aad uga xumaaday. Midda hore waxay ahayd in Maxamed Dheere iyo Shacabkii Jowhar oo maanta oo dhan gegida dayuuradaha Jowhar oo qorraxdu aad u kululayd taagnaa oo sidii ballanku ahaa aan loogu iman, kuwaas oo ay dhici karto in ayan la socon waxa sababay dib u dhacayaga oo ay ku wacnayd dayuuradda Jaamac Buluug, markii ay na waayaanna niyadjab weyn ku dhici karay, taas oo runtii aan aad uga xumaaday.Tan kalena waxay ahayd naftaydii oo khatar gashay, oo aaney diyaaraddu wadan shidaal ku filan oo aannu Jabbuuti ku gaarno.

Markii aannu Jabbuuti cagaha soo dhigayna duuliyihii noo sheegay in aan diyaardda dhibic shidaal ahi ku jirin. Markii aan hoteelka imid ayaan Maxamed Dheere telefoonka kula xiriiray. ' Hallow' marki aan iriba afkiisa buu furtay, dhowr daqiiqana waa ii oggolaan waayey in aan hadlo oo intaas isaga ayaa hadlayay. Dulqaad badan kaddib, markii uu ii oggolaaday in aan la hadlo, baan si qabow ugu sheegay dabinka la ii dhigay. Waxaan u sheegay in aan la doonayn oo keli ah in la iga horistaago imaantika Jowhar, balse lagu dadaalay sidii naftayda halis loo gelin lahaa. Nasiib wanaag waan ku guuleystey in aan qanciyo, shakigiina ka saaro. Waxaa kale oo aan ka ballanqaaday in, marka aan safarka dibadda ka soo laabto, aan toos Jowhar uga soo degi doono. Maxamed Dheere ballanqaadkaas aad iyo aad buu ugu farxay, si qaddarin lehna wuu u soo dhoweeyey.

Weli waxaan iswaydiinayaa, ma suurtoobi kartey in saddexdii mas'uul ee maamulka ugu sarreeyey ay sidaas xilkasnimo-darrada ah ugu dhaqmaan, mase khiddada bay wax kaga jireen?! Mid waa la hubaa, waana iska caddahay in shilkaas ay gacan weyn ku lahaayeen kooxo doonayey in TFG-du burburto. Waana iyaga kuwii ka faa'iidaysan lahaa in Maxamed Dheere nalaku diro, iyo in naftaydaba halis la geliyo

## KA QAYB-QAADASHADA SHIRKII DOOXA EE KOOXDA 77

Jabbuuti habeen ayaannu ku hoyanney. Subaxdii Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle ayaannu kulannay, wuxuu nagu martiqaaday in aannu la raacno Dayuuraddiisa, kol haddii aannu u wada soconnay caasimadda Qadar(Dooxa) oo lagu qabanayey shirkii Iskaashiga Dhaqaalaha ee Dalalka Dhexdhexaadka ah. Martigelintii waannu uga mahadnaqnay waannuna ka cudurdaaranney, oo annaga ayaa dayuurad gaar ah wadanney. Barqadii baannu Jabbuuti ka duulnay, magaalo ku taal Boqortooyada Sacuudi Carabiya baannu shidaal ka qadannay, Dooxana waxaannu ka degney goor fiid ah, halkaas oo Amiirka Qadar uu si xushmad leh noogu soo dhoweeyey.

Shirka Dooxa wuxuu fursad u noqday in Soomaaliya oo masraxa siyaasadeed ee dunida ka maqnayd 15 sano ay sidii xubin buuxda uga qaybgasho. Markii TFG-da la soo gaarsiiyey martiqaadkii Amiirka Qatar ee shirka, waxaannu u dirnay wafdi ka qaybgala hawlaha shirka. Wafdigaas waxaa hoggaaminayay mudane Ismaaciil Hurre Buubaa. Wafdigaas heerka sare ah waxaannu halkaas ugu dirnay in aannu dunida u muujinno in Soomaaliya ay dawladi ka dhalatay, diyraarna u tahay in ay dib u buuxiso kaalintii ay kaga jirtey beesha caalamka, iyo in ay bilawga shirkaba ku baraarujiso ergooyinka xaaladda Soomaaliya iyo baahida loo qabo in dawladaha dhexdhexaadka ahi ay si degdeg ah ula soo gaaraan taageero wax ku ool ah.

Ajeendada ugu muhiimsan oo halkaas looga hadlayey waxay ahayd sidii loo xoojin lahaa iskaashiga dhaqaale ee koofur-koofur (south-south). Shirku wuxuu ahaa mid si wacan loo agaasimey, wufuud badanina ay ka soo qaybgaleen. Muddadii aannu halkaas ku sugnayn waxaannu shirar kala duwan gaar gaar ula yeelannay madaxdii shirka ka soo qaybgashay. Markii uu shirku dhammaaday waxaan laba beri ku hakaday magaalada Dubai, halkaas oo aan farriin kaga sugayey dawladda Yemen oo waddey dadaal ay ku dhexdhexaadineysey aniga iyo Gudoomiyaha Baarlamaanka.

Inkasta oo aqlabiyaddii xildhibaannada ay ku sugnaayeen Jowhar, haddana ma jirin tiro sharci ahaan ku filan in Baarlamaanku wax ku go' aamiyo. Sidaas awgeed, kala qaybsanaantii xildhibaannadu waxay sababtay in kalfadhiyadii TFPdu qabsoomi waayaan, dabadeedna TFG-diina shaqayn kari waydo, oo ay weydo wax u ansixiya shuruucdii iyo barnaamijyadii ay ku hawlgeli lahayd. Aniga ayaa si toos ah u weydiistey dawladda Yemen oo ahayd dawladda keli ah oo ay lillaahi ka ahayd in ay Soomaaliya wax la qabato. Dawladda Yemen codsigaas way iga aqbashay, waxayna isla markiiba xoogga saartay sidii ay shirkaas u suurtagelin lahayd.

# YEMEN: ANIGA IYO SHARIIF XASAN

Sida la og yahay, tan iyo markii aan ka soo baxay xabbiskii Itoobiya waxaan ku dhex jirey kooxihii siyaasadeed ee dalka ka jirey, dhowr goorna waxaan isku dayey in, iyada oo wax badan lagu kala duwan yahay, madaxdaas oo dhan shir la isugu keeno, si ay isugu afgartaan dano guud oo midayn karey. Run ahaan, markii aan SSDF hoggaaminayey iyo markii dawlad goboleedka Puntland aan madaxda ka noqday waxaan arrintaas u huray wakhti badan, waxaana ku khasiray dadaal iyo dhaqaale aan yarayn. Marar badan oo lagu guuleystey in siyaasiyiintaas shirar la isugu keeno, laguna heshiisiiyo baa waxaa dhici jirtey in, isla siyaasiyiintaasi, doc faruur ku sameeyaan heshiiskii la kala saxiixday, weli iyada oo ayan qallalin khadkii heshiiska lagu saxiixay.

Arrimahaas iyo kuwo la mid ah ee aan u soo joogey, waxay muujinayaan in madax-kooxeedyada siyaasadeed ee dalka ka jirey aaney u madaxbanaanayn taladooda oo sida ay u badan tahay ay shisheeye ku xirnayeen. Sidaas awgeed, khilaafka TFG-da laga dhex abuuray waxba kama duwanayn kuwii hore loogu kala daadin jirey tala kasta oo ay Soomaalidu gaarto. Waxaase nasiib wanaag ah in maanta ay dalka dawladi ka jirto oo aaney dhici karin in si fudud gudeheeda looga majaxaabiyo. Sidaas darteed, waxaa ii muuqatay in, haddii ay xukuumaddu qaaddo dadaal dheeraad ah, la heli karey talo meelmar ah oo lagu qancin karey in xildhibaannada Muqdishu iyo Jowhar kala fadhiyey ay tanaasulaad isu sameeyaan, sidaasna khilaafkii ku soo afjaraan.

Waayo-aragnimada aan u lahaa dhaqanka madax kooxeedyada siyaasadda dalka, iyo fikraddaas aan aamminsanaa baa ugu weynaa arrimaha igu khasbay in aan dawladda Yemen ka codsado in ay arrintayada dhex gasho oo aniga iyo Shariif Xasan, guddoomiyaha Baarlamaanka isu kaaya keento. Qof ahaan, Shariif Xasan kama mid ahayn qabqablayaasha, horena looguma arag masraxa siyaasadda Soomaliyeed.

Muddadii burburka lagu jireyse wuxuu ahaa qabqable ka-warqab, xiriir hoosena wuxuu la lahaa qabqablayaasha Muqdisho kan ugu shirqool iyo hal abuurba badnaa Maxamed Qanyare Afrax, xiriirkaas oo ka soo jeeday xididnimo iyo dano dhaqaale. Ma aha arrin sir ah in, tan iyo maantadaas la joogo, Qanyare uu Shariifka diiradda u hayo. Waxaa la aamminsan yahay in, markii muddo yari ka dhimmanayd shirkii dibu-heshiisiinta ee IGAD qaban-qaabadiisa ku jirtey, qaybsashadii ergooyinku soo dhowaatey, isla Qanyare ku dhiirrigeliyey in uu siyaasadda galo.

Shariif malaha waa ku farxay taladii Qanyare oo durba meelmarinteeda buu u hawlgalay, wuxuuna ka faa' iidaystey afarta arrimood ee soo socda:

- Isaga oo haystey dhaqaale wanaagsan, haddii loo eego saboolnimada dalka ka jirta oo uu tabcaday muddadii dheerayd ee uu ganacsiga ku jirey.
- Beesha Ashraafta ee uu ku abtirsado oo gobollada Bay iyo Bakool looga aqoonsan yahay in ay yihiin hoggaamiyayaal ruuxi ah taladoodana la qaato.
- Hooyadiis oo ka dhalatay beesha Liisaan oo ka mid ah beelaha waaweyn ee labadaas gobol.
- Dagaal iyo colaad ba'an ee ka dhex jirtey RRA dhexdeeda oo si foolxun u wiiqday kaalintii ay beelaha Digil iyo Mirifle kaga jireen siyaasadda dalka.

Shariif Xasan waxaa halkaas uga muuqatay fursad uu, isaga oo ka faa' iidaysanaya arrimaha kor ku xusan, wax uga qaban karo dhibaatooyinkii halkaas ka jirey. Sidaas awgeed, isaga oo xammaasdaysan buu wuxuu yimid magaalada Baydhabo, halkaas oo uu hawshiisii ka bilaabay. Markii uu magaalada yimidba wuxuu gacanta ku dhigay oo haddiibana shaqo geliyey koox rag ah oo hore uga tirsanaan jirtey ciidankii Nabadsugida Soomaaliyeed (NSS), oo hore magaalada ugu dayacnaa. Markii uu kooxdaas isku dubbaritey, wuxuu xoghaye ka dhigtay, ciidankana madax uga dhigay nin hore NSS-ta G/sare ka ahaan jirey. Sidaas wuxuu mudda gaaban ku noqoday ninka wararka magaalada oo dhammi ku soo ururaan oo habeen iyo maalinba gurigiisa la tuunsan yahay.

Dabadeed wuxuu kulmiyey odayaashii "Beesha Ashraafta", kuwaas oo uu dhacsiiyey in ay kaalintooda uga faa' iideeyaan beelaha Digil iyo Mirifle oo ay ka shaqeeyaan sidii ay u heshiisiin lahaayeen madax RRA -da. Taladaas oo odayaashii ka oggolaadeen, dabadeedna meel marinteeda uu isaga laf ahaantiisu hoggaanka u qabtay. Nasiib wanaag, dibu-heshiisiintii ay Ashraafta gundhigga u ahayd si fiican bay ugu guuleysteen, oo ergooyinkii beelaha Digil-Mirifle waxay yimaadeen shirkii El-Doreet, Kenya ka dhacayey iyaga oo gacmaha is wada haysta.

Hore ayaan dhibaatooyin uga soo maray isku wadiidda rag aad ugu kala duwan khibradda, aragtida iyo ujeedadaba. Markiiba waa ii caddayd in aanan maalmo kooban keshiis iyo wax wadaqabad ula gaari karin nin siyaasadda dalkuba ku cusub tahay oo weli ay saamayn weyn ku leedahay talada qabqablayaashu. kulanka aan doonayey in aan Shariifka la yeeshose ahmiyad weyn buu ii lahaa oo waxaa suurtoobi kartey in uu albaabbada u furo kulammo danbe oo aannu meel wax isula dhigno.

Shariif Xasan waa aqbalay martiqaadkii dawladda Yemen, dabadeedna sidii la isku ogaa wuxuu ka soo degey magaalada Sanca, halkaas oo aan wax yar uga soo horreeyey. Waxaa nala dejiiyey isku hoteel. Shir toos ahse marna isuguma aannaan imaan, oo madaxda Yemen baa noo kala dabqaadeysey. Afar beri oo wada hadal ah waxba waa isu keeni weynney, oo uu Shariifku wuxuu shardi ka dhigay in xukuumaddu ay fariisato caasimadda dalka ee Muqdisho. Wuxuu kale oo ku celceliyey shardigaas oo la aqbalo ma ahee in uusan diyaar u ahayn in uu arrin kale ka hadlo. Talo kasta oo la hordhigo wuu diidey. Markii laga quustay, oo uu ' mayada' joogteeyey ayuu runta sheegay oo Yementii u gaarsiiyey in uu Muqdisho kaga soo baxay go'aan cad oo la soo faray, kaas oo ahaa in TFG-da Muqdisho timaaddo mooyee aan wax kale laga wada hadli karin. Dadaal kasta oo ay madaxda Yemen samaysay shirkii wax natiijo ah waa laga gaari waayey, waana lagu kala tegay. Markii aannu Shariif Xasan kala quusannay, waxaan wada hadal rasmi ah la bilaabay madaxda dawladda Yemen, kaas oo u badnaa taageerada dawladda Yemen u fidin lahayd TFG-da.

Markii xukuumadda Yemen gaar ahaan uga shirtay arrintaas, waxay go'aan ku gaartey in ay noo fidiso dhammaan wixii aannu ka codsannay.Taas oo isugu jirtey hub, saad ciidan, shidaal iyo cunno in mudda ah ku filan ciidan ay tiradiisu gaareysey 5000. Taageeeradaasi muddo gaaban bay dalka ku soo gaartey. Kolkii aan soo dhammaystay hawlihii aan dalka Yemen u tegay, waxaan u soo kacay dhinaca Soomaaliya, muddo yar kaddibna waxaan u baxay xagga magaalada Jowhar.

## SOO CAGADHIGASHADII DALKA-JOWHAR

Markii aan soo gabagabeeyey shaqo aan u joogey magaalada Gaalkacyo ayaan ku amray agaasimaha guud ee madaxtooyada Xuseen Cali Saylaan iyo 12 ka mid ahaa ciidanka ilaalada madaxtooyada in ay Jawhar iiga sii hormaraan oo ay sii diyaariyaan hoygii aan degi lahaa, amnigiisana sii sugaan. Barqannimadii 19ka bisha Luulyo 2005 ayay gegida dayuuradaha Gaalkacyo ka dhoofeen, saacad kaddibna Jawhar ayay ka dageen, halkaas oo si wanaagsan loogu soo dhoweeyey.

Waxaa la geeyey gurigii uu hore u degganaa guddoomiyaha Gobolka Shabeellada Dhexe Maxamed Cumar Xabeeb (Maxamed Dheere), kaas oo uu iiga baxay. Gurigu wuxuu ka koobnaa 6 qol, 2 musqulood, balbalo lagu nasto iyo dayr aan weyneyn. Gurigaas waxaa la dhisay 1976kii, waxaana dhisay Xasan Abshir Faarax oo guuddoomiye gobol xilligaas ka ahaa Shabeellada Dhexe. Markii aan hubsaday in gurigii aan degi lahaa uu diyaar yahay, ayaan 24kii bishii Luulyo 2005tii ka soo degey gegida dayuuradaha ee magaalada Jawhar, halkaas oo si diirran la iigu soo dhoweeyey. Guriga waxaan ka degey 2 qol, qol waxaa degay Ra'iisul Wasaaraha Cali Maxamed Geeddi, qol kale waxaa laga dhigay xafiis, qol waxaa yiil qalab isgaarsiineed oo gobolka laga lahaa, qolka lixaadna waxa degay marti kale.

Magaalada waxaa iiga soo horreeyey xubno ka tirsanaa labada gole: Baarlamaanka iyo xukuumadda. Badidood waxay seexan jireen oo cuntada loogu karin jirey dugsi u dhowaa xarunta Madaxtooyada. Dugsigaas oo qolal badan ka koobnaa, waxaa qolkiiba seexan jirey 5

ama 6 qof. Cuntadooda waxaa hormarin ahaan u bixin jirey maamulka gobolka. Mas'uuliyiinta qaarkood waxay degeen guryo ijaar ah oo magaalada dhexdeeda ku yiil. In kasta oo dagaalladii sokeeye saamayn weyn ku yeesheen magaalada Jawhar, adeegyadii bulshaduna wada burbureen, haddana wax saboolnimo ahi karna muuqan oo waxay u ekayd magaalo uu dhaqdhaqaaqeeda dhaqaale wanaagsan yahay, dadkuna shaqo wada haysto. Magaalada waxaa ka jirey nabadgelyo lagu kalsoonaan karey, waxaana u xilsaarnaa miliishiyada gobolka, kuwaas oo gacan adag ku qabtay amniga magaalada. Lama oggolayn in magalaada dhexdeeda lagu wato wax hub ah iyo in labada kontarool ee magaalada ka kala xiga dhinaca waqooyi iyo kan koofureed, la iska soo galo. Dadka iyo gaadiidkaba aad ayaa loo baari jirey. Sidaas oo kale, magaalada kuma hoyan karin qof aan la garanayn halka uu magaalada ka deggan yahay, ama halka uu u socdo, ama aan magaalada ku lahayn abbaan damiin ka noqda.
Muddo yar kaddib, markii dawladdu soo degtey, oo kharaj badani magaalada galay, waxay la soo baxday muqaal cusub oo farxad leh. Kalsoonidii dadku hore magaala ugu qabey baa laba jibbaarantey, noloshii bulshaduna sare ayay u kacday.

Soo degitaankii dawladdu wuxuu magaalada ku soo kordhiyey maalgelin iyo shaqo abuur ka dhashay fursadaha cusub ee ay dawladdu dhalisay. Waxaa durba magaalada laga taagay dhismayaal cusub, waxaa sare u kacay xiriirkii ganacsi ee Shabeellada Dhexe iyo dalka intiisa kale, waxaa xafiisyo hor leh ka furtay hay'ado caalami ah, wakiillo ka kala socdey dawlado kala duwan, wasaarado dawladda ka tirsan iyo hay'ado qaran. Waxaa batay socdaalladii magaalada lagu imanayey, waxaa la dayactiray, lana ballaariyey gegidii dayuuradaha ee magaalada, si looga dhigo mid ay xataa diyuuradaha waaweyni ku soo degi karaan.

Sidaas oo kale, waxay dawladdu gacan weyn ka geysatey, kobcinta tacabka beeraha, dayactirka iyo hagaajinta keliyadii beeraha iyo sidii dib loogu hagaajin lahaa biyo-xireenkii weynaa oo ay dawladda Shiinuhu degaanka ka dhistay burburka hortiis, kaas oo loogu talaggalay in uu fatahaadaha webiga xakameeyo, biyahana kaydiyo si markii biyaha webigu uu hoos u dhac ku yimaado, biyihii kaydsanaa loogu aayo.

Shacbigu markuu arkay isbeddelka weyn ee ka dhacay magaalada waxay dareemeen sida ay dawladnimadu horumarka lagama maarmaan ugu tahay. Isbeddelkaasi wuxuu si xoog leh u soo nooleeyey rajadii ka samatabaxa burburka ee in mudda ah shacbigu ku taamayey, isla markaasna, waxaa isbeddellada laf ahaantooda uga muuqday waa cusub. Arrintaasi waxay marag ma doonto u tahay dareenka kala duwan ee shacbiga caadiga ah iyo kan Guddoomiyaha Gobolka mudane Maxamed Dheere ka kala qabeen dawladnimda. Maxamed Dheere wuxuu cayaarayey laba siyaasadood oo uu uga dan lahaa in uu kaalintiisa siyaasadeed kor ugu qaado. Dhinaca kalena wuxuu doonayey in saldhigga dawladdu uu weligiis ahaado Jawhar. Maxamed Dheere wuxuu ku hawlanaa sidii uu gebi ahaanba, si doqoni ma garato ah, ku maroorsan lahaa awoodda dawladda, iyadana uga dhigi lahaa hay'ad magaalada qaxooti ku ah. Inkasta oo madax badan oo dawladda ka tirsani aad iyo aad uga xumadeen hab-dhaqanka Maxamed Dheere, qof ahaan wax dhib ah iguma hayn, oo fikradihiisa siyaasadeed ayan ka duwanayn kuwii qabqablayaasha Muqdisho. Qaababkiisa marmar la saluugi karey waxaa igala muhiimsanaa faa' iidada ay joogista dawladdu dadweynaha u lahayd.

Bishii Sebtembar 2005tii waxaan safar ugu baxay dalka Maraykanka, si aan uga qaybqaato Shirweynaha Ummadaha Midoobey. Shirkani wuxuu ku soo beegmay laba munasabadood ee dunida ahmiyad gaar ah u leh, kuwaas oo kala ahaa lixdan-guuradii ka soo wareegtey asaaskii UN-ka iyo shan guuradii ka soo wareegatey dhaqangelinta barnamijka loogu magacaabay MDGs, ama Bartilmaameedyada Horumarinta Milleeniyumka, sidaas awgeed, waxaa shirkaas ka soo qayb gelayay badi madaxda dunida. Anigu si gaar ah ayaan ka qaybgalka shirkaas u danaynayey, oo waxaa halkaas iiga bannanayd fursad aan indhaha dunida ugu soo jeedin karey xaaladda murugsan ee dalkayaga ka jirtey. Sidaas oo kale, waxaa isla shirkaas iga suurtaggeli kartey in aan la kulmo qaar ka mid ah madaxda shirka ka soo qaybgashay, si fool ka fool ahna ugu bandhigo baahida loo qabo in beesha caalamku ay gacan naga siiso dadaalka aan ugu jirno ka soo kabashada burburka. Markii aan New York ka degtay waxaa si xamaasad leh iigu soo dhoweeyey Soomaali fara badan oo isaga kala timid daafaha adduunka, kuwaas oo aan qof qof iyo wadajirba ula kulmay.

Taariikhu markii ay ahayd 17kii Sebtembar 2005tii baan golaha loo dhan yahay ee Ummadaha Midoobey ka jeediyey khudbad, taas oo aan ku soo bandhigay afkaarta iyo mowqifyada dawladda Soomaaliyeed ka qabto arrimaha kala duwan ee shirweynaha lagu soo bandhigayo. Waxaan halkaas ka caddeeyey in ay sharaf ii tahay in aan ka soo qaybgalo shirweynaha loo dhan yahay, kaas oo aan u bandhigay sida ay dibuheshiisiintu noogu leedahay ahmiyadda kowaad iyo sida aannu u taageersannahay aragtida AU-da. Waxaan codsaday in Soomaaliya laga qaado xayiraadda hubka loona oggolaado in dib loogu dhiso ciidan hanan kara amniga dalka iyo kaalmo degdeg ah oo lala soo gaaro si dib loogu dhiso hay' adihii dawladda.

## KU SOO NOQOSHADII JOWHAR

Durba markii aan ku soo laabtay magaalada Jowhar, waxaan toos u gudaggalay shaqadaydii. Waxaan ogaadey in muddadii yarayd ee aan dalka ka maqnaa ay wax badani isbeddeleen oo Maxamed Dheere uu si fiican u gudaggalay arrimaha dawladda isaga oo kaashanaya saaxibbo toos ugala shaqeeya majaxaabinta xukuumadda. Waxaan u yeeray Ra'iisul Wasaaraha, Maxamed Dheere iyo qaar ka mid ah xildhibaannada beesha Abgaal oo ay ka mid yihiin Cabdullaahi Maxamed Afrax, Cali Geeddi Shadoor iyo Hilowle Iimaan, kuwaas oo aan ku iri 90 km baa Jawhar iyo Muqdisho u dhaxeeya, intaas oo dhammina waa degaan Abgaal, marka waxaan idinka doonayaa in aad ka shaqaysaan sidii ay dawladda Muqdisho loo geyn lahaa, si ay ugu yaraan xarun uga samaysan lahayd xaafadaha ay beeshiinnu deggan tahay.

Markii aan dhawr jeer la hadlay raggaas oo aan jawaab wax ku ool ah ka waayey, baa waxaa ii xaqiiqowbey tuhunkii aan Maxamed Dheere ka qabay ee ahaa in uusan doonayn in xukuumaddu Jawhar ka guurto. Sidaas oo kale, waxaan ogaaday in rag ka tirsan xukuumadda, iyo dawlado shisheeye, ay Maxamed Dheere ku qanciyeen in uu xoogga saaro sidii Jawhar looga dhigi lahaa caasimaddii dalka. Waxay u sheegeen in lagala shaqaynayo sidii loo dhisi laha waddo laami ah, iyo mid tareennadu maraan oo isku xira xeebta degmada Cadale iyo

magaalada Qallaafe ee ku taal soohdinta Soomaaliya iyo Itoobiya. Dhawr goor oo aan la soo qaaday Ra' iisul Wasaaraha sababta loo tagi waayey Muqdisho, wuxuu igu yiri aniga ayaa dhowaan halkaas ku tegi doona kormeer si aan ugu soo kuurgalo waxa iska beddelay xaaladdeeda tan iyo markii iigu danbaysey. Maalmo kaddib, wafdi ballaaran oo Ra' iisul Wasaarahu hoggaminayey ayaa waxay u baxeen magaalada Muqdisho, markiise uu wafdigu ka degey Muqdisho oo ay u kicitimeen dhinaca hoygii loogu talaggalay baa waxaa ku qaraxay miino jidka loo dhigay. Qaraxaas waxaa ku naf waayay dhowr qof, dad fara badanina waa ku dhaawacmeen. Nasiib wanaag, wafdigii wax dhibaato ahi kama soo gaarin oo iyaga oo nabad qaba bay gaareen halkii ay u socdeen. Markii la maqlay qaraxa lala beegsaday RW, odayaashii iyo waxgaradkii ku sugnaa magaalada Muqdisho si geesinnimo leh bay u cambaarayn falkaas argaggixiso. Sidaas oo kale, ayay beesha caalamku u cambaaraysay.

Maxamed Qanyare Afrax oo keli ah baa war uu saxaafadda siiyey shaki geliyey ujeeddada ka danbaysey qaraxa, ilaa heer uu gaaray in uu yiraahdo maxaa markasta isku abbaara qaraxa magaalada ka dhaca iyo imaatinka Cali Geeddi, waxaan u malaynayaa in uu isagu qaraxa wato. Aad iyo aad baa Soomaalida oo dhammi uga xumaatay warkaas ka soo yeeray Qanyare oo ahaa Wasiirka Amniga Qaranka lagana filayey erayo xilksanimo xanbaarsan.

Subaxdii danbe wafdigu waxay u soo keceen xagga Madaxtooyada oo ay ballan kula lahaayeen Xuseen Caydiid, Wasiirkii Arrimaha Gudaha, ahaana RW ku-xigeen. Markii uu wafdigu soo istaagey irriddii Madaxtooyada ayaa, bal iska daa in laga furo ee waxayba miliishiyadii Xuseen Caydiid kala hortimimaadeen qoryo, amarna ku siiyeen in ay degdeg uga tagaan meesha. Kolkii loo sheegayna in ay Xuseen Caydiid meesha kula ballansanaayeen, wayba ka sii dareen oo waxay yiraahdeen ' Wallaahi buusan Xuseenka aad sheegeysaan meesha uusan soo geli karin, haddii uusan mushaarkayagii na siin' . Muddo kaddib, rag wafdiga la socdey oo yiqiin guriga Xuseen degganaa baa wafdigii meesha ka waday oo Xuseen u keenay.

Xuseen wuxuu wafdigii u sheegay in meesha ay belo ka haysato oo miliishiyadu gadood ku jirto, haddii aan wax loo helinna ay fara ka bax noqon doonaan. Dabadeed waxay ku heshiiyeen in ay Madaxtooyada isu raacaan oo Ra' iisul Wasaaruhu ka ballanqaado in uu arrintooda wax ka qaban doono. Sidii bay yeeleen, wadahal badan kaddibna waxay ku guuleysteen in ay miliishiyadii qanciyaan.
Sidaas baa wafidigii ku galay xaruntii Madaxtooyada, shir rasmi ahna kula qaateen Xuseen Caydiid. Ujeeddo sidaas u sii weyn ma lahayn warbixinnada iyo talooyinka ay meesha isku dhaafsadeen, balse waxaa qiimo weyn lahayd oo horseed nabadeed u ekayd in ay dawladdu shir ku yeelato ' Villa Soomaaliya.' Ku soo noqoshadiisii Jawhar Ra' iisul Wasaaruhu wuxuu ka keenay dayro gaarsiisan in ayan dawladdu Muqdisho tegi karin.

Tan iyo maalintii TFG-du ka soo guurtey Kenya, waxaannu ka shaqayneyney in aannu xarunta ay dawladdu degtey isugu keenno tiro ciidammo ah oo bilaw u noqda ciidammo qaran oo ay dawladdu dhismahooda ku talo jirtey. Waxaannu ku guuleysanney in aannu tiro yar oo ciidammo ah ka soo ururinno Puntland iyo Gobollada Dhexe, kuwaas oo safarkii ay ugu soo baxeen koofurta la kulmay caqabad ah siyaasiyiin u dhashay beesha Xawaadle oo diidey in ciidankaasi soo maro jidka dheer ee Beledweyne iyo Jawhar isku xira. Dhacdasaasi waxay igu noqotay mid fajiciso ah oo aanan marna ka filanayn beesha Xawaadle, oo aan madaxdooda isku ogeyn in ay iyaguna dhinacooda ciidammo ka soo ururiyaan degaanka Hiiraan oo dabadeed Jawhar u soo gudbiyaan.

Waxaanse ku tashaday in, inta aan ka hubinayo sida wax u dhaceen, dabadeedna xalka ku habboonna loo helayo, uu ciidanku meeshiisa ku nagaado, si aan isku dhacba u iman. Igama maqnayn in ciidanka noo soo socdey uu si fiican u hubaysnaa, oo uu tiro ahaan iyo tayo ahaan toban goor ka awood badnaa miliishiyada laga horgeeyey oo jidgooyada looga dhigay. Haddii uu ciidankaasi go' aansan lahaa in uu waddada xoog ku soo maro, waxaa hubaal ahaan lahayd in isku dhac iyo dhimashoba imaan lahaayeen; taas oo sucmad xumo u soo jiidi lahayd dawladda. Sidaas awgeed, ka hortagga halista noocaas ah baa i gaarsiisey in aan ciidankii meeshiisa ku hakiyo.

Baaritaan dheer oo aan xaaladdaas ku sameeyey waxaa iiga soo baxay natiijo welwel dheeri ah i gelisay. Sida la og yahay, Soomaalidu waa dad siyaalo badan isugu wada xiran oo waxa ka dhaxeeyaa ay ka badan yihiin waxa kala geeya. Inkasta oo dhaqanka noocaas ahi faa' iidooyin badan leeyahay, haddana dhaliila badan buu leeyahay, haba ugu hoorreyso xajin la' aanta xogta. Waxaa ii caddaatay in qalalaasihii ka dhex dhacay ciidankii soo socdey iyo beesha Xawaadle uu ka danbeeyey Maxamed Dheere, kaas oo malaha hore u go' aansaday in aan marna ciidan ay dawladdu leedahay uusan Jawhar cag soo dhigin. In ciidanka loo diido waxaa ka danbeeyey siyaasad ay soo maleegeen mucaaradka dawladda ku kacsan oo aan rabin in TFG-du yeelato ciidan ay badbaadeeda ku sugto.

Raggaas waxaa welwel ku hayey in xukuumaddu isku fillaato oo dabadeed u gudubto dhisme ciidan qaran oo ay kaga adkaato mucaaradkeeda oo haystey meela dalka ka mid ah. Qaar ka mid beelaha is hortaagayna waxaa loogu warramay in ciidankaasi ahaa ciidan beeleed halisna ku ah degaannadooda. Waxaa kale oo aan ogaadey in Maxamed Dheere lacag badan ku khasiray si ciidankaas looga hor-istaago in uu Jawhar cag soo dhigo. Arrintaasi waxay Maxamed Dheere ka ahayd ka hor tag wax kasta oo wiiqi karey saldana uu Gobolkiisa ku haystey. Tallaabadaasi waxay noo noqotay caddayn dheeri ah oo nooga marakacaysey siyaasadda gurracan ee Maxamed Dheere iyo intii ay talo-wadaag ahaayeen.

Waxaan hubsaday in Maxamed Dheere uusan dawlad qaran rabin uuse doonayo in uu magaceeda heer gobol ugu adeegsado.
Markii aannu wada ogaanney sababihii ciidanka loogu diidey in ay Jawhar u soo gudbaan, iyo weliba dadkii ka danbeeyey shirqoolkaas, waxaannu helnay xalkii aannu si fudud ciidanka u soo dhaafsiin lahayn caqabadihii loo dhigay. Taladaas Ilaahaya na waafajiyey, baannu ku gaarney in, ciidankii safarka soo galay oo muddo ku xayirnaa xudduudka Itoobiya iyo Soomaaliya, uu magaalada Jawhar soo gaaray taariikhdu markii ay ahayd 20kii Sebtembar 2005tii.

Ciidankaas waxaa la dejiyey xero magaalada ka xigta koofur Galbeed, una jirtey 6km, taas oo lagu magacaabo Koongo. Maxamed Dheere aad iyo aad buu uga xumaaday in ciidammadaasi ay xaruntaas degaan, wuxuuna bilaabay in uu iska fogeeyo. Taas oo uu ku caddeeyey markii uu diidey in ciidankiisu ka qaybqaato, tababbarkii halkaas looga furay ciidankii Jawhar la keenay.

Magaalada Jawhar waxaa durbadiiba ka bilawday tuhun kala galay ciidankii cusbaa iyo miliishiyadii Maxamed Dheere, dareenkaas oo ka dhashay xiisaha ciidanka cusubi u qabay in ay magaalada oo aaney badidood hore u arkin ay lug xerada uga soo aadaan si ay uga soo adeegtaan, waxayse kala kulmeen aflaggaado iyo cagajuglayn kaga imaanaysey ciidanka Maxamed dheere. Khilaafkaasi wuxuu sare u kacay markii aan amar ku bixiyey in qaybo ka tirsan ciidankii xerada Koongo joogey difaac laga geliyo daafaha magaalada, kaddib markii ay isa soo tartay halista ka imanaysey dhinaca kooxihii mucaaradka ku ahaa ee Muqdisho.

Markii ciidammadii xerada Koongo fadhiyey ay si degdeg ah u gudagaleen waajibaadkii la siiyey, baa miliishiyadii Maxamed Dheere ku bilawday cadaadis iyo weliba in ay si qarsoodi ah u ugaarsadaan oo u waxyeelleeyaan. Ugaarsigaas waxay goor habeen ah ku dileen hal askari, waxayna dhaawac u geeysteen dhowr kale oo ka mid ahaa ciidankii cusbaa.

Waxaa shaki hor leh igu abuuray sida aaney RW iyo Maxamed Dheere wax garawshiiyo ah arrinta uga bixin markii lagu wargeliyey shilkaas. Halistii dawladda kaga soo fool lahayd kooxaha dawlad-diidka ah ee Muqdisho fadhiyey, hadal waa dhaaftay oo waxay isu rogtey colaad dhab ah, kaddib markii kooxahaasi ay magaalada Balcad isugu soo urureen oo shir degdeg ah halkaas ku qaateen, kaas oo ay isku waafaqeen in ay dagaal kama danbays ah lagu soo qaado magaalada Jawhar oo ahayd xaruntii dawladda. Waxaan u malaynayaa in aan qorshahaas lagala tashan Maxamed Dheere, laguse wargeliyey markii uu dhammaaday oo sahammo isdabajoog ah lagu sameeyey aagga Jowhar.

Sababta ay Maxamed arrinta ugala tashan waayeen waxaan u malaynayaa in ay ku timid aqoon fiican oo ay u leeyihiin sida saxiibkood u yahay qof ay wax walba ka suurtoobi karaan oo aan si buuxda la isugu hallayn karin. Sidaas awgeed, waxay door bideen in arrintu ku fiican tahay in Maxamed Dheere la ogeysiiyo wax dhammaaday oo uu ku khasabanaado oggolaanshaheeda.
Falceliskiisa arrintaas looga tashaday waxaa daliil u ah, hadallaadii uu raggaas ku yiri marar badan oo uu taleefoonka kula xiriiray, hadalladaas oo uu si cad ugu sheegay in aaney micne weyn lahayn in Cabdullaahi Yuusuf la soo weeraro, oo uu u baahan yahay oo keli ah meel uu dego iyo calan loo saaro oo lagu yiraahdo mudane Madaxweyne. Sidaas awgeed, waxaan idiin sheegayaa in ay habboon tahay in aan odaygaas wax wakhti ah lagu lumin oo aynnu danaheenna kale qabsanno. Waxaan ogaaday oo kale, in hadalkii uu Maxamed Dheere saaxiibadiis ku yiri, uu salka ku hayey talo ay hore u gaareen RW Cali Maxamed Geeddi, Cabdirisaaq Juriile iyo Maxamed Dheere, oo ahayd in ay iga tashadaan oo magaca dawladda u adeegsadaan danahooda gaarka ah.

Raggaasi waxay is dhacsiiyeen in, aan Jawhar magan ugu ahay, oo aanan sina uga hor-imaan karin. Markii aan u adkaysan kari waayey shirqoollada joogtada ah ayaan ku tashaday in aan muddo gaaban ku helo meel Jawhar ka roon oo aan xukuumadda xarun uga dhigo. Kuwa isku hawlayey wax yeellaynta dawladdu waa qabqablayaashii doonayey in ay Muqdisho kaga soo duulaan dawladda; waa kuwii hore uga hortegey in ay dawladdu Baydhabo ka dhigato xarun ku meel gaar ah, waa mudane Madaxweyne Cabdiqaasim Salaad, iyo odayaal beesha Cayr ka tirsan oo uu kula shiray magaalada Baraawe; waa kuwii agaggaarka Mustaxiil jidgooyada ugu dhigtay ciidammadii Puntland iyo gobollada Dhexe; waa kuwa ka mid ah xubnihii ugu sarreeyey dawladda, isla markaasna giddigood isku bahaystay wiiqidda iyo burburinta dawladda. Waxaa haddaba isweydiin leh waxa TFG-da ka dhimman, waxa ku siyaado ah iyo waxa sababay in ay gudeheeda ka degi waydo? Waa su'aal xaq ah, jawabteeduse waxay u baahan tahay in xoogaa dib loogu noqdo taariikhdii dhowayd ee Soomaaliya, iyo sida TFG-duba ku dhisantay.

Soomaaliya waxaa ka dhacay dagaal sokeeye oo tan iyo haddeer jiitamaya, tafaraaruqii ka dhashay baase shacbigii Soomaaliyeed kala diley, kala fogeeyey, waxaana sidaas awgeed adkaaday dibu-heshiisiintii. Isla muddadii dagaalku dalka ka socdey ayaa waxaa soo ifbaxay kooxo kala ujeeddo duwan, kala siyaasad duwan, kala xiriirro duwan, kuse midaysan in aan dalku xasilin, dawladina ka dhismin. Kooxahaas oo isugu jirey qabqablayaal dagaal, kuwo ku hodmay dhiigga qubanaya, kuwo magaca diinta ku adeegta, qabaa' il dhul ballaarsi ku jirey iyo NGO-yo. Waxay dhammaantood wada aamminsanaayeen in ay burburka iyo sharcidarrada oo keli ah ay ku gaari kareen danahooda qaran-diidnimo. Beesha caalamku ma oggolaan karto, sababa badan awgood, dalka oo dhan in mudda dheer aaney ka jirin sharci iyo kala danbayn, sidaas awgeed, waxaa loo baahday oo laga fursan waayey in, si kasta oo la yeelo, habkii iyo dawladnimadii dib loogu soo dabbaalo Soomaaliya oo hore dawladnimadii ku fashilantay.

Dhibka ugu weyn oo mideynta fikradaha caqabadda ku noqdey waa shakhsiyaadka siyaasadda hormuudka u ah oo ka maran waddaniyaddii dareen wadaagta lagu noqon lahaa oo kala jiidanaya aragtiyo hoose oo qabiil. Qaab-dhismeedkaas ayaa sababay in ay dawladda isugu yimaadaan kooxo badan, kuwaas oo aan ka midaysnayn ujeeddada dawladda loo dhisay. Kooxda ugu muhiimsan qaybahaas waxay ahayd tan dawlad-doonka ah oo tirada xubnaha Baarlamaanka ugu badnaa. Mase ahayn dad isku xiran oo barnaamijka ay wataan meel uga soo wada jeensan kara. Damaaci jago, qof jeclaysi iyo isdhaliilid dhexdooda ka jirtey baa xaqiiqo ahaan kala dhantaashay xoogga ay tiro iyo tayo ahaanba lahaayeen. Kooxda labadaad waxay ahayd dawlad-diidka, kuwaas oo isugu jirey qabqablayaasha dagaalka, xubnaha Baarlamaanka ee ku kala tiirsanaa kuwa xaaraanta ku hodmay, kuwa magaca diinta ku qaraabta iyo NGO-da.

Kooxdu ma ahayn kuwa isjecel ama isku barnaamij ah oo cadaawadda ka dhexaysey way ka darnayd tan ay gooni-gooni ugu qabeen TFG-da, waxay ka midaysnayeen talada ah in aan dalka dawladi ka dhalan. Kooxda saddexaad, waxay ka koobnayd calooshood u shaqaystayaal aan labada kooxood oo kale midna gaar ahaan ugu xirnayn, use sacab tuma hadba tii ay u arkaan in markaas dantoodu ku jirto.

Kooxdaani waxay isugu jirtey rag la soo shaqeystay keli-taliskii Siyaad Barre iyo rag ka tirsanaan jirey TNG-dii lagu soo dhisay dalka Jabbuuti. Markii laga shidaal qaato guudmarkaas, waxaa si fiican loo garan karayaa in su'aashii taagnayd jawaabteedu ku dhan tahay dadeecadda ay dawladdu ka samaysan tahay oo ay sabab u tahay dagaalka gudeheeda ka aloosan.

Sidaas awgeed, la yaab malaha in, Ra' iisul Wasaaraha, Wasiirka Qorshaynta iyo Iskaashiga Caalamiga ah iyo Maxamed Dheere isku qanciyaan in ay si fudud talada igala wareegi karaan, qabqablayaashana ka dhaadhiciyaan in ay saddexdoodu hayaan taladii dawladda lagu ridi lahaa iyada oo aan wax xabbad ah la ridin. Inkasta oo ay saddexdaasi talo wada qaateen, waxaan u malaynayaa in taladaasi gooni ku ahayd Juriile iyo Maxamed Dhere, Ra' iisul Wasaarahana la adeegsadey.

In sidaas wax u dhaceen waxaa laga dhadhansan karaa saamayska ay labada ninba ku leeyihiin Ra' iisul Wasaaraha. Juriile iyo Cali Maxamed Geeddi waxay hore u lahaayeen xiriir shaqo, oo waxay ka wada tirsanaayeen Jaamacaddii Ummadda Soomaaliyeed. Sidaas oo kale, Maxamed Dheere wuxuu ka mid ahaan jirey qabqablayaasha dalka awoodda ku lahaa, sidaas darteed, wuxuu ahaan jirey nin beesha Warsangeli (Harti Abgaal) oo Cali Geeddina ka dhashay tixgelin gaar ah ku leh. Intaas waxaa dheeraa, in Maxamed Dheere uu xubinnimadiisii Baarlamaanka ku wareejiyey Cali Geedd, si Cali Geedi loogu magacaabo RW DKMG.

Xiriirkoodu wuxuu u muuqdaa mid ka faa' iidaysanaya xaaladda cakiran ee dalka oo lagu doonayo in dano gaar ah lagu fushado. Kaddib markii ay ii caddaatay in ayan Jowhar joogitaan danbe lahayn, waxaan maskaxdayda isugu keenay talooyin badan oo dawladdu kaga bixi kartey xaaladda rajo-beelka ah oo ay xilligaas ku sugnayd. Talooyinkaas baan, sida ay u kala fudud yihiin, mudnaan ugu kala siiyey, si haddii ay midi ii socon weydo aan tan xigta ugu gudbo. Aniga oo taladaydu meel ii taal baan dhammaadkii 2005tii waxaan u duulay magaalada London, halkaas oo aan baaritaan caafimaad sannadkiiba hal mar u tago.

Aniga oo London ku sugan oo aan weli wax tallaabo ah ka qaadin qorshihii aan hore u degsadey baa, nasiib wanaag, waxaa martiqaad ii soo diray mudane Cali Cabdalla Saalax, Madaxweynaha Yemen, kaas oo uu iiga codsadey in aan ka soo qaybgalo shir Sanca ka dhacaya oo majaraha loogu taagayo iskaashi nabadgelyo ee ka dhaxeeya dawladaha deggan daafaha Badda Cas iyo gacanka Cadmeed, martiqaadkaas oo aan yeelay.

## YEMEN: MAR LABAAD ANIGA IYO SHARIIFKA

Martiqaadkaasi wuxuu ii noqodey fursad wanaagsan oo aan qorshayaashaydii ku gudaggeli karo. Waxaan ku bilaabay taladii ugu horreysey oo ahayd in aan mar kale heshiis ka raadiyo Guddoomiyaha Baarlamaanka Shariif Xasan. Baaritaan kaddib, waxaan ogaadey halka uu wakhtigaas ku sugnaa, dabadeed taleefon ayaan kula hadlay, waxaana ka codsadey in aannu xal u raadinno arrimaha qaran ee kala daadsan. Baarlamaankuna kaalinta kowaad ayuu kaga jiraa wax ka qabashadaas. Shariif Xasan wuxuu igu jawaabey in uu taladaas ila qaatay, balse ay dad la socdaan oo uusan toos iigu iman karin. Waxaan u sheegay in loo baahan yahay in shirku ku ekaado labadayada oo keli ah. Cabbaar markii uu fekerey buu wuxuu igu yiri, ‘ Waa hagaag’ . Intaas wuxuu iigu daray in uu Nayroobi u duulayo, oo uu ragga hadda la socda halkaas isaga soo reebi doono. Wixii intaas ka danbeeyana uu taleefoon iga sugi doono si aannu u wada hadalno.

Dhammaadka shirkii Yemen ka dhacay oo ay ka soo qaybgaleen dawladaha Yemen, Sudaan, Itoobiya iyo Soomaaliya, looguna magacaabay Fooramkii Sanca. Waxaan la xiriiray Madaxweynaha Yemen, kaas oo aan hubay in uu mar walba diyaar u ahaa in uu soo dhoweynayo talo kasta oo daawo loogu raadinayo wax ka qabashada arrimaha qallafsan ee Soomaaliya. Waxaan ka codsaday in uu mar kale noo fududeeyo si aannu mar labaad aniga iyo Guddoomiyaha Baarlamaanku u kulmi lahayn. Madaxweyne Cali Cabdalla Saalax si sharaf leh buu ku soo dhoweeyey codsigayagii . Wuxuu shir noogu qabtay Magaalada Cadan. Nasiib wanaag, arrintaydu markaan waa ka roonayd halkii aannu kala taagnayn shirkii hore oo aannu dalka

Yemen ku yeelannay. Aniga iyo Shariif waxaannu marka hore isla garannay in, xaaladda aannu ku sugannahay aaney dan u ahayn dalka; isla markaasna, aaney sharafi ku jirin xildhibaannada Muqdisho iyo Jawhar kala fadhiya, sidaas darteedna loo baahan yahay in aynnu dhibaatooyinka dalka ka jira mudnaanta kowaad siinno. Dood fara badan kaddib iyo kaalin wanaagsan oo madaxda Yemen arrinta ka qaadatay waxaannu, nasiib wanaag, ku heshiinney in dawladda la isugu keeno magaalo saddexaad, isku marna laga soo wada guuro Muqdishu iyo Jawhar. Heshiis rasmi ah ayaannu ku gaarney magaalada Cadan ee dalka Yemen, 5tii Jannaayo 2006dii, kaas oo aannu kala saxiixannay iyada oo uu goobjooge ka ahaa Madaxweyne Cali Cabdalla Saalax. Haddii aan maanta dib u eego, sida fudud ee aannu ku gaarney heshiiskaas qiimaha weyn ugu fadhiyay dawladda, waxaan oran karaa in uu yahay heshiis taariikhi ah oo sharaf u ah Guddoomiyaha Baarlamaanka Shariif Xasan. Waxaan ka codsaday Madaxweynaha Yemen in uu naga bixiyo kharaj gaarayey boqol kun doolar oo lagu hawlgalo maalmaha hore, si heshiiska loo gaarsiiyo ugu horrayn xildhibaannada ka tirsan Baarlamaanka oo ku kala sugnaa Muqdisho iyo Jawhar, iyo si loo gudaggalo hawlihii la xirirey abaabulka shirka iyo soo guuritaanka xildhibaannada. Codsigaas Madaxweynuhu waa iga oggolaaday. Wax yar kaddib, markii lacagtaasi i soo gartey, waxaan farta ka saaray Guddoomiyaha Baarlamaanka oo fulinta heshiiska u xilsaarnaa.

Xildhibaannadii ku kala sugnaa Muqdishu iyo Jawhar, waxay ku kala noolaayeen duruufo aad u kala duwan. Halka xildhibaannadii Jawhar degganaa aad iyo aad magaalada loogu soo dhoweeyey, kana heleen xushmo iyo xornimo aan xudduud lahayn oo halkii ay doonaan magaalada uga bixi jireen. Nasiibdarro, saaxibbadoodii Muqdisho ku sugnaa, run ahaan magaalada maxaabbiis bay ku ahaayeen, oo waa laga ilaalin jirey in ay meel uga baxaan. Intaas waxaa u dheeraa aflagaaddooyinka iyo cadaadiska kaga iman jirey qabqablayaasha Muqdisho. Markii Shariif Xasan Yemen uga duulay xagga Muqdishu, wuxuu shir la qaatay xildhibaannadii halkaas ku sugnaa, wuxuuna uga warbixiyey wixii uu dalka Yemen kala kulmay iyo heshiiskii aannu Cadan ku wada gaarney. Xildhibaannadii si fiican bay heshiiskii u soo dhoweeyeen, waxayna isla qaateen sidii lagu meelmarin lahaa.

Xildhibaannada Muqdisho ku sugnaa wakhtiba iskama ayan dhumin oo degdeg bay Baydhabo u tageen. Markii dalka laga maqlay heshiiska Cadan, waxaa liqi kari waayey Maxamed Dheere, kaas canbaarayn dusha uga tuuray dawladda oo dhan, isla markaas, dacaayad iyo aflaggaaddo meel walba iila fariistay. Sidaas oo kale, Cali Geeddi Ra' iisul Wasaarihii dalka oo laga sugayey in uu arrinta si fiican u soo dhoweeyo, baa si kulul uga horyimid.

Ra' iisul Wasaaraha malaha waxaa qaaday dareen qabyaaladeed, sida rag badan oo Abgaal ahi u qaatay in iyaga lagu xumaynayo, oo labada magaalo Muqdisho iyo Jawhar oo dawladda laga raray ay ahayeen degaammo Abgaal. Halka RW-hii Xukuumadda iyo xubno ka tirsan TFG-da oo mudane Cabdirisaaq Juriile ugu horrayey ay heshiiskii uga hortageen, shacbiga Soomaaliyeed waxay u soo dhoweeyeen si farax iyo yididdiilo leh. Arrintaasi waxay muujineysaa in dadka qalalaasaha ka wada Soomaaliya ay aad u tiro yar yihiin ayse qaylo dheer yihiin, oo dabooleen codka intii badnayd ee sama-ka-taliska ahayd.

Si kasta oo wax u dhaceenba, waxaan ku dadaaley in, aan dejiyo RW-ha, dhacsiiyana in heshiiska Cadan lagu gaarey, uusan cidna lid ku ahayn, balse yahay guul weyn oo TFG u soo hoyatey. Waxaan RW ku casumey in uu magaalada Gaalkacyo iigu yimaado, halkaas oo aan u joogey heshiisiinta laba beelood oo gobolka Mudug muddo dheer ku dagaallamayey (Sacad iyo Saleebaan). Sidaas oo kale waxaan isla magaaladaas ugu yeeray Guddoomiyaha Baarlamaanka si khilaafka ka dhashay heshiiska kor ku xusan, looga gaaro is afgarad. Kolkii labadaas mas'uul ay soo gaareen magaalada Gaalkacyo, baa meesha waxaa nooga bilawday shir ballaaran oo mas'uuliyiin fara badan oo kale nagala soo qaybgaleen. Shirkaas waxannu si deggan arrintii uga baaraandegney kaddibna si wanaagsan ayaannuu isugu wada afgarannay.

Markii uu shirkii noo dhammadayna labaadii mas'uul waxay u kala dhoofeen Jawhar iyo Baydhabo. Waxaase tallaabo degdeg ah oo RW qaaday shirkii Gaalkacyo dabadiis, iiga dhadhantay in uu xoogaa ka biyodiidey, dabadeedna ay ula ekaatay in uu Shariif Xasan kula beredtamo dhaqangelinta heshiiska. Waxaa dhacday in RW markii uu Jawhar ku noqday uu UNDP u gudbiyey codsi uu ku doonayey in

Xukuumadda loo soo shubo lacagtii yarayd ee loogu talaggalay in TFP-da lagu taageero si ay dayactir iyo qalab shaqo oo kooban ugu diyaariso xaruntii Baarlamaanku ku shaqayn lahaa. Codsigaas oo guddoomiyaha Baarlamaanku si caro leh uga hortegey, isla markaasna, rasmi ahaan uga codsay UNDP in ay lacagta ku soo shubto xisaabta maamulka Baarlamaanka.

Arrintaasi waxay kala qaybisay madaxdii UNDP iyo wakiilladii deeq-bixiyayaasha ee xubno ka ahaa qoondaynta iyo mareynta maaliyadda lagu taageero TFG-da, oo ay isku mowqif ka noqon waayeen labadii codsi ee loo soo kala gudbiyey. Waxaa la isoo gaarsiiyey buuqii meesha ka jirey, kaddibna waxaan UNDP u qoray warqad aan marka hore uga cudurdaarey buuqa dhinacayaga uga yimid, marka labaadna aan kaga codsaday in ay lacagta toos ugu wareejiyaan maamulka TFP oo sida la og yahay u madaxbannaanaa maamulkooda hoose.

UNDP waxay qaadatay taladii aan u soo jeediyey. Waxaa mudda gaaban kaddib i soo gaarey warar sheegayey in wakiillada halkaas u fadhiyey dawladaha Talyaaniga iyo Ingiriiska , Signor Stefanini iyo Mr. Campell ay taladii aan soo jeediyey aad iyo aad uga xumaadeen. Dabadeed waxaa i galay shaki aan ku dareemay in buuqii ka dhexdhacay maamulka UNDP uu ahaa tallaabo hor leh oo lagu doonayey in TFG-da laga dhex abuuro khilaaf hor leh oo mar labaad ay xubnaheedu ku kala tagaan, sidaasna lagu baabba'sho heshiiskii Cadan lagu gaarey.

In walaacaygu qayb ka ahaa shirqoollada TFG-da ragaadiyey oo gaarsiiyey heer xun oo is afgaranwaa. Wax kasta oo meesha ka jirey Ilaah baa naga og, waxaase hubaal ahaa in, labada wakiil ee ka xumaaday heshiiska dhexmaray laba mas'uul oo ka wada tirsan TFG-da, ay ka turjumayeen aragtida dawladahooda, kuwaas oo si aan qarsoodi lahayn meelo badan uga muujiyey in aaney wax dan ah u hayn TFG-da.

# BAYDHABO

Markii aan soo gaarey magaalada Jawhar, waxaan bilaabay in aan fuliyo heshiiskii Cadan. Sidaas awgeed, waxaan amar ku siiyey Xuseen Cali Saylaan, agaasimaha Madaxtooyada in uu degdeg uga shaqeeyo sidii Madaxtooyada loogu rari lahaa magaalada Baydhabo. 23kii Febraayo 2006dii ayuu agaasimihu ka duulay magaalada Jawhar isaga oo wata tira yar oo ka mid ah ilaalada Madaxtooyada. Markii ay halkaas tageen, waxay kala kulmeen soo dhoweyn wanaagsan, waxaa la geeyey guryo naadi u ahaan jirey saraakiishii XDS, halkaas oo aad ugu dhowayd gegida dayuuradaha Baydhabo. Degaankaas waxaa loogu talaggalay in, si ku meel gaar ah, looga dhigo xaruntii Madaxtooyada. Laba maalmood gudahood raggii meesha tegey waxay degaankii ka qabteen hawlo badan oo isugu jirey nadaafad iyo dayactir suurtaggelin karey in, si ku meel gaar ah, Madaxtooyada la dejiyo.

Naadigu dhinac walba waa ka burbursanaa, muddadii burburka lagu jireyna cid wax ka qabatey ma ayan jirin, sidaas awgeed wuxuu iska noqday meel halaq-galeen ah. Xeradaas waxaa ku noolaa, dhinac walbana kaga wareegsanaa 3000 oo qoys, kuwaas oo u badanaa dad ka soo barakacay degaanno kale. Dadkaasi waxay halkaas ka dhisteen cariishyo, baraakooyin iyo khaymado. Barakacayaashaasi waxay habeenkii guryahooda ku soo xeraysan jireen xoolo ay malaha la soo barakeceen, kuwaa oo isugu jirey ari, lo' iyo dameero. Waxaa kale oo meesha uga furnaa dugsi qur'aan oo ilmahooda wax loogu dhigo.

Sawaxanka (qaylada) habeen iyo maalinba ka yeeri jirtey dadka iyo duunyada meesha ku wada nool, waxay ahaayeen kuwo dhibaato ku haysey xasilloonidii shaqada, nasaashada iyo hurdada. Waxa intaas ka darnaa oo barakacayaasha iyo dadka kaleba welwel ku hayey, joogitaanka dhallinyaro wada hubaysan oo akhlaaq xumo caadaystey halisna ku ahaa dadka meesha deggan. Si kasta oo ay xeradu u baabba'sanayd haddana ma ayan jirin meel dhaantey oo xarun ahaan la dhaafsan lahaa. Markii agaasimaha iyo raggii la socday ay xerada ka qabteen wixii ay kari kareen ayay i soo ogeysiiyeen in la soo guuro. Galabnimada 25kii Febraayo 2006dii, ayaan Jawhar ka soo duulay oo

dhinaca Baydhabo u soo kacay. Sidaasna waxaa ku dhammatay sagaal bilood oo TFG-du Jawhar fadhidey, ninkii meesha haystayna kala kulantay dhibaatooyin aan yarayn oo ciriiri geliyey waxqabadkii laga sugayey. Maalinta aan ku soo degney magaalada Baydhabo, hawado aad bay u kululayd, heerkulkuna aad buu u sarreeyey. Dadweyne iyo mas' uuliyiin aad u fara badan ayaa gegida dayuuradaha isugu soo baxay si ay halkaas noogu soo dhaweeyaan.

Nasiib wanaag, markii dayuuraddii na waddey soo gashay hawada magaalada Baydhabo baa cirkii daruuro miiran noqday oo roob mahiigaan ah Ilaah samada ka soo daayey. Markii dayuuraddii soo caga dhigatay gegida, iyada oo weli uu roobkii da'ayo, baa dadkii meesha isugu yimid hal mar ku wada qayliyeen: ' Cabdullaahi Rooblow ku soo dhowow Baydhabo'. Roobkii galabtaas bilawday wuxuu magaalada ku da'ayay saddexdii beri oo ku xigtey. Anigu aqoon fiican baan u lahaa Magaalada Baydhabo oo mudda dheer baan hore uga soo shaqeeyey. Baydhabo waxay ahaan jirtey magaalo aad loo jecel yahay, taas oo hawadeeda wanaagsan iyo doogga dageenkeeda kula baxday "Switzerland of Somalia". Guud ahaan, gobolka Jubbada Sare wuxuu ahaa gobol Ilaahay khayraad ku mannaystay, wuxuuna ahaa gobolka ugu wax-soo-saar badan xagga dalagga beeraha, sida masaggada, galleyda, canabka, caannuuniga, iwm. Sidaas oo kale gobolkaasi wuxuu caan ku ahaa xoolaha nool sida geela, ariga iyo lo'da. Xoolaha suuqyada dalka lagu gato iyo kuwa dibadda loo dhoofiyaba waxaa ugu badnaa kuwa gobolkaas ka soo jeeda.

Nasiibdarro, Baydhabada aan hadda soo gaarey ma ahayn magaaladii aan aqiin. Magaaladii dalka oo dhan looga soo dalxiis tegi jirey, 2006dii waxay u ekayd meel bahal-galeen ah. Daaro dumay iyo cariishyo haawanayey oo keli ah bay magaaladu ka koobnayd. Dadka ku noolaa kama badnayn dhowr kun oo qof oo wada sabool ah. Nasiib wanaag, markii aannu soo gaarney waxaannu magaalada ku khasirnay 2 milyan oo doolar oo ay nagu kala taageereen dawladaha Kenya iyo Sudan. Hal malyan waxaannu ku khasirnay xeraynta miliishiyooyinkii degaanka, halka hal malyan oo kalena aannu ku khasirnay ciidammadii qaranka oo aagga soo degey. Markii lacagtaas yari ay magaalada gashay waxaa muddo bil ah si u soo noolaatey bilicsamidii magaalada, dhaqdhaqaaqii

dadka iyo ganacsiga. Waxaa furmay makhaayadihii, hoteelladii, dukaammadii yaryaraa iyo hoosooyinkii dayactirka baabuurta. Waxaa soo cammirmay suuqyadii magaalada. Sidaas oo kale, markii jid-gooyooyinkii laga sifeeyey waddooyinka magaalada soo gala iyo kuwa ka baxaba waxaa furmay isu socodkii degmooyinka oo hore u kala xirnaa, sidaasna waxaa tartiib-tartiib u soo noqday isdhaafsigii ganacsiga degmooyinka u dhaxeeyay iyo isdhexsocodkii dadkii hore u dagaalsanaa.
Magaaladu waxay sii ladnaatay markii xildhibaannadii, hay'adihii caalamiga ahaa, shaqaalihii dawladda, xirfadleyaal aqoon gaar ah u leh adeegyada kala duwan ee bulshada iyo qurba-joogtii ay soo buux dhaafiyeen, dabadeedna hoteelladii iyo guryihii ijaarka ahaaba wada buuxsameen.

Amnigii iyo kala danbayntii magaalada dib loogu soo dabbaalay baa, suurtaggeliyey in ay dib degaanka ugu soo noqdaan ganacsatadii dagaalka sokeeye awgiis dalka uga qaxday. Hal sano gudaheed magalaadii waxay la soo noqotay wejigii hore loogu aqoon jirey. Markii aan arkay sida ay magaaladu muddo gaaban isu beddeshey, waxaa ii caddaatay in, haddii dalka la nabadayn lahaa, ay arrimo badani iska xallismi lahaayeen. Waxaa kale oo ii caddaatay in baahida Soomaaliya ay yar tahay oo dhaqaale yar oo la geliyaa uu wax badan ku kordhin lahaa.

## BAYDHABO: MIDAYNTII TFP

Tartiib-tartiib waxaa magaalaada u soo galay xildhibaannadii ka tirsanaa Baarlamaanka Federaalka, kuwaas oo meela kala duwan ku kala maqnaa, haba ugu badnaadeen Jawhar iyo Muqdisho. Raggii mudda toban bilood ah kala maqnaa ayaa bishii Febraayo isugu wada yimid magaalada Baydhabo. Isu imaadkii iyo is-dhexgalkii xildhibaannadu waxay abuurtay wadajir iyo wada shaqayn hor leh oo TFG-dii gelisey naruuro cusub, taas oo sababtay in ay muddo gaaban ku meelmariyaan shuruuc fara badan ee hawlaha dawladdu u xayirnaayeen muddo hal sano ku dhow. Kolkii la dayactiray qolweynihii Baarlamaanku ku shiri lahaa, ayaa 26kii Febraayo 2006dii,

waxaa ka furmay magaalada Baydhabo kalfadhigii caadiga ahaa ee Baarlamaanka, kaas oo nasiib wanaag, ay xubnihii TFP-du ku dhammaayeen. Kalfadhiggaas waxaa ka soo qaybgalay ergooyin tiro badan oo ka socdey beesha caalamka, wakiillo dawlado aannu saaxiibbo nahay iyo weriyeyaal ka socdey warbaahinta gudaha iyo tan dibadda.

Markii guddoomiyihii Baarlamaanku uu rasmi ahaan shirka u furay, waxaa shirka taleefoon u soo diray mudane Cali Cabdalla Saalax, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Yemen, taleefoonkaas oo uu ugu jeediyey xildhibaanadii ka qaybqaadanayey kalfadhigaas hambalyo iyo bogaadin uu ku dhiirrigeliyey in ay ku dadaalaan midnimada TFG-da iyo wada shaqaynta qaybeheeda kala duwan. Intaas kaddib waxaa hadalkii qaatay xubin Baarlamaanka ka tirsan oo ku hadlayey magaca TFP-da oo halkaas iiga soo jeediyey mahadnaq, sida uu yiri aan ku mutaystay kaalinta lama illaawaanka ah ee aan ka qaatay isu soo ururinta iyo midaynta xildhibaannadii kala fadhiyey Muqdisho iyo Jawhar. Markii ay dhammadeen farriimihii iyo hambalyooyinkii kala duwanaa ee kalfadhiga laga soo jeediyey, ayaa Guddomiyihii Baarlamaanku igu casumay in aan meesha ka jeediyo khudbadii furitaanka kal-fadhiga.

Hadalkaygii waxaan ku bilaabay mahadnaq aan kalfadhiga uga jeediyey intii gacanta ka gaysatey suurtagelinta iyo mideynta xildhibaannada oo uu hormuud u ahaa Cali Cabdalla Saalax, Madaxwynaha Jamhuuriyadda Yemen. Waxaan intaas ku daray, in wixii maanta ka danbeeya Goluhu wajibaadkiisa u guto si xilkasnimo leh, mudnaanta la siiyo wixii danta guud ku jirto, isla markaasna, xalaydhalay laga dhigo wixii ina soo dhexmaray. Ugu danbayntii waxaan xildhibaannada ka codsaday in ay xoojiyaan xiriirka ay la leeyihiin degaannada ay ka soo jeedaan, hormuudna u noqdaan sidii dalka loogu baahin lahaa dawladnimada. Baarlamaanku wuxuu muddo gaaban ku dhisay guddiyadii dastuuriga ahaa ee qaranka, kuwaas oo ay ka mid ahayeen (i) Guddiga Dastuurka Federaalka, (ii) Guddiga Dibuheshiisiinta, (iii) Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah, (iv) Guddiga hub ka dhigista iyo Jihaynta Miliishooyinka (v) Guddiga dib u Dejinta. Guddiyadaas oo dhammina si toos ah bay ugu dhaqaaqeen hawlihii loo

xilsaaray, wax khilaaf ahina kama jirin waajibaadka loo xilsaaray, haddii laga reebo Guddiga Dastuurka Federaalka. Goluhu arrintaas waa ku kala qaybsanaa, oo waxaa jirey dad aan yarayn oo ka so horjeedey in dalka laga hirgeliyo habka Federaalka ah, kuwaas oo doonayey in aan waxba laga beddelin habkii dhexe ee xukunka ee hore dalka uga jiri jirey.

## DILKII MUDANE DEEROW

Nasiib wanaag, waxaa wasiirka Federaalka ahaa mudane Cabdalla Deerow Isaaq oo ahaa nin shaqsi ahaanna sharaf leh, Soomaalinnimaduna ku weynayd, habka federaalkana aamminsanaa. Durba markii la dhisay Guddiga Dastuurka Federaalka, Cabdalla Deeroow wuxuu safar degdeg ah ugu baxay magaalada Nairoobi, halkaas oo hawl toddobaad soconaysey kaddib, uu heshiis kula galay hay'ado caalamiga ah, heshiiskaas oo lagu maalgelinayey diyaarintii dastuurka federaaliga ah ee qaranka, kaas oo afti kaddib beddelaya Axdiga ku meel gaarka ah.

Mudane Deerow wuxuu, barqadii maalin khamiis ah ka so degey gegida dayuuradaha ee Baydhabo, dabadeed wuxuu toos iigu yimid xaafiiska, halkaas oo uu warbixin buuxda iga siiyey wixii uu Nayroobi kala soo kulmay, wuxuuna ii sheegay in uu hay'adihii ku lug lahaa la soo gaarey heshiis buuxa, heshiiskaas oo irridda u furayey in bishaan gudeheeda la bilaabo hawlihii la xiriirey samaynta dastuurka. Wuxuu iga tagay 12kii duhurnimo. Waan u mahadceliyey waana u duceeyey in Ilaahay hawshaas culus la garab galo, waxaana ku ballannay in aan beri oo Jimce ahayd wada qadayno.

Mudane Deerow wuxuu ahaa nin isku kalsoon oo aad looga jecel yahay degaanka gobolladii hore la isku oran jirey Jubbada Sare. Wuxuu ahaa nin meeshii uu doono mara isaga oo aan wadan ilaalo gaar u ah, sida madaxda kale ee dalku u badan tahay. Wuxuu ahaa nin la isu taago oo Soomaali oo dhammi xurmayso. Mudane Deerow wuxuu ahaa nin meel kasta ku daafaca danaha Soomaaliyeed. Wuxuu ahaa geesi si bareer ah uga hortaga markii uu arko danaha ummadda oo la marin habaabinayo ama lagu danaysanayo. Maalintii uu ii yimid tii ku

xigtey oo Jimce ahayd ayuu markii uu salaadda Jimcaha soo tukadey ayaa gacan-ku-dhiiglihii dilkiisa loo soo diray goobtaas ku toogtey. Gacan-ku-dhiiglihii wuxuu u cararay meel lagu ballamiyey, si loogu saangado abaabulayaashii dilka ayaa markiiba Muqdisho u dhoofiyey. Gadaal waxaa laga ogaadey in uu denbiiluhu ku xirnaa qas wadayaal kala duwan sida maxkamadaha iyo qabqablayaashii Muqdisho. Dilkani wuxuu xiriir la lahaa dilalkii taxanaha ahaa ee kuwa nabad-diidka ahi ay Muqdisho iyo meelo kaleba ka fulinayeen. Si nabadda magaalada loo sugo oo looga hortago dilalka qorshaysan, waxay dawladdu go' aansatay in ay gegida dayuuradaha ee Baydhabo kala wareegto miliishiyo beeleedka haysta.

Miliishooyinka haystey waxay ka tirsanaayeen beelaha Hadamo iyo Liisaan ee beelweynta Mirifle. Waxay dawladdu amartay in miliishooyinka la geeyo xeryaha Ciidanka XD Soomaaliyeed si dhaqan celin loogu sameeyo, dabadeedna gegida dayuuradaha lagu wareejiyo ciidammada Booliska, waxaana arrintaas loo xilsaaray Janan Cali Xasan Looyaan (Cali Madoobe). Janan Cali wuxuu dhawr jeer arrinta kala hadlay rag isugu jirey qabqablayaal iyo xildhibaanno TFG-da ka tirsanaa oo dhallinyaradaas meesha ku hayey in ay sida ugu dhibaato yar gegida uga saaraan, wayse ka dhego adaygeen codsigii Jananka. Waxaa Janan Cali khasab ku noqotay in uu xoog adeegsado si uu gegida ula wareego.

Hawlgalkaas waxaa ku dhintay dhowr dhallinyaro ah oo ka tirsanaa miliishooyinkii gegida hore u haystey. Xildhibaan Maxamed Ibraahim Xaabsade (beesha Liisaan) iyo qabqable Saransoor (beesha Hadamo) waxay dhacdadaas kaddib, magaalada ka bilaabeen bannaanbaxyo rabashado wata, waxay damceen in ay dawladda culays saaraan si loogu daayo haysashadii gegida dayuuradaha. Waxay gaareen heer ay idaacadaha ka baahiyaan baaq isugu jirey cadaadis iyo cabsi-gelin oo ay ku codsanayeen in Janan Cali xilka laga qaado uu magaaladana ka baxo . Dawladdu ma dhegeysan cagajuglayntaas, waxayna ku dadaashey sidii hawlaha gegida dayuuradaha loo caadiyeyn lahaa baahideedana wixii la awoodo loogu qaban lahaa.

Markii la arkay, sida gegida dayuuradaha muddo gaaban loo hagaajiyey, buuqii iyo dacaayadihii belo-abuurka ahaa iskood bay u shiiqeen. Dhacdo kale oo buuq magaalada ka abuurtay waxay ka dhalatay dadaalkii loogu jirey in la xoojiyo nabadgelyada magaalada oo jidgooyooyinkii hore loo dhigtay gudeheeda looga qaadi lahaa. Markii la soo gaarey jidgooyo ay miliishiyo u dhalatay beesha Galadle dhigteen meel halbowle ah ee uu dhaxaysey Madaxtooyada iyo Baarlamaanka ayaa ciidankii dawladda lagala horyimid diidmo qayaxan oo looga horjeedey in halkaas jidgooyada laga qaado. Dabadeed waxaa meeshii ka dhacay iska horimaad ay ku dhinteen qaar ka mid ah kuwii ay jidgooyadu u tiil iyo malaaqii beeshe Galadle oo meesha u yimid in uu ciidammada dawladda ka codsado in aan jidgooyada laga qaadin meesheeda. Beesha Galadle waxay ku adkaysatay in uu malaaqu meesha u yimid si uu u dhexdhexaadiyo ciidammada iyo miliishiyada halkaas isku haystey. Arrintii waxaa lagu xalliyey in ay mag dawladdu bixiso.

Magaalada Baydhabo waxay ka mid ahayd meelaha ugu weyn ee la isku haystey, lana isku baabbi'iyey shan iyo tabankii sano ee dagaalladu dalka ka socdeen. Sidaas awgeed, dhallinyaradii waa iska bahaloobeen oo meel kasta qori bay la taagan yihiin. Saboolnimada dagaalka ka dhalatayna waxay bulshadii degaankana ku abuurtay yididdiilo la'aan. Si kasta oo ay dawladdu aad ugu dadaashey wax ka qabashada arrimahaas, haddana weli kuma wada guuleysan, run ahaanna awood uma lahayn, in mudda gaaban ku xalliso dhibaatooyinkii baaxadda weynaa. Durba markii ay dawladdu u soo guurtey magaala Baydhabo, waxay ku dadaashey in ay xoojiso xiriirkii ay la lahayd dawladaha deriska ah, kuwaas oo ay si joogta ah wufuud isu dhaafsan jireen.

Iyada oo lagu jirey horumarinta xiriirrada caynkaas ah ayaa waxaa Soomaaliya booqasho ku yimid wafdi ka socday dalka Ugandha ee uu hoggaaminayay mudane Cali Ke-Ke oo ahaa Ra'iisul Wasaare ku-xigeen iyo Wasiirka Warfaafinta. Waxaa la qorsheeyey in wafdigu booqasho saacado ah ku gaaro xero saldhig u ah ciidammada qaranka ee ku tiil tuuladda Mannaas oo 35km ka xigta magaalada Baydhabo dhinca galbeed. Kolkii uu wafdigu soo dhammaystay booqashadiisii oo uu ku soo jeedo xagga Baydhabo ayaa miliishiyo beeleed jidka u gashay oo

rasaas oodda uga qaadday, dabadeed ilaaladdii wafdiga la socotey baa si geesinnimo leh isaga caabbisay, kuwaas oo dhowr ka mid ah meesha lagu diley, kuwo kalena la qabqabtay.

Lixdii bilood ee hore oo TFG-du ay ku sugnayd magaalada Baydhabo, waxay xoogga saartay sidii lagu dhisi lahaa ciidan qaran oo tartiib-taartiib u suga nabadgelyada dalka. Inkasta oo dhaaqale xumo na haysey, waxannu go'aan ku gaarney in aannu boqolkiiba sagaashan wixii dhaqaale ah ee na soo gala u jihaynno xagga ciidammada, go'aankaas oo aannu dadaal badan ku meelmarinnay. Nasiib wanaag, wax badan baa arrintaas nooga qabsoomay. Mudda gaabanna waxaa noo suurtaggalay in aannu askar iyo dhallinyaro fara badan ka soo ururinno gobollada dalka oo dhan oo isugu keenno xeryihii XDS hore ugu lahaan jirey agagaarka magaalada Baydhabo iyo Ballidoogle, goobahaas oo aannu tababbarro degdeg ah uga furnay.

Sidaas oo kale, waxannu dhammaystirnay dhismihii Hey'adihii Garsoorka sida Maxkamadaha, Booliska iyo Ciidanka Asluubta, kuwaas oo tartiib-tartiib dalka uga hawlgalay, inkasta oo ciriiriga dhaqaale ee na haystey awgiis ayan wax weyn qaban karin. Iyada oo hay'adihii kale ee qaranku orod iyo dadaal ugu jireen sidii ay xilalkooda u gudan lahaayeen, nasiibdarro, waxaa dhacay in xukuumaddii lafdhabarta dalka u ahayd ay si muuqata uga gaabisay xilkii loo igmaday, dabadeedna hawlihii qaranku kala socon waayeen. Kolkii dhaleecayntii iyo dhaliilihii xukumadda lagu hayey ay fara ka bax noqdeen , ayaan dhowr goor arrimaha kala kulmay mudane Cali Geeddi RW TFG-da, kaas oo kulan walba oo na dhex mara iga ballanqaadi jirey in uu degdeg wax uga qabanayo wixii qalloocday, aanse marna kaga dhabayn wixii uu ballanqaaday.

Markii laga quustay waxqabad danbe oo xukuumadda laga sugo ayaa, si lama filaan ah, xildhibaanno badani Golaha Baarlaamaanka soo hordhigeen codsi kalsoonida lagala noqonayo Xukuumadda. Kolkii soo jeedintii xildhibaannada cod loo qaaday, dawladdu kalsooni darradii waxay kaga badbaaddey dhowr cod. Codayntii kaddib ayaa RW iigu yimid Madaxtooyada.

Wuxuu warbixin iga siiyey sidii wax u dhaceen, eeddana wuxuu dusha uga tuuray Shariif Xasan, Guddoomiyaha Baarlamaanka iyo xildhibaannadii Muqdisho la joogey. Maalintaas waxaannu ku kala tagnay in aannu si fiican uga soo baaraandegno khilaafka soo kala dhexgalay hay' adaha, kaddibna aannu wada hadal isugu soo noqonno.

Kulankayagii labaad waxaan RW hordhigay xogo badan oo la xiriirey arrimihii lagu dhaleecaynayey, waxaana kula taliyey in ay isaga laf ahaantiisa sharaf u tahay in uu jagada RW iska casilo. RW arrintii ma garaysan, wuxuuna igu eedeeyey in aan ka danbeeyey codsigii la isku dayey in kalsoonida lagala noqdo. Kolkii ay cabashadiisii meel walba gaartey, ayaa la igala soo hadlay meelo badan iyada oo la iga codsanayey in aan arrimaha qaboojiyo, lagana shaqeeyo sidii isafgarad loo gaari lahaa. Ma garan waxa RW arrin fudud uga dhigay mushkilad caalami ah oo aannu si uun gudahayaga uga dhammaysan karney.

Waxaa magaalada Baydhabo noogu yimid Wasiirka Arrimaha dibedda ee dalka Itoobiya mudane Seyoum Mesfin, kaas oo nagu dhexdhexaadiyey in Xukuumadda la siiyo saddex bilood oo tijaabo ah oo ay isku saxdo. Sidaas oo kale, waxaa lagu heshiiyey in xukuumaddu is casisho haddii ay muddadaas ku qaban weydo hawlihii laga sugayey. Heshiiskaas waxaa ila saxiixay Guddoomiyaha Baarlamaanka iyo RW, waxaa goob jooge ka ahaa Wasiirka Arrimaha Dibedda ee Itoobiya. Heshiiskaasi wuxuu fursad noo siiyey in aannu dhismihii xukuumadda dib ugu noqonno oo boqolkiiba soddon dhinno tiradii faraha badnayd ee xukuumaddii lagu soo dhisay Nayroobi. Markii aannu dhammaystirnay dhismihii xukuumadda lagu heshiiyey, ayaannu Baarlamaanka horgeynney oo kalsooni ka codsannay.

# IS-QARXINTII LA ILA BEEGSADAY

Bishii Sebtembar 18dii 2006dii, waxaan ka qaybgalay fadhi aan caadi ahayn oo Golaha Baarlamaanku kaga doodayey kalsoonidii la siin lahaa xukuumadda cusub oo maalmahaas la dhisay. Fadhigaas waxaan u tegey in aan xubnaha Baarlamaanka ku boorriyo in ay tixgeliyaan xaaladaha adag ee dalka ka jirey oo ay da[illegible]a kalsooni siiyaan. Markii aan hadalkaygii dhammaystay, waxaan ka soo degtey kursigii marti-sharafta, waxaa Golihii iga soo sagootiyey guddoomiyaha Baarlamaanka, kaas oo intii aanan ka soo bixin Baarlamaanka, ku yiri, RW "Miyaadan Madaxweynaha raacayn?", aniga oo la yaabay su'aasha guddoomiyuhu weydiiyey RW, baan si fiican labadaba u fiirshey oo ku iri: "Sidee buu i raaci karaa RW isaga oo xukuumaddiisii kalsooni Golaha uga doonaaya"; hal mar bay labadii ninba wada yiraahdeen "Haa, waa sax." Daqiiqado yar kaddib, kolkii aan Baarlamaanka ka soo baxay oo aan baabuurkii fuulay, wax yarna hore waddada u soo raacay, ayaa la igu qarxiyey baabuur cabbaysan. Ilaah waa iga badbaadiyey oo baabuurkii aan la socdey oo ololaya baan albaabka iska furay oo ka soo degey.

Isla markaasna tacshiirad baa nalaku soo furay. Ciidankii ila socdey baa ka jawaabey. Waxaannu ka leexannay jidkii weynaa oo waxaannu qaadnay jid yar oo looga leexdo waddada weyn oo dariiqa Madaxtooyada meel danbe kaga dhacda. Waxaa jidka yiil wiil nala noqday in uu dhaawac yahay ama dhintayba, wax yar markii aannu dhaafnay ayaa ciidankii naga danbeeyey waxay arkeen wiilkii aannu soo dhaafnay oo bistoolad la soo baxaya, dabadeed way noo qayliyeen, nasiib wanaag xabbaddii way kala hormareen markii uu xaggaya la soo beegsaday.

Wax yar kaddib waxaa noo yimid askari lagu magacaabo Maxamed Yare oo amar la'aan baabuur qori saaran yahay kala soo baxsaday xeradii ciidanka, kaas oo nagu soo gaarey halkii aannu maraynev, dabadeedna noola soo cararay xarunta Madaxtooyada. Baabuurkii waxaan ka degey aniga oo dabku meel kasta iga gaarey, waase Ilaah mahaddiise ima gaarin wax lagu sheegi karo dhaawac weyn. Dharkii

baan iska baxshay, finiinnadii (firir) biraha iyo quraaradaha korkayga galay baa la iga saaray, biyo qabowna waa la igu shubay, dabadeedna sariirta baan isku tuuray. Markii fadhigii Baarlamaanku dhammaaday oo kalsoonidii dawladda la siiyey, baa waxaa mas'uuliyiintii i soo booqatay ugu soo horreeyey Shariif Xasan iyo Fawsiya Maxamed Shiikh, kuwaas oo kolkii ay indhaha igu dhufteen muujiyey dareen naxdin ah. Iyaga oo yaabban bay qolkayga ka baxeen. Hore baan u maqli jirey in dembilayaashu ayan marna indhaha siin karin dulmanayaasha. Taasu maanta bay ii xaqiiqowdey.

Waxaa ii yimid R/Wasaaraha oo igu yiri dayuurad baan degdeg u codsanayaa oo Nayroobi ayaannu kuu qaadeynaa. Waan u mahadceliyey, waxaana u sheegay in aanan anigu meelna aadayn ee uu ku dadaalo sidii uu dadka kale oo shilka ku dhaawacmay wax ugu qaban lahaa. Dadka aan ka hadlayaa waxay ahaayeen saraakiishii ila socotey, kuwaas oo ay ka mid ahayeen Janan Maxamed Nuur oo baabuurka ila saarnaa ahaana kaaliyahayga gaarka ah (Aide-De–Camp), Istakiin oo ahaa wadihii baabuurka iyo agaasimaha Madaxtooyada Xuseen Cali Saylaan oo dhinaca bidix iga fadhiyey iyo Dr.Cabdiqafaar Yaasiin Faarax oo baabuurkii iga horreeyey saarnaa oo gacanta midig ay go' day.

Falkaas waxaa laga soo abaabulay Muqdisho oo ay haysteen kooxdii maxkamadaha isku magacawday. Baydhabo waxaa falkaas ka fuliyey xubno dawladda iyo Baarlamaanka ka tirsan oo uu ugu horreeyo guddoomiyiha Baarlamaanka Sharrif Xasan Shiikh Aadan. Dhawr beri ka hor, baa ciidanka nabadsugiddu i soo gaarsiiyeen warar sheegaya in magaalada la soo geliyey baabuur loogu talaggalay in dad lagu qarxiyo. Caddayn dhab ahse looma hayn goobta baabuurka la geeyey, cidda wadata iyo cidda lagu qarxinayo. Saraakiishii warka ii keentay waxaan ka codsaday in, inta aan wax tallaabo ah la qaadin, ay arrinta si fiican u baaraan. Haddii aan wax yar dib ugu laabto sida fudud ee shirqoolkaas la iigu dhigay, waxaa soo baxaysa in aan aniga laf ahaantaydu jebiyey xeerkii udegsanaa, ' Dhawrista amniga dhaqdhaqaaqa Madaxweynaha' oo iska qaatay go'aan ay nabad-sugiddu iska la hayd, aniga oo ayan shaqadayda ahayn, mudaantana siiyey talo Shariif Xasan Shiikh Aadan ii keenay.

Sidatan bayna wax u dhaceen: Goor ay saacaddu ahayd 7:00dii fiidnimo, taariikhduna ahayd 17 Sebtembar 2006dii, ayaa aniga iyo Cali Geeddi oo Madaxtooyada fadhina waxaa noo yimid Guddoomiyihii Baarlamaanka Shariif Xasan. Wuxuu noo sheegay in uu berri shirkii Baarlamaanku furmayo, ajendaduna tahay kalsoonidii uu RW u codsaday xukumadda isla maalmahaas la dhisay. Wuxuu noo sheegay in uu doonayo in uu adduunka tuso in dalku ammaan yahay oo xataa Baarlmaanku uu fariisan karo ilaalo la'aan. ' Wuxuu nagu yiri in, isaga oo taladaas ka duulayey uu mar hore amar ku siiyey ilaaladiisii in aaney berri i raaci doonin oo ay guriga iska joogayaan. Wuxuu nagu yiri in uu annagana naga rabo in aannu sidiisa oo kale yeelno oo aannu berrito shirka tagno annaga oo aan wax ilaalo ah wadan. Wuxuu nagu yiri oo kale in, sawir noocaas ah oo aynnu muujinnaa wax weyn ka beddeli doono sida adduunku Soomaaliya u arko.

Aniga iyo RW gacmo furan baannu ku soo dhoweyney taladiisii. Nasiibdarro, Ilaah nama garansiin, in ninku shirqool noo maleegayo. Shirqoolkaas waxaa ka danbeeyey Maxkamadihii Muqdisho haystey, qaar ka mid ahaa, madax kooxeedyadii Muqdisho iyo madax ka mid ahayd TFG-da. Inkaasta oo la ogaa colaadda dhexdooda ka jirtey, haddana, waxay ka midaysnaayeen dilkayga iyo burburinta TFG-da. Isqarxinta waxaa loo soo xilsaaray, qaabkii loogu talaggalayna u fuliyey inkasta oo Ilaah iga badbaadiyey nin lagu magacaabo Abdisalaan Xirsi Lugey (Habar Gidir, Sacad, Reer Hilowle) ninkaas oo isqarxinta ka hor ku sugnaa magaalada Baydhabo muddo dhowr maalmood. Madaxda TFG-da ku jirtey ee qaybta ka ahaa shirqoolka waxaa hoggaaminayay guddoomiyaha Baarlamaanka Shariif Xasan Sh. Aadan, kaas oo doonayey in uu noqdo Madaxweyne ku meel gaar ah uuna ku dhawaaqo in TFG iyo maxkamadaha la isku daray.

Agaasinka iyo isku-dubbarridka shirqoolka waxaa u xilsaarnaa Cismaan Caato, halka xildhibaan Xaaf u xilsaarnaa keenista baaburka isqarxinta lagu fulinayey. Xildhibaanada ay ka mid ahayeen Xaabsade, Fawsiya, Black, Dhuuracaso iyo Qanyare waxay u kala xilsaarnaayeen isku dubbarridka hawlaha Baydhabo looga baahnaa, sida hoosadii (Garaashkii) baabuurka la dhigay, baabbi'inta raadadka laga heli karey

xogaha shirqoolka. Isqarxintaas waxaa loo saaray guddi baaritaan ku sameeya, kaas oo uu guddoomiye ka ahaa Jeneral Nuur Shirbow, ku-xigeenka xeer ilaaliyaha guud Dr.Cali-Yare iyo ku-xigeenka Nabadsuggida Cabdikariin Shiikh Yuusuf. Isla beryihii falku dhacay waxaannu ka codsannay dawlado aannu xiriir leennahay in ay nagu taageeraan baaritaanka shilkaas. Qaar ka mid ah baannu jawaab ka helnay oo waxay noo soo direen saraakiil aqoon iyo waaya' aragnimo u leh qaraxyada, kuwaas oo markii ay na soo gaareenba DNA ka qaaday ninkii isqarxiyey, dabadeed noo soo sheegay in ninka isqarxiyey yahay Soomaali. Laba beri kaddib markii uu qaraxu dhacay ayuu Shariif Xasan ii yimid oo ii sheegay in uu Dubai tegayo, halkaas oo ay ugu imanayso afadiisii oo Maraykanka deggan. Wuxuu ii sheegay in uu shan beri gudahood ku soo laaban doono.

Ma aqaan sababta uu bixitaankiisa iigu soo sheegay, isaga oo mar hore taladiisii meel soo dhigtay. Markii uu Baydhabo ka duulay baa araggiisa noogu danbaysey, dib danbena nooguma soo noqon. Bil kaddib baannu ogaanney in guddoomiyihii Baarlamaanku uu Muqdisho tegay, halkaas kala jaanqaaday Maxkamadaha, kuwaas oo markii dalka laga saaray uu u raacay magaalada Asmara, Eritereeya.

## ISBAHAYSIGII LA DAGAALANKA ARGAGGIXISADA

Maalmo ka hor inta aan dawladda loo soo rarin magaalada Baydhabo, baan ka dhagaystey raadiyo Jawhar war uu soo saaray guddoomiyaha gobalka Shabeellada Dhexe Maxamed Dheere, kaas oo uu ku leeyahay in, gobalka Shabeellada Dhexe uu ka qaybgelayo isbahaysiga la magac baxay la-dagaallanka argaggixisada, kaas oo ay ku midoobeen madax kooxeedyadii Muqdisho.

Maxamed Dheere wuxuu degganaa dhismaha igu xigey, marnaba ilama soo qaadin in uu ku biirayo kooxdaas iyo ujeeddadeeda. Maalin kaddibse, ayaa waxaa la ii sheegay in Maxamed Dheere lagu yiri in ayan TFG-du meelna ka shaqayn doonin ee uu dantiisa awgeed ugu biiro isbahaysigaas oo Maraykanka taageero ka haysta, isla markaasna

diyaar ula ahaa in uu ku taageero hub iyo dhaqaaleba. Maxamed Dheerena si fudud ayuu arrintaas ugu qancay. Isbahaysigaasi wuxuu ka koobnaa Maxamed Qanyare Afrax, Muuse Suudi Yalaxow, Bashiir Raage Shiiraar, Bootaan Ciise Caalin (Xaaraan ku Naax), Cabdi Qaybdiid, Cumar Finish iyo kuwo kale.

Qanyare oo durba isu muujiyey nin isu caleemasaaray guddoomiyannimada isbahaysigaas ayaa Muqdisho kaga dhawaaqay in ujeeddada ugu danbaysa ee isbahaysigaasi tahay sidii dalka looga dhisilahaa dawlad ay iyagu hoggaamiyaan. Xaqiiqo ahaanse, ujeeddada la hubey oo isbahaysigaas laga lahaa, waxay ahayd fulinta qandaraas lala galay hay'adaha Maraykanka u qaabbishan basaasidda oo doonayay in loo soo qabqabto rag ay u haysteen argaggixisonnimo, iyada oo loo xaqiijiyey in ay raggaasi Muqdisho ku sugnaayeen, kuna dhex noolaayeen kooxaha islaamiyiinta sheegta ee Muqdisho saldhigyada ka samaystay. Sidaas oo kale, waxaa la hubiyey in ay, bil kasta oo ka mid ahayd saddexdii sano ee ugu danbaysey, hay'adaha Maraykanku siin jireen qabqablayaasha Muqdisho lacag gaareysey boqol iyo konton kun doolar oo ay qandaraaskaas ku fuliyaan.

Kooxaha islaamiyiintu waxay dalka ka soo shaacbaxeen markii ay xukuumaddii burburtay oo sharcigii iyo kala danbayntiina baabba'een, caasimaddiina noqotay meel dagaal ragaadiyey oo labadii nin ee isku haystey Janan Caydiid iyo Cali Mahdi, ku kala adkaan waayeen, ilaa UN-ku soo kala dhex gashay oo sidii ay magaalada u kala haysteen xudduud ama khad cagaaran loogu kala sameeyey.

Dhinaca Woqooyi ee magaalada waxaa haystey Cali Mahdi oo ahaa madaxweynihii KMG ahaa, tan Koofureedna Caydiid oo USC guddoomiye u ahaa. Labada nin waxay ku guuldarraysteen in ay nabadeeyaan aagaggii ay ka kala talinayeen. Waxaa cirka isku shareeray faldembiyeedyadii magaalada ka dhici jirey, sida dilka, kufsiga, dhaca, iwm;. Arrimahaasi waxay dadweynaha ku abuureen welwel iyo cabsi aan dhammaad lahayn.

Hay'adaha u dooda xuquuqda bini' aadanka waxay adduunka oo dhan ku faafiyeen warbixinno iyo xogo loo qaateen ah oo ay beesha caalamka ku baraarujinayeen dhibaatooyinkii ka socdey caasimadda Soomaaliya. Cali Mahdi oo doonayey in loo arko siyaasi mas'uul ah oo ka duwan Caydiid, kana soo horjeeda qalalaasaha, ayaa wuxuu kula heshiiyey Shiikh caan ka ahaa dhinaca Woqooyi ee magaalada Muqdisho, laguna magacaabo Shiikh Cali Dheere, in uu Woqooyiga Muqdisho ka furo maxkamad Islaami ah oo shareecada Islaamka ka fulisa degaankaas. Markii Shiikhii oggolaadey codsigii loo soo jeediyey, waxaa loogu deeqay dhaqaale uu ku fuliyo hawlaha maxkamadda sida miliishiya, xabbisyo iyo xaafiisyo.

Shiikh Cali Dheere wuxuu magaalada ku qabtay gacan bir ah. Wuxuu dadweynihii oo dhan ku abuuray cabsi aan xad lahayn. Dhinaca Woqooyi ee magaalada waxaa ka dhalatay nabad aan hore loogu arkin tan iyo markii dawladdii burburtay. Waxaa guud ahaan la wada aqoonsaday in dhinaca Woqooyi nabadgelyo laga helay, halka dhinaca Koofureed faldembiyeedyadii ka dhici jirey sare u sii kaceen, ilaa la gaaray heer ay dad badani uga qaxaan xagga Waqooyi.
Nasiibdarro, arrimihii Shiikhu ku micneeyey in ay sabab u ahaayeen in uu ku guuleysto nabadda uu ka dhalatay Woqooyiga Muqdisho, ayaa isaga dib ugu soo noqday. Qaabkii Shiikhu u adeegsadey maamulidda Shareecada ayaa ku soo baxday mid aan caddaalad ku dhisnayn. Waxaa caddaatay in uusan Shiikhu waxba ka qaban dembiyada waaweyn oo ay galaan ragga caanka ah oo awoodda ku leh Woqooyiga Muqdisho.

Wax qabadkiisu wuxuu ku koobmay gabood-falayaasha yaryar sida tuugada oo uu ku ridi jirey xukun adag sida gacmo goyn iyo karbaash, iwm. Iyada oo hortiiba maxkamadda lagu dhaliilayey qallafsanaanta xukunka iyo hubsiino la' aanta gaboodaha (dembiyada) ayaa waxaa dareenkii dadweynaha iyo bulshada caalamkaba kiciyey xukunkii isweydaarka ahaa oo danbe. Waxaa dhacday in, Cali Mahdi meel kasta cadaadis laga soo saaray si uu maxkamaddaas wax uga qabto. Cali oo hore loo ogaa in uu u dhego-nuglaa dareenka siyaasadda dawladaha shisheeye, ayaa goor subax ah weerar lama filaan ah ku qaaday maxkamaddii oo xiray.

In kasta oo maxkamaddii Shiikh Cali Dheere xirantay, haddana, fikraddii ay ku dhisantay waxay noqotay mid tartiib-tartiib magaalada uga hirgasha. Waxaa arrintaas aad iyo aad uga faa'iidaystey wadaaddo doonayey in ay xukunka ku qabsadaan iyaga oo ku marmarsoonaya in ay Magaalada ka dhaqan-gelinayaan shareecadda islaamka. Sidaas soo kale, wadaaddani waxay aad iyo aad uga faa' iidaysteen waaya-aragnimadii ay ka heleen wixii ku dhacay Shiikh Cali Dheere.

Taladiii wadaaddadaasi ku doonayeen in ay halkeedii ka sii wadaan fikraddii uu Shiikh Cali Dheere ka hirgeliyey Woqooyiga Muqdisho, ayaa suurtaggal ugu muuqatay kaddib markii Caydiid la dilay, Cali Mahdina masraxa siyaasadda si lama filaan ah uga suulay, oo qabqablayaal labadii hore kala raacsanaa ay magalaadii xaafad xaafad ugu kala habsadeen.

Iyaga oo halistaas ka feejignaa ayay, wadaaddadii doonayey in ay magaalada ka dhisaan maxkamado hor leh, qaadeen tallaabo ay dhidibbada ugu aasayeen maxkamadaha cusub. Maxkamadahaas oo lahaa dabeecad siyaasadeed balse loo muujinayey kuwo ku salaysan shareecada islaamka. Tallaabada hore waxay ku meelmariyeen qorshe ay tartiib-tartiib maxkamado uga dhiseen xaafadaha magaalada Muqdisho oo dhan, iyaga oo maamulka maxkamadahaas hoos geeyey qabiilka xaafaddaas deggan, si dabadeed qabiilka ay ku sunteen uu xil isaga saaro hawlaha maxkamadda. Inkasta oo maxkamaduhu ku dhismeen qaab qabiil, haddana, waxaa ka dhaxeeyey xiriir iyo iskaashi hoose.

Kolkii ay sidaas isugu xireen qabaa' ilkii iyo maxkamadihii, waxaa u fududaatay wadaaddadii in ay si fudud ugu dhaqaaqaan tallaabadii labaad oo ay maxkamadaha ugu dhiseen ciidammo isla iyaga hoos yimaada, kana madaxbannaan madax kooxeedyada isku haystey xukunka magaalada. Isbiirsiga isku xirnaanta maxkamadaha iyo beelaha, iyo dhismaha ciidammo hoos yimaada maxkamadaha, waxay muddo gaaban wadaaddadii xagjirka ahaa u yeeleen awood aan la inkiri karin oo magaalada ku soo biirtay, kuwaas oo weliba si habaysan ugu hanqaltaagayey hanashada xukunka dalka.

Sidaas ayay maxkamadihii magaalada oo dhan uga samaysteen saldhigyo u gaar ah, iyaga oo taageero dhaqaale ka helayey islaamiyiinta xagjirka ah iyo hay'ado ay isku ujeeddo yihiin. Farsamadaas ayay maxkamaduhu ku bilowdeen, ku koreen, ku ballaariyeen xiriirkoodii caalamiga ahaa, ku yeesheen awood ay ku martigelin kareen kuwo xagjir ah iyo dembiilayaal ay isku ujeeddo ahayeen.

Markii ay hubsadeen in ay magaalada awood ku leeyihiin ayay, tartiib-tartiib madaxa ula soo kaceen wadaaddo xagjir ah oo hore uga tirsanaan jirey Al-Itixaad Al Islaam, sida Xasan Daahir Awees, oo hore dagaal xumi nagu dhex maray gobollada Woqooyi Bari, dagaalkaas oo ay ku jabeen. Wadaaddadii waxay bilaaben in ay khubaro ka keensadaan dalalka islaamiyiintu xoogga ku leeyihiin, kuwaas oo uga furay xarumo lagu tababbaro ciidammadooda Muqdisho iyo goobo kale. Miliishooyinka maxkamadaha waxaa ugu xoog badnaa kuwa beesha Habargidir, kuwaas oo hore u helay laba fursadood oo ayan kuwa kale helin.

Tan hore, waxay ahayd taageerada ay ka haysteen beesha ay ka tirsan yihiin oo burburka ku naaxday; tan labaadna waxay ahayd xiriirka sokeeye oo ay la lahaayeen ururrada islaamiyiinta ee adduunka, kuwaas oo ay hub iyo maalba ka heli jireen. Intaas waxaa ka daran, maxkamadihii la yiri waxaa loo dhisay in ay ka shaqeeyaan sidii loo xasilin lahaa Muqdisho, waxay si qorshaysan isugu rogeen dhaqdhaqaaq ka mid ah horseedka ururrada xagjirka ah ee islaamiyiinta caalamka. Muddadii ay korriimada ku jireen oo dhan, ciidammada maxkamadahu waxay si joogta ah magaalada Muqdisho uga fulin jireen falal isugu jirey dil iyo afduub ay la beegsan jireen indheergaratada, aqoonyahannada, shaqaalaha hay'adaha waddaniga, kuwa caalamiga ahba iyo saraakiishii XD Soomaaliyeed.

Inkasta oo dilalkaas laga lahaa ujeeddooyin ismuujin ah, haddana habka loo fulinayey iyo wakhtiyada la fulinayey waxay, run ahaan ku jaan go'naayeen tababbarrada khubarada ajnebigu siinayeen xubnaha Al Shabaab si ay ugu diyaariyaan hawlaha la doonayey in ay fuliyaan.

# DAGAALKII SADDEXAAD EE MUQDISHO

Dagaalkii kowaad ee Muqdisho wuxuu dhexmaray Siyaad Barre iyo isbahaysigii beelaha Hawiye (USC) dhammaadkii 1990kii iyo bilawgii 1991kii. Halka dagaalka labaadna ka dhex qarxay isla beelihii waagaas Siyaad Barre magaalada kula dagaallamayay. Inkasta oo dagaalkaan saddexaad ay isaga soo horjeedeen xoogag magacyo kala duwan wata, dhab ahaan dagaalkaani wax weyn kama duwanayn dagaalkii labaad ee Muqdisho ka dhacay, kaas oo dhexmaray isla beelihii hore magaalada ugu dagaallami jirey. Waxa keli ah oo ku soo kordhay waa taageerada ay ka kala haysteen Mareykanka, dawlado kale iyo ururro muslim ah.

Qabqablayaasha Muqdisho waxay ku dagaal galeen magaca ah Isbahaysiga la-Dagaallanka Argaggixisada waxayna gacan ka heleen Hay'adaha sirdoonka ee Dawladda Maraykanka. Kooxda kalena waxay ku dagaal gelaysey magaca ah Golaha Difaaca Diinta iyo Dalka. Labadaas qolo oo ku kala sugan duruufaha aan hore kor ugu soo xusay ayaa, bishii Febraayo 2006dii, dagaal culusi ka dhex qarxay, kaas oo si xun magaalada u wada saameeyey.

Haddii la is barbardhigo awoodda hub iyo tan ciidan ee labada kooxood kala haysteen, waxaa xaqiiqo ahayd in qabqablayaashu ay ka xoog badnaayeen maxkamadaha. Waxaase xooggooda wiiqayey cabsida ay laftigoodu kala qabeen, taasoo caqabad weyn ku ahayd in ay xooggooda mideeyaan. Maxkamaduhu hadba markii ay meel ku soo ogaadaan xaaladda mid ka mid ah qabqablayaashii la dagaallamayay ayay si fudud mid kale ugu gudbaan oo xooggooda oo dhan isugu geeyaan oo ay jebiyaan. Dagaalku wuxuu qaabkaas ku socdey mudda saddex bilood ah, intaas uu socdayna marna qabqablayaashu iskuma ayan deyin in ay is-hagaajiyaan oo dagaalka u galaan tab ka duwan tan ay ku baabba'een oo badday in tobankii beriba mid ka mid ah la jebiyo. Cirib-danbeedka farsamo xumadoodaas dagaal waxay sababtey in magalada oo dhan gacanta looga dhigo. Inkasta oo rasmi ahaan maxkamaduhu guul ka soo hooyeen dagaalkii Muqdisho, waxaa marag ma doonto ah oo Soomaaliya oo dhan laga wada og yahay in guusha ay maxkamaduhu sheegteen iyo jabka qabqablayaashu ay ku yimadeen

taageerada aan kala harka lahayn oo shacbiga Muqdisho isla barbartaagey miliishooyinkii maxkamadaha.
Dagaal kasta oo dhacaa wuxuu keenaa khasaaro fara badan, dhibka ugu weynina wuxuu ku dhacaa shacbiga. Cawaaqibxumadii ka dhalatey arrimihii bini' aadannimo ee dagaalkaasi keenay, waxay ka yaabiyeen dunida oo dhan. Sidaas oo kale, waxaa lala yaabay sida foosha xun ee Maraykanku ugu lug lahaa waxa Mugdisho ka dhacayey. Bishii Maajo 2006dii baa, aniga oo booqasho ku joogey dalka Iswiidhen, waxaa warbaahinta caalamku su'aalo iga weydiiyeen waxa ka socdey Muqdisho iyo waxa aan dooneyney in aannu ka qabanno.

Si fudud baan su'aalihii uga jawaabey, oo waxaan ku soo koobay in aanaan waxba ka qaban karin, oo ay dawlad weyni ka danbayso dagaallada Muqdisho. Sidaas oo kale, waxan meeshii ka caddeeyey in TFG-du jagadii wasiirnimo ka xayuubisay qabqablayaashii dagaalkaas ku jirey. Kuwaas oo ay ka mid ahayeen Maxamed Qanyare Afrax wasiirkii amniga qaranka, Suudi Yalaxow wasiirkii ganacsiga, Cumar Finish wasiirkii diinta iyo caddaaladda iyo Botaan Ciise Caalin wasiirkii hub-ka-dhigista iyo dhaqan celinta, mana jirin wax kale oo aannu samayn karney.

Qabqablayaashii dagaalka lagu jebiyey, carar bay magaalada uga baxeen oo nin walbi wuxuu foodda saaray halkii uu islahaa waad ku badbaadi kartaa. Ma jirin mid dib u soo eegay kuwii kale ee dagaalka kula jirey. Dulliga iyo sharaf-darrada magaalada looga saaray raggii dhowr iyo tobankii sano ee danbe shacbiga Muqdisho afduubka ku haystey. Maxamed Qanyare Afrax wuxuu u baxsadey degaan ka mid ah gobollada dhexe, balse loogama harin oo waa laga daba tagey.

Markii uu muddo hadba meel ku dhuumanayey bay dani bidday in uu TFG-da soo weydiisto in la badbaadiyo. Markii uu xaggayaga soo aadey ayaa meel dhexda ah dagaal ku qabsaday, halkaas oo gaadiidkii u watey qaarna laga qabsaday, qaar kalena lagaga gubay, balse xoogaagii hubka ahaa ee u samatabaxay buu naf lacaari kula soo gaarey degmada Ceel Cali oo ka tirsan gobolka Hiiraan, halkaas oo uu qaylo dhaan nooga dirsaday. Saraakiil ka tirsan ciidammada ayaan Madaxtooyada shir kula yeeshay oo arrintii dhexdhigay.

Qaar raggaas ka mid ahaa waxay soo jeediyeen in aan meeshiisa loogu tagin, waayo isaga oo wasiir ah ayuu ka horyimid dawladdii uu ka tirsanaa, kaddibna ku dhawaaqay in qabqablayaashu ay dawlad cusub dalka u dhisi doonaan markii ay magaalada Muqdisho ka saaraan maxkamadaha. Qaar kale arrinta way ka aammuseen, halka kuwo tiro yarina soo jeediyeen in loo gurmado. Kolkii aan raggii wada dhegeystey, arrintana si fiican u qiimeeyey, waxaan saraakiishii u sheegay in aaney habboonayn in qof carar ah oo ku soo magangalay aad albaabbada ka xirato. Waxaan amar ku bixiyey in degdeg loogu gurmado.

Mas'uuliyaddaas waxaan u xilsaaray Janan Maxamed Warsame Faarax (Darwiish), taliyaha Ciidanka Nabadsugidda qaranka, kaas oo degdeg arrinta ugu hawlgalay oo mudda gaaban Qanyare oo nabadqaba Baydhabo keenay. Maxamed Dheere wuxuu u cararay dhinaca xadka Itoobiya. Muddo yar kaddibna, wuxuu soo galay magaalada Baydhabo, isaga oo watay ciidan tira yar. Aad baan uga naxay markii aan arkay rafaadka iyo dayaca korkiisa ka muuqdey. Wuxuu naga helay soo dhoweyn uusan naga filayn. Muuse Suudi iyo Bashiir Raage, waxay Muqdisho kaga baxeen doonni, waxay sii mareen dhowr dal oo Afrikada bari ka tirsan, dabadeendna waxay uga sii gudbeen Afrikada dhexe. Muddo markii meelo soo marmareen bay ka fursan waayeen in ay Baydhabo noogu yimaadaan. Iyagana waxaannu u soo dhoweyney sidii kuwii hore oo kale. Sidaas oo kale Cabdi Qaybdiid, Bootaan Ciise Caalim (Xaaraan-Ku-Naax), Cumar Finish, mid mid bay, iyaga oo naftu waddo, Baydhabo u soo wada galeen. Madax badan baa ka xumaatay soo dhoweynta aannu qabqablayaashaas u fidinnay. Xubno ka tirsan TFP-da waxay tala ku soo jeediyeen in, intooda Baarlamaanka ka tirsan laga xayuubiyo xubinnimada Baarlamaanka, kuwa aan ka tirsanaynna laga reebo in ay wax shaqa ah dalka ka qabtaan. Xaqiiqa ahaan, imaatinkii raggaasi magaalada noogu yimadeen, qalaalaase aan yarayn buu TFG-da ka dhex abuuray, dadaal iyo wada-hadal badan kaddib ayayse xiisaddii iska qabowdey.

Guushii ay ka soo hoyeen dagaalkii Muqdisho, waxay maxkamadihii u soo jiiddey sharaf iyo magac wanaag. Dhowr dal oo Carab ahi waxey ugu deeqeen hub iyo dhaqaale. Sidaas oo kale warbaahinta Carabta, BBC laanteeda af Soomaaliga iyo FM-yada Muqdisho waxay, guusha maxkamadaha u buunbuuniyeen si xad-dhaaf ah, oo gaarsiisan in wararkii Soomaaliya oo dhan laga dhigay Muqdisho iyo Maxkamadaha. Maalmo kaddib, maxkamadihii waxay samaysteen dallad isku xirta oo ay ku magacaabeen Ururka Midowga Maxkamadaha, gole la-tashi oo uu madax ka yahay Xasan Daahir Awees iyo guddi fulineed oo uu madax ka yahay Shiikh Shariif Shiikh Axmed.

## ISBALLAARINTII MIDOWGA MAXKAMADAHA (UMM)

Ururku markii uu helay magac, hub iyo dhaqaale wuu isu bogey, dhiirranaanina way gashay. Ujeeddadiisii ahayd in ay mar uun Muqdisho gacanta ku dhigaan waxay u xuubsiibatey in ay dalka oo dhan qabsadaan. Arrintii Soomaaliya waxay dhalisay dareen cusub oo caalami ah. Shir 15kii Juun 2006dii ka dhacay magaalada New York oo looga hadlay xaaladda Soomaaliya, waxaa lagu asaasay guddi loogu magacaabay ' Somalia Contact Group' oo si gaar ah u daneeya arrimaha Soomaaliya, kana soo jeediya talooyinka ku qumman sidii beesha caalamku gacan uga geysan lahayd xasilinta dalka. Guddigaas oo Maraykanku qabanqaabiyey waxaa Maraykanka ka sokow xubno ka ahaa dawladaha Boqortooyada Midowdey iyo Talyaaniga oo hore Soomaaliya u gumaysan jirey, Norway iyo Iswiidhen .

Waxaa jira in ay dalalkaas ku sugan yihiin qaxooti badan oo Soomaali ah. Midowga Yurub iyo dawladda Tanzania ayaa iyaguna xubno ka ah . Waxaa guddiga goobjoogayaal looga dhigay UN-ka iyo Midowga Afrika. Guddigaas laguma martiqaadin Jaamacadda Carabta. Camar Muuse, Xoghayaha Guud ee Jaamacadda Carabta wuxuu dhiniciisa ka caddeeyey in ay Jaamacaddu ka shiri doonto arrimaha Soomaaliya, wuxuuna ka digey in Soomaaliya la geeyo Ciidammo shisheeye.

## HESHIISKII KOWAAD EE KHARTUUM

Jaamacadda Carabta oo wadajir u taageertay Midowga Maxkamadaha, isla markaasna, aammintey in ay Soomaaliya maanta cagta saartay dariiqii Masar la dooneysey, ayaa waxay ku dhawaaqday in ay abaabuleyso shir lagu heshiisiinayo TFG-da iyo UMM. Dawladda Suudaanna waxay dhineceeda kaga dhawaaqday in ay fidineyso gogosha shirkaas. TFG-da iyo UMM way soo dhoweeyeen talada Jaamacadda Carabtu soo jeedisey iyo gogosha dawladda Suudan ay fidisayba, dhinacayaguse wuxuu si buuxda uga dheregsanaa in aaney Jaamacadda Carabtu dhexdhexaad arrinta ka ahayn, garsoorena ka noqon karin wada hadallada ay ku dhawaaqday in la isugu yimaado.

Waxaa kale oo isweydiin leh, haddii ay Jaamcaddu 2006-da wax ka qaban karto dhibaatooyinka Soomaaliya ka jira, maxay wax uga qaban weydey shan iyo tabankii sano ee ka horreeyey oo weliba dhibaatooyinka dalku ay sida maanta ka fududaayeen. Waxaa jirey walaac ay dad badani ka qabeen ujeeddada dhabta ah ee ka danbaysey shirka ay Jaamacadda Carabtu ku dhawaaqday; waxay madaxda qaarkood u qaateen in shirkaasi yahay wakhti dhumis looga eexanayo TFG-da. Kulankii ay labada dhinac isugu taageen magaalada Khartuum waxay, 2dii Juunyo, 2006dii ku gaareen heshiis ay qodobbadiisa ka mid ahaayeen:

- In ay labada dhinac joojiyaan weerarrada ay isku wadaan xag ciidan iyo xag saxaafadeedba.
- In labada dhinac ay is aqoonsadaan
- In la furo maxkamad la soo taagayo dambiilayaashii dagaalka.
- In la dhawro midnimada Soomaaliya.
- In shacbiga Soomaaliyeed lagu taageero dib u dhiska hay'adihii qaranka iyo dib u soo noolaynta dhaqaalaha.

Waxaa kale oo lagu heshiiyey in Khartuum la isugu yimaado shir kale oo lagu dhammaystiro arrimaha qabyada ah. Shirka heshiiska lagu gaarey waxaa ka soo qayb galay dhinaca TFG-da Madaxweyne Cabdullaahi Yuusuf, RW Cali Maxamed Geeddi, guddoomiyaha baarlamaanka Shariif Xasan Shiikh Aadan iyo madax kale oo TFG-da

ka tirsanaa. Halka dhinaca UMM ka socdeen wafdi 10 qof ka kooban oo uu hoggaaminayay Dr. Maxamed Cali Ibraahim. Heshiiska waxaa labada dhinac u kala saxiixay Cabdullaahi Shiikh Ismaaciil, wasiirka arrimaha dibadda ee TFG-da iyo Dr. Maxamed Cali Ibraahim, wakiilka midowga maxkamadaha.

Khadkii heshiiska lagu qoray oo aan weli qallalin baa UMM bilaabay in uu gebi ahaanba ku tunto heshiiski labada dhinac kala saxiixdeen. Waxay dagaal ka bilaabeen gobollo fara badan. Dagaalkaas oo ay doonayeen in ay dhul badan ku qabsadaan, ka hor inta aan la isugu tegin shirka labaad ee Khartuum.

Waxay qabsadeen badi gobollada koofureed, gobollada dhexena waxay ka qabsadeen tan iyo degaanka Bandiiradley oo u jirta 70km magaalada Gaalkacyo oo ka tirsan Dawlad Goboleedka Puntland. Waxaa u qorshaysnaa in ay degdeg u qabsadaan magaaladaas oo ku taal meel halbowle ah.

## HESHIISKII LABAAD EE KHARDTUUM

Shirkii labaad ee ka dhacay magaalada Khartuum waxaa TFG-da uga qaybgalay wafdi uu hoggaaminayay Guddoomiyaha Baarlamaanka, wax natiijo ah oo loo dhanyahayna kama soo bixin.

## TFG: ISBEDDEL ISTARATEEJIYADEED

Markii aan arkay weerarka ay maxkamaduhu TFG-da ku wadaan iyo sida aaney u tixgelinayn heshiisyadii Khartuum lagu gaarey, Jaamacadda Carabta iyo dawladihii Carbeed oo kalena ayan wax xil ah iska saareyn dhaqangelinta heshiisyaddii Khartuum, ayaan talo ku gaarey in TFG-du beddesho hannaanka wada hadalka. Shir gaar ah oo aan la qaatay sarakiisha sare ee ciidammada TFG-da waxaan ku boorriyey in ay difaaca adkeeyaan, waxaana uga digey saddexda dhinac oo magaalada Baydhabo weerarka lagaga soo qaadi karey, kuwaas oo kala ahaa waddada magaalada ka soo gasha xagga Buur Hakaba, tan ka soo gasha dhinaca Diinsoor iyo dhabarjebin ciidammada TFG-da lagaga soo qaado waddada ka timaadda dhinaca Beledweyne.

Waxaannu diyaarinnay qorshayaashii difaaca iyo dagaalkaba. Waxaannu samaynay maababkii (Khariidooyinkii) lagama maarmaanka u ahaa hawlgelinta ciidammada, kaddib waxaan u duulay Addis Ababa. Waxaa safarka igu weheliyey Janan Cabdullaahi Cali Cumar (Ina Libaax Sanka Taabtay) iyo agaasimaha Madaxtooyada Xuseen Cali Saylaan. Markii aan tegayey waxaan saraakiisha ciidanka weydiiyey in aannu is-difaaci karno iyo in kale. Waxay iigu jawaabeen maya, isma difaaci karno, waxayna iigu dareen in, haddii dagaalku muddo socdo ay maxkamaduhu halis na gelin karayaan. Intaas waxay ka horreeyey fadhi ay, 14kii Juunyo 2006dii, ay TFP-du ku yeelatay magaalada Baydhabo, kaas oo ay ku ansixisay go'aan ah in dalka la keeno ciidammo ajnebi ah. Xiritaankii shirkaas baa Guddoomiyihii Baarlamaanku Shariif Xassan Shiikh Aadan shaaca ka qaaday in codayntii arrintaas loo qaaday lagu ansixiyey 125 cod, halka 73 codna looga horjeensadey. Go'aankaasina sidaas buu ku meelmaray. Go' aanka Baarlamaanku wuxuu waddada u xaarayay meelmarinta codsi hore oo ay TFG-du u gudbisey AU-da si dalka la keeno ciidammo gacan ka siiya TFG-da sidii ay dalka u xasil lahayd. Codsigaas waxaa hore loogu gudbiyey AU, UN iyo Jaamacadda Carabta.

Addis Ababa waxaa nagu soo dhoweeyey wasiirka arrimaha dibadda Seyoum Mesfin. Wuxuu noo sheegay in aannu la kulmi doonno Ra' iisul Wasaaraha berri subax. RW waxaan warbixin buuxda ka siiyey xaaladda adag ee Soomaaliya ka taagnayd. Waxaan u fasiray qorshihii aannu soo diyaarinnay iyo khariiddadii ku lifaaqnayd. Waxaan u sheegay baahida loo qabo in ciidan hub culus wata degdeg loo geeyo si ayan xaaladdu uga sii darin oo noqon mid aan wax laga qaban karin. Waxaa qorshahayaga ka mid ahaa in la isku ogaado haddii dagaal bilowdo dhinacyada aannu ka dagaalgeli karno.

Waxaannu isla oggolaannay in saddex aag dagaalka laga galo. Kan hore: Baydhabo-diinsoor ilaa Kismaayo, kan labaad Baydhabo-Buurhakabo ilaa raarka (buundada) Afgooye, kan saddexaadna wuxuu ahaa Bandiiradley-Beledweyne ilaa raarka Balcad. Waxaannu isla garannay in aan Muqdisho la gelin oo la hareereeyo, hub-ka-dhigisna lagu soo rogo. Waxaa kale oo aan u sheegay in UMM haystaan hub culus oo nooc

walba leh, iyo in maxkamduhu dhowaan qabsan doonaan gobollada Bay, Bakool iyo Gedo, dabadeedna dagaalku noqon doono mid u dhaxeeya UMM iyo Itoobiya, TFG-duna meesha ka baxayso. Waxay ila ahayd in aan dawladda Itoobiya ka dhacsiiyey in TFG la qabsanayo, arrintaas oo ahayd qodobka ugu weyn oo aan Addis Ababa u imid. Madaxdii Itoobiya ee aan la kulmay waxay u arkeen arrintii aan hordhigay mid ahmiyad weyn u lahayd labada dalba. Waxay ii sheegeen in ay talada aan soo jeediyey ku qanceen. Sidaas oo kale, waxay ii sheegeen in ay isku noqonayaan, oo la tashanayaan ciddii ay wax uga baahan yihiin, ciddaas oo aan u gartay dawladda Maraykanka. Ugu danbayntii waxay nagu yiraahdeen hadda iska noqda, annaga ayaa degdeg idiinla soo xiriiri doonnee.

Subaxdii danbe waxay na siiyeen dayuurad aannu Baydhabo ku tagno. Baydhabo markaan tegey waxaan xubnaha sare ee xukuumadda iyo ciidammada warbixin ka siiyey kulankaygii Addis Ababa. Waxaan ku wargeliyey in dawladda Itoobiya ay oggolaatey codsigeennii, muddo aan dheerayna ay ciidammo inoo soo diri doonto. Waxaan ka codsaday in arrintaas la isu diyaariyo, isla markaasna, la isla meeldhigo sidii ay labada talis u wada shaqayn lahayeen. Dawladda Itoobiya markii ay la tashatay ciddii wax kaga xirnaayeen bay, ciidammadii hadba qayb soo dhaqaajisey. Ciidan aad u hubaysan bay dalka soo gelisey. Qaabkii difaacayagu u dhisnaa bay ciidammadii Itoobiya gadaal ka fariisteen. Si fiican baannu ula soconney dhaqdhaqaaqa ciidamada UMM Waxaa naloo sheegay in ay Baydhabo aad ugu soo dhowaanayeen. Waxay durba soo fariisteen waddada Daynnuunay ka baxda oo dhulka carramadowda u baxda.

Hore ciidanka maxkamaduhu wuxuu isku soo urursaday xagga Diinsoor, waxay isa soo horfariisteen guuta ka tirsan XDS oo loogu talaggalay difaaca jidka Baydhabo-Xuddur. Dhinaca Koofurna waxay ka soo dhaqaaqeen waddada Doolow. Meel kasta waxaa iiga imaneysey digniin leh war meesha isaga bax, inta ayan maxkamaduhu qabsan magaalada Baydhabo. Sidaas oo kale, madax badan oo TFG-da ka tirsan ayaa iyana tala noocaas ah iila imanaysey. Qofk kasta waxaan ugu jawaabayey waan dagaallamayaa. Dad badan waxaa welwelka ku ridey war la'aanta.

# DAGAALKII MAXKAMADAHA LOOGA SAARAY DALKA

24kii Disembar 2006dii waxaa dalka ka bilawday dagaalkii in mudda ah la saadaalinayey. Maxkamadaha ayaa dagaalka bilaabay. Weerarkii ugu horreyeyna waxay ku soo qaadeen fariisimmadii ciidammada TFG-da ee aagga Iidaale. Isla wakhtiyadaas waxaan ku sugnaa Madaxtooyada, halkaas oo ay ila joogeen saraakiil Soomaali iyo Itoobiyaan isugu jirtey, halkaas oo aannu ka samaysannay xafiisyo aannu dagaalka ka hoggaaminayney.

Maalintii labaad ciidammada Maxkamaduhu waxay dib u soo riixeen guutadii tuulada Iidaale difaaca kaga jirtey oo G/sare Abdirisaaq Afguduud taliye ka ahaa. Waxaa dabadeed u gurmadey ciidan Itoobiyaan ah oo G/sare Gabre-Dilla watey. Annaga qorshahayagu wuxuu ahaa in aannu saddexda maalmood ee hore difaac kula dagaallanno, iyaguse ma ayan ogayn.

Ciidammadii fadhiyey aagga Daynnuunay waxay xirteen difaac xoog leh oo waa la soo riixi kari waayey. Markii ciidammdii Maxkamaduhu ay saddex beri weerar ahaayeen oo khasaare badan la gaarsiiyey, ciidankii Beledweyne ugu urursanaa oo dhabarjebinta nagu samayn laahaana aaney weli soo dhaqaaqin, ayaannu bixinnay amarkii weerarka. Mudda yar kaddib, markii ciidammada oo dhan la wada gaarsiiyey amarkii dagaalka ayaa ciidankii Maxkamadaha dhinac kasta weerar lagaga soo qaaday. Waxaan amar ku bixiyey in, ciidammada lagu jebiyey aagagga aan laga harin ee la dabaggalo oo halkooda lagu burburiyo si aaney dib ugu guran Muqdisho, kismaayo, iwm.

Sidaas oo kale, waxaannu go'aan ku gaarney in, magaalooyinka ay ka mid ahayeen Muqdisho iyo Kismayo ay maalinta toddobaad gacantayada soo galaan. Inkasta oo aannu hawlgalkii ku guuleysanney oo maalintii toddobaad labadii magaalaba qabsannay, nasiibdarro, haraagii ciidammada Maxkamaduhu waxay u carareen xagga koofureed ka hor inta aannaan gelin magalooyinkaas.

Aagga Bandiiredley ciidankii ka dagaalamayey oo uu hoggaaminayey G/Sare Xiif Cali Taar, Cabdi Qaybdiid iyo saraakiil kale waxay Muqdisho ku soo gaareen waqtigii loo qabtay. Maalintii ay taariikhdu ahayd 1dii Jannaayo 2007dii waxay Soomaaliya u ahayd maalin barakaysan oo waxaa isku soo beegmay laba munaasabadood oo farxad leh, midi waxay ahayd ciidii weynayd ee Ciidul-Adha, tan kalena waxay ahayd maalintii la jebiyey ciidammadii Maxkamadaha ee halista geliyey xukuumadda sharciga ah ee dalka. Isla maalintaas baan Baydhabo kaga duulay Helikobter, taa oo aan kaga degey meel u dhexaysa Afgooye iyo Muqdisho oo ku magac dheer Carbiska, halkaas oo XDS u ahaan jirtey xero kayd. Carbiska waxaa igu soo dhoweeyey RW Cali Geeddi iyo odayaal Cali Mahdi ku jirey oo uu Muqdisho ka soo waday. Cali Geeddi maalintii lixaad ee dagaalka ayuu galay Muqdisho, mana ahayn in la galo magaalada sida ku cad ballankii aan hore isugu ogayn, taas oo aanan garan waxa ku kallifay.

Markii aannu is waraysannay, baan RW Cali Geeddi ku iri in kasta oo madaxdii maxkamadu baxsadeen, ciidankoodii weli magaalada ayuu ku jiraaye ma laga dhigay hubkii. Su'aashaas waxaan u weydiiyey ogaanshaha aan u lahaa in haraagii ciidammada Maxkamaduhu aad u liiteen oo si fudud hubka looga dhigi karey. RW wuxuu iigu jawaabey maya. Odayaashii la socday RW waxay aad iigu adkeeyeen in, si kasta oo la yeelo hubka laga dhigo haraagii ciidanka maxkamadaha ee magaalada ku jirey. Cali Geeddi iyo Cali Mahdi, baan si gaar ah ula fariistay geed quraca hoostiis , waxaana u sheegay in aan Baydhabo ku noqonayo, mudda yar kaddibna dawladda ka soo rarayo, waxaase lagama maarmaan ah in la xaqiijiyo in, hub ka dhigistii oo dhammaatay, dawladdu magaalada soo gasho.

Nasiibdarro, waxaannu magaalada soo galnay iyada oo aan amarkii aan baxshay ee hub ka dhigista ahaa waxba laga fulin. RW iima sheegin wax sabab ah oo amarkaasi u fuli waayey. Aqoonta aan u lahaa awgeed, waxaan hubey in Cali Geeddi uusan sabab la'aan u fulin waayin amarkaas, balse uu jirey sabab kale oo uu kaga gaabsaday in uu fuliyo hub ka dhigistii aannu ku heshiinney.

Warar gadaal iga soo gaaray, aananse xaqiiqadooda hayn, waxay sheegayeen in Cali Geeddi iyo saraakiil Itoobiyaan ahi ay isku afgarteen amar diiddadaas, kaddib markii ay laaluush aan yarayn ka qaateen ganacsato reer Muqdisho ah oo gacansaar la lahaa maxkamadihii dalka laga saaray. Aniga oo aan weli ka quusan xilkasnimada RW-ha, ayaan mar kale ku amray in magaalada hubka laga dhigo. RW waxaan u sheegay in haddii aan sidaas la yeelin ay hubaal tahay in ciidammadii Maxkamaduhu dib magaalada isugu soo uruursan doonaan, hubkoodiina gacanta ku dhigi doonaan, dabadeedna ay meeshooda weerar inakaga soo qaadi doonaan. Intaas kaddib waxaan ku iri, ' Caliyow waxaad ogaataa in dagaalka hadda inaku bilowdaana uu si fudud isugu rogi doono dagaal sokeeye' . Intaas arrinta kagama aanan harin ee waxaan u yeeray G/ dhexe Gabre Ezaber oo ka tirsanaa sirdoonka ciidammada Itoobiya, isla markaasna ahaa xiriiriyaha labada dawladood, waxaana weydiistey in laga dabatago ciidankii maxkamadaha ee baxsadka ahaa si aaney mar labaad meel isugu urursan oo dib weerar u soo qaadin. Sargaalkii wuxuu igu yiri: ' Annagu qabiil lama aannu dagaallamayno' .

Run ahaan aad bay jawaabtaasi ii dhibtay mana garaysan, taas oo aanan marnaba ka malaysanayn. Waxaan ku iri: ' Kuwii aannu hortii la dagaallamayney qabiil bay ahaayeen. Waxaad ii sheegtaa in jawaabta aad i siisay aan u garto mid ka soo jeedda siyaasad cusub ee dawladda Itoobiya' . Iigama jawaabin. Ma ahayn arrin naga daahsoon in, dawladaha tooska dagaalka ugu jirey, kuwa maalgelinayay iyo kuwa hubka ku soo daabulayey ay Soomaaliya ka lahayeen dano kala duwan.

Maraykanka oo maalgeliyey hawlgalkii Itoobiya, ciidammadeedana dalka ku soo hoggaamiyey, muddadii ay hawlgalka ku jirteyna la daba joogey xogo dagaalka muhiim u ah, ujeeddadiisa ugu weyni waxay ahayd in la baabbi' iyo islaamiyiinta xagjirka ah. Aragtida guud ee dagaalka uu Maraykanku ku fushaday Itoobiya, xaqiiqo ahaan waxba kama duwanayn kii uu hore ugu wakiilan jirey qabqablayaashii Muqdisho. Sidaas awgeed, la dagaallanka islaamiyiinta xagjirka ah ka sokow, Maraykanku kama lahayn hawlgalkaas wax dan ah oo dhaafsiisan ujeeddadaas. Danaha dawladda Itoobiya ka lahayd hawlgaas way ka qota dheeraayeen tan Maraykanku ka lahaa.

Marka ugu horreysa waxay ula jeeddey in, xukun islaamiyiin xagjir ah oo ka dhasha Soomaaliya uu jiritaankeeda halis ku yahay, saamays weynna ku yeelan karo muslimiinta dalkeeda aqlabiyadda ku leh, xukunkana aan waxba ka haysan.

Marka labaad, waxay dooneysey in ay hawlgalkaas kaga hesho Maraykanka aqoonsi ah in ay tahay dawlad lagu kalsoonaan karo oo gacan weyn ka siin karta dagaalka uu kula jiro islaamiyiinta xag jirka ah ee ku soo badanayey geeska Afrika. Marka saddexaad, waxaa hawlgalkaas uga muuqday fursad ay Soomaaliya ugu dhisi kartey dawlad maqaarsaar ah oo ay siyaasaddeeda wax ka maamulan karto. Dawlado Carab ah oo aan yarayn iyo muslimiin iyana fara badan oo si dadban dagaalka uga qaybqaatay waxay aamminsanaayeen in, guul ay islamiyiinta xagjirka ahi ka gaaran Soomaaliya, ay sare u qaadayso awoodda islaamku dunida ku leeyahay.

Dhabtuse waxay ka muuqataa dunida afarteeda gees oo Islaamiyiinta xagjirka ahi waa kuwa meel walba dabka ka hurinaya iyada oo ay ugu horreeyaan dalalka Islaamku. Dawladda Eritereya oo dowr weyn ka qaadatay dagaalkii u dhexeeyey TFG-da iyo Maxkamadaha, waxay dagaalkaas ugu jeeddey aag hor leh oo bariga iyo galbeedka lagaga furay cadowgeeda kowaad oo ah Itoobiya. Sidaas awgeed, taageerada ay kooxahaas u fidiso ma ahayn oo keli ah hub ay siiso, balse waxay oggolaatay in dalkeedu noqoto marinka looga soo gudbiyo taageerooyinka faraha badan ee islaamiyiinta xagjirka ah ay meelo badan ka helaan. Maxkamaduhu waxay dagaalka ka lahayeen laba ujeeddo. Mid ah in ay dibadda ka samaystaan is bahaysi rag iyo maalba la soo gaara si ay xididdo adag dalka uga samaystaan, taas oo argaggixisada dunidu ka faa' iidaysan kartey. Iyo mid ah, sidii beelaha dawlad diidka ahi dalka ku qabsan lahaayeen, iyaga oo magaca diinta adeegsanaya.

TFG-da ujeeddadeedu waxay ahayd daafaca iyo dhowrista qarannimada dalka, gacmo furan waxay ku soo dhoweyneysay cid kasta oo himiladaas gacan ku siineysay. Sidaas awgeed ciidammada Itoobiya ee gurmadka ugu yimid waxba ugama duwanayn kuwa meelo kale uga imaan karey. Waxaa keli ah oo nagaga beegnaa waxay ahayd in aannu

ku mahadnaqno markii ay hawsha nala qabtaan, dabadeedna aannu si wacan u sagootino markii la gaaro in ay dalkoodii dib ugu noqdaan. Dhinaca kale waxaan hubay in, haddii la fulin lahaa saddexdii amar oo aan baxshay ee kala ahaa
(i) hubka oo magaalada laga uruuriyo
(ii) ciidankii Maxkamadaha ee baxsad ka ahaa oo la daba galo, iyo
(iii) in aan la gelin Muqdisho oo labada raar (buundo) ee Afgooye iyo Balcad la xiro uu dagaalku dhammaan lahaa, Soomaaliyana ay maanta xaalad ka fiican ku sugnaan lahayd. Wakhti badan ma qaadan in ay si fudud u soo baxaan dhibaatooyinkii aan muddada ka digayey. Tartiib-tartiib bay ciidammadii maxkamaduhu magaalada u soo galeen, sidii aan malaynayayba hubkoodii ayay gacanta ku dhigeen .

Saddex bilood kaddib waxay, guri u dhow, kii la dejiyey ilma Cabdirashiid, madaxweynihii hore oo 200 mitir u jira Villa Soomaaliya , iigaga soo rideen B10 iyo baasuuke, kuwaas oo rasaastii ka soo dhacday iiga soo galeen dariishaddii qolka aan fadhiyey, dabadeedna ku dhacay kursigii aan ku fadhiyey, dhinac ka mid ahna burburiyey. Nasiib wanaag Illaah waa iga badbaadiyey. In Madaxtooyada laga soo weeraro meel sidaas ugu dhow waxay ku timid dabacsanaan ka jirtey dhinaca amniga oo aan hore si fiican loo sugin. Sababta arrintaasi ku dhacdayse waxaa iska lahaa ciidammada Itoobiya, iyaga oo hore noogu sheegay in ay ciidammada TFG-da kala wareegeen mas'uuliyadda amniga madaxda sare ee TFG-da.

Sidaas awgeed, ciidammadii TFG-da waxaa la kala geeyey qaybaha kala duwan ee magaalada. Sidaas ayay labada ciidan u kala qaybsadeen xilalkooda. Habeenka la i soo weeraray waxaa dhacay in ciidammadii Itoobiya banneeyeen aagga la iga soo weeraray. Wax baaritaan ah laguma samayn sababta ay ku dhacday in aaggaas la banneeyo. Markii aan arrinta qaadan kari waayey ayaan go'aan ku gaaray in mas'uuliyadda amniga ee Madaxtooyada dib loogu soo cesho ciidankii TFG-da. Nasiibdarro, wixii habeenkaas ka danbeeyey Madaxtooyadii waxay bartilmaameed joogta ah u noqotay kooxihii dawlad diidka ahaa. Weerarradii Madaxtooyada lagu soo qaadaayey waxay, sidaas oo kale, ugu fideen magaalada oo dhan.

# ODAYAASHA BEELAHA HAWIYE

Markii aan, horraantii bishii Jannaayo 2007dii, caasimadda soo galay, ayaa meela badan la iga soo gaarsiiyey codsiyo badan oo odayaal ka tirsan beesha Hawiye ku doonayeen kulammo ay ila yeeshaan. Qof ahaan, waxaan codsigoodii u qaatay mid faa' iido leh. Sidaas awgeedna, waxaan codsigoodii ku oggolaaday qalbi furan iyo niyadsami. Waxaase durba ii caddaatay in odayaashii beesha Hawiye aaney iigu hambayn sidii aan ugu lisay. Halka aan anigu wada kulankayaga u arkayey arrin wanaagsan oo wax dalka dan u ahi ka soo bixi kareen, iyaga wuxuu ka ahaa tab lagu doonayey in la igu hawllaniyo dood aan milgo (murti) lahayn oo wakhtiga la igaga luminayo. Bil iyo bar baan habeen kasta odayaasha beesha Hawiye u qaabbilayey jilib-jilib. Jilib kasta oo aan la kulmaa wuxuu i weydiisan jirey wax awooddayda ka baxsan oo aan Axdiga Qaranku ii oggolayn.

Codsiyada odayaasha beesha Hawiye waxaa ka mid ahaa in looga baxo, loona sharciyeeyo xarumihii dawladda oo ay xilligii burburka ku habsadeen, kuwaas oo laga saaray markii dawladdu Muqdisho soo gashay. Dhismayaashaas waxaa ka mid ahaa xarumihii ciidammada qalabka sida, xaafiisyadii dawladda, kulliyadihii Jaamacadda, dekadda iyo gegida dayuuradaha.

Sidaas oo kale, waxay codsadeen in dib loogu noqdo habkii awood qaybsiga beelaha Soomaaliyeed ee 4.5, loona kordhiyo qaybtii ay hore uga heleen qorshahaas. Kaas oo hore loogu sed buriyey, oo la isugu daray RW-hii Cali Geeddi iyo RW-ku-xigeenkii Xuseen Maxamed Caydiid. Muddadii dheerayd ee buuqaas la igu jaah-wareerinayey, beeshu waxay hoos ka waddey qaylodhaan ay isugu tol wacaneysey dalka gudihiisa iyo dibaddiisaba, si ay isu abaabulaan, isla markaasna, taakulayn ugu uruurinayaan waxaa ay ugu yeereen muqaawimada (kacdoon), run aahaanse ahaa miliishiyo beeleed. Isla muddadaas, beeshu waxay dhistay guddiyo kala geddisan oo hawlo kala duwan loo xilsaaray. Guddiyadaas waxaa ka mid ahaa guddiga odayaasha beelaha Hawiye, guddiga bakaaraha, guddiga warbaahinta. Guddiga odayaashu

wuxuu u xilsaarnaa siyaasadda iyo xiriirka beesha caalamka.
Isla markii la dhisayba, wuxuu u ambabaxay magaalada Asmara ee dalka Eritereeya, si uu awaamir uga soo qaato madaxdii maxkamadaha ee ay halkaasi xarunta u ahayd. Guddiga Asmara aadey waxaa hoggaaminayay Ugaas Caga-Jabe (beesha Cayr), waxaase rasmi ahaan madaxnimada guddigaas ula wareegay Xasan Xaad (beesha Murursade). Burburka ka hor Xasan wuxuu ahaan jirey shaqsi caadi ah, balse wuxuu, dhex' orodkii dagaalada sokeeye, qalalaasihii siyaasadeed, boobkii iyo bililiqadii hantidii ummadda iyo tii qarankaba, ku hantay dhaqaale iyo jagada odaynimo.

Guddigaas waxaa afhayeen u ahaa Axmed Diiriye. Axmed wuxuu ahaan jirey reer miyi, wuxuuse ku soo gurmaday qayladhaantii USC-da, taas oo uu miliishiyadeeda ku biiray. Sidaas ayuu Muqdisho ku soo galay. Axmed wuxuu qayb libaax ka qaatay boobkii iyo bililiqadii magaalada ka dhacay, haddana wuxuu haystaa hanti maguurto ah. Guddiga odayaasha beesha Hawiye wuxuu iska ahaa maqaarsaar u xilsaaran ku dhawaaqa wararka iyo qayla-dhaanta loo dhiibo, balse hawlaha dhabta ah sida abaabulka miliishiyada, isku dubbarridka taakulaynta iyo faafinta dacaayadda waxaa qaabilsanaa ganacsatada iyo siyaasiyiinta.

Inkasta oo magac ahaan beelaha Hawiye dagaalka ku wada jireen, haddana, shaki kuma jirin in beesha Cayr ay hormuud ka ahayd kacdoonka dawlad-diidnimo ee beelahaasi isku bahaysteen. Kaalintaas oo ay ku bannaysatay hantidii ay ka heshay burburkii dalka, miliishiyada iyo hubkii badnaa oo ay Caydiid ka dhaxashay, iyo weliba warbaahinta afka dheer oo ay caasimadda ka samaysatay.
Kolkii beelaha Hawiye ay dhammmaystirteen qaabdhismeedkoodii abaabul, guddiyadiina wada hawlgaleen, bay isku qanciyeen, fikrad ah in ay gaar ahaan isu taagi kareen, rabshado iyo qalalaase kala duwanna magaalada ka samayn karaan, tallaabooyinkaas oo ay u arkayeen in ay magac ku yeelanayaan. Sidaas ayay beel ahaan ugu xuubsiibteen dhaqdhaqaaq dawlad-diid ah, kaas oo si joogta ah u soo saara war saxaafadeed, si toos ahna ula xiriira safaaradaha shisheeyaha iyo hay'ado caalami ah.

Safaaradaha iyo hay'aduhuba waxay u fidin jireen taageero iyo kaalmooyin kala duwan , isla markaasna, waxay faafin jireen dacaayadahooda si ay sare u qaadaan codkooda. Si wax looga ogaado heerka foosha xun ee ay Yurub ka gaartey faraggelinta ay dalka ku haysey, waxaa nooga filan in aynu ka xusno waraaqaha ay rasmi ahaan TFG-da u soo diri jireen oo ay si rasmi ah nuqul (koobi) uga siin jireen Odayaasha Beesha Hawiyana, si ay dunida ugu muujiyaan in labadaas dhinac ay agtooda ka siman yihiin. Waraaqdii ugu danbaysey ee iga soo gaartey Lewis Michale madaxa iskaashiga iyo horumarinta caalamka ee EU-da, wuxuu nuqul ka siiyey guddoomiyaha Odayaasha Beesha Hawiye Xasan Xaad, taas oo dad badni u qaateen in sargaalkaasi doonayey in uu isla simo Madaxweynaha iyo madax beeleed.

Haddii aan isku daro hadalkii uu hore iigu yiri Gabre Ezaber ee ahaa ‘Annagu qabiil la dagaallami mayno’ iyo qaabka EU-du noola dhaqantay waxaa soo baxaya in codka dheer ee odayaashaasi la soo baxeen ay salka ku haysey taageero wax-ku-ool ah oo ay dawlado shisheeye ka haysteen. Guddiga warfaafintu wuxuu u xilsaarnaa kicinta beesha Hawiye iyo faafinta dacaayadaha lagula dagaallamayay TFG-da. Waxaa fulinta hawshaas dusha u ritey warbaahinta FM-yada Muqdisho ka hadla oo ay leeyihiin beesha Hawiye iyo Yuusuf Garaad, madaxa laanta af-Soomaaliga ee BBC-da oo afhayeen ka noqday been abuurka iyo dacaayadaha TFG-da lagula dagaallamayey.

Guddiga Bakaaruhu, wuxuu u xilsaarnaa taakulaynta miliishiyaadka la dagaallamaya dawladda. Bakaaruhu wuxuu burburka ka hor ahaa suuq yar, balse wuxuu ku dhismay hantidii dawladda iyo tii shacbiga laga boobay xilligii burburka. Horumarka suuqaasi ku gaarey, mudda gaaban, wuxuu noqday wax lala yaabo, Soomaaliyana wuxuu ka noqday suuqa ugu weyn. Bakaaruhu wuxuu iska noqdey suuqa looga cabbir qaato dhaqdhaqaaqa sicirka badeecadaha iyo heerka sarrifka lacagaha qalaad ee Soomaaliya laga isticmaalo.

Awooddiisu waxay gaarsiisey in uu noqdo xarunta dawlad-diidka lagana hubeeyo miliishiyaadka dawladda la dagaallamaya. Sidaas oo kale Bakaaruhu waxay gabbaad u noqdeen shakhsiyaad xagjir ah oo adduunka laga doonayey, sida Salalax Cali Al-Nabhaan (Kenyan/ Yemeni), Haaruun Fazul (Kamooro), Cabdalla Al- Sudani (Sudan) iwm.

Guddiyadii beelaha Hawiye oo garab ka haystey shisheeye badan waxay qalalaasihii ay dalka ka wadeen gaarsiyeen heer caalami ah. Waxay iska noqotay arrin caado laga dhigtay in wufuudda ay dalka Itoobiya u dirsadaan loo soo dhoweeyo si dawli ah, loona fududeeyo sidii ay ula kulmi lahayeen madaxda ugu sarraysa. Koolkoolintii guddigaan maqaarsaarka ah surncadda loogu samaynayey waxay gaartey in beesha caalamku tiraahdo TFG iyo beesha Hawiye ha wada fariisteen.

Itoobiya waxay dhinaceeda ka waddey dadaal ay talada reer Yurub ku xoojineyso, waxayna si muuqata ugu bareertey sidii ay mawqifka beelaha dawlad-diidka ah ugu samayn lahayd dhidibbo adag oo ay siyaasad ahaan iyo ciidan ahaanba ku taageerto.

# MAAMULKA GAL-MUDUG

Aniga oo Baydhabo jooga ayaa waxaa ii yimid Mudane Maxamed Warsame Cali (Kiimiko) oo sheeganaya in uu yahay maamul la magac baxay Gal-Mudug. Wuxuu ii sheegay in uu maamulkaas uu Madaxweyne ka yahay oo uu rabo in ay TFG aqoonsato maamulkaas. Waxaan ku iri maamulkaas xuduudihiisa ma' ii-sheegi kartaa? Magaca Gal-Mudug muxuu u taagan yahay? Xaggee baase caasumad u ah? Mudane Kiimiko kama uusan jawaabin su' aalahaas aan weydiiyey. Waxaan ku iri markii aad su' aalahaas iiga jawaabtid ayaan wada hadlaynaa. Waxaanse ogaa in uu jiray damac ah in beesha Sacad ay rabto in ay Gaalkacyo qayb ka mid ah ay magaalo madax uga dhigaan maamulka uu mudane Kiimiko ii sheegay. Arrintaas aad ayaan uga soo horjeeday in ay Gaalkacyo noqoto magaalo u kala qaybsan laba maamul.

## SHIRKII DIBUHESHIISIINTA BEELAHA SOOMAALIYEED EE MUQDISHO 2007

Waxaannu ku dadaalney in aannu dhacsiinno beesha caalamka oo ku adkaysanaysey in TFG-da iyo beelaha Hawiye wada fariistaan, in aqlabiyadda beelahaasi qayb muhiim ah kaga jireen TFG-da, taas oo ay ka qaateen, kana badsadeen saamigii ay xaqa ugu lahaayeen awood qaybsiga ay Soomaalidu ku heshiisey. Sidaas awgeed, waxaa loo baahan yahay in aan afka lagu ballaarin beelo sharaf leh oo kaalin weyn kaga jira dibu-dhiska dalka, lagana mid dhigin dhowrka jifiyood ee qala-laasaha dalka ka wadey, si aan dawladiba dalka uga dhalan oo uu bur-bur ugu waaro. Nasiib-darro, dadaal kasta oo aannu samaynay si aannu u kala saarno bulsho-weynta beelahaas iyo xooggaga fidmo-wadayaasha ah waa noo socon weydey, beesha caalamku way ka dhaqaaqi weydey go'aankeedii ahaa in shir la isugu yimaado.

Waxaa dabadeed sandulle nagu noqotay in lagu dhawaaqo shir dibu-heshiisiineed oo Muqdisho lagu qabto, kaas oo ay ka soo wada qeybgeli doonaan madax-dhaqameedyada beelaha Soomaaliyeed. Shirkii caadiga ahaa ee AU-da oo Addis Ababa ka dhacay bishii Jannaayo 2007dii ayaan rasmi ahaan uga sheegay in aannu caasimadda dalka ku qaban doonno shir dibu-heshiisiineed oo beelaha Soomaaliyeed isugu iman doonaan, kaas oo qayb ka ahaa dadaalka TFG-du ugu jirtey nabadaynta dalka.

Wufuud ka tirsan beesha caalamka oo aan halkaas kula kulmay aad bay arrinta u soo dhoweeyeen iyaga oo isla markaasna ballanqaaday in ay taageero ka geysan doonaan maalgelinta shirka. Kolkii aan shirkaas ka soo noqday waxaan amar ku bixiyey in degdeg loo gudagalo abaabulkii iyo hawlihii kale ee lagama maarmaanka u ahaa si uu shirku u qabsoomo, xukuumadduna si degdeg ah bay hawshaas u gudagashay.

Bishii Febraayo 2007dii, waxaan baaris caafimaad u tegey magaalada London, markii aan dhammaystayna waxaa la igu martiqaaday in muxaadaro ku saabsan arrimaha Soomaaliya ka jeediyo (Chatham House, London). Inkasta oo aaney barnaamijka iigu jirin, haddana waan oggolaaday. Waxaan isku dayey in aan wax ka beddelo fikradda qaldan ee dadweynaha dunidu ka haysto Soomaaliya, taas oo ah in Soomaaliya ay tahay dal faashil ah, Soomaaliduna yihiin dad waxmagarad ah. Aniga oo arrintaas ka duulaya ayaan hadalkaygii ku bilaabay: " inta aanan gudagelin mawduuca hadalkayga, waxaan jeclahay in aan soo qaado arrin ka mid ah taariikhda siyaasadda Soomaaliyeed oo inta badan la iska illaawo. Sida la og yahay, Soomaaliya waxa ka jiri jirey axsaab badan ee loollan u geli jirey hoggaaminta dalka, xukuumaduhuna isu beddeli jireen si dimuqraaddi ah.

Muddadii u dhexaysey markii ay Soomaaliya xornimadeeda hanatay 1960kii, iyo markii 1969kii ciidammadu afgenbi xukunka kula wareegeen. Waxaa dalka ka dhacay saddex doorasho guud iyo mid Madaxweynennimo, oo xaq iyo caddaalad ku dhacday.

Xisbigii iyo Madaxweynihii laga adkaadaaba waxay u hambalyayn jireen kuwii ka guulaystey. Rabitaanka shacbigu wuxuu ahaa mid la sharfo oo loo hoggaansamo. Labaatan sano oo keli-talis ah iyo 16 sano oo dagaal sokeeye ah oo sababay dhimashada tiro dad ah oo ka badan nus malyuun, barakicinta malaayiin shacbi ah iyo burburka kaabayaashii dhaqaale ee dalka. Cawaaqib xumadii laga dhaxlay dagaalkaas waxay weli ka muuqataa dadka iyo dalkaba. Sida la og yahay isku-dayo badan oo la sameeyey in dalka dib loogu soo dabbaalo nabad iyo xasillooni way wada fashilmeen.

Mar kasta oo heshiis la gaaro waxaa soo bixi jirey kooxo hubaysan oo hor leh. Qabqablayaasha dagaalka ee haysta miliishooyinka hubaysan waxaa shir kasta oo la qabto laga siin jirey jago, dhaqankaas oo abuuray fikrad ah in shiddo iyo qalalaase meel lagu gaaro, halkii la isku ciqaabi lahaa. Sidaas awgeed, Soomaaliya waxay muddo gaaban ku noqotay dal ay sharcidarradu meel aad u xun gaartey.

Soomaalida iyo beesha caalamkuba marna kama ayan samrin sidii ay dalka ugu heli lahaayeen xal waara. Laba sano oo lagu jirey shir dibuheshiisiineed kaddib, waxaa dalka Kenya lagu gaarey heshiis lagu ansixiyey 'Axdi qarameed', waxaana lagu dhisay TFG-da. Dhiba kasta oo ka horyimidba, xukuumaddii la soo dhisay waxay ku guuleysatey in ay dalka soo degto oo ka hawlgasho.

Mar aan wax ka xusay himiladii ay Maxkamaduhu dhaliyeen iyo burburkii ay dalka ugu horseedeen, waxaan iri: 2006dii waxaa la moodey in rajo cusubi dalka u dhalatay, kaddib markii Ururka Midowga Maxkamaduhu uu dagaal caasumadda ka dhacay uga itaal roonaaday qabqablayaashii hore magaalada uga talin jirey. Rajadaasise way is cuntay, oo maxkamadahii ayaa dib uga gurtay ballanqaadyadii nabadeed iyo wadashaqayn ay la yeelan lahaayeen TFG-da. Waxay ka baxeen laba heshiis oo ay TFG-da kula galeen magaalada Khartuum, waxayna diideen in ay xukuumadda la fariistaan shirkii saddexaad ee loo ballansanaa, iyaga oo weliba colaad xun u muujiyey TFG-da.

Halistii UMM ku hayeen TFG-da waxay gaartey heer aan loo dulqaadan karin. Bishii Disembar 2006dii, waxay weerar ku soo qaadeen Baydhabo oo ahayd xarunta ay dawladdu fadhidey. UMM waxay caddaysteen in ay doonayaan in ay dalka xoog ku qabsadaan. Markiise ciidammada TFG-du ay dagaal ku jabiyeen madaxdoodii way is casileen, ururkiina wuu baaba' ay. Waxay go' aansadeen dagaal dhuumaalaysi ah. Mar aan wax ka soo qaaday xaaladda dalku ku sugan yahay, waxaan iri, maanta dawlad ayaa dalka oo dhan gacanta ku haysa, si sharcigii iyo kala danbayntii loo soo celiyose waxay u baahan tahay shaqo culus.

Waxaan hadalkaygii ku soo gabagabeeyey in aan ka soo qaybgalayaashii ku baraarujiyo sida Axdiga KMG ah u qeexay tartiibaadka dalka lagu xasilinayo, iyo sida looga shaqaynayo hirgelinta hab dimuqraaddi ah inta ayan dhammaan muddada kala guurka ah. Waxaan meesha ka sheegay oo kale in loo baahan yahay in beesha caalamku nagu taageerto dadaalka aannu wadno, dhinac farsamo iyo dhinac maaliyadeedba. Waxannu ku rajo weynahay in ay dawladda

Ingiriisku hormuud ka noqoto arrintaas. Markii aan dalka ku soo noqday waxaan la kulmay xukuumaddii, taas oo ila socodsiisey halka ay marayeen hawlihii shirku. Waxaana isla go' aansannay in shirku marka hore noqdo heer qaran, kaddibna u sii faalalo heer gobol iyo heer degmo. Kharashkii shirka oo dhan waxaa badidiisii bixisay Boqortooyada Sacuudi Carabiya, qaarna waxa bixiyey EU-da iyo beesha caalamka. Shirkii wuxuu magaalada Muqdisho ka socdey 15kii Luuliyo-30kii Agoosto 2007dii. Waxaa shirkaas si toos ah uga soo qaybgalay salaadiin, cuqaal, nabaddoonno ka socdey beelaha Soomaaliyeed oo dhan, kuwaas oo ay tiradoodu gaareysey saddex kun.

Madaxda qaranka oo dhan iyo wufuud meelo badan ka kala timid waxay shirka ka jeediyeen khudbooyin guubaabo iyo duco isugu jira. Shirka dood adag baa ka dhacday, si kululna waa la isu haaraamay, ugu danbayntiise qodob kasta ee ajeendada shirka ku jirey waxaa laga gaarey heshiis buuxa, sida dhaqanka Soomaaalidu dhigayana, intii wax kala tirsaneysey way isu hoydeen. Shirku wuxuu talooyin badan ka soo jeediyey sidii wufuudda badan ee shirka ka soo qaybgashay ay nabadaynta u gaarsiin lahayeen beelaha iyo degaannada ay ka kala yimaadeen. Sidaas oo kale, waxay talooyin ka soo jeediyeen sidii ka-qaybqaadashada maamulka dalka loo ballaarin lahaa, muwaadiniinta aan Golaha Baarlamaanka ku jirinna loo siin lahaa fursad ay kaga qaybgeli karaan Golaha Wasiirrada.

Madax-dhaqameedyada beelaha Soomaaliyeed oo dhan waxay muujiyeen in ay nabad iyo wadajir u heellan yihiin. Waxbase kama beddelin dhaqankii kooxaha dawlad-diidka, kuwaas oo sii laba jibbaarey dagaalladii ay dalka ka wadeen. Shirku wuxuu ka marag kacay wixii aan hore meel kasta uga sheegnay oo nala ka dhegeysan waayey. Kuwaas oo ay ka mid ahayeen in aaney jirin beelo Soomaaliyeed oo colaad iskala soo horjeedey iyo in aan jifooyinka yar ee qalalaasaha dalka ka wadaa ayan dooneyn in ay Soomaalidu heshiiso oo ay dalka dawladi ka dhisanto. Nasiibdarro, xaqiiqdaas nala kama rumaysan oo sidii hore baa faraggelintii nalooku wadey.

Waxaase yaab leh sida, beesha caalamka oo goobjoog ka ahayd shirkaas qabashadiisa, ay isaga indhatireen aragtida nabad-diidka iyo xag jirnimada. Go'aannadii shirka ka soo baxay aad iyo aad baa meel kasta looga soo dhoweeyey. Sidaas oo kale, Golaha Shacbigu wuxuu ansixiyey badi qodobbadii ka khuseeyey go'aammadaas. Halka dawladda Soomaalidu ku guda jirtey fulinta barnaamijyo dalka lagu xasilinayey iyo kuwa kale oo lagu xoojinayey sidii ay bulshada rayidka ahi uga qaybqaadan lahayd talada dalka. Ciidammadii Itoobiya oo aannu ka fileyney in ay gacan nagu siiyaan hawlaha faraha badan ee na hor yiil waxay tartiib-tartiib garabmar ugu sameeyeen shaqooyinkii aannu ku heshiinney oo dhan, waxayna xiriir toos ah iyo wada shaqaynba la samaysteen ganacsata iyo guddiyada kala duwan ee beelaha dawlad-diidka ah.

Is-afgaradkii dhex maray labadaas qolo, waxay gaarsiisey in G/dhexe Gabre uu fagaare kasta ka yiraahdo " beesha Cayr ma ahee Soomaaliya dad kale ma uu jiro. Hadalka G/Dhexe Gabre wuxuu ku soo beegmay wakhti ay qalalaase abuurayaasha beeshu dhallinyarada ku dhiirrigelinayeen in ay hubka qaataan oo dawladda la dagaallamaan. Dawladdu waxay, isla maalmihii ay Muqdisho soo gashay, rasmi ahaan ugu dhawaaqday in ay Cabdiqaasim iyo Cali Mahdiba dawladdu u aqoonsanayso una meelmarinayso xasaanaddii uu dastuurku u jideeyey, taas oo ay ku muteysteen in ay hore jagada Madaxweynennimo dalka ka soo qabteen. Nasiibdarro, Cabdiqaasim wuu ku gacansayray sharaf iyo xurmo kasta oo lagu maamuusay, wuxuuna ka doorbiday in uu dawladda ka soo horjeesto. Mudane Cabdiqaasim, wuxuu degganaa xaafadda Taleex oo u dhow isbitaalka Digfeer.

Meeshaas waxaa ku yiil qalcad weyn oo fariisin u ahayd ciidan ka amar qaata. Ciidankaasi wuxuu habeen walba weerar ku soo qaadi jirey ciidanka dawladda ee fadhiyey Km.4, maalintiina waxay ku kala dhuuman jireen guryaha xaafadda . Dhawr jeer ayay dawladdu isku dayday in ay wada hadal nabadeed la yeelato, ayaan darrose Cabdiqaasim wuu inkiray wixii lagu soo eedeeyey mana uu oggolaan in la wada qaato hab degaanka lagu xasiliyo. Markii la ogaaday wixii xaafadda ka jirey oo dhan, ayay dawladdu go'aan ku gaartey in aagga oo dhan ciidan lagu wareejiyo oo guri guri loo baaro, isagana

ammaankiisa la sugo oo loo geeyo ciidan ka tirsan Booliska Soomaaliyeed. Arrintaasna waxaa loo xilsaaray taliyaha Booliska S/ Guuto Cabdi Qaybdiid. Maalintii ciidanka dawladdu uu bilaabay hawlgalkii, ayaa ciidankii meesha ku jirey iyo ilaaladiisiiba aagga oo dhan laga saaray. Dabadeed waxaa la galay gurigii Cabdiqaasim, kaas oo laga soo saaray waxyaalaha qarxa, hub fara badan oo fudud iyo teknikada dagaalka. Markii waxaas oo dhan oo wada sharcidarro ah laga helay, ayuu weliba S/Guuto Cabdi Qaybdiid u geeyey laba unug oo ciidanka Booliska ah, kumase uusan qancin wuuna ka biyo diidey. Hawgalkaas kaddib Cabdqaasim wuxuu joogteeyey dacaayad uu ku fidinayo warbaahinta gudaha iyo tan dibadda, uuna ku canbaaraynayo TFG-da iyo Madaxweynahaba. Maalmo kaddibna wuxuu u duulay Qaahira, halkaas uu siyaasadiisii dawlad-diidka ahayd ka sii watey.

Dawladdu iyada oo dhibban oo iska daafacaysa ayay dhan kalena isku hawshay soo noolaynta maamulladii gobollada iyo degmooyinka. Waxaa si gaar ah loo dardargeliyey dhismihii bankiga dhexe, maxkamadihii, wasaaradihii, hay' adihii dawladda, halkaas oo lagu hawlgeliyey shaqaalihii dalka. Dadaalkaas waxaa lagu fuliyey isku tashi waana laga maarmay ballammadii caalamiga ahaa ee marnaa. Waxaa noo qabsoomay oo dhan waxaannu ku fulinney Iskaa Wax u Qabso. Beesha caalamka ballanqaad maran ma ahee, marna wax qiime lihi nagama soo gaarin.

## DHAMMAADKII XUKUUMADDII CALI GEEDDI

Magacaabiddii RW Cali Geeddi waxay ka danbaysey talooyin ay ii soo jeediyeen rag badan oo tixgelin mudan. Taladaas ka sokow waxaan tixgeliyey aqoontiisa qof ahaaneed. Waxaan filayey in uu xilalkiisa iyo xiriirradiisa kaalin weyn ka qaadanayo; wuxuuse gabay wax ka qabashada khilaafkii soo kala dhexgalay xildhibaannadii, isaga oo kolkol meeshii uu ka daafici lahaa siyaasaddiisa RW isu muujiyey mid dhexdhexaad ka ah aragtida dawladda iyo kuwa ka soo horjeeda. Arrimahaas oo isbiirsaday waxay igu sanduleeyeen in aan kaalintiisii buuxiyo. Waxaa dulqaadkaygii meesha ka baxay, markii uu RW bilaabay in uu jagooyin sare uu rag ku magacaabo isaga oo, sida uu

sharcigu yahay, aan horkeenayn golaha wasiiradda, diidey in dakhliga dawladda bankiga dhexe la geeyo, lana sameeyo miisaaniyad qaran, isaga oo doorbiday in uu la macaamilo xawaaladaha gaar ahaaneed. Waxaa intaas dheeraa isaga oo galay hub urursi, ciidan samaysasho iyo hawlo kale oo ka baxsan xilka RW. Sida ku cad Axdiga Qaranka qodobkiisa 11aad faqraddiisa 8aad, 9aad, 10aad, 11aad, haddii xukuumaddu ay ku fulin weydo arrimaha ku xusan qodobbada sare, waxay Baarlamaanka weydiisanaysaa cod kalsooni ah, haddii ay weydana waxaa, iyada oo la raacayo Axdiga, la dhisayaa xukuumad cusub.

Qodobka 8aad wuxuu qorayaa, ayada oo aan wax loo dhimin faritaannada Axdiga la xiriira dhismaha wasaaradaha waxaa la dhisi karayaa Guddiga Federaalka iyo Arrimaha Dastuurka oo u xilsaaran dhaqangelinta arrimaha Dastuurka iyo Federaalka. Qodobka 9aad, wuxuu qorayaa dawladda FKMG ah, waxay hubinaysaa in la dhaqangeliyo habka ferderaalka 2 sano iyo bar gudahood, laga bilaabo marka guddiga la dhiso. Qodobka 10aad, wuxuu qorayaa haddii xukuumadda FKMG ah ay ku guul darraysato in ay ku baahiso habka ferderaalka dalka oo dhan muddada loo qabtay oo ah laba sano iyo bar, xukuumadda FKMG ah waxay golaha shacabka weydiisan doontaa cod kalsooni ah, haddii ay weydana waxaa la dhisayaa xukuumad cusub iyada oo la raacayo sida uu tilmaamayo Axdigaan.

Qodobka 11aad, wuxuu dhigayaa dawladda FKMG ah ee lagu dhisay faqradda 8aad waa in ay ku gaarsiisaa dhammaan dalka Soomaaliya habka federaalka sannad gudihiis haddii ay ku guul darraysatana waxaa lagu dhaqmayaa faritaannada qodobka 11aad (8) ee kor ku xusan.

Markii RW Geeddi ka gaabiyey in uu fuliyo waajibaadka uu Axdigu u xilsaaray, muddadii qodobbadaas ku cayinnaana dhammaatay, ayaan RW u qoray waraaq aan ku leeyahay, aniga oo sababaynaya in uu kalsooni weydiisto Golaha Shacbiga, haddii kalena uu istiqaaladiisa ii keeno. Taladii aan u soo jeediyey RW wuu ku gacansayray, wuxuuna bilaabay arrin aan loo fadhiyin oo ah qaylo-dhaan qabiil oo uu ku beerlaxawsanayo in laga gardaran yahay. Wuxuu ii soo diray Odayaal dhaqameed iyo xildhibaanno la beel ah, kuwaas oo iga codsaday in aan

arrinta dib u dhigo; markii aan dhegeystey codsigoodii waxaan u sheegay in arrintu ay tahay mid ku qeexan Axdi qarameedka TFG-da lagu dhisay, kaas oo aanan ku xadgudbi karin, oo shaqadayduba tahay ilaalinta Axdiga. Waxaan u sheegay in, haddii aan arrintaas dib u dhigo, ay khasab igu noqoneyso in aan xilka ka dego, maxaa yeelay waxaan noqonayaa in aan jebiyey Axdigii Qaranka.

RW Geeddi wuxuu qaylo-dhaan kale u dirsaday dawladda Itoobiya, oo ay beryihii danbe si gaar ah isugu xirmeen si ka baxsan awoodda RW Geeddi, ilaa la gaaray heer Itoobiya ila baalmarto arrimaha khuseeya xiriirka labada dal oo ay si toos ah iyaga iyo RW Geeddi dhexdooda ka dhammaystaan iyada oo aan waxba la igala socodsiin. Isla maalmahaas waxaa i soo wacay Seyoum Mesfin oo ah Wasiirka Arrimaha Dibadda ee Itoobiya, wuxuuna iga codsaday in uu ii yimaado.

Waxaan ugu jawaabey in aanay dalka ka jirin wax dhibaato ah, balse yahay saaxiib aannu xurmayno oo mar allaale markii uu doono noo iman karo. Subaxdii danbe ayuu Mesfin ka soo degey gegida dayuuradaha ee Baydhabo, oo toos u yimid Madaxtooyada. Wuxuu iga codsaday in uu na dhexgalo aniga iyo Ra' iisul Wasaaraha. Waxaan ugu jawaabey intii aan hore ugu iri, odayaashii iyo xildhibaannaddii uu RW ii soo diray, waxaana u caddeeyey aragtidayda. Kaddib RW Geeddi buu la xiriiray oo kula taliyey in uu iscasilo, taladiina wuu qaatay. Subaxdii danbe wuxuu khudbadiisii RW ahaan ugu danbaysey oo sagootis ahayd ka jeediyey Golaha Shacbiga.

Wuxuu codsadey in TFG-du bixiso deyn fara badan oo uu ku galay magaca dawladda, taas oo laga yeelay. Markii uu shaqada ka tegey waxaa la dejiyey magaalada Nayroobi, wuxuuna Barlamaanku u oggolaaday in uu haysto xubinnimadii TFP-da.

# KA HOR DHISMAHA XUKUUMAD CUSUB

Muddadii u dhexaysey sagootigii RW Geeddi iyo magacaabiddii Ra'iisul Wasaare cusub waxaa hawlaha caadiga ah ee maamulka xukuumadda sii wadey mudane Saalim Caliyow Ibrow.
Afartii toddobaad ee ka danbaysey waxaa dalka gudihiisa iyo dibaddiisaba ka socdey ol' ole siyaasadeed oo lagu soo xulayey Ra'iisul Wasaare cusub. Waxaan bilaabay wada-tashigii caadiga ahaa oo aan la yeeshay siyaasiyiintii , xildhibaannadii , wakiilada bulshada rayidka ah. Badidood waxay ii soo jeediyeen in markaan RW loo magacaabo nin aan xubin ka ahayn Baarlamaanka. Fursaddaas waxay suurtaggal noqotay, kaddib markii, iyada oo la raacayo talo ka soo baxday shirkii Dibuheshiisiinta ee Luulyo/Agoosto 2007 Muqdisho lagu qabtay. Muwaaddiniintii jagadaas u hanqal taageysey waxay bilaabeen loollan adag oo ay ku soo jiidanayeen dareenka xildhibaannada iyo siyaasiyiin kale oo ay u arkayeen in ay arrintaas gacan ka geysan kareen.

Raggii jagadaas isu soo sharraxay waxaa ugu firfircoonaa nin uu Cali Mahdi taageerayey oo arday ka ahaa Jaamacad ku taal dalka Malaysia ' Mudullood-Abgaal-Agoonyare' . Ololaha Cali Mahdi qaaday wuxuu ahaa mid meel walba gaarey. Wuxuu Cali musharraxa iigu keenay magaalada Nayroobi, wuxuuna ku dadaaley in uu igu qanciyo ku habboonaanta jagada ee musharraxiisa. Sidaas oo kale, wuxuu ku dadaaley in uu tartamihiisa ka bixiyo tilmaamo ay beesha caalamku ku qanacdo, sida danjiraha Maraykanka iwm. Musharraxiinta kale waxay kala ahaayeen: Abdirizak Isaaq Idow ' Mudullood-Abgaal-Wacaysle' oo ah ganacsade, hanti ku leh Muqdisho iyo Dubai, waxaana ol' ole ugu jirey ganacsato badan oo iyaguna ganacsi ku leh Dubai iyo Muqdisho. Nuur Xasan Xuseen ' Nuur Cadde' ' Mudullood-Abgaal-Celi' oo hore u ahaan jirey sargaal ka tirsan ciidankii Booliiska Soomaaliyeed, xilligaasna ahaa Xoghayaha Guud ee Laanqayrta Cas ee Soomaaliyeed. Musharraxaan waxaa olole weyn ugu jirey siyaasiyiin iyo madax-dhaqameedyo ka tirsan beesha mudullood iyo siyaasiin isugu jirey Soomaali iyo Ajnabi oo xaruntoodu ahayd Nayroobi, iyo weliba saraakiil Soomaaliyeed oo madax ka ahayd Laanqayrta Cas, sida

Dr. Axmed Maxamed Xasan ' Foodcadde' iyo Janan Cabdinuur Yuusuf Axmed ' Tumey' . Cabdullahi Maxamed Afrax' Mudullood-Abgaal-Wacaysle' , oo ahaan jirey wasiirka ganacsiga ee xukuumaddi Cali Geeddi. Musharraxaan waxaa u ol' olaynayay siyaasiyiin isugu jirey kuwo beeshiisa ah, iyo saaxiibbo beesha Hartida Daarood u badnaa. Injineer Maxamed Caddow ' Mudullood-Ojaajeen' oo ahaa xildhibaan miisaan ku leh TFG-da iyo guud ahaan beeshiisa. Maxmed Maxamuud Guuleed ' Gacmadheere' ' Habargidir-Saleebaan' oo ahaan jirey wasiirka arrimaha gudaha ee xukuumaddii Cali Geeddi. Musharraxaan waxaa isku raacsanaa beesha Habargidir oo dhan iyo saaxiibo qabiil kasta lahaa. Gacmadheere waa nin miisaan ku lahaa xildhibaannada iyo Bulshada Soomaaliyeedba.

Sida kor ku cad, musharaxnimadooda tooska ah ka sokow, waxaa raggaas u ololaynayey dad isugu jirey Soomaali iyo shisheeyaba.
Inta aanan ka jawaabin culayska faraha badan ee meelo kala duwan la iga soo saarayey, waxaan soo saaray shuruudo lagu doonayey in qof kasta oo jagadaas u tartamayaa soo buuxiyo. Shuruudahaas waxaa ka mid ahaa:(1) in uu yahay muwaaddin Soomaaliyeed oo aamminsan habka federaaliga ah; (2) in uu yahay nin hufan oo aan hore dalka denbi uga gelin; (3) in uu yahay nin leh karti, waaya' aragnimo iyo dhaqan wanaagsan; (4) in uu yahay nin diinta Islaamka aamminsan; (5) in uu yahay nin ku xiran bulshada Soomaalida.

Markii aan tartamayaashii ku qiimeeyey shaxdaas, waxaa soo baxay mudane Nuur Xasan Xuseen ' Nuur Cadde' , dabadeed waxaan raadsadey xog dheeraad ah oo ku saabsan Nuur Cadde. Cid kasta oo aan la xiriiray, Soomaali iyo Ajnabiba, waxay ii caddeeyeen in uu yahay ninka Soomaaliya waqtigan looga baahan yahay. War bixintii la iga siiyey waxaa ii buuxshey saddex arrimood oo CV-giisa ka muuqdey, oo qof ahaan i qanciyey. Kuwaas oo kala ahaa (1) in ninkani yahay nin da' ah, waaya-aragnimo ku leh hawlaha dalka iyo kuwa caalamiga ahba; (2) in uu yahay nin sharci-yaqaan ah, maamulka guud iyo canshuurahaba khibrad ku leh; (3) in uu yahay nin muddadii burburka lagu jirey oo dhan ka shaqayn jirey hay'adda samafalka ee Bisha Cas ee Soomaaliyed, xiriirna la lahaa hay'adaha caalamiga ah oo

shaqada weyn ka hayey dalka Soomaaliyeed sida ICRC-da (International Committee of the Red Cross). Intaas waxaa dheeraa, codsi gaar ah oo odayaasha beesha Mudullood iiga yimid, kuwaas oo 400 oo ka mid ah oo Maxamed Dheere, Guddoomiyihii Gobolka Banaadir soo abaabuley, iigu yimaadeen magaalada Baydhabo. Odayaashaasi waxay safarka dheer u soo galeen in ay ku muujiyaan taageerada beesha Mudulood ay u haysey Nuur Cadde, oo ka tirsanaa beesha Galmaax Abgaal ' Celi iyo Reer Mataan' oo degaanka Muqdisho u badan, TFG-dana aan jago ku lahayn. Gabagabadii waxaa ii soo baxday in, sababaha aan soo xusay awgood, Nuur Cadde buuxin karo, jagada Ra'iisul Wasaarannimo ee bannaanaatay.

## XUKUUMADDII LABAAD EE TFG-DA

Markii uu Ra' iisul Wasaaruhu weydiisanayey kalsoonida wuxuu Baarlamaanka soo hordhigay barnaamij maangal ah oo lagu wada qancay, kaas oo saameeyey dhammaan qaybaha kala duwan ee hawlaha dawladda. Sidaas oo kale, wuxuu ballanqaaday in uu dardargelinayo waxqabadka dawladda, degdegna dib ugu soo dhisayo hay'adihii qaranka oo dhan. Su'aalo yar kaddib, Baarlamaankii wuxuu aqlabiyad buuxda RW ku siiyey kalsoonidii.

Guudmarkaan kooban ee barnaamijka RW Baarlamaanka soo hordhigay ayaa laga garan karaa sababaha uu ku soo jiitey dareenka iyo soo dhoweynta xubno ka tirsan TFP-da. Ra'iisul Wasaaruhu wuxuu barnaamijikiisa si fiican ugu faahfaahiyey wixii uu doonayay in uu hirgeliyo, sida ku baahinta dalka ee habka federaalka, isaga oo xoogga saaraya sidii guddiga dastuurku hawshiisa u gudan lahaa. Sidaas oo kale, wuxuu ballanqaaday in uu xoojinayo tayada iyo kartida maamulayaasha degmooyinka iyo gobollada dalka. Arrimahaas oo ah kuwii laga waayey dawladdii hore. Dhinaca dhaqaalaha, wuxuu ballanqaaday in uu xoogga saarayo sidii lagu soo noolayn lahaa guud ahaan dhaqaalaha dalka, gaar ahaan waxsoosaarka iyo tas-hiilaadkii lagama maarmaanka u ahaa. Sidaas oo kale, wuxuu Baarlamaanka ka hor caddeeyey in uu tartiib-tartiib u hirgelinayo canshuurihii hore loo ansixiyey si ay xukuumaddu u hesho dakhli ay kaga maaranto ku

tiirsanaanta taageerada beesha caalamka. Wuxuu ku nuuxnuuxsaday sida uu wax uga qaban doono arrin xasaasi ah oo ku tallaabsigeeda ay xukuumaddii ka horreysey ku fashilantay, magac xumo iyo sharaf dhacna dawladda u soo jiiddey, taas oo ahayd ' miisaaniyad dalka loo sameeyo.'

Aad iyo aad baa loogu farxay kolkii uu yiri: ' Waxan mudnaanta kowaad siin doonaa sidii dalka loogu samayn lahaa miisaaniyad fadhida oo si cad u qeexaysa, una muujinaysa habsami u adeegsiga dakhliga dawladda soo gala, meel kasta ha ka soo galee' . Sidaas oo kale, RW wuxuu ballanqaaday in, xukuumadda uu madaxda ka yahay, iyada oo la kaashanaysa beesha caalamka, ay wax ka qaban doonto saboolnimada dalka ku baahdey, shaqooyin abuuri doonto, adeegyadii bulshada dib u soo celin dooto, si sare loogu qaado daryeelka iyo nolosha bulshaweynta Soomaaliyeed.

Amniga iyo xasilloonida RW wuxuu Baarlamaanka ka hor caddeeyey in, Xukuumaddiisu ay ballanqaadeyso in ay mudnaanta kowaad ee hawlaheeda siin doonto dib u dhiska iyo tayaynta qaybaha kala duwan ee XDS iyo qaybaha kale ee ciidammada u xilsaaran amniga iyo xasilloonida, oo sida uu yiri: ' Tallaabadaasi waxay lagamamaarmaan u tahay jiritaanka qaranka' . RW wuxuu intaas ku daray in uu qirsan yahay in XDS, in kasta oo ay da'diisu yar tahay qalab ku filanna uusan haysan muujiyey geesinnimo, waddaninnimo iyo niyadsami uu heegan ugu yahay in uu dalka xasilliyo, una babacdhigo kooxaha nabad-diidka ah oo dalka qalalaasaha ka wadey.

Dhinaca dibu-heshiisiinta RW wuxuu ammaan ballaaran u jeediyey Baarlamaanka iyo xukuumaddii ka horraysayba sida xilkasnimada leh oo ay u sii wadeen dibuheshiisiintii ay ka soo bilaabeen Eldoret, iyaga oo dhidibbada ugu sii aasay shirkii dibu-heshiisiinta beelaha Soomaaliyed oo lagu qabtay magaalada Muqdisho. Barnaamijkiisa wuxuu hoosta uga xarriiqay ammaan ballaaran ee uu u jeediyey isimmadii, cuqaashii iyo madax-dhaqameedyadii kale ee shirkaas ka qaybgalay. Wuxuu soo dhoweeyey sida raggaasi iyaga oo ka wakiil ah beelahoodii isu cafiyeen , isla markaasna u ballanqaadeen in ay dibu-heshiisiinta gaarsiindoonaan gobollada dalka oo dhan. Sidaas oo kale,

wuxuu caddeeyey in uu ku faraxsan yahay in Baarlamaanku uu ansixiyey talooyinkii ay soo jeediyeen, kuwaas oo uu ka mid ahaa qodob qeexayay in ka mid noqoshada xukuumaddu u furan tahay dhammaan muwaaddiniinta Soomaaliyeed, iyaga oo aan loo kala eegayn haddii ay Baarlamaanka xubin ka yihiin iyo haddii kale. Intaas wuxuu ku daray in, muwaddiniin badani oo isagu kow ka yahay, ka faa' iidaysteen isbeddelkaas, maantana jagooyin sare xukuumadda ka hayaan. isaga oo arrimahaas ka duulaya, ayuu Baarlamaanka hortiisa ku ballanqaaday in uu dibuheshiisiintii ka sii wadi doono halka ay maanta joogto, khilaafaadka bulshada dhexyaalna ka gaari doono xal kama danbays ah, muddo aan dheeraynna barnaamijkaas ku soo dhammaystiri doono guul u soo wada hoyata, isla markaasna, wada qancisa Soomaalida oo dhan.

Sida hore ku xusan, barnaamijka RW soo hordhigay Baarlamaanka aad ayaa loogu bogey, waxaana loo arkay mid caqligal ah oo daawo u noqon kara dhibaatooyinka badan oo isbiirsaday ee TFG-da wiiqay. Sidaas oo kale, waxaa loo qaatay mid dalka cagta u saarayey tubta habboon. Dhammaan waxaa la isku raacay in uu dalku helay RW loo baahnaa.

## MAXAA KA DANBEEYEY ?

Nasiibdarro, barnaamijkii quruxda badnaa iyo hadalladii wanaagsanaa ee Ra' iisul Wasaaruhu Baarlamaanka ka hor akhriyey, waxay muddo yar kaddib ku soo baxeen hal bacaad lagu lisay. Gabagabadaas waxaa daliil u ah:

- difaacii qaranka oo muddo gaaban burburay, taasoo keentay in amnigii iyo xasilloonidiina faraha ka baxaan,
- dagaalladii Muqdisho ku koobnaa oo tartiib-tartiib dalka oo dhan ugu fiday,
- maamulladii gobollada iyo degmooyinka oo hore dhismahooda dadaal badan la geliyey oo kala daatay,
- kooxihii dawlad-diidka ahaa oo muddo gaaban isu rogay ururro habaysan oo tabo dagaal oo cad ku socda, barakac hor lehna shacbigii ku khasbay.

Sidaas oo kale, waxba kama uusan qaban arrimihii uu ballanqaaday in uu fulinayo sida dhaqaalaha, nabadgelyada iyo maamulka guud. Mudda yar, hab maamulkii RW Nuur Cadde wuxuu noqday, kolkii la barbardhigo kii ka horreeyey ' kud ka guur oo qanje u guur'. Nuur Cadde wuxuu la yimid dhaqan lala yaabo, bal iska dhaaf dhaqaale uu dhiso iyo maaliyad uu hagaajiyee, wuxuu baabi' iyey wixii hore loo dhisay. Wuxuu ku tagrifalay hantidii ummadda. Markii ay ii caddaatay in uusan maamul dhisayn ee uu ku danaysanayo, ayaan Nuur Cadde xaafiiskayga ugu yeeray, kulana taliyey in uu Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda Axmed Yaaqshiid, ka beddelo jagadaas oo u dhiibo nin kale oo badbaadin kara hantida qaranka.

Taladaas dheg uma uusan jalaqsiin. Nasiibdarro, taakulaynta ciidammadii lafdhabarta u ahaa xasilinta dalka ayuu isku laday (dayacay), taas oo dhalisay niyadjab gaarsiisan heer ay qaarkood ku biiraan xoogagga dawlad-diidka ah. Intaa waxaa weheliya in uu RW meel iska dhigay xilkii loo igmaday, oo uu si aan gabbasho lahayn afhayeen ugu noqday Ururka Ganacsatada Bakaaraha oo ah meesha laga qorsheeyo, laga maalgeliyo, lagana hoggaamiyo dagaallada ay nabad-diidku abaabulaan. Isbahaysi xaaraan ah oo uu la galay Itoobiyaanka iyo ganacsatada Bakaaraha ayaa waxay u suuraggeliyeen:

- In lagu amray ciidammadii qaranka in laga soo saaro Bakaaraha, laguna amro in aysan soo dhaafi karin jidka wadnaha.
- In ciidammada ilaalada canshuuruhu aysan wax canshuur ah ka qaadi karin ganacsatada Bakaaraha, wax baaris ahna ku samayn karin.
- In gacansatada Bakaarahu ay yeelan karaan ciidammo u gaar ah. Taas oo qeexaysa ujeeddada ah in awoodda dawladda ama jiritaankeedaba la tirtiro.

Sidaas oo kale, dibu-heshiisiintii uu hore ugu ballanqaaday in ay barnaamijkiisa kaga jirto mudnaanta koowaad, wuxuu faraha ka saaray, isaga oo la kaashanaya, mudane Ahmadu Ould Cabdalla, oo ahaa madaxa UNPOS iyo wakiilka Xoghayaha guud ee Ummadaha Midoobay u qaabbilsan Soomaaliya, raggii dagaalka kala soo horjeedey TFG-da ee u tafaxaytey burburinta dawladda. Laba wejiilaynta RW waxay keentay in dawlad-diidkii xoogsado oo ay qaybihii magaalada ee

ay dawladdu gacanta ku haysey faraheeda ka baxaan. Shirqoolladdaas waxaa kaalin weyn ka qaatay taliska ciidammada Itoobiya, kuwaas oo si dadban isu hortaagey in lala dagaallamo dawlad-diidka. Saraakiisha ciidammadaasi waxay gaareen heer ay ciidankooda amar ku siiyaan in aaney xeryahooda ka bixin, farna u dhaqaajin dagaalka ay dawlad-diidku TFG-da ku hayeen. Sidaas oo kale, waxay dagaalka ka hor istageen ciidankii TFG-da oo aadka u tababbarnaa oo Itoobiya hore loogu soo carbiyey laguna xereeyey aagag gaar ah, amarna ku siiyeen in aaney wax tallaabo ah qaadin. Shirqoolladaasi waxay horseedeen in awooddii TFG-du si xawlli ah hoos ugu dhacdo, isla markaasna, xaaladdii dalku ku sugnaa ay maalin walba maalinta ka danbaysa ka sii liidato.

Markii muddo la joogey, baan waxaan dareemay in, saraakiil Itoobiyaan ah oo ay ka mid ahayeen G/dhexe Gabre, G/Sare Johannes iyo G/dhexe Tasfai, ay si dadban ula wareegeen awooddii dawladda, RW Nuur Cadde-na fuliyo wax allaale wixii ay kula taliyaan. RW Nuur Cadde waxay gaarsiyeen in uu saraakiisha Itoobiya u qoondeeyo kharash gaar ah oo TFG-du bixiso, halka uu hay'adihii qaranka ka afqabtay kharash ay ku fuliyaan hawlihii loo igmaday. Marka RW sidaas ugu amar-ku-taaglaynayo hantida yar ee qaranka, wax talo ah ma weydiiyo xubnaha ka tirsan xukuumadda uu madaxda ka yahay, anigana waxba iima sheego. Musuqmaasuqa RW iyo saraakiisha Itoobiya ay faraha kula jireen ma jirin cid xog' ogaal u ahayd, waxayna ka dhigeen sir adag oo ay si xoog leh u ilaaliyeen, taas oo aan ahayn hab dawladeed.

Xaaladdu markii ay sii murugtey, baan Madaxtooyada ku qabtay shir ay ka soo qaybgaleen RW, madaxda Wasaaradda Gaashaandhigga, Taliyeyaasha Ciidammada Itoobiya iyo Taliyeyaasha Ciidammada TFG-da. Kolkii aan shirka furay baan si aan leexleexad lahayn ugu iri sarakiishii Itoobiyaanka ' Haddii aaney ciidammadiinnu diyaar u ahayn in ay dalka nala daafacaan, annaga ayaa isdifaacayna ee waxaan idinka doonayaa in ciidammadayada aad xayirteen aad degdeg ugu fasaxdaan si ay u noogu soo madaxbannaanaadaan, maxaayeelay sidaas baa dantayadu ku jirtaa' .

Waxaan u sheegay in aannaan yeeli karin annaga oo leh ciidan fara badan, ay darbiyada nooga soo dhacaan kooxaha dawlad-diidka ahi. Saraakiishii Itoobiya hadba gees ayay fiiriyaan, waxaana ka muuqatey in ayan kulankan ka sugayn erayo siyaasadeed oo sidaas u cadcad. Waxaa ka muuqdey in ay hadalkaygii dhibsadeen.

Aniga oo iyaga jawaab ka sugayey baa, si lama filaan ah, RW Nuur Cadde hadalkii u qaatay. Tallaabadaas oo aan laba sababood awgood loogu baahnayn. Midda hore aniga ayaa dalka Madaxweyne ka ah, midda labaadna aniga ayaa dastuur ahaan ah taliyaha guud ee ciidammada qalabka sida. Waxaa intaas ka sii daran sida la yaabka leh ee uu hadalkaygii uga horyimid. Inta uu xagga saraakiisha Itoobiyaanka u jeestey buu cod dheer ku yiri: ' Ma jiro wax ciidan ah oo aad noo soo wareejinaysaan ee sidiinna ciidanka gacanta ugu haya!' . Aniga iyo saraakiishii ka socotey Wasaaradda Gaashaandhiggu waanu is fiirinnay, hadalkayagiina dib baannu u liqnay, waayo ma aannaan rabin in aannu meesha ku dhex muranno.

Dabadeed, waxaan iri: ' Shirku wuu xiran yahay' . Markii nala ka tagay baan RW weydiiyey waxa ku jiidey in uu sidaas u hadlo, wax jawaab ahi afkiisa waa ka soo bixi weydey. Run ahaan RW wuxuu u dhaqmay sidii nin ka faraxashay arrimaha Soomaaliya oo doorbiday in uu wakiil ka noqdo danaha iyo siyaasadda dawladda Itoobiya. Waxaa kale oo ii caddaatay in, ciidankii Itoobiya oo gurmadka noogu yimid, uu muddooyinkii danbe isu rogey ciidan doonaya in uu maamulka dalka nagala wareego. Sidaas awgeed, waxay caado ka dhigteen in ay si xaddhaaf ah toos fara ula galaan hawlmaalmeedka TFG-da.

Saraakiisha Itoobiyaanku waxay bilaabeen in, madaxda iyo shaqaalaha caadiga ah ee hay'adaha dawladda, ay ugu yeertaan xafiisyadooda iyo guryahooda si ay xogaha dawladda uga helaan. Waxay qaadeen tallaabooyin ay dib ugu soo noolaynayeen dibna ugu soo hubaynayeen ciidammadii maxkamadaha ee ay iyagu dalka nagala xoreeyeen. Sidaas oo kale, waxay bilaabeen shirqoollo ay gacan ku siiyeen sidii, saraakiil iyo maleeshiyooyin ciidammadaas ka tirsanaa oo dhuumaalaysi ku joogey gobollada qaarkood, ay dib ugu qabsan lahaayeen gobolladii ay hore gardarrada ku haysteen, dadkii degaanka lahaana ka barakiciyeen,

intii kaga hartayna si foolxun u gumaysan jireen. Saraakiisha Itoobiyaanku waxay gaareen in, iyaga oo RW u adeegsanayey, ay baabi' iyeen maamulladii ka jirey dhowr gobol oo si xawli ah u shaqaynayey, dabadeedna ay si fudud u qabsadeen xoogaggii dawlad-diidka ahaa. Tallaabadaasi waxay sababtay in ay gebi ahaanba istaagaan isu socodkii iyo kala ganacsigii gobollada ee hore sida caadiga ah isugu furnaan jirey.



Saraakiisha Itoobiya intaas oo keli ah kuma ekayn shirqoollada ay dawladda ku majaxaabinayeen, bal waxay si buuxda uga qaybqaateen shirqoollada dawladda ka dhanka ah oo meelo kale laga soo maleegayey. Waxaa xusid mudan sida ay hawlahooda ugu fududayn jireen warfidiyeennada dawlad-diidku dibadaha ka soo ijaaran jireen. Kuwaas oo ay la kulan siiyaan qof allaale qofkii ay doonayaan ee madaxda TFG-da ka mid ah. Warfidiyeennada loo soo ijaartey in ay dacaayad been ah ku fidiyaan warbaahinta caalamka, iyaga oo u muujinaya in TFG-du ku tumatay xuquuqda bini' aadamka, qaxootigii ay ka hor-istaagtey kaalmadii beesha caalamku u fidin jirtey, dadkana ay denbi la' aan isaga xirxirto, kii ay rabtana jirdisho amaba toos u disho. Ciidammada Itoobiya waxay gaareen heer ay mararka qaarkood

qaataan kaalinta muqaawimada, si ay sare ugu qaadaan xawliga uu ku socdey dagaalkii lagaga soo horjeedey TFG-da. Waxaa xusid gaar ah mudan in, iyaga oo iska dhigayey kooxaha dawlad-diidka ah, ay hoobiyeyaal iyo hub kale ku soo ridi jireen xarunta Madaxtooyada iyo gegida dayuuradaha. Sidaas oo kale, markii mucaaradka iyo ciidammada TFG-du foodda isla galaan, ciidanka Itoobiya waxay gadaal ka soo toogan jireen ciidanka AMISOM oo gudaha Madaxtooyada ku jirey, iyaga oo rasaastooda u ekaysiinayey mid uga timid dhanka TFG-da. Qof kasta oo waayeel ah waa fahmi karey in, ujeeddooyinka raqiiska ah ee ka danbeeyey dhacdooyinka dulmiga ah ee ciidanka Itoobiya ku wax yeellaynayey sumcadda iyo nafta ciidammada AMISOM, ay ahayd weerar bareer ah oo ciidanka ku jihaysan, si loogu khasbo, sida uu mucaaradku doonayey, in ay dalka ka baxaan. Nasiib wanaag, arrintaas way ku khasaareen oo ciidanka AMISOM wuu u dhabar' adaygay cabsigelinta Itoobiya, si sharaf lehna wuxuu ugu mintiday sidii uu ku gudan lahaa xilkii AU-du u soo igmatay. Saraakiisha Itoobiya waxay is dhacsiiyeen in aan la garanayn dhibka ay dalka ku hayaan, dabadeed waxay isku qanciyeen in ay weli sare u qaadi karaan tallaabooyin xididada loogu siibayo TFG-da, kuwaas oo markaan ku wajahnaa shakhsiyaadka ay is lahaayeen xoog bay uga soo horjeedaan kooxaha dawlad-diidka ah ee ay saraakiisha Itoobiya taageeraysey.

Iyaga oo arrintaas maanka ku haya ayaa waxaa dhacday in, bishii Agoosta 2008dii, taliyaha ciidanka Itoobiya G/Sare Yohannes oo wata dhowr sargaal oo ciidammadiisa ka tirsan iigu yimaadeen xafiiskayga. Wuxuu igu yiri: ' Madaxweyne waxaannu rabnaa in aannu xirno Maxamed Dheere oo markaas ahaa Guddoomiyaha Gobolka Banaadir' . Markaan arkay degdegga ku jirey, baan tartiib ugu iri: ' Oo dambigee buu galay?' . Wuxuu iigu jawaabey ' Hubkii buu baadiye geystey oo qarsaday' . Waxaan ku iri soo baara oo markii ay ku caddaato baan tallaabada ku habboon ka qaadaynaa. Markuu jawaabtaydii maqlay buu, intuu istaagey, si caro ku dheehan tahay xafiiskayga ka baxay. Waxaan is weydiiyey xilkasnimo darrada uu sargaalkaani ugu barreeray in uu codsigaas oo kale i waydiiyo. Waxaa iska caddaa danaysiga saraakiisha Itoobiya iyo sida

saraakiisha Itoobiya iyo sida muuqata in ay ku jireen, qaab kasta ha u heleene hanti urursi. Markii aan ka diidey saraakiisha Itoobiyaanka in ay xiraan Maxamed Dheere ayay ka soo dhammaysteen Nuur Cadde in uu jagada ka qaado. Maalmo kaddib waxaa la ii keenay warqad Maxamed Dheere jagada looga qaadayo oo uu soo saxiixay RW Nuur Cadde. Kolkii aan warqadda eegay meel baan iska dhigay, wax tixgelin ahna ma aanan siin. Dabadeed waxaa ii yimid Nuur Cadde, kaas oo igu yiri: ' Madaxweyne, noo saxiix dekreetadii Maxamed Dheere shaqada looga fariisinayey' .

Run ahaan, waan ka xishooday in aan ku iraahdo warqadda ma adiga ayaa soo qoray mise saraakiisha Itoobiya; dabadeed, waxaan ku iri: "Maxamed Dheere dawladda ayaa u magacawday guddoomiyennimada gobolka Banaadir, meeshana dekreeto ayuu ku fadhiyaa, adiguna iima aadan soo qorin wax sabab ah oo uu ku mutaystay in jagada laga qaado." Nuur Cadde isaga oo aan hadal danbe i oran buu iska tegey.

Nuur Cadde wuxuu go'aan ku gaarey in, uu arrimaha dawladda oo dhan u maamusho sidii guri uu leeyahay oo kale. Sidaas oo kale, wuxuu damcay in, shirkii dibuheshiisiinta ee la yiri Jabbuuti baa lagu qaban doonaa, uu u maamusho sidii uu doono, isaga oo aan cidna talada wax ka siin. Ninkii shirka qaban qaabinayey Ahmadu Ould Abdalla oo isaguna Itoobiya iyo Talyaaniga ka amar qaata, baa dawladda soo weydiistey in ay Jabbuuti u soo dirto wafdi wada hadal la bilaaba mucaaradka. RW Nuur Cadde isaga oo aan xukuummaddiisa iyo anigaba la tashan buu Ahmadu Ould Abdalla toos ugu gudbiyey magacyo ay diyaariyeen isaga iyo rag kale.

Maalmo kaddib, baan ogaaday magacyada sida qarsoodiga ah loo diray. Dabadeed waxaan toos ula hadlay Ahmadu Ould Abdalla, waxaana weydiistey in uu magacyada dib noogu soo celiyo, oo ah kuwo ayan xukuumaddaydu ka warqabin. Ahmadu Ould Abdalla, halkii uu magacyada dib noogu soo celin lahaa buu iigu soo jawaabey, ' Adiga iyo RW ka wada hadla.' Kaddib waxaan u yeeray Nuur Cadde, waxaana ku ir:i ' Bal waxaad iiga warrantaa shirka Jabbuuti iyo cidda inoo ka qaybgalaysa' . Wuxuu igala hadlay wax aan meshaba oollin, dabadeedna wuu istaagay oo iska baxay.

Markii uu iga tegey buu toos war saxaafadeed u qabtay. Kaas oo uu adduunka ugu sheegay in aan anigu diiddanahay dibu-heshiisiinta. Wax jawaab ah kama aanan bixin, maxaayeelay waan iska gartay in uu ninkani yahay nin loo adeegsanayey burburinta TFG-da, looguna sheekeeyey in isaga Madaxweyne laga dhigayo. Been beenta RW lagu maaweelinayey waxaa horseed ka ahaa Ahmadou Ould Abadalla iyo wakiilka Talyaaniga Soomaaliya u qaabilsanaa Signor Rafaelli. Kibirka iyo dhaqan xumida labadaas dibolomaasi waxaan u fahmay in aaney keli ku ahayn Ould Abdalla oo taageero caynkaas ah ka haysto Maraykanka, Rafaellina dawladdiisa. Sidaas waxaa iigu caddaatay in, iyada oo lagu tumanayo qawaaniinta caalaamka iyo Axdi qarameedka TFG-da, gacantayda lagala baxay xukuumaddii aan anigu madaxa ka ahaa. Ragga kale oo iyaguna hagardaamada qayb fiican ka qaatay waxaa ka mid ahaa:

Mudane, Dr. Bashiir Attalla, Xoghayihii Sare ee urur goboleedka IGAD ,wuxuu ahaa nin xagal daacin badan ku hayey soo celinta qaranimada Soomaaliyeed isagoo mar walba isku dayi jirey in dowlada shisheeye danahood u fuliyo. Dr. Bashir waa nin aan lahayn aragti fog waxaana indha-tiray danaysi gaar ah. Intaas wuxuu ku darsday karti xumo iyo dabacsanaan saa'id ah.

Mudane Moses Watangula, waa Wasiirkii Arrimaha Dibada ee xilka laga eryey kaddib dacwadihii musuq-maasuq ee ay dowladiisa ku soo oogtay, wuxuu ahaa nin baahi badan u qabay tabcasho dhaqaalle. wuxuu kaloo ahaa nin dano siyaadeed dowladaha IGAD qaarkoood ku fushan jireen isagoon ka fiirsan, wuxuu kol hore isku dayey inuu ka dillaalo Soohdin Badeedka Koonfurta Soomaaliya la wadaagto Kenya iyadoo DFKGS ee xilligeygii diidmo cad ka muujisey, waxa ay u soo shaac baxday arrintan shacabka Soomaaliyeedna kuna baraarugeen kolkii DFKGS ee dambe la gashay heshiis is-afgarad badeed (MOU ) ee la rabay in soohdin badeed been ku saleysan caalamka loo soo bandhigo, taas oo ay ka biyo diideen Baarlamaanka DFKGS kaddib kolkii shacabka Soomaliyeed gadood iyo cabasho ballaaran ka keeneen arrintaas, kaddibna ay gaashaanaka u daruureen. Waa nin dullaalnimadu wax kasta ay kala weyn tahay oo danayste ah.

# SIYAASADDA DHABTA AH EE DAWLADDA ITOOBIYA

Weligey ma aanan illaawin maahmaah Itoobiyaan ah oo is' araggayagii ugu horreeyey uu Mingistu Haile Mariam igu yiri kaddib markii uu oggoolaaday in SSDF ay saldhigyo ka samaysato dalka Itoobiya, taas oo ahayd ' Shabeel dabada lama qabsado, haddii aad qabsatidna lama sii daayo, waayo wuu kugu soo jeesanayaa oo ku cunayaa." Maahmaahdaas siyaalo kalena waa loo yiraahdaa, sida ' Shabeel lama kooraysto, haddii aad kooraysatidna ha ka degin, yuusan ku cunine' .

Nuxurka maahmaahdaasi wuxuu ii soo baxay markii aannu qabsannay Balanballe iyo Galdogob oo ay Itoobiya adduunka u sheegtay in degmooyinkaasi ka tirsanaayeen dalka Itoobiya oo dawladda Soomaalidu ay gardarro ku haysatey, haddana ay sidaas calankoodii uga taageen. Ka runsheegidda lahaanshaha taariikheed ee degmooyinkan Soomaaliyeed, xilliga taliskii Mingiste, waa tan ii keentay lix sano oo xabsi ah. Xabsiga, amar dawladeed kagama aanan soo bixin ee, iskay baan uga soo baxay, aniga oo ka faa' iidaystey burburka Taliskii Mingiste iyo dawlad la' aantii xigtey. Waxaan dabbaaldegga iyo rayraynta la qaybsadey qowmiyadihii Itoobiya ku noolaa oo isbedelkan u arkayey waa cusub oo soo gunaanadaya silicii ay talisyadii Amxaaradu qarniyo ku hayeen. Dulucda maahmaahdani waxay tilmaamaysaa in xilligii Mingiste iyo kan Zenawi ee maantaba uusan shabeelka Itoobiya ku ekayn in uu cuno ciddii dabada qabata oo sii daysa oo keli ah, balse uu weerarro gardarro ah ku qaado cid kasta ama dawlad kasta oo uu danihiisa ku fushan waayo.

Markii qunjuraafkii ciidammada Itoobiya si fiican u wiiqay waxqabadkii TFG-da, oo ay ku guuldarraysteen in TFG-du kala daadato, baa dawladdii Itoobiya isqarin kari weydey oo si toos ah bannaanka isu soo dhigtay. Waxay bilawday in ay geed dheer iyo mid gaabanba u fuushay si ay talada dalka uga wareejiso TFG-da oo gaashaanka ku dhufatay in ay isla weynaanta iyo daandaansiga Itoobiya u hoggaansanto.

13kii Agoosto 2008dii, dawladda Itoobiya ayaa dalkeeda nagu martiqaadday aniga, guddoomiyaha Baarlamaanka iyo RW iyada oo ku andacooneysey in ay na dhexdhexaadineyso. Martiqaadkii waannu oggolaannay, waxaannuna tagnay magaalada Addis Ababa. Martiqaad-kaas ka hor waxaan ka qaybgalay shir Jabbuuti ka dhacay 2dii luulyo 2008dii, oo ay ka soo qaybgaleen xubno ka tirsan Guddiga Amniga UN-ka (Security Council), kaas oo looga hadlayey arrimaha Soomaaliya.

Halkaas waxaan ka jeediyey khudbad aan kaga warbixiyey xaaladda dalku ku sugan yahay iyo waxa Soomaaliya ka doonayso in ay beesha caalamku u qabato. Markii aan hadalkii dhammeystay, su'aalihii la i weydiiyeyna ka jawaabey, waxaan ku noqday Muqdisho. Xilliga ay Itoobiya noo fidineyso martiqaadka, ma jirin wax dhib ah oo dalka ka taagnaa oo aan ka ahayn faraggelinta dawladda Itoobiya. Dhowr goor ayaan arrintaas diidmo uga geeyey madaxda ugu sarraysa ee dalkaas, isla markaasna, uga digey natiijada xun ee faraggelintaas ka dhalan doonta. Dhibaatada kale ee dalka ka jirtey waxay ahayd khayaanada uu Nuur Cadde qaranka ku hayey, taasna waxaa xil iska saaray Golaha Shacbiga oo mooshin kalsooni kala noqosha ahi ka yaalley. Mooshinkaasna waxaa lagu soo oogey dembiyada faraha badan ee uu qaranka ka galay, oo ay ka mid yihiin qadobbada hoos ku qoran:

- Qodobka 3aad – Sarraynta Sharciga – Faqradaha 1aad iyo 2aad ee tilmaamaya in ay Jamhuuriyadda FKMG ee Soomaaliya ku dhisan tahay sarraynta sharciga, laguna dhaqi doono si waafaqsan Axdigan iyo in Axdiga Dowladda FKMG yahay xeerka ugu sarreeya ee ay hoos yi-maadaan dhammaan hey' adaha awoodda leh ee dalka.
- Qodobka 44aad - Awoodaha Madaxweynaha faqradaha (d), (e) iyo (f).
- Qodobka 46aad faqradda 3aad ee tilmaameysa in uu Ra' iisul Wasaarahu leeyahay soo jeedinta xubnaha ka mid noqonaya Golaha Wasiirrada, Madaxweynuhuna leeyahay oggolaanshaha.
- Qodobka 48aad – Waajibaadka Wasiirka Kowaad – Xarafka (b) ee tilmaamaya in uu Ra' iisul Wasaaruhu mas' uul ka yahay horumarinta, isu-duwidda iyo kormeeridda siyaasadda xukuumadda iyo maamulka guud ee dawladda.

Qodobka 52aad – Golaha Wasiirrada – Faq. 2aad, xarafka (a) ee

- tilmaamaya waajibaadka Golaha Wasiirradu in uu ka mid yihiin diyaarinta, dhaqangelinta siyaasadda iyo miisaaniyadda qaranka.
- Qodobka 53aad – Xilka Golaha Wasiirrada – Faq. 3aad, xarafka (a) ee tilmaamaya in ay Golaha Wasiirradu si wadar ah mas' uul uga yihiin, iyada oo la tixraacayo mabda' a mas' uuliyadda wadareed iyo qof ahaaneed, wax kasta oo ay fuliyaan sida fulinta awooddooda iyo meelmarinta waajibaadkooda.
- Qodobka 65aad ee Ciidammada Qalabka Sida oo caddaynaya in ay Somaaliya lahaanayso Ciidan Qaran oo keli ah.
- Qodobka 71aad – Muddada Kala Guurka ah – Faq. 10aad ee tilmaameysa iney waajib ku tahay xukuumadda in ay qaaddo dhammaan tallaabooyinka lagula dagaallami karo qabyaaladda, eexda, xatooyada hantida dadweynaha, musuqmaasuqa iyo dhammaan falalka wax isdabamarinta ee curyaaminaya dhaqanka suubban ee bulshada iyo hawlaha qaranka.

Bal garannay in ay aniga iyo Nuur Cadde noo yeeraan oo arrimaha fulinta isku hayney, waxaan garan waayey sababta ay ugu yeereen Aaden Madoobe oo Guddoomiye ka ah Baarlamaanka, kaas oo aan meelna ka soo gelin arrimaha laga hadlayo. Waxaa hubaal ah in aan loo keenin dalxiis, ama khibrad uu u leeyahay dastuurka, waxaase la malayn karey in loogu yeeray in loo afgarto sidii lagu yiqiin, dabadeedna la siiyo waajibaad cad. Xusuus ahaan, Aaden Madoobe, wuxuu ka mid ahaa kooxdii isku bahaysatay SRRC-da, markii TFG-da la dhisayna waxaa laga dhigay Wasiir. Waxaa dabadeed dhacday in jagadii guddoomiyaha Baarlamaanku bannaanaatay, kaddib markii, guddoomiyihii hore mudane Shariif Xasan oo hormuud ka ahaa isqarxintii Baydhabo la ila beegsaday uu fakad ahaan ugu biiray kooxihii dawlad-diidka ahaa ee Asmara isku urursaday. Mudda gaaban kaddib, waxaa TFP-kii dhexdooda ka bilawday tartan ba'an oo jagadaas loo galay. Waxaa hor iyo horraan isa soo sharraxay Kiishbur, kaas oo madax kooxeedyadii Muqdisho oo dhammi isu taageen sidii uu ku soo bixi lahaa. Arrintaasi welwel bay i gelisay, aniga oo ogaa haddii musharrax raggaasi wataan meesha ku soo baxo uu TFG-da carqalad ku noqonayo. Waxaan la xiriiray Aadan Madoobe oo jagadaas danaynayey. Waxaan weydiiyey waxa uu samayn doono haddii aannu

gacansiinno oo uu jagadaas ku soo baxo. Wuxuu ii xaqiijiyey in uu dardargelin doono hawlaha TFG-da, taas oo ah kaalin aannu in muddo ah ka curyaansanayn. Rag aan saaxiibbo ahayn baan u yeeray oo olole xoog leh baa loo galay musharraxnimadii Aaden Madoobe. Ololahaas oo, nasiib wanaag lagu guuleystey, jagadiina wuxuu ku helay aqlabiyad fiican. Markii uu guulaystey waxaan isiri, TFG maanta ayay guulaysatey, mar haddii ay heshay Guddoomiye Baarlamaan oo la shaqaynaya. Maalmo kaddib, wuxuu bilaabay in uu su'aal ka keeno mashruuc kasta oo ay dawladdu Baarlamaanka u gudbiso. Iyada oo lala yaabban yahay dhaqanka Guddoomiyaha, baa waxaa sir lagu helay in ninku uu hawl fududayn doonayo.

Maalin maalmaha ka mid ah baan u yeeray oo waxaan ku iri: ‘ War Aadan sidee baad wax u waddaa, oo maxaa ka jira waxa lagaa sheegayo?’ . Aniga oo aan hadalkii dhammaysan buu soo booday oo i weydiiyey waxa laga sheegayo. Waxan ku iri: ‘ Waxaa lagaa sheegay in aad, sharci kasta ee xukuumaddu ay Baarlamaanka u soo gudbiso, aad ka dooneysid hawl fududayn’ . Mudda gaaban kaddib, waxa dhacday in Raadiyeyaasha laga dhegeysto go'aanno la yiri waxay ka soo baxeen Baarlamaanka, kuwaas oo aan xukuumaddu wax war ah ka hayn, isla markaasna, aan la garanayn cidda soo jeedisey. Mar allaale markii la isweydiiyo halka ay ka soo jeedaan go’ aannadaasi, baa waxaa la yiraahdaa waxaa soo jeediyey hay'adaha Nayroobi fadhiya.

Waxaa intaas lagu dari jirey in hay'adahaasi mashaariicda iyo barnaamijyada ay wataan la garab maraan xukuumadda oo toos guddoomiyaha ugu gudbiyaan, kaas oo si musuqmaasuq ah uga ansixin jirey Baarlamaanka oo uu ka samaystey koox la shaqaysata oo arrimaha la dhammaystirta. Taas waxaa ka si daran oo la ogaaday, uu dhaqanna ka dhigtay in, markii loola yimaado mashruuc la doonaayo in Baarlamaanka laga ansixiyo, khidmaddiisana la siiyo, uu isaga oo aan Baarlamaanka fariisin, gurigiisa tago oo iska qorqorto go'aan been abuur ah oo aan cidina ka warqabin, kaas oo uu dabeed warbaahinta ka faafiyo, isaga oo u ekaysiinaya in Barlamaanku ansaxiyey. Dawladda Itoobiya, oo sababa badan awgood marmarsiinyo u raadinaysey sidii aan jagada ku bannayn lahaa, baa waxay iska dhaadhicisay in is afgarasho dhexmarta Nur Cadde iyo Aaden Madoobe ay yoolkaas ku gaari kartey. Sidaas

ayayna labadaas nin xiriir-hoosaad ula yeelatay. Markii aan fahmay in xaalku taagan yahay meel aan barako lahayn, baan waxaan xafiiskiisa ugu tagay RW-ha Itoobiya Meles Zenawi. Waxaa ila socday Dr, Yuusuf Cumar Azhari iyo Xuseen Ca li Seylaan. Kolkii uu na soo dhaweeyey oo aannu wada fariisannay baan ku iri, 'Mar haddii aad go'aansateen in aad TFG-da af-genbidaan, aniga ayaa idiin fududaynaya oo shiddo la'aan istiqaalo Baarlamaanka u geynaya. Inta uu istaagay oo muraayadihii indhaha iska baxshay ayuu igu yiri,'Innaga oo muddo dheer saxiib ahayn, baad Cabdullaahi i leedahay kooxaha ay ciidammadaydu la dagaal-lamaayaan baad iiga hiilisay'. Waxaan ugu jawaabay in dhibka TFG-da soo foodsaaray ay dawladda Itoobiya mas'uul ka tahay ee faraha kala baxa. Muddadii aan Addis Ababa ku sugnayn oo dhan, Itoobiyaanku waxay ka shaqaynayeen sidii TFG-da loo bahdili lahaa.

Taas oo ay u adeegsatey warbaahinta ugu afdheer ee dunida, kuwaas oo ay maalin la arkaba ka sii deyn jirtey dacaayado ay ku dhalee-cayneyso madaxda TFG-da iyo is qabqabsigooda aan dhammaadka lahayn. Riwaayaddaas oo dhan waxay uga dan lahayd in ay si gurracan noogu soo jeediso indhaha beesha caalamka. Muddo markii aannu halkaas ku sugnayn, dawladda Itoobiya waxay soo diyaarisay heshiis farsamaysan kaas oo danta keli ah oo ay ka lahayd ay ahayd in Max-amed Dheere shaqada laga saaro. Intaas kaddib, waxay iga codsadeen in aan Baydhabo tago oo joojiyo mooshinka ka dhanka ah Nuur Cadde oo xildhibaannadu u soo gudbiyeen Baarlamaanka. Codsigoodii waan yeelay.

Baarlamaankii baan tagay, oo xildhibaannadii ka codsaday in ay igu sharfaan in ay mooshinka joojiyaan. Arrintaasi waxay Baarlamaankii ku noqotay dhabarjab aan ku sameeyey, dabadeedna aad iyo aad bay iigu buuqeen, wayse joojiyeen mooshinkii. Itoobiya intaas kuma ekaan ee waxay bilowday in ay IGAD ka dhex samayso olole dhan ka ah TFG-da. Sida la og yahay IGAD waxay noqotay hay'ad iska magac ah oo dawladaha ku jira ay mid waliba dhinaceeda u dhibaataysan tahay, oo ay haystaan mashaakillo gudahooda ah awgood. Saddexda waddan oo IGAD xubnaha ka ah oo xaaladahooda lagu sifayn karey caadi waxay kala ahayeen Itoobiya, Kenya iyo Ugandha. Dawladda Kenya waxay iska raacdaa waxa Itoobiya soo jeediso.

Dawladda Ugandha oo ay Soomaaliya ka joogeen ciidammo nabad ilaalineed (AMISOM) waxay jeceshahay in dalka nabadi ka dhalato, sidaas awgeed, way ka hufan tahay faraggelinta arrimaha gudaha ee Soomaaliya. Ayada oo ay adkaayeen xaaladaha ay ku sugnaayeen badi dalalka IGAD xubnaha ka ahaa, dawladda Itoobiya waxay halkaas ka dhex baaraneysey fursado ay kaga faa' iidaysaneyso Itaal darridooda. Markii ay dalalkaas siyaasaddeeda ku qancisay bay waxay qabanqaabisay in wasiirrada arrimaha dibadda ee IGAD ka shiraan arrinta Soomaaliya waqtiga la qabanayo shir sannadeedka Golaha loo dhan yahay ee Ummadaha Midoobay, kaas oo ku beegnaa Sebtembar 2008dii. Shirkii Itoobiya ku qabanqaabisay New York wuxuu u dhacay sidii loogu talagalay. Itoobiya waxay shirkaas ka soo saartay go'aan aan noocisa hore loo arag, kaas oo lagu leeyahay in dhammaan xukuumadda iyo xildhibaannada TFG ay shir aan caadi ahayn isugu yimaadaan magaalada Nayroobi.

Nasiibdarro, shirkaas waxaa Soomaaliya uga qaybgalay mudane Cali Axmed Jaamac Jangeli, wasiirkii arrimaha dibadda, kaas oo wax ka saxiixay go'aankii ay Itoobiya ku dooneysey in ay TFG-da ku burburiso. Tallaabadaas sharcidarrada ah wasiirku iskiis buu u qaatay. Waxaa la yaab leh sida ay dhowr dawladood go'aan uga qaadan karaan aayatiinka qaran dhan oo si walba xor u ah, iyaguna ayan wax shaqa ah ku lahayn. Sidaas oo kale lama garan karo goorta iyo sida Guddiga Amniga ee UN-ku awooddiisii wakaalad u siiyey IGAD.

Dhinaca kale way adag tahay in lagu fekero in go'aankaas oo kale ka soo bixi karo maskax caafimaad qabta. Waxaan Nayroobi tegey Xilligii shirkaas lagu ballamay oo ahaa 25kii Oktoobar 2008dii.

Markii hore waxaa shir meesha ku yeeshay wasiirrada arrimaha dibadda ee IGAD, waxaana guddoominayey wasiirka arrimaha dibadda ee Itoobiya Seyoum Mesfin oo ahaa guddoomiye sannadeedka IGAD. Waxaa la iigu yeeray in aan dhegaysto. Waa afgembi iska cad. Waxaa faraha lala galay dastuurkii TFG-da. Goortaan arkay sida ay wax u wadaan baan ka dooday. Dheg la iima jalaqsiin. Shirka waxaa fadhiyey Nuur Cadde iyo Jangeli, midkoodna afka ma furin.

Galabtii markii la gaaray baa iyada oo ayan dooddii dhammaan buu Mesfin meesha ka sheegay in wixii laga hadli lahaa laga hadlay shirkuna uu xiran yahay. Markii aan iska tegey, wasiirradii waxay iska qorteen wixii ay rabeen. Wax nala kala tashaday ma ayan jirin. Subaxdii baa la ii yeeray balse uma aan dhaqaaqin. Markii shirku dhammaaday baan meeshii imid. Waxaa la ii sheegay oo keli ah in maalinta ku xigta TFG-da oo dhan shir loo qabanayo. Waa yahay baan ku iri. Waxay soo qoreen "War Murtiyeed" aan qodobbada ku qoran qaarkood dhaliilay.

Waxaan ka codsaday in ay soo beddelaan oo sida hagaagsan oo lagu heshiiyey loo soo qoro. Weyna oggolaadeen. Injineer Maxbuub oo ahaa Xoghayaha Guud ee IGAD wuxuu iga ballanqaaday in aan war murtiyeedka aan waxba laga beddeli-doonin oo uu isagu mas' uul ka yahay. Waxaase dhacday in ay Itoobiya war murtiyeedkii qaldanaa ay ku dhejiyeen boggii ugu danbeeyey ee saxiixnaa ee warmurtiyeedkii saxa ahaa oo si qarsoodi ah madaxdii u hoos geliyeen. Galabtii waxaa la qabtay shirkii TFG-da. Shirka waxaa furay, hadalna ka jeediyey wasiirka arrimaha dibadda ee Itoobiya. Markii uu dhammeeyeyna wasiirradii kale ee IGAD baa hadallo ka jeediyey. Intaas kaddib, Aadan Madoobe ayaa laga codsaday in uu xildhibaannada ka soo xulo shan qof oo magacooda ku hadla, kana dhiibta aragtidooda waxa TFG-da ka khaldan iyo sida ay la tahay in gefafkaas lagu sixi karo. Aadan Madoobe wuxuu soo xulay dad u badan mucaaradka, kuwaas oo dhaliilo aan la xisaabi karin shirkii uga jeediyey madaxda TFG-da.

Markii Shirka la xiray, madaxdii IGAD way ku kala aragti duwanaadeen go'aankii ay Itoobiya doonaysey, kaas oo ahaa in xilka la iga xayuubiyo oo cod been ah la ii qaado. Dawladda Kenya oo markii hore, sida laga maqlay hadallada ka soo yeerayey wasiirkeeda arrimaha dibadda, oo ka darnaa sidii ay Itoobiya ku hadlaysey ayaa ugu danbayntii ku gacansayrtay taladii ay Itoobiya wadatey. Kenya waxay arrinta iska taagtay mowqif adag, kaddib markii ay caddaysay in aan TFG lagu duminayn gurigii lagu dhisay. Markii Itoobiya ay halkaas ku hungowdey, ayaa lagu heshiiyey in markii ay TFG-du dalka ku noqoto, la dhiso Gole Wasaaradeed oo loo dhan yahay. Maalmo kaddib, waxaan baaris caafimaad ugu baxay London.

Nuur Cadde oo aanan ballan la lahayn baa London iigu yimid, kaas oo aan isku ogeyn in aan Muqdisho isugu tagno. Wuxuu iga codsaday in aan u saxiixo liis ay ku qoran yihiin magacyadii Golihiii Wasiirrada oo Itoobiya ay la soo diyaarisay. Waxaan ku iri sow iskuma aynaan ogeyn in aynu Muqdisho isugu nimaadno oo halkaas ku dhisno gole aynu ka wada tashannay, ee bal ii sheeg waxa is beddelay. Wuxuu iigu jawaabey in degdeg xukuumad loogu baahan yahay ee saxiix. Waxaan ku iri iga raalli ahow, anigu saxiixi maayo khuraafaad la soo dhoodhoobay oo aan ku fadhiyin baahida dalka. Nuur Cadde wuxuu la xiriiray IGAD iyo beesha caalamka.

Dabadeed Mesfin baa farriin London iigu soo diray, isaga oo iiga codsaday in aan Addis Ababa ku soo maro. Markii aan Addis Ababa imid Mesfin baannu halkaas ku kulannay. Wuxuu igu yiri fadlan saxiix liiskan. Waxaan ku iri Nuur Cadde waan ka soo diiday ee, maxaa adiga liiska kuu keenay? Waan ogaa in Itoobiya soo diyaarisay magacyadaan. Wanaa garanayey in aan meesha dawlad laga rabin ee la doonayey mid maqaarsaar ah oo Nuur Cadde ku adeegto. Inta aan carooday baan Mesfin ku iri horta "Ma qirsan tahay in Soomaaliya qaran jira tahay oo taladeeda leedahay?" Wuxuu igu yiri "Haa". Waxan ku iri "Ma qirsan tahay in TFG tahay dawlad madaxbannaan". Wuxuu yiri "Haa". Waxaan ku iri "Ma qirsan tahay in aan ahay Madaxweynihii TFG-da". Wuxuu yiri "Haa". Waxaan ku iri, "Oo marka maxaad amar ii siinaysaa?".

Ugu dambayntii waxaan ku iri, ' Nuur Cadde ha ii keeno wax macquul ah oo isu dheellitiran, haddii uu doonayo in aan warqadda u saxiixo' . Waxaan u sheegay oo kale, in aan berri subax dhoofayo oo uu dayuurad ii diyaariyo. Wuxuu igu yiri, ' Waa hagaag' . Subixii danbe, Mesfin si fiican buu gegida dayuuradaha iigu sagootiyey. Waxaan tegey Nayroobi, waxaana dayuurad iigu soo diray mudane Qadaafi. Waxaan saddex beri soo joogey dalka Liibiya, halkaas oo aan kulammo kala duwan kula yeeshay madaxda dalkaas. Dabadeed waxaan soo maray Khartuum oo aan ballan kula lahaa Madaxweyne Cumar Bashir. Labada hoggaamiye waxaan kala hadlay in ay gacan ka geystaan shirka dibuheshiisiinta ee bisha Disembar loogu ballansanaa magaalada Jabbuuti.

Booqashooyinkaas kaddib, waxaan ku soo noqday magaalada Nayroobi. Maalmihii aan halkaas joogey waxaan kulammo kala duwan kula yeeshay mas'uuliyiin ka tirsan beesha caalamka oo uu ka mid ahaa Mr. John Yetes, ku-qaybsanaha arrimaha Soomaaliya ee dawladda Maraykanka iyo madaxa UNPOS Ahmadu Ould Abdalla. Labadaba waxaan kala hadlay sidii aan uga qaybgeli lahaa shirka Jabbuuti. Labaduba waxay igu yiraahdeen in aan aniga iyo Nuur Cadde Muqdisho iska raacno oo Jabbuuti la tagno barnaamij aannu heshiis ku nahay.

Markii raggaas arrintoodu ii bixi weydey ayaan doonay in aan xiriir la sameeyo Madaxweyne Ismaciil Cumar Geelle, waase la iga meermeeriyey oo waa ii suurtoobi weydey in aan la hadlo. Waan iska gartay in meesha uu shirqool ka jirey, oo la doonayey in aanan shirkaas ka qaybgelin. Isla magaalada Nayroobi, baan 22kii bisha Nofembar, ballan kula lahaa Janday Frazer. Kulankaasi wuxuu ka dhacay gegida dayuuradaha Nayroobi, wuxuuna socday muddo hal saac ah. Waxaan ka wada hadalnay xaaladda dalka iyo khilaafka Nuur Cadde iyo aniga ka dhaxeeyey. Waxaan hadalkeedii ka fahmay in ay taageersanayd aragtida dawladda Itoobiya.

Markii aan si fiican u dhuuxay nuxurka hadalkeeda baan ku iri, ' Haddii arrimuhu sidaas yihiin, go'aan baan gaari doonaa, waana kula socodsiin doonaa, balse waxaan idiin sheegayaa in aad xaaladda Soomaaliya ku qaldan tihiin, oo ay aakhirka kooxaha xagjirka ahi gacanta ku dhigi doonaan talada dalka, dabadeedna ay adkaan doonto si xal fudud loogu helo' .

Subaxdii dambe ayaan dayuurad ka qaatay magaalada Nayroobi, waxaana ka soo degey Garowe. Isla galabtii ayaan halkaas shir ku la qaatay madaxdii Dawlad goboleedka Puntland iyo Isimmadii. Waxaan warbixin buuxda ka siiyey halka ay taagan tahay xaaladda TFG-du iyo shirqoollada Itoobiya horseedka ka ahayd ee loo dhigay iyo talada aan gaarey. Dood gaaban kaddib, waxaa si buuxda la iigu taageeray mowqifkii aan arrinta ka qaatay. Maalintii ku xigtey Dawlad goboleedka Puntland waxay soo saartay war murtiyeed ee ku dhaliilayso qallooca la geliyey shirka dibuheshiisiinta Soomaaliyeed ee magaalada Jabbuuti ka bilaabanayey. War murtiyeedkaasi wuxuu aad iyo aad uga caraysiiyey Xukuumadda jabbbuuti, si ay ku sheegtay war rasmi ah oo ay arrintaas kaga hadashay in dawladda Jabbuuti aaney wax shaqo iyo tala ah aysan ku lahayn shirkaas oo kaalinteedu ku eg tahay oo keli ah gogosha ay dhigtay.

Dawladda Jabbuuti waxay ku tilmaantay gardarro in lagu dhaliilo xilka shirka. Laba maalmood kaddib waxaan u soo kicitimay xagga Baydhabo, waxaanse soo maray Jabbuuti. Halkaas waxaan shir kula qaatay Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle, kaas oo aannu talooyin iyo aragtiyo iska dhaafsannay xaaladda Soomaaliya iyo guud ahaan tan gobolka. Subaxdii danbe Baydhabo ayaan ka soo degey, waxaana shir la qaatay xildhibaanno ka socda Baarlamaanka, kuwaas oo markii aan la socodsiiyey in aan jagada Madaxweyninnimo isaga degayo, waxay ii soo jeediyeen in aan taladayda dib u dhigto oo aan RW cusub magacaabo. Si aan u raalligeliyo, waxaan RW u magacaabay Mudane Maxamed Maxamuud Guuleed (Gacmadheere), waxaana xilkii ka xayuubiyey Nuur Cadde aniga oo ka shidaal qaadanaya denbiyada "Khiyaano qaran" ee Maxkamadda Sare ku soo oogtey, iyada oo isla markaasna weydiisatey in xasaanadda laga qaado, si maxkamad loo soo taago.

Mudane Gacma dheerese wuu iska casiley jagada maalmo kaddib arrimo u gaar ah awgood. Anigu waxaan rasmiyeeyey go'aankii aan hore u qaatay oo dad badani ka warqabeen in aan is casilayo, sidaas awgeedna, waxaan hortagey Baarlamaanka, halkaas oo aan ka jeediyey khudbad aan ku sagootinayey xildhibaannada, uguna rajaynayey in Ilaahay la qabto dadaalka ay ugu jireen badbaadinta qaranka.
Khudbadii sagootiska (Farewell speech) ahayd ee aan madashaas ka jeediyey waxay u dhacday sidan:

Mudnayaal iyo Marwooyin,

" Waxaa sharaf ii ah inaan maanta hortiinna imaado oo idin kala hadlo dhawr arrimood oo aan u arko inay muhiim yihiin. Muddo dheer ayaan u soo shaqeenayey ummadda Soomaaliyeed. 1956 dii ayaan noqday markii ugu horraysay sarkaal ciidammada ka tirsan, haatanna waxaynnu ku jiranaa sannadka 2008. Muddadaas iyada ah anigu qaranka Soomaaliyeed baan u shaqaynayey, iskay uma shaqaysan, hawl kalena ma qabsan, wax kalena kama shaqayn. Afartan sano wakhti laga joogo ayaan siyaasadda soo galay, awal sarkaal ciidan baan ahaa, ilaa iyo wakhtigaasna siyaasadda ayaan ku jiray. Anigoo runtii ku dedaalay kulli-yoon ummaadda Soomaaliyeed inaan si daacadnimo ugu shaqayeeyo aniga oo intaan shaqayn karo is-garab taaga si dhibaatada ay ku jirto uga baxdo. Hayeeshee waxaan anigu ku dedaalayey runtii hawshii aan ku jirnay inaan ka mira-dhalinno, inaynnuu ku guulaysanno, haatase meel baynnu joognaa. Waxaan halgankaas ku mutaystay Laba iyo toban san iyo bar xabsi siyaasadeed ah aniga oo aan waxba geysan. Waxaan ka qaybqaatay dhammaan shirarkii dibu-heshiineed ee isdaba-joogga ahaa ee Soomaaliya loo sameynayey.

Waxaan in badan xildhibaanadiinna hortayda fadhiya kala qayb galay shirkii ugu dambeeyey oo lagu qabtay Kenya oo labada sano socday, halkaasna lagu soo dhisay dawladda Federaalka ee ku meel gaarka ah. Markaas oo idinku aqlabiyad buuxda iigu doorateen xilka madax-weynanimada, waana idiin ka mahadcelnaya inaad masuuliyaddaas i saarteen oo aan muddo afar sano iyo bilo idin la shaqaynayey.

Waxaan ku dedaalay sidii looga mira-dhalin lahaa dib-u-heshiisiintaTFG lagu soo dhisay. Waxaan dibu-heshiisiintii ka bilaabay magaalada Muqdisho dhex martay beelaha Soomaaliyeed oo dhan san-nadkii 2007, bishii Luulyo iyo Agoosto, waxaan bishii Jannaayo 1dii, 2007 dalka oo dhan ka xoraynay Midowgii Maxkamadaha iyo arggagix-isadii kale. Waxaan bisha Jannaayo 30dii, 2007 ugu baaqay caalamka inay gacan ka geystaan sidii loo dhammaystiri lahaa dib-u-heshiisiinta beelaha Soomaaliyeed. Waxaan bishii Luulyo, 2007, magaalada Muqdisho ku qabtay shirarkii dib-u-heshiisiinta oo ay ka soo qayb galeen 2600 qof.

Waxaan bishii Nofember, 2007dii anoo cuskanaya shirkii dib-u-heshiisiinta beelaha Soomaaliyeed ee Muqdisho ka dhacay magacaabay Raysul-Wasaare iyo 9 wasiir oo aan ka tirsanayn baarlamaanka waayo waxaan u arkayey wax lagma maarmaan ah in Baarlamaanka iyo shacabkuba xukunka ka wada qayb galaan, haddaba:

- Markii aan dareemay in dedaalkaas la sameeyey ay caqabado ka horyimaadeen, aniga iigu muuqda inay culusyihiin oo gudo iyo dibedba leh
- Markii aan arkay in axdgii lagu heshiiyey la baalmaray oo runtiii aad mooddo in ogaan loo yeelay
- Markii aan arkay in beesha caalamka taageeradii ay noo ballan qaaday aysan na siin oo aysan sidii la rabay wax noo tarin, si waajibkeenna aynnu si dhakhsa leh u gudanno
- Markii aan yaqiinsaday in dib-u-heshiisiintii la afduubay oo idinka iyo aniga toonihi midna wax shaqo ah ku lahayn
- Markii ay ii caddaatay in ciidamadii qaranka cunto iyo gunno loo waayey oo ay darxumo u kala tageen.

- Markii ay caddaatay in waddanka badankiis kooxo xag-jira ay gacanta ku dhigeen, awood aan ku xoraynana aan u weynay;

Mudanayaal iyo marwooyin sidii aan horay hortiiba idiin ku ballan-qaaday maalintii la ii dhaarinaayey xilka madaxweynanimada oo ahayd 14-10-2004, waxaan khudbadaydii malintaas ku iri, " Saddex arrimood midkood uun bay mid noqon doontaa xilka aad ii dhiibteen intaan hayo:

- in aan ku guulaysanno oo waajibkeenna fulinno
- in anoo waajibkayga fulinaya aan ku geeriyoodo, illayn Rabbi bay wax walba ku xiran yihiin iyo
- Haddaan hawsha wadi waayo xilkii aad i saarteen in aan idiin soo celiyo, illayn anigu ma boobine idinkaa ii doortaye. Haatan shan-farood iyo calaacal inaan wax ku xukumana weligygana ma rabin, haatanna ma rabo.

Mudanayaal iyo marwooyin waxaan intaas oo dhan u halgamayey, Soomaaliya oo xasiloon, qaranimadeedii, madaxbannaanideedii iyo midnimadeedii la soo noqota, ku dhaqmaysa nidaam dimoqraadi oo doorasho iyo xisbiyo badan ku dhisan. Hadday ii muuqatay waxaas oo dhan inaysan haatan sura galayn waxaan go'aansaday xilka aad ii dooorateen 10-10-2004 inaan idiin soo celiyo.

Warqaddii aan saxiixay oo sidaasi ku qoran tahayna hortiinna waxaan ugu dhiibayaa guddoomiyaha Baarlamaanka. Waayo dastuur ahaan, haddiiba dastuurka in uun la xushmaynayo, wuxuu qorayaa madax-weynuhu hadduu shaqada ka tago( sababtu waxay doonto ha noqotee) xilka ku meelgaar ahaan waxaa la wareegaya guddoomiyaha Baarlamaanka. Waa arrin dastuuri ah. Anigu dastuurka mana jebin, haddana ma jebinyo, kana leexan mayo.

Guddoomiyaha Baarlamaanka oo haatan garabkayga taagan baan warqadda u dhiibaya, xilkiina ku wareejin, waana idin macasa-laamaynayaa oo aniga dayuurad baa Ayraboorka ii fadhida. Waxaan rajaynayaa inaad midowdaan oo dagaal iyo shiddada iska deysaan, oo wadjir ahaan uga shaqaysaan siday Soomaaliya darxumada ay hadda ku sugan tahay uga baxdo.

Aad baad u mahadsantihiin!.

Isla duhurkii waxaan dayuurad ka qaatay gegida Baydhabo, waxaana ka degey magaalada Garowe, halkaas oo si diirran la iigu soo dhoweeyey, maalmo kaddibna Gaalkacyo ayaan uga sii gudbey. Laba toddobaad kaddib, waxaan ka soo dhoofay magaalada Gaalkacyo oo waxaan ka soo degey magaalada Sanca, Yemen, halkaas oo Madaxweyne Cali Cabdalla Saalax igu martigeliyey in aan dego.

Anigu waan ka nastay ku jiridda tooska ah ee siyaasadda Soomaaliya, balse laba arrimood oo wax ka qabasho u baahan sidoodii bay u taagan yihiin. Tan hore waa cabsida ay Itoobiya ka qabto midnimada Soomaaliya iyo dib u soo noolaashaha dawlad Soomaaliyeed oo awood iyo tayo leh. Tan labaadna waa xaaladda ba'an ee dalka Soomaaliya ka taagan oo aan weli loo hayn rajo muuqata oo daawo u noqon karta. Xaaladdaas oo sii waaritaankeeda laga yaabo in ay gobolka oo dhan la degto.

## WALAALO JABBUUTI (SHIKII 3aad)

Jabbuutida 2009, ma aha Jabbuutidii 1991 iyo tii 2001. Jabbuuti way isbeddeshey. Waxay noqotay xarun maaliyadeed iyo goob istiraatijayadeed ee gobolka geeska Afrika laga ilaaliyo. Jabbuuti waxay mahadisay maalgelinta Khaliijka ay ka heleen. In muddo ahba Jabbuuti waxay dhaqan ka dhigatay in ay isu muujiso difaacaha jiritaanka iyo badbaadada Soomaaliya. Mar uu ka hadlayey saldhigyada uu Jabbuuti ka siiyey ciidammada dawladaha reer Galbeedka ee loogu talaggalay la dagaallanka argaggixisada iyo burcad badeedda, Madaxweynye Ismaciil Cumar Geelle wuxuu warbaahinta u sheegay in uu tallaabadaas u qaaday si aan loo weerarin Soomaaliya oo hore loogu daray dalalka argaggixisadu ku sugan tahay, kana soo hawlgalaan. Sidaas oo kale, Jabbuuti waxaa laga furay xarumo u xilsaaran hawlihii ay hore Akadamiyada Cilmiga Fanka iyo Suugaanta Soomaaliyeed ee dalka uga hayn jirtey, iyada oo madaxda Jabbuuti sheegeen in looga dan leeyahay badbaadinta taariikhda iyo suugaanta Soomaaliyeed, sidaasna looga hortago in ay dabargo'aan.

Jabbuuti waxay noqotay xarun ay tartiib-tartiib isugu soo ururaan ragga maalqabeenka ah iyo ganacsatada Soomaaliyeed. Maalqabeenka Soomaaliyeed gacmo furan baa lagu soo dhoweeyaa, Soomaalida dan yarta ah iyo kuwa qaxootiga ahse looma oggola in ay dalkaas cag soo dhigaan. Dhaqankaas waxay kala mid tahay dalalka Carabta marka Yemen laga reebo. Ganacsato badan oo Soomaali ah ayaa Jabbuuti meherado badan oo ganacsi ku leh, sida bangiyo, xawaalado, hoteello iyo shirkado ganacsi.

Sidaas oo kale waxay halkaas ka wadaan dhismayaal ballaaran oo casri ah oo dhowaan beddeli doona bilicda magaalada oo dhan. Wadarta maalgelinta ganacsatada iyo shirkadaha khaliijka iyo maalqabeenka Soomaaliyeed waxaa lagu wadaa in ay tobanka sano ee nagu soo fool leh Jabbuuti ka dhigi doonaan xarun adeeg iyo mid maaliyadeed oo gobalkaan Geeska Afrika sida Singapore, Dubai, Hong Kong, iwm.

Sidaas awgeed, magaalada Jabbuuti si walba waxay ugu milantay arrimaha Soomaaliya. Muddadii Itoobiya ay Afrika iyo meelo kaleba ka waddey shirqoolladii TFG-da lagu majaxaabinayey, magaalada Jabbuutina waxaa ka socdey barnaamijyadii iyo qorshayaashii majaraha loogu taagayey dawladdii beddelli lahayd. Mudda hal sano ku dhow, ninka ka madaxda ahaa UNPOS, wuxuu halkaas ka waday shir uu isugu keenay koox ka mid ah mucaaradkii Asmara isku bahaystay iyo garabkii TFG-da oo Nuur Cadde hoggaaminayey, si uu jagooyinka ugu kala qaybiyo dawlad uu sheegay in uu Soomaaliya u dhisayo. Sidaas oo kale, Ahmedu Ould Abdalla wuxuu magaalada Jabbuuti keenay Aaden Madoobe oo markaas ahaa Madaxweynaha KMG ah ee dalka, kaas oo is afgarad hore uga dhexeeyey, kaddib uu ka ballanqaaday in aan Jagadiisa Guddoomiye Baarlamaan la taabanayn.

Dibuheshiisiintii Axmedu Ould Abdalla ka wadey magaalada Jabbuuti waxay gadaalihii isugu biyo shubatay wax farsamaysan ee ninkaas iyo abbaannadiisu (kafiilladiisu) sidii ay rabeen u samaysteen. Taas oo muujineysey in ayan jirin mucaarad iyo dawlad la heshiisiiyey, balse ay ahayd layli lagu sii xoojinayey afgenbigii lagu sameeyey TFG-da.

Inkasta oo hortiiba ay dantu ahayd, haddana shirkaas kama soo bixin wax go'aan ah oo xataa dadka lagu maaweelin karey. Waxa keli ah oo go'aan loo ekaysiin karey waxay ahayd Baarlamaankii oo awalba tiro badida la ciirayey oo laban laabmay, lana gaarsiiyey 550. Dadkii riwaayaddaas abaabulay way garanayeen in aan Baarlamaan noocaas ahi shaqayn karin, balse waxay ku bislaysanayeen danahooda dhaqaale. Markii la gaarey in dib loo dhiso hay'adihii qaranka, waxaa Jabbuuti la isugu keenay xubnihii ka tirsanaa Golaha Baarlamaanka ee la ballaariyey.

Halkaas waxaa Madaxweyne loogu doortay Shiikh Shariif Shiikh Axmed, halka Aadan Madoobena loo oggolaaday in uu jagadiisa haysto. Shiikh Shariif wuxuu u magacaabay RW Cumar Cabdirashiid Cali Sharmarke, oo aabbihiis dalka ka ahaan jiray Madaxweyne, kaasoo la dilay wax yar ka hor intii Siyaad Barre uusan dalka afgenbi ku qabsan 1969kii.

Halkaas waxaa ku qaday Nuur Cadde oo hore raggii koolkoolinayey ay u ballan qaadeen in isagu noqon doono Madaxweyne. Markii uu jagadaas waayey, dawladihii taageerayey, siiba Talyaaniga, ayaa Shiikh Sharrif ku qanciyey in uu u magacaabo in uu Soomaaliya danjire uga noqdo dalka Talyaaniga, isla markaasna, wakiil uga noqdo Soomaaliya dalalka ku bahoobay Midowga Yurub.

# Gunaanad

Badi dadka da' dayda ah waxay ku soo barbaareen baadiyaha. Sida ay u badan yihiinna si lama filaan ah ayey magaalada ku soo galaan. Miyigu qiimo weyn ayuu ugu fadhiyaa Soomaalida, maxaa yeelay waxaa ku xiran noloshooda. Ilaa waqtigan oo la marayo qarnigii 21aad nolosha Soomaalidu dakhli ahaan iyo shaqo ahaanba waxay ku xiran tahay dhaqaalaha baadiyaha.

Magaalada waxaan soo galay aniga oo 16 jir ah oo niman walaalahay iyo ilmo adeertay ah soo raacay, ayadoo ayan igu jirin in aan magaalo joogo ama shaqo ka bilaabo ayaan si lama filaan ah ciidammada la iigu qoray. Halkaas ayaa waa cusubi iiga bilawday.

Nasiib wanaag nolosha cusub ee ii bilaabatay waxaa qiimo siyaado ah u sii yeelay xarakadii wadaniga ahayd ee xilligaa dalka ka socotey, taas oo laba jibbaartey barbaaradaydii, nuxurna gelisey waxbarashadaydii. Aniga oo hanaqaad ah baan waxbarashada bilaabay, waxaanse rajaynayaa in jiilalka danbe loo suurtageliyo fursado u sahlaya in ay yaraanta waxbarashada ku bilaabaan.

Soomaaliya oo dhan waxaa ka dhacaysey dabaysha xornimada. Qaranimaduna maalinba maalinta ka danbaysa bay soo dhowaanaysey. Muddaadaas oo dhan waxaan isku barbar wadey waxbarashada ciidan iyo tan caadiga ah. 1954kii waxaan waxbarasho layli sargaal na loogu diray anaga oo 14 dhalinyaro ah dalka Talyaaniga si aannu majaraha ugu taagno ciidanka Soomaaliya. Kaddib markii 1956kii la baabb' iyey ciidankii, waxaa nalaku wareejiyey ciidammada Booliska. Dhammaan tababaradaas kala duwan waxaa nalaku baray si fiicanna aan u hantay dhawrista sharciga iyo kala danbaynta, taas oo asaas u ah jiritaanka hay' adaha qaranka iyo tayeynta dawladda Soomaaliya u dhalanaysey. Ciidammada markii aan u wareegeyna waxaa aqoontayadii hore nalooku siyaadiyey difaaca dalka iyo dadka, taas oo macnaheedu tahay difaaca qaranka.

Aqoontaan ka helay ciidammada iyo wacyiga siyaasadeed ee SYL oo si fiican ii saameeyey waxay iigu abuureen dareen qarannimo oo aan gorgortan lahayn. Sidaas oo kale waxay i gayeysiiyeen in aan ku taag-naado waajibaadka sargaal kasta ku khasban yahay in uusan siyaasadda faraha la gelin oo u heelanaado difaaca qarannimada iyo dhawrista shar-ciga iyo kala danbaynta. Sababahaas awgood ayaa igu khasbay in aan ku gacan sayro taladiii Siyaad Barre ii soo jeediyey oo ahayd in aan inqilaabno dawladda sharciga ah.

Sababahaas baa igu dhaliyey in aan qoriga qaato si aan uga hortago diktatooriyadda Siyaad Barre. Dareenka qarannimo ayaa i baday in aan 12 sano ku kala jiro xabbisyadii Siyaad Barre iyo Mingiste. Kolkii aan ka soo baxayna waxaa la igu salaamay Soomaaliya oo burburtay. Halkaas ayaan ka saan qaaday sidii Soomaaliya dib la isugu soo celin lahaa qaranimadiina loo soo celin lahaa. Baadigoobkaas oo aanan marna ka harin ilaa 2004tii aan ku guuleystey in aan calankii Soomaaliya dib uga soo taago Villa Soomaaliya, dunidana aqoonsi buuxa ka helno, 15 sano kaddib markii aan ka maqnayn saaxadda caalamka.

Haddii aan taariikhda in yar dib u jeleecno, waxaa noo soo baxaysa su' aal ah Soomaaliya burburka ma laga badbaadin karey. Jawaabtu waxay tahay haa, Labo fursadood; oo lagu badbaadin karay ayaa dalka soo martay. Midda hore waxay ku suurtageli kartey tallaabo diblomaasi oo dawladaha Siyaad Barre gacansaarka la lahaa ay si midaysan u qaadaan si ay Siyaad Barre ugu qanciyaan in uu xukunka ka dego, kaddib markii ay caddaatay in dalku burbur qarka u saaran yahay. Tan labaad waxay ahayd Jabhadihii Siyaad Barre ka soo hor-jeestey oo ku midooba barnaamij qarannimo dabadeedna dalka gacanta ku dhiga. Taladaas oo Axmed Maxamed Maxamuud Siilaayo, oo ahaa Guddoomiyaha SNM aan hore ugu bandhigay, balse uu ku gacansayray. Si kasta ha noqotee Labadaas fursadood waa la gabay. Sidaas oo kale waxaa la is weydiin karaa, ma la badbaadin karey Soomaaliya burburka dabadiis. Jawaabtu waa haa.





Waxaa jirey saddex fursadood oo arrintaas suurtagelin karey, balse ayagana waa la gabey. Tan koowaad waxaa suurtagelin karey UNISOM markii ay dalka oo dhan gacata ku dhigtay. Tan labaad waxay ku suurageli kartey hirgelinta go' aannadii ka soo baxay shirkii Addis Ababa 1993kii ururada Soomaalida oo dhan iyo madaxda dhaqameedyada Soomaaliya isugu yimaadeen. Nasiibdarro fursadahaanina sidii kuwii hore bay u suurtageli waayeen. Tan saddexaad waxay ku iman kartey haddii la ila qaadan lahaa taladii aan ku dhisayey ciidammo Soomaaliyeed oo tiradoodu dhan tahay ilaa labaatan kun oo dalka lagu xasiliyo.

Dhibka Soomaaliya ka taagan, wuxuu ka dhashay hungadii awooddii Siyaad Barre ka dhalatay ka sakow waxaa cirka ku shareeray shan arrimood:

- Tan koowaad waxay ahayd isku daygii xukun boobka USC ku kacday oo ay gaar ahaanteeda ugu dhawaaqday in ay dib u dhiseen dawladdii qaranka oo Cali Mahdi Madaxweyne ka yahay. Ma jirto cid ay kala tashadeen. Mana jirin sabab ku khasbaysey in ay si fudud xukunka u boobaan. Waxay la noqotay in Soomaaliya Muqdisho tahay oo ninkii caasumadda haystaa uu dalka oo dhan haysto. Arrintaasi waxay kala fogaysey ummaddii Soomaaliyeed, maadaama loo arkay dawladda Cali Mahdi mid qabiil ka tirsan.

- Tan labaad waxay ahayd ku dhawaaqa gooni u goosashada Somaliland. Taas oo niman gumeysi raac ahi u bareereen in ay taariikhda Soomaaliya dib u ceshaan muddo soddon sano ah. Arrintaasi waxay la yaab ku noqotay Soomaali oo dhan. Waxay dhiirrigelisey dawladihii ka horjeedey qarannimada Soomaaliyeed iyo himiladii SYL. Waxay albaab cusub u furtay daba-dhilifyo maangaabnimadoodu gaarsiin karto in ay Soomaaliya kala googooyaan.
- Tan saddexaad waxay ahayd dagaaladdii aan kala go' a lahayn ee Caydiid horseedka ka ahaa iyo isu beel wacashadii lagaga hortagayey horornimadiisa iyo dhul ballaarsiga beesha Habargidir, oo keenay in dareenkii qarrimo la illaawo.

- Tan afaraad waxay ahayd faragelintii dawladaha deriska, gaar ahaan dawladda Itoobiya ay kula dhexjireen arrimaha Soomaaliya, si ay uga hortagaan in Soomaalidu ay dhexdeeda iska afgarato oo ay wada hadal ku dhamaystaan khilaafkooda. Foolxumada faragelinta dawladaha deriska ah waxay gaartey in ay qabaa' ilka hub isugu dhiibaan, qabaa' il gaar ahna xiriir hoose la samaystaan iyo in ay madax kooxeedyo gaar ah naas nuujiyaan.

- Tan shanaad waxay ahayd in shirkii koowaad ee dibuheshiisiinta ee ka dhacay Jabbuuti 1991kii, lagu abaal mariyey hoggaamita qaranka kuwii ka danbeeyey xasuuqii Muqdisho loogu geystey beelaha Daarood, gaar ahaan beesha Majeerteen. Arrintaasi waxay ceel dheer ku riddey midnimadii ummadda Soomaaliyeed, waxayna tuhun weyn ku abuurtay beesha Daarood danta Jabbuuti ka lahayd falkaas foosha xun oo ay u bareertay.

Waan garwaaqsanahay in aanay wada sax ahayn tallaabooyinkii kala duwanaa ee aan qaaday mudaddii aan halganka ku jirey, balse dhaliilo badan oo la ii soo jeediyey wada sax ma ahan, weliba waxaan oran karaa inta badan sal iyo raad malaha. Midda keli ah oo aan qirsanahay in jid la iiga yeelan karo waxay ahayd Soomaalida oo aan wacyi ahaan diyaar u ahayn in aan la dagaalamay Siyaad Barre, taasna waxaan oran karaa in ay ahayd mid la igu kallifay.

Waxaa kale oo la igu dhaliilay oo weliba laga badbedshey in SSDF ay ku dhisnayd hab qabiil, taas oo aan oran karo in ay ku salaysnayd dacaayad uu Siyaad Barre ka faafiyey si uu uga horkeeno ummada Soomaaliyeed. Xaqiiqana waxaa u ah in dacaayadda uu SSDF ka faafiyey ay asaga dib ugu noqotay oo uu dalkii dhammaa uu qabiil qabiil ka dhigay ilaa heer uu gaaray in dawladdii uu madaxda u ahaa isugu soo ururto qabiilka Mariixaan, isaguna uu kaabbo qabiil u noqdo. Arrintaasi waxay gebi ahaanba meesha ka saartay sharciyaddii xukunkiisa.





Sidaas oo kale waxaa la iga fidiyey been ah in aan Puntland ka dhigtay faraskii aan ku gaari lahaa mansabka dalka ugu sarreeya, waxaana daliil looga dhigay in aan maal iyo waqti badan u huray isu keenidda kooxaha kala duwan ee siyaasadda Soomaaliya. Waxaa xusid mudan in hoosta laga xarriiqo in gobolada Puntland dhaqan u leeyihiin badbaadinta qarannimada Soomaaliyeed, waxaana marag ka ah waqti badan ka hor inta aanan Puntalnd madaxda ka noqon in madaxdii goboladaasi ay taageero muuqata oo wax ku ool ah u fidin jireen gobolada Soomaaliyeed ee dagaalka kula jirey kuwii doonayey in ay qarannimada suuliyaan. Tusaale waxaan u soo qaadan karnaa doorka shariifka ah ee madaxdii goboladda Puntland ku bahoobey ay ka qaateen iska caabintii shacbiga gobolada Hiiraan iyo Jubbadada sare kula jireen Caydiid. Aniguna markii aan madax ka noqdey Puntland waxaan halkeedii ka sii wadey dhaqan iyo siyaasad hore u jirtey, waxaana aamminsanahay in aan ku guuleystey.

Dhaliil kale waxay ahayd in aan diidey ka qayb qaadashada shirkii Jabbuuti ee 2000, oo Ismaaciil Cumar Geelle isugu keenay bulshada rayadka ah si ay dawlad Soomaaliyeed halkaas ugu dhisaan, isla markaasna aan u ololeeyey sidii la isugu keeni lahaa kooxaha hubaysan oo talada dalku ka go' do. Haddii taasi ceeb leedahay waa run. Waxaanse qabaa in ay tahay maangaabnimo in la igu dhaliilo tallaabada keli ah ee suurtagelin kartey in la dhiso dawlad qaran oo loo dhan yahay.

Dawladdii aan madaxda u ahaa waxay ku guuleysatey ayada oo Itoobia la kaashanaysa in ay dalka oo dhan gacanta ku dhigto, maamulna u samayso gobolada oo dhan ayada oo u gogol xaaraysa sidii dalka looga dhaqan gelin lahaa qodabada ku cad axdiga qaranka, oo ay ka mid tahay dhismaha maamul goboleedyo isku filan. Nasiibdarro, waxaa durba soo baxay ififaalo muujinaya in hawlaha TFG-du waddey ay gebi ahaanba lid ku yihiin siyaasadda dawladda Itoobiya ka leedahay Soomaaliya. Taas oo ah in ay dalka u kala hayso gobol gobol iyo qabiil qabiil si loo waayo qaran Soomaaliyeed.

Waxaa maskaxdayda ka weynaatey saddex arrimood oo kala ah, in kuwii aan u igmaday hoggaanka xukuumadda sida Cali Maxamed Geeddi iyo Nuur Cadde ay lug jiideen xilkii lagu aamminay, ayaga oo daba dhilif u noqay dawlado iyo ashkhaas shisheeye si ay u dhabar-jebiyaan xukuumaddii ay madaxda ka ahaayeen. Taas waxaa ka sii darnaa kuwii loo doortay in ay hoggaamiyaan golaha sharcidejinta sida Shariif Xasan iyo Aadan Madoobe ay Baarlamaankii ka dhigteen dukaan ay ku ganacsadaan, oo ay qarannimadii kala weynaatay si ay shilimaad u helaan. Dhaqan xumada mas' uuliyiintaas waxay fursad u siisay in Itoobiya laba jibaarto ololihii ay kaga soo horjeedey siyaasaddii qarannimo oo aan horseedka ka ahaa, iguna dacaayadayso in aan mas' uul ka ahay dhibka Soomaaliya ka jira.

Markii aan qiimeeyey xaaladahaas oo dhan waxaan go' aansaday in aan banneeyo jagadii Madaxweynenimo si ay shacbiga Soomaaliyeed iyo adduunweynahaba ugu caddaato in aanan ahayn kursi-doon. Kolkii aan jagada banneeyey waxaa degdeg loo abaabulay shirkii Jabbuuti ee saddexaad waxaana lagu doortay Shiikh Shariif Shiikh Axmed inuu dalka madax ka noqdo. Xukuumaddii halkaas ka dhalatay taladeeda waxaanu deynayaa Soomaali-weyn. Ugu dambayn, waxaan ummadda Soomaaliyeed kula talinayaa inay gartaan darxumada ay ku sugan yihiin muddada 21ka sano gaaraysa , taassoo ay sabab u tahay qabyaaladda aan meelna lagu garanayn oo dib ugu celinaysa dalka xilligii gumeysiga Yurub ee lixdankii laga xoroobay. Waxaa lagama maarmaan ah in laga shaqeeyo si wadajir midnimada, qaranimada iyo xasiloonida dalka. Haddaan saas la yeelin ha la ogaado in dib loogu noqonayo gumeysigii foosha xumaaa, oo dadkaan maarada loo la' yahay kii goosasho raba iyo kii boob wax ku doonayaba waxa y faa' iidayaan iyo waxay garanayaan ma jiraan ee waxay horseedayaan jiritaan beel, in lagu hoobto bohol dheer iyo in gacan gumeysi dib loogu noqdo. Sideedaba, waxaa wax lagu yahay qaranimada loo siman yahay ee aan qabiil gooni wax u lahayn. Rajada keli ah oo aynnu leenahay maanta waa da' da soo koraysa oo beddesha siyaasiyiinta hadda joogta. Eebbe talada toosan ha inna wada solansiiyo!.

**DHAMMAAD**

## *Biography of the Author*

Colonel Abdullahi Yusuf Ahmed, was born in 1934 in Garowe, Nugal region of Somalia. He was the ninth in a family of eighteen. He was recruited into the Somali police in 1950, and subsequently joined the Somali National Army when it was formed in 1960. He successfully completed cadet officer training at the Cadet Officer Academy in Italy from 1954-1956, and later at the School of War in the former Soviet Union. He had an exceptional military career and was popular within the Army. He held various important commanding posts of increasing responsibilities in the Somali National Army. He took part in the 1964 Somali-Ethiopia war and was awarded a medal of honour for bravery and was promoted to Lieutenant Colonel. He was detained without charge or trial for six years in the early 1970s for political reasons by General Mohamed Siyad Barre, the leader of the military government. After being released from detention in 1975, he became the General Manager of Fiat-Wagad Auto and Spare Parts Agency. He was again recalled to the army when the 1977 Ogaden war broke and given the command of the entire Southern Section of the war zone. He attended the Faculty of Law of the Somali National University.

In 1978, following the defeat of the Somali Army in the Ogaden war, Abdullahi Yusuf and other army officers tried and failed to stage a coup against the Government of Siyad Barre. When the attempt coup failed, he fled to Kenya where he was given political asylum. He later joined the exiled Somali opposition groups in Ethiopia. He became Chairman and Commander of the Somali Salvation Democratic Front (SSDF) which started an armed insurrection against the regime. He remained Chairman of the SSDF until his detention in 1985 in Ethiopia for denouncing the claim by the Ethiopian regime of Mengistu Haile-Mariam that certain areas of Somalia were Ethiopian territories. He remained in an Ethiopian jail until 1991, when the Ethiopian opposition forces led by Meles Zenawi, the current Prime Minister of Ethiopia, deposed the military regime by force. After regaining his freedom, Abdullahi travelled back to the North-Eastern regions of Somalia.

Abdullahi Yusuf was a central figure in all the Somali reconciliation conferences. In order to facilitate the reconciliation, he and other politicians founded the Somali Reconciliation and Reconstruction Council, the SRRC, an umbrella group that negotiated as a group. In 1998, the people of the North Eastern regions of Somalia established the self-governing Puntland State of Somalia and Abdullahi Yusuf was elected as the first President of Puntland State of Somalia. In October 2004, Abdullahi Yusuf was elected President of the Transitional Federal Government (TFG) of Somalia. Two years into his presidency, the Union of Islamic Courts (UIC), took control of Mogadishu and threatened the Somali government which was in Baidoa at the time and later moved to Mogadisho (Villa Somalia) after the defeat of UIC. Abdullahi resigned the Presidency of the TFG in January 2009 before the end of his term. He now lives in Yemen.



Colonel Abdullahi Yusuf Ahmed's influence on the military and political landscape of Somalia has been felt for more than half a century of service to his country. He took part in two wars that Somalia engaged with Ethiopia. In the first, in 1964, he won a medal and citation for the bravery and leadership he displayed in the battle field. In the 1977 war, he was in overall Command of the Southern Sector of the operation. Poor political leadership lay at the core of the defeat of the Somali army in this war. Following the defeat and withdrawal from the battle theatre, Abdullahi Yusuf and other officers tried and failed to stage a coup against the regime. He then tried to topple the regime by armed insurgency. Although Abdullahi Yusuf did not succeed to bring down the government, others who followed his method managed to achieve what he could not. His journey was cut short by the Ethiopian regime who arrested him for six good years without charge or trial, when he stood up for his principles. Both the Ethiopian and Somali regimes were brought down by armed insurgency in 1991 while he was in prison in Addis Ababa.

Following the collapse of the regime and the plunging of Somalia into internecine war, he helped setup the self-governing Puntland State of Somalia, and became its first president. Six years later he was elected as President of Somalia. Abdullahi Yusuf is a driven man who knew what he wanted in life. He served in the Somali army with distinction on and off the battle field. His impact on the political arena was not as successful as in the army. During his presidency, he worked hard to bring about peace in Somalia. His struggle for that objective was hampered by a well-organised conspiracy spearheaded by prominent figures in his government and regional powers that were allied to him at some point in the past. Halgan iyo Hagardaamo (Struggle and Conspiracy: A Memoir) is a candid account of the life and time of President Abdullahi Yusuf Ahmed and the events that shaped Somalia for the past fifty years. It is about the battles that Colonel Abdullahi Yusuf Ahmed fought literally as well figuratively during this period and the successes and failures that accompanied him. It is about the conspiracy that was woven against the Somali State with help of senior political figures in the country. The book is written in a narrative style that Somali readers will find it enjoying.




Published by

**SCANSOM PUBLISHERS**

BOX 6118, 17506 JÄRFÄLLA. STOCKHOLM, SWEDEN

www.scansom.com FAX: 46 8 58360647

ISBN 978-91-85945-36-8

9 789185 945368 >